GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review
and Implementation Commission

# MAXDARQORAALKA

## SOOJEEDIN WAX-KABEDDEL KOOBAN CUTUBKA 4AAD EE DASTUURKA

## CUTUBKA 5AAD: NIDAAMKA FEDERAALKA IYO BAAHSANAANTA AWOODDA JFS

## CUTUBKA 6AAD: BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA
IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**MOGADISHU: FEBRAAYO 2026**

**Tusmo:**

**Kulanka 11aad (Febraayo 7, 2026)** ........ **2**

Sen. Ali Shacban Ibrahim ........ 2

Xil. Hussein Qasim Yusuf "Idow" ........ 2

Sen. Saed Abdi Hussein ........ 3

Avv. Burhan Aden Omar ........ 4

Sen. Saredo Mohamed Hassan ........ 6

Xil. Dr. Mohamed Hassan Mohamed ........ 6

Xil. Ilyas Sheikh Ahmed ........ 7

Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 9

Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed ........ 10

Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud ........ 11

Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed ........ 12

Xil. Omar Ali Isak ........ 12

Sen. Saynab Ismail Mohamed ........ 13

Xil. Zamzam Muhumed Omar ........ 13

Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed ........ 14

Sen. Ali Shacban Ibrahim ........ 15

**Kulanka 12aad (Febraayo 9, 2026)** ........ **16**

Sen. Ali Shacban Ibrahim ........ 16

Xil. Asho-kos Mohamud Omar ........ 16

Xil. Ahmednur Sheik Mohamed ........ 17

Xil. Ahmed Nur Dirie ........ 18

Xil. Mahdi Mohamed Guleid ........ 20

Sen. Saed Abdi Hussein ........ 22

Xil. Abdi Ibrahim Warsame ........ 22

Xil. Mohamed Harun Abdillahi ........ 23

Xil. Yusuf Mohamed Adan ........ 25

Xil. Mohamed Abukar Abdi ........ 27

Xil. Yasin Abdullahi Mohamud ........ 30

Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed ........ 32

Xil. Abdirisak Adam Warsame ........ 33
Sen. Muse Suudi Yalahow ........ 34
Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur ........ 36
Xil. Lul Ibrahim Omar ........ 39
Sen. Zamzam Dahir Mohamud ........ 40
Sen. Ali Shacbaan Ibrahim ........ 41

**Kulanka 13aad (Febraayo 11, 2026) ........ 43**

Xil. Dr. Mohamed Sh. Ahmed ........ 43
Xil. Mohamud Abdulkadir Haji ........ 45
Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 47
Sen. Hassan Hussien Haji ........ 49
Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed ........ 51
Xil. Mahdi Mohamed Guleid ........ 53
Sen. Ahmed Mohamed Ali ........ 57
Xil. Abdi Ibrahim Warsame ........ 58
Xil. Mukhtar Mohamed Guled ........ 59
Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed ........ 62
Xil. Jama Mohamed Askar ........ 64
Xil. Dr. Mohamed Hassan Mohamed ........ 65
Sen. Abdikani Gelle Mohamed ........ 66
Xil. Adan Mohamed Ali ........ 68
Xil. Abdulkadir Omar Moalim ........ 69
Sen. Muuse Sudi Yalahow ........ 71
Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud ........ 72
Xil. Abdifatah Abdullahi Araye ........ 74
Sen. Laila Ahmed Ismail ........ 75
Xil. Suhur Haji Ulusow ........ 76
Xil. Yusuf Geele Ugas ........ 77
Xil. Nur Ahmed Dirie ........ 78
Xil. Mohamed Ali Haga ........ 79
Xil. Abdiwahab Abdi Omar ........ 81

Xil. Abdikarim Abdow Heydar ........ 82

Xil. Sh. Aadan Mohamed Nur ........ 83

**Kulanka 14aad (Febraayo 11, 2026) ........ 84**

Xil. Abdirisaq Abdullahi Moalim ........ 84

Xil. Osman Mohamed Mohamud ........ 86

Sen. Mohamed Abdi Osman ........ 89

Xil. Mohamed Ahmed Mohamed ........ 90

Xil. Abdiqafar Elmi Hange ........ 92

Xil. Abdikani Gelle Mohamed ........ 95

Xil. Omar Ali Abdi ........ 96

Xil. Jama Mohamed Askar ........ 97

Sen. Zamzam Abdullah Ahmed ........ 99

Xil. Qali Ahmed Dirie ........ 100

Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 100

Sen. Saynab Ismail Mohamed ........ 102

Xil. Yusuf Mohamed Adan ........ 104

Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud ........ 107

Sen. Deka Hassan Hussien ........ 108

Xil. Mohamed Ibrahim Ali ........ 110

Xil. Sharif Mohamed Abdalla ........ 111

Xil. Mohamed Deq Barre ........ 112

Xil. Dr. Mohamed Hassan Mohamed ........ 114

Xil. Hussien Ali Haji ........ 116

Xil. Yusuf Heyle Jimale ........ 117

**Kulanka 15aad (Febraayo 14, 2026) ........ 119**

Xil. Hussein Qasin Yusuf "Idow" ........ 119

Sen. Saed Abdi Hussien ........ 123

Sen. Hassan Hussien Haji ........ 124

Xil. Mohamed Harun Abdilahi ........ 125

Xil. Abdulkadir Sheikh Ali ........ 129

Sen. Saynab Ismail Mohamed ........ 130

Xil. Yasin Abdullahi Mohamud ........ 131
Sen. Deka Hassan Hussien ........ 132
Xil. Jama Mohamed Askar ........ 133
Xil. Mohamud Abdirahman Omar ........ 137
Sen. Zamzam Abdullah Ahmed ........ 139
Xil. Sahra Abdullah Igal ........ 140
Xil. Mohamed Abukar Abdi ........ 142
Xil. Salah Sharif Sayid Ali ........ 144
Xil. Lul Ibrahim Omar ........ 146

**Kulanka 16aad (Febraayo 15, 2026) ........ 147**

Xil. Abdullahi Adan Ahmed ........ 147
Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 149
Sen. Abdikani Gelle Mohamed ........ 152
Xil. Dr. Mohamed Sh. Ahmed ........ 154
Xil. Mukhtar Mohamed Guled ........ 157
Sen. Mohamed Abdi Osman ........ 159
Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud ........ 160
Xil. Mohamed Ali Hassan ........ 163
Sen. Zamzam Dahir Mohamud ........ 166
Xil. Omar Ali Abdi ........ 167
Xil. Asha-kos Mohamud Omar ........ 168
Xil. Mohamed Harun Abdillahi ........ 170
Xil. Mohamud Abdulkadir Haji ........ 171
Sen. Abdihakim Moalim Ahmed ........ 172
Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud ........ 177
Xil. Mohamed Abdi Mohamed ........ 180
Xil. Mohamed Kerow Mohamed ........ 182
Xil. Sharif Mohamed Abdalla ........ 183
Xil. Adan Mohamed Ali ........ 185
Xil. Said Mohamed Mohamud ........ 187

**Kulanka 17aad (Febraayo 16, 2026) ........ 190**

Xil. Abdikarim Abdow Heydar ........ 190
Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed ........ 192
Sen. Abdiweli Mohamed Ibrahim ........ 194
Xil. Mohamud Abdulkadir Haji ........ 195
Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed ........ 196
Xil. Abdulkadir Sh. Ali ........ 199
Xil. Mohamud Abdirahman Omar ........ 200
Sen. Hassan Hussien Haji ........ 202
Xil. Guled Bihi Abdi ........ 204
Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud ........ 205
Sen. Saynab Ismail Mohamed ........ 206
Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 208
Xil. Aweys Mohamed Omar ........ 210
Sen. Abdihakim Moalim Ahmed ........ 212
Xil. Mukhtar Mohamed Guled ........ 215
Sen. Deka Hassan Hussien ........ 218
Xil. Nur Ahmed Dirie ........ 220
Sen. Fartun Abdulkadir Farah ........ 222

# SOOJEEDINTA KOOBAN EE QODOBBADA 49AAD, 50AAD IYO 54AAD EE CUTUBKA 4AAD

**Kulanka 11aad (Febraayo 7, 2026)**

| | | |
|---|---|---|
| Kalfadhiga: | 7aad | |
| Kulankii: | 11aad ee Wadajirka Labada Aqal | |
| Goobta: | Villa Hargeysa | |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: | 143 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: | 28 Sanator |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:55 a.m | |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 1:00 p.m | |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Aqalka Sare<br>Sen. Ali Shacbaan Ibrahim | |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansixinta Ajendaha.
(3) Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-kabeddelka Dastuurka.
Cutubka 4aad: Wax-kabedelka kooban oo ku saabsan Qodobada 49aad,50aad iyo 54aad ee cutubka 4aad ee Dastuurka.






**Sen. Ali Shacban Ibrahim**
Guddoomiyaha Kuxigeenka 1aad ee Aqalka Sare.

Bismilaah, xildhibaannada hala fadhiisto, xildhibaannada walaalayaal fadhiista, ajandaha marka hore aan ansixino, ciddii rabta gacanta ha taagto. Ajandaheenu ansax ayuu inoo yahay. Waxaan wacayaa Guddoomiyaha Guddiga Dastuurka Xuseen iidow.



**Xil. Hussein Qasim Yusuf "Idow"**
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka

Mudanayaasha Sharafta leh, waa dimuquraadiyad waaye, "No" waad dhihi kartaan. Mudanayaasha sharafta leh subax wanaagsan salaan kaddib wax waa diidi kartaan, xurmo weyn ayaan idiin hayaa, anigoo ku hadlaya magaca Guddiga Lasocodka iyo Guddiga Madaxabannaan, waxaan garawsanahay ee aan u arkin ama ka soohorjeedin in doodda nuxurka shanta cutub ee dastuurka halkan laga furo.

Xildhibaannada sharafta leh waxaan xurmo u hayaa aragrtidooda, laakiin baarlamaanku wuxuu leeyahay nidaam, dimuquraadiyaduna waxay leedahay xoriyad, xildhibaannadu xaq ayey u leeyihiin inay afkaartooda muujiyaan. Laakiin si waafaqsan xeerarka iyo nidaamka baarlamaanka u degsan, dood ayaa idiin furan.

Nidaamka baarlamaanka u degsan sidaas daraadeed annagu waxaan u shaqaynaa baarlamaanka, baarlamaanka ayaa na doortay. Baarlamaankuna waa kala aragti duwanaan karaa, laakiin wuxuu leeyahay nidaam dimuquraadiya, xeer hoosaad iyo dhaqan guud oo baarlamaana ayuu leeyahay oo uu ku shaqeeyo.

Waxaan xildhibaannada saaxiibaday ah iyo gudoonkaba ku baraarujinayaa, inay doodani halkan ka bilaabanayso, laakiin ayna ku dhamaanayn. Saaxiibadayna waxay xaq u leeyihiin inay doodda ka qayb qaataan, gudoonka sharafta lehna waxaan ka codsanayaa inay xildhibaannada dareenkooda wakhti siiyaan, wakhtigaasina ugu danbayna aragtida labada dhinac ee baarlamaanku leeyahay meel la iskugu keeno.

Haddaan nahay Guddiga Lasocodka iyo Guddiga Madaxabannaanba, waxaa sharaf weyn inoo ah inaan hortiina nimaadno muddo laba usbuuca kadib, labadaa usbuuc waxaan ku shaqaynaynay oo aan diyaar u ahayn inaan halkan ka jeedino warbixinta la xiriirta afarta cutub ayaan halkan u joognaa inaan ka jeedino. Laakiin duruufaha ka jira baarlamaanka oo marwalba aaminsanayn in la isku soo jiidjiido ayaa dib inoo dhigay, yeelkeede maanta ayaan wada joognaa waxaan filayaa mudane kasta oo baarlamaanka ka mida ah inuu haysto nuqul ka mida soojeedimaha shanta cutub.

Waxaan sidoo kale rajaynayaa xildhibaan kasta oo halkan fadhiya inuu haysto war bixinta afarta cutub la socota, waxaan sidoo kale rajaynayaa afarta cutub, cutubka 4aad ee lagu noqdayna isbeddel kii lagu sameeyeyna inuu hortiina yaalo. Wakhti badan ayaan siini doonaa maalmaha soo socda laakiin mudane guddoomiye waxaan kaa codsanayaa inaad saaxiibkay Senator Siciid Cawke oo ku noqoshada cutubka 4aad halkan ka akhriya inaad iga oggolaato inuu hore yimaado, senator Siciid soo dhawaw, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Sen. Saed Abdi Hussein**
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee BFS

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista dastuurka waxay latashiyadan u qaabeeyeen iyagoo booqashooyin rasmi ah ku tagay Dawlad Goboleedyada Koonfur-galbeed, Galmudug iyo Hirshabeele sidoo kale si loo hubiyo ka qaybgalka muwaadiniinta ku sugan dibadda waxa la qabtay latashiyo dalka dibadiisa ah oo lagu qabtay magaalooyinka London, Nairobi iyo magaalooyin kale. Intii ay socdeen latashiyada qaybaha kala duwan ee bulshada iyo hay'adaha dawladu waxaa loosoo bandhigayay 33 su'aalood oo lagasoo saaray cutubyada 5aad ilaa 9aad ee dastuurkaa kuwaasoo si fiican u abbaaray meelaha aan uga baahnayn inaan ka helno talooyin iyo fikrado qaran si dib-u-eegista dastuurku u noqdo mid ka turjumaya rabitaanka bulshada iyo aragtida muwaadiniinta soomaaliyeed. Kulammadii latashiyada ahaa ee aanu qabanay waxaanu latashanay hay'adaha dawlada, aqoonyahanadda iyo sharci-yaqaanadda soomaaliyeed, dhalinyarada soomaaliyeed, haweenka, bulshada rayidka

ah, odayaasha dhaqanka, dadka naafada ah, culuma'udiinka, hay'adaha heer federaal iyo heer dawlad goboleed gaar ahaan golayaasha wasiirada, bahda garsoorka iyo golayaasha wakiilada.

Latashiyadas balaadhan waxay xaqiijiyeen in dib-u-eegista dastuurku aysan ahayn arrin xafiis balse ay tahay geedi socod qaran oo ku dhisan ka qaybgal, wadatashi iyo lahaanshiyo bulsho. Intii u dhaxaysay Agoosto ilaa Sebteember waxaanu qabanay kulamo wacyigelin dadwayne ah si bulshada soomaaliyeed loogu sharaxo nuxurka cutubyada 5aad ilaa 9aad, kulamadaasna waxa lagu qabtay qayb kamid ah Degmooyinka Gobolka Banaadir, Jaamacado iyo Ururada bulshada rayidka ah, waxa sidoo kale la adeegsaday qalab wacyigelin oo la iraahdo "Civic Education" si xataa bulshada aan lahayn aqoonta akhrisku ay u famaan waxa uu yahay dastuurku iyo sida uu noloshooda u saamayn doono.

Gunaanadkii, mudane guddoomiye iyo mudanaayaasha baarlamaanka,dib-u-eegista dastuurku ma ahayn hawl xafiis balse waxay ahayd geedi socod qaran oo cilmi-baaris, wadatashi iyo masuuliyad ku dhisan, ugu dambayntii masuuliyadaas taariikhiga ahi maanta waxay saarantahay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed si ay u dhamaystiraan dastuurka, ugana saaraan marxalada kumeelgaarka ah una dhisaan jiilasha mustaqbalka dawlad ku dhisan sharci, caddaalad iyo isla xisaabtan.

Waxaan ku boorinayaa xildhibaanada sharafta leh oo ay ku jiraan kuwa qaylinayaayi inay arrintan u wajahaan arrin qaran, masuuliyad taariikhi ah iyo danta guud ee ummada soomaaliyeed, fikradihiinu waa muhiim, aragtidaada dhiibo adigoon qaylinayn aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Avv. Burhan Aden Omar**
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka.

Aslaamu calaykum wa raxmatulaahi wa barakaatu, mudane guddoomiye, mudanayaal maanta waxaa sharaf weyn noo ah inay maanta halkan ka bilaabanayso dooda cutubka 4 aad oo wax ka beddel lagu sameeyey qodobadiisa.

Guddiga madaxabannaan ee dib-u-eegista iyo hirgalinta dastuurka wuxuu diyaariyey ka dib heshiisyadii xukuumada federaalka iyo mucaaradku ay wadagaadheen ogosto 2025. Soojeedinta wax ka beddelka qodobka 49aad, 50aad iyo 54aad ee cutubka 4aad ee hore loo ansixiyey baarlamaanka federaalka maarso 30, 2024. Sidaad ogitiin cutubyadii la ansixiyey waxaan ka baranay waxyaala badan, mudane guddoomiye qodobdada hoos ku xusan waxay saamayn ku lahaayeen cutubyada hadda lagu soo gudbiyey oo ah 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad ee dastuurka 2012.

Qodobada wax laga beddelay waxaa kow ka ah  qodobka 49aad. Qodobka 49aad wuxuu sheegayey sidaad ansixiseen oo si aqlabiyed leh ba aad ku ansixiseen  hay'addaha sida tooska ah loo dooranayo, waxaad ku ansixiseen in baarlamaanka soomaaliya shacabku soo dooranayaan labadiisa aqal, madaxweynaha sidoo kale shacabku soo dooranayaan, hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka dawlad goboleedku ay soo dooranayaan baarlamaanadooda, sidoo kale golaha wakiilada ay soo dooranayaan hay'addaha sida tooska ah loo soo dooranayo.

Waxaan beddelnay oo soojeedinta hadda ku soo jeedinaynaa oo idinka aan idinka rabnaa inaa maantaanta ka doodaan hawshii ahayd madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa loo ceshay cutubka 6aad, 7aad iyo 8aad, gaar ahaan qodobada 96aad iyo sidoo kale cutubka 7aad qodobada 104 faqradiisa 1aad oo sheegaya in madaxdweynaha Jamhuuriyada federaalka soomaaliya ay dooranayaan labada aqal ee baarlamaanka federaalka soomaaliya. Sidoo kale hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka dawlad goboleedyada waxaa dooranaya la soo jeediyey golohooda wakiilada sida ku cad qodobka 69aad faqradiisa 1aad. Sidoo kale golaha deegaanka iyo duqa magaalada waxaa la soo jeediyey duqa magaalada inay golaha wakiiladu dooranayaan. Maantaa, waxaa la rabaa doodaa qodobka 49aad doodiisa halkaa ka sii bilowdaan iyadoo faahfaahsan waxay ku qorantahay qodobada hadda aan sheegay ee kala ah cutubka 7aad, qodobkiisa 114aad iyo cutubka 6aad qodobkiisa 90aad iyo sidoo kale cutubka 8aad Qodobkiisa 128aad faqradiisa 1aad.

Mudane guddoomiye, mudanayaal waxaa sharaf weyn noo ah sidoo kale inaan halkan idinkula wadaagno qodobka 50aad isbeddelka ku yimid waxay noqotay in marka hore waxaa isku xirnaa doorashada dawladaha hoose iyo doorashooyinka heer federaal iyo golayaasha kale. Hadda waa la kala furay oo waxay noqotay mudda hay'addaha sida tooska ah loo dooranay inay shan sano.

Qodobka u danbeeya waa 54aad waa tartanka xisbiyada siyaasadeed iyada waxaa la yiri saddex xisbi baa ku ansixiseen, waxaa la soo jeediyey in oo soo jeedinta ku taala in boqolkiiba toban ururkii ka hela xubnaha labada aqal doorashadooda ka dib inuu noqonayo xisbi qaran inuu noqonayo, saddexda arimood hadaan soo koobo saddex arrimood baa la beddelay in madaxweynuhu la soojeediyey inuu baarlamaanku dooranayo, ra'iisal wasaaraha sidii sii hora lagu ceshay. Ra'iisal wasaaraha xukuumada federalka soomaaliya waxaa xilka ka qaadi kara ama soojeedin kara mooshinkiisa kalsooni kala noqoshada golaha shacabka ayaa soo jeedinkara, halkii ay ka ahayd raysal wasaaraha waxaa xilka ka qaadi kara madaxweynahaa. Sidoo kale tartanka xisbiyada meeshii saddexda ahayd waxaa laga dhigay waxaa la soojeediyey inay noqoto boqolkiiba toban tirada guud.

Mudane guddoomiye mudanayaal siduu senator Siciid Cawke sheegay waxaa halkan cutubyada ina horyaala waxaa asal ama sal u ah saddex arrimood latashiyada dadweynaha iyo hay'addaha dawlada, cilmi baadhisyo la sameeyey iyo sidoo kale heshiisyada lagalay ee golaha wadatashi qaran uu galay. Mudane gudoomiye iyo mudanayaal maanta waxaan hortiina keenay sida uu sheegay senator Siciid dib-u-eegista ama dib-u-habaynta cutubyada 5aad ilaa 9aad.

Sidoo kale qodobadii aan hadda xusay 49aad, 50aad iyo 54aad ee cutubka 4 aad. Cutubyadan waa tiirarka dawladnimada wuxuuna mid walba abaarayaa nidaamka federaalka awooda xeer dejinta fulinta iyo garsoorka mudane gudoomiye iyo mudanayaal waxaan u mahadcelinayaa dhamaan labada guddi xubnahooda oo shaqo aad u weyn soo qabtay sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa dhamaan muwaadiniinta soomaaliyeed ee taladooda halkan lagu soo daray waa mahadsantihiin, qodobada maanta laga doodayo cutubka 4aad waa qodobadaas, waxaa kale oo haysataan nuquladii waad mahasantihiin.



**Sen. Saredo Mohamed Hassan**

Walaalayaal Illaahay subxaanahu watacaalaa wuxuu iri "وذكر فان ذكرى تنفع المؤمنين". Illaahay subxaanahu watacaalaa hadana wuxuu iri "وما على رسول الا البلاغ المبين". Walaalayaal Baarlamaanka gudihiisa sida aan u jeedno saaka waxa fadhiya 90 xildhibaan waxaan dhamayn. Marka ma 90 xildhibaan ayaa ka shaqayn karta dastuur? "Kama shaqayn karto". Dastuurka 4tiisii cutub ee ugu horaysay madaxwaynuhu wuxuu iri waan ka noqday marka maxay kaga duwanyihiin cutubyadan hada la keenay kuwii hore ee uu ka noqday? Walaalayaal suurtagal maaha anigoo Senator Sareedo Jayte ah oo qof kasta oo baarlamaanka jooga uu i yaqaano runtaan idiin sheegayaaye kursi inaan kusoo noqdo uma burburin karo ummada soomaaliyeed, umana burburin karo "Mandate" ay ka hartay 65 maalmood.

Waar walaalayaal Illaahay subxaanahu watacaalaa aynu ka cabsano, waar sidani xal maaha oo askartanina waa dhibaataysanyihiin anaguna waan dhibaataysanahay, saaka wadada aan soo marayay waxa laygu iri baabuurka yaa kula saaran? Xildhibaan ayaan ahay oo xasaanad ayaan leeyahay macnaheedu waa maxay? Dastuurka qayb ayaan ka shaqaynayaa qaybna waan ka noqonayaa halkee laga qoraa? Waar walaalayaal, Guddoomiye, Guddoomiye kuxigeen, Madaxwayne iyo Raysulwasaare fariintani maanta idinkay idinku socotaa ee Illaahay ka baqa. Madaxwayne waxaan wali madaxwayne kuu leeyahay baarlamaan ama hay'ado ina kala saara ma jiraan, shalay madaxwayne waxaad nagu tiri adigoo Stage-kan igala hadlaya 24 sano wixii aad dhisayseen yaysan idiinkaga dumin 24 saacadood, aniguna waxaan ku leeyahay 35 sano wixii aan soo dhisaynay ee aan soo dhoodhoobaynay yayna ku dumin 65 maalmood. Illahay ha idiin barakeeyo, meeshan baarlamaan ma jiro Mandate-keenuna uu dhamaaday golaha waxa fadhiya waa 90% golihii wasiirada, xildhibaanada joogaayina ma dhama 20% xildhibaanada loogu talo galay inay golaha imaadaan. Dastuurka anigaa raba inaan ka shaqeeyo oo aan "*Legacy*" qaato laakiin halkee Legacy-gu yaalaa?



**Xil. Dr. Mohamed Hassan Mohamed**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Rabisharaxlii Sadrii Wayasirlii Amrii Waxlul Cuqdata Minlisaanii, waxaan maanta u hambalyeynayaaa Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, golaha oo gartay dastuur la'ansixin waayay mudo intii dalkaan dib-u-dhis ku jiray 20 sano ah, waxaa Sharaf ii ah maanta in aan hortaaganahay kana mid ahay baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee 11aad kaas oo maanta dhamaystiraaya dastuur waligii la'dhamaystiri waayay. Waxaan u hambalyeynayaa hogaankii gartay, waxaan u hambalyaynayaa gu'ddoonkii garatay waxaan u hambalyaynayaa soomaalidii garatay maanta dalkeena inuu dastuurkiisa dhameystirmo, waxaa Sharaf ii ah hogaanka dalka maanta haya in aanan gacmo iyo lugo hadii la qabto danta qaranka soomaaliya oo cidna u aabayeeleynin oo in uu horay u wado.

Waxaa Sharaf ah in gacmo shisheeye dalkaan dastuurkiisa in loo gacan haayo iney noqoto ineysan soo faragali karin madaxweynaha, guddoonka baarlamaanka waa 70 jiro, ogaaday in dalkaan maantay in uuu socdo wado kaliya wadadaas oo ah wadada horumarka.

Waxaan rabaa sidoo kale baarklamaanka hogaankiisa inaan bogaadiyo qaabka, hanaanka inta lays dilo leys dagaalo hadana laga doodaayo dastuur in maanta cid dagaalameysa in aysan jirin amnigeenana baarlamaankana wax garad noqday uu fahmay in dalkan uu u baahan yahay horu socod, cida diideysa in maanta baarlaamnka inuusan shaqeynin maxay rabtaa, cida diideysa in maantay dastuurka ku meelgaarka la joojiyo maxay rabtaa? Cida diideysa dalkaan inuu hore u socdo maxay rabaan? Maalinkasta "circle" siyaasadeed aan dhammaaneynin oo aan shacbi gaareyn in lagu jiro. Dalkaan waxaa laga qabtay doorasho qof iyo cod gobolka banaadir waxaa la qabtay oo imaaday hogaan waxaa dhacay in la helay hogaan shacabka ay doorteen ma waxaas ayaa laga xunyahay.

Maanta waxaa Sharaf u ah qaranka soomaaliya inaa ka mid tihiin baarlamaankii sheeganeeyay dastuurkii soomaaliyaan dhameystirnay, dastuurkaan maahan dastuur aan anaga leenahay waa dastuur shacabka soomaaliyeed ay leeyihiin. waa dastuur qof walba uu aragtidiisu uu keenay halkan waa dastuur aad arkeysaan mucaaradka iney maanta makaroofaanka baarlamaanka dhahayaan waxaan wax jira maahan waa hanaan dimoqraatiyadeed aan waligeed la'arkin yaanan been la isku sheegin hogaan adag oo meesha uu u socdo aanan ka leexaneenin ayaa dalka hogaamiya ama aan ku daba faylno ama aan la nimaano mashruuc ama qaanuun ama hay'ad ama wado sax ah oo qoran oo dalkaan ka wanaagsan waxa aan wadno, amaan heynaa ma firinbi ayaa la rabaa in baarlamaanka lagu heysto, ma waxaa la rabaa afar wiil iney 150ka ama 200 ee meeshaan fadhiso loo afduubo waa mahadasantihiin guddomiye, shaqo fiican ayaad wadaan waana idin hambalyaynayaa hambalyo ayaan idin leeyahay constitution-ka waan marineynaa cidii diidanna makaroofankaan ha timaado haka hadasho cidii wadato hadal ka duwan hadalka aan wadno ha latimaado makarfoonka ha sheegto ma dastuur ilaa iyo soomaaliya dastuur ilaa iyo dibada shacabka soomaaliyeed ay ka hadlayaan ayaan heynaa, wixii fikrad ah wixii maskax ah aan ahayn qalalaaso aanan ahayn dagaal oo aan ahayn dil oo aanan ahayn, fowdeey baarlamaanka war halala yimaado salaamu caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Ilyas Sheikh Ahmed**

Bismillaahi Raxmaaani Raxiim waxaan rabaa inaan faahfaahiyo sida ajandaha maanta ku cad chapter-ka 4aad ee lagu laabtay ee wax-ka baddelka lagu sameeyay.

waxaa Sharaf ii ah bishii "February" 2024 anigoo halkaan taagan inaan ka hadlay seddaxdan qodob oo wax-ka beddel in lagu sameeyo in lagama maarmaantahay, wagaas xillibaano badan ayaa igu dhibsaday, laakiin maanta waxaa Sharaf ii ah waa duubantahay "on the record" meel kastaa laga arki karaa in maanta wax-ka beeddel lagu soo sameeyay ka dib markii madasha samatabixinta oo qaar ka mid ah meeshaan taaganyihiin ay madaxweynaha kala hadleen, madaxweynaha ku wada hadleen ka bacdina is badal lagu sameeyay, maxay yihiin marka qodobadaas laga hadlay? Qodobka 49aad hay'adaha sida tooska loo soo dooranaayo waxaa la socotaan wax-ka beddelka dastuurka halkaan maanta aan ku sameynay in lagu sheegay hay'adaha dastuuriga shacabka sida tooska u soo dooranayaan inay ka mid yihiin Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya arrintaa iyada ah aniga waagii waan ka biyo diiday waxaynu nidhi sida dastuurkeena soo ahaan jiray 60kii ilaa iyo hadeertaan oo gobanimada markaan soo qaadanay ah wuxuu ku dhisnaa in baarkamaanka doorto madaxweynaha xitaa, iyadoo dalka xisbiyo ahaa.

xisbiyada markii leysku soo doorto ayaa leysku imaan jiray ayaga ayaana madaxweynaha dooranjiray.

Maanta farqadda (b) oo awal aheed Madaxweynaha Jamhuuriuada Federaalka Soomaaliya waxaa si toos ah cod qarsoodi ah kusoo dooranaaya muwaadiniinta jamhuuriyada federaalka soomaaliya waa laga badalay, waxaa loo celiyay asalkii golaha labada aqal ee baarlamanka soomaaliya iney si toos ah madaxweynaha u doortaan, laakiin labadaas aqal ee shacabka inay shacabka soo doortaan ka dibna madaxweynihii doortaan.

Sidoo kaleeto madaxweynaha ayaa reysalwasaaraha magacabaya xilkana ka qaadaya ayay ahayd tii hore halkan ayaan ku diiday, maanta waxaan ku faraxsanahay in awoodaasi loo celiyay cutubka 6aad awoodaha golaha shacabka in loo celiyay oo golaha shacabka uu dooranaayo uu ansixinaayo reysalwasaaraha iyo baarlamaankiisa. Xukuumada sidoo kaleetana golaha shacabka asagana kalsoonida kala laabanaayo waa qodob kale oo runtii aad loosoo dhaweeyay, sidoo kaleeto hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka ee dowlad gobleedyada shacabka ayaa dooranaaayo ayay ahayd hadeertaan waxay noqotay oo loo celiyay oo sidii halkaan ugu doodeynay oo ah wakiillada Dawlad Gobleedka.

Waxaa intaasi dheer guddiga waxaan rabaa iney mulaaxadeestaan qodobka 69aad waxaa idinkugu qoran hogaamiyaha iyo hogaamiye kuxigeenaka ayaa dooranaayo xoghayeyaasha marka xoghayeyaasha maxaad ula jeedaan? Ma wasiiradoda ayaad ka wadaan farqadda waxay idinka raacsantahay qodobka 96aad farqadiisa 1aad oo cutubka 6aad oo loo raray qodobkaan, marka xoghayeyaasha maxaa laga wadaa hadaad ula jeedaan wasiirada waxaa fiican inaad faqrad kale geysaan waa lagu wareerayaa qodobkaas mulaaxadadaas.

Sidoo kaleeto qodobka 49aad markaan halkaas ugu gudbo, isla qodobka 49aad faqradiisa 4aad madaxweynaha jamhuuriyada federaalka soomaaliya waxaa si toos cod qorsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranayaa waala tiray sidoo kale faqrada 5aad waa la tiray "which there is good", qodobka iigu danbeeya oo ah qodobka 54aad sidoo kale wax ka badal ayaa lagu sameeyay sidaas waa tartanka xisbiyada , waxaan aad ugu faraxsanahay in aad loo soo qurxiyay, markii hore waxay ahayd ururo iney tartamayaan oo golayaasha caasimada ku tartamayaan qolayaasha deegaanka oo dalka oo dhan ka bacdina seddexda urur ee ugu cod bato iney xisbi qaran noqonayaan hada is badal ayaa lagu sameeyay isbadalka lagu sameeyay waxa waaye kow cabirka waxaa loo soo raray labada aqal waxaa kaloo loo sameeyay "thresh hold" ama saami boqolkiiba 10% ah, awal waa lagu wareersanaa 10% markii heshiiska wadatashiga golaha samatabixinta iyo madaxtooyada ay wada gaareen 10% xagee la dhigayaa ayaa aad isku weydiinayay lakiin maanta waxaa la cadeeyay in ay tahay labada aqal baarlamaanka jamhuuriyada federaalka soomaaliya, sidoo kaleeto farqadii ahayd saddexda urur oo ugu koreyso ayadana waa la tiray runtii waxaan aad u bogaadinaayaa oo waliba aniga si gaar ah farxad iigu leh in qodobadii shalay halkaan aan ka diiday aan rabay in wax ka bedel lagu sameeyo lagu sameeyo.

Intaas waxaa dheer dastuurka arrintiisa aniga dadka markasta aaminsan in violent -ga ama qeylada wax lagu xaliyo maahi anigaa "publicly" faceboogeyga ugu qoray "comments" aan dastuurka ka qabo kii hore iyo kii danbe, laakiin waxaan rabaa markii la saxaayo in lagu saxo dooda halkaan, xillibaanada, senatarada halkaan timid ra'yigeeda ayay ka hadashay marwalba waxaan u baahan nahay in la wada hadlo, in madaxweynaha iyo golaha samatabixinta ay wada

hadleen oo shirar badan ay galeen maxay dhashay maanta? Waxay noo dhashay qodobadii aan ka qabnay dooda oo dooda badan laga qabay oo la aminsanaa in madaxtooyada dhinac u buuseyso in laga wada hadlay wax laga badalay maanta iyadoo, la badalay noloo keenay sidoo kalena chapter-da  dhiman hadaan ka doodno oo si caadiya loo wada hadlo wax badan ayaan saxeynaa, halna ogaada dastuurku waa "living document" document haraaya oo nool oo joogo waaye, kuwa mucaaradka oo dhinaca kale jira bari "documents" waa u imaanayaan waxbay ka badalaayaan waxbay ku darayaan wali doodiisa way socotaa ma dhamaanin marka sabab hada leysku xiijiyo maqabo. Dadka marwalba si adag halkaan ugu hadlo dastuurka arrimihiisa anaa ka mid ah anaa "issue" ka qaba laakiin maxaan aminsanahay halkaan ayaan la Imana waala hadlaayaa waala doodayaa wixii sax ahna waala qaadanayaa.

Waxaa daliil u ah maanta is badalka chapter-ka 4aad loogu laabtay saddexdaan qodob ayaa u daliil ah marka akhyaarta saaxiibaday waxaan ugu baaqayaa inaan is dajinoo wada hadalno doodno, dalkaan cid aan anaga ahayn uma maqno marka aad iyo aad u mahadsantihiin maalin wanaagsan.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Bismillaahi raxmaani raxiim, hal mar firriimbiga iigu roonaada, si aan u xasuusto garsoorenimadeydii, iigu roonaada, ooda iga daa. Guddoonka sharafta leh iyo hawlwadeenada aad ayaan  ugu  mahadceliyo oo aan la wadaago asxaabta iga horreysay, guddigii hawshaan qiimaha iyo qaayaha leh soo qabtay, waqtiga dheerna ku soo bixiyay. Waxa meesha hadda ka dhacaya oo firriimbi ah oo sabatan ah, waa calaamadaha dimuqraadiyadda iyo xornimada, waana sidaas oo loo baahanyaha, baarlamaanna sidaas ayuu ku shaqeeyaa. Waa mahadsantihiin, codsigeygana waa firriimbiga in la ii badiyo laakiin jugta kale la iga daayo. Haddaan taas  intaa uga baxo, qodobo badan oo halkaan iigu xusnaa, xildhibaankii iga horreeyay ayaa wax ka tilmaamay, marka sidaan waqtiga u beekhaamiyo waxaan toos u aadayaa qodobo aan la xusin oo iigu jiray, anigoo u dhaafaya wixii la xusay, xildhibaankii iga horreeyay hadda oo wax badan arrimahaas ka hadlay. Qodobka 54aad, farqadiisa 1aad oo ay ku xusan tahay 10% inay noqdaan oo u gudbaan xisbi, ururka hela, lambar kaasi aad iyo aad ayuu u culus yahay, una badan yahay, waxay ila tahay in laga dhigo meeshaas 5% sababta aan u leeyahayna waxa waaye haddii boqolleyda loo noqdo. Waxay imaanaysaa illaa iyo saddex iyo toban, shan iyo toban xildhibaan xisbigii ku guuleysta tiro intaas leegna, ururka ku guuleysta uu mudan yahay inuu xisbi qaran noqdo, marka qodobkaasi, waxaan aaminsanahay bal meeshaas in dib loogu noqdo oo laga yareeyo 10% maadaama waxay noqoneysaa 33 iyo wax u dhigma oo aad u badan oo dhici karta inay aad u adkaato inay xisbiyo badan helaan oo xisbiyada 20 iyo 9 iyo qaarkood ama badankood ay helaan oo halkaasi hadhow cilad kale nooga timaado, marka in xoogaa xariga loo dheereeyo ayaan soojeedin lahaa.

Waxaan kale oo aan aad iyo aad u bogaadinayaa qodobadii aynu ku ansixinay shirkii horre oo hadda la xusay, sida awood ka qaadista reysul-wasaaraha iyo doorashada madaxweynaha, hawlahaas oo dhan in loo celiyay sidii ay ahayd oo  awoodaha golaha shacabka ama baarlamaanku leeyahay, hadhowtii ha kala yeeshaan meelaha qaarkood sida xukuumadda ansixinteeda oo golaha shacabka qusuusiyaat keeda ay kamid tahay.

Waxaan ugu dambeyntii soojeedin lahaa ayadana, meesha oo madaxweynayaasha dawlad goboleedyada oo ku xusan hogaamiyeyaasha, hogaamiyaha xoogaa marar badan waxaa ka dhacda kalmad lala xiriirin karo taariikh madow oo aan soo marnay dalkeena sida hogaamiye kooxeed oo kale, marka haddii lala kaashan karo akadeemiyaha fanka iyo dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliya oo hadal kaas kalmad ka wanaagsan loo heli karo, muujinaysana hogaamiyaha laakiin aan madaxweynaha ahayn in la raadiyo, sida hormuudka oo kale, sida hagaha oo kale iyo sida dadka murtida leh ayaa heli kara. Waxaynu leenahay akadeemiyo, takhasuska noocaas inoo leh, bal kalmadaas way fiican tahay laakiin taariikh xun baa lala xariiriyaa, haddii aynu kalmad kale oo ka macaan heli karno, guddiga taas waxaan kula talin lahaa inay ku noqdaan, haddaan intaas iraahdo, aad iyo aad ayaad ugu mahadsantihiin xildhibaanada sharafta leh, inta sida fiican ee sharafta leh ii dhageysatay iyo inta firriimbiga ii yeerisayba, waad mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed**

Alxamdulilah. Waxaan salaamayaa guddoonka labada aqal, xildhibaanada baarlamaanka labada aqal, guddiga dastuurka ee baarlamaanka labada aqal, guddiga madaxabannaan, saxaafada iyo dhammaan akhyaarta waan salmaayaa. Assalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh. Bacda salaan. Runtii muhiim waaye doodda waxkabadelka dastuurka ee runtii soo soctay. Dastuurka waxkabadelkiisa runtii waa shaqo muddo dheer soo soctay oo baarlamaanka labadiisa aqal ay ka shaqeynayeen oo maraaxil kala duwan soo martay. Afar cutub ayaa baarlamaanka labadiisa aqal ka doodeen, waxkabadelkiisa dhammeystireen. Haddana guddiga labada aqal ee baarlamaankana iyo guddiga madaxabanaan ee dastuurka ay soo gudbiyeen warbixino ku saabsan cutubyada shanaad ilaa sagaalaad, waxay ka tarjumeysaa runtii sida ay xildhibaanada diyaarka ugu yihiin doodda waxkabadelka dastuurka.

Dastuurka waa dukuminti nool. Dukumintigaasi waxkabadelkiisa wuu soconayaa, wuuna jirayaa, markasta oo ra'yi cusub la keeno, waa laga shaqeynayaa, fikir iyo talo ayaa lagu darsanayaa. Xildhibaanka wuxuu xaq u leeyahay inuu aragtidiisa dhiibto, soo istaago, cabiro waxa ay asaga la tahay. Doodu waa ay furan tahay, saaxiibaday halkaan qaarkood qeylinaya, makaroofanka waa u furan yahay. Aad baan uga mahadcelinayaa guddiga. Waxaan rabaa doodeyda waxkabadelka dastuurka ay soo gudbiyeen chapter-adii cutubka 4aad, qodobadiisa 49aad, 50aad, 54aad. Waxaa la rabaa guddiga inay qortaan mulaaxadaatka noo muuqanaayay ama ii muuqanaayay ee runtii aan doonayo inaan wax ku daro oo ku kordhiyo qodobka 49aad, sida ay sheegeen guddiga, hey'adaha dastuuriga, qodobka 49aad hay'adaha sida tooska ah loo dooranayo, waa ku mahadsanyihiin inay baarlamaanka labadiisa aqal loo daayay, sidookale golaha wakiilada dawlad goboleedyada loo daayay laakiin aniga waxaan comment ku darsanayaa qodobka 49aad, faqradiisa 1aad, xarafka D, waxaa qoran golaha deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenkiisa, xubnaha sida tooska ah loo soo dooranaayo waxaa loo badelay golaha deegaanka oo keliya, waxaa laga saaray duqa magaalada iyo ku-xigeenkiisa.

Aniga waxaan qabaa duqa magaalada iyo ku-xigeenkiisa in lagu daro xubnaha sida tooska ah loo soo dooranaayo oo laga daayo golaha deegaanka inay soo doortaan maadaama caasimaddu ay ka duwan tahay maqaamka iyo habkeeda, sidookale waxaan rabaa inaan comment ku darsado oo guddiga note-gareystaan qodobka 54aad, farqadiisa 1aad, doorashooyinka golaha deegaanka waxaa ku tartamaayo dhammaan ururada siyaasada ka diiwaangashan guddiga

madaxabannaan ee doorashooyinka, waxaa loo badelay ururada siyaasada ee hela 10% doorashada baarlamaanka labada aqal ayaa xisbiyo noqonaya. Aniga waxaan soojeedinayaa si ka qeybgalka siyaasadeed uu u balaarto oo u noqdo inta ugu badan ee ka qeybqaadan karto xisbiyada in laga dhigo 5% maxaa yeelay dad badan oo banaanka taagan oo qeylinaya waxaa sabab u ah kalsooni inaysan qabin inay 10% keeni karaan, si ka qeybgalka siyaasadeed uu u balaarto, waxaan soojeedinayaa in meesha 10% ta ah loo badelo 5% ayaan soojeedinayaa, guddigana aad ayaa u mahadsantihiin, doodana hala wado, halag qeyb qaato. Xildhibaanada saaxiibaday ah, halka iyo labada taagan makaroofanka qaata, doodiina dhiibta, doodana waa ay furan tahay, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud**

Waan salaamayaa guddoonka labadiisa aqal iyo xildhibaanada sharafta leh ee halkaan fadhiya, intaas kadib waxaan halkaan maanta ujoognaa akhrintii dhammeystirka Dastuurka ee kala fadhiyadii hore, waxaa halkan lagu mariyey oo Baarlamaanka uu mariyey afar cutub oo afartii cutub qeybo kamid ah latashiyo lala sameyey siyaasiyiinta wax laga bedeley.

Waxaa halkan lagu soo celiyey doodihii Baarlamaanka uu qabey in Raisulwasaraha Golaha shacabka ay doortaan oo go'aanadii Baarlamaanku doodaha adag ka galey uu ahaa waan soo dhoweyneynaa. Sidoo kale xildhibaanada labada aqal oo taariikhda dalkan intii uu jirey maadaama uu "parliamentarian" uu ahaa ay dooran jireen madaxdii dalkaan soo marey asagana dib ayaa loo soo celiyey waa awoodaha Baarlamaanka usoo laabtey ayey kamid tahay.
Cutubyada hada dhimmana waxaan rajeyneynaa Baarlamaanka haduu ka doodo oo aragtidiisa halkaa ku kabo in aragtidaa iyo siyaasiyiinta dadka ka fikirka duwan ay ayagana arki doonaan waxay ku soo daraana ay tusaale u tahay in sidaan oo kale dib looga soo celiyo Baarlamaanka labadiisa aqal.

Intaa kadib waxaan rabaa in aan gudaha u galo oo farqada 49aad ee Dastuurka oo ay ku qorantahay hogaamiyaha iyo hay'adaha Dastuuriga ah, Baarlamaanka oo ka kooban labadiisa gole iyo madaxweynaha oo ay dooran doonaan labada aqal asgana dib usoo dooran doono Raisulwasaarihiisii isla si sidaas lamid ah golaha shacabka ayaa wuxuu dib-u- eegis ku sameyn doonaa xilka Raisul wasaraha qaranka. Waxaan rabnaa in aan itaas ku xoojino doorashada Golayaasha ee tartanka xisbiyada oo halkaan ay guddiga ku soo gudbiyeen in laga dhigey 10% waxaan soojeedineynaa in lambarkaas wax laga yareeyo waxaan aad u soojeedineynaa in "thresh hold" ay noqoto meshii awal seddaxda xisbi ay ku qorneyd.

Maanta nuxurkeena uga weyn wuxuu daaranyahay in afartii cutub ee horey loo ansixiyey wax ka bedelkoodii oo la'isla soo gartey dhammaan siyaasiyiinta in aan dib u toosino oo wixii la'isku soo gartey aan ku meel marino ka dibna aan u gudubno cutubyada xiga ee ka bilaabanaya cutubka 5aad ilaa 9aad dhammaan aad ayaad umahadsanyihiin.



**Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed**

Waan ku faraxsanahay malin kale iyo madal kale in aan halkan joogo waxaa cajiib ah oo aan saake baarlamanka ku arkay mid ka mid ah ragii dalkan hamiga iyo aragtida fog ka lahaa oo teendhada noogu khudbeyn jiray in uu dastuurka dhameystiri doono oo maanta dastuurkii diidan.

Mudunahaas sidee buu bari noogu khudbeyn doona, waxaan lee yahay mudane adigaa shalay noo khudbeyay adigaa noo sheegay in aa dastuurka dhameystireysid, adigaa yiri dastuurka dhameystirayaa.
Ma aqaani raga waxa aad adiga rabtid rabo shaashadaha ayey ka fiirsanayan waxaan leeyahay fadlan sidey shaashadaha u fiirsanayan adigana u fiirso, yeysan kugu soo dhex tarhiibin.

Waxaan rabaa dastuurka in aa ra'yigeyga ka dhiibto oo ah:- in cutubyada dib loogu laabto waxaan leeyahay aad iyo aad baad u mahadsantihiin, rayigaas waa qabnay doodasna waxey ahayd doodihii hore oo aan qabnay sida in reysul wasaaruhu in ay ka qaadi karaan baarlamaanku, madaxweynuhuna ay soo dooran doonan baarlamaanku, hogaamiyaasha maamul goboleedyada in ay soo dooran doonan golaha wakiilada ra'yigaas ayaan qabnaa dood kale iyo ra'yi kale oo aan qabo majiro taas ayaana u soo istaagay. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Omar Ali Isak**

Alxamdu lillah, wassalaatu wassalaamu calaa rasuuli laahi, wabacdu.

Mahadsanid mudane guddoomiye, Guddoonka labada Gole aad iyo aad ayey u mahadsanyihiin, sida sharafta leh quruxda badan ay u daadihinayaan barlaamaanka maanta, sidoo kale waxaa aan aad ugu faraxsanahay saaxibadeeda oo dimuqraadiyadda muujinaya waa ku mahadsanyihiin, dimuqradiyada waa loo baahan yahay.

Intaa ka bacdi waxaan aan aad ugu faraxsannahay maanta sida quruxda badan oo dooda ku bilaabatay una socoto, laga bilaabo saakay subaxdii ilaa hadda, waxaan leeyahy labada gole aad iyo aad baad u mahadsantihiin, waxaan soo dhawenayaa una hambalayenayaa guddoonka labada guddi, guddiga madaxabannaan dib-u-eegista dastuurka iyo guddiga lasocodka iyo xubnaha gudiyadaasi shaqada fiican oo quruxda badan ay soo qabteen, waxaan leeyahay horay u sii socda, idima carqaladayn karaan shan qofood, waxa aan aad iyo aad ugu xumahay shanta qof saaxibadey.

Qodobadaan quruxda badan oo maanta lasoo dhigay ee cutubkii 4aad lagu soo noqdayna aad baan u soo dhawenayaa, muhiimadda waxa waaye in dastuurka noo furmay doodiisna si rasmi ah ugu furantay xarunta golaha shacabka, insha allaahu tacaalaa waxaan rajanaynaa si qurux badan ay ku dhammaato, Dastuurka dhameystirkiisa waa waajib dastuuri ah oo qaran waaye, waxaana laga rabaa iney dhameystiraan labada gole ayaa masuuliyadoodi tahay, qof kale oo looga heybeysanaayo ma jirto wayna dhameystiri doonaan, meesha hadda uu marayana shantaan cutub kadib afar cutub ee hartay, shantaan cutub waala dhameyn doonaa si qurux badan ayaa wada tashi loo galiye, soomaaliyoo dhan waa lagala soo tashaday, waan la og yahay,

baarlamaankii 9aad ilaa iyo hadda ayaa la waday, si qurux badanna way ku dhamaan doontaa, kadibna afar cutub ayaa hartay, afartaa cutubna waa la dhameyn donaa, dastuurkii oo dhameys tiran ayaan sugaynaa mardhow haduu ilaahey yiraahdo.



**Sen. Saynab Ismail Mohamed**

Maanta waxaa farxad weynoo ah intii meesha aan joognay arrintii la soojeeday oo laga shaqaynayey oo ahayd dhamaystirka dastuurka wajigiisii 2aad inaan maanta nimid aad baa ugu faraxsanahay.

Markaan eego dawlada soomaaliya maanta qof damiirlihi ka ma shaqeeyeen ilaa dastuurkeeda iyo hawlaheeda la qabto, marka loo eego cadawgaan yeelanay, marka loo eego qayb qaybteeda waxaan leeyahay waan soo dhawaynayaa labada guddi ee ka soo shaqeeyey dastuurka iyo maanta meesha uu maraayo. Waxaan xoojinayaa oo aan isku soo taagay qodobada ka sheekaynaya soodimihii 1991 dii, 1991 dawladii dhisnayd waxay ahayd "unitary". Laakiin dawlada hadda joogta waa federaal, waxaana jirta degmooyinka qeybtooda oo u dhaw degma kale inay xukunto degmo aad uga fog. Arrintaas oo u baahan guddiga xudduudaha iyo soodimuhu in dib u qaabayn lagu sameeyo, iyadoo loo eegayo sida ay isugu dhawyihiin ama ay isku saamayn karaan.

Arrinta kale oo ah mabaa'diida federaalka oo uu sheegayo qodobka 65aad, xeerka iskaashi ee dawlada federaalka ah iyo dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka ah, waxaan rabnaa in la qeexo oo la cadeeyo, iyadood ogtihiin maanta dawlada federaalka soomaaliya inay xiriirka u jartay dawlada Emirate oo mudo hagardaaminaysay, haddana madaxda maamul goboleed ay tagaan oo au  u sii socdaan, oo ay muuqato in hagardaamo iyo faro lagula jiro dib loogu dhigayo,xitaa baarlamaanka ay ka dhex muuqato. Taa waxaan jecelnahay inay muuqdaan qodobadaas laguna xisaabtamo. In heerkasta oo dawlada federaalka awoodaheeda iyo dawladaha xubnaha ka ah markay cadaadaan ay meesha ku yaalaan wixii lagu dhaqmilahaa.

"Shame on you", idinkaa ah niman waaweyn oo wadankoodii u hadlayn oo maanta firimibi haysta. Waxay yiraahdaan maahmaah soomaaliyaa jirtoo la yiraahdo "habar jecloy muuse waakaa", niman u soo xaydxaytay inay soomaaliya hogaamiyaan oo maanta sidaa u dhaqmaya waxay muujinaysaa kalsooni daro. Baarlamaanku wuu fadhiyaa codkiinaa ku biirin lahaydeen waxaad tabanaysaan, laakiin firimbi intaad qaadataan umadda soomaaliyeed waxaan ka bixinaynaa raaligalin, naga raali ahaada ayaan leenahay shacab weynaha wax ma yaqaano meeshan ka buuxee, soomaaliya hanoolaato.



**Xil. Zamzam Muhumed Omar**

Waxaan rabaa arinta dastuurka in aan dib ugu soo laabto, Dastuurka 4 cutub ayaa horey loo soo ansixiyay, dadka shalay gacanta u taagay ee dastuurka aaminasanaa maanta Waa kuwaas Meesha inoo taagan.

Sharciyan nin walbo oo siyaasi ah oo imaaday dalkaan oo musharax madaxweyne ah, Wuxuu ku doodaa dastuur baan dhameystirayaa.
Afar sano ka hor madaxweyne Maxamed Abdulahi Farmaajo markuu joogay qaar kamid ah ayaa joogo maanta oo ku doodaya dastuurkaan dhameystirayaa.

Xassan Sheikh Maxamuud wuxuu mas'uul ka yahay in uu dastuurka dhameystiro, Saaxiibayaal aragti siyaasadeed iyo dood saxan iyo caqli fayow oo caafimaad qaba waxa lagu doodaa. Nin miis garacaaya iyo nin wax foorinayo waxaan u arkaa, ama siiri soo qaata ama wax kale soo qaata dalkaan iyo dadkaanba wuu socday, ninka ragg ah ee raba dalkaan in uu jiheeyo, halkaan inaad timaado doodada iyo aragtidada dhiibo. Waan soo dhaweenayaa dastuurka qodobkiisa madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya in uu magacaabo Raysalwasaaraha uu awood u leeyahay Waan soo dhweynayaa qodobkaas.

Maanta waa mabaadii'guud dadkan loo istaagi maayo waa loo soconayaa, waa Lashaqeenayaa nidaam dastuuri ayaa lagu dhameynayaa, dastuurka waa la dhameystiryaa dalka iyo dadkuba ha noolaadaan. Dastuurka dhameystirkiisa wadeynaa dalka waa guuleystay ciidamada qaranka is heysta Wadooyinka dhex taaganna waa guuleysateen waad badbaadsateen cirdigiina waad badbaadiseen, sharaftiina waad badbaadiseen, wax kastoo hor istaaga dowladnimada waan iska celineynaa. Waad mahadsantihiin.



**Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed**

Bismillahi rahmani raxiim Alxamdullillahi rabil caalamiin wal caaqibatul mutaqiin wala cudwaana ilaa cala daalimiin. Wasallahu calaa sayidinaa maxamadin wacalaa aalahi wasacbihi ajmaciin.

Intaas kadib guddoonka sharafta leh, Guddoomiya iyo Guddoomiya ku xigeenada, sanatarada iyo xildhibaanada dhammaan labadda aqal ee sharafta badan, masuuliyiinta ka socoto golayaasha ama guddiyada dastuurka marti sharafta kale iyo saxaafada dhammaan waxaan idin leeyahay, Sallamullahi caleykum waraxmatullahi wabarakaat.

Mudane Guddoomiye warkaan dhihi lahaa hore baa loo yiri oo inta igu fikirka aheyd la qabaa anoo soo koobayaa waqtigana ka faaiideysanaya, waxaan dhihi rabaa hambalyo hambalyo iyo bogaadin inaa u soo gudbiyo guddoonka sharafta leh sida habsamida ah oo ku wado iyo xasiloonida oo runtii waa faaqsan xeer hoosaadka baarlamaanka labadiisa. Tan kale waxaan rabaa hambalyo hambalyo iyo bogaadin inaa u soo gudbiyo guddiyada ka shaqanayey dastuurka dhameystirkiisa, godoonka labada gole iyo kan madaxabannaan iyo dhamaan inta ka soo shaqaysay wax-kabeddelka howlaha socday ee dastuurka. Waxaan rabaa hambalyo iyo bogaadin inaa u soo gudbiyo dimoqraadiyadda ka jirta baarlamaankeena oo runtii u dhiganta kuwa aduunka sida ingiriiska iyo mareekanka oo kale, rutii raga walaalaheena ama masuuliyiinta waxa ay diidayaan in ay muujin karaan, si dimuqraadi ah taas ay socoto hawshu, aygana ay muujin karaan shucuurtooda. Tan kale anoo soo koobaayo waxaan u xilsaarannahay hadaanu nahay xillibaanadeena labada golle, massuuliyadeena oo aan u dhaarannay waxa ay ahayd ka shaqeynta dastuurka waxkabedelkiisa iyo dhammeystirkiisa.

Maanta howsha socotana waa howshaas oo runtii loo dhaqaaqay, intaasna soo socotay ilaa baarlamaankii 9aad, waxaan jeclaanlahaa walaalahey xillibaanada golayaasha ah intii horayba loo sheegay, runtii ayagoo muujinayo shucuurtooda, ay ku muujiyaan awooda codka ay leeyihiin iyo xasaanada ay leeyihiin, ku gudbin karayaan fikirkasta ay qabaan ay ku wajahaan arintaan maanta loo joogo dastuurka, waxaan u soo qaadanaya miisaal,maxaa yeelay horta lacagta qaadaneyno, musharka aan qaadayneyne waxaa u qaadanaa inaan ku shaqayno

howlaha ku wajahan  dasruurka oo kale  iyo wax yaaabaha kale ee shuruucda ku wajahan, hadii aan taas fulin  waxaa qadenyo baadil ayey  noqoneysaa, xaqna ma noqoneyso, taas waxaa rabaa inaa isku sheegno.

Mida kale oo u dambeyso waxaa raba mudane guddoomiye, arrinta dastuurka yacnii waxaa miisaal u soo qaadanaya ayaantii hore laga doodaaye, waa tii la keenay waxkabedelka, markii laga hadlaaye qodabadii dastuurka ee 49aad,  50aad iyo 54aad waa ognahay, markii la keenay doodii lasoo dhex dhigay, runtii fikirka laga dhiibtay oo saan oo kale loga dhiibtay ayaa wax ka badalmay, markii madaxweynaha iyo samatabixinta is arkeen, waxaa sal dhig u ahaa fikirkii inta laga badalay, san oo kale manta lagu jeediyay, taas idinkana wax ku badali karaysaan, waan idin soo dhaweenaya inay  waxkabedeli doonaan  rajaynaa, waxaa rabaa ugu dambeentii mudane guddoomiye waa ku dheeraaday inaa soo dhaweenayo, oo taageerayo, fikirkeenii mirihiisa noo soo noqdo, inaan taageerno wax-kabadalka kooban oo ku saabsan, qodobada 49aad, 50aad, iyo 51aad, cutubka 4aad dastuurka, oo  manta runtii  wax weyn ah  maxaa yeelay, waa fikirkeena oo gadmay,  waa  fikirkeen runtii jidka loo baahnaa maray, taas waxaa soo dhaweenaynaa , waxaa rajeenaya inay ila soo dhaweeyaan  walaalehena hada horteena joga, ugu danbayntii qodobda kale dastuurka dhiman ee la soo xiraayo. Ugu dambeentii qodobada harayn waaxaa rabaa saas oo kale anagoo ka doodnay oo fikirkeenay galinay inaa waxkabedelno, aad iyo aad ayaan hambalyo iyo bogaadinayaa wabillaahi towfiiq wasalaamu calaykum warax matullahi wabarakaatuhu.



**Sen. Ali Shacban Ibrahim**
Guddoomiye Kuxigeenka 1aad ee Aqalka Sare

Aadaa umahadsanyihiin sanatarada iyo xildhibaanada maanta halkan joogey xiliga salaad ayaan joognaa xildhibaanada iyo sanatarada oo qoran doodahooda waa sii socon doonaan isniinta ayaan isku soo laabaneynaa shirkeena maanta waa noo xiranyahay aad ayaad umahadsantihiin.

**Kulanka 12aad (Febraayo 9, 2026)**

| | |
|---|---|
| Kalfadhiga: | 7aad |
| Kulankii: | 12aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeysa |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:44 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 2:14 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Aqalka Sare<br>Sen. Ali Shacbaan Ibrahim |

**Ajendaha:**

(4) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(5) Ansixinta Ajendaha.
(6) Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-kabeddelka Dastuurka.
Cutubka 4aad: Wax-kabedelka kooban oo ku saabsan Qodobada 49aad,50aad iyo 54aad ee cutubka 4aad ee Dastuurka.






**Sen. Ali Shacban Ibrahim**
Guddoomiyaha Kuxigeenka 1aad ee Aqalka Sare.

Waad mahdsantihiin, aan is dhagaysano marka hore ajendaha noo ansixiya gacanta taaga, waad mahadsantihiin, ajanduhu sidaasuu ansax inoogu yahay. sidaad la socotiin doodii ayaa inoo gaadhay, xildhibaananada had hadlaayo hala aamuso aan isdhagaysano. Doodii ayaa noo bilaabanaysa, doodeenii ayaa noo socota markaa xidhibaannadu ha is qoraan kuwa qorana ha bilaabaan doodda.



**Xil. Asho-kos Mohamud Omar**

Dastuurka sidiiba waxa weyaan heshiis bulsho waana waxaan kasoo shaqeynay haddii aan ka hadlo qodobkiisa 4aad waana afar qodob aan horey u ansixinay kaaso ay ku jireen Madaxweynaha in la dooranayo oo ay shacabka dooranayaan. Haddana waxaa lagu soo beddelay Madaxweynaha in ay dooranayaan Golaha Barlamanka Jamhuuriydda Federalka Soomaaliya labadiisa aqal.

Ra'iisulwasaaraha Xukuumadda in uu soo magacaabayo Madaxweynaha Jamhuuuriyaddu, Baarlamanka Golaha Shacabkana uu ansixin doono lana xisaabtami doonan oo haddii ay bixinayana ay ayaga bixinayaan. Tan kale maamul goboledyaduna markay deegaanada dhisaan inay maamul goboleedkoodu ayaga soo dooranayan, mar haddii ay qeexantahay mudaneyaal oo ay halka horteenu ku taalo shalayna dood badan ka yimaadeen oo dad inaga naga mid ah ansixiyeen dad ka mid ahnaay diidanaayen, horta taa waxaan leeyahay waxaynu ku sii jiid jiidno ma ahan shalayna Raiisulwasaare Kuxigeenka doodan doodii ka horeysay si fiican u kala qeexay. Waxaan leenahay Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Madaxweyna kasta oo horteena jooga oo doonayey in uu madaxweyne noqodo wuxuu noo sheegayay in Dastuurka KMG ka saarayo, dabarkiina waxaa ka gooyay Dastuurka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee 11aad ee ay maanta mudanayaashii labadii gole ay halkaan ku dhan yihiin.

Mudaneyaal iyo marwooyin dadkiina sharafta leh ee halkan jooga tariikh uga taga ilmihiina idinkoo ka been sheegin waxaa qabateen oo Ilaahey dartiina la hortegaya, Ummadda Soomaaliyeed haka baxdo Dastuur KMG ah, dalka wuu ka baxay Dastuur KMG. 2012 ayuu ka baxay, intaa kaddib anaga oo soo galnay Barlamankii 9aad waxaa nalagu dhaariyay baaburtii AMISOM, maantana waxaan ku dhaaranay holkii aynu wax ku qabaneynay oo nalagu doortay. Dalku halkuu joogay shalay maanta ma jooge mudanayaal yeeynu qodobkaas isku daahine sidiisa haloo ansixiyo, dalka soomaaliyeed, dadka soomaaliyeed ha loogu naxo, dastuurkuna waa wax jira , waa waxa kaliya dadka ku soo noqonayaan dastuurka , kitaabka Alla nagalugu dhaariyay laakiin sharuucda aan qaadanay ayuu dastuurku ugu weyn yahay, marka hadalkeyga waxaan ku soo koobayaa maaddama mudaneyaal badan iga danbeeyaan mudaneyaalow waxaa aynu annaga qornay yaanan waqtiga iskaga qaadine, qodobo kale ayaa na sugayee qodobkaan sidiisa haloo ansixiyo. Wabillahi tawfiiq.



**Xil. Ahmednur Sheik Mohamed**

Mudane Guddoomiye Walaalayaal, waxaa u soo istaagay inaa kalmad ka iraahdo, run ahaantii xildhibaankii iga horeeye baa maalin dhawayd sabtidii qodobadaas waa ka hadlay.

Qodobka 4aad faqradda 49aad, 50aad iyo 54 aad waa dhaweed halkaan ayaan kaga doodnay, wax ka bedel baa lagu sameeye. Anigu waxaa ka mid ahaa Xildhibaanadii wax ka bedelkaa diidanaa maxaa yeelay, dastuurka ku meel gaarka ah waxaa saldhig u aha oo laga soo unkay axdigi ku meel gaarka ahaa, Qodobo siyaasi ah bey ahayeen oo run ahaantii awoodaha Xukuumadda, Madaxweynaha, Barlamaanka la is barbar dhigay, ayada oo xal loo arkaaye xaaladahii dalka uu soo maray darteed, sidaas darteed iima muuqanin federaalka aanahay iyo heshiisyada oo muhiim u ahaa saldhigii dowlad dhisideena oo aan aniga ka mid ahaa odayaashii wax ka soo sameeye exaladaa ayada ah xildhibaanada hada walaaladeen ah Baarlamaanka ka hadlaya ee baarlamaanka dhexdiisa ka buuqaya run ahaantii waa qorantahay waa *(recorded)* doodihii iyada oo duuban iyo iyada oo qoranba oo xog hayaheena noo diyaariyeen. Kuwii ansixinaye ee lahaa ha beddelo ahaayeen maanta maanta markii madaxweynihii iyo guud ahaanba qodobadii ugu weynaa lagu soo celiye ansixintiisa iyo barnaamijkiisa ee xildhibaanada walaalaheen ah ee baarlamaanka suurad xumeynaya, ee dowlada suurad xumeynaya ee sharaf dilaya.

Run ahaantii waa wax aad iyo aad looga xumaado waa wax shacbigeena iyo caalamka iyo guud ahaanba ummadduba aan u muuqano xilkasnimo la'aan iyo masuuliyad daro, waxaan caaneyno iyo waxaan wax ka sheegeyno ,waxaan foolxumeyneyo, waa dowladnimadeenii, waa jiritaankeenii, waa karaamadeenii, sidaas darteed waxaa la leeyahay cidwalba waxa ay ku hadasho waqtigaa sheegi doono ee anaga waxaa naloo dhaariye oo aan dastuurka dhameys tirkiisa, wax yaabaha ugu weyn ee baarlamaanka laga rabo buu ahaa, Yaa badalaya, yaa saxaya, yaa wax ku daraya, haduusan baarlamaanka aheyn, run ahaantii cidii dood ka qabta waxii doodaan kaqabna saa looga hadlaayi ayaan u soo jeedineynaa, iney soo jeediyaan oo halkaan ka had laan loo baahan yahay.

Mudane guddoomiye, mudanayaal, run ahaan tii hadey jirto siyaasiyiinta ama dowladaha qaar, sida wax u socdaan kabiya diidan, waxaa la ogyahay inloo madalyahay, wada hadalo siyaasaddla iyo guud ahaanba wax yaabaha dhanna laga wada hadlaayo, cidii rabtana iney meeshaa kaga hadasho ayey ku haboontahay, laakiin shaqadii baarlamaanka dastuurkii aan u dhaaranay oo anagu dhameystirkiisa ay waaajib baarlamaanka saaran uu yahay, inaana la dhameystirin, inaanan la tixin, cid laga yeelayo cid laga aqbalayo midna ma jirto.

waxaan anigu walaashey caasha koos ku waafaq sanahay, ee labadaan qodob ee na horyaala run ahaantii aan u arko meelihii aan tabasho ka qabnay la soo dhameyey, run ahaantii sidii dastuurka uu udhignaa lagu soo celiyey, awoodihiina meelahooda lagu soo celiyay, baarlamaanka aan katirsanahay awoodii uu ku lahaa laga qaaday la soo celiyey, sabab maanta oo aan uuga buuqno ma jirto, inaa anagu madax weynaha doorano, inaa unuga aan siino xukuumadda kalsooni, inaan kalsooni ka qaadno, awoodihii aan ku dagaala meyni bay ahayd, waana helnay Baarlamaankana wuu helay, waxaa naga maqan oo maanta lala qaylinayo oo jidadka lala taagan yahay maxey tahay, waxey ila tahay inaa qodobadaasi hadda iska an saxino, waxii kalane aan u gudubno.



**Xil. Ahmed Nur Dirie**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, waan salaamayaa guddoonka iyo golaha shacabka iyo bahda saxafada iyo dhammaan xubnaha kale ee shaqaalaha, marka hore salaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Salaam ka dib runtii maanta waxaan rabaa inaan u mahadceliyo xillibaanada fadhiya golaha iyo guddoonka marka hore waxaan leeyahay waad mahadsantihiin dulqaadka aad muujiseen, saddexdii fadhi ee fadhiyadaan ka horeysay dulqaadka aad muujiseen oo aad u dadaasheen ilaa xad guddoonka iyo xillaabaanada dulqaatay ilaa xad waxaan leeyahay aad baad u mahadsantihiin, sababtoo ah wax lala yaabo ayaa ka dhacay meeshaan oo aad loogu suurad xumeeyay baarlamaanka iyo ummada soomaaliyeedba, marka intaas waxaan u mahadcelinayaa xillibaanda iyo guddoonka labada aqal.

Intaas ka dib sidaad ogtihiinba dastuurkaan soomaaliya waxyaalo kala duwan buu soo maray runtii wuxuu xaq u yeeshay in uu baarlamaan walba istaago meel dhaxo looga tago amaba la taawanin, lacaga farabadan oo aad dhagaha ka maqasheenna oo ku baxday dastuurkaan 50 "million" baa meelaha qaar la sheegayaa, meelaha qaarna meelaha qaarna lacag "million" ku

dhow baa la sheegayaa, waxaas waxaa ka sii daran dastuurkaan lacagihii ku baxaayay dhaqan xumada kubaxdaa kasii daran, runtii  baarlamaankaan 11aad baarlamaan Sharaf leh oo u istaagay nidaam dowladeed inuu dhismo u istaagay weeye, waad ogtuhiin shuruucdii halkaan lagu ansixiyay oo farada badnayd, dastuurkana waa tiirkii 4ta cutub aan ka ansixinay weeye waxaan leeyahay markaa baarlamaanka aqlabiyadiisa wuxuu go'aansaday dastuurkaan wax qarash ah uusan ku bixin, waagii farta soomaaliga loqoray oo kale inuu noqdo, farta soomaaliga waagii laqoray marka hore waxaa lasoo sameeyay "research" baala soosameeyay ku baxaaya qarash baala soo sameeyay intaasoo "million" oo xiligaas joogtay baa la sheegay, ka dib maxaa la sameeyay? Ololihii hormarintaa la aaday sidaa ogtiihiin farta soomaaliga sidaas ayaa lagu hirgaliyay, dastuurkan asagoo waxba ku bixin qofwalbaa oo xillibaan ah uu mishaarkiisa qaadanaayo baa la ansixinaya haduu alle yiraahdo disaas baarlamaanka aqlibiyadiisaa go'aansatay.

Mida kale waxaan rabaa ummada soomaaliyeed inan u sheego baarlaamaankaan waa 331 xubnood markii lagu daro 2bada xubin sharafeeda ah, waa 331 marka "research" la sameeyay oo aan xogo badan uruurinay baarlamaanka magaalada waxaa ka maqan 21 xubnood sidiisaba inta kale waa joogaan inta kale waxay ku sugan yihiin meeshaan, 2024tii xubniihii baarlamaanka dastuurka 4ta cutub ansixiyay xubno ka badan baa jooga magaaladaan maanta oo ku sugan una diyaarsan iney ansixiyaan sidaa ogtihiin saddex meelood laba meelood baa la rabaa 330 saddex marki loo qeybiyo 220 baa nagala rabaa 110 looma baahna ayay noqoneysaa sidaas ayay u dhigmeysaa, inkastoo qofwalba loobaahan yahay hadana 110 looma baahna ayay noqoneydsaa wey joogaan xillibaandii kusoo talagalay iney ansixiyaan dastuurkaan taas horta ogaato xillibaanda soomaaliyeed iyo ummada soomaaliyeedba sidaas ha ogaato waxyaaalaha kaloo shoobaraha ku saabsan baarlamaan waa coddheeri iyo kula bixid haldheeri sidaas ayay ku micno fiican tahay lakiin buuq waxba mataraayo waxaan rabnaa marka dastuurkana inuu socdo doodana ay socoto  guddoonka iyo xillibaanada aad ay u dhageystaan waxwalbo, waxaan rabaa oo kale inaan intaas  ku daro intaas ku daro dastuurka iyo ansixintiisa markaa waxyaalo badan oo dibada laga sheegsheegaayay lagu daro, baarlmaaankaan furitaan kiisa waad ogtihiin xeer hoosaadkaan nooyaalo aan ku dhaqanno baarlamaanka 11aad uu leeyahay cutubka 3aad qoqodbka 211aad farqadiisa 5aad waxay sheegeyso fiiriya xeer hoosaadka ka fiiriya, waxaad kaloo fiirisaan cutubka 3aad qodobka 25aad farqadiisa 7aadna fiiriya intaasna fiiriya intaas inaad fiirisaan ma xirmaayo baarlamaanka ama fasax ma aadaayo inta inta ay qabyo yahay ma xirmaayo intuu sharci yaalo Meesha sidaas horta qorta halkaas heygaga harto saxaafad iyo dacaayad halkaas haku harto. Waxaan rabaa marka inaan aad u soo dhaweeyo seddexdaan qodob oo Meesha ku qoran waa saddexda qodob qaarkeen aan ka qabnay inta badan xiliibaanda muxaafadkaa qaarkood dood ka qabay meshaan oo diiday seddexdaan qodob waad ogtihiin seddexdii qodob waala soo celiyay.

Waxaan marka soo dhaweyneynaa seddexdaan qodob soo celintoodii 4 qodob oo cutubka afaraadna ka tirsaneed inaan sidoodii ku qaadano maadaama naloo soo celiyay, maxay ahaayeen: Madaxweynaha iney doortaan xiliibaanada labada aqal Reysalwasaaraha xilka waxaa ka qaadi kara xiliibaanada; iyo tan Maamul gobleedyada ayay aheed.

Iskuma fogaaneyno markaa waxaan soo dhawenayaa marka in kanna aan qaadano baarlamaankana in miir uu kabado tartiib insha allaahu waajoogaan xillibaanadii ummada soomaaliyeed been danbe looma sheegi doono siduu u socdo baarlamaankaan iyo habsami

usocodka u uku bilowday uu ku dhammaan doonaa ilaa cutubka 9aad aan ka gaarno hadii alle yiraahdo Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Waxarakaatuh.



**Xil. Mahdi Mohamed Guleid**

Bismilaahi raxmaani raxiim, xildhibaanada labada aqal ee baarlamaanka federaalka soomaaliya, shirgudoonka, guddiyada dastuurka labada guddi dhamaantiin waan idin salaamay asalaamu calalaykum wa raxmatulaahi wa barakaatu.

Ugu horayn waxaan rabaa inaan hambalyeeyo labada guddi run ahaantii shaqada ay soo qabteen ee ku saabsan dastuurka dib-u-eegistiisa ama ha noqoto cutubka 4 aad.

Ugu horayn waxaan u hambalyeeynayaa shaqada ay qabteen labada guddi ee dastuurka waxaan rabaa inaan u gudda galo cutubka 4 aad oo qodoboda 49, 50 iyo 54 wax laga beddelay. Qodobka 49 faqradiisa 3 aad iyo 4 aad oo ka hadlaaya doorasha xildhibaanada aqalka sare 49 faqrada 3 aad, xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa cod qarsoodi ah oo madaxbanaan ku dooranaya kaliya muwaadiniinta degan dawlad goboleed kaas oo buuxiyey shuruudaha codbixiye, in dawlad goboleedkaasi ay doortaan xildhibaanada ama senatorada ka soojeeda Aqalka Sare waa ay fiicantahay.

Laakiin dastuurka "generic" waa "document" guud oo mabaadiida guud inuu dhigo ay tahay, waayo mustabalka marwalba dib looguma noqondoono dastuurka in wax laga beddelo. Markaa haddii imika duruuftu ay qasbayso in dawlad goboleed mesalan Hirshabeele, Koonfur Galbeed, Galmudug ay doortaan Senatorada metalaya, xaalada hadda aynu ku suganahay awgeed mardhaw waxay noqondoontaa in gobolo loo sii kala qaybiyo. Ka ba soo qaad Hirshabeele 8 senator baa ka yimaada, laba gobol weeyi afar iyo afar, afar iyo afartaas ayey noqonaysaa haddana in degmooyin loo sii dhaadhiciyo, isku duuduubkan hadda dawlad goboleedkii oo dhan la leeyahay mardhaw inama anfacayso oo markaa amniga, xasiloonida iyo deganaanshuhu hanaqaadaan waxay noqonaysaa degmada in loo sii kala jabiyo, gobolkii afar degmo leh afar senator ay ka soo baxaan. Markaa anuu waxaan soojeedinayaa duruufta hadda aynu ku suganahay sharciga doorashooyinka ayaa xakamayndoona. Wixii mabaadii guuda siiqo xaddidaysa oo tan sidan oo kala ah ayaan loo qorin ayaan oran lahaa, ee in dawlad goboleedku uu dooranayo laakiin mardhaw sharciga doorashada fursad loo siinayo in wax laga beddelo, gobolo loo sii kala jabin karo degmooyin loo sii kala jabin karo.

Waxa iyadana lamida 49 faqradeeda 4 aad xubnaha ku tartamaaya kuraasta golaha wakiilada ee dawlad goboleed kasta waxaa si toos ah oo qarsoodi ah oo madaxbanaan ku dooranaya dhamaan muwaadiniinta degan dawlad goboleedka. Markaa mesalan haddana dawlad goboleed ka soo qaad Galmudug waxaa wada dooranaya reer Galmudug oo dhan baarlamaankii. Imika duruuftaa kalifaysa laakiin hadhaw waxay noqondoontaa in gobol iyo degmooyin loo kala jabiyo. Markaa in dawlad goboleedkaas uuni inay dooranayaan ha lagu daayee, dhamaan ta waajibinaysa ha laga saaraan soojeedinayaa oo ha loo qoro siiqa guud. Dastuurka waa "generic document" markasta waa inuu ahaa kaliya "clear, concise and wide" inuu cadyahay, inuu kooban yahay, inuu nuxur balaadhan ku fadhiyo, markaa taasaa in aynu gacmaha iska xidhno

oo marwalba dastuurkii in dib loogu noqdo oo wax beddelo inoo fududaynaysa waaba sida dasaatiirtu guuda ahaan u qoran yihiin.

Qodobka 54 tartanka xisbiyada siyaasada, heshiiska aad ku soo salayseen cutubkan 4 aad ee saddex qodob wax ka beddelay sida ra'iiysal wasaaraha, iyo madaxweynaha doorashadiisii tooska ahayd iyo xisbiyadii saddexda lagu xaddiday waxa uu abuurayaa in urur iyo xisbi ay shaqsiyaad qaanuun oo kala duwan ay leeyihiin. Markaa halkan doorashooyinka hay'addaha kala duwan waxaa ku tartamaya xisbiyada siyaasadeed ee sida rasmiga ah ugu diwaangashan guddiga madaxabanaan. Hadda xisbi siyaasadeed lamaba diwaangalin karo, ururo siyaasadeed baa la diwaangalinayaa shuruudihii xisbiga si waafaqsan buuxinaaya, mardhaw marka ururadaasi tartamaan ayaa kuraasta ay baarlamaanka federaalka ku helaan baa xisbi loo rogayaa. Markaa hadda yaan la oran xisbiye xisbi ilaash urur (xisbi/urur) markaa xisbi jiritaan buu mardhaw yeelandoonaa qaanuuni ah, haddase waa urur siyaasadeed oo kuraasta uu helay xisbi ku noqondoona markaa taana urur aan gaelino.

Waxaan u imanayaa markii afarta cutub aynu ansixinay guddigu warbixin ayey halkan ka bixisey lifaaq warqad saddex qodob ka kooban, taas oo ahayd in da'da qaangaadhka oo dastuurkii 12 kii 18 jir u yaqaanay ay culumada soomaaliyeed qaylo dhaan ka keeneen, xoriyada diintana qaylo dhaan ka keeneen. Nimankan xalane deganina ay qisaasta qaylo dhaan ka keeneen, markaa saddexdaa qodob waxaa la yidhi dib baan ula noqonay ee dood baa ama ka furnaandoonta ama hadhaw mar dabaa la xalindoonaaye hadda kuma jiraan inta la ansixinayo. Saddexdii qodob dodoodii cutubka 4 aad na kumaydaan soo darin, cutubyada shanta ahna oo la qaybiyeyna kuma jiraan markaa iyaga maxaa lagu xaliyey, ma gashaanti aamus baa lagu meheriyaa baa oo waynu ka aamusnayn oo sidaasay inoogu qornaan doontaa.

Waxaan u soo noqonayaa markaa cutubkan 4 aad oo doorashooyinka iyo xisbiyada ka hadlaya isbedelka lagu sameeyey wuxuu u baahnaandoonaa in xeerarka doorashooyinka iyo axsaabta dib loogu noqdo gabi ahaabtoodaba iyo jedwalka C ee lifaaqa dawlad goboleedyada awooddaha ay leeyihiin. Waxaa ku xusteen doorashooyinka dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka waxaa la siiyey dawlad goboleedyada oo saddex heera haddana lifaaq aad galiseen, markaa saddexda heer ma baarlamaankii dawlad goboleedkaa iyo dawladihii hoosaa, heerka kalee saddexaad muxuu yahay? Xidhibaanada heer federaal ee ka soo baxaya dawlad goboleedka, ma dawlad goboleed guddi doorasho oo ay leedahay baa shaqo ku leh, mise guddi doorasho oo guud oo midaysan baa dalka doorashooyin ka qabanaysa, halkaana muhmal ayaa ku yara jira waa cadayndoontaan. Asalaamu wa raxma tulaahi wa barakaatu.

Waxa iyadana lamida 49 faqradeeda 4aad xubnaha ku tartamaaya kuraasta golaha wakiilada ee dawlad goboleed kasta waxaa si toos ah oo qarsoodi ah oo madaxbanaan ku dooranaya dhamaan muwaadiniinta degan dawlad goboleedka. Markaa mesalan haddana dawlad goboleed ka soo qaad Galmudug waxaa wada dooranaya reer Galmudug oo dhan baarlamaankii. Imika duruuftaa kalifaysa laakiin hadhaw waxay noqondoontaa



**Sen. Saed Abdi Hussein**
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee BFS

Mudanayaasha sharafta leh iyo mudanayaasha ka qaybqaatay dooda wax-ka-bedelkii yaraayee lagu sameeyay Cutubkii 4aad, inkastoo qodobada iyo faqradaha ku jiray u badnaayeen faqrado la raray ama laga *Remove*-gareeyay halkii hore ee aynu ku ansixinay oo ahayd 4tii cutub ee hore, kuwaasoo doodoodu ay ku iman doonto cutubyada dambe sida Cutubka 7aad iyo 8aad oo si faahfaahsan hadhawna qofku uga doodi karo oo fikirkiisa uga dhiiban karo.

Hadii intaa aan kaga gudbo 4tii cutub ee hore maanta waxa baarlamaanka horyaala qaybo kamid ah Cutubka 5aad oo sida buugaagtan aad haysataanba aad ka arki kartaan Cutubka 5aad wuxuu ka koobanyahay 4 Madax, wuxuuna ka bilaabmayaa qodobka 61aad wuxuuna ku eekaanayaa qodobka 69aad sadexda madax ee hore. Maanta marka sadexda madax ee ku eeg qodobka 69aad ayaa ina horyaala waxayna kala yihiin: Madaxa Koowaad: Qaabdhismeedka Dawladda; Madaxa Labaad: Iskaashiga Heerarka Dawladda; iyo Madaxa Sadexaad: Dawlad Goboleedyada.

Ku soo dhawaada qof kastana waxa la rabaa in sadexdaa madax qodobada ku jira midka uu aragti ka dhiibanayo dul-istaago. Waxa inoo diyaar ah hawlwadeenadda ururinaya maxdarka ee inoo qoraya marka si ay ugu fududaato qofka xildhibaanka ah waxa laga rabaa marka ugu horaysa inuu qodobka dul-istaago oo tusaale ahaan uu dhaho waxaan ka doodayaa ama aragti aan ka dhiibanayaa qodob hebel iyo sidoo kale faqrada. Taasi waxay sahlaysaa in hawlwadeenku meesha aad aragtida ku daraysid si fiican u *Cover*-gareeyo, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Abdi Ibrahim Warsame**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Mahadsanid mudane guddoomiye. Guddoonka labada aqal iyo xildhibaanada labada aqal, assalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh. Marka horre waxaan rabaa inaan u mahadceliyo guddoonka labada aqal oo uga mahadceliyo ayaamihii badnaa oo hadda golahaani uu hakadka galay oo runtii la iskudayay in la joojiyo, doorkii ay ka qaateen ee ahaa inay dulqaadkii badnaa ay sharciga ku badaleen, waan uga mahadcelinaynaa.

Waxa aan halkaan ku heynaa waa dastuurkii, dastuurkana wuxuu dhammeystirka siinayaa labada aqal ee baarlamaankana, waana u fadhiyaan, ciddii waxkabadaleysa waxaa la rabaa inay ra'yi iyo dood halkaan kaga badasho. Dastuurka laguma hor istaagi karo qalalaase iyo firimbi iyo xoog-xoog laguma hor istaagi karo iyo youtubero propaganda iyo caay kaga hortaga, waxaa lagu badeli karaa oo keliya in halkaan la soo istaago oo qofka waxa uu ka qabo uu sheego dabadeedna mid ka aragti duwanaan karo, dabadeedna in cod la geliyo, sidaa uu ku meel maro. Marka aad iyo aad ayaan uga mahadcelinaynaa guddoonka inay doorkaa qaateen, waxaana rajeynaynaa inay ku sii socdaan.

Haddaan ka gudbo doodaan cutubka 5aad, qodobkiisa 61aad wuxuu ka hadlayaa qaabdhismeedka heerarka dawlada, aad ayaan uga mahadcelinayaa guddiga labada heer ee dastuurka, wuxuu u muuqdaa in si fiican loo soo qoray xeerarka oo loo soo taxay. Qodobka 61aad oo ka hadlaya dhismaha maamul goboleedyada, raali ahaada, 62aad oo ka hadlaayo dhismaha maamul goboleedyada, waxaan u arkaa kaas, waxaan ka qabaa argtiyahaan, 62, farqada koowaad qaabka ay u qoran tahay waxaa jiraya dawlad goboleedyada ku dhisma si waafaqsan axkaamta qodobkan, waxaan qabaa in lagu badalo, waxaa la dhisayaa dawlad goboleedyada cusub, xukuumaddu waxay soo dhisaysaa dawlad goboleedyada cusub si waafaqsan dastuurka, mas'uuliyadaa waxaa leh xukuumadda, waa in la cadeeyaa oo dastuurka cadeeyaa dhismaha cidda leh marka ugu horreysa sidaa daraadeed wuxuu ku haboon yahay, xukuumaddu waxay soo dhisaysaa dawlad goboleedyada cusub si waafaqsan dastuurka, isla qodobkaas, faqradiisa 2aad oo la yiri waxaa ansixinayo Aqalka Sare, qeybaha dastuurka waxaynu ku ogeyn inuu matalo maamul goboleedyada, qeybaha dambe ee dastuurkana waxay cadeynayaan in lagu soo xulayo gobol-gobol oo 18-kii gobol ay tahay, marka haday saa noqoto oo maamul goboleedyada ay noqoto ansixintooda, waxaan is leeyahay waa lagu kala aragti duwanaan karaa oo dano kala duwan ayaa ka dhex muuqan karaa, kaana in si fiican looga baaraandego ayaan qabaa.

waa in la cadeeyaa oo dastuurka cadeeyaa dhismaha cidda leh marka ugu horreysa sidaa daraadeed wuxuu ku haboon yahay goboladu xaq bay u leeyihiin, laguma qasbi karo waxaan is ogoleen, marka waa badan tahay, waxaa ku haboon, aragtideyda in laga dhigo gobol iyo wixii ka badan. 18-ka gobol haddii ay federaal noqonayaan, wax u diidi karo ma jiraan ama ay maamulo noqonayaan. Siyaabaha federaalka loo dhiso gobolna wuu noqon karaa, gobolo iskutagayna wuu noqon karaa, marka sidaas ayaan ka qabaa faqrada 6aad ee isla qodobka, waxaan qabaa in asaga meesha laga saaro oo aan la caburin gobolada doonaya inay wax sameystaan. Qodobada kale aad ayaan ugu waafaqsanahay guddiga dastuurka labadiisa heer. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Harun Abdillahi**

Bismilaah salaatu wasaalaamu calaa rasuuli laah mahadsanid guddomiye aad baan uga mahadcelinayaa guddigii Dastuurka ee labada qeybood ka koobnaa ee runtii kasoo shaqeyey qofobadaan Dastuurka ee dowlada federaalka ee ina hor yaala oo runtii ah kuwo aqoon badan iyo dadaal badan iyo waqti badanba lageliyey waa mahadsantihiin "comments" keyga ayaan ku darsanayaa.

"Comment" Kan koowaad aan ku darsanayo waa qodobka 62 aad gaar ahaan farqadiisa 5aad oo sheegeysa Dowlad goboleedyada waxa ku midoobi kara 3 qobol labo afar oo deris ah iyagoo xur u ah go'aan kooda.

Midoobi karadaas waa "choice" mana ku midoobi karaan weyna ku midoobi karaan waa in la waajibiyaa waa in ay ku midoowaanba oo ku midoobi kara oo suurta galnimadaa meesha ka saara baryahaan waad aragteen maamul goboleedyo qola kasta tuulafooda ayey doonayaan in gobo lama maamul goboleed ka dhigato marka waa in Dastuurkii horena laguma dhaqmin kana waa in lagu dhaqmo la waajibiyaa oo wixii kasoo horjeeda dastuurka waxba kama jiraan si cad looga dhigaa, markasta suurta galnimada waa ina meesha laga saaraa.

Qodobka 3aad 63aad oo asigana ka hadlaayey maqaamka caasimada in kastoo caasimada ku soo ansixiney qodobadii hore ee afarta aheyd oo hadana dib aan u galney oo inoo furanyihiin waxaan qabaa caasimada anagaaba ubaahan shuruudna ku xireyn maqaamna ku xireyn Dowlada federaalka in ay hoos timaado marka caasimada maqaam inta aan usameyn laheyn in Hargeysa lanooga bedelo ayaan ka jeclaan laheyn halkii mugdisho lalahaa oo midnimada loo tanaasulo.

Marka waxaan oran lahaa caasimada iyadaa kursimaada sidaa ku qabta in dowladii federaalka "basse" keeda tahay iyo in dhaqaalihii Dowlada federaalka ah iyo wixii aduunyada nagu caawiseyba caasimada ay galaan ha inoo tanaasusho oo sidaa hanoo yeesho, hadii ayna tanaasuleyn anaga muddo hanalagu soo wareejiyo mudda kooban oo midnimadaa kusoo celino hadaan saacla yeleynin wareegto halaga dhigo soomaali waxbey isku heysataayee wareegto halaga dhigo caasimad tobankii sanaba si dalka u dhismo isku soo gaaro 10kii sanoba gobol kamid ah gobolada caasimad laga dhigo adeegyadii dowladana markaa shuruud looga dhigo in gobolkaasi dowlada uu qaadi karo.

Qodobka 69aad oo ka hadlaya doorashooyinka golaha fulinta ee dowlad goboleedyada waxaan odhan lahaa waxaad tirahdeen dowlad goboleed kasta wuxuu yeelanayaa golle fulineed oo ka kooban hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen oo ay dooranayaan golaha wakiilada iyo ma aragtey xog hayayaal ee yeynan bulshada ka wada qaadin awooda hadii dowlada federaalka aan dhahney Baarlamaanka ha doorto dib looga soo celiyey runtii aniga waxaan qabey dadweynaha sidiisi hore loo daayo lakiin hadii loo batey in lagu soo celiyey Baarlamaanka federaalka in ay doortaan golaha fulinta ee ma aragtey ama madaxweynaha dowlada federaalka dowlad goboleesyada yeysan dhinac marin si awooda shacabka ay uga dhowaato waa in ay doortaan golaha wakiilada shacab weynaha dowlad goboleed kaas hogaamiyahoodii.

Waxaan rabnaa hogaamiye "popular" ah oo dadka u adeegaya oo bulashada kalsooni la heysta in ay maamulaan gobaladii marka waa in ma aragtey laga saaraa qodobka ah golaha wakiilada dooranayo awooda loo celiyaa ee maxay aheyd shacab weynaha ha doortaan marka aynu mudo shacab weynuhu gobolada ay doortaan federaalkana aakhirkii waanu bedeli doonaa Dastuurku waa "living document" marka iyafana waxaan oran doonaa shacabku hadoortaan markasta awoodu in ay shacabku leeyihiin waxay kor uqadeysaa dowladnimada isla xisaabtanka madaxduna waxay sumcad iyo taagyeero ka raadinayaan shacab weynaha marka halkaa halaga noqdaan dhihi lahaa.

Waxaa ii xiga qodobka 79aad oo awood usiinaya aqalka sare in uu ansixiyo hadii dowlada federaalka ubaahato in ay fara gelin kusameyso dowlad goboleed runtii qodobkaas aad buu ufiicanyahay waana taagyeersanahay dowladnimadu sideedaba waa is xakameyn waa hay'adba waa in hay'ad xakameysa marka waxaan aad u taagyeersanahay in golaha aqalka sare u awoodaa yeesho ansixinta uu ku ansixinayo hadii fara gelin lagu sameynayo awood kamid ah dowlad goboleedyada.

Waxaa intaa ii dheer cutubkaan waxa uu wataa seddax jadwal oo midna awooda Dowlada federaalka uu ka hadlayo jadwalna awooda dowladaha goboleedtada ka hadlayo, jadwalna uu ka hadlayo awooda dowlada hoose kaga hadlayo.

Hadii aan ku horeeyo kan awooda dowlad goboleedyada ka hadlaya tusaale ahaan qodobkiisa 28aad waa jadwalka "c" waa jadwalka labaad qodobkiisa 28aad waxa uu sheegayaa imtixaanka iyo shahaadooyinka dowladaha dugsiyada hoose iyo dhexe ayuu awood usiinayaa dowlad goboleesyada nidaam federaal ah ayaan qaadaney federaal in aan qaadanaa micnaheeda ma ahan in aan gobolo maamulno oo gola wakiilo leh madaxweynayaal leh ee wasiiro leh micnaheeda muu aheyn muu aheyn micnaheedu wuxuu ahaa in adeegyada la federaaleeyo ee hadii imtaxaan dugsi sare uu mugdisho uu ku xiranyahay hadii wiilka ki dhasha gobolka uga kooneya dalka afartiisa jihaba oo imtaxaankiisa shahaadiga ah uu ka sugayo mugdisho ama xarunta federaalka wali adeegyadii lama federaaleyn marka waxaan qabaa seddaxda xeer ee dugsiyada waxbarashadaba in la federaaleeyo oo laga dhigo kuwa ay dowlad goboleedyadu maamulaan waa adeegyadii bulshada loo dhoweeyaa. marka awooda aad kusoo koobteen dugsiga hoose iyo dhexe sarena waa in lagu daraa aduunyadani inteeda badan wax barashado ma ahan mid "centeralized" ah ee waa mid "decentrralized" ah hadii "centerelized" noqoto magaranayo in hormar badan laga gaarayo waa sidii ay ahaan jirtey uun ardey koonaha dalka ku dhashey oo bulsha ujoogin oo cidi ujoogin in uu magaalada marti ku noqdo shahaada soo raadsada ama imtaxaankiisa wax laga saxayo oo uu yimaado xaruunta dowlada federaalka ah.

Waxaa intaa ii dheer jadwalka "A" iyo jadwalka "c" laba awoodood oo iska hor imaanaya ayaa kujira, tusaale ahaan jadwalka "A" qodobkiisa 12aad wuxuu ka hadlayaa maamulka doorashooyinka hal guddi oo maamulaya doorashooyinka seddaxda xeer waa awoodaha dowlada federaalka ah ayuu sheegayaa, isla jadwalka "C" qodobkiisa 2aad wuxuu ka hadlayaa asaguna maamulka doorashooyinka dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka iyo xeer deegaan oo yeelanaya hal guddi oo maamulaya doorashooyin seddax xeer ah awoodihii maamulka dorashoyinka waxaad hoos geeyseen dowlada federaalka oo jadwalka "A" ah qodobkiisa 12aad iyo jadwalka "c" awoodaha dowladaha xubnaha ka dowlada federaalka qodobkiisa 2aad marka kaa in lakala saaro oo meel lagu soo koobo oo la yirahdo dowlad goboleedyadu doorashooyinkooda maamulanayaan laba xeer ah kan dowladaha hoose iyo kan wakiiladooda ah iyo kam madaxdooda ah iyo dowlada federaalka oo wixii doorasho federaal ah in sidaa loo kala dhigo ayaa ku talinaa aad iyo aad baa umahadsantihiin.



**Xil. Yusuf Mohamed Adan**

Mahadsanid guddomiye marka hore asalaamucaleykum xildhibanada labada aqal ee Baarlamanka gudiyada dib-u- eegista Dastuurka ee labadiisa hay'adood ee kala duwan runtii aniga daraad ayaan isbarey marka waxaan rabaa in aan ka hadlo qofobka 49aad iyo kan koowad.

Bismilaahi racmaani raxiim xildhibaanada labada aqal guddiga dib-u-eegista dastuurka labadiisa xeer iyo guddoonka dhamantiin asalaamu caleykum bacda salaam runtii sharaf gaar ah ayey ii tahay in aan kasoo muuqdo ka doodista dastuurka oo runtii macno weyn nooga fadhiyo wadankeena sidaa ka war qabtiin doorashooyinkeena waxay ahaayeen kuwo hadba xaalad soo mareen ha ahaadaan mid odayaasha ilaa midii uga dadbaneyd ee aheyd dowlad goboleed aniga waxaan rabaa doodeyda in aan ku saleeyo oo aan ku qornaa doodii daraad marka waxaan rabaa in saas loo ogaado ayaan rabaa.

Aragtida aan ka qabo ayaa waxay tahay qodobka 49aad lambarkiisa 1aad oo ku qornaa Baarlamaanka jamhuuriyada federaalka soomaaliya oo ku kooban labada aqalka sare iyo golaha shacabka in ay dadka si toos ah u dooranayaan meesha ay tahay cadeyn ama faafaahin ubaahan ayaa waxay tahay qaybta aqalka sare waaye.

Runtii sidaan ka war qabno aqalka sare waxaa dooranayo ku qoran waxa ku qoran meesha dadka ku nool fowlad goboleedka ayaa si toos ah udooranayo aqalka sare ayaa ku qoran sanatarada taasi micnaheeda waxay tahay aqalka sare ma matalo shacabka guud ahaan ee wuxuu matalaa dowlad goboleed ayuu matalaa. Marka meesha dhibka uu ka imaanayo ayaa waxay tahay qaabka loo dooranaayo ma guddiga doorashooyin heer federaal maamulo mise dowlad goboleed walba sida daraad camal in loo geeyo wakiilada dowlad goboleedyada ma ayagaa soo dooranaayo mise sidii hore doorasho dadban ayey noqonee waxaan rabaa in la cadeeyo oo lasheego.

Qaabka uga fudud aan soo jeedineyno waxay tahay aqalka sare in uu noqdaan qabaa aniga mid isku mid loo soo dooranaayo oo dowlad goboleedyada oo dhan ah taasi marka waxay meesha kasaaree in uu ahaadaa rabnaa qaabka lagu soo dooranaayo aqalka sare in uu Dastutuurkena ku cadaado ayaan rabnaa ee aysan noqonin mid tafaraarug kale keenaya ama dood kale in uu keenayo oo bari kamaalin waxay dhihi karaan haa doorasho toos waaye lakiin "tecnical" ahaan ayaga anaga dooraneyno shuruuc ayaan udiyaarineynaa ay dhahaan ayey keeni kartaa marka taas waxaan qabaa in aad looga feejignaado.

Qodobka 49aad xarafkiisa "c" waxaan qabaa golaha deegaanka meesha waxaa laga saarey duga laga saarey inta kale dadkaa soo dooranaayo ayaa la dhahay, laakiin duga iyo ku xigeenkiisa waxaa la dhahay waa laga saarey marka waxaan rabnaa guddiga dib-u-eegista Dastuurka in ay noo fasiraan sababta looga saarey maxay tahay meshana waa meesha uga xasaasiyada badan waaye runtii bari ka maalin waxaa laga yaabaa in lasoo magacabo marka qabnaa taas oo kale in la cadeeyo oo la dhaho golaha deegaanka oo dadka ay soo doorteen in ay doortaan baa larabaa duga magaalada iyo ku xigeenkiisa taasna taas ayaan qabaa.

Qodobka 50aad mudada xilheynta oo hay'adaha Dastuuriga ah waxaa meesha ku qoran oo laleeyahay hal xili doorasho oo mideysan ayaa ku qoran meesha hadana mesha waxaa lasii raacsiiyey golaha deegaanka marka laga reebo ayaa la yiri marka taas waxaan u arkaa marka xalihii la doortey in lagu ekeyey ama meshaan in lagu bedelo ayaan qabaa labo xili doorasho sida wadamada qaarba ay yihiin sida "Negiaria" iyo wadamo badan ayaan saas ah in laga dhigo xeer "state level" ah iyo xeer "national level" ah doorashada in laga dhigo hadii kale waxay noqonee afarta sanaba in lagu jiro kaliya in "looping" ama "campain" lagu jiro mar walabana doorasho in la qabto waaye waxay ubaahantahay warashaad ayey ubahantahay "logistic" dhibaato ayey keenee marka waxaan qabaa in hal xili doorasho lagu soo koobo ayaan qabaa.

Waxaan kaloo qabaa in qodobkaas lagu xuso 59aad laleeyahay wixii faafaahin ah waxaa loo cuskan doonaa xeerka doorashooyinka marka meelaha qaar fahmi wayey waxay tahay xeerka doorashooyinka iyo Dastuurka yaa weyn labadooda waxaan umaleyna in ay tahay " putting in the cup board"in ay tahay ayaad umaleynee midkii weynaa aya la yereyey kii yaraa ayaa waxaa lasiiyey bari kamaalin ayaa waxaa laga yaabaa golaha wasiirada lageeyo oo xeerka wax laga bedelo laga yaabaa marka waxaan rabnaa Dastuurka in la adkeeyo rabnaa sidii daraad oo kale aysan dhicin.

Waxaan kaloo qabaa in la adkeeyo waxay ku dhici kartaa kaliya in meelaha qaar oo doodaha ka imaan karo in hada aan ka doodnaa la rabaa waxaan kaloo qabaa hadii lacala ay noqoto is bedel in lagu sameeyo Dastuurka in laga dhigaa rabaa afti dadweyne in loo qaado hadii kale Baarlamaanka naga danbeeyo ayaa wax ka bedeli kara marka waxaa laga yaaba "indirect" doorashooyinkii dadban in lagu aadaa laga yaabaa marka si aysan taas udhicin waxaan rabaa in qodob lagu daro laleeyahay Dastuurkaan wax kama bedeli karo Baarlamaan ilaa afti dadweyn loo qaado taas ayaan qabaa mesha cajiibka ah waxaa kamid ah qodobka 54aad tartanka xisbiyada mesha xisbiyada waxaa ku qoran waxaan la qabaa raisulwasaare ku xigeenkii hore oo dhahay in xisbi booskiisa lagu bedelo urur lagu qoro taas waan qabaa. Waxaan kaloo qabaa in ayadana la cadeeyo mesha waxaa ku qoran 10% ayaa ku qoran xildhibaanada labada aqal marka 10%hadey noqoto ururka wuxuu noqon karaa xisbi qabiileysan ayuu noqon kara aileen 10% hadii la dhaho 34 Xildhibaan melahaas ayey noqonee oo xisbi ayey noqon karaan marka taas bedelkeedii waxaan qabaa in laga dhigo 3/1 "one third" in laga dhigo intaas ayaan qabaa aad ayaad umahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Abukar Abdi**

Bismillaah salaam Alaykum waraxmatullahi wabarakaatuhu, guddoonka iyo xildhibaanada sharafta leh waad salaamantihiin, salaam kadib.

Waxaan rabaa intaan ajendaha sii galin oo dooda, waad mahadsantihiin gudiga soodiyaariyeen labada gudiba. Baarlamaanka waxaad moodaa manta in uu aad qaboob u yahay, dhadhankii, cusbadii iyo macaankii ayuu la'yahay. Aniga waxaan isle yahay maalmihii u dambeeyey waxyaabihii dhacay waan la soconay, baarlamaanka soomaaliyeed waxyaabo aan ku qurxooneen baa dhacay oo laga baaqsan karay oo si sidaan ka wanaagsan loola dhaqmi karay. Annaga nafteen ceeb iyo foolxumo ayey nagu tahay xildhibaano asaageyna ah, deeganno iyo dad matalayaanin manta ay ka maqanyihiin ay banaanka ay ku maqan yihiin.

Saaxiibadeena waaye aragtida iyo fikirka waalagu duwanaan karaa kuweena halkaan fadhiya manta wada faraxsan beri bay imaan doontaa wax aadan ku faraxsaneyn si aadan jecleyn inay timaado. Ani isma lihi guddoonka iyo baarlamaanka labadiisa aqal halkaan fadhiya sida hadda aan u yaalna si qurux badan ma ahan. Waxaan ka doodayno waa dastuur umadeed waa heshiis bulsho waa waxyaabo u baahan in ummaddaan ay mideeyaan. Waxaan aaminsanahay si sidaan ka duwan in lasameyn karo ayaan aaminsanahay, waxaan rabaa mudanayaal waa asaageena waa saaxiibadeena maalin waliba sanad waliba isku mid ma ahaan karto.

2021-2022 wixii jiri jiray hadana maantana inay jiraan kuwa ku xigana ay saas sameeyaan. Marka aniga talo waxaan soojeedinayaa guddoonka ragga saaxiibadeena haday aragti iyo dood ay qabaan oo waxay sheeganayaan oo "microphone" ay ka sheegan karaan in fursad loo siiyo laakiin xoog loo isticmaalin. Sharcina ma ahan xaqna ma ahan waxaan ognahay isbedelka aan manta ka doodayno heshiisyada Waxaa ka maqnaa dowlad goboleedyoayaa horey uga maqnaa oo doodo ah heshiisyo loogu talagalay in hab siyaasi loogu heshiiyo.

Aniga waxaan isleeyahay shalay dastuurka iyo waxyaabo dood ah baa ka jiray qodobo Waxaa jiray in si siyaasi ah loogu soo heshiiyo markaas ka dib baarlamaanka la keeno. Dawlad goboleedyada ayaa ka maqnaa hadana xildhibaano ayaa ka maqan, aniga waxaan soo jeedinayaa kaliya gudoonka aan ka codsanayaa waliba in guddi xildhibaano loo saaro arintaan oo ragga maqan la fadhiista waxyaabaha ay tabanayaan iyo sida ay wax u rabaan u soo sheegan kara kana macaamili kara iyaga iyo guddoonka si baarlamaan keena inoogu qurxanaado wax aan ka doodayno ay u qurux badnaadaan.

Aniga guddoonka waxaan u soojeedinayaa in gudi la saaro gudigaa oo xildhibaano ah arintaasna dood lagala galo raggaas lala fadhiisto, marka aad ayaad u mahadsantihiin. Doodaydu haddaan toos u galo, waxaan rabaa cutubka 5aad oo manta halkaan uga doodayno, cutubka 4aad baa halmid iga raacayoo, waxaa layiri xildhibaano ayaa dooranaayo waxyaabaha lagu faraxsan yahay bay kamid tahay. Aniga aragtideyda horey waan u jeedsaday aragtidaasna rag badan ayaa qaba dad badan oo bulsho soomaaliyeed baa qaba.

Madaxweynaha jamhuuriyadda iyo hogaanada wadankaan inay shacabku doortaan waxay ka qurux badan tahay majirto, haddii kale waligeed kama dhamaanayso wixii aan soo marnay oo musuq maasuq ahaa oo cod gadashada ahaa, xildhibaanadu oo waxay rabaan haday tahay in codadkoodu laga iibsado micnuu lee yahay.

Aniga waxaan qabaa Waxaa ka qurux badan in shacabka soomaaliyeed ay soo doortaan, war nimankaan lacagaha badan wadanka ka dhacay bal kursigaas lacag inay uga fadhiyaan war annagii iyo maxay ahayd dad badan ayaa raba iisheeg "*population*" inay cod ku qaataan madaxweyna nimada, haddaa lacag noogu badiseen waxaan rabnaa inan lacag idinkaga qaadno, marka haddii aad ku celiseen lacagtii iyo kala gadashadii kursiga.
Aniga waxaan is leeyahay waxay kala qurux badan tahay in shacabka soomaaliyeed uu soo doorto.

Cutubka 5aad badankiis 80% wuu cusub yahay 7qodob buu ahaa 2qodob waa latiray 5qodob ayaa soo hartay asalkii dastuurka14qodob oo cusub ayaa lagu soo daray.
Awoodaha sida loo dhigay waxyaabo badan baajira tan ugu horeysa aan qabo, xildhibaan Maxamed Haaruun ayaan la qabaa oo ah Qodobka 5aad isla cutubkan 5aad wuxuu dhigayaa "dowlad goboleed Waxaa ku midoobi kara labo, sadex ama afar gobol oo deris ah iyagoo xor u'ah go'aankooda". Waxaan la qabaa ragga soojeediyey oo ah in meeshaas "optional" ka laga saaro oo ah "ku midoobi kara"in laga saaro, dowlad goboleed, waxaa noqon kara laba gobol iyo wixii ka badan in la yiraahdo, asalkii dastuurka sida uu u qornaa ayaa ka qurux badan sida hadda "optional" ka laga dhigay.

Arintaas oo meel furan gobolka xitaa waxay u dhigantaa hal gobol baa noqon kara dowlad goboleed arintaas waxaan rabaa in lagu laabto gudigu ay ka dhigaan (laba gobol iyo ka badan baa noqon kara dowlad goboleed.

Dowladdu waxaan aaminsanahay maamul goboleedyo badan oo hadda la dhisay, haddii ladhaho laba gobol iyo ka badan maamul goboleed noqoneyn, marka dowladdu dhinac inay kaga shaqeyso in gobol wax ka sii yar dowlad goboleed laga sii dhigo, melena ay noogu soo qorto ay na dhahdo "optional" ka dhig inay wax ku jiraan baad moodaa, waxaan is leeyahay meesha gudigaas in lasaxo waaye laba gobol iyo ka badan in laga dhigo.

Gobol gooni isu taagi kara oo dowlad goboleed ahaan majiro xukuumadda federaalka soomaaliya ayaa maamulaysa, gobolo badan oo dowlad goboleed laga dhigay baa jira dowladdu maxay umaamuli waysay? Dastuurkeena sidaan buu dhigayaa dawlad goboleedyada aan buuxin shuruuda ah laba gobol iyo ka badan maxay dowlad goboleed ugu dhigaysaa dowladda? Maxay dowladdu usii maamuli waysay illaa laga helaayo laga dhamaystiraayo u dhamaystiri mayso? Aniga arintaan waxaan is leeyahay waxay u baahan tahay in wax laga dhaho.

Waxaa meesha ku jira oo qodob muhiim ah in laga doodo mudan dood adag laga galo waa maqaamka caasimadda, Qod63aad guddigu labo xulasho ayuu soo diyaariyey cilmi baaris ama tira koob uu gudigu sameeyey bulshada soomaaliyeed dawlad goboleed ay ku sameeyeen bay halkaan ku soo gudbiyeen.

Caasimadda jamhuuriyadda federaalka soomaaliya waa muqdisho mudda ayey ahayd ummadda soomaaliyeed ay wada joogaan in dood laga soogaliyo maalin waliba caasimadan, dawlad goboleedbaa, aniga waxaan is lee yahay iyada nafteedaa waxa loogu dan lee yahay waxyaabo aan la fahmi Karin iska tahay. Anigu shaqsiyan caasimadda soomaaliya waxaan qabaa muqdisho, horta in dhowrkii sanaba meel kamid ah wadanka ay noqoto caasimad 10sano ama 20sano, wadankaa ku dhismaayo ummaddaa cadaalad ku heleyso "*resource*" kii awoodii dawladdaa laga faaideysanayaa, in hal gobol la taagnaado waligeed aniga waxaan isleeyahay Waxaa ka qurux badan in lawareejin karo 10sano 20sano meel lagu wareejin karo.
Caasimadda soomaaliyeed aad baa loogu doodaa dadbaa matalaadeed ka hadlo horta matalaadda aan halkaan ku fadhino waa mid noocee ma mid gobol baa? Ma mid degmaa? Ma mid qabiilbaa?

Soomaalidu waa 5 beelood ,5taas beelood baa wax lagu qaybsaday aniga waxaan qabaa haddii matalaad la rabo, maqaamka caasimadda aniga waxaan leeyahay muqdisho waxaan soojeedinayaa xulashada koowaad oo ah magaalo madax gobol u'ah dowladda federaalka, 50% aragti arurin lasameeyo dadka sidaas ayey qabeen aniga taas ayaan soo jeedinayaa, laakiin haddii larabo "option"ka kale dowlad goboleed la lee yahay waxaan is lee yahay gobol iyo dowlad goboleed iyo caasimad iskuma qaadan karto suurtagal ma noqonayso.

Markaas caasimadda meelo kale haloo raadiyo marka taas ayaan ka qabaa ra'yigeyga. Waxaa jirta heshiisyada leh saamaynta siyaasadeed dhaqaale guud u dhaxaysa dawladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, labada dowladood inay heshiis galaan heshiiskaasna baarlamanka la keeno oo heshiiskaas laga saxiixo heshiisyo calami ayaan saxiixi jirnay halkaan naloo keeni jirnay laakiin heshiis isla wadankii gudahiisa in baarlamaanka federaalka la keeno baahida arintaas keentay aniga ma aqaano.

Qodobka kale, waxaa la yiri madaxa sedexaad ah Qod67aad farqadda 2aad "qodobkasta oo kamid ah dastuurka dowlad goboleedyadu oo aan waafaqsaneyn dastuurka federaalka wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, dowlad goboleedyadu dastuurkood mararka qaar waxyaabo u gaar ah sooma jiri karaan, haddii reer KGS dastuurkood ay ku qortaan in luqadda soomaaliga lahjadiisa kowaad ay maayga noqoto ma dastuurkuu ka hor imanayaa mala diidayaa? Haddii dhaqankoodu ugaarka ah la hormarinaayo in la diido miyaa? Waxaan qabaa waxyaabaha aan dhibaato ku'ahayn ka hor imaaneyn oo kaliya kama mid noqon karaan yaan la dhihin. Laakiin dowlad goboleed waxyaabo qaar waxay ka mid noqon kartaa dhaqamada afafka, afaf badan baa u baahan in la hormariyo dowlad goboleed inay hormariyaan u baahan tahay, taas in la faah

faahiyo ayey u baahan tahay hadaynan dhibaato kale keeneenin oo dawlad goboleedkaas hormarinaynin.

Waxaan rabaa awoodaha dowlad goboleedyayada, dowladda federaalka iyo dowladaha hoose oo lasoo kordhiyey halkaas,dowladda federaalka waxaad ogeydeen 4 awoodood ayaa horey u lahayd oo u madax banaan tahay laakiin hadda maxaa lasameeyey 44 awoodood ayaa lasiiyey dowladda federaalka maamul goboleedka Waxaa lasiiyey 29 awoodood oo waliba lala wadaagaya dowlada hoose awoodo lasiiyey isla Waxaa la yiri awoodaha wadaaga waxaa kamid ah dawladdii hoose dawladda federaalka la maamulaysaa awoodaha wadaaga kamid ah waxaan lee yahay awoodahaan tirada badan dawladda federaalka lagu soo aruuriyey waxyaabihii siyaasiga wadanka saameen aan ku lahayn.

Wabiyada lala maamulaa, wadooyinka lamaamulaa waxyaabaha ay kamid tahay dhalashada iyo sugnaanta Waxaa la leeyahay dawladda fedraalka ayaa maamulaysa arinkaas waxaan rabaa in wax laga badalo awoodahaas lagu laabto. Tan gudiga doorashooyinka oo hal guddi sedex xeer awooda federaalka waa galiseen kan state-kana waa galiseen qodobkaas waxan rabaa inaad meel u daysiin, gudi doorasho ee sedex xeer ah Waxaa lageeyey state-kiina waa ku jiraa federal level-na wuu ku jiraa marka hal haloo daayo kaas. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Yasin Abdullahi Mohamud**

Waxaan rabaa inaan doodeyda ku saabsan dastuurka ku darsado inaan toos u galo inkastoon is leeyahay xillibaanado kuraasta baan u qabeynaa, qodobka 63aad ee dastuurka ee ka hadlaayo waxaan rabaa seddex qodob inaan taabto ama 4 qodoba aan dhaho oo qodobka 63aad ee maqaamka caasimada ah iyo qodobka 70aad ee ka hadlaya awoodaha dowlad gobleedyada, awoodaha dowldaada dhexe iyo qodobka 71aad ee wadaaga dowladda federaalka iyo dowladda xubnaha ka ah dowladda federaalka iyo qodobka 72aad ee ka hadlaaya dhismaha dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka.

Qodobka 63aad waxaan leeyahay maqaamka caasimada waxaa loo soo qoray labo , taasoo kala ah inuu noqdo caasimad la mid ah dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ee maqaamkeeda iyo matalaadeeda nIdaamkeeda ay u gaaryihiin, waxaan rabaa inaan codkeyga ku biiriyo oo aan taageero in magaalo madaxda caasimada soomaaliya ee mogadisho in ay yeelatoo maqaam iyo matalaad iyada u gaar ah, iney ka mid noqoto ama ay ku xuquuq noqoto dowladaha xunaha ka ah dowladda federaalka.

Maxaa yeelay magaalo madaxda caasimada iney iyada yeelo amnigeeda ay sugato hadaba amnigeeda ayadaa Sugata, laakiin waxaa saaran culayska dowladda dhex, iyadoo culayka dowladda dhexe uu saran yahay oo dowladda dhexe ay kala siman tahay dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka ayay noqon kartaa magaalo madaxbannaan oo madaxdeeda iyo goleyaasheeda iyo golaheeda wakiilada iyo madaxweyne ama hogaamiye dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka iney yeelato, maxaa yeelay waxaan garan karnaa magaalkaan caasimada ah culayka ugu badan ee heystoh wuxuu yahay in markasta loo xeerinaayo ama la hoosgeenaayo ama lagu eedeynaayo dowladda dhexe. Waxaan rabnaa dowlada dhexe

awoodaheeda xubnaha ka ah dowladda federaalka guud ahaan dalkoo dhan iney kala mid noqoto, magaaladaan ay noqoto magaalo madaxbannaan.

Waxaan rabaa qodobka 70aad ee jadwalkiisa A,b, wuxuu qeexaa awooda federaalka dowladda federaalka waxay leedahay 43 “chapter” oo awood ayaa u qoran waxaan is leeyahay awoodaas awood ka dheeri ah caasimada gooni ay u xukunto uma maahna dowladda dhexe waxaan marka aniga araktiideyda ay tahay in dowladda dhexe ay kala midnoqoto caasimada dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, sidoo kale waxaa Meesha ku jirta ayadana qodobka 71aad awoodaha wadaaga ah ee dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah iyo ay wadaagaan anigu waxaan soojedinaa ka xilibaan ahaan in magaalo madaxda caasimada mogadisho ay la wadaagto dowlad gobleedyadaas aysan ku gaarnoqon marka la dhaleeceynaayo malaagada caasimada waxaa la yiraahdaa villa wardhiigleey, waxaan rabnaa in villa wardhiigleey loo asteeyo mogdishana ay noqoto magaalo madaxbannaan oo maqaam iyo matalaad u gaar ah leh. Intaa ka dib xillibaano saaxibadey ah waxay ka dhawaajiyeen halawarwareejiyo caasimada hadii magaalo qaadi karta population-ka ama culayska dowladda dhexe iyo dadka soomaaliyeed ee kala maanka ah magaalo qaadi karta magaalooyinka soomaaliyeed xaan ku diideynaa.

Xillibaano meeshaan ka doodaayay magaalo madaxda dowlad goboleedyada gaarka ah ama constiance-gooda hadeysan tagi Karin, iyadoo dowladd gobleed ah oo caasimadii dowladd gobleed ka ah hadana waxay ku doodayaan caasimadii halageeyo ma qof caasimada mogadisho inuu yimaado laga horistaagi karo ayaa jirta waa maya, waxaan rabnaa in caasimada laga daayo jisaarka qofwalba oo soomaali ah ayay waajib ku tahay magaaladaan maqaabkeeda iyo matalaadeeda inay u doodo culayska heystah magaalada shacabka soomaaliyeed ee caasimada dagan culeeska heesta qofkastoo xillibaana ah anigana idinla hadlaayo deegaan doorashadeeda ama constiance-geega aan kasoo jeedo waa Galmudug magaaladeeda constiance-geega waa ceeldheer dhuusamareeb hadana sida aan dhuusamareeb iyo ceeldheer ay waajib iigu tahay inaan ugu doodo ayay waajib iigu tahay inaan ugu doodo magalada caasimada.

Sidoo kale qodobka 72aad dowlad gobleedyada waxaa la yiri laba gobol iyo wixii ka badan saddex gobol iyo wixii ka badan aniga waxaan qabaa in loo daayo taas shacabka soomaaliyeed maaadaama layiri awooda halooceliyo shacabka sida ay isku raacayaaan tirade ay isku raacayaan sidii dastuurka hore u qeexaayay in dagmado ay yeelato dadkeeda shacabkeeda aniga aan kasoo jeeda dagan haday soo jeediyaan ineysan ka mid ahan Karin dowlad gobleedkaas waa ku qasbantihiin maala leeyahay waa maya, anigu waxaan qabaa in dadku madaxbannaadaan oo awoodo sidaan ugu doodeyno in awooda loo celiyo shacabka soomaaliyeed in la yiraahdo 2 gobol iyo wixii ka badan laakiin aan la dhihin 3 gobol 4 gobol la dhihin 5 gobol la dhihin in “option” la siiyo dadku in ay is raacraaci karaan.

Waxaa la socotaan hada hadii uu yahay gobol ka mid ah maamul gobleedyada dowladda xubnaha ka ah dowladda federaalka ah waan ka baxay dowladda dhexe gobolada kale maku qasban yihiin iney ku raacaan? Waa maya dagmooyinka maku qasban yihiin hada fursad ayaa la heestaa inaanan lagu qasbin ee shacbiga soomaaliyeed la madaxbaneeyo meeshay rabaan iney raacaan si dastuuri eh iney soo jeediyaan. Waxaan usoo noqonaa marka ku celcelinaa maqaamka iyo matalaada caasimadu waa iney madaxbannaanataa waa iney gobolada dowladaha xubnaha ka ah dowoladda federaalka ah iney la mid noqoto dowladda dhexena waa iney ula sinaataa waa loo asteen karaa magaalo u gaar ah ay dowladdu ay dagantahay lakiin

dawladda dalka oo dhan ayay maamushaa ee mogdisho kaliya ma maamusho Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed**

Bismillaah, runtii farxad ayay noo tahay in maanta markale doodii dastuurka aan ka doodayno oo aad iyo aad muhiim inoogu ahayd iyo guddoonka oo aan uuga mahadcelinayo sida hufan ee shaqada ay inoogu wadaan, waxaan rabay inaan doodayda guddaha u galo. Cutubka 5aad marka la leeyahay goboladu way israaci karaan waxaan dhahnay maamul goboleed waxa noqon kara labo gobol iyo wixii ka badan. Halkaas aniga waxaan qabaa in laga dhigo gobol kasta oo kamid ah goboladii soomaaliya iyo cid alaala iyo cidii wax isku darsan karta oo aan la xadidin oon shardi looga dhigin inay noqdaan labo gobol, hadii shardigaasi imaado waxa imaanayso gobolo badan oo aan is rabin oo dalkaan colaado badan ayaa ka dhacay waana lays dilay dhiigoodii ayaa walina isku muuqda marka waxaan qabaa in aan laysku qasbin oo aan la oran maamul idiinka dhexeeya samaysta oo shardiga laga dhigo gobol iyo wixii ka badan.

Waxa kaloon rabaa qeexida goboladii soomaaliya, sidaan wada ognahay 1960kii Goboladii Soomaaliya waxay ahaayeen guud ahaan 8 gobol, gadaal waxa looga daray 10 gobol oo ay ku dartay dawladii kacaanku, kuwaas laftooda waxa jirta cadaalad daro badan oo laga tirsanaayo, tusaale ahaan 1961gobolka ana ka soojeeda ee hiiran lagama codayn dastuurkaa looma codayn, maxaa yeelay "issue" ayey qabeen markaas.

Maantoo 2026-ka la marayo mar labaad in la yiraadho Hiiraan 16 gobol ka mid ah wali dastuurka hada socdan lagu qeexayo inuu hal gobol yahay, waxa suurtagal ah maaha, hadii kuwii hore digrayto ku yimaadeen, sheikh shariif ayaa labo gobol ka dhigay. Waxaan rabaa in la qeexo dastuurka inta gobol uu yahay dalku oo 19 laga dhigo waa ra'iyaga aan qabno, sidoo kale deegaanka aan soojeeda dadkiisu ay qabaan. Tan ah xulushada caasimada, anigu waxana qabaa waa marka laga hadlayo caasimada in ay noqoto maamulo goboleed. Caasimada waxaa ku nool dad 4 million ah, waxay u baahanyihiin maamulo goboleedyada kale waxa ay u baahanyihiin.

Waxay u baahanyihiin in ay Senataro in ay helaan, waxay u baahanyihiin nidaam gooni ah in ay helaan wayna noqon kartaa sharci diidaya iyo nidaama diidaya ma laha in ay maamulo goboleed noqoto isla markaan caasimaad noqoto wax diidaya ma jiro. Markaa in mogdisho kaliya lagu hayn in kaliya ay noqonin caasimad ay degantahay dawlada dhexe, waxaa meesha ka baxaya xuquuqdii 5 million ee caasimada ku nool ayaa meesha ka baxaya. Waxaan soojeedinayaa Guddiga Dastuurka in xulashada labaad la qaato. Waxaan ku sii darayaa hal arrin xildhibaano badan oo saaxiibayda ah ayaa markay halkan soo istaageen, waxay dhaliil u soojeediyeen caasimada. Caasimadan cid ay danbi ka gashay ma laha, iyadaa dhibane ah in dhibkale loo gaysta ma aha, waxaan codsanlahaa mid saaxiibkay ah oo meeshan ka hadlay ayaa wax uu yidhi caasimada si cadaalada loo helo ha loo warwareejiyo, isaga halkaa taagan oo sidaas dhahaya maamulo goboleedkiisa ma tagi karo, cadaalada uu halkaas ka waayey oo anigu igu raadinayo, isagaa laga rabaa inuu ka jawaabo. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Abdirisak Adam Warsame**

Bismilaah, guddoonka golaha ee labada aqal ee baarlamaanka, xubnaha baarlamaanka labada Aqal, labada guddi ee guddiga madaxabanaan iyo guddiga la socodka dastuurka dhamaan asalaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.

Salaam ka dib waa farxad maanta in doodii baarlamaanka ay noogu dhacayso jawi degan oo ka nabdoon ama ka xasilan maalmihii aan soo dhaafnay. Runtii dastuurka soomaaliya ee maanta horteena yaala ee ka doodayno marxalado kala duwan ayuu soo maray isagoo muddo dheer ahaa mashruuc lagu raadiyo dhaqaale, dhaqaale fara badan oo malaayiin ahna ay ku baxeen haddana dhamaan waayey. Baarlamaankii 9 aad ayaa laga rabay in dastuurka uu dhammaystiro, markii uu kari waayeyna wuxuu u wareejiyey baarlamaankii 10 aad, kii 10 aad ayaa haddana mar labaad kari waayey wuxuuna u soo gudbiyey baarlamaankan maanta jira ee 11 aad. Waxaa ilaahy fadligiis ah in baarlamaankii 11 aad uu maanta dastuurka uu meel fiican dhammaystirkiisa u maraayo, markii la fiiriyana waa waajib baarlamaanku uu leeyahay dhammaystirka dastuurka sida ku cad cutubka 6 aad madaxa 4 aad oo ka hadlaaya habraaca sharci dejinta baarlamaanka iyo cutubka 15 aad madaxa 1 aad oo ka hadlaaya wax ka beddelka dastuurka oo inta ba siinaaya baarlamaanku inuu xaq u leeyahay dhammaystirkiisa.

Runtii waxaan ku bogaadinayaa labada guddi ee noo qaabilsan wax ka beddelka ama dhammaystirka dastuurka in yacnii daraasado badan iyo latashiyo badan iyo heshiisyo badan ay soo marsiiyeen, isagoo intaas soo maray oo habraaciisu saxan yahay ayey horkeeneen. Markaa waxaan jeclaan lahaa xildhibaanada saaxiibadeen ah ee naga aragtida duwan waa saaxiibadeen, dalku waa dimuquraadi, rayigooda xor ayey u yihiin. Laakiin waxaan jeclaan lahay qaabka ay hadda isugu dayeen inay hor istaagaan waajibaadkaa dastuuriga ah ee baarlamaanku gudanaayo ma jeclaysanin. Markaa haddii ay wax tabanayaan waxay ahayd halkan rayi caafimaad qaba inay ka jeedsadaan aragtidooda soo bandhigaan, isla markaana haddii codka naga helaan aan ku raacno haddii aan ka helnana ay nagu raacaan.

Intaa kaddib waxaan u gudbayaa cutubkii 4 aad oo meela meelo iga raaceen, laakiin meelo badan waxaan uga gudbayaa in saaxiibo aan halkan isaga aaraa' 5 ahayn ay soojeediyeen. Markaa waxaan taabanaa qodobka 54 aad ee ka hadlaaya tartanka xisbiyada siyaasadeed oo siiqayn lagu sameeyey, siiqayntaas ayaan iyadana ayaan wax yar ku darayaa. Qodobku wuxuu markaa leeyahay, doorashooyinka hay'addaha kala duwan ee dawlada waxaa ku tartamaya xisbiyada siyaasadeed ee sida rasmiga ah uga diwaangashan guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha. Baarlamaanka federaalka soomaaliya ayaa soo saaraya xeer faahfaahinaya, habraaca diwaangalinta ururada iyo xisbiyada siyaasadeed ayadoo ururkii hela boqolkiiba 10 tirada xubnaha labada aqal. Meeshaasaan waxaan rabaa marmarka qaar meeshaas sharciga waxaa la rabaa inuusan bidix iyo midig u jiidine uu hal dhinaca aado marka sharci la qoraayo. Markaa xubnaha labada aqal marka la yiraahdo tirada codkooda miyaa mise tirada xubnaha waaye, markaa waxaan jeclaan lahaa meeshaas la yiraahdo boqolkiiba 10 tirada kuraasta labada aqal ee fedederaalka soomaaliyey ayey ka heleen oo kuraas lagu beddelo meesha xubnaha ah siiqayntaas.

Haddii aan u gudbo cutubka 5 aad ee isagana na horyaala qodobkii 63 aad wuxuu ka hadlayaa maqaamka caasimada dalka wuxuuna soo gudbinaayaa daraasado badan isagoo soo sameeyey ka dib labo xulasho ay isticmaalaan dalalka haysta nidaamka federaalka ah oo maanta anaga aan haysano, oo xulashadiisa 1aad ay tahay gobol caasimad ah oo hoos yimaada dawlada federaalka, xulashada 2aadna ay tahay caasimad dawlad goboleed ah. Markaa anigoo fiirinaaya "population" ka ku nool xamar iyo xuquuqaha uga maqan metalaada aqalka sare darteed iyo "poplation" kaa tirada badan oo soomaali oo idil ka kooban ee caasimada ku nool ee aysan jirin deegaan soomaaliyeed oo ka dad badan in meeshaas ay dadka muqdisho ku nool oo caasimada ilaahay deegaan uga dhigay in ay xaq u leeyihiin inay helaan dawlad goboleed madaxbanaan.

Markaa waxaan fadilayaa oo soo jeedinayaa xulashada 2 aad oo ah caasimad dawlad goboleed ah. Markaa guddiga waxaan jeclaan lahaa iyo xildhibaanada saaxiibadayba in arintaas si weyn hoosta uga xariiqaan bulshada caasimada ku nool ee soomaaliyeedna marnaba gorgortan kama galayso qodobkaas. Saaxiib nin aan nahay oo halkan ka hadlay, saaxiibkay xildhibaan Maxamed Abuukar oo daraaasad "fake" oo uu ka soo ururiyey fadhi ku dirirada makhaayadaha ayuu halkan keenay oo dhahaaya dadkii soomaaliyeed aqlabiyadooda xulashada koowaad ayey dhaheen. Halkan markaa timaado xildhibaanow waxaa lagaa rabaa rayigaaga gaarka ah inaa ka hadasho inaad ummada ka been sheegto lama rabo, saaxiibkay waxaan leehay (xataa yatabayanu laka khaydul abyadu minal khaydu aswadu). Aslaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.



**Sen. Muse Suudi Yalahow**

Bismillahi rahmani raxiim, Alxamdullillahi rabil caalamiin, wabihi nastaciinu calaa umuuri dunyaa wadiin, wasalalaahu calaaa sayidinaa muxamadin wasac bihii wasalam.

Mudane Gudoomiye, labada aqal sana tara dooda iyo xildhibaanadooda, dowlad goboleed yada iyo guddiga madaxa banana wax alaala iyo waxii jooga assalaamu caleekum, salaaan bacdigeed waxaan aad ugu mahad cilihaa guddiga dastuurka madaxa banana, "number one" waxaan kaloo "number one" umahad celihaa guddiyada dastuurka baarlamaanada labda aqal, waxaa laga soo shaqeeyay muddo badan oo la soo qaaday dowlado badan oo fadaraal lasoo qaatay, waa badan yihiin laakiin mareekanku ku jiro jarmalku ku jiro, sood afrika ku jirto, hadaan isku darno oo yurub kaliya aadin, ayku jirto naanjeriya, itoobiya, bakistaan, waxey isku wada waa faqsan yihiin in awooda oo kala reeban qaarna ay leeyihiin dowlad goboleed, qaarka kalana ay leeyihiin dowladda fada raalka, isku dhac meeshaas kama jiro, waxaa hadda isku duuban dad la arkaba meeshey rabto u jjiideyso, buugaan waa nala siiyay xaq iyo baadhil oo soomaali ah ayuu kala saaray, wax lagu dhaqmi karo oo les dirqi Karin waaye, shaqo badan ayaa la qabti waan ugu mahad celihaa.

Waxaa soo heray dowlad goboleed yada waa iney isku mid ahaadaan, amba ahaadaan gobolotorayaal, amba ay ahaadaan hogaamiya yaal, wax uun isku mid ah in qaarba magic loo suubsho ma ahan, hadaa u soo noqdo Gobolkaan Banaadir, Soomaaliyoo dhan ayuu ka dhaxeeyaa, haloo kala badnaado waxa uu u baahan yahay marka wax la mid ah ninka Budlanda ka yimaada, Jubbalanda ka yimaada, Koonfur Galbeedna kayimaada, Hirshabeela ka yimaada, Qaatumana ka yimaada, magaca ay leeyihiin oo kale ayuu u baahan yahay, magacaas inuu isku

mid ahaado, waxoo ku qoranyahay labada qeebood, qeebta labaad waaye, hadii hogaamiya la yiraahdo, hogaamiye uu la yahay.

Waxaa soo heray dowlada dhexe, dowladda dhexe xoolaheedi hal kaanee yaaliin, Aqal kaanaa ka mid ah, Fillada ayaa ka mid ah, Kumaando Buluusiya ayaa kamid ah, Kumaando seer jido ayaa kamid ah, wasaaradda caafimaad ka ayaa ka mid ah, War faafinta ka mid ah, wasaarada hoo dhan ayaa ka mid ah, cid ku taagan maleh, dadka waa ku wada nool yihiin, aniga magaaladaan leema xijin karo, nin inta ka hadlaayi hadaayet, halahoo cunaa cunaa, mahoow jiifta oo kalaan jiiftaa, mahoow galo oo xammaamka oo kalaan gala, xaquuq gooni aan leeyahay ma jiro, waana ku qanac sanahay, saan u noolahay inuu u noolaadoo qudhiisa ka leeyahay, magaalada aan ku qanacsanahay, anuka caloo sheena walax ku jira oo Soomaali naceyb ah ma jirto, mid nimo Ayaan rabnaa, anigu waayo arak Ayaan howlahaan ku ahay, imbagaati ayaa lagu reebay, Dowlad Goboleed yo ayaa la dhisay, tan dibaa loo dhigay, labo golaa la dhisay, allaha ha u naxariisto Xaaji Nuur Caddaa dhisay, dekereeto ayaa lagu baa baiyey, ninka ku baa ba'shay waxaan aad u jeclahay war keeygi inuu gaaro, hadii hayb ahaan loo xisaab tamana waa igu heyb, kahor waxaa dhibsaday hogaa miyayaashi, waliba anaa ola leeyhaayi, School Bulusiya waxaa ku baa ba'shay madaxweynihii waqtigaas, waana waa yihii kaduudiyaha, waliba ayadoo kaduudiyaha ihaaya aan tagay, guddiga wax walbaa dhisnaay, meeshii markii la istaagay madaxweynihii waagaas jiray, waan isla ognahay cidoo ahaay, war bixintii markaan dhameyni oon dhahnay in les doortaan rabnaa, wuu soo istaagay waxow yiri habel ayaa madax ka eh shirkane waa xerenyahay, waa hebel asaga wato mehii ayaa lagu kala dhaqaaqay, labadaas mar aan aniga taagnaay, reebidda horana inbagaati waan taagnaa, nasiib wanaag waxaa eh guddigaan dastuurka waa soo hagaajiyey, baarlamaan kaan oo soo balan qaadana, balan koodina iney fulshaan ay nasiib u helayaan, taariikh dahab ah ay umadooda kaga qaadanayaan, niman kaan walaalaheey ah oo maqan sahal ay baar lamaanka ku soo galeen, hadda markey soo galaayeen aniga sahal ku ma soo galin, xuleeys aan ku soo galay, dad ila mid ahna wey yaryihiin, hadda waxaan diyaar u ahay in leys doorto, aan doorasho ku hero, dad tirsan i reebo aan diidaye, laakiin dad badan haduu I reebo ama dad badan ima reebayee da'da i reebeyso, labadaas aan ku heraa, waa ku farax sanahay, waxii ilaahey qorana qof weyheyso ma jirto, walaalahey musharaxiintu waxaan u faraa waxaan u qorneynin helimaayaan, aniga mucaarad waan soo ahaan jiray Baarlamaankaan nin waan isku dagaalni, dagaalka ninka hogaaminayo anoo ahaa, laakiin amxaaro dalka masoo galeyso, aan ku dagaalamaayi, aniga masoo galeyso aan hogaaminayi, waa leygu xeray, hadii leygu xeray daqiiqad waa leysoo deeyi, waliba waxaa I soo deeyey waa lakala wenyahee mareekanka ayaa isoo deeyey.

Warka waa idinku daalshay, xulashada midda labaad, ee magaaladaan mudantahay waa wada leenahay, qof kaligeed leh maleh, guryaheedna waa ku dhisanyihiin, wax alaala waxii dowladu leedahay dowladaa leh, waxii shacabku canshuur ka qaatana haloo suubiyo maamul maamulada kale lamid ah, taasaa codsanaa.   Assalaamu Caleekum Warax matullahi Wabarakaatuhu.



**Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Alxamdulilah wa scw. Guddoonka sharafta leh, xildhibaanada, mudanayaasha, dhamaantiin waa salaamantihiin, assalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh.

Waa maalin kale oo aynu ka doodeyno arimaha dastuurka, dastuurka waa sharcigii aynu ku dhaaranay weeye, una dhaaranay in dal kaan lagu ilaaliyo weeye, mas'uuliyad gaar ah ayaa inaga saaran inaynu tifaftirno oo aynu toosino oo aynu ra'yigeena ku darno, inagoo uga wakiil ah umadda Soomaaliyeed ee ina dooratay. Marka waa waajib dastuuri ah, waa waajib qaran weeye inay xildhibaanada ra'rigooda halkaan ka yidhaahdaan waa mid muhiim ah weeye oo waajib ku ah, chose maahan, inay waajib ku tahay inay taladooda iyo ra'yigdooda halkaan ka yidhaahdaan, inay ka maqnaadaan maahan, in la is hor istaagana meesha kumaba jirto. Marka waxaa ila haboon inaynu runtii dib ugu noqono waxaynu u dhaaranay. Waad ogtihiin oo dastuurka maalintii halkaan la keenayay ee ugu horreysay qodobo fara badan ayaa ku jiray oo runtii doodo halkaan lagaga sameeyay, doodihiina ay ku soo biyo shubteen waxyaabo fara badan oo madashii ku soo heshiisay inaynu halkaan ku badelno oo qodobo fara badan aynu ku badelnay halkaan oo madashu ay keentay halkaan inaan ku badelno, meesha lagu badeli karo ee lagu toosin karo halkaan weeye, meesha umadda u wakiilatay ra'yigeeda asaasiga ah ee wixii ka soo baxo sharci noqonayaan, umadduna ay ku guddoomeysaa, tan naloo wakiishay taas weeye.

Sidaas oo kale marxalada uu hadda marayana, dood waa mid inaga inoo taal weeye oo ku toosino. Go'aan kama dambeysa ah, dooda markii ay dhammaato, dee waxa weeye sida sharcigu qabo unbaa lagu kala baxaa. Marka anigu waxaa diidan tahay iyo waxaa jeceshahayba inuu qofku halkaan ka yidhaahdo, inay ra'yigiisa umaddu maqasho waa mid muhiim ah. Anigu waxaan oran lahaa, dhawr qodob oo kooban ayaan wax ka oran lahaa, mid waxaan kaga noqonayaa qodobka 49aad oo cutubkii afaraad ahaa, raali ahaada guddoonka haddaan qodobkaa ku soo celiyo. Waxaa jiro qodobo aynu markii horre ansixinay oo hadana madaxweynaha Jamhuuriyada federaalka Soomaaliya, markii kaddib, mucaaradkii iyo madalihii, doodaheedii kaddib, haddana in dib loogu soo noqdo la isla qaatay, dabcan waxyaabaha, dastuurka waa living document, umadda la dhageysto, mucaarad iyo muxaafidba la dhageysto, kaddibna golaha lagu soo celiyo, waa mid meesha ku jirto, sidaas ayuuna ku socon doona weligiis intuu jiro oo hadba marxalad ayuu sii aadi doonaa.

Qodobka aan wax kaga noqonaayo waa Qodobka 49aad weeye, farqadiisa B, oo ah arin runtii u baahan dastuurka inuu caddeeyo, waayo hadduu caddeyn waayo sida marxaladaasi lagu maamulayo haddaanu caddeyn, jahawareer baa lagu dhacayaa, sideedana dastuurka wuxuu fududeeyaa hawlaha dawladu inay u socto iyo qaranku sida ugu fudud, ugu caddaaladsan, la isku fahmi karo ayuu u shaqeeyaa.

Waxaa halkaasi ku jirtay madaxweynaha Jamhuuriyada federaalka Soomaaliya ayaa magacaabayo reysul-wasaaraha, asaga ayaana xilka ka qaadaya baynu ku soodarnay berrigii dhaweed laakiin dastuurkii waxaa ku qornaa magacaabis keliya, baarlamaanka golaha shacabka ayaana xilka ka qaadayo ayaa ku qorneed, arrintaasi isma waafaqsaneyn, waxaan maleynayaa raggii ama gabdhihii soo joogay Baarlamaankii Sagaalaad, tobanaad iyo xaalado

badan ayay u soo joogeen. Sideydaba reysul-wasaaraha haddii aanay xisbiyo jirin, madaxweynaha ayaa soo magacaabo, madaxweynaha markuu soo magacaabo dabcan wuxuu ku dhisan yahay kalsoonida madaxweynaha oo lagu keenay, madaxweynaha ayaa markaa baarlamaanka horkeena oo yidhaahda, waxaan kalsoonida siiyay oo dalkaaan ku aamini karaa, waa shaqsigaan, kartidiisa iyo aqoontiisa iyo hufnaantiisa, sidaas darteed baarlamaanka waxaan idinka rajeynayaa inaad igu waafaqdaan oo kalsoonida siisaan, sidaas ayuu u soojeedshaa. Marka it means waxa uu ku dhisan yahay kalsoonidii madaxweynaha iyo markuu baarlamaanku ansixiyo, kalsoonida baarlamaanka golaha shacabka ayuu ku dhisan yahay markii la ansixiyo, labadaas kalsooni ayuu ku shaqeynayaa.

Beni-Aadam baynu nahay, waana ay soodhacday, haddii reysul-wasaaraha iyo madaxweynaha isqabtaan oo wadashaqeyn waayaan, oo xaalad kale timaado, Beni-Aadam baa la yahay, sida marar badan dhacday, halkaa maxaa looga gudbayaa? Wuxuu lumiyay kalsoonidii madaxweynaha, marka uu kalsoonida madaxweynaha lumiyo maxaa hadhaayo? Kalsoonidii golaha shacabka ayaa hadhay, kalsoonidaas golaha shacabka inay ku raaci karaan iyo inay ka hor imaan karaan, sidee loogu gudbinayaa oo ay ugu imanaysaa golihii shacabka? Meeshaasi ma cadda. Golaha shacabka iskiis buu awood u leeyahay, inuu isagu xiliguu doonaba uu mooshin sameeyo uu xukuumadda kalsoonida kala noqdo, taasi waa awoodaha gaarka uu u leeyahay weeye laakiin hadda taasi xili kuma xirno, xili kasta ayay noqon kartaa laakiin hadda markii uu madaxweynihii iyo reysul-wasaarihii isqabteen, sidee baa si marxaladaas looga gudbo, baarlamaankii loo weydiinayaa, inay iyaguna kalsoonidii ku waafaqaan ama ay ku diidaan kalsoonida oo sidaas xukuumaddu ku sii shaqeyso, halkaa dastuurka waxba kama sheegayo, haddaan sidii horre ku soo celino weeye, waxba kama sheegayo.

Intee baa marka la isa sii heesan karaa oo dalku jaam sii geli karaa oo shaqadii dawlada aanu socon kareynin oo la isla rafanayo, waa dhibaato meesha taalo weeye because haddii la isqabto, arintaas waxay u baahan tahay in xal degdeg ah loo helo, haddaba xal degdeg ah ma loo heli karaa? Haddaanu xal degdeg ah noqoneynin, baarlamaankii aan la weydiinin, xukuumaddii u yeedha oo kalsoonidii eega si oraneysa, farqad oraneysa aysan jirin, 15 cisho gudahood, bil gudaheed, laba bilood iyo saddex bilood, whatever, intii loo xaddido muddo aanu cidi oran kareynin hala isugu yeedho oo baarlamaankii waajibkiisa ha guto ciddi oran kareynin, hal kaa waa la isla fadhiisanayaa, marka arrintaasi xal bay u baahan tahay. Haddaanu dastuurka arrintaa xalinaynin, uuna xal ka gaareynin oo waxba sameyneenin, qaab arintaas degdeg loogu xalin karo ama mooshin ka keena oo mooshinkii hala soo dedejiyo si loo yidhaahdaa waa inay jirtaa because mooshinka gaar buu iskaga leeyahay baarlamaanka laakiin yaa oranayo, sidee loo oranayaa? Ma jirto, yaa weydiinayo horta, su'aashaasi horta way lumeysaa. Marka waxaan leeyahay si dawladnimada ay degdeg ugu shaqeyso oo functional u noqoto, arimaha caqabaadkana degdeg loogu xaliyo waxay u baahan tahay oo soojeedin lahaa in faqrad lagu daro inuu madaxweynaha u soo gudbiyo baarlamaanka, mar hadduu kalsoonidii reysul-wasaaraha luntay u soo gudbiyo, baarlamaankuna uu markaa kalsoonidii u qaado ama ha ku waafaqo ama ha ku diido in meeshaas lagu daro. Saw maadan garan?

Haddaynu faqradaasi jirin, waa la isla wareeraa marka, waa meel aamusan, meeshaas marka wixii la doono ayaa laga yeelayaa, baarlamaankuna goortuu doono ayuu shiri karaa, goortuu doono ayuuna mooshinkiisa soo gudbin karaa. Marka intaas waxay ila tahay inaan waxyaabaha dawladnima lagu sixi karo ayay ka mid tahay. Qodobka kale 49aad laakiin hadda ku jiray, waxa weeye in dhismaha dawlad goboleedyada in la dhiso runtii wax muhiim ah weeye, marka

arrintaasi in la dhisaa waxay u baahnayd uu sheegayo qodobka 49aad, in guddi heer qaran ah loo sameeyo oo xeerna loo sameeyo qaabka dawlad goboleedyada lagu dhisayo, waxaa la yiri, aqalka sare oo keliya ha loo gudbiyo, aqalka sare siduu u shaqeynaa haddaanu xeer uu ku shaqeeyo uu san jirin oo leh criteria iyo farsamo ku dhisan macaayiir la isla soo gartay ku dhisan uusan jirin, aqalka sare dood unbay ka noqoneysaa markaa, wixii ka soo horbaxo, halkaa in lagu garto ayay noqoneysaa.

Waxaa fiican guddi qubaro ah in loo saaro, xeer golayaashu ay ansixiyeen uu jiro in dawlad goboleedyada lagu dhiso, sidii loo dhisi lahaa soohdintooda, macaayiirta isku tagitaan kooda, qaabka ay iskugu biiri lahaayeen, u midoowi lahaayeen, hadday is khilaafaan sidii loo xalin lahaa, waxaas oodhan waxay u baahan tahay in xeer lagu soo saaro, xeer kaas iyo khubaradii ku qorneed xeer kaas yaan la diidin, waa arrin loo baahanyahay, dhismaha dawlad goboleedyada in la yidhaahdo xeerka dhismaha dawlad goboleedyada, oo saas loo soo saaro oo dastuurkuna uu sheego weeye.

Waxaan ku biirin lahaa intaasi iyadoo waqtigayga malaha cidhiidhi ku jiro, waxaa la yiri: waxaa midoowi kara laba dawlad goboleed iyo ka badan maahee, saddex iyo afar ayaa midoowi kara, weliba si volunteer ah, ayagoo iskood ah. Hadday midoowi waayaan, maxaa dhacaayo? Ma la isku qasbaa? La iskuma qasbayo, waayo hadday midoowi waayaan midda kale midoow maahanee, sameyn kara, noqon kara in la yidhaahdo, midoowi kara maahan because midoowi kara waxa weeye, kuwa horrey u jiray oo dawlad goboleed ahaa ayaa midoowayo, saas waxay u egtahay kuwa markii horreba jiray. Marka waxaa dawlad goboleed noqon kara, waa in la xaddido weeye. Aniga waxaan oran lahaa, waaqaceena hadda jooga iyo waxaynu ku qorayno way kala duwan yihiin, si aynu isku waafajino waaqici hadda jooga iyo weliba marka aynu caasimadda ka hadleyno iyo dawlad goboleedyada si aan isku waafajino waa in la yidhaahdaa dawlad goboleed waxaa noqon kara gobol iyo wixii ka badan inay noqdaan because waxaan leenahay caasimaddii gobol ha noqoto, dawlad goboleedna ha noqoto, waxaan kale oo leenahay xuduudaha dawlad goboleedyada, waa goboladii 91-dii iskuma gudbi karaan, 91-dii weeye, marka gobolna gobol kale uma gudbi karo, haddana caasimaddii gobol bay ahaaneysaa, haddaysan gobol kale u gudbi karin dawlad goboleed bay noqon kartaa, gobol bay noqon kartaa, marka intaas lafyeeda si aan contradiction kaas uga baxno, waa in la yidhaahdaa gobol iyo wixii ka badan ayaa dawlad goboleed noqon kara si volunteer oo iskood ah ayayna iskugu biiri karaan.

Marka waxaan oran lahaa arrintaasi oo contradiction kaas nagu dhex jira, Galmudug wa dawlad goboleed, marka haddaad tidhaahdo, dastuurkayna wax buu qorayaa, xudduudihii goboladuna sidooda ayay ahaanayaan oo degmooyin ma soo raacsan kartid. Marka waxaan u baahannahay inaan iswaafajino waaqica jiro iyo waxaan dastuurka ku qorayno oo niraahno si aan hawsha iskugu fududeyno waa inaan niraahnaa dawlad goboleed waxaa noqon kara gobol iyo ka badan, even may noqdaan 5-gobol, 6-gobol, mardhaweed Jubaland iyo koonfur hala iskudaro ayaa dood ka taagneed. Haddii dalka xitaa la isku biiro oo lix iyo shan-shan la iskugu biiro, wayba inoo soo yaraan laheed, marka yaanan afarna lagu xaddidin, ha noqoto gobol iyo ka badan ha furnaato, intii isku biiri karto markaa ha isku biirto oo dawlad goboleed keeda ha dhisato, anigu sidaas ayaan oran lahaa maxaayeelay haddii kale tanaaqudaad, waaqica jira iyo waxaan ka hadleyno isma waafaqayaan. Waxaa jiro hadda iminka Waqooyi Bari baynu dhisnay, weli waxaa lagu muran san yahay intee buu ka kooban yahay waa inuu noqdaa, kuwa kale ayaa soo socdo, Hiiraan baynu hadda ka hadleynay, soo maadan garan. Marka waxaan

isleeyahay si aan muran kaas uga baxno waa inay gobol ka bilaawantaa, wixii ka sareeyana ay markaasi noqoto, taas baan anigu oran lahaa oo ku soo gabagabaynayaa, koley meelo fara badan ayaan wax ka sheegi lahaa ee waqtiga oo igu cariiri ah darteed intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa.



**Xil. Lul Ibrahim Omar**

Mahadsanis guddomiye xildhibanada sharafta leh labada gole waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka asalamu caleykum waraxmatulahi wabarikaatuh bacda salaam maanta waxaan halkaan ujoognaa aayaha umada soomaaliyeed oo ah Dastuurka waxaad moodaa xildhibaanadii dhaartey dalkaan in aysan Dastuurkaba qiimo agtiisa uga fadhinin kuraasta waad ujeeda waxaa jooga golahaan 15 xildhibaan ayaa fadhida saakana wuu buuxayoo boqol ilaa labo boqol ku dhowaa waxaad moodaa xildhibanada in laso qasbey war xurbaa tihiin xeer hoosaadka idin qabanaayo xaq waxaa looleeyahay xildhibaanka haduu kooramka soo xaadiro in uusan ka bixi karin golaha ilaa laga soo xiraayo.

Guddomiye adigoo mahadsan labada aqal hadey maanta uga horeysa dhibaatadii horey ujirtey maanta golihii degenyahay cid dhegeysatana aan laheyn fikirkeena ma koraasta naga dhegeysaneysa mise xildhibaanadii la rabey in ay fikirkooda ka dhiibtaan ay cabiraan dadbey matalaan halkaan ma fadhiyaan. Waxaan rabaa horta in xeer hoosaadka lala tiigsado si aysan markale udhicin arinkaan markaan kusoo laabto Dastuurka ee Dastuurka waa heshiis bulsho cid qasab sanka dad uga gelin karto majirto waxaan aaminsanahay afartii cutub oo hore in aan ka shaqeyney ayadoo ah bishii ramadaan soo galeyso waxaad moodaa xildhibanada in ay ciqaab xaga illahey ka timid in ay idin heysato maxaa yeeley maxaa markasta kusoo toosiyey bisha ramadaan xiliyada kale maa noo keentaan.

Waxaan umaleynayaa ileen dadka markey gaajeysanyihiin wax ma akhriyaan waa la iska tuurayaa subaxdii ayaa halkaan la imaanaya gacan taag kaliya ayaad rabtaan taasna wax soconaayo ma ahan waxaan waa dastuur wuxuu ubaahanyahay in waqti dheer la is sasiiyo laga soo fikiro xildhibaanada ay guruub guruub u fadhiistaan ay dhahaan maxaa umada soomaaliyeed dan uga jirtaa yeysan noqonin maxaa aniga dan iigu jirta war qabiil waa laga tagey maanta caalamka waad ujeedaa meshuu marayo waxaan umaleynayaa caalamka in aadan ka war qabin in la iscino mar dhow dhowdahay waxaan umaleynaa in lanoo tashtey.

Markaan usoo laabto dastuurka waxaan wax yar k qabey aniga cutubyadii afaraad oo aan horey u ansixiney waxaa jira in aan anga afar cutub cutubka afaraad laga shaqeeyey oo aheyd in madaxweynaha ay shacabka ay soo doortaan mudane guddomiye raali ahaaw dib ayaan uga laabanaayaa.

Waxaan ognahay anagoo ansixiney in uu madaxweynaha seddax qof heshiis kala galey lano boqol iyo kabadan ayaa halkaan ku ansixisey hadii seddax qof ay bedeli karto waxaan anaga aan sameyno in aan waqti gelinaaba ma ahan. Waxaan ka digayaa mudane madaxweyne adigoo mahadsan wax intaas oo umad ka shaqeysey in aadan labo iyo seddax qof rayigeena uusan bedeli karin ee aad iska ilaalisaa khaladaadka badan qof walba siduu rabo hadii loo yeelaayo

dalkaan horey uma dhaqaaqayo waxaan rabnaa dalkaan in uu horey usocdo aadan fikiro badan aadan ku bedelin labo qof iyo seddax qof taas waa iga codsi.

Marka usoo laabto Dastuurka een qodobka 5aad maqaamka mugdisho ee mugdisho runtii waa umada soomaaliyeed maqaamkeeda xaqbey uleedahay in ay hesho sida umada kale matalaad ay uleeyihiin 4malyannbaa degen ee afarta malyan xuquuq ayey leeyihiin vid soomaali ah oo xuquudeeda la qadan karo majirto lakiin calaamo su'aal baa saaran ee calaama su'aalka waa maxay caasimadii umada soomaaliyeed ah maamul goboleed islama qaadan karto.

Waxaan rabnaa in laga fikiro in ay ahaato caasimada umada soomaaliyeed iyo in ay ahaato maamul goboleed kusoo biira maamul goboleedyada kale aniga rayigeyga waxaan aaminsanahay in ay xuquuq leeyihiin ayna xaq uleeyihiin in ay matalaad yeeshtaan hadaba gobolka banaadir matalaad ayuu leyahay markey maamul goboleedyada fadhiisanayaan asiga wuu fadhiistaacid dhaheysa malahan adiga saanuuba hada ku yahayba ay matalaadooda ku heystaan kaliya waxaa ka dhiman aqalkii sare in ay ku yeeshtaan matalaad madaama maamul goboleedyada uu matalo gobolka banaadir xaqaas waan siineynaa waxaan rabaa in uu ahaado caasimada umada soomaaliyeed lehna matalaad oo matasha sida sanataro ayna udoodaan waajibna u ah in ay yeelato insha allah inteeda kalena dib ayaan udhiganayaa.



**Sen. Zamzam Dahir Mohamud**

Qofkasta waxa aan kusalaamayaa mansabka uu ku fadhiyo , een xildhibaanka walaalkee ahaa Maxamed Abuukar wuxuu yiri ee somali uma dhamo , baarlamaanka soomaliyeed hadee soomaali u dhameen meel kale ay somali u dhamaan kartaa jirin , saan ognahay soomaali 4.5 ayaa wax ku qeybsanay xildhibaanno qabiilkasta ayuu leeyahy , wasiir ayuu leeyahay , ee baarlamaankana wuu kala qeyb sami karaa mucaarad iyo muxaafad waa yeelan karaa , laakiin mucaaradkana soomaali ayaa jirto muxaafadkana soomaali kale ayaa jirto. xildhibaanada soomaaliyeed ka socdo qabiilada soomaaliyeedna wey fadhiyaan meeshaan , dastuurkana wuxuu siinaayaa in baarlamaanka soomaaliyeed uu xaq u leeyahay in uu wax ka badalo oo ma aragtaayee uu ka shaqeeyo waa TOR oo baarlamaanka soomaaliyeed uu leeyahy.

hadii aan ku daro baarlamaankii 10aad guddiyadii dastuurka ee xiligaas shaqeenayey , shaqada hada kitaabka aan gacanta ku heyno buugaan aan heyno 90% ayagaa kasoo shaqeeyey , kaliya waxaanan usuurta gelin in ay baarlamaanka keenaan gobolada wadankee tageen inta xorta ah , state yada ee tageen , latashiyada ayey sameeyeen , kaliya waxaa usuurta gali weysay gudigaas in ay keenaan baarlamaanka dfederaalka ah.

annga waxaan ku guuleysanay in baarlamaanka aan keenno ma argtaayee ilaahey noo qadaray waa alle mahadiis, baaarlamaanka 11aad waxey u tahay sharaf iyo karaamo inay maanta dastuurka qabyada ahaa mudada in ma argtaayee ay dhameystiraan ama ay ma aragtaayee wax ka badal ku sameeyaan.

Dastuurka saan ognahay hadda wax ka badalkiisa afti ma gaarin , qodobada ka mid qodobada u dambeeya ayaa sheegi doono dhameystirka saxda ah ee dastuurka , waa sharci dastuur ay leedahay ummadaan soomaaliyeed, baarlamaanka ay shqadiisa tahy ay waajib tahay in ay ka

shaqeeyaan any time ama xili kasto ay umadaan soomaaliyeed wax ku heshiiso ayaa ma aragtaaye “amendment” wax la dhaho lagu sameyn karaay. Waana awoodda baarlamaanka soomaaliyeed , baarlamaanka soomaaliyeed ayey ku kulansan tahay ummadda soomaaliyeed, marka waxaa leeyahy gudigii oo naga horeeyey ee baarlamaankii 10aad aad ayey u mahadsanyihiin oo abti Abdi Qeydiid oo hogaaminayo oo dastuurka hadda gacanta aan ku heyno kasoo shaqeeyey , sidoo kale hadda gudiga Icric ayagana shaqo muhiim ah ayey qabteen oo waa ognahy aduunkii hadda waxaa loo guuray ma argtaayee waxaa loo guuray digital , si “digitalizing” oo danabeesan ma argtaayee ummadda ula wadaageen. shacabka soomaliyeed meelkasto ay joogaan ra’yigooda wey soo gudbiyeen wayna qorantahy waana “report” gareesan tahay, haddii midaas intaas uga gudbo waxaan qabaa aniga qodobka 63aad ee ka- hadlaayo maqaamka muqdisho .

Ilomo adeeryaalow sida aan ognahay maqaamkaan muqdisho waxaa ku nool 5m iyo ka badan, 5m iyo ka badan xuquuqda ay lahaayeen intaan ka badan lama dafiri karo, dafiraadka kuma sii socon karto. Gobolka Banadir wuxuu ka koobanyhy 20 degmo hadda ,20 degmo waaye dowlada federaalka inee caasimad ku dhex yeelato oo caasiamada dowlada federaalka la shqeyso iyo in umadda degan ay mataalaad helaan gobol ey helaan , state ay helaan wuu u qeybsamaa horta dhulkiisa iyo “resource” kiisa iyo dadkaan gobolka banaadir dagan , labadaasba wey u qeybsamaan caasiamdna waalaga sameyn karaa , maamul goboleedna waa laga sameyn karaa.

Adduunka waxyaabaha lagu tartamo waxaa waaye “human resource” wax la dhaho waa “population”. population kii ugu badnaa dalka soomaaliyeed caasimadda ayey ku noolyihiin , gobolka banaadir ayey ku noolyihiin, gobolka banaadir oo state ah, caasimadii federalka ee dowlad soomaaliyeed oo muqdisho ah, labo horta source ahaanna wuu u qaadi karaa , population ahaan neh wuu u qaadi karaa wuuna awoodaa xaqa neh wuu u leeyahay inuu helo.



**Sen. Ali Shacbaan Ibrahim**
Guddoomiye Kuxigeenka 1aad ee Aqalka Sare

Aad iyo aad ayaad uugu mahadsantihiin dulqaadka iyo sidaad aragtidiina u dhiibateen, doodeenii maantana intaasaan kusoo gabagabaynaynaa barina way sii soconaysaa. Xildhibaano iyo senataro badan ayaa qoran marka bari way inoosii soconaysaa insha Allah, kulankuna waa inoo xiranyahay waad mahadsantihiin.

# CUTUBKA 5AAD

## NIDAAMKA FEDERAALKA IYO BAAHSANAANTA AWOODDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



**Kulanka 13aad (Febraayo 11, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankii:** | 13aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| **Goobta:** | Villa Hargeysa |
| **Wakhtiga uu furmay:** | 11:09 a.m |
| **Wakhtiga uu xidhmay:** | 13:15 p.m |
| **Shir-Guddoonka:** | Guddoomiye Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe" |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansixinta Ajendaha.
(3) Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-kabeddelka Dastuurka. Cutubka 5aad: Nidaamka Federaalka iyo Baahsanaan Awoodda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.






**Xil. Dr. Mohamed Sh. Ahmed**

Hannaan loo saxaa jira, hogaan u raacayaa jira oo salaada shuruudeedii iyo axkaamtii wax walba uu yaqaano oo salaadii way naga jabatay waad qaladay baa la leeyahay laakiin si habaysan. Markaa waxaa la rabaa salaada iyo imaan nimada iyo maamulnimada sida masaajidka ugu soo tukano oo shanta wakhti aan u tukanayno oo imaamkana axkaamtii iyo shuruucdii ay salaadu lahayd aan isla wada ogay uu u ilaalinayo, anaguna sidaa soo kale aan u ilaalinayno ayaa la rabaa meel kasta oo nolosha ah goob kastoon tagno inaan sidaa u ilaalino. Haddaan siyaasad joogno iyo hadaan ganacsi joogno iyo hadaan arrimo kale oo bulsho maaraynaynaba waxaa la rabaa salaadu inay marwalba inoo noqoto muunada horteena taala sida masaajidka marka aan tago aan iskugu faylsanahay, ee u khushuucsanahay, een isku ilaalinayno ee axkaamta ruux walba laga rabo inuu ilaaliyo. Kii khaldmana si habaysan loogu sheegayo, ayaa la rabaa namuujad kaasi inuu inaga soo baxo.

Markaa waa inaan noqono dad midaysan markay cibaadaysanayaan oo masaajid ku cibaadaysanayaan iyo markay baarlamaan ku cibaadaysanayaan labadaba isku si u dhaqmaan, maxaajira tan waa cibaado danihii guud ee ummada ayaan ka shaqaynaynaa ciyaar maaha waa cibaado, cibaadaduna ansixid bay u baahantahay shuud iyo aadaab iyo axkaam ayey leedahay. Markaa bal horta ummaddaha kale waan ka duwanahay dhaqan iyo diin iyo waxaan leenahay astaan.

Arrinta dastuurka khusaysa gaar ahaan iyo ismaan dhaafkiisa akhiyaarta wax dastuur diidan horta majiraan runta markaan isku sheegno laakiin anagaa is dhiidan dastuurkan xoog badan baa galay maskax badan baa gashay, maan badan baa galay, guddiyo iyo dad xogogaala iyo dad khubara ah ayaa ka soo shaqeeyey. Waxa ku yaala nin kastoo masuul ah haddii la yiraahdo adaa masuul ah e maaree sidiisuu u qaadanayaa laakiin waxaan diidanahay waxay tahay hebel ayaa hadda meesha jooga markaa hebel baan diidanahay wuxuu wadana waan diidanahay, waa tii soomaalidu dhihi jirtay, 114 ayaan aqaanaa kaa akhrisan maayo ayaa ka adag. Markaa akhrisan maayadaas waxay inaga reebtay qayrkeen ummad ahaan bay inooga reebtay ummadihii dawlad ahaan bay inooga reebtay dawladihii. Waayo haddii aan inagu is aqbalin oo la is ogolaanin waxaan ku khasbanahay cadaw inaan ogolaano oo hoos tagno oo cadow isku loogno. Markaa waxaa la rabaa waxaan nahay dad masuuliyiina oo ummadii wax badan ay ka sugaysaan nahay isdiidadaasi meel ay ku dhamaanaysaa ma jirto malaa'iigna la inoo soo diri maayo dastuurka inoo dhammaysa saw ma ogidina. Ruux hebel hebel la yiraahdo oo reer hebel la leeyahay oo "group" hebel weeyi oo aragti hebel buu leeyahay la leeyahay ruux aan hayn horta ma imanaayo, hadduu Xasan Sheekh meesha hadda ka tagana mid kalaa Imani, hortiisna dhawr iyo toban san ayey sii socotay oo madax kala duwan ayaa timid ismana beddelin mar walbana dad baa diidayey. Markaa waxaan u baahnahay malaa'iig ilaahay nooma soo dirayee horta ruux soomaaliya oo hebel hebela baa shaqadan qabane waa shaqo ummadeede inaan is aqbalno oo aanan cadawga isku loogin, inaan meel fadhino oo ummadnimadda dawladnimadda soomaaliya qabiil noqoto oo 25 sano talaab qaadi weydana cid dan ay ugu jirto ma jirto.

Markaa dastuurka lama diidana anagaa isdiidane aan si ahaan isku ogolaano dadkii nooga soo shaqaynayey way mahadsan yihiin shirguddonka iyaga aadbay u mahadsan yihiin runtii, guddonku waxay muujiyeen dulqaad aad iyo aad u balaadhan, intaas markaa halkaa aan uga soo tago.

Aan u imaado qodobadii khuseeyey dastuurka waxaan ku darsanayaa dhawr qodob akhiyaareey. Heerarka dawlada waxaa weeyi 62 aad, 61 aad faqradiisa 2 aad oo ka hadlaysa, dawlada federaalka waxay waajibkeeda u gudanaysaa si waafaqsan dastuurka federaalka halka ay dawlad goboleedyadu u gudanayaan si waafaqsan dastuurka federaalka iyo dastuurka dawlad goboleedka. Meeshaas wax baa ka maqan li ana huu faqrada 1 aad waxay sheegaysaa heerarka dawlad goboleedyada sidii dastuurkii hore ahaayeen inaysan labo ahaynee hadda saddex laga dhigay oo waxaa lagu soo daray dawladaha hoose. Markaa maadaama hadda lagu soo daray iyaga lagama rabo miyaa inay u dhaqmaan si waafaqsan dastuurka qaran, ka midka maamul goboleedka iyo xeerarka gaarka ah oo iyaga ay leeyihiin lagama rabo miyaa. Ma inay maqnaayeen ayaa lagu iloobay mise maamul goboleedkaa ku filan oo dastuurka maamul goboleedkaa markaa in la sheego maadaama heerarkii saddex laga dhigay dawladahana in iyaga laga rabo masuuliyadas inay saarantahay waajibkaas meesha miyeyna ku jirin.

Waayahay qodobka 62 aad faqradiisa 2 aad golaha aqalka saree e baarlamaanka federaalka soomaaliyeed ayaa go'aan ka gaadhaya ogolaanshaha dhismaha dawlad goboleedyada jamhuuriyada federaalka soomaaliya. Markaa aqalka sare ayaa lagu koobay waa sax aqalka sare wuxuu matalayaa maamul goboleedyada oo "mandiq asnaan" marka laga fiiriyo meesha waa ku jirtaa laakiin haddii maamul cusub la samaynayo oo ku talnayn aqalka sare saw danuhu isma diidayaan oo danihii maamul goboleedada markaa dhisnaa iyo kuwan cusub oo raadinaaya hadda inay ka mid noqdaan saw dhib uga imaan maayo. Mise dadku waa ku wa metalan yihiin

aqalka sare oo wax ka maqan ma jiraan, dabcan dad ka maqan ayaa jira beesha shanaad ay ka mid tahay oo malaha u baahan iyagana in si gooniya iyagana loo fiiriyo, meelaha qaarkood siiqay isaga baahan yihiin.

Qodobka 63 aad ee ku saabsan xulashooyinka maqaamka magaalada muqdisho ee caasimada ah laba xulashaa la keenay mid walba si bay wajiih u noqon kartaa, aniga waxay iigu muuqataa xulashada 1 aad inay munaasib tahay oo ah caasid dawlada federaalka hoostimaada inay noqoto. Sababtuna waxay tahay aan ku ciladaynayo inkastoo dad badan oo asxaabtay ah ay dood sidaas ka duwan ay qabaan oo magaalada ha laga dhigo maamul goboleed ah. Xulashada 2 aad faqradeeda 3 aad maaro looma helidoono, xulashada 2 aad haddii laga dhigo maamul goboleed faqrada 3 aad warka ku xusan war la maarayn karo maahan. Macnaheedu waxa weeyi hadda waxaa inoo jira dawlad federaala iyo dawlad goboleedyo dhul kama dhexeeyo dawlada federaalka meelbay joogtaa caasimadii bay joogtaa dawlad goboleed yadana mid walba dhul uu isaga ka taliyo ayuu joogaa. Iyagoo kala fog oo meel wada joogin ayaa khilaafaadkoodii la maarayn laayahay xeerkii iyo shuruucdii qornaa inay kuwada dhaqmaana taag loo laayahay, bal aduu sawiro hal maamul goboleed iyo dawladii federaalka oo hal dhul wada jooga, magaalada muqdisho oo aadka u kooban wada jooga sidee loo maaray doonaa markaa mushkuladaasi way culustahay aan isleenahay. Haddii laakiin maarayn loo helo wax dhiba oo weyn malaha laakiin aniga sidaa ayey iigu muuqataa oo aad ay u adagtahay in la maareeyo khilaaf hore isdiidadii aan ogaa aan hadda la daalaadhacayno oo aanan xal u helaynin.

Mida kale magaalada Muqdisho aad bay u kooban tahay oo dhulkeedu dhul hadda laba dawladood u qaybsama maaha, haddii la yiraahdo waa la balaarinayaa oo xagaa iyo xagaaba waa loo fidinayaa qaybta hadda dawladu degantahayna dawlada federaalkaa loo deynayaa dhulkaa kaloo weyn oo lagu balaarinayana maamul goboleed baa laga dhigi taas waa hawl kale. Laakiin hadda meeshan iigama muuqato marka sidaa la yiraahdo aragtida.

Qodobka 64aad faqradiisa D oo lala akhriyey qodobka 65 aad faqradiisa 2 meeshaas iyadana waxbaa kujira waa xiriirka u dhexeeya heerarka kala duwan ee dawladaha. Faqradda D waxay leedahay waa inay wada shaqeeyaan heerarka kala duwan ee dawladu waxayna carab dhawday oo sheegtay dawlada dhexe federaalka, dawlad goboleedyada xiriirka u dhexeeya iyo xiriirka dawlad goboleedyada dhexdooda u dhexeeya. Wali waxaad moodaa in dawla hoose ee la soo kordhiyey ee heerarka dawlada ka mida in wali aad loo aqoonsanayn laguma xusin halkan, laakiin mida danbe waa lagu xusay. Waa mahadsantihiin, salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.



**Xil. Mohamud Abdulkadir Haji**

Guddoonka labada aqal, xildhibaanada labada aqal, gudiga dib-u-eegista madaxa banaan iyo gudiga la socodka labada aqal, howl-wadeenada baarlamaanka, ciidamada amniga iyo saxaafadda madaxa banaan, waan idin salaamay. Salaan kadib, maanta waxaa laga hadli doonaa cutubka 5aad ee maqaamka caasimadda.

Marka ugu horeysa, waxaan rabaa inaan halkaan kala hadlo saaxiibada baarlamaanka ka maqan, mudane guddoomiye, in aad ii ogolaato inay maslaxadda dalkaan qayb kamid noqdaan,

ka shaqeynta dastuurkana ay qayb ka noqdaan. Dastuurkaan shaqsi malahan, cid gaar ah oo looga shaqeenaayo inay jirto umaleyn maayo.

Waa buug heshiis lagu yahay, xilli walibana wax laga badali karaa. Waxaan soojeedinayaa inay maslaxadda ummadda Soomaaliyeed qayb ka noqdaan ka shaqeynta dastuurka, waana "number one" maslaxadda ummada Soomaaliyeed. Ummada Soomaaliyeed ayaa ku heshiisay, waa sharci ama nidaam ummada Soomaaliyeed ku kala hagaayo, isla markaana dalkaan sharciyadiisana adkeynayo. Waad mahadsantihiin.

Laba xulasho ayaan rabaa cutubka 5aad qodobka 63aad, xulashada koowaad iyo xulashada labaad. Midda koowaad oo ah "gobol caasimad ah oo hoos yimaada dowladda federaalka," iyo xulashada labaad oo ah "caasimad dowlad goboleed ah." Aniga waxaan rabaa inaan qaadano xulashada labaad. Xulashada koowaad waxay u badan tahay sida hadda caasimadda ay tahay ayey u badan tahay, sidaas darteed waxaan soojeedin lahaa in xulashada labaad la qaato, maadaama magaala madaxda ay noqon doonto dowlad goboleed leh maqaam iyo xuquuq lamid ah dowlad goboleedyada kale. Sida la og yahay, caasimaddan dad badan ayaa ku nool oo xuquuq u baahan, canshuur bixiyaal ah, meel ay ku tiirsanyihiinna majirto, dowladda federaalkuna dalka oo dhan ayey maamushaa.

Waxaan rabaa, anigoon dureynin ama aanan dhib u arkeynin, in xildhibaankii iga horeeyey uu ka hadlay dhibaato ay keeni karto haddii caasimaddu noqoto maamul goboleed gaar ah. Dabcan, dowladda federaalku waxay maamushaa dalka oo dhan, dowlad goboleedyaduna siyaasiyan waa la isku khilaafi karaa, laakiin dalkaan waxaa u hari doona sharci markaas loo sameeyo, ayaa u hari doona. Shaqsi,maanta diidan marxaladda maanta lagu jiro, dalkaan masii joogi doono, Ilaahay haduu yiraahdo, dalka wixii heshiis la dhigto ama sharci la qorto un baa u hari doona.

Caasimaddaan waxay u baahan tahay inay hesho xuquuqda ka maqan, isla markaana ay noqoto dowlad goboleed lamid ah kuwa dalka ka dhisan la mid ah. Aragti ahaan, aniga waxaan qabaa in la xoojiyo. Waxaa kale oo ku jirta caasimaddu maamul goboleed gaar ah noqoneyso, inaysan in dhul balaarsi sameyneynin. Xoogaa waxaad moodaa in gudiga kasoo shaqeeyey wax ka beddelka dastuurka ay caasimaddii u asteeyeen inay maamul goboleed noqon karto, haddana meesha ka muuqato in lasoo koobaayo oo la leeyahay dhul balaarsi lama sameyn karo. Aniga aragtideyda waxa weeye in caasimadda markii loo ogolaado inay dowlad goboleed noqoto, waa in lagu soo daraa degmooyinka ku hareersan sida Balcad, Afgooye iyo Warshiikh. Waa in lagu soo daraa maamul goboleedka caasimadda, sidaas darteed waxaan rabaa in la balaariyo, maadaama caasimaddii garoonka ugu weynaa Warshiikh laga dhisaayo. Waxaan doonayaa in Warshiikh, Balcad iyo Afgooye lagu soo daro caasimadda si ay maamul goboleed xoog leh u noqoto.

Dawladda Federaalka cabsida laga qabo oo la leeyahay haddii maamul loo sameeyo ama lala diriraa, waxaa macquul ah aniga Jeego ah inaan madaxweyne ka noqdo "state"ka. Nin dagaal ma'ihi, waad i taqaaniinee, dad dagaalamana kama soo jeediyee, waxaana rajeynayaa meeshaas buuq inuusan ka dhalan doonin. Laakiin dadka deegaanka waa inay helaan xuquuqda ka maqan sida lamidka ah dadka maamul goboleedyada kale ay u haystaan. Waxaan rajeynayaa in nala qaato in caasimadda ay hesho maqaam gaar ah oo lagu tixgeliyo dadka tirada badan ee degan,

gaar ahaan dadka aniga aan matalo, in ay helaan xuquuqda maamul goboleedyada kale. Waad mahadsantihiin.

Dastuurkana waxaan rabaa, sida degnaanshiyaha ka muuqato maanta iyo shalay baarlamaanka, in lagu sii wadi doono. In xildhibaanada naga maqan fariinta aan u diray ay aqbali doonaan, gudoonkuna u wakiilan doono dad arrintaas ka shaqeeyo. Baarlamaanka xildhibaanada ka maqan muhiim ayey u yihiin, waa sax, laakiin waa inay ka shaqeeyaan marka hore marxaladda iyo xaaladda dalkaan looga samata bixi lahaa. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Guddoonka labada aqal, xillibanada sharafta leh dhammaantiin, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Warabarakaatuh.

Mudane Guddoomiye, anoo markaa ula jeeda guddoomiye Aadan, waxaan marka hore saaxiibadey la qabaa iga horeeyay, halkaana ka qirayaa maalmihii howlaha kale aad ku maqneed inaan helnay guddoon sharaf badan, sifiicana noo hogaamiyay. Waliba waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa madaama guddoonka aqalka sare, madaama guddonka golaha shacabka ay horey wax badan noo soo hogaamiyeen, hadaan mahadcelintaas intaas ugu baxo.
Waxan la wadaagayaa xillibaanada iiga horeeyay inaan u baahan nahay isku tanaasul, iyo dhammaan xubnaha labada aqal iney mashruucaan muhiimka ah ee u leh masiirka ummada Soomaaliyeed, in aysan qofkasta intuu soo istaago uu halkan uu ra'yigiisa ka dhiibto.

Hal xillibaan haduu maqanyahayna, wuxuu nagala maqan yahay caqli iyo afkaar dhici karta inuu wax ku badali lahaa. Meesha xalka laga raadiyay in lagu bado firinbi iyo qeylo iyo sawaxan iyo miis in lagaraaco, marka waxaan leenahay waxaasu dhacdo dhacday waaye, laakiin  ha laga dabo tago. Caano qubtay dabadoodaa la qabtaa, saaxibadeena halaga daba tago, iyaguna ha garaabaan, golahana sidiisu haku soo noqdaan.

Hadaan u gudbo dhinaca farsamada, qodobka 61aad heerarka dowladda, mararka qaarkood waxaad leedahay timirtii horaaba dab lowaayay, hadeer un waxaan la ciirciireynay dowladda federaalka iyo dowladdii state-yadii. Awood kaloo dowladadu hoose ah hadaan kusoo darsano, armay ku fiican tahay iney sideeda ahaatoo dowladda federaalka iyo dowladd goboleedyada, oo dowladda goboleedyada ayaa dastuur kooda iyo nidaamkooda uu kusoo baxo dowladaha hoose. Dowladd goboleedka ay ka koobantahay dowladdii state-ka iyo dowladaheeda hoose, taas sidaas ayaan u eegi lahaa.

Dhinaca soohdimaha iyo qodobka 62aad Golaha Aqalka sare ayaa go'aaminaaaya, meeshaas waxay ku fiican tahay aniga ra'yigeega in ladhaho golaha baarlamaanka Soomaaliyeed la yiraahdo labada aqal lakala saarin, baarlamaanku waa mid, waa laba aqal, inkastoo midkasta xeer hoosaad leeyahay. Hasayeeshee arimaha masiiriga ah oo culculus oo waaween sida dhismaha dowladaha iyo waxa la midka ah, waxay ku fiican tahay in la yiraahdo baarlamaanka Soomaaliya labadiisa aqal.

Dowladd gobleed waxaa ka mid noqon kara qodobka 5aad, 2 gobol, 3 gobol, iyo 4 gobol iyo wixii la mid ah. Ujeedada sideedaba dowladd goboleedka loo sameeyay maxay tahay? Waxay tahay in awoodii iyo xukunkii ladaadaajiyo, shacabka loogeeyo. Sidaa awgeed waxaan aminsanahay in ay noqoto gobol iyo wixii ka badan la yiraahdo meeshaas, gobol iyo wixii ka badan iney "state" dhisikaraan karaan, lakiin tanaa 3 gobol iyo 4 gobol in aysan qaban meeshan sidaa anugu aan aaminsanahay. Taladeydu waxay tahay in laga dhigo, waliba taas aad aan ugu codsanaayo guddigu in ay ii diwaan galiyaan, taariikh waaye, maalin kale ayaa laga hadli doonaa. Arda kaloo naga yar yar, ama aan noolaano ama yaanan noolaanin, ayaa codsan doonaa.

Qodoba 6aad gobol gooni isku taagi karo majiro ayaa la yiri, waa inuu ku gaaro mida kale marka la leeyahay dowladd goboleedyada o daris ah, "why" loogu qasbaayaa inuu daris yahay waxaa la yiri. Daris nimadii dhinacna wanaag ayay ka keentay, dhinacna dhibaato ayay ka keentay. Dhinac wanaag way ka keentay maamulkii iyo isku xirnaantii ayay isku dhawyihiin, dhinacna dhibaato ayay ka keentay oo waxay inoosoo abuurmay "tribble federal states" baa abuurmay.

Waaba fiican tahee, marka hadii "states" gobol ku yaala Mudug iyo gobol ku yaala "Southwest" intey iyagu heshiiyaan ay midoobaan, ay dowladda noqon karaan, wax cad oo fiican waaye. Maxaa dhacay? Waxaa laga gudbi lagaa dowlad goboleed isku dhafan, Soomaali badan oo qabaa'il kala duwan leh kuwada biiri karaan. Waxaan aad ayadana aad u saarayaa culayska qodobka 63aad oo ah mowqifka caasimada. Xildhibaanka iga horeeyay, waliba xillibaan aan aad u jeclahay, sheeqeyga Dr-ka, wuxuu sheegay iney kooban tahay caasimadu.

Hadda kahorbaa nin reer baadiya ah oo caana qaada oo Xamar intuu ka keeno Caalyaale ka keeno ayuu wuxuu keeni jiray Madiina qafaalkii waagii la qabtay. Markii la qabtay waxaa la geeyay xero meel garoon isbartiibo leh. Markaasaa waxaa la yiri intaa lagu ordaayaa. Dabadeed dad sport tartan ugu qeyb galo, makaasaa dadka baadiyaha ka yimid aalaga soo qabtay halageeyo stadium Banaadir baala keenay. Stadium Banaadir waa meel wareegsan, waala orday, waala orday, ninkii waa matay, markaasoo wuxuu yiri: tan iyo Caalyaale ayay noosoo koobeen."

Macnaha waxaa waaye, Xamar waala sookoobayee. Ummada ku nool, tirada ku nool, iyo shacabka ku nool state-yada hada jira ayay ka badantahay. Markii la eego sharcigii hore iyo xukuumadii caanka ee taktay ee lagu saleeyay iney gobolada ahaadaanna 17 dagmo iyo 16 dagmo ayaa logaga tagay, state-ka intaasoo dagmo leh keewaay. Labo, waxaan rabaa in hadal laga dhabeeyo kuli waxaan ku wadahadalnaa caasimada, Soomaali oo dhan baaleh, waalawada dagan yahay. Haday saas tahay waa runee, meyno ka dhabeeno oo dowladd gobleedka ayno wada leenahay ka dhisano. 4 "million" oo tiradaas leh matalaad la'aan iyo dalkaan kama noqonkaraan.

Waxaan kaloo arrinteyda kusii xoojinayaa warkii ahaa xildhibaan kaloo walaalkey ka yeeray, kuu ahaa maxasuustee isqabqabsigee siibadineysaa. Hadaysan taboo ahayn oo wax laga yaabo in laga hadlo, "federalism" dhan baaba saas u muuqda. Waxaan isku heysanaa anagoo haldal ah, hal qoomiyad ah, hal jinsiyad ah, hal luqad leh, hal diin leh, ayaanu niri state-yo aanu sameyno. Anigiinan abuurin awalkeedii yeysan ina cabsi galanin marka.

Shacab ka mid ah oo qofkasta maanta halkaan fadhiya deegaan ku leyahay, oo inuu matalaad ka waayo dalkaan, oo uu ahaado muwaadinka darajada labaad ama saddexaad, baarlamaanka federaalka Soomaaliya maantay haystaan, ilaa laga soobilaabo axdigii kumeel gaarka ahaa, ayaa waxaa laga hadlaayay status-ka iyo meeqaamka caasimada Soomaaliya hala qeexo.

Waxay ila tahay inaan ku dhiirano ineyno qeexno, oon niraahno caasimada Soomaaliya waa "state" ka mid ah state-yada hoos yimaada dowladda federaalka Soomaaliya. Hadhowto shuruucda nidaamka inoo dagsan ayaa xakameynaaya oo kala qabanaya, lakiin hadaba dhib inooma yara. Hana u qaadanina hadalkeyga dhibkii horaan dhib kusaa'idineynaa. Xalbey keeneysaa waxay keeneysaa ummad cawaadeysoo leh matalaad la'aan baan nahay, in qofkasta iska arko muraayada, iska arko oo aan ka saarno, hada siduu dad u fakaro waxaa waaye, Xamar haday baxdo yaa kasoo baxaaya? Inta meeshaan fadhida kuli way kasoo baxayaan. Dadka aad matashaan oo halkaaanu ku matalno meel aysan kasoo baxeynin, Xamar hadii state ladhigo majiro.

Waxaanan aaminsanahay inuu noqon doono state-ka iskugu dhexgalka badan, ugu balaaran, uguna insha-aallahu tacalaa waxtarka roonaado dalka Soomaaliya Waxaan kasoo gabagabeynayaa qodobka 64aad, mabaadi'da khilaaf haduu yimaado golayaasho maxkamado maahan. Golaha shacabka iyo golaha aqalka sare mid koodna ma goyn karo.

Waa in si dhaqso ah aan u sameynaa maxkamadii dastuuriga ahayd oo maxkamda dastuuriga markuu khilaaf yimaado, ama dowladda federaalka ama dowladdaha xubnaha ka ah federaalka dhexdooda is qabsadaan, ama dowladda federaalka ama dowladd goboleedku ay wax sharci ama nidaam wax isku qabsadaan, waa in dal "rule of law" ah oo kala danbeen shuruuc leh waa inaan leenahay. Golayaashu xeerarka ayay dajiyaan, mafuliyaan. Xeerarkii lagu shaqeyn lahaa aan dajino, maxkamadii dastuuriga aheed ee waxyaabahaas takhasuskeeda aheedna aan abuurno. Waad mahadsantihiin. Wasalaamu Caleukum Waraxmatullaah.



**Sen. Hassan Hussien Haji**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim.

Guddoonka labada aqal, xildhibaanada sharafta leh iyo senataradaba, waan idin salaamayaa. Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Salaan kadib, waxaan kamid ahaay guddiga la socodka Baarlamaanka oo soo diyaariyey nuqulka qoraalka hadda na hor yaallo. Waxaan rabaa wax yar oo taariikh ah marka hore in aan ku hor maro. Sida la socotaan, guddiga la socodka Dastuurka iyo guddiga madaxbannaanba, waxay waajibaadkooda dastuuriga ah in ay Dastuurka dib-u-eegis ku sameeyaan ay soo diyaariyaan, la tashtaan khubaro, markey soo diyaariyaana in ay keenaan golaha. Dib-u-eegista dastuurka wakhti hore soo bilaabatey, waa la sheegey Baarlamaankii 9aad, Baarlamaankii 10aad iyo Baarlamaankii 11aad baa hadda Dastuurka ka shaqeynaya.

Baarlamankii 9aad wuxuu soo diyaariyey seddax "option" oo xul ah oo aad uga soo shaqeeyeen. Baarlamaankii 10aad seddaxdii xul ayey mid ka qaateen, waxay usoo gudbiyeen Baarlamaankii 11aad. Marka xulkii soo gudbiyeen Baarlamaankii 10aad baa guddiga madaxabannaan iyo

guddiga la socodkaba kusoo shaqeeyeen. Wax-kabedelidii dastuurka afartii cutub, waxay ahayd wax ka bedelidii u weynayd arrimaha asaasiga ah oo Dastuurkaan ku jirta, oo nidaamkii "parlemanterial"ka laga guurey, raisulwasaarihii awoodiisa la dhimey, axsaabtii oo laxadidey, seddaxdaas oo Dastuurkii kumeel gaarka ay ku jireen. Dood badan kadib waa la nagu soo celiyey waa tii shalay laga doodayey waaye.

isbedelka uga weyn waaye Dastuurka ku jirey. Inta soo hartey waa arimo farsamo iyo heshiisyo maqnaa oo lagu soo darey waaye, oo hadda cutubkii 5aad oo aan ka hadleeyno iyo cutubkii 4aad oo doorashooyinkii labadaba heshiisyaa kujirey. Isbedelka hadda aan sameyneyno, cutubkii 4aad wuxuu taabtey hadana arimihii doorashooyinka. Waxaa loo baahanyahay markaan isbedel hadda ku sameyno ee cutubka 4aad, in hadana isbedel lagu sameeyo shuruucdii kale ee halkaan ku ansixiney. Ay kamid yihiin sharcigii doorashooyinka, sharciga guddiga madaxabannaan ee doorashooyinka, iyo sharciga axsaabta.

Waxaa loo baahanayahay in dib looga soo noqdo. Marka meel haddaad taabato, meel kalaa is bedel ubaahan. Taas hadaan ka gudbo, oo hadda qodobo, maadaama Dastuurka dadkii ka soo shaqeyey aan kujiro wixii aan guddiga dhaxdiisa aan ka doodno, laakiin aniga rayi ahaan aan halkaan kasoo jeedin karo, marka in aan taabto.

Qodobka 49aad ee shaley laga hadlayey, hay'adooyinka Dastuuriga ah oo si toos ah loo soo dooran jirey ee markii hore, waxaa kujirey hogaamiyaasha dowlad goboleedyada.
Magaca hogaamiyaha dowlad goboleedka wacaan ka qabaa "concern." Waxan rabaa magaca hogaamiyaha in loo raadiyo magac kale.

Baaritaan markaan sameyey, wadamada federaalka qaar waxa ay leeyihiin waa "governor," waa ingiriis. Qaar waxay oranayaan wasiirka 1aad waa "first minister," qaar waxay leyihiin "premier," qaarna waxaa waaye "head of member state," oo ah madaxa dowlad goboleedka. Marka madaxa dowlad goboleedka iyo waxaan dhan, waxay la xariiraan waxaa loo yaqaano maamul "executive power." Hoggaamiye macnihiisa markaad fiiriso: hogaamiye xisbi, hogaamiye kooxeed, hogaamiye diineed. Adiga hogaamiye xoogoo magacaas waa ila qumanaan waaye. Horeyna in loo sheegey waa laga yaabaa magaca in aad noo soo raadisaan. Afsoomaali rasmi waan ku waayney.

Taas hadaan ka gudbo, qodobka caasimada hadda laga hadlaayo waaye. Guddiga intaan kujirey aniga wax ma go'aaminin. "Option" ayaan keeney, maaddaama "option" keeney hadda fikirkeyga waan iska dhiiban karaa. Waxaan qabaa xulashada koowaad in ay hadda aad iyo aad uga haboontahay in magaalada Muqdisho ay qadato oo caasimad ah.

Xulashada koowaad nafteeda waxay kuu sheegeysaa in magalada Muqdisho yeelan karto matalaad. Xulashada koowaad nafteeda way kujirtaa, marka xulashada koowaad in ay munaasab ku tahay yaan arkaa.

Cutubka 5aad hadaan u gudbo, run ahaantii cutubka 5aad nidaamka federaaleynta waaye. Nidaamka federaaleynta waad aragteen in seddax xeer loo qeybiyey: xukuumada federaalka, dowlad goboleedka, iyo dowladaha hoose. Awoodaha lakala siiyey oo aad ujeedaan jad walada kujirto: midna 44 tahay, midna 29, midna 30, midna 32. Awoodahan runtii heshiiskii madasha wada tashiga qaranka yaa laga keeney. Sidey u qoreen baa loo soo qorey. Halkaan anaga guddi

ahaan waan ka doodney, shaleyna waa la sheegey awoodaha qaar in ay dhax galayaan. Waxaan ukeeney baarlamaanka in ay awoodahaan sifiican ukala saaraan. Maadaama rag siyaasiyiin ah ay kusoo heshiiyeen intey qol isla galeen wixii ay soo diyaarsadeen, labada guddi wey ku cuslaatey in ay inta kala saaraan, oo hadda ay keenaan doodiina kadib waxaad ka orataan oo laga doodo guddiga. Marka waxaa fursad u heli doonaan in doodahaas kala saaraan. Taasna waan idinku buraarijinayaa. Midda iigu danbeeyso oo aan kusoo gabagabeynayaa, oo xildhibadanii iiga horeyeyna ay ka hadleen, arimihii baarlamaankaan ka dhacay furitaankii kadib iyo qeyladii inta ay ka dhacdey wax shacabkeena Soomaaliyeed u qalma ma aheyn.

Waxaa meesha ka baxay sawir aad iyo aad uliito ahaa, magaca Soomaaliyeedna dhibaato ukeenayey, magaca umadeedna dhibaato ukeenayey. Marka waxaa loo baahanayahay guddonka iyo golahaba in ay ilaaliyaan shuruucda dalka uyaala oo uga weyn yahay dastuurka iyo xeer hoosaadka. Haddii ay isku qabsi iyo ay imaadana, xildhibaan sidiisaba doodiisa iyo nidaamkiisa waxa lagu xaliyaa qaab qoraal ah, mooshin mise si xeer hoosaad ah. Marka waxaan rajeynayaa arimahaas in la xaliyo.



**Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Alxamdulilah rabilcaalamiin, wa scw. Waa mahadsantahay, guddoonka baarlamaanka labadiisa aqal, xildhibaanada baarlamaanka golaha shacabka iyo aqalka sare, hawlwadeenada baarlamaanka, saxaafada, dhammaan waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka, assalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh. Bacda salaan. Runtii marka horre waxaan rabaa inaan bogaadiyo doodaha quruxda badan ee dastuurka ee xildhibaanada baarlamaanka labadiisa aqalba ay soojeedinayaan. Runtii waa arrin aad muhiim u ah in dooda dastuurka ay socoto, xildhibaanada si qurux badan ay uga qeyb qaataan, ra'yigoodana dhiibtaan, fikir koodana cabirraan, contribution-ka ay u arkaan ama waxa ay ku darsanayaan ay u arkaan muhiim, ay dastuurka ku daraan, cid kasta oo xildhibaan ah cod buu leeyahay, inuu soo istaago oo aragtidiisa ka niqaasho uu ku darsado ayaa qurux badan, waana sida hadda maantay aan u fadhino, waana bogaadinayaa.

Haddii intaas aan ka gudbo, haddii aan u gudbo qodobada aan isleeyahay waa muhiim oo aan ka soo calaamadeeyay cutubka 5aad doodiisa, qodobka 61aad ee heerka dawladaha ka hadlaya, wuxuu leeyahay faqradiisa koowaad, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka kooban tahay saddex heer dawlad goboleed, federal, dawlad goboleed iyo dawladaha hoose, halkii markii horre ay ka ahayd heer federaal iyo heer dawlad goboleed, hadda waxaa soo kordhay dawladaha hoose, waan bogaadinayaa qodob kaas in saas loo dhigo maxaa yeelay Federalism-ka ayaa macnihiisa wuxuu yahay in awoodda la daadejiyo, marka haddii markasta oo awooda la daadejin karo oo heerarkii awoodda dawladnimada la balaarin karo ee balaartaan, waa markasta oo shacabka qofka adeegga la siinaayo uu si fiican oo qurux badan ku sii gaarayo.

Dawladda federaalka inay awooddo leedahay ee tahay dawlad goboleedka iyo dawlada hoose. Qodobka ku xiga qodob kaas, waa Qodobka 62aad ee ka hadlaayo dhismaha dawlad goboleedyada iyo soodimahooda, qodob kaan, farqadiisa 2aad waxay leedahay golaha Aqalka Sare ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya ayaa go'aan ka gaarayo oggolaanshaha dawlad goboleedka. Aqalka Sare waa run, state-yada ayuu matalaa, haddana waa qeyb ka tirsan

baarlamaanka federaalka Soomaaliya. Marka golaha shacabka maadaama isna "house of the people" yahay, shacabkii matalaayo, deegaanadiina matalaayo, illeen qofka deegaan ayuu ka soojeedaa oo ka yimaaday.

Aniga waxaan qabaa meeshaan lagu ekeeyay aqalka sare in laga dhigo baarlamaanka Soomaaliya labadiisa aqal laga dhigo maadaama baarlamaanka laba aqal leeyahay, aqalka sare, golaha shacabkana uu matalo dadkii iyo deegaanadii uu matalo, isla qodobka 62aad, farqadiisa 5aad waxay leedahay dawlad goboleed waxaa ku midoowi kara 2,3 ama 4 gobol oo deris ah, ayagoo xor u ah go'aan kooda, halkaan dood badan ayaa ka dhalatay, aniga waxaan qabaa si gobolada Soomaaliyeed ee shacabka Soomaaliyeed ku nool yihiin, gobol kasta uu u helo waxa isaga uu mudan yahay ama waxa isaga u baahan yahay oo lakabkaan ah, haddii intaas aa soo gaarin, dawlad goboleed ma noqon kartid, looga baxo, aniga waxaan qabaa in halkaas la yiraahdo gobol iyo wixii ka badan la yiraahdo, hal gobol iyo wixii ka badan ayaa dawlad goboleed noqon kara, waayo tijaabada ah laba gobol waan soo aragnay.

Anaga waxaan ku jirnaa state-building, dawladnimada way dhismaysaa, way korreysaa, marka waxaan arkaa inay muhiim tahay gobol iyo wixii ka badan in halkaas la yiraahdo ayaan qabaa. Isla qodobka 6aad, wuxuu ku xiran yahay qodobka 5aad, wuxuu leeyahay gobol gooni u istaagi karo dawlad goboleed ahaan ma jiro, haddii la oggolaado oo la yiraahdo hal gobol baa dawlad goboleed noqon kara, qodob kaan waxaan u maleynayaa waa laga maarmi doonaa, meesha wuu ka bixi doonaa.

Waxaa ku xiga qodobka 63aad oo runtii qodob aad iyo aad muhiim u ah, kuna saabsan maqaamka caasimadda, guddiga madaxabanaan ee dastuurka iyo guddiga lasocodka dastuurka ee baarlamaanka labadiisa aqal way mahadsanyihiin. Xulashooyinka la soo gudbiyay iyo daraasadaha iyo waqtiga dheer ee lagu bixiyay. Aniga waxa aan muhiim u arkaa waxaa waaye caasimadda Gobolka Banaadir, Magaalada Muqdisho xurmo aad iyo aad u weyn ayay leedahay, xurmada ay leedahay waa hoyga umadda Soomaaliyeed, waxaa ku nool shacabka Soomaaliyeed oo aad u tiro badan oo malaayiin ah ayaa ku nool, umadda Soomaaliyeed ayay hoy u tahay, haddana saas ay tahay waxa ugu muhiimsan caasimadda waa inay matalaad hesho, matalaada caasimadda ayaa asal ah marka laga hadlaayo maqaamka caasimadda, matalaada labada xulashaba, xulashada koowaad, gobol caasimad ah oo hoos yimaado dawlad goboleed, matalaad way helaysaa sida meeshan ku qoran, xulashada labaad ee ah caasimad dawlad goboleed ah iyadana matalaad way helaysaa.

Marka haddiiba matalaad ay helayso oo caasimadnimada matalaad ku helayso, horta xujadii waa fushay laakiin aniga waxaan doorbidi lahaa xulashada 2aad oo ah caasimad dawlad goboleed ah. Caasimadda way u qalantaa, umadda Soomaaliyeed ayay hoy u tahay, waxyaabaha iyo astaamaha gaarka ah ee kulansatay ayay caasimaddu dheer tahay. Haddii qofkasta la weydiin lahaa xageed jeceshahay, Ciid haddii la weydiin lahaa Beledweyne ayuu oran lahaa, haddii aniga la i weydiiyo, Caluulo ayaan oran lahaa, qofwalba meesha uu jecel yahay ayuu sheegan lahaa laakiin features-ka iyo astaamaha ay caasimadda leedahay ayay kulansatay, marka aniga waxaan ayidayaa xulashada 2aad ayaan ayidayaa.

Qodobka 64aad waxa uu leeyahay mabaadiida federaalka ayuu ka hadlaayaa, wuxuu leeyahay dhammaan heerarka kala duwan ee dawlada waa in ay dhawraan, una hogaansamaan mabaadiida federaalka ee soo socd: faqradiisa koowaad waxay leedahay xarfo tiro badan ayay

leedahay, xarafka ugu hooseeyo waa xarafka (G) wuxuu leeyahay in khilaaf kasta oo ka dhex dhashta dawlada federaalka iyo dawlad goboleedyada ama dawlad goboleedyada dhexdooda, lagu xaliyo wada xaajood, haddii lagu guuleysan waayo, waxaa loo gudbinayaa aqalka sare si ay go'aan uga gaaraan, aqalka sare isagu gole sharci dejin waaye, wada xaajood kaas iyo Odayeyntaas qeyb wuu ka noqon karaa laakiin waxaa imaan kara waxyaabaha qaarkood waa khilaafaad dastuuri ah, marka kama fursaneyso go'aan maxkamaddeed, halkaas waxaan soojeedinayaa in sidookale lagu daro in go'aanka maxkamadda dastuuriga in la siiyo.

Qodobka 66aad, wuxuu leeyahay heshiisyada iskaashiga ah ee heerarka dawlada, farqadiisa 2aad waxay leedahay, heshiisyada leh saameyn siyaasadeed, dhaqaale guud ee u dhaxeeya dawlada federaalka iyo dawlad goboleedyada waxay u baahanyihiin ansixin baarlamaanka federaalka, horta heshiisyada u dhaxeeya dawlada federaalka iyo dawlad goboleedyada, aniga sidaan isleeyahay baarlamaan federaal ah uma baahna maxaa yeelay waa maamul ka tirsan dawladii federaalka, marka in baarlamaankii loo soo celiyo, aniga waxaan isleeyahay arrintaas aad baa loo yara dheereeyay. Marka xoogaa waxa macnaha u yeelayo waxa weeye, qodobka waxaa la yiri heshiisyada leh saameyn siyaasadeed, meeshaas saameyn siyaasadeed waxaan soojeedinayaa in lagu badalo saameyn masiiri ah in la yiraahdo ayaan soojeedinayaa. Aad baa u mahadsantihiin, waan ku dheeraaday, mar labaad waan idiin mahadcelinayaa. Assalaamu caleykum.



**Xil. Mahdi Mohamed Guleid**

Mudane Bismillaahi Arraxmaani Arraxiimi, Assalaatu wassalaamu calaa sayidinaa muxamed wacalaa aalihii wasacbihii wasalim.

Shirgudoonka labada Aqal. Xildhibaanada sharafta leh, assalaamu caleekum warax matullaahi wabarakaatuhu, waqtigoo kooban aawgeed, horaan ugudi gali doonaa, dooda cutubka 5aad ee wax kabadalka dastuurka.

Qodobka 61aad qaab dhismeedka ama heerarka dowladda. heerarka dawladda jamhuuriyadda soomaaliya, waxaa ku sheekteen inuu yahay, waxaa ku soo koobteen saddex xeer, oo Dowladda Fadaraalka, Dowlad Goboleedka iyo Dowladda Hoose, marka tii hore waxuu ahaa laba heeroo oo ah: Dawladda fadaraalka iyo dowlad goboleedka, laakiin hadda halkaan qaab dhismeedka saddexda ahi waxaa hadana ku jirta gobolkii oo inaga yirni fadaralku waxuu noqonayaa laba gobol, ama saddax gobol ama afar gobol, marka qaab dhismeedka la sameeyo gobolka shaqada uu lahaan lahaa meeshaan way ka baxeysaa, marka laba midkood aan ka dhigno, aan niraahno qaab dhismeedka dowladdu fadaraalku waxa weeyaan afar heer oo ah: dowladda fadaraalka, dowlad goboleeed yada, gobolka iyo dowladda hoose, waayo doorka gobolka ama barisabka waxa weeye, in amniga iyo cuqaasha iyo dhoorkan degmo isku xirkooda iyo, hadey yimaadaan shirkoodi iyo, waxyaabahaan inuu ka shaqeeyo, marka hadii aan doorba la heynoo degmadiiba la soo taagan tahay awoodba iguma lihid, waa halkii qodob carabta oronjirtay " لا محل له من الإعراب" marka uma hogaan samayaan, awood dastuuri ah uu leeyahay ma jirto, mid kaloo sharci ah sharci ahaan oo ku leeyahayna ma jirto, marka sideedii hore aan ku celino, oo aan iraahno waa laba heero dowladda fadraalka iyo dowlad goboleedka, mar dowlad goboledkana sidaan u daadajino, yeelanaya heer dowlad goboleed, gobolka iyo degmada, markaa sharciga fadaraalka la soo saari doona daadajintiisa sidaas buu samenayaa, meeshii qof dastuurkana ku sheegin

sharcigana uu san eheyn ayaa oron doontaan waa gudoomiyaha gobolka Gedo ama gudoomiyaha gobolka Shabeelada dhexe, ama Shabeelada hoose, sharciyad qaanuuni iyo awood dastuuri uu leeyahay toona majirto, marka waxaan soo jeedin lahaa labadii xeeroo ladaadajiyo aan ka dhigno, ama afar xeer aan ka dhigno, taas halkaas ayaan kaga baxayaa.

Qodobka 62aad waxaa jira dowlad goboleed yada ku dhisma axkaamta, marka axkaamta tira ama erey bixi Soomaali faqradaha awoodaahi taasaa kaga sii haboon, faqradaha hobolka, gobolka aanan ka koo banyahay ayadu aanu yiraahno. Laba iyo lexdan qodobkiisa 3aad asagana u soo gudbayo marka ay dhismaan dowlad goboleed yada waxaa wax ka badal lagu sameyn karaa oo kaliya marka heshiis ku wadaagaan, wuu sii socda hadii heshiis wayaan waxaa qilaaf kooda lagu xalinaa habraac yada maxkamadeed waxaana go'aamin doona maxkamadda dastuuriga.

Aniga dood weyn baa ka qabaa maxkamadda dastuuriga, in kastoo xagga dambe ay ku qorontahay aya doo faah faahsan, dalkan inika 10 sano ku dawaad ayaa luqadaha siyasadeed, ama guryaha siyasadeed, Baarlamaanka, Xukuumadda iyo meelaha laga hadlo seddax erey baa aad u caanbaxay, saddexdaa erey waxa weye dalku waa fadaraal, 4.5 baa lagu fadhiyaa, maxkamadda dastuuriga noo ma dhisna, war hadii fadaraalku xal ku gaariweynay, war hadii 4.5 hormar ku gaari weyni maxkamadu dastuuriga ayadu lakeeni maayo, inteena halkaan fadhida iyo kuwo nala mida ama aqoon ahaan iyo fikrad ahaan naga sii hooseeya, ayaa imanaya anigu waxaan amin sanahay istasionadan faraha badan makenayaan xal, dhaqaalaha culeys bey ku keenayaan, iyadoo heer qabiil lagu eegay qilaaf horleh bey abuurayaan, dood weyn baa kataagan maxaa dastuuri ah maxaan dastuuri eheyn, ama talaa sifada Shari ah, anigu waxaan qabaa habka nidaamka garsoorku uu dhigayo in maxkamadda sare labalaariyo, garsoorayaasha shanta ah lagu kordhiyo maxkamadda sare, marka (ishuus) ama mawaadiic sharci ah ay taagan yihiina ay isku badasho maxakamadda dastuuriga, "group" baa sidaas yiraahdo, inaga horay sidaa u aheyn, mareekanka shuruucda iyo tafaasiirta kaga dayano ayaa sidaas ah, taasna halkaas ayaan kaga baxayaa.

Soodimaha qodobka 4aad ee dowlad goboleed kasta waxa ay ku salaney dontaa, soodimihii gobolada, qodobkaan dastuurkii hore sidaas buu ugu jiray, waa uun 18 kii gobol oo afka laga dhoorayo, runta markii la sheego hadii ummad nimo aan u fikireeno, Soomaaliya dalkaan la yiraahdo wacyiga maanta yaal aanan ka hadleyn oo aan ku tashaney halkaan 120 milyan baa naga xiga, "Christian " ah , oo halkaan 60 milyan baa naga xiga oo "Christian " u badan, marka waxaa nagu soo socdo culeysyo "bulutics" hormuud u yahay, dunida sidii horay ay shaan jirtay ma aha, waxay ku noqon dontaa 1884 sidii loogu tashaday, ninka rooni reerka u haro, marka haday soomaaliya rabto qiyaar umadeed ineysii lahaato, ama waxey noqon kartaa nidaamka fadaraalka waana u dhex jirnaye, in 18 maamul daadijin uu yahay u jeedadu, labo mid mid kooda I laqaato 18 ka fadaraalka ahaa fadaraal noqdaano oo awooda halkaa ku u ruuto, iyo in saddex nooc loo fadaraal garoobo, 6 da gobol oo riferenka lesku oron jiray, Jubba land iyo Koon fur galbeed hal stated oo fadaraal in ay noqdaan, lexda gobol Shabelada hoose, Shabelada dhexe, Mudug, Nugaal, BAri, Hiraan, lexdaasina hal fadaraal iney noqdaan, shanta gobolee Woqooyina ama Soomaalilan tuna hal gobol iney noqdaan, Caasimadda Lamarna waaxda kale ay afaraadna ay noqoto, is ogolaansho, iyo in lagu tartamo "population" iyo dhaqaale lexda koonfurta "population" ku tartamaan lexda iyo dhaqaale wax soo saar, fadaraaloo maxaa soo kordhisaa, taasa markaa keeneysa dal dad uek inaa nu ahaan karno, tan hadda aanu ku noolnahay waxa weeye fadaralisan oo lagu lari wax la yiraahdo jeeri man dari, jeeri mandari

macnahedu waxa weeyaan keentaas reer keeyga dagaa geelaheygu daaqi jiray, ayaduna iisoo qeyda, fadaralisan ka shaqenena oo "nationalized" ahi oo aan dasturey neyna Soomaalidu ma anfici doona, waqti dambe aa la arki doonaa, waan ka gudbayaa qodobka.

Waxaana u gudbaayaa xulashada waxaa jirta falaasifada sharciga waxa ay yiraahdaan, digaagadda iyo beedka, siyaasadda iyo sharciga kebaa horeyay, kebaa key ay tahay inuu hogaamiyo, anigu aqoon teedi iyo sida ay ilatahay baan ku darsadee, sida aanu unool nahay hadii aanu ku tashaneyno, dastuurkuna aynu uqoreyno, dey waaba ku sii jirnaa xeendhaabkii fadraal sidaan u yaala.

Aragti baan ka qabaa maqaamka caasimadda iyo xulashada labada nooc, wataa tan aan iri dastuurki yoo sharciyoo dhismin ayaa fadaraalku qaadanay dabadeedna way kala koreen, oo hadaad isku eegtid "balance" waxaad is oroneysaa balansiga dheeli tirku uyaala dul duleeloyin badan baa ku jira, labada xulasho maqaamka iyo matalaada ee caasimadda gobolka banaadir waxaan qabaa aamin sanahay in ay qaadano xulashada labaad, caasimad dowlad goboleed ah, oo waliba habka aanu raceeno oo "reseach" ka aad sameyseen ama baxsiga aad soo sameyseen, ama hanoqoto Najeria ama hanoqoto Yurubta kale ama Hindiya hanoqoto, nooca Germany inaa qaadano, sida Berlin iyo Germany ay uyalaan, maxaa kala hagaya marka in xeer ka kala xadeenta awoodaha oo baarlamaanka fadaraalka soosaara la sameeyo oo dhinaca amniga, kaabayaasha dhaqaala Dekedda iyo Airpor ka ferstarekcher ka in uu lagu kala xadenayo sida ay u kala yelanayaan,oo sharcigaasi kala hago horimarinta magaalada inteebaa maamul goboleedka leyahay, inteebaa dowlada dhexe ay leedahay, halkaa loo sii kala sameeyo, qodob kaana waxaan kaga baxayaa in wax badan ay tari karaan, in xulashada la sal dhigo dooda muddo dheer bey soo socotiyee , xulashada labaad ee ah caasimad dowlad goboleed ah ineynu qaadano sharcigane lagu kala xadeeyo, oo awoodaha loogu kala qeebiyo.

Waxaan qodobka 5aad ku sii ayidayaa isla qodobkas 65aad in loo baahan yahay xeerarka fadaraaleenta labadiisa aqal iney soo saran. Waxaan u imanayaa lifaaqyada qodobka 76aad, horta intaan lifaaq yada u gudbin dhex galka dowladda fadraalka hadii ay jirto waxa aynu ku koobnay waxaa lasoo dhex gali karaa, dowladda awood u leh hadii ay jiraan arimaha mid nimada dhuleed tabanaya aniga qaranka iyo madax banaanida jamhuriyadda soomaaliya, laakiin hadii dowlad goboleedku uu gesanayo xasuuq iyo xad gudub, ku xad gudbayo xuquuxda aadamaha, oo dil kawado gobol gaar ah ama degma gaar ah, oo ma araktay uu xasuuqayo, awoodi gobolka iyo ciidanka uu u adeeksanayo, doorka dowladda fadaraalka ma waxey noqoneysaa daawasho yaalka wacan, marka anigu waxaan oron lahaa aan ku soo darno farqo labaad oo oraneysa, hadii ay jirto xad gudub baahsan, oo xuquuqda bini aadamiga ah markaa dowladda fadaraalka xilbaa kasaaran in ay soo far galiso.

Jadwalka labaad ee lifaaqa ayaa u imanayaa 40 faqradoo, awooda ay leedahay dowladda fadaraalka ah, anigu waxan leeyahay aan ku soo darno ilaalinta dhowrista deegaanka iyo isbadalka cimilada, waayo waa azmo ama dhibaato caalami ah, iska daa mid daleed, marka dowladda il gaar u lahaato, awoodaha wadaaga sideebaa loola dagaalamaa nabad guurka, sidee ilaalinta duur joogta loogu shaqeyaa, sideebaa duur joogta awooda ay wadaagaan marka labaad ay noqoto, siyaasadda guud iyo jiheen teeda. Dowladda fadaraalka iney awood u yeelata aad bay muhiim u tahy.

Lifaaqa waxa aan u imaanayaa jad walka awoodah u gaarka ah faqradiisa labaad maamulka doorashooyinka dowladaha xubnaha ka ah dowladda fadaraal iyo heer deegaan hal guddi oo maamula, hagudi oo maamula doorashooyinka saddex da xeer, ayaa tiraah deen dowlad goboleedkana awoodaas siiseen, isla dastuurka oo aanu ansaxinay isla afartiisa cutub, waxka badalna lagu sameyay, qodobka 55aad waxa uu dhisayaa, waxa uu kahad layaa maamulka doorashooyinka, dhisidda gudiga madaxa banaan ee dorashooyinka qaranka iyo soodimaha, waxaa ladhisayaa guddiga madaxa banaan iyo soodimaha waxaa u xil saaran maamulka oo uxil saaran maamulka doorashooyinka oo dhan Iyo maarentooda heer kasta, siloo helo doorashoyin hufan daah furan xur ah iyo xalaal ah, marka qodobkii 55aa ayuu burinayaa jad walka oo li faaqa ahi, oo ku lifaaqa. Qodobada waa in la waa fajiyaa qodobka 55aad ayaa asal ah, in kan loo soo raroo faqradan meesha laga saaraa loo baa han yahay, waad mahad san tihiin. Wassalaamu caleekum warax matullahi wabarakaatuhu.

18 Waxaan sii xusayaa qodobka lexdan iyo, inuu kahadlay ayaan u maleenayaa gobol gooni isku taagi karo majiro, inta uu gobol kale ku biirayo taasi marka dib baan u dhiganayaa munaasabadiisa ayaan la sugayaa iyo waqtigeeda, hadii alla idmo. waxaan ka hadlayaa qodobka 63aad ee caasimadda, maqaamka caasimadda gobol caasimad ah oo hoos yimaada dowlada fadaraalka iyo xulashada kale oo ah, caasimad dowlad goboleed ah, waxaan rabaa midda kow inaa ku hormaro qodob keeda 4aad xeerka doorashooyinka fedaraalka waa inuu siiyaa mu waadhiniinta dagan magaalo madaxda, xaq ay u yeeshaan in ay ku dooran karaan wakiilo ku matala golayaasha baarlamaanka dowlada fadaraalka.

Golayaasha Baarlamaanka Dowlada fadaraalka, waa labo heer, sida aanu naqaano, Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare, hadaad marka uwadaan, aqalka shacabka hadaad u jeedaan, 275 xubnood oo sumad le weeyaan, waxe ku yimaadaan hab beeleed bey ku yimaadaan, meesha aad ka keeneysaan oo ka nusiseen, baa idinka rabnaa inaa noo faafahisaan,275 xubnood oo beelo leeyihiin sida halkaan uga soo bixi karaan, Golaha Shacabka sida uga imaan karaan ama looga reebi karo taas waxaan u baahanna hay faa faahin, hadii u jeed kiinu ay tahay, Aqalka sare waa iney matalaad ku yeeshaan hadaad ka wadaanna waa run, Gobolka Banaadir xubnaa ka maqan, marka xaqiiqda laga hadlo, 18 gobol ayaa Soomaaliya wax loo qeebiyay, gobolkaani maheysto, kuraastii xaqa uu ulahaa, taa markaa intaa kaga gudbo.

Waxaan rabaa inaa qeebta labaad ugudbo, oo ah Caasimad Dowlad Goboleed ah, Muqdisho waxaanu ognahay Caasimadii Soomaaliya iney tahay, muran badan kama jiro, waxaan ognahay dhaqaalihii Soomaaliya Cadaan iyo Madow, Gaal iyo Islaamba meelkasto ka yimaado inuu halkaan yimaado, oo halkaan ka soo dago, waxaan ognahay Dowladda heerar keedi kala duwanaa oo dhan iney daganyihiin, waxaan ognahay Gudoomiyaha Gobolku inuu leeyahay maqaamka madaxda "stad" yada oo kale, mararka shirarka ay iskugu yimadaan inuu kursi ku leeyahay, waxaad moodaa in ay wax badan oo hadda aan xusin iney heysato allaha u siyaadiyo, culeyskedana way heysataa. Laakiin waxaa rabaa ninbaa sac lahaayo, sagaal guji ayuu ka maali jiray, koonbadii tobnaa guji kaga day, sagaalkii bay daadisay, waxaan leeyahay wax badan bey heysataa caasimaddi, ismana saar naan karto Caasimad Dowlad Goboleed ah, nin baa han duu waxuu arkay gantii geed buu ku arki ganihiina geed buu ku arki, si leys ku waa fajin lahaa baa loo baahan yahay, Caasimaddi way ahaaneysaaa Dowlad Goboleedna way noqoneysaa qofkii hadda isasaaraa iga cilmi badan, aniga waxaan is leeyahay suurad gal ma noqoneyso, anigu wax u diidaneyn, waxaan leeyahay Banaadir waxaa ka maqan ku raas ay Aqalka sare ku laheyd, waxeyna kaga maqan yihiin "stad" yada qeeb ka mid ah, halooga soo celiyo, xaqeeda si

ay u hesho haloo soo celyo, laakiin kuraas kaloo dheeri ah meel laga keenayo uma leen maayo iney jirto, intaa intasaa uga gud bayaa, waxaana rajaxayaa iney noqoto Gobolka Banaadir Dowladu dagantahay, war keygu sidaas buu u cad yahay.



**Sen. Ahmed Mohamed Ali**

Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, shir guddoonka labada aqal, baarlamaanka labada aqal iyo dhamaan shaqaalaha iyo saxaafada salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu. Xildhibaanada iyo Senatarada sharafta badan horta waa maalintii iigu horaysay oo halkan aan soo istaago, baarlamaankan aniga waligay hortiisa masoo istaagin marka maanta waxaan idiinka codsanayaa in waxyar lay dhagaysto daqiiqado yaroo kooban.

Aniga guud ahaan hadalkaygu wuxuu ku saabsanyahay qodobka 63aad ee Maqaamka Magaaladda Muqdisho, Soomaaliya waxay soo martay colaado badan, dhibaato badan iyo rafaad badan, 95% dhibaatadaas Soomaaliya ka dhacdayna waxay ku dhacday shacabka magaalada Muqdisho, shacabkaas waxay la kulmeen qaraxyo, waxay la kulmeen colaado, waxay la kulmeen waxyaabo xad-dhaaf ah oo aysan qaadi karin oo ay kamid tahay cashuurahan dawladu qaado, waxa kaloo kamid ah waxbarashadoodii iyo nidaamkoodii oo sidii la rabay aan ahayn. Ayadoo sidaas ay tahay hadana dadkaasi horey ayay u socdeen oo ma aysan hakanin, waxay la kulmeen qaraxyada ay kamid yihiin midkii Soobe oo aysan ku dhinteen siday dadku sheegaan 700 oo qof laakiin ugu yaraan anigu aan aaminsanahay inay 1000 qof ku dhimatay. Aniga markaas goobjoog ayaan ahaa oo taliyaha madaxtooyada ayaan ahaa oo gacantayda midig ayaan wax uuga qaaday, hantida iyo dadka ku baaba'ay yacni lama qiyaasi karo hadana dadkaasi ma aysan hakanin oo waxbaa idiinku dhacay ma aysan dhihin oo waxbarashadoodo, dhismayaashooda iyo caafimaadkoodaba horey ayay usii wateen.

Waxaad aragteen Magaaladda Muqdisho inay tahay magaalo qurux badan oo haybad leh oo dadka uugu badana ay ku noolyihiin hadii loo fiiriyo gobolada kale ee dalka. Sanaddihii 1391dii Magaalada Muqdisho waxa imid sahamiyihii caanka ahaa ee reer Marroco Ibnu Batutah wuxuuna ku sheegay sanadkaasi in Magaaladan Muqdisho dadka ku nooli ay ahaayeen dad ganacsato ah oo haybad iyo sharaf leh, dadka soo dhaweeya, masaajiddo ay ku yiileen, Diinta Islaamka ay haysteen, salaadiin iyo boqorana ay ka talinayeen. Muqdisho waxa soo maray xukuno badan oo halkan waxa ku taala ilaa 6 xukun inay soo martay laakiin midkii uugu dambeeyay oo uugu muhiimsanaa oo dalkeenu markuu xornimada qaatay waa xukunkii Talyaaniga ahaa waaye.

Aniga waxaan rabaa marka in dadka Muqdisho la siiyo matalaad dhab ah oo ku aadan inay la mid noqdaan State-yada kale, waxaanan soojeedinayaa xildhibaanada sharafta leh in la qaato xulashada labaad oo ah Caasimad State-ah, xildhibaanada waxa jirey qaar dhinac kale uuga dhawaajiyey laakiin aniga waxaan idinka codsanayaa walaalahayow in Muqdisho dadkeeda la siiyo inay helaan matalaad iyo haybad oo ay lamid noqdaan gobolada kale. Hadalka waqti ayuu leeyahay, in badan waan wadi karaa laakiin ujeedada keliya oo aniga maanta u imidday waxa waaye in dadka Muqdisho aad xildhibaanadiinu dib u fiirisiin, xuquuqdooda iyo xaqa ay leeyihiina aad siisiin. Waxba idiinka halayn maayaan oo Magaalada Muqdisho qofna la dhihi maayo inteed u socotaa, gobolkeed ka timi iyo halkeed ku dhalatay la dhihi maayo, waa dad

iska Happy-ah oo ciyaalka xaafada ah marka waxaan soojeedinayaa in Muqdisho la siiyo maqaamkeeda oo ah xulashada labaad Caasimad State-ah. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin xildhibaanada sharafta leh, maanta iyo shalay aamusnaantiinu waa fiicantahay inta kalena waxaan Illahay uuga rajeynayaa inuu soo hanuuniyo oo aan isku imaano anagoo sharaf lehna aan baarlamaankeena iyo wixii nalooga baahanyahay oo dalka dan u ahna aan horumarino insha Allah, waad mahadsantihiin.



**Xil. Abdi Ibrahim Warsame**

Bismilaahi raxmaani raxiim, mahadsanid mudane guddoomiye guddoonka labada aqal iyo xildhibaanada labada aqal waan idin salaamayaa. Salaam ka dib mudanayaal waxaan rabaa horta inaan halkan qolada guddiga dastuurka labadiisa heer bal inaan tilmaam yar ka siiyo, waxaad moodaysaa waxa fiican inaynu maalin walba waxaynu qabanayno wax ka qabanayno ay inoo cad yihiin oo aynu nidhaahno maalin heblaayo waxaynu wadaynaa cutub hebel ilaa qodob halkaa. Haddii wuxu iska keen dhex galaan oo maalin walba meesha aynu joogno qof walba meel kasoo bilaabo waan ku wareeraynaa ama qaar dabada iska qabtaa oo qodobada ilaa garsoorka gaarsiisan iska sii wadaan waxa waynu ku wareeraynaa. Hadda xubnihii guddiga qaarkood baa halka kan waxay ka hadlayeen chapterkii 4 aad oo saddex cisho ka hora aan ka doodaynay markaa anaga xagee joogna saw inaan anagu ku wareerno maaha. Waxaa fiican maalin walba inaa noo cadaysaan ooo tiraahdan waxa laga doodayaa cutub intaa qodobadiisa intaa ilaa intaa si shaqadu u koobnaato oo go'aan looga gaadho.

Ta labaad waa isla codsi ku wajahan guddiga, dastuurka hore afar chapter aynu u ansixinay oo hadda wax ka soo noqdeen haddana 5 chapter oo kale ayaad meesha keenteen. Maalin walba laba chapter iyo shan chapter iyo afar chapter laga hadlimaayee waxa fiicnaan lahayd dastuurka mar halawada dhammaystiro inta aynu dooda ku jirno chapter-ada hadhay inaad miiska keentaan oo soo dhigtaan ayaa fiicnaan lahayd oo dastuurka oo isku dhan halmar aynu gabagabayno oo ka wada faraxalano, taa markaan intaa kaga tago.

Qodobada 62 faqradaha 2 aad iyo 3 aad iyo 5 aad shalayna waan ka hadlay, waxaan la qabaa xubno badan oo halkan kaga hadlay, waxaan markale ku celinayaa in gobolkii iyo wixii ka badnaa la ayido iyo ansixinta aqalka sare inay tahay "confict of interest" oo ku sugan qodobka 62 aad faqradiisa 2aad iyo waliba khilaafka oo maxkamadda dastuuriga ah. Dhamaantood qodobka 62 aad waxay u badan yihiin firqooyin cusub. Markaa waxaan leeyahay doodaydu shalay sidii ay ahayd baan u qabaa waan ku taageersanahay xidhibaanadii ka hadlay. Waxaan rabaa qodobkaa inaan ku daro liiska maamul goboleedada jira hadda waxaa loo baahan yahay lifaaq inaad ka soo dhigtaan oo ku soo dartaan dastuurka si ay u cadaato meesha wax laga bilaabayo isa gana taas waa ku soo boorinayaa.

Qodobka 63aad oo caasimada ugu weyn waxaan meesha ugu soo noqday, caasimada saaxiibkay jeego waa baxaan u malaynayaaye cabsi badan baa ka jirta, dad badan baa shaki waxay ka qabaan caasimada gobolaa loo soo goynayaa degmooyin baa loo soo goynayaa isaguna waxoogaa intii wuu yara taabtay oo dadkii waaba sii didiyey. Laakiinm waxaan rabaa inaan idiin sheego caasimadu iyadaa isku filan, waa gobolka Banaadir waa 20 degmo xaqbay leedahay dalkan abaalbay ku leedahay dadka Muqdisho degaa waa dadka qudha ee maanta laga helayn

hal qof oo qabiil ka hadlaya waa 4 milyan oo qof waa gobolka Banaadir. Markaa iyadaa isku filan hadaa qaadano dariiqa ah gobol iyo wixii ka badan iyadaa isku filan degmo looma baahna balacdna looma baahna waa Banaadir State of Somalia. Markaa waxaan ayidayaa in dawlad goboleedka loo daayo oo faqrada qaybteeda 2 aad xulashada 2 aad ee dawlad goboleed in la siiyo.

Waxaan rabaa inaan kaga tago saaxiibkay Mahdi ra'iisal wasaare hore waa nin aan aqaano saaxiib aan nahay, waan ogahay waa shakhsiga kitaab aan ku mari karo qof soomaaliyeed oo midnimada ka jecel oo ka muwaadinsani inuusan jirin ku mari karo, aa'daan ugu bogaadinayaa aa'daan amaanayaa. Halkan wuu ka kaftamayoo mar uu federaalka ka hadlayey baa wuxuu yiri bal shan shan iyo waxaas ha la isku raaciyo qayb xagaasa ah. Markaa maskaxdaydaa waxaa ku soo dhacday waar shantii gobol ee waqooyiga labo iyo badhna xagaa iyo israa'iil u kaceen labo iyo badhna u kaceen xaga Soomaaliya sidee baa loo federaalayn karayaa baa maskaxdayda ku soo dhacday. Markaa taana waxaan leehay sidaa waxba iskuma raaci karaan, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin salaamu calaykum.



**Xil. Mukhtar Mohamed Guled**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Xillibaanada labada aqal iyo saxaafada Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Salaam ka dib inta aanan hadalkeyga gudda galin waxaan rabaa marka ugu horeysa inaan halkaan ugu mahadceliyo guddiga arrimaha la socodkaee ee dastuurka ee labada heer iskugu jira labada aqal iyo guddiga madaxabannaanba, qaabka quruxda badan ay usoo diyaariyeen waxka-beddelka dastuurka ay usoo xigteen oo ay soo xigteen qodobadii hore ee dastuurkii 12kii iyo midka hada aan wax ka badaleyno, sida ay usoo xuleen ay usoo hagaajiyeen horta waan ugu mahadcelinaya marka ugu horeyso intaa kaddib.

Mudanae guddoomiye mudanayaal, waxaan rabaa inaan dhoor qodob inaan ka hadlo commnet-gareeyo, marka waxaan qabaa talo ahaan kusoo jeedinayaa xillibaanda iyo sanatarada saxiibadeyda hadlaayo guddiga dastuurka labada guddi ee ka shaqeynaayo dastuurka inta badan waxay qortaan commnets-ka xillibaanada ayay qortaan, xillibaanada halkaan soo istaagay hadal kooda wuuxu u badnaa war aan la qori Karin ama aanan la comment gareyn karina ayuu u muuqdaa, marka sidas darted guddiga si ay u qoraan oo qodobada laga doodaayo xiliibaanada Meesha ay u bataan loo ogaado waxaan ka codsanayaa saaxiibadey xiliibaanada sanatarada iney qodobada toos u abaaraan oo warka badan iyo sheekeeyinka badan ay iska daayaan iyo maamulka golaha u yaalo inaan anaga ka hadalno inaan iska deyno.

Hadaan ku hormari waxaan rabaa inaan ka hadlo qodobka 62aad oo ka hadlaayo dhismaha dowladd gobleedyada iyo soohdimaha gaar ahaan faqradiisa 5aad, waxaa ku qoran ama aad soo qorteen dowladd gobleed waxaa ku midoobi kara 2,3, ama 4 gobol oo diris ah iyagoo xor u ah go'aankooda marka waxaan adkeynaya labada xillibaan oo iga horeysay in ay soo jeediyeen in ay qasab noqoto in laba gobol iyo wixii ka badan in ay ku midoobi karaan, 2 gobol, 3 gobol ama gobol 4 iyo wixi ka badan ayaan soojeedinayaa, oo lakiin aysan noqonin "optional" aysan noqonin ayaan soojeedinayaa faqradaasi 5aad, sidoo kale faqradda 6aad isla qodobkaasi waxaa

ku qoran gobol gooni isku taagi kara majiro, dowladd gobleed gooni isku taagi kara majiro, xukuumada federaalka soomaaliya ayaa maamuleysa gobolkaas inta u uku biiraayo gobol ama dowaladd gobleed kale.

Waxaan ognahay dowladd gobleedyo hada dhisan ineysan gaareyn laba gobol, iyada naftirkeeda waxaan idinka rabnaa guddiga dowladd gobleedyada noocaasi ah, talada lga yeeli karo laftirkeeda inaad soojeedisaan iyadana waan idinku bogaadinayaa, maadaama laba gobol iyo wixii ka badan aad dhahdeen dowladd gobleedyada aan laba gobol dhammeen ama aan la ekeen side ayadana lagtirkeeda laga yeeli karaa? Ama waxan dhiirogalineynaa dowladda gobleedyada hada jra laftirkooda ay sii go'go'aan ayaan sii dhiiragalineynaa.

Qodobka 63aad, oo ka hadlaaya maqaamka caasimada  waxaan rabaa hadal lagayaabe xillibaano inta badan aysan sheegin lakiin xillibaanda inta badan iyo sanatarada hadalka meeshaan kajeediyay arrinka laga hadlaayay caasimada,  horta waxaan rabaa iney xaqiijiyo xiliibaanda inta ka hadlay dhan marka laga reebo jeego iyo aniga horta caasimada waan u simannahay, ninka kaliya ee caasimada igula doodi kara waa xiliibaan jeego, caasimaadn matalo lakiin xillibaanada kale ee meeshaan ka hadlay ee ka yimid ama galmud ama hirshabelle iyo ka yimid iyo jubolland iyo anigoo koonfurgalbeed ka yimid caasimada soomaaliyeed waan u simannanay horta lamabarka 1aad, waxaan rabaa horta taas inaan xaqiijo. Arrinta ah matalaadeeda, nooca matalaad ay u baahantahay, u baahnaankartana waalaga hishiin karaa waana laga hadli karaa reer gaar ahna iska xijin karo mana yeelankaro, hadii matalaad guud loorabana xillibaanada inta fadhiya oo dhan oo reeraha kala duwan iskugu jiro ayaa matalaadeeda ku fadhiyo ayadaa masuul ka ah. Labada xulosho ay guddiga soo bandhigeen xulashada koowaad oo ka hadleyso caasimad hoos imaaneyso dowladda federaalka ah, aniga shaqsiyaan ahaan waxaan qabaa xulashada koowaan in la qaato, ayaan qabaa laakiin xulashada 1aad markii la qaadanaayo hadana faqradda 4aad waxaa ku qoran xeerka doorashooyinka federaalka waa inuu siiyaa muwaadiniinta dagan magaalo madaxda xaq ay ku doorankaraan wakiilo u matala golayaasha baarlamaanka federaalka sooomaaliya, waa ineysan matalaadaas ku waayin, dagnaanshada ay dagan yihiin magaalo madaxda dowladda federaalka,  guddiga waxay meeshaan ku sameeyan qodobkaan isku dhex karis, oo ah arrinta laga hadlaayo wakiilada ku matala golayaasha baarlamaanka, mawaxaad rabtaan xillibaano cusub oo golaha shcabka ah in loo sameeyo in loo sameeyo gobolka banaadir, misa waxaad ka hadleysaan xillibanada hore u matalaayay  ee saaxiibadey ay ka mid ahaayen gobolka badanaadir lagu doorto yaad ka hadleysaan ama waxaan ka hadleysaan sanataro cusub loo sameeyo ayaad ka hadleysaan iyada laftirkeeda waxaan rabnaa in lakala cadeeyo, wakiilada matalaada aad ka hadleysaan waa noocee? Ma aqalka saraa ma golaha shacabkaa in la xaqiijiyo iyada naftirkeeda waan rabnaa, waxaan qabaa aniga talo hadaan hadii aqalka sare matalaad loogu daro matalaadaasna ay noqoto qaab awood qeybsi ah, oo lagu heshiiyo intaanan la qorin ka hor ama aanan la ansixinin dastuurka, xolashada kowaad markaas qodobkaas waxaan aminsanhay qodobkaas hadii la cadeeyo iney iyaga u fiican tahay, si madaama caasimad u mad soomaaliyeed ka dhxeyso ay noqoto ama ay tahay.

Haddii xulashada 2aad la aado marka oo ah, caasimad dowladda gobleed ah, hadii la aado waxay noqoneysaa laba shay in laga shaqeeyo ansixinta ka hor si ay dowladd gobleed u noqoto gobolka banadir, labada shay marka in laga hishiiyo gaar ahaan reeraha gobolka banaadir u badan, ama kow hanoqdaan ama saddex hanoqdaane ay ka hishiiyaan u baahanyihiin waa labo qodob:

Qodokbaka 1aad, awood qeysiga dowladd gobleedkaas meequunoqonyaa horta in lagu heshiisyo waaye horta inta aanan la ansixin ka hor, oo dowladd gobleed aanan loo aqoon sanin ka hor inta aan laga dhigin gobolka banaadir, awood qeybsiga gobolka banaadir waa in lagu noqdaa oo lagu hishiiyaa reeraha dagan ay ku hishiiyaan qodobka 1aad.

Qodokbaka 2aad, maadaama ay dowladd gobleed ay noqoneyso, caasimadiina ay tahay, waxaa qasab ah inaan qodob kalo aan ku darno aan niraahno 10kii sanoba in caasimada la wareejiyo, oo 10 sano ka dib in caasimada laga dhigo garoowe, 10 sano ka dib laga dhigo caasimada laga dhigo beydhabo, 10 sano ka dib laga dhigo jowhar, 10 sano ka dib laga dhigo kismaayo, 10 sano ka dib laga dhigo hargeysa, 10 sano ka dib laga dhigo laascaanood, lakala wareejiyo oo 10 sano ka dibba caasimada dowladd gobleed kale loo wareejiyo, hadii kale gobolka banaadir dowlad gobol manoqon karto, hadaanan la fulinin shuruuduud awoood qeybsiga iyo in caasimada in 10 sanaba ama labadii tream-ba mar la wajeeriyo, isla qodobka 64aad oo ka hadlaaya mabaadi'da federaalka gaar ahaan faqradda (f) waxaa idin qoran xeerarka kala duwan ee dowladda ay si cadaalad ah u wadagaan una qeybsadaan kheyraadka iyo dakhliga dalka, ma waxaad ula jeedaan in dakhliga dalka loo qeyb sado dowladd gobleed ahaan, sida hada aan ognahay lacagaha ee kabka miisaaniyada gaar loo kala qeybsado, misa waxad ka wadaa in aan u qeybsano 5ta beelood oo halkaan aan ku mideysan nahay, iyada naftirkkeeda waxaa la rabaa in la cadeeyo, hadii dowladd gobleed ay tahay sakhsiyan iyo reerka aan kasoo jeedaba ma'ogaan doono dabcan waan diidi doonaa in kheyraadka dalka loo qeybsado dowladd gobleed, waxaan aminsanahay in lagu kala qeyb sado, 5ta belood oo soomaali ay ku dhantahay si cadaaladd si ay ugu sinnato markaas, lakiin hadii dowladd gobleed lagu qeybinaayo waa inaan Meesha kasaarnaa ereyga caadaaladda ah.

Sidoo kale qodobka 69aad, oo ka hadlaaya golaha fulinta dowladd gobleedyada, gaar ahaan faqradiisa 2aad hogaamiyaha, hogaamiye ku xigeenka dowladd gobledka, waxay xilka heynayaan muddo 5sano ah ka bilaabmata maalinta xilka loodhaariyo looguna doorankaro laba mudo xileed oo isku xiga, qodobkaasi aniga waan sii xoojinaya waan sii adkeynayaa waxaana waliba guddiga ka codsanayaa in lagu daro inaan qodobkaas, qodobada wax laga badali karo dastuurka uusan ku jirin, si madaxweynaha markaasi markaasi yimaada federaalka hanoqdee ama midka dowladd gobleedka hanoqdee uusan u furin qodobkasi uusan uga dhigan in mudo saddex mudo xiled uu tartami karo uu soo istaagi karo, muddo xileedka si uusan u furmin qodobkaasi waxaan rabaa in lasii adkeeyo oo la yiraahdo qodobada dastuurka wax laga badali karo mudo ka dib kuma jiro qodobka noocaasi ah.

Sidoo kale waxaan rabaa inaan ka hadlo jadwalka (A) waxaad moodaa jadwalada 2 A, 2 B, 2 C, iney inta badan ay isku soo noqnoqonayaan dastuurkeenii hada waxka-baddalka aan ku wadno ciladaha ku jiray ay sii socdaan yaymeeshaan ka muuqataaa, tusaale dastruurkii hore ee kumeel gaarka oo aan isticmaaleyno oo wali isbadalka aan ku wadno waxaa ku jiray qodobo dowladd gobleedka iyo dowladda federaalka ay isku qabsanayaan oo laba markaad dastuurka u eegtidna qodobo ay adeegsan karaan ay ka heli karaan oo ay saxtahay oo midna aan garta la siinkarin labada qodobka ladabii meeloodba uu ku jiro, sidoo kale aqalka sare iyo golaha shacabka oo kale awoodaha qaar ay isku dhexjiraan, marka waxaan rabnaa guddiga aan ka codsanayaa in qodobada dastuurkaan waxka-beddelka aan ku wado iney kala saaraan oo waadix ay kala noqdaan, tusaale hadaan soo qaato jadwalka 2 A, oo ah awoodaha u gaarka ah dowladda federaalka faqradiisa 10aad waxa ku qoran siayaasada diiwaan galinta dhalsahada,

dhimashada, guurka iyo furiinka waxaa awoodaha gaarka u ah dowladda federaalka iyo sidoo kale awoodaha u gaarka ah markaad timaado 2 C,  oo ah awoodaha u gaarka ah dowladd gobleedyada gaar ahaan faqradda 26aad siyaasadaha dowladaha xubinta ka ah dowladda fedraalka ee diiwaan galinta dhalashada, dhimashada, guurka bixinta warqaddaha aqoonsiga, marka waxaan codsanaya guddiga iney kala saaraan, awoodihii dowladda federaalka waxay ku jirtaa sidoo kale mid dowladd gobleedka u gaarka ahna way ky jirtaa, waxaan ka codsanayaa guddiga qodobada noocaas iney kala saaraan si aan leyskugu qabsanin, sidoo kale farqadda 12aad maamulka doorashooyinka oo awoodaha ugaarka dowladda federaalka markii lajoogo faqradda 12aad waxa ku qoran maamulka doorashooyinka hal guddi ayaa maamulaaya doorashooyinka, sidoo kalteeto isla jadwalka 2 C, lambarkiisa labaad ama faqrada 2aad waxaa ku qoran maamulka doorashooyinka heer dowladaha xubnaha ka ah dowladaha federaalka heer deegaan hal duggi oo maamula doorashooyinka saddexda heer, xerka doorashooyinka aan ansixinay ee guddiga doorashooyinka iyo soohdimahana wuxuu ka shaqeynayaa doorashada xillibaanada, tan madaxweynaha iyo tan dowladd gobleed yada ee golaha deegaanka iyo sidoo kale iyada naftirkeeda waxaan rabnaa inaan kala saartaan , marka waxaan kasoo gabgabeynayaa qodobada qaar qaarna way ii dhiman yihiiin lakiin maadaama waqtiga iga dhacay intaas ayaan kusoo gabgabeynayaa, waxaan aad u xoojinayaa codsanayaa guddiga shaqada fiican aad qabateen kaliya waxaan ka dhiman qodobada kala saara waad mahadsantihiin.



**Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed**

Guddoonka sharafta leh oo ugu horeeyo gudoomiyaha iyo ku xigeenada,habdhorayaasha,xildhibaanada labada aqal ee sharafta leh iyo saxaafadda waan idin salaama.

Runtii wixii laga dhihi lahaa qodobada habraaca soojeedinta wax ka bedelka qodobada 5aad,6aad,7aad,8aad,9aad ee dastuurka KMG ah runtii intii hadashay ayaa nuxurka dhabta sheegtay maadaama waqtiga uu kooban yahay,waxaan isku dayeyaa inaan soo koobo waliba nuqdooyinka muhiimka ka raaco inta kalena aan “second”-gareeyo.

Runtii waxaan rabaa inaan hambalyo iyo bogaadin usoo jeediyo gudoonka sharafta leh qaabka xasiloonida iyo degnaanshiyaha leh ee ay u daadihinayaan golaha,runtii maalmahaan u dambeysay ku wadeen iyo waxaan rabaa hambalyo iyo bogaadin inaan u soojeediyo labada gudi dastuurka gudiga madax banaan gaar ahaan runtii dadaalkii ay soo sameeyeen oo runtii ka shaqeynta qodobadaan ee dastuurka wax kabedelkiisa,wax ku darkiisa iyo habeyntiisa waxaan rabaa hambalyadaas inaan ujeediyo,Maxaa yeelay dadaal badan bey soo sameeyeen.

Si aan u’aado si toos ah qodobada yacnii lahadal haaye ama qodobada laga hadlaayo waxaan rabaa qodobada kale intii layiri waliba ragga qaarkood ay yiraahdeen,anoo ku waafaqsan sidii xubnaha qaarkood,waxaan rabaa “focous”ka inaan saaro qodobka 63aad ka hadlayo maqaamka caasimadda ayaan rabaa “focou”ka inaan saaro,kuwa kalena waxaan ku waafaqsanahay saaxiibadey oo ka hadlay sida xil Mahdi, xil Bashiir,xil Jeego inta ay sheegeen waan ku waafaqsanahay iyo inta kale waan ku waafaqsanahay hadana waxaan rabaa “focus” inaan saaro.

Waxa waaye runtii hambalyada u gudbinaayo gudiga madaxabanaan waxa waaye qaabkii ay usoo tafatireen qodobkan 63aad waxayna ay tahay inay u soo diyaariyeen hab cilmi baariseed aysan iska soo qaadan oo runtii ku saabsan maqaamka caasimadda ayagoo runtii baadi goob u galay waliba dalalka ku dhaqma nidaamka federaalka inay baadi goobkaas ay galeen kadibna ay runtii ku soo hooriyeen labada xulasho oo ka dhigeen "option1,option2"marka labada xulasho oo labadaba yacnii ku wajahan arinta maqaamka caasimadda soomaaliya. Taas anoo ka amba qaadaya ayaan waxaan rabay waxyar inaan gadaal u noqdo oo ah runtii waxa aad maanta farxad u'ah in laga hadlaayo maqaamka caasimadda soomaaliya annagoo og yacnii xiliyadii dheeraa ama xiliyo badan oo lasoo dhaafay in doodeeda lagu jiray halagu daro shuruucda halagu daro arinta maqaamka magaalada ama caasimadda in ay ahayd waxbadan oo laga doodaayey oo markii u dambeysayna lagu daray gudina loo saaray laakiin nasiib daro horey u socon weydey. Maanta waa ilaahay mahadiis inaan ka doodayno laba xulasho oo gudiga sharafta leh ay soo saareen oo "option1, option2" ah,waxaan kaloo rabaa guud ahaan waagaas aan ku doodeyney maqaamka caasimadda.

Caasimaddu inay tahay caasimad ummadda oo dhami u dhanyihiin oo lagu wada dhex jiro aysan jirin wax dad gaar uleh laakiin ay tahay caasimadda ummada soomaaliyed in ay xuquuqdeeda iyo maqaamkeeda inay xaq uleedahay waliba markii la soo qaado ku doodi jiranay deegaan ahaanna inay buuxineyso shuruudaheedii oo waliba maanta ay deganyihiin dad ku dhow ama ka badan ilaa 5millon.
Maantu waa ilaahay mahadiis xulashadii inaan joogno oo xulasho aan kala xulaneyno gobol caasimad ah oo hoos yimaada dowladda federaalka "option1" ah iyo caasimad dowlad goboleed ah oo "option 2" ah.

Markaan soo qaado magaalo madaxda anoo soo koobaayo magaalo madaxda federaalka dabcan marka la leeyahay caasimad dowlad goboleed ah Waxaa loola jeedaa markey shuruudaha soo buuxisay anigoo ka amba qaadaya xulashada 2aad inay tahay dowlad goboleed leh maqaam iyo xuquuq lamid ah kuwa dowlad goboleedyada federaalka Soomaaliya ka dhisan,taas waxaan rabaa hoos inaan ka xariiqo.

Waxaa waaye magaala madaxda federaalka dabcan waxay noqoneysaa dowlad goboleed leh maqaam iyo xuquuq lamid ah kuwa dowlad goboleedyada federaalka soomaaliya,taas oo u ogolaanayso wixii xuquuq uleedahay ayadoo laga ambaqaadayo "population density "ga, iyadoo aga amaqaadayo istaraatiijiyada meeshay ku taalo,ayadoo laga ambaqaadayo ummada dhan inay u dhanyihiin. Mid laga dhawaajiyey baa jirta hadaayey ragga qaarkood ay ka dhawaajiyeen asxaabta ah oo ah yacnii qaabka yacnii hadhow dowladda federaalka ah iyo xukuumad dowlad goboleedka ee magaala madaxda federaalka ay u heshiin karaan ama ay u qaybsan karaayaan taasna waxay ku cadahayba yacnii hadhowna lasii cadeyn doonaa waliba qaabka hadda dhigaalku uu u yaalo.

Runtii waxay tahay in wixii ku xiran in la dhowro dabcan mabaadii'da xiriirka iskaashiga eek u xusan dastuurka siduu u xusan yahay ayaa loo raaci doonaa,taasna waa inay ku heshiiyaan sida arimaha canshuuraha,xeerarka nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyin,dabcan dowladda federaalka waxay degan tahay ama ay ku leedahay xarumaheeda midaas ayaa laga heshiinayaa ama laga sii balaarin doonaa, ma noqonayso mid ka dhex dhalinaysa ama ka dhex dhalin karta xukuumadda dowlad goboleedka magaala madaxda federaalka tashwiish ka dhex dhalinayso ma noqonayso.

Waxaan rabaa mudane gudoomiye mudanayaal anoo soo gaabinaayo runtii inaa halkaas ka ambad qaadno sidii sharciga ku wajahan ayna u fududaato xuquuqda ay leedahay caasimadda magaala madaxda caasimadda in ay halkaasi ay ku cadaato oo xuquuqdooda iyo maqaamkaas uu meeshaa ka Cadaado.

Marabo inaan ku sii fogaado mar kale iyo mar kale waxaan laqabaa qodobada kale oo kamid ah Qod62aad ilaa Qod69aad intii dhahday oo taabatay waan "second"gareenayaa Qodobkan 63aad sidaas ayaan asigana hoos ugu xariiqayaa waxaan rajeenayaa insha'allaah in Allah noo fudeediyo howshaan oo dastuurka ah maxaayeelay waa howl soo bilaabatay baarlamaankii 9aad dhamaan weydey balse maanta runtii sida loogu heelan yahay markaad fiirisid xildhibaanada iyo gudoonkaba dhammaan waxaad moodaa inuu ilaahay nawaafajin doono in aan soo gaba gabeyno oo taariikhda aan ku galno runtii dastuurka yacnii wax kabedelkiisa, habeentiisa, dhameystirkiisa ku taariikh yeesho insha'allaah mudane gudoomiye aad baad umahadsantihiin wabillaahi tawfiiq.



**Xil. Jama Mohamed Askar**

Bismilaahi raxmaani raxiim guddonka sharafta leh iyo xubnaha Baarlamaanka labada gole ee halkaan fadhiya asalaamu caleykum waraxmatulaahi wabarikaatuh waxaan jeclahay in aan abaaro qodobada halkaan ku yaalo ee lasoo jeediyey qodobka 61aad hadaad eegto ee ka hadlaya qaab dhismeedka Dowlada caafiyan jamhuuriyadaan soomaaliya ama Dowlada federaalka soomaaliyeed ayaa la yirahdaa so ma ahan halkaan waxa ku qoran seddax "structure" ayaa loo qeybiyey ee Dowlada federaalka ah maamul goboleedyada iyo dowlada hoose tan u sareysa ee ah Dowlada federaalka soomaaliyeed waxaa soo hoos galaya dhammaan dalka oo dhan Dastuurka "article" kii hore ee la bedeley wuxuu dhigayey xukuumada federaalka marka guddiga waxaan kula talin lahaa maadaama marka laleeyaha dowlada federaalka ah soo wada galayaan maamul goboleedyada iyo Dowlada dhexeba in ay dib u eegaan horta ereyga Fowlada federaalka ah.

Sidoo kale waxaan jeclaan lahaa in sidii hore lagu daayo Dowladaha hoose oo aan "structure" seddaxaad aan laga dhigin maxaa yeeley Dowlad goboleedka waa dowladaha hoose oo la isku geeyey "structure" seddaxaad ma noqon karaan dowlada federaalka iyo dowladaha ama dowlad goboleedyada kaliya lagu daayo een "article" 63aad oo soo bandhigaya labo "option" ama labo kala doorasho oo caasimada ah waxaan waafaqsanahay in mugdisho ay noqoto caasimada soomaaliyeed oo "federal city" ay ahaato oo aaney noqon maamul goboleed sawabtuna waxaa weeye magaaladaan mugdisho markaan caasimad markaan ka dhigney awoodii dowlada soomaaliyeed baa taala kheyraadkii dowlada soomaaliyeed inta uga badan ayaa yaala waxa kaliya mesha yaala waxaa waaye sidee u heli lahaayeen xuquuq siyaasi ah dadka ku nool marka in loo nidaamiyo sida guddiga soo jeediyey "option" ka 1aad oo ah in ay noqoto caasimad federaal ah isla mar ahaantaas xuquuqdii siyaasiga ah ay yeeshaan dadka ku dhaqan magaalada mugdisho ayaan soo jeedin lahaa hadey culees ku noqoto dadka magaalada mugdisho degan oo aysan jecleyn mugdisho in ay caasimad sii ahaato caasimada federaalka dowlada soomaaliyeed waa in la keenaa "option" kale oo laaga wareejin karo hadii kale waa in ay ahaataa magaalada

caasimad soomlida isiman islamar ahaantaa xuquuqda siyaasiga ah dadka degan sigaar ah ay udhowrsanyihiin.

Qodobka 65aad wuxuu ka hadlayaa iskaashiga dowlada dhexe ee federaalka ah iyo maamul goboleedyada ee maba'di guud ayuu ka hadlayaalakiin kama hadalayo "mechanizam" iyo qabkey uwada shaqeyn lahaayeen qodobkii hore ee la bedeley wuxuu sheegayey in si sanadla ah ay ukulmaan madaxda dowlada federaalka ah iyo madaxda dowlad goboleedyada tiina waa laga sarey waxaan soo jeedin lahaa in qodobkaas dib loo soo celiyo isla qodobka 65aad faqrafiisa 5aad waxay shegeysaa in baarlamaanku uu soo saari doono xeer abuuri doona gudiyo dejin doona habraacyada ay isku kaashan doonaan maamul goboleedka iyo dowlada dhexe.

Markaan ka hadleyno labo "structure" ee dowladood oo wada shaqeynaya in dastuurka arintaa si u xeyriyo ayaa fiican in hoos loo dhigo in qaanuun ama "act of parleman" halkaan aynu ku ansixineynaa in uu hadhow jaan gooyn doono qabkeey uwada shaqeynayaa in taa laga daayo hoos ayu udhigno xeer Dastuur qawaniin dastuur waa in ay arintaan nidaamiyaan.

Qodobka 68aad golaha wakiilada maamul goboleedyada waxaa la yiri yaaney dhaafin tiradooda 99 xubnood waxaad ogaataan qaar baa labo gobol ka koobnaan doona qaarbaa in kabadan ka koobnaan doona ee qaba'il kala kala gedisan iyo shucuub kala gedisan baana ku noolaan doonta waxaan jeclaan lahaa saqafkaa loo jarey 99ka kor looga qaado oo yaaney dhaafin tusaale ahaa 120 xubnood ama 130 ama 150 intii ka hooseeysa xurbey uyihiin cidii sameysan karta oo 60 ka dhiganeysa lakiin waxaa hadhow aqabad noqon kara maamul goboleed ka kooban afar gobol iyo mud ka kooban labo hobol in aad ku xadido labadaba tiradoodii golayaasha wadaag 99 xubnood.

Tan udanbeysa ee aan ka hadlayo waa mid arin guud ah waxaa waaye faragelinta dowlada federaalka ah ay ku sameyn karto maamul hoboleed oo halkaana xildhibaano ka ahadleen waa in ay qeexanaataa hadii tusaale ahaan midnimada qaranka ay halis gasho tusaale ahaan hadii masiibo ay waxba ka qaban karin maamul goboleedyadu ay ka dhacado hadii tusale ahaan nidaamka dastuuriga ah ee dalka uu halis galo waa in ay cadaadaan goorta ay maamul goboleed ku sameyn karto "interfention" ama faragelin isla mar ahaantaa uu ahaadaa aqalka sare cida ogolaaneysa faragelin Asalaamu caleykum waraxmatulaahi wabarikaatuh.



**Xil. Dr. Mohamed Hassan Mohamed**

Mudane Gudoomiye,gudoomiyaal xildhibaanada sharafta leh,waxaan rabaa runtii habsami u socodka dooda oo aad u socoto inaan u hambalyeeyo labada gudi iyo labada aqal ee dastuurkaan isku howlay dhameystirkiisa ka shaqeyntiisa iyo shacabka in uu helo dastuur dhameystiran.

Waxaan rabaa dhowr qodob inaan taabto oo kamid ah Qod 62aad "Dhismaha dowlad goboleedyada iyo soohdimaha" farqadiisa 5aad "dowlad goboleedku wuxuu ku midoobi karaa labo gobol sedex,ama afar iyo wixii ka badan"qodobkaas hadana si toos ah wuxuu ugu hor imaanayaa qodobka kale ee caasimadda iyo maqaamkeeda oo loogu talagalay asagana asoo hal gobol ah in loo kala dooro in uu maamul noqdo.

Waxaan soojeedinayaa qodobkaa in halkaan lagu badalo ama laga dhigo sida xildhibaano badan oo iga horeeyeen ay qabaan,dowla goboleedka gobol iyo wax ka badan ayaa lagu aas aasi karaa qodobkaas waxaan is lee yahay wuxuu mataqaanaa labada qodob,marka laga hadlayo dhismaha caasimadda ayey u saamaxaysaa in si toos ah isku qaataan.

Qodobka 2aad waa qodobka caasimadda ee labada farqo loo kala qaaday inay federaalka hoos timaado iyo in maamul goboleed caadi ah laga dhigo oo caasimaddii ah,waxaan qabaa runtii qodobkaas iyaduna gobolka banaadir waxay ahayd muddo dheer wax laga doodi jiray maqaamkeeda maantana waxay soo gaartay meel golihii shacabka labadii aqalka inay u fadhiyaan inay manta go'aan ka gaarayaan.

Go'aankaas waa go'aan masiiri ah waa meeshii runtii noloshayda in badan aan ku soo qaatay, Hilwaa ayaan ahaa gobolkaan waxaan is lee yahay gobolka banaadir caasimad ahaan waxa uu mudan yahay xuquuq maamul goboleed in loo sameeyo, kaas oo muhiim ay tahay qof waliba oo inaga mid ah oo "representation" ka ah sida uu sheegay wasiirada iga horeeyeen wasiir Bashiir Goobe iyo guud ahaan xildhibaanada kale ee sheegeen waa inay noqotaa "screen" caasimadeed oo qof waliba iska arki karo soomaaliyeed.

Ayna u lahayn dad gooni ah mataalad, haddii maamul goboleed caasimaddii ah ay noqonayso ayna xaq uleedahay runtii,qodobkaas in sidaas iyadana loo dhigo ayaan soojeedinayaa ugu dambeyn waxaan lee yahay, dastuurka waxaan ku darsanayaa kolley caasimaddu qodob xil Maxamed Haaruun oo sheegay ayaa jira 10kii sano mar in labadalo taas dalka ayey hormarinaysaa. Haddii laga dhigo caasimadda maalinba gobo lama xitaa Waqooyi iyo Galbeed laga kala dhigo waxay soo kordhin kartaa arimo wanaagsan oo dhismaha dalka horumarinaysa keeni karta midnimada qodobada ugu waaweyn waliba waxaan soojeedinayaa in laga dhigo caasimadda soomaaliya meeshii ahaan jirtay Boorama ama Awdal marka labaad ee xigta in halkaan naloo geeyo, Si Waqooyi iyo Soomaaliya ay usii midoobaan,waad mahadsantihiin.



**Sen. Abdikani Gelle Mohamed**

Mahadsanid Gudoomiye. Bissmillahi Raxmaani Raxiimi Alxamdullolahi Rabil caalamiin wasalaatu calaa sayidinaa wasalim.

Awal Alle ayaan u Mahadcelinayaa, Bacdallaahi waxaan u mahadcelinayaa Gudiga madaxa banaan iyo Guddiga kale oo baarlamanka ka soo shaqeeye hooshaan aad baan ugu mahadcelinayaa.

Madaama waqtiga uu koobanyahay ciriirina yahay waxaan rabaa inaa toos u guda galo.
Qodobka 61 aad ee ka hadlay heerarka dowladda, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka koobantahy saddex heer dowladdeed oo kala ah; Dowladda federaalka ah, Dowlad goboleedyadda iyo Dowladdaha hoose, Dowladda hoose iyo Dowlad goboleedka masaafo dheer baa u dhaxeesa in heerarkaa afar laga dhigo baan qabaa, heerka gobolka in lasoo geliyo baan qabaa haddii kale lagu celiyo in laga dhigo dowlad goboleed iyo dowladda dhexe kaliya labadaa in laga dhigo oo laga saaro dowladdaha hoose meshaas, dowladdaha hoose marwalba waxa ay hoos tagayaan Meesha ay hoostagi jireen iyo wasaaraddahooda marna ma madax banaan karaaan , waxaan qabaa marka in labaddaa mid naloo kala dooro oo aynu qaadano kii inoo wax tar roon oo ah, Dowlad goboleed iyo dowladda dhexe.

Isla qodobkaas Farqadiisa 2 aad dowlada federaalka ah waxey waajibaadkeeda u guduneysa si waafaqsan Dastuurka federalka ah, halka dowladd goboleedyada ugu danayaan si waafaqsan Dastuurka federalka ah, Dastuurka dowllad goboleedka iyo xeerarka kale. Dastuuradda waad ogtihiin Dastuurka federalka ah iyo Dasaatiirta ay heystaan dowlad goboleedyada wee is khilaafsan yihiin sidaa daraateed hadii mid walba la yiraahdo waajibaadka waxee u gudaneysaa si waafaqsan dastuurka waajibaad keeda  waxaa imaanaya iska hor imaad. In dastuurada iska horyimadaan, mid walbana dastuurka anisixeye waa jibaadkiisa. Waxaan qabaa kaasna in laga dhigo dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada waxee waajibaadkooda u gudanayaan si waafaqsan dastuurka dowladda federaalka Soomaaliya oo laga saaro waxa dheeriga ah oo Meesha ku jira.

Waxaan sii xusayaa qodobka ku yaala in uu yahay ayaan u maleenaya; majiro gobol gooni isu taagi karo inta uu gobokale ku biiraayo kaas marka dib baa u dhiganayaa munaa sabadiisa la suganayaa. Iyo waqtigeeda hadii alle idmo.

Waxaan ka hadlayaa 63 aad oo ka hadlaya Caasimadda, ee maqaamka caasimadda, gobol caasimad ah oo hoos yimaada dowladda federaalka ah iyo xulashada kale oo labaad oo ah caasimad dowlad goboleed ah. Waxaan rabaa midda kowaad inaan ku hormaro oo ah Qodobka 4 aad heerka doorashooyinka federaalka ah waa inuu siiyaa muwaadiniinta degan magaala madaxda xad ay ku dooran karaan wakiilo ku matala golayaasha baarlamaanka dowladda federaalka Soomaaliya.

Golayaasha Baarlamaanka Dowlada fadaraalka, waa labo heer, sida aanu naqaano, Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare, hadaad marka uwadaan, aqalka shacabka hadaad u jeedaan, 275 xubnood oo sumad le weeyaan, waxe ku yimaadaan hab beeleed bey ku yimaadaan, meesha aad ka keeneysaan oo ka nusiseen, baa idinka rabnaa inaa noo faafahisaan,275 xubnood oo beelo leeyihiin sida halkaan uga soo bixi karaan, Golaha Shacabka sida uga imaan karaan ama looga reebi karo taas waxaan u baahanna hay faa faahin, hadii u jeed kiinu ay tahay, Aqalka sare waa iney matalaad ku yeeshaan hadaad ka wadaanna waa run, Gobolka Banaadir xubnaa ka maqan, marka xaqiiqda laga hadlo, 18 gobol ayaa Soomaaliya wax loo qeebiyay, gobolkaani maheysto, kuraastii xaqa uu ulahaa, taa markaa intaa kaga gudbo.

Waxaan rabaa inaa qeebta labaad ugudbo, oo ah Caasimad Dowlad Goboleed ah, Muqdisho waxaanu ognahay Caasimadii Soomaaliya iney tahay, muran badan kama jiro, waxaan ognahay dhaqaalihii Soomaaliya Cadaan iyo Madow, Gaal iyo Islaamba meelkasto ka yimaado inuu halkaan yimaado, oo halkaan ka soo dago, waxaan ognahay Dowladda heerar keedi kala duwanaa oo dhan iney daganyihiin, waxaan ognahay Gudoomiyaha Gobolku inuu leeyahay maqaamka madaxda "stad" yada oo kale, mararka shirarka ay iskugu yimadaan inuu kursi ku leeyahay, waxaad moodaa in ay wax badan oo hadda aan xusin iney heysato allaha u siyaadiyo, culeyskedana way heysataa.     Laakiin waxaa rabaa ninbaa sac lahaayo, sagaal guji ayuu ka maali jiray, koonbadii tobnaa guji kaga day, sagaalkii bay daadisay, waxaan leeyahay wax badan bey heysataa caasimaddi, ismana saar naan karto Caasimad Dowlad Goboleed ah, nin baa han duu waxuu arkay gantii geed buu ku arki ganihiina geed buu ku arki, si leys ku waa fajin lahaa baa loo baahan yahay, Caasimaddi way ahaaneysaaa Dowlad Goboleedna way noqoneysaa qofkii hadda isasaaraa iga cilmi badan, aniga waxaan is leeyahay suurad gal ma noqoneyso, anigu wax u diidaneyn, waxaan leeyahay Banaadir waxaa ka maqan ku raas ay Aqalka sare ku

laheyd, waxeyna kaga maqan yihiin "stad" yada qeeb ka mid ah, halooga soo celiyo, xaqeeda si ay u hesho haloo soo celyo, laakiin kuraas kaloo dheeri ah meel laga keenayo uma leen maayo iney jirto, intaa intasaa uga gud bayaa, waxaana rajaxayaa iney noqoto Gobolka Banaadir Dowladu dagantahay, war keygu sidaas buu u cad yahay.

Qodobka 65 oo oranaya ishkaasiga u dhaxeeya heerarka kala duwan Dowlada Jamhuriyadda fadaraalka Soomaaliya waa iney dhowraan u hogaan samaan dastuurka Soomaaliya iyagoo aan isa siineeynin awood ka bax san midda uu dastuurka siiyay, halkaas waxaan oran lahaa hadii ay san jirin awood hada lagu maamuli karo xul ah, ama aysan jirin sharci, hada la isku waafaq san yahay aad ogtahay in qilaafaad badan uu jiro, waxii halkaan manta hada laga yiraahdaa, hirgalin bay naga rabaan oo doonayaan, iyada laftigeeda waxa ay u baahan tahay, in lays waafajiyo in layiraahdo waxii aan waafaqsaneen dastuurka Dowlada federaalka in laga dhigo ayaan qabaa qodobkaasna.

Qodobka 53 oo ku qoran waxuu lee yahay, xukuumada federaalka marka ay wada xaajood galayaan gaar ahan saameenaya dowladaha ay quseeso, xubin ka ah dowlada federaalka, irgada wadaxaajoodka galeysa waxaa kaabaya wakiilo ka socda, dowlada federaalka waxaa rabaa kaabaya in laga badalo, oo lagu balado, waxaa ka mid noqonaya kaabidu waa caawin, halkaa marka awoodii dowladaha stateyada ka maqan kaabin waa cabin, marka waxaa ka mid noqnayo in layiraahdo wakiilo matalayo dowlaha xubna ka ah.

Qodobka 67aad waxa uu oranayaa, qodobkasta oo ka mid ah dastuurka dowlad gobaleedyada oo aan waafaqsaneen dastuurka federaalka, waxa uu noqonaya wax kama jiraan, dastuurka stateyada waxaa kamid ah oo ku qoran waxaan dastuurka ku jirin waxay ku saleeyeen baahidooda, waxaa qabaa in halkaa laga dhigo, qodob kasto oo kamid ah dastuurka dowlad gobaleedyada, oo aan waafaqsaneen dastuurka dowlada federaalka isla markaas wax u dhimaayo midnimada iyo dowladnimada in lagu daro qabaa, isla markaa wax u dhimaayo midnimada iyo dowlidnimada waxuu noqonaya wax kama jiraan.

Isla qodobkaas tirada xubnaha olalaasha iyo wakiilada dowlad gobaleed kasto, waa in aysan ka badnin 99 xubnood dowlad gobaleedyada, iyagaa baahidooda inaga og, hoos waxa lagu sii si loo hubiyo dhamaan dadka ku nool dowlad gobaleedka, in ay helaan matalaad hadii 120 jifo ay dagan yihiin oo ay 99 ku xadiday yaasiinayo marka kuwa kale, haray xaquuqdooda mise dowlada ayaa mushaar siinaysa, ani waxaa qobaa qodabka 99 ah in laga saaro mesha, in la yiraahdo waa in dastuurkooda ku xadidaan, inta ay yeelanayaan hadaanan mushear la siinaynin, cida mesha dagan aan ka warqabin, in tirade loo jaagooyo aniga maqabo, waxaa qabaa 99 in mesha laga saaro iyaga baahidooda iyo daaadood ay ku nool yiihiin og, in loo daayo qabaa, aad baa u mahad santihiin salaamullah calaykum warax matullah.



**Xil. Adan Mohamed Ali**

Horta halkaan marka la imaado waxaan matalaynaa shacabka Soomaaliyeed waxana fiican inaan ku matalno waji qurux badan iyo akhlaaq oo qofka isagoo xor ah uu imaado, waxaad ogaydeen in halkaan lagu jeexjeexay buugaagtan oo ah hanti qaran waayo waxa lagusoo daabacay cashuurta ummada Soomaaliyeed, waxay kamid tahay adeegyada aan ummada u

hayno in lagu ciyaarana ma mudnayn marka waan ka raali galinaynaa cidii samaysay waanan ka xunnahay. Intaas kadib mudane guddoomiye iyo dhamaan xildhibaanada sharafta leh ee labada aqal hadaan u daadago qodobada aan aragtida ka qabo. Qodobka 61aad waxaan soojeedin lahaa xildhibaankii iga horeeyay ayaa soojeediyay oo waxaan la qabaa in A iyo B kaliya laga dhigo oo laga saaro Dawladaha Hoose waayo waxay hoos imaanaysaa Dawlad goboleedka marka waxaan qabaa in C laga saaro.

Qodobka 62aad waxaan soojeedinayaa in la qaato xulashada koowaad oo ka hadlayso caasimada ah sababtoo ah caasimada ayaaba sharaf ah, wax kaloo intaas ka wayn oo loo raadinaayo maba jirto marka waxaan qabaa in la qaato xulashada koowaad laakiin loo sameeyo faqrado kale oo dadka deegaanku ay ku heli karaan xuquuq buuxda haday ahaan lahayd Golaha shacabka iyo haday ahaan lahayd Aqalka Sareba oo aan horey laga tixgelinin in la siiyo, waxaan soojeedinayaa marka in halkan caasimadii ummada Soomaaliyeed ah oo ummadoo dhani ay ku nooshahay in muhiimad gooni ah la siiyo oo xuquuqdooda ay helaan dadka degan magaaladan guud ahaan inkastoo shacabka Soomaaliyeed dhamaantood ay deganyihiin hadana dadkii asal ahaan lahaa ee joogay inaan lagu dulmin oo xuquuqdooda ay helaan.

Qodobka kale oo ka hadlaayay go'aan ka gaaridda Aqalka Sare ee Dawlad Goboleedyada. Waxaan isleeyahay Aqalka Sare hada ayaanan looba dhamayn, waayo gobolna kuma dhisna qabiilna kuma dhisna marka waxaan soojeedinayaa in goboladii 1991dii lagu jaangooyo ama nidaamkeena aan wax ku qaybsano ee 4.5ka. Hadaan usoo laabto go'aan ka gaaridana in sidii hore ee dastuurka ay uugu qornayd oo ahayd inuu baarlamaanku go'aanka ka gaarayo loo daayo ayaan qabaa ama si kale loo dhigo, marka waxaan dhihi lahaa tan hada waxaa ka imaan kara cadaalad daro oo Aqalka Sare sida Gollaha Shacabka uma dhisna waana lagu kala badanyahay, aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Abdulkadir Omar Moalim**

Mahadsanid guddoomiye, bismilaahi raxmaani raxiim guddoonka baarlamaanka oo ugu horeeyo gudoomiyaha iyo xildhibaanada sharafta leh, guddiga dib u eegista dhamaan asalaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu. Salaam ka dib waxaan rabaa inaan sii gudda galo doodayda oo aan ka sii amba qaado qodobka 61 aad, qodobka 61 aad wuxuu sheegayaa sida xildhibaanadii iga horeeyey ay sheegeen saddex heer waxaan qabaa anigu in laba heer lagu soo koobo sidiisaba, labada heer ee dawlada federaalka iyo dawlad goboleedyada.

Qodobka 62 aad faqradiisa 2 aad wuxuu sheegaayaa golaha aqalka sare ayaa go'aaminaya dhismaha dawlad goboleedyada maadaama uu metalo. Meeshaas waxaan qabaa in la yiraahdo baarlamaanka jamhuuriyada federaalka sababtoo ah hadda maamul goboleedyadii horta way dhismeen wayna dhisan yihiin intooda badan. Waxaan rabnaa sharciga ama qawaaniinta halkana laga dejiyo inay dhaqangal ay noqdaan, si ay dhaqangal u noqdaan waxa xaqiiqda jirta ee dalka taala iyo waxa aan ka shaqaynaynaa horta inay is waafaqsanyihiin, waxa la iswaafajin karaa baarlamaanka jamhuuriyada federaalka Soomaaliya halkaas oo ay taalo gobanimada dalka. Faqrada 5 aad ee dhahaysa laba gobol iyo wax ka badan ama saddex ama afar, haddayba ku dhisnay laba gobo iyo wax ka badan. Maamulada qaar sida lagu dhisay la ogyahay sideen

isku waafajinaynaa waxa aan qaanuuniyan ama aan sharci ahaan deginayno iyo waxa ka jira dalka maamul hadda jira inaan dib loogu noqonayn inuusan jirnin ama aysan dhacaynin anu ognahay.

Qodobka ugu muhiimsan ee dooda maanta uu yahay qodobka 63 aad ee maqaamka caasimada waxaan rabaa qodobkaa intaan sii galin horta inaan wax yar muqadama ka hormarsadoo saaxiibada haddiyo jeeraale u dooda maqaamka caasimada. Caasimadu waa caaasimada ummada soomaaliyeed dad gaarihi inay adeegsadaan waxoogaa waa laga roon yahay xildhibaanka halkaa soo istaaga ee aragtidiisa dhiibta in aragti kale lagu laqmiyo, shalay bay ka dhacday halkan in xildhibaano, xildhibaan aragtidiisa dhiibtay ay kaliya isaga u jajawaabaan taas waxaa rabaa muqadamada.

Halkan waxaa taala laba xulasho xulashada 1 aad gobol caasimad ah oo hoosyimaada dawlada federaalka iyo xulashada 2 aad caasimad dawlad goboleed ah. Tusaale markaan u soo qaadano natiiijada latashiyada ay soo sameeyeen guddiga iyo aragtidii laga uruuriyey maamul goboleedyada iyo gobolka Banaadir chapter ka ku yaala page ka 35 aad waxay ku soo ururiyeen natiijadii ka soo baxday latashiyada. Waxaana ugu horeeya gobolka banaadir natiijadii laga qaaday, waxay sheegaysaa gobolka banaadir natiijadii la tashiyada laga qaaday 52% inay u codeeyeen gobol caasimad ah oo hoosyimaada dawlada federaalka. Gobolka labaad ama maamulgoboleedka labaad ee laga codeeyey waa galmudug 53% ayaa latashiyadii lasoo ururiyey natiijadii noqotay in aragtida 1 aad la qaato. Koonfur galbeed 61%, Hirshabeele 41% tusaale ahaan wadarta guud 49% in aragtida 1 aad la qaato waxaa jira aragtiyo dhahaaya ama saaxiibada sababaynaaya in caasimad dawlad goboleed ah la qaato.

Maxaa keenaaya ina caasimad dawlad goboleed ah la qaato, waxaa keeni kara oo ay ku doodayaan ama doodu ay noqonaysaa in maamul ama metalaad ay hesho caasimadu, caasimadu labada aragtiba metalaad way ku helaysaa horta midna ku wayni mayso. Laakiin gobol marka la metalaayo horta sharciyan horta gobol ahaan inuu metalo yaytahay dastuurka waa ku qornaa waa aqalka sare caasimadu marnaba weyni mayso inay metalaad hesho in la qaato labada aragtiyood midkood caasimadu hadda waxay haysataa maqaam ay haystaan maamul goboleedyada hadday shirar noqoto, hadday go'aan noqoto, hadday talo noqoto. Caasimadu hadda waxay gobolada kala simantahay "resource sharing" ka 40% ay wada qaataan maamul goboleedyada iyo maamulka gobolka Banaadir ama caasimada hadday kala simantahay, wax loo raadinaayo maahan wax loo baryayey maahan wax ay u daba taagan tahay maahn haday kala simatahay, iyadu waxay dheertahay intaas dawladnimadii soomaaliya ayaa yaala caasimadan gobolka banaadir. Maamul goboleedyadiina haday kala simantahay waxwalba oo xuquuqa oo ay helayaan haday la simantahay iyadiina ay u dheertahay inay yaalaan "infrastructure" kaabayaashii iyo balayiintii deeqaha dalka soo galaayey ay halkan ku dhamaanaayeen.

Tusaale ahaan hadaan tusaale yar soo qaado "budget" keena dawlada 80% intuu ku baxaa caasimaduu ku baxaa haday amni tahay iyaduu ku baxaa, qaar ayaa waxay sheegayaan xamar ayaa cashuur laga qaadaa sax waa laga qaadaa laakiin xamar maxay ku beddelataa tusaale aynu soo qaadano. Xamar intaysan nabad noqonin ama maamul la'aan ahayd ama aysan dawladu joogin "Greenland" wax layiraahdo ayaa magaalada kala dhexyaalay reeraha joogay iskuma gudbayn. Laakiin xuquudan iyo horumarkan iyo bilicdan waxay ku heshay in caasimada ummada soomaaliyeed ay noqoto taasi ayaana keenaysa horumarkan ay gaarto anaga waan

ogolahay caasimada inay hesho metalaad oo la hubo cid diidaysana malahan. Aniga fikirkaygu wuxuu ku cadyahay waxaan qabaa faqrada 1 aad ee ah gobol caasimada ah oo hoosyimaada dawlada federaalka, oo uu helo metalaadii uu mudnaa gobolka banaadir. Waa mahadsantihiin guddoomiye waa ka baxay.



**Sen. Muuse Sudi Yalahow**

Bismillahi Raxmaani Raxiim, Alxamdullilaahi Rabil Caalamiin mudan guddoomiye guddoonka labada, baarlamaanka labada aqal, guddiga dastuurka madaxabannaan halka baarlamaanka wixii joogo Asalaamu Caleykum.

Mudana guddoomiye Salaan Ka bacdi waan ku faraxsanhay imaatinkaaga baarlamaankana jawigiisa waan ku faraxsanahay, hool badan aa la qabtay diyaarna waan u nahay, waxaa soo haray waxbadan uma soo istaagin xillibaanada qaarkoodna warkooda waa ila fiican yahay, qaarna warkooda xaqiraad aan ka arkaa, anaka dowladd gobleed aan abid shariif, gobolkaan banaadirna waala wada daganyahay koonfurgalbeed aanan waxba ka sheegin abid keey, sidey isku dhiseysana madiidini Galmudug aan wax ka sheegin hirshabelle aanan wax ka sheegin, jobolland aanan wax ka sheegin wixii kale oodhan aanan wax ka sheegin, cid aan ka baryeeno mijirto governa tore-na hadaan leenahay, waa joogyaa shirka maxaa loo qabtaa hadii governatorana la leeyahay ha ahaado, guddoomiye ii sheeg, guddiga dastuurka maxay u qabteen governatore waaba joogyaabee muungaabaa ah, hadaan la dhaafsiin Karin wixii dadka kale u qabo haduusan haleynin maxaa dadka loo hool beelshay, gobolkaan dadka lagu xaqiro laguma dulmiyo waala wada leeyahay, mawaxaa loo diidan yahay magaca hadii hogaamiye la dhahayna hogaamiye nimadii, hadii governatoore laga wada dhigaayana gover natoora nimadii, hadii kale magacya kaloo la mid ah magacaha kale maxaa loogu qasbaa oo gobolkaan loogu qasbaa, hada wiilkaas waa koonfurgalbeed madaxweynihii koonfurgalbeed ayaa soo dagay waxaa soo dhaweyhaa guddoomiyihii gobolka banaadir, maxaa leyskugu qasbaa asaga ugu darnaan maa guddoomiye waaan ogahay koonfurgalbeed dadkaan ugu jecel nahay kulligood war ay isasoo dhaheen ayaa Meesha ku jiro runtaan sheegaa waa soo tashadeed, guddoomiye anaku matashano lakiin waxaa dadka simaaayaan rabnaa dadka in lala simo kaliyaan rabnaa.

Waxaa la leeyahay madaxweynihii cali guudlaawe aa soo dagaa governtoorihii gobolka banaadir aa soo dajinaa intasoo xaqiraad ah maa nalagu siinaa, guddoomiye dastuurkaan waxaa koow iyo laba loogu qoray waa in aan kowna ka gudubno labana aan tagno, xuquuq dheeriyana kuma rabno dowladu waxa ay hada hesho ha hesho lakiin magaca kaliyaaan ku rabnaa asagaas naanan naloo diidin cidii noo ogalna waa ku mahadasanyihiin, inta noodiidanna waa ku mahadasanyihiin lakiin waxaan ka rabnaa iney codka noo ogolaadaan Aalaamu caleykum.



**Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud**

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka labada aqal, xildhibaanada sharafta leh iyo hawlwadeenad, hay'addaha amniga asalaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu, salaam ka dib runtii waxaan sigaara u mahad celinayaa guddiga dastuurka gaar ahaa kuwa labada aqal iyo kuwa madaxabanaan hawsha adag ee ay qabteen iyo guddoonka labada aqal oo runtii masuuliyad iska saaray.

Waxaan rabaa intaanan guddagalin qodobkaa inaan qodobo dhawra cadeeyo oo gudoomiyaha qaar ka mida ku bilaabay hadalkiisa. Muhiimada waxaa waaye dastuurka marka laga hadlaayo oo aan rabno inaan dastuurkan inaan ka doodno ansixino guddoomiyaha wuu sheegoo wuxuu yiri 800 oo ergo in ka badan ayaa ansixisay, 800 boqolna waxay u xilsaaratay labada aqal ee maanta joogta. Labada aqal ee maanta joogta iyaga kaliya ayaa xaq u leh inay dastuurka cusub ay samayso dastuurka qodobo kamida wax ka beddesho ama cutubyo ka mida wax ka beddesho. Raga odoyaasha ah maanta shirka barita iyo wixii ka danbeeya u bilaabandoonana iyo raga kale ee iyagana xildoonka ah ee musharax madaxweyne ah iyo madaxweynaha jamhiiriyada soomaaliya gebigoodaba maalin bay sharaxnaayeen hal waxbay na weydiisteen oo ah walaalayaalow na doorta ama idoorta waxaan qabanayaa dastuurka inaan dhamaystiro.

Macnaheeda hadalkaa markay leeyihiin waxay qirayaan cida dastuurka laga codsanaayo inay tahay cida xaqa u leh inay dastuurka inay iyadu ka haddasho, mida 2 aad waxay tahay halkani waa halka ay ku midaysan yihiin Soomaali Maxamed oo idil ma dhahayo laakiin beelaha inta ugu badan ee soomaaliyeed ay kuwada jiraan. Qalad hora lagalayoo aqalka saraa waxaa lagu qaybsaday maamul goboleed iyadoo maamul goboleedyadu wada sinayn oo cidi labo leedahay cidi hal leedahay cidi saddex leedahay cidina wax lahay. Ma rabno markaa inaan qaladkale galno oo dastuurkii ummada ka wada dhexeeyey ee "social contract" ahaa in laba qolo oo tan iyo lixdankiiba iska haystay in iyagii loo celiyo oo hadda la yiraahdo teendhada ha loogu geeyo ama xalane haloogu geeyo berito wax la aqbali karo maaha.

Guddoomiye taariikh ahaan marka la fiiriyo wakhtiyada dhaw waliba baarlamaanka waxuu xaq ulahaa baarlamaankii 9 aad oo aad ka mid ahayd in qodob laga beddelay oo laga saaray oo madaxweynaha inuu kala diri karo, baarlamaankii ayaa istaaga oo qodobkaasi waa la tiray waana fulay. Baarlamaankii 10 xildhibaana anaga naga mida xildhibaan saabir iyo xildhibaan xasan macalin ay kamid ahaayeen xasaanada laga qaadi rabay baarlamaanku isagaa u istaagay oo yiri sida guddoonka xilka looga qaadayaa baarlamaankana xubintiisa looga qaadayaa. Waxaa jirtay guddoomiye bangiga in la ga dhigay qo ajanabi ah baarlamaanka waaye cida diiday oo ka hortagtay waana fulay, waxaa jiray sidoo kale isla dastuurkana hadeerto aan ka shaqaynayno baarlamaanka hadda markaan furnay waxaan ansixinay in shan sano muddo xileedka baarlamaanka uu yahay ma arag xildhibaan ka hadlaaya arrintaas balse jaanibka kale ee walaalaha naga aragti duwan ee iyagu ansixiyey qaybna ka ahaa ayaa maanta waxay u ololaynayaan ee ay leeyihiin baarlamaankii ay ka tirsanaayeen inay diidaan waxyaabaha iyagu ansixiyeen.

Baarlamaanku ma noqonkaro ama dastuurka ma noqon karo ama xeerkasta oo dalka laga soosaaro ma noqon karo ( afa tuminuuna bacda kitaabi wa takfuruuna bi bacdi) qaarna in la

qaato qaarna in la diido wax la aqbali karo maaha, waa in si toos ah loo wada qaataa, cida leh markaa masuuliyada oo aan rabno inay masuuliyada si toos ah u qaadato oo aan rabno inaan ku garab istaagno waliba si cod dheeri ah inaan ku garab istaagno waa guddoonka baarlamaanka, baarlamaanka wuxuu yaalayaa halka aad dhigtaan. Haddaad baarlamaanka maanta rabtaan oo aad ragas u gaysaan micnaha baarlamaankii magaciisa iyo muunadiisa iyo haybadiisa idinkaa dilay. Haddaad soo istaagtaan madaxweynaha wuxuu u taagan yahay inuu ilaaliyo sharciga dastuurka oo hooyo u tahay, waa in isaga lagula xisaabtamaayo waxa halkana aan laga ansixinin uu isagana saxiixay waa wax lama taabtaan ah oo dib aan loogu noqonayn madaxweynaha waa in taasi loo sheegaa xukuumadana waa inay taas ku dhaqantaa.

Hay'addaha caalamiga ah ama "international community"-gana waa in loogu dhibciyaa dhagaha dawladahooga waxay ku dhisan yihiin "institution" ayaye ku dhisan yihiin oo hay'addo baarlamaani ah, hay'adahooga baarlamaanka inay ixtiraamaan iyaguna waa nay ixtiraamaan hay'adda baarlamaanka soomaaliya ay leedahay. Xildhibaanadeena wacyigeena waa inaan furnaa awoodeena ayaan si majaam ah inta isga bixinay caro kale oo nala mida ama u dhisan qaabk aan dhihi karo qaabkii 91 dii u burburnay ee saddexda sadexda xadhkood ah u dhisan ayaan rabanaa awoodii maanta inaan ku wareejino si majaam ah.

Markaa guddoonka waxaan kula dardaarmayaa maanta hal shay ka tega halka shay eed aad ka tagaysaan waa "legacy" baarlamaankii 9 aad waxaa la dhahayey baarlamaankii guddoomiye jawaari, lama sheegaynin Mahad Cawad iyo rag kale lama sheegaynin baarlamaankii tobnaan waxaa la sheegayey guddoomiye Maxamed Mursal. Baarlamaanka waxaa la sheegayaa guddoomiye Aadan Madoobe waa inuu noqdaa baarlamaankii guddoomiye Aadan Madoobe wuxuu ka tagay "legacy" ah dastuurkii inuu wax ka beddelay dhamaystirayna uu noqdo. Intaas haddayna ahayn guddoomiyow cidkalaan xilkii iyo wixii ku wareejin yaan la is daalinin ummada soomaaliyeed 329 xubnood cashuurtooda yaan cunin mishaarkooda yaancunin aan iska fasaxno, shanta golaha sare, shan yar ah iisheegin dalku ha iska noqdo waa tashan jirteene ha taliyaan intaas aan kaga baxo qodobkaas.

Qodobka aan ka hadlaayo ee dhanka markaa u soo laabto qaab dhismeedka dawlada ama heererka "level" ka uu yahay waxaan la qanaa qolooyinka afarta soo jeediyey saddexda hala baddelo oo qaybta gobolka ha lagu daro. Qaybta kalee xigta ee looga hadlaayo maqaamka, maqaamka runtii raga qaarkood waxay ka fiiriyeen xaga isbalaarinta juqufaafikal aduunyada, laakiin isbalaarin "demography" ayaa dhici kara oo micnaheedu yahay "politically" xamar ama muqdisho markii laga hadlaayo soomaali Maxamed way u wada dhaxaysaa cashuurtoodii ayaa ku wada jirta waxaa weeyi dhaqaalahoodii ayaa wada yaala, haddana waa iany mudnaan jirtaa dadka asal ahaan ka soo jeeda waa in mudnaan gaar ah la siiyaa ma diidanin caasimada inay maqaam noqoto way nadhibaysaa in la yiraahdo gudoomiyaha gobolka Banaadir ayaa wuxuu soo dhawaynayaa sida xaaji Muuse sheegay madaxweynaha hebel waxaan rabnaa "the same" xuquuq uu maamul goboleed leeyahay oo madaxweyne aad u bixiseen oo hadeerto hogaamiye loo beddelo oo layiraahdo hogaamiyaha ayaa wuxuu soo dhawaynayaa hogaamiyaha.

Laakiin waxa meesha ku jiraa waxa weeyaan waa maamul goboleed ama Banaadir State ay soomaalida oo dhan iska aragto oo xuquuq ay kuwada leedahay iyadoo mudnaan la siinaayo dadka asal ahaan ka soojeeda "not only" dadka degan arrinta kale eek u saabsan awooddaha dawlad goboleedyada dawlad goboleedyada aduunka ee aan idhaahdee xuduudaha, xuduuda hadda noo taala "reality" markii laga hadlo waa xuduud qabyaaladeed waaye maaha xuduud

juquraafi maaha. Waxaa kuu cadaynaaya waxaa weeyi Galmudug ayaa waxaa la yiri gobol iyo bar macnaheedu maxaa waaye xuduuda gaalkacayaa la kala jaray ma waxaa loo kala jaray juquraafi kali looma kala jarin waxaa loo kala jaray waa la soconaa xuduudaasi iyada ah ma ka talaabi karnaayoo federaal la fahmi karo oo dadka si juquraafi kali ah waxaa weeyaan xuduudaa u dhaxayso miyaa waxaa weeyaan qaadan karnaa mise hadday tahay midan hadeerto laga halaayo oo "demography" ah ama qabyaalada ku salaysan ha la iska daayo haloo celiyo 18 kii gobol, gobol kastana waxaa weeyi dad ayaa wada degan 18 kii gobol hala qaato naga daaya laba gobol iyo kabadan iyo saddex iyo gabigeedaba waxaa weeyi meesha halaga "cancel"-lo.

Mida kale marka lagu salaynaayo qodobka kalee ku saabsan tirada 99 miyey noqonaysaa todoba miyey noqonaysaa cid waliba waxay rabtay samaysatay, haddii lo fiiriyo isla iyada laftarkooda laba gobol iyo saddex gobol dadka degan waxaa laga yaabaa shabeelada hoose inay ka dad badan yihiin ama jubada hoose inay ka dad badan yihiin ama inay shabeelada dhexe ama hiiraan ka dad badanyihiin. Laakiin  gobol ahaan uu saddex gobol yahay dadkiisana ay kala bar hal gobol leegyihiin, markaa waxaan aaminsanahay aniga maamul goboleed kastaba tirada isaga uu yeelanaayo, iasagoo u fiirinaaya awooddisa dhaqaale isagoo fiirinaayo awooddiisa dadeed inuu ku saleeyo dastuurkiisa inuu ku saleeyo ayaa waxaa weeyaan aaminsanahay, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Abdifatah Abdullahi Araye**

Waxaan toos u galayaa doodayda oo ah cutubka 5aad Qod 63aad ee ka hadlaya maqaamka caasimadda xulashooyinka lasoo gudbiyey, Waxaan soojeedinayaa in laqaato xulashada 2aad ee sheegaysa in maqaamka caasimadda ay noqoto dowlad goboleed caasimad ah,sawabta aan ku dooranaya waxay tahay.

Haddii muqdisho ay noqoto caasimad dowlad goboleed ah waxa ay yeelaneysaa maamul u gaar ah sida dowlad goboleedyada oo kale taas oo ka dhigan in dadka degan muqdisho ay heli doonaan matalaad buuxda oo siyaasadeed dhaqaale iyo mid sharciyeedba, sidookale xuquuq lamid ah dowlad goboleedyada kale.

Muqdisho waxay heli doontaa xuquuqda iyo awoodda oo lamid ah kuwa dowlad goboleedyada kale sida sameynta dastuur,baarlamaan iyo xukuumad u gaar ah, taas oo sare u qaadeysa cadaaladda iyo sinaanta dadka reer muqdisho xasilinta cabashooyinka matalaad la'aanta Waxaa jiray cabashooyin badan oo ku saabsan in muqdisho ay dhisan lahayd matalaad rasmi ah oo lamid ah dowlad goboleedyada haddii ay noqotana caasimad dowlad goboleed ah Waxaa xal loo heli doonaa arinta ku saabsaneyd xalinta cabashooyinka matalaad la'aanta ah.

Horumar iyo adeeg furan maamul dowlad goboleed waxa ay u sahleysaa muqdisho in ay si madax banaan u hormariso adeegyada bulshada amniga iyo dhaqaalaha haddii aan isku dayo inaan ka jawaabo su'aalihii hoos yaalay,haddii xulashada 2aad aan qaadano midda koowaad oo ah maamulka uu noqonaayo. Muqdisho haddii ay noqoto caasimad dowlad goboleed maamulka caasimadda waxa uu noqonayaa maamul dowlad goboleed leh madaxweyne, gole wasiiro ama xog-hayaashaa iyo hay'adaha kale fulinta sharci dejinta iyo garsoor leh.

Maamulkani waxa uu u madax banaan yahay arimaha gudaha sida horumarinta sida amniga,dhaqaalaha iyo adeegyada bulshada goleyaasha ay yeelaneyso caasimadda,caasimadda waxa ay yeelaneysaa goleyaal lamid ah kuwa dowlad goboleedyada kale sida baarlamaan dowlad goboleed,golaha wakiilada caasimadda, xukuumad dowlad goboleed,madaxweyne/horjooge iyo golaha wasiirada,garsoor dowlad goboleed,maxkamad madax banaan ama garsoor madax banaan. Sidookale degmooyinka hoos yimaado muqdisho waxa ay yeelanayaan goleyaal deegaan,goleyaal degmo iyo maamule hoose.

Muxuu noqonayaa xiriirka caasimadda iyo xukuumadda dowladda federalka? Xiriir sharciyadeed iyo mid maamul dowladda federaalka iyo caasimadda waxa ay yeelanayaan xiriir sharciyadeed oo qeexan sida dowladda dhexe ay mas'uul ka tahay arimaha federaalka sida: -difaaca,siyaasadda,arimaha dibadda,lacagta iyo wixii lamidka ah. Halka dawladda hoose ee caasimadda ay maamusho arimaheeda gudaha iskaashi iyo wada ogolaansho Waxaa jiri doono iskaashi iyo wada ogolaansho arimaha quseeya labada dhinac gaar ahaan marka ay timaado adeegyada muhiimka ah iyo amaanka guud ee caasimadda.

Matalaadda caasimadda ee goleyaasha dowladda baarlamaan federaalka,haddii muqdisho ay noqoto dowlad goboleed waxa ay yeelaneysaa matalaad rasmi ah oo buuxda ka dhex muuqata labada aqal ee baarlamaanka aqalka sare iyo golaha shacabka sida dowlad goboleedyada kale ee dalka. Golaha wasiirada Waxaa dhici karta in xunbo matalaad muqdisho loogu daro gola wasiirada si loo xaqiijiyo in codka caasimadda laga maqlo heerarka qaranka hay'adaha kale ee dowladda matalaad gaar ah ayaa lasiinayaa muqdisho si loo ilaaliyo xuquuqda dadka degan iyo horumarka caasimadda.

Waxaan ku soo gaba gabenayaa doorashada ah in muqdisho ay noqoto caasimad dowlad goboleed ah Waxaa ay hor seedaysaa maamul,matalaad iyo horumar dheeraad ah Waxaa la xaqiijinayaa in dadka degan caasimadda ay helaan xuquuq lamid ah kuwa dowlad goboleedyada ah iyada oo la ilaalinaya kala soocidda awoodaha dowladda dhexe iyo kuwa deegaanka.

Aniga oo xulashada qodobkaas ku salenayo waxaan rabaa markii aan dib u laabano qodobka 62aad farqadiisa 5aad gudiga waxaan weydiinayaa haddii ay tahay in maqaamka caasimadda il gooni lagu fiirinayo iyo hadii kale,sawabtoo ah Qod62aad farqadiisa 5aad waxuu dhigayaa "dowlad goboleed Waxaa ku midoobi kara labo,sedex ama afar gobo loo deris ayaga oo xur u'ah degnaan shiyahooda" waxaan soo jeedin lahaa in qodobkaani uu yahay qodob yacnii aanan ku saabsaneyn in maqaamka caasimadda si gooni ah loo fiirinayo in laga dhigo gobol iyo wixii lamid ah,waad mahadsantihiin.



**Sen. Laila Ahmed Ismail**

Xildhibaanada labada aqal iyo howlwadeenadaba waxaan rabaa aniga qodobka kaliya in aan ka hadlo maamul goboleedka magaalada mugdisho ee matalaada caasimada aniga ciyaalka xaafadaan ah oo reer mugdisho ah oo reer madiinaa ahay marka labaadna sanatarada lagu doortaan kamid ah marka si khaas ah ayaan umatalaa gobolka banaadir marka waan ku qasbanahay in aan ka hadlo.

Caasimada maamul goboleed in ay noqoto wax diidayaa majiraan ee dowlada federaalka ahna ay degnaato dowlada federaalka ah waxay masuul katahay ciidamada iyo hay'adaha fowlada oo dhan iyada oo degan baa lagu sameyn karaa si "special" ah oo ay soo habeeyaan guddiga ee doorashooyinku hadii la yirahfo maamul goboleedka waxaa loo oran karaa hal gobol iyo wixii kabadan hadii la yiraahdo hal gobol macnaheeda waxaa waaye umadaa kala tageysa.

Hada soomalilan waxaa lagu heystaa yeyna kala taginee hafii la yirahdo lakiiin halhal mamul iyo halhal magaalo iyo hal gobol baa waxay noqon doonaan mamul goboleed lasiinayaa macnaheeda waxaa waaye in lakala tagayo marka si aan loo kala tagin oo aan soomali ukala tagin inaga naftirkeena lanagu sheegaa wax 20malyan ahee si aynaan ukala tagin labo gobol iyow ixii ka badan caasimadana waa "spicial case" wey ka duwan taas lama oran karo hal gobol lakiin waxaa la oranayaa "special case" dadka magaalada degan waxay xaq uleeyihiin metelaad oo ay rabaan oo in badan kusoo celceliyeen baarlamaankii baa fadhiya illah baa nasiib inoo siiyey in aan ka ahadalno marka waxaan ku celcelinayaa oo aan ku waadaqsanahay xildhibanadii iyo senataradii iga horeeyey mamul goboleed in laga dhigo oo dhax degantahay xukuumada federaalka ah ay dhax degantahay ayadana mamul goboleed is maamula xuquuqda maqana la helo marka intaas ayaan kusoo gaba gabeynayaa waa mahadsantihiin.



**Xil. Suhur Haji Ulusow**

Assalaamu caleekum warax matullahi wabarakaatuh, gudoomiya labada aqal, xildhibaanada, sanatarada, bahda saxaafadda, guddiga dastuurka labada guddi, Assalaamu caleekum warax matullahi wabarakaatuhu.

Qodobka 63aad maqaamka caasimadda xulashada 1aad farqadiisa afaraad waxey uqorontahay sida tan xeerka doorashada faderaalka inuu siyaa muwaadhiniinta dagan magaalo madaxda xaqna ayku dooran karaan wakiilo ku matalo golayaasha baarlamaanka federaalka Soomaaliya waa in ay matalaadaasi ku weynin degenaashaha ay degen yihiin magaalo madaxda dowladda fadaraalka awgeed.

Ee waxaan ognahay matalaada labada gole marii laga reebo aqalka sare, matalaada golaha shacabka in lagu qeebsaday, qabaailo marka maqaamka la sameeyo loo ogolaado maamul goboleed ku hoos nool iney yihiin, ma waxaa la siinayaa xildhibaano ku matala golaha shacabka, misa xildhibaanadii hore oo Muqdisho iyo Soomaaliyoo dhan laga soo aruuriyay, ayagana qeeb laga siinayaa, arintaas waxaan umalenayaa arintaas in ay is qaban karin.

Aniga waxaan soo jeedin lahaa xulashada kowaad in la qaato, Muqdisho maqaam noqoto aqalka sarena ku matalo, sabab too ah Caasimada Soomaaliya anaga dhan caasimadeeni waaye, muqdisho dad gaar lala heysiinayo, soomaliya oo dhan ayaa ku nool canshuurta anaga oo dhan ayaa wada bixino dalkasta waxa uu u baahan yahay caasimad, aniga waxaa soo jeedin lahaa caasimadda dowladda federaalka ee Soomaaliya matalaad ku leh aqalka sare, oo matalaadeeda leh, goweer natoorka magaalada muqdisho sanatar keena aan xuso waa inuu maqaam yeeshaa asaga lasoo dhaweeyaa sida madaxwenayaasha maamul gobo leedyada asigana la xuso xaq buu lee yahay, waa in la soo dhaweeyo, sawabtoo ah in maqaam yeelato, matalaat yeelato, laakiin Caasimada Banaadir inee noo ahaato Gobalka Banaadir ayaa wax walbo ka ween si ana Gobalka Banaadir waxa waye maamulka kaliya oo ma araktay kabanaan qabiil inuu dowlad isku tago, oo dowlad u hogaansan waye, laakiin hada markii la dhaho hal gobal laga dhigayaa

ma arakty iisheg maamul siinaayo, Soomaali waa la sii kal fogeena ma fahantay, ani waxaa qabaa in ma arkinoo  muqdisho inee noo ahaato Caasimada Dowlada federaalka Soomaaliya nidaamka federaalka qodobkiisa 62aad farqadiisa 6aad, ugu yaraan labo gobal iyo in ka badan ayaa ku midoobi karo, Dowlada dowladaha xubinta ka ah, dowlada federaalka iyo xeerarka u gooni ah, ani waxaa soo jeedi lahaa labo gobal iyo wax kabadan horta waa qabay, in uu gobal iyo bar inoo noqdo dowlad, laakiin saaxibkeyga Jeega markuu dhahay afgooye iyo marka ku darsanaa waa booday, taas marka waxaa lee yahay labo gobal iyo wax ka badan ayaa waxaa noqon kara dowlad gobaleed.

Qodobka 61aad heerka dowlada jamhuuriyada federaalka Soomaaliya waxee ka kooban tahay 3 heer dowladeed oo kala ah dowlada faderaal dowlad gobaleedyada iyo dowlada hoose ani waxaa qabaa in laga dhigo 2 dowlad oo ah dowlada federaalka iyo dowlad gobaleedyada sawabtoo ah meeshaas waxaa ka dhalan karo "conflict" qodobka 64aad mabaadida faderaalka farqadiisa f heerarka kala duwan ee dowlada ay  sida cadaaalaha ee u wadaagayaan una qeebsanayaan qeeraadka iyo daqliga dalka waxaan soo jeedinaya si cadaalad ah in loo qeybsado si equity ah, asalaamu alaykum warax matullah wabarakaatu.



**Xil. Yusuf Geele Ugas**

Waxaan halkan ka maqlayay xildhibaano ka hadlaya Maqaamka Muqdisho, waxaan usoo istaagay inaan wax yar caddeeyo. Magaalada Muqdisho waxa lagusoo doortay Xildhibaanada Banaadiriga iyo Somaliland, intayada kale qolaba meel ayay ka timid sidaas darteed waxa ku nool 4 Milyan iyo dad ka badan waxa laga yaabaa Maamul Goboleedyada kale intaas in lamid ahi inaysan ku noolayn iyo in ku dhaw. Waxaan usoo istaagay waxay tahay Magaaladan Muqdisho waxa waaye Magaalo Soomaali wada leedahay weeyi, waxaanan rabaa in Maqaamka Muqdisho Maamul Goboleed laga dhigo, Soomaali xuquuqdeeda ayaa ku wada jirta sida loo kala deganyahay waa loo kala badsan karaa. Walaalaha Reer Koonfur-galbeed waxay dadka kale uuga dhawyihiin runtii waa deegaankoodii marka xanuun gooni ah ayay ku hayaan ee in intaas loo fahmo ayaan rabnaa inaan u sheegno inta kale walaaluhuna waa la wada mid.

Waxaan rabnaa inay Caasimadu Maqaam yeelato, waxaan rabnaa inay Maamul Goboleed noqoto, qof kastana xuquuqda uu ku leeyahay ka helo sidaas darteed yaynaan iskusoo riixriixin, xaafada aan anigu kasoo jeedo yaan gooni loogu riixin. Waxaan codsanayaa in sidaa wax loo kala saaro si xuquuqda 4ta Milyan u hesho, 4ta Milyana waa Soomaali ee ogaada maaha xaafad gooni ah. Intaasaan usoo istaagay, inaan dooda ku salayno waar 4 Milyan oo Soomaali ah ayaa deggan sidee ayay xuquuqdooda ku heli karaan? Mida labaad baarlamaankani wuxuu xaq u leeyahay in 54ta Senatar la bedalo oo tiradooda la badiyo, in deegaanadda cusub oo dhismaya wax loogu daro, marka insha Allahu waad mahadsantihiin, walaalayaal waxaan usoo istaagay inaan intaas cadeeyo oon xaafad gooni ah lagusoo riixin, waad mahadsantihiin salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.



**Xil. Nur Ahmed Dirie**

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka labada aqal xildhibaanada labada aqal, guddiga madaxabanaan iyo guddiga kale ee korjoogtaynta iyo dhamaan, shaqaalaha iyo saxaafadaba salaamu calayku Wa raxma tulaahi wa barakaatu. Salaam ka dib mudane gudoomiye waxaan rabaa inaan ku hora maro runtii baarlamaankan 11 aad shaqo badan buu qabtay balse waxaa laga siibay xididkii dhiiranaanta baa laga siibay baarlamaanka moodaa. Waxaan fagaara badan ka sheegnay baarlamaanka shaqada uu qabto inay sharci tahay oo baarlamaankana wax alla wixii mara ay sharci yihiin madaxwaynaha uu saxeexo waxaan markaa leenahay dastuurkan shaqaan ka soo qabanay, afar cutub ayaan ansixinay tii kalena waa ku guda jirnaa shaqadiisana inagaa iska leh oo la iskuma haysto baarlamaankaana xaq u leh. Kow waxaan rabnaa masuuliyiinta dawlada madaxweynaha iyo ra'iisal wasaaraha waa masuuliyiin soomaaliyeed ciday doonaan bay la shiri karaan, ciday doonaan bay soomaali isku soo dhawayn karaan laakiin shaqooyinku waa inoo kala soocan yihiin.

Shaqada dastuurka baarlamaankanaa iska leh anagoo ixtiraamayna, shaqooyinkooda iyo hawlahooda ku ixtiraamayna anaga shaqadayada in lanagu ixtiraamo weeyi, haddii madal la shiraayo, haddii mucaarad lala shiraayo, haddii la la shiraayo beel caalam intaba shaqo kuma laha. Dastuurkan baarlamaankan ayaa iska leh masuuliyiintana waa idinka taas horta waa qodobkan 1aad.

Tan kale doorasho, doorasho yaale waxaan ansixinay guddi doorasho halkan ayaan ka ansixinay guddiga doorashada, waxaan u idmanay soomaaliyoo dhan saddexda heer doorashada inuu guddigaasi masuul nooga yahay. Doorasho haddii laga hadlayo madaxda dawlada ee hadda soo sheegay madaxweynaha iyo ra'iisal wasaarahana waxaan u sheegaynaa guddigaa doorashadaa masuul ka ah doorashada cidkaloo lagala saa'iri karo ma jirto baarlamaankanaana la xisaabtamaya, xaqiiqada in la isku sheegaa fiican. Meeshan arrinta ka dhacday oo baarlamaankan soomaaliya masuulka ka ah degmo walba meeshan waa lagu metalaa Degmada ugu yar baa laba qof ku metashaa anaiga degmadaan ka soojeedo afar baa ku metesha. Wax alle wixii doorasha ah guddigaas ayaan u daba fadhinaa baarlamaankaana la xisaabtamaaya cid kaloo shaqo ku lihi ma jirto, haddi shir madal lagalaayo iyo haddi mucaarad lala shiraayo iyo haddii dad la soo dhawaynaayo waa furantahay laakiin dastuur iyo doorasho baarlamaankan baa xukuma intaas horta waa inaa ogaataan.

Amniga iyo la xisaabtankiisa iyo hawlihiisa qaranka waa u furan yahay, laakiin dastuur iyo doorasho baarlamaankanaa laga xukumaa, intaas waxaan qabaa qolo walba halkeeda ka ogaato, waxaa kale ee dheeri ii ah walaalaha soomaaliya taageera oo beesha caalamka la dhaho shaqooyinka ay soomaaliya la hayaan iyo hawlaha nala hayaan waan ku soo dhawaynaynaa. Laakiin soomaaliya waxaa ka dhisan saddex heer saddex tiir baa ka taaagan, kow waa sharci dejinta, labo waa fulinta, saddex waa garsoorka wixii soomaaliya ay ka dhex rabaa saddexdaa tiir ha u adeen, dhex wareega iyo qaska kale soomaaliya waa inay ka joojiyaan. Arrintaana waxaynu u sheegaynaa beesha caalamka xaqiiq inaan is dhex orodno dawladnimadii soomaaliya lagu dheelo, qoloba meel ka istaagto maya soomaaliya baarlamaankanaa laga xukumaa. Waa ku celinayaa walaalaha soomaaliya taageera ha la xiriiraan haday soomaaliya uga baahdaan arrimaheeda saddexdaas tiir baa iska leh hala xiriiraan fulinta, sharci dejinta iyo garsoorka.

Wixii ay rabaa iyagaa ka jaahil bixinaaya laakiin haddii meel walba la istaago intan xalane ka gal iyo intan habartay ka gal ay noqoto waxaas dawlanimada soomaaliyaa lagu dhaawacayaa intaasna waa ka afeefaynaynaa. Mida kale haddii aan u soo dhaco dastuurka, dasruurkan horta waxaa la sameeyey 12 kii afartii cutub ee ka beddelnay ee ku dhiiranay ka baarlamaan ahaan ma ogiye, markaa waxaan leeyahay heerarka kala duwan oo awooddaha dawlada hoosaa lagu soodaray. Waxaan balan qaadnay inaan daadajinayno awooddaha oo hoos gaynayno, waayahaye qaabka aan ku daadejinayno maaha isqabqabsiya inuu noqdo, waa inuu qaab macna leh oo sharciyeysan aan ku daadejino, dawladii federaalka, maamul goboleedkii, dawlada hoose. Dawlada hoose inatay ka jirtaa markaa gofertoorihii gobolku aaway hadda tusaale ahaan waxaan ognahay maamul guddoomiye degmo iyo goforatoore dhisan oo inay kala madaxbanaan yihiin aad moodo, markaa waa in la soo galiyaa heer guddoomiyihii gobolku waa inuu soo gala meeshaas awoodii waa inaysoo gasho ama loo daayaa labadda sare inta kale waligeedba way is dhex yaacaysay. Labada sare in loo daayo iyo in afar laga dhigo taasi sidaasay ku haboontahay siday ila tahay.

Barmaamijka caasimada ayaa aad looga hadlay, caasimada runtii soomaaliya wax badan bay hadda xaq ugu lahayd, waan soo dhawaynayaa in loo helo sharci adag oo caasimada iyo maamul goboleedka lagu dhaqo laakiin in loo ogolaado maamul goboleed waa soo dhawaynayaa. Sababtoo ah haddee magaaladan dawlada federaalka oo baydhabo ka soo guurtay, anoo agaasimaha arrimaha gudaha ah ayaan halkan imid 2007 baya ahay meeqa sanaa laga joogaa intaas muqdishaa dawladani deganayd. Waaana la dhex joogay iyadoo sharci adag la isticmaalaayo oo meelo badan laga istaagaayo, si xal waarana loo helo waa in maamul goboleedna loo ogolaado ka dibna sharci adag oo lagu kala saaraayo awoodihii in loo helo, taasna waa soo dhawaynayaa.

Waxaa kaloon ku darayaa dastuurkan masuuliyadiisa anagaa iska leh waa ku celinaynaa taas, farafaraynta kale ha laga daayo, mudane guddoomiye labadii aqal waa u dhantihiin waa in la helaa xarig adag oo masuuliyadiisa qaadataan oo inta aan soo sheegay ba xakamaynaaya waa in loo helo. Intaas waxaan ka codsanayaa guddoonka xadhiga adkeeya yaan la dabcinin soomaaliya si ay meel u gaadho intaasaan kuligeen ka simanahay. Si kale haddaan u dhigo waa xildhibaanka aqlabiyada baarlamaanka masuuliyiinta afkooda ku hadlaaya salaamucalaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.



**Xil. Mohamed Ali Haga**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, guddoonka labada aqal xillibaanada sharafta bada Asalaamu Caleykum Waraxmatullahi Wabarakaatuh.

waa la daalay baan filayaa xillibaanada waa si bay u yara caajisanyihiin lakiin in la joogo qaranka loo shaqeeyo aad bay muhiim u tahay waanan ku faraxsanahay maanta baarlamanka siduu uu shaqeynaayo, oo ay xillibaanadu ilaa sacaan casarkii ay joogaan waan ku faraxasanahy, Sharaf gaar ah bay ii tahay horta waxaan u mahadcelinayaa labada guddi arrintaan dastuurka waxka-baddelkiisa isku soo howlay waqtiga badan galiyay, aad baan idinkiigu mahadcelineynaa, guddoonka waxaan ugu mahadcelineynaa sida habsamida leh ay u daadihinayaan kulamada fadhiyada baarlamaanka,

waxa kaloo tahay inaan aad isku mahadcelino sida quruxda badan aan isku dhageysaneyno ee aan rabno ineynu jiheeno mustaqbalka dalkeena, dastuurku waa mustaqbalkii ummadeena wax fududna maahan mana ahan wax lagu cabiri karo aniga waxa ay ila tahay iyo deegaankeyga ku qurux badan tahay, hadii aynu rabno ineyno wax ka badalno xaalada dalka u uku jiro, ama aynu u jeexno dariiq cusub aan aheen kan maanta nasiib darada ina heysata "basically" wuxuu ku dhisanyahay ee dastuurkeenani ama qaabka maamul ee dalka u qeybsan yahay, hadda qabill mana aheen dowladda hore oo inaga waaween "ethpoia" dariskeena ay tahay markii ay "etalic federaliazam" ay qaateen, waxaa Meesha ka baxday ama ciriiri ku jirta markasta dowladihii "storng" aheed ee "Ethiopia"

marwalba waxaad maqashaan qoomiyadda oromadi, qoomiyadda amxarada inaguna "clam basic federalism" baynu qaadanay xaalada dalkaana saamaxaysay, lakiin arakti ahaan waxaa qumanaan laheed ama fiicnaan laheed anigu madaama aan nahay sharci dajiyaashii ineynu fikir keen uxor ka ahaado ee maanta "federalizem" ku dhisno, sidee bay isku raaci karaan dalka siduu noqon karaa mustaqbalkiisa ku dhismi karaa kulana tartami karaa dowladaha kale ee caalamka ama sida kale iyo si lamid ah sida aan ugu noolaano hadii aan anigu soo qaato qobodada wax badan waxaan la qabaa saaxiibadeyda hore halkaan ka yimid, lakiin waxaan rabaa laba qodob oo aan muhiim aan u arko inaan halkaan ka sheego oo ah, qodobka 62aad oo ah farqadda 2aad oraneysa aqalka sare oo kaliya ayaa go'aan ka gaaraya dowladd gobleedyada in la yiraah labada gole, matalaada la balaariyo "because" waxaaba laga yaabaa dad badan inaanay matalaadba ku laheen aqalka sare laftirkiisa go'aanka laga gaaraayo uu yahay go'aan soomaaliyeed, lakiin inta badan waxaa lagu dhan yahay golaha shacabka in la raaciyo, marka taas ayaan soo jedinlahaa, farqadda 5aad oo iyadana oroneysa 2 gobol iyo ka badan waxaan oran lahaa halaga dhigo hal gobol sababtoo ah, wax lagu kala tagaayaana majiro, labada dowladeed ayaa waxay yihiin oo ka tirsan fedraalka gobol iyo bar markaas iyaka miyaa dib loogu celinaayaa misa kuwa cusub ayaa loo xadeynayaa dastuurkuna Makala sheegaayo sidaasi darted waxanu oran laheen hal gobol halaga dhigo.

Waxaan ku faraxsanahay maanta inaanu ka hadleyno maqaamka mogadisho oo runtii aniga dereen gaar ah ii leh, maadaama 91dii ilaa hada Meesha aan ku noolahay ay tahay magaalo madaxda mogadisho anigoo siyaasi ah 91dii ilaa hada aan joogo oo matalaad deegaan keyga iyo dadkeyga aan ku matalaayay, farxad gaar ah bay ii tahay in maantay laga hadlaayo maqaam keedii, marka maqaamka caasimada laga hadlaayo maahan in la siyaasadeeyo casimada dalku waxa weeyaan udub dhaxaadka isku keen haya hada midnimada soomaaliya, afkii maay maxay baan ka dhignay calankii waan ku kala taknay ninba calanki buluuga ahaa waxbuu ku dhajistay oo calaamd kaloo ku sameeyay, lakiin waxa kaliyaan isku raacsanahay waxa weeyaan inay tahay mogadisho caasimada dalka soomaliya, sidaaasi darted waxa iska keyhaaya ee midnimada soomaaliya haaya markaa ineynu si dagan oo taxadar leh maskax iyo macna badan ku jiro ugu fikirno ayaa ayaa loo baahan yahay.

Waxaynu kahadleynaahi waa dastuur, dastuurkuna waa sharci sharciga melena lagama leexiyo melena lagama qaato marka hadii aan rabno inaan qaadano, waxad moodaa qolada wax soo diyaarisay iney u diyaariyeen siday u dhigeen xulashada koowaad iney dadku u bataan, sababtoo ah xulashada labaad hadii ay rabaan in la qaato waxay aheed qodobka 62aad iney ka dhigaan ay yiraahdaan hal gobol taasi ayaa xireysa, waxaan rabaa mar hadii mar dastuur laga hadlaayo anagoo aan jecleen maqaamka mogadisho hoos loo dhigo maadaama ay tahay tiirka iyo udub dhaxaadka isku keen haaya, mudan tahayna iney dadka ay ka sareyso tahay Meesha

kaliya dadka soomaaliyeed u simanyihiin, waxaa haboon sharciyan marka aan ka hadleyno qodobkaas laga badalo lagadhigo hal gobol si ay mogadisho markaa u noqoto dowladd gobleed waana soo dhaweynaynaa iney yeelato Sharaf ayaad leedahay, xaaji muuse waan kugu raacsannahay in mogadisho karaamadeeda hoos loo dhigo marabno, mogadisho waa mesha dalka ugu sareysay, waa hooyadii soomaaliyeed waa Meesha isku keen haysa sidaasi darted waxay mudantahay iney ka sareyso dhammaan gobolada kale ee dalka waxkasto ay kaga sareyneyso diyaar baan ula nahay, lakiin mar hadii aan ka hadeeni sharci waxa waaye inuu sharciga waa faqaa. Waxaan soojeedinayaa qodobka 62aad iyo 63aad in la leys waafajiyo Asalaamu Caleykum Waraxmatullahi Wabarakaatuh.



**Xil. Abdiwahab Abdi Omar**

Guddoomiyaha golaha gudoonka guud ahaan xildhibaanada sharafta leh,hadal iyo afkaar waqtigeedii ma ahan waxaan toos uguda galayaa toos qodobada ee wax kabadalka dastuurka aan usoo istaagay meeshaan.

Qod 61aad farqadiisa 2aad qaabka uu u qoran yahay in lasiiqeeyo la qurxiyo way ka fiican tahay marka sharci la dajinaayo Waxaa lagu qoraa luqad qaanuuneed, luqadda qaanuuneedkana waxay baneenaysaa in wixii la qoro mararka qaar loo aqrin karo ruuxda qaanuunka loo fiirin karo. Haddii laxadido kalimaadkaa qodobka lagu saleenaayo oo ay noqoto qodobo ka adag xadidaaya ama qayb noqonaayo Waxaa Meesha ka baxaysa ruuxul qaanuunka, sidaas daraadeed Meesha la leeyahay gooni iskuma taagi karaan kalmadda “karaan” in laga ilaaliyo ayey ahayd si ay u furanto marka qaybaha dambe looga hadlayaa in dowlad goboleedyo ay soo kordhi karaan ama ay soo biiri karaan, haddii la xiro Waxaa baa ba’aayo ruuxul qaanuunka,taas waxaan jeclaan lahayn in lasiiqiiyo.

Qodobka kale 49aad farqadiisa 1aad tirade xididaada dowlad goboleedyada shardi laga dhigaayo aqalka sare waxaan qabnaa annaga in sidiisii horey lagu daayo oo dastuurka KMG 2012 ku qornaa oo ahaa in golaha shacabka loo daayo, sawabtoo ah xildhibaadana iga horeeyey ayaa sheegeen aqalka sare iyo xadidaantiisa dadka matalaada u jooga ama dad badan inay ka maqanyihiin. Haddii aan dhahno dowlad goboleed hala soo kordhiyo aqalka sare “approve”gareenayo la yiraahdo Waxaa laga yaabaa in qabiil xx ama degaan xxx ama gobol xxx uusan ku lahayn matalaad sidaas daraadeed uu xaq u lahaa ama uu helo uu ku wayn karaa,taas waxaan rajeenayaa in sidiisii horey loo daayo.

Qodobka 62aad Dhismaha dowlad goboleedyada iyo soohdimaha, farqadiisa 5aad “dowlad goboleedku wuxuu ku midoobi karaa labo gobol sedex,ama afar iyo wixii ka badan” anigu waxaan qabaa oo aan soojeedinayaa in hal gobol la qaadan karo ½ laqaadan karo hadba soomaali si ay isku fahmi karto,mararka qaar waxaan hagaajinaa luqadda waxaan dhahnaa annaga waxaan ku jirnaa “state bulding” sida xaqiiqda ah annaga wali “state bulding” ma gaarinee ee ( qabiil bulding ) ayaan mareynaa wali qabiil baan wax ku maamulaynaa,wali qabiil ayaan wax ku dhisaynaa inta dhisan qabiil ayey ku joogaan.

Qabiil xxx hadduu xaqiisa helay qabiil xxx kale inuu xaqiisa waayo in loo adeegsado “terminology” xadidaayo way yara adag tahay waxaan qabnaa hal dowlad goboleed haddii la doono lafura’o hal gobol xitaa hadduu noqon karo si taas ugu xirmi karo “Federal” iyadana “options”ka in lagu soo daro waan qabaa.

Tan caasimadda xildhibaanada xaqa u lahaa iyo kuwa ka hadlay gabigood waan lawada qabaa,maantana caasimadda Waxaa Sharaf ugu filan in ciyaalka xaafadda ay u hadlayaan dadkii ku dhashay iyo dadkii ku korey oo aan magac qabiil ku difaacaynin inay caasimadda u hadlayaan ayaa caasimadda Sharaf ugu filan.

Sharafta ugu wayn ay caasimadda haysato waa inay jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya tahay maalinkaa xoriyadda qaadanay 1960kii ilaa hadda,maqaamkaas maqam kaweyn oo la gaarsiin lahaa majiro kaliya waa qurxin, marka waxaan qabaa "option"ka 2aad ayaan qabaa,dadka deegaanka waxay qabaan in lala qabo waan qabaa xaqay u leeyihiin matalaadna waa leeyihiin. Annagoo meel kore ka imaanay hadaaba matalaad yeelanay in dadka Meesha joogo matalaad yeeshaan iyadana waan qabaa,midna maqabo tan caasimadda nin guri kiro ku dagasn inuu yiraahdo aniga iska leh mid guri kulehna la yiraahdo malihid iyadana dadka deegaanka nagama qabata annaga.

Marka caasimadda waxay ku qurux badan tahay caasimadda jamhuuriyadda federaalka inay noqoto maqaamna kaas ayaa ugu filan sharafna taas ayaa ugu filan waxa kale ay tabanayaan dadka deegaanka ay helaa "option"2aad ayaan xoojinayaa, waana ka baxay waad mahadsantihiin.



**Xil. Abdikarim Abdow Heydar**

Aniga waan soo gaabinayaa, waa la daalay. Labada qodob uu wasiir xagaa uu waday, labadaas qodob ayaan waday, qodobka 62aad, farqadiisa 2aad iyo qodobka 63aad, xulashada 2aad, caasimaddu inay maqaam hesho, aad iyo aad ayay muhiim u tahay, waxyaabo badan oo maqan ayaa lagu helayaa, waxaana dareemayaa muddo dheer sidaad ogtihiinba caasimadda inay ku dulman tahay maqaamka ay lahayd, marka sidaas daraadeed waxaan qabaa in xulashada 2aad laga dhigo, caasimadna laga dhigo, sidii wasiir Jeego sheegayna in la weyneeyo oo zone-ka loo weyneeyo oo lagu daro Balcad iyo Afgooye, waan qabaa ayaduna, arrin wanaagsan waaye arrintaas sababta oo ah maadaama xukuumaddii la dagan tahay, waxaan u baahannahay dhul ballaaran oo lagu kala saaro maamul goboleedka Muqdisho iyo dawlada Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya.

Sidokale waxaa laga dhawaajiyay xildhibaanadii halkaan qalalaasaha ka abuuray 2berri kahor, 3berri kahor. Xildhibaanka xasaanad ayuu leeyahay, ixtiraam ayuu leeyahay, karaamo ayuu leeyahay, in la karaameeyo oo la ixtiraamo ayuu leeyahay, isagana intoo kale ayaa looga baahanyahay. Xildhibaanka halkaan wuxuu u fadhiyaa inuu soojeediyo ra'yigiisa iyo fikirkiisa, inuu diidmana leeyahay, ogolaanshana leeyahay laakiin xildhibaanka ma qabato, mana naga qabato xildhibaanada kale ee saaxiibadeena ah in shaqadii baarlamaanka, aan shacabka u wadnay, umadda Soomaaliyeed oo na fiirsaneyso oo anaga indhaheeda aa nahay, inay jeex-jeexaan dukumintigii shacabka looga qaaday caanshuurta oo naloogu soo daabacay inaan u dejino inay jeex-jeexaan, aflagaadoodaan, firimbi yeeriyaan, laba maalmood uu u xayirnaado baarlamaanka nama qabato. Xildhibaanka xaq ayuu leeyahay, inuu fariisto waxa uu diidan yahay inuu afcad ku sheegto, waxa uu ogolyahayna inuu afcad ku sheegto laakiin in

xildhibaanka laga soo dhex hadlo, inuu danaha Soomaaliyeed hor istaago ceeb waaye, inuu danaha shacabka hor istaago ceeb waaye.

Waxaan rabnaa inaan shaqada inoo taala aan dhammeystirno, waxaan rabnaa inaan taariikh sameyno, baarlamaan keena 11aad, taariikh nalagu xasuusto. Qabyo qoraal kaan dastuurka, waad ogtihiin inta uu qabyo qoraal yahay, in la yiraahdo waxaa anaga sharaf inoo ah oo nagu filan, berrina aad sheegan kartaa, inaa dhahdo, waxaan dhammeystiray dastuurkii dalka Soomaaliya, dadkii dhammeystiray ayaan ka mid ahaa, waxaan kamid ahaa xildhibaanadii 11aad ayaan kamid ahaa inaa dhahdo, taas ayaa berri ka maalin sharaf kuu ah, ilmahaagana aad u sheegi kartaa, ehel kaagana aad u sheegi kartaa, dadka aa matashidna waa u sheegi kartaa. Waa wax aad u haboon waaye, taariikh daas waxaan rabnaa inaa hirgelino oo rumeyno, aan taariikh jirto ka dhigno insha'Allaah. Inta dhimanna waan dhammeystiraynaa, waana mahadsantihiin.



**Xil. Sh. Aadan Mohamed Nur**
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Xildhibaanada sharafta leh, dood aad u dheer ayaa la galay aad ayaanan idiinku mahadcelinayaa dulqaadkiina iyo sida degan een hawsheena u dhamaysanay. Waxaan usoo istaagay hadlay 25 mudane oo labada aqal ah waxana laga dooday Qodobada 61aad ilaa 69aad doodaasina sidaas ayay inooga dhamaatay. Berito insha Allahu waxaan ka rajeynaynaa Guddiga iyo Hawlwadeenadu inay inoosoo gudbin doonaan qodobada laga hadli doono, hala dulqaato beri Arbacada waan iskusoo noqonaynaa si Khamiista iyo Jimcaha aan u nasano, fadhigeena maantana sidaas ayuu inoogu xiranyahay aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin salaamu calaykum.

**Kulanka 14aad (Febraayo 11, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankii:** | 14aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| **Goobta:** | Villa Hargeysa |
| **Wakhtiga uu furmay:** | 11:10 a.m |
| **Wakhtiga uu xidhmay:** | 3:05 p.m |
| **Shir-Guddoonka:** | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe" |

**Ajendaha:**

(7) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(8) Ansixinta Ajendaha.
(9) Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-kabeddelka Dastuurka.
Cutubka 5aad: Nidaamka Federaalka iyo Baahsanaan Awoodda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.






**Xil. Abdirisaq Abdullahi Moalim**

In laga fogaado maanta oo dalkeennii Soomaaliyeed lagu soo duulay oo Yuhuud ku soo duushay, dhibaatana ay ku haayaan kuwii kale oo aan ogeyn oo waligood na dhibi jirayna ay geesaha taaganyihiin, in baarlamaankii is qabsado waxyaabo aan dan u ahayn umadda Soomaaliyeedna la isku qabsado sax ma ahan. Waa markii la midoobi lahaa oo ummadda Soomaliyeed ay midoobi lahayd gacmaha is qabsan lahayd cadowgeenana iska dhicin lahayd. Marka intaas lagu soo noqdo waxaan rabaa xeendaabka sharciga ah midaynta ummadda Soomaaliyeed intaas waa iga dardaaran.

Waxaan rabaa in aan ku billaabo 2022 markii doorashooyinka madaxweynaha la gelayay qof kasta annaga naga mid ah oo caafimaad qabay maalinkaas oo doorashadiisana fadhiyay oo madaxweyne dooranaayay khudbooyinkii madaxweynayaasha naga hor akhriyeen mid walbo, wuxuu lahaa in uu Dastuurka dhammeystiri doono oo kumeelgaarnimadana uu ka saari doono.

Runtii madaxweynaha hadda jooga ayaa nasiib u yeeshay asagaana wixii uu nooga khudbeeyay oo malinkaas noo shegey ayuu ku dhaqaaqay. Waxaan rabaa in xildhibaannada labada gole ummadda Soomaaliyeed in aan u sheegno Dastuurkan in ay Soomaali leedahay ma ahan Dastuur inta marka la dhammaystiro meel la iskaga tuuro qol lagu soo xiri doono ama badda

lagu tuuri doono, waa dastuur waligeena na daba taagnaan doona oo meel walba dhuujis u baahan laga dhuujin doono meel walba cillad ka timaadana laga hagaajin doono ma ahan dastuur weligiis saan ahaan doono mar walbo waxaa la sameynayaa "Amendment" ama wax-kabeddel lagu samayn doono Dastuurka.

Waxaan rabaa in aan idin soo xasuusiyo Garoowe 1 iyo Garoowe 2 umad badan oo Soomaaliyeed ayaa walwal ka qabtay oo diiddanayd mar walbana ka hadli jirtay wali ma arag qof Garoowe 1 iyo Garoowe 2 u dhibay oo dhibaato u soo gaartay, hantidiisa lagu qaatey, dhiigiisan lagu baneystey intaas lakiin dadkii sheegi jiray in Garoowe 1 iyo Garoowe 2 dad gaar ah la beegsanayo xuquuqdooda la duudsiinaayo dhibaatooyin lagula kacaayo kana dadkii saas dhihi jirey ayaa saas dhahaya Dastuurkaan in la hagaajiyo dad ayey dhib ku tahay hantidooda baneysan doontaan sidaas dhici doonaan.

Waxaan rabaa ummadda Soomaaliyeed in aan u sheego raali kama ihi shakhsiyan qof muslim ah Soomaali ah meel hantidiisa lagu bannaysanayo asaga naftiisa lagu bannaysanayo dad gaar ah lagu beegsanayo ma ahan wax aan ka shaqaynayo diyaarna uma ihi sidaas darteeda, waxaan rabaa in la is dejiyo Dastuurkaan waa Dastuur Soomaali loo sameynayo qaladna wuu jiri karaa waana la beddeli doonaa hadii Alle idmo intaas waxaan rabaa in umada Soomaaliyeed qalbiyadooda ay ku degaan dadka Soomaaliyeed naga fiirsanaya ama dalka gudihiisa oo aan awoodin in ay meeshaan imaadaan oo arkaan waxa meesha ka socda waxaa la rabaa dhegahooda iyo quluubtooda wax fiican oo u qalma ay ku farxi karaan in golahaan uu ka soo baxo is jiidjiid iyo legdanka dhibaatooyinka siyaasadeed in laga joojiyo ayaan qabaa oo dadkaas wax anfacayo laga sheekeeyo .

Hadaan usoo noqdo waxyaabihii wax-kabedelka u baahnaa waxaan rabaa Qoddobka 62aad dhismaha dawlad goboleedyada iyo soohdimaheeda farqadiisa 2aad waxay leedahay aqalka sare baarlamaanka federaalka soomaaliyeed ayaa go'aan ka gaaraya ogolaanshaha dhismaha dowlad goboleedyada ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya aniga ma qabo waxaan rabaa farqadaas in la tiro sababtoo ah Dastuur si wadajir ah aan u ansaxiney oo meeshaan aan kaga shaqeyney hadana in yirahdo aqalka sare kaligiis ayaa go'aan ka gaaraya sax ma ahan marka waxaan rabaa wixii wax-kabedel ah oo hadda kadib loo baahdo in baarlamaanka lagu soo celiyo baarlamaankana uu sidaas uga wada shaqeeyo.

Waxaan kaloo rabaa in aan caddeeyo shalay markaan mesha fadhiyay aan dhegaysanayay 80% xildhibaannada meeshaan fadhiyay waxay isku raaceen hadalkoodana u badnaa in maamul goboleed uu noqdo 1 gobol iyo wixii ka badan anigana shaksiyan waxaan rabaa codkayga in aan ku biiriyo in maamul goboleed uu noqdo hal gobol iyo wixii ka badan haddii Alle idmo taas saas ayaan leeyahay.

Waxaa jira faqrooyin badan oo is khilaafaya oo xoogaa iska hor imaanayo waxaa ka mid ah soohdimaha maamul goboleedyada ee soohdimaha maamul goboleed kasta oo cusub waxay ku salaysnaan doonaan soohdimihii gobolada dalka iyo sidii ay u jireen sidaan ognahay maamul goboleedyada la dhisayo soohdimaha kuma salaysna qaarkoodna waaba dhismeenba marka meelaha qaar waxa la leeyahay kuwa cusub ayaa lagu "Aply" gareyn doonaa sidaas yeeli doono sax ma ahan in waxaas toos loo "Aply" gareeyo ma ogiyee ma noqonayso in kuwii horana ay fullaan kuwa danbena la yiraahdo sidaas ayaa loo isticmaalaya.

Midda kale Maqamka Caasimada Gobolka Banaadir “Majority” dadka waxay u codeeyeen xulashada 2aad anigana xulashada 2aad ayaan qabaa in ay noqoto sababtoo ah waa in ay noqotaa caasimad maamul goboleed ah gobolka Banaadir sababtoo ah dadka reer Banadir waa hadleen in badanna codkooda waa dhiibteen waxay rabaan ummadda Soomaaliyeed oo jacaylka maamul goboleedyada u qabto  sidey u qabaan ayey ayagana u qabaan maamul goboleed Banaadir leedahay oo iska dhax arkaan ayay rabaan gogolaha Soomaaliyeed iyo meelaha la iskugu imaanayo in ay ka dhax muuqadaan sidaas darteed waxaan codkeyga ku biirinayaa in gobolka banaadir uu noqodo maamul goboleed ka mid ah maamul goboleedyada jira ee dalka.

Waxaan kaloo rabaa waa hal gobol waa sax laakiin gobbolada kale markaad fiiriso waxa ay ka koobanyihiin 4 degmo 5 degmo 7 degmo, gobolka Banaadir waxa uu marayaa 20 degmo waxaa ku nool “Population” kabadan 3 Milyan iyo wax lajira oo qof waxa qabaa runtii hal maamul goboleed ma ahnee waxay u qalmaan in ay labo noqdaan waxayna xaq u leeyihiin in ay is doortaan ninkay rabaana meesha keenaan oo laga dhaafo dadkaan loo magacaabayo oo aan ognahay mararka qaar magacaabida lagu qasaaro oo qaarkood shan bilood markay joogaan la eryo oo shaqada ay gudan waayaan marka waxaan qabaa in laga dhaafo dadka loo soo magacaabayo ee ay noqdaan maamul ka mid ah maamul goboleedyada ka jira dalka sidaas darteed waxaan codkayga ku biirinayaa in gobolka Banaadir uu ka mid noqdo maamul goboleedyada jira ee dalka.

Sidaas darteed labo sheey ayaa uga muhiimsanayd istaaga aan soo istaagay in maamul goboleedyada dhismi doonaa ay noqdaan hal gobol iyo wixii ka badan iyo in gobolka Banadir uu yeesho maqaam la mid ah maamul goboleedyada dalka ka jira oo uu noqdo maamul goboleed buuxa leh hoggaamiyahooda, leh caasimaddiina leh, wax kasta oo ay u baahanyihiin dadkaas su'aalo waxaa imaanayo marka sidee la isku waafajinayaa madaama dawlada ay ku dhax nooshahay gobolka banaadir oo canshuuraadkii iyo wax dhan ay isku qasanyihiin dawlada waxay noo sheegtay in shidaal uu soo burqanayo mar dhow abaarta iyo gaajada laga bixi doono sidaas darteed aan loo baahan doonin dekaddii iyo eelboorkii wixii ka soo gala canshuurahaan jidadka laga qaado ama xaafadaha khayr ayaa soo socdo *Picture*-ka weyn ha la fiiriyo haddii la dhihi lahaa fowlada naga dumaysa hadii gobolka Banaadir uu maamul goboleed uu noqdo sidaas ma dhacaysee waa in niyadda la dhistaa “next one year two year” waddankaan shidaal ayuu yeelan doonaa kheyraad ayaa imaan doona “Resource” badan ayaa yaalo dalkaan, rabo in la soo saaro waana guulaysanaynaa, wasalaamu caleykuma waraxmatulahi wabatikaatu.



**Xil. Osman Mohamed Mohamud**

Bismillaah, gudoonka labada gole, xildhibaannada labada gole, bahda saxaafadda, dhammaan inta Meesha fadhido waan idin salaamay, salaam kaddib.

Waxaan rabaa in aan dhawr qodob ka hadlo marka hore xildhibaannada labada gole ummada Soomaaliyeed ee hortayda fadhido waxaan aad u amaanayaa inta hadda fadhido waa raggii waddanka inaan horey u wadno oo la dardargeliyo oo ummadda na soo dirsatay aan daacad ugu adeegno waa dadkaan soo wada shaqaynay, baarlamaanka maalmahaan waa isku dhex qasmay waan arkayay aniga ma imaanin mana hadlin

laakiin waxa meesha ka socday wax fiican ma ahayn xildhibaan qaran oo ummad dhan matalo oo dad badan fiirsanayaan.

Aniga xildhibaan ayaan ahay codkeyga muxaafad ayaan ku ahay waxaan rabaa *System*-ka socdo inuu shaqeeyo in dastuurka la dhammaystiro in dalka horey loo wado in wax kasta caqabad dalka ku keeni karo aan ka hor imaado ayaan rabaa, aniga Xaadoole ah aan rabo. Haddii la soo kaco oo hortayda soo istaagto, baarlamaankan sidiisaba xoog kuma shaqeeyo ee wuxuu ku shaqeeyaa cod ayuu ku shaqeeyaa, codkii haddii la waayay afartoo qof halkaan inay soo istaagto xildhibaannadii ay ka shaqayn waayeen oo candhuuf, xaraanti iyo farambi uu la yimaado, sax ma ahan wax dadweyn meel lasoo istaago ma ahan. Ilmaa ku maqli jiray tush, jooji, yeeli maysid waxaas ilmahaan ku maqli jiray ma ahayn niman waaweyn oo xildhibaanno ah in ay sidaas sameyaan.

Arrinkaas gudoonka waan ugu mahadcelinayaa inay ka jawaabeen laakiin markii hore in dabacaas la suubbiyo ma ahan meeshaan shaqaa nagala rabaa, waxaan ka shaqanayno waa masiirkii ummada soomaaliyeed waa dadka Soomaaliyeed waxii wax u tari lahaa berito dalkeenna waxaad ogtihiin dhibaatooyinka iyo caqabadaha uu soo maray. Waxaa larabaa inan u gudbino dadka u kala qaybsamay qabbiilada iyo gobolada iyo waxaas annagu waxaan leenahay oo difaacayno ayaa loo baahanyahay, xildhibaannada Soomaaliyeed haddii aynan dalka Soomaaliya baddiisa, barigiisa iyo xaduudihiisa ilaalin ee iyagu ka dagaalamin oo nin waliba qolo gooni ah.

Hadda nimankaas qaar ka mid ah ayaan la sheekeestay way igu qancin waayeen waxa ay wadaan adiga ma kuugu qancin karo adiga kaaga in aad ku qanciso wuu diidayaa, taas wax soconayso ma ahan, anigu ma aaminsani haddii qori lala soo galo in la joojin karo baarlamaanka iyo hawsha kasocota, baarlamaanka ayaa hawsha wada. Dowladda inay madaxweynaha oo dastuurka kala shaqeeyo baarlamaanka markii hore wuu ku ololeeyay waana lagu wada ololaystay, waana ku amaanaynaa waana ku garab istaageynaa xilligeedii ayaa lagu jiraa, haddii la iska dhaafo dastuurka oo 4tii cutub la meel mariyay meeshiis lagu dhaafo macnaheedu miyaa wadanka meeshiisa ha iska joogo.

Wadanka meeshiisa ha iska joogo ileen waa qalan yahay qof haduu qalanyahay isbitaal yaalo dastuurku waa qalanyahay, haddaan la dhammaystirin sidee doorasho loo aadaa kii hore Garoowe1 iyo Garoowe2 yaa lagu qanciyey oo Soomaali ah.

Yaa inoo sheegaayo oo la arkay ragga soo walaaqay waana la aqbalay, midkaan oo annaga ka shaqaynay in lahor istaago oo maalin kasta fowdo kaliya iyo dawladda meesha ay ka duleeshato. Soomaaliland inaan aniga leeyahay ayaan aaminsanahay qof iga leh inaysan jirin, inay gobolkayga tahay gobol Soomaaliyeed tahay, kuwan kale ee Daaroodka inta jooga Putland iyo dadkaan waa dadkaygii kuwaanna waa iswada leenahay waxaan rabnaa in aan Soomaali midayno, xildhibaanno qaran nahay gobol la iga leeyahay oo aan aaminsanahay ma jiro gobolkaygii waaye gobol alla gobolkaan tago waa inaan goboladaynii ilaashanno in aniga kayygii la ilaaliyo meel aan kala leennahay ma jirto.

Waxaa soo haray caasimaddaan, waa caasimaddii ummadda Soomaaliyeed waa caasimad dadka soo dhaweysay waan wada leenahay, waxaan rabnaa inaan wada shaqeyno Soomaalinimada ka wada shaqayno haddii aanan ka shaqaynaynin, nimaa wuxuu igu dhahay firimbigaan seddex

Sanaa xildhibaan ku soo noqday hadana sanadkii 4aad ayaan ku noqonayaa. War aniga xildhibaan firimbi kuma rabo xilna firimbi kuma rabo firimbi halkaan lagu foodeeyo xildhibaan kuma rabo, yaa ku soo siiyay ayaan dhahay halkoo halkaas fadhiya ayaa i soo siiyay ayuu dhahay, xildhibaan nin soo dirsaday xildhibaan Soomaaliyeed ma'ahan, meesha xildhibaan Soomaaliyeed ayaa la rabaa.

Aniga dawlad goboleedka la iga soo doortay waa Hirshabeelle hal mar ma arag Cali Guudlaawe oo isoo wacaayo i dhahayo waxaas ka soo hor jeeso ama waxaas diid.
Waxaan rabnaa nimankaan walaalaheyn waddanka yimid la sheegayo Axmed Madoobe iyo Deni mar hore ayay ahayd inay yimaadaan madaxweynaha u yimaadaan, madaxweynahooda waaye goboley jiraan federaalkuu joogaa inay ka xanaaqaan ma ahayn, inay la shaqeeyaan, dastuurkaan hadday wax ka qaldanyihiin inay dhahaan madaxweyne qalad baa jira. Waxaan rabnaa middaas in la'aado marka, taas waa middii ummadda Soomaaliyeed aan la dar daarmaayay, war iyo qayli wax lays kagama qaadayo waa laysku baranayaa, dadaa i soo diray iyo hebel ayaan u shaqaynayaa meeshaan ka socon mayso, meeshaan nidaam iyo kala dambayn ayaa loo baahaan yahay, fikir hadaad qabtid xildhibaan baad tahay halkaas fadhiiso aniga ha i xaraantin ha igu candhuufin fikirkaaga dhiibo.

Waxaan soo dhaweenayaa dadkaan Soomaaliyeed inay hadlaan wax waliba hadal lagu dhammeeyo Soomalinimada aan ka wada shaqayno, dastuurka waxaan taageersanahay, waxaan ka rabaa inan ka hadlo caasimadda qod 63aad xulashada 2aad oo caasimad dawlad goboleed ayaan taageersanahay Muqdisho waa caasimaddii ummadda Soomaaliyeed, waa indhihii ummada Soomaaliyeed, waa miyaaraddii qof walboo Soomaaliya ah iyo meel kasta ay ku nooshahay dal iyo dibad ay iska arkaysay waaye magaaladaan Muqdisho.

Maamuus iyo maqaam Soomaaliyeed ayey xambaarsan tahay waa magaalo ka kooban 20 degmo ku dhowaad lagu qiyaasay 4 milyan inay ku nooshahay oo canshuur bixiyaal ah oo ku astaysan dowlad jaceyl, Muqdisho waxay mudan tahay in aan maanta u hiillino Muqdisho dadkaas Soomaaliyeed ee ku nool baarlamaanka Soomaaliya ayay maanta hoos yaalliin maanta waxaan rabnaa Muqdisho in aan u hiillino, waxaan rabnaa Muqdisho in la caddeeyo arrimaheeda lana adkeeyo.

Muqdisho waa magaalo soo martay marxalado kala duwan iyadoo dadka Soomaaliyeed ay colaado kala wadeen, geedisocodkii dawlad dhiska Soomaaliya oo deegannada Soomaaliya isku imaan karin, Muqdisho kaligeed ayaa waxay xambaartay ee ay aruurisay ummadda Soomaaliyeed. Muqdisho waa meesha kaliya ee il dhaqaalo ee dawladda Soomaaliya si toos ah u maamusho Muqdisho. Muqdisho waa in aan u hiillino waana inay noqoto caasimad dawlad goboleed ah oo caasimadaha caalamka ka jira la mid ah, waxaan rabnaa inay Muqdisho yeelato matalaad aqalka sare ah ay maamulato hay'adaheeda dawladeed ee gaarka ah.

Sida booliiska daqli aruurinta, canshuuraha, maaraynta dakhliga iyo mashaariicda hormarineed ee laga hirgaliyo magaalada ee muhiimka u'ah magaalada, anigoo ku hadlaaya afka dadka Xamar iyo Xamar daye iyo afka shacabka Soomaaliyeed ay caasimad u tahay magaalada Muqdisho, waxaan cod dheer idinkugu sheegayaa xildhibaanada labada gole Muqdisho in aad masiirkeeda u danaanisaan bannaanka dhigtaan ay caasimad dawlad goboleed ah noqoto. Cagaweyne war hadaad rabtid inta imow warka anigaa wata, Muqdisho ayay joogtaa beriga war iguma jiro, waxaan rabnaa marka xildhibaannada labada gole Muqdisho arrinteeda waxaan

rabnaa in bannaanka la soo dhigo loo hiilliyo ay la mid noqoto dawlad goboleedyada dalka ka jiro aanan looga tagin meel cad loogu tagin, taas waxaan ka leeyahay dastuurka.

Waxaan kaloo aad u taageersanahay dastuurka in la hirgeliyo oo dalka la dhameystiro dastuurkiisa wadan qabyo ah dawladda KMG waa kabaxday dastuurkii ayaa KMG ah kuma shaqayn karto baarlamaanka 11aad shaqo badan ayuu soo qabtay arrintaan hala dardargaliyo dastuurkana aan ka taqalusno waddankana hore aan u wadno waan idinkaga mahadcelinayaa shaqada aad waddaan waad mahadsantihiin.



**Sen. Mohamed Abdi Osman**

Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Labada Guddi ee kasoo shaqeeyay dastuurkan maanta aynu ka shaqaynayno, saxaafada iyo dhamaan marti sharafta kale waxaan idiinku salaamayaa salaanta islaamka asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu. Intaanan gelin doodayda cutubka 5aad waxaan rabaa inaan waxyar dib ugu laabto cutubyadii lasoo dhaafay gaar ahaan cutubkii 4aad.

Erayga Hogaamiye xildhibaano badan ayaa ka hadlay waxaan rabaa aniguna inaan doodayda ku biiriyo, waxoogaha eraygaasi wuxuu leeyahay dhadhan aan fiicnayn in magacyo horey usoojiray uu yahay hogaamiye oo fara badan middii diimeed, mid tacliimeed mid aad ufara badan, waxaan laqabaa saaxiibadii horey waxaan laqabaa in loo raadiyo magac ku haboon.

Waxyaabo badan baa lasheegay, wadamadaan federaalka ahi magacyo badan loo qaato anigu hadaan yiraahdo “governor” runtii waxaan u’arkaa inuu ku haboonyahay California oo 50millon degan tahay Waxaa xukumo “governor” waxaan aad iyo aad carabka ugu adkeenayaa kalmadda madaxweyne maamul goboleed in laga guuro.
Waxay aad usuurad xumeenaysaa waxay aad iyo aad hoos uga dhigaysaa jiritaankii dowladnimada oo ah dal madaxbanaan oo hal madaxweyne leh laakiin markii shirarka lasoo wada fadhiisto dhowr madaxweyne lawada sheegto wax sax ah ma’ahan anigu “governor” baan dhihi lahaa laakiin magacyo ka fiican waa loo raadin karaa.

Markaan dhaho “governor” ninkii meeshaa usareeyey Waxaa jira goboladu waxay leeyihiin “governors” runtii *governors*-ku maadaama hadda layiri sedex heer kala duwan weye dowladdu: dowladda federaalka, maamul goboleedyada iyo dowladaha hoose, magaalooyinka caasimadda ah oo *governor*-ku joogo wuxuu culees kuyahay Maayarka ayuu culees ku yahay, maadaama magaalada dhismaheeda iyo wax qabadkeedu loo doortay Maayarka waxay ku fiicnaan lahayd in maayarku u madaxbannaanyahay.

Oo magacaan “governors” ka oo gobolada jooga maadaama maamul goboleedkii uu “governor” lee yahay in Meesha laga saaro, wallow saaxiibada xildhibaanada qaarkood ay dowladaha sii dadajiyeen oo afar kadhigeen sawabta aan uleeyahay waxa weeyey waxaan ogahay gobolada inay dhibaato ka jirto dowladda hoose “mayor” ku inuusan ka shaqeyn kareynin “governor” ka oo ah yacnii uu ku hayo isagoo dowladiisa ka wakil ah uusan u madaxbaaneyn shaqadiisii. Aduunyadaan waad aragteen magaalo waliba “mayor” baa xukuma magaalooyinka oodhan Waxaa xukuma “mayor” ka “mayor” ku waa ninka lagula xisaabtamaayo, amniga hoos yimaado

waxyaabaha "infrastructure" ka oo dhan ay hoos yimaadaan, arintaasi dood baan kaqabaa wixii laga yeeli karo in laga yeelo. Taas markaan kabaxo waxaan rabaa Qodobka 63aad oo ah xulashada maqaamka magaalada Muqdisho anigu labada xulasho waan wada aqriyey aniga oo ka eegaaya in "overlap" uu yimaado oo magaaladii caasimadda aheyd laba madaxweyne ay wada fadhiistaan anigu waxaan leeyahay Waxaa ku haboon xulashada 1aad baa ku haboon oo ah (Gobol caasimad ah oo hoos yimaada dowladda dederaalka).

Intaa hadaan ka gudbo Qodobka 62aad Farqadiisa 4aad waxay kahadleysaa soohdimaha, anigu soohdimaha waxaan uqaatay inay tahay soohdimihii jiray oo 18gobol ahaa, Waxaa jira shaqooyin dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada ka dhaxeeya iyo Waxaa jira mid gole waliba ugaar ah, shaqooyinkaas ugaarka ah runtii way fara badanyihiin iyo waxey wadaagaan waxay ku taalaa waa,2A, 2B, 2C, 2d ilaa dowladda hoose oo 2C ah.

Mid waliba markaad fiirisaan Waxaa kujira qodobo aad iyo aad ufara badan oo taxan oo qolo waliba awoodeeda ay tahay inay sidey u qoran tahay ay u fuliso, waxaan dhihi lahaa iyadana awoodahaasi Waxaa larabaa qola waliba hay'ad waliba midda ay leedahay inay ku dhaqanto.

Intaas markaan katago gudoonka sharafta leh xildhibaanada labada aqal waxaynu ognahay xildhibaano iyo Senatoro oo saaxiibadeen ahi inay maanta inaga maqanyihiin, waxaan qabaa joogitaankoodu inuu wax badan inagu kordhin lahaa, waxaan leeyahay oo gudoonka ka codsanayaa in gudi loosaaro lala fadhiisto ciddii ogol oo ku qanacsan inay xeendaabka sharciga fikirkeeda iyo aayaheeda ku soojeediso in loo ogolaado.
Sawabtoo ah 50 qof baa inaga maqan 50maskaxood baa inaga maqan wax badan waxay nagala maqanyihiin ra'yi ah, waxbadan oo aqoon ah, wax badan oo faa'ido ah, arintaas gudoonka waxaan ka codsanayaa in arintaasi gudi loo saaro lala fadhiisto ciddii udiyaar ah inay fikirkeeda si wanaagsan udifaacdo oo aan rabsho kujirin in laga aqbalo ayaan jeclaan lahaa. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Ahmed Mohamed**

Runtii waxaan rabaa inaan marka horre toos u galo qodobbada aan ka qabo ra'yiga, waxaana ugu horreeya markaan dejinayno dastuur iyo markaan ka hadlayno dastuur, dastuurka wuxuu u baahan yahay si gaar ah in looga taxadarro, wuxuu u baahan yahay in laga ilaaliyo ereyada dhawrka macno yeelan karo, wuxuu u baahanyahay inuu dastuurka noqdo mid qeexan oo cad, ereyo aan si sax ah loo qeexin waxay keeni karaan fasiraad kala duwan, waxa aan ka hadleyno waa dastuur, marka waa inuu qeexnaadaa, ereygana waa inuusan noqonin eray ay suurtagal tahay in dhawr macno ama dhawr fasiraad loo yeelo. Waa inuu noqdo mid kooban oo si toos ah u qeexaya awoodaha, arartaasi waxaan uga dan leeyahay, waxaan arkay qodobbo runtii u baahan in la mideeyo oo iska soo horjeedo.

Markaan ka hadleyno Qodobka 61aad, Faqradiisa 2aad waxaa ku qoran, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay waajibaadkeeda u gudanaysaa si waafaqsan dastuurka federaalka, halka ay dawlad goboleedyada u gudanayaan si waafaqsan dastuurka federaalka, dastuurka dawlad goboleedka iyo xeerarka kale ee dalka, meeshaas waxaa ku jira isku soo noqnoqosho ayaa ku jirta. Waxaan u baahannahay marka oon soo jeedinayaa in la iswaafajiyo Qodobka 61aad,

Faqradiisa 2aad iyo Qodobka 67aad, Faqradiisa 1aad, waxaa ku qoran Qodobka 61aad, Faqradiisa 1aad, dastuurka dawlad goboleedyada waa in ay noqdaan kuwa waafaqsan oo aan ka hor imaanaynin dastuurka federaalka, Faqrada 2aadna waxa ku qoran, qodob kasta oo dastuurka dawlad goboleedyada oo aan waafaqsaneyn dastuurka federaalka, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan. Marka ma jirto baahi loo qabo in mar kale la soo celiyo oo la dhaho dawlad goboleedkana waxay ku shaqeyneysaa dastuurka noocaas ah, dawladda federaalkana waxay ku shaqaynaysaa dastuurka federaalka, labadaas ayaa xaddiday, wax kasta oo kasoo horjeedo dastuurka federaal inaysan ahayn dastuur sax ah. Marka waxaan qabaa oo aan soojeedinayaa in la iswaafajiyo Qodobka 61aad, Faqradiisa 2aad iyo Qodobka 67aad, Faqradiisa 1aad iyo 2aad.

Intaas kaddib. Waxaan rabaa inaan u soo gudbo Qodobka 62aad ee ka hadlaya, dhisidda dawlad goboleedyada iyo soodimaha, Faqrada 5aad ee qodob kaas waxaa ku qoran, dawlad goboleed waxaa ku midoobi kara 2,3 ama 4 gobol oo deris ah ayagoo xor u ah go'aan kooda, arrintaas dabcan xildhibaanno badan ayaa ka hadlay, waxaan rabnaa runtii inaan tajribadii aan soo qaadannay fatradii la soo dhaafay wixii aan ka barannay dastuurka asaasan waxa loo samaynayay oo federaaleynta loo samaynayay waxay ahayd in dawladnimada la daadejiyo ayay ahayd oo hoos la gaarsiiyo, sababta looga dhigay federaal sidaas ayay ahayd sidaa darteed waxaan qabaa in laga dhigo faqradaas wax ka badan hal gobol ama hal gobol iyo wixii ka badan in lagu soo kordhiyo oo laga saaro tirada kale.

Qodobka 63aad oo runtii dad badan ay ka hadleen oo aad iyo aad runtii loo naax-naaxiyay, waxaan ku celinayaa aniguna xulashada ay soo diyaariyeen guddiga dastuurka, xulashada 2aad oo ah caasimad dawlad goboleed ah, saas markaan leeyahay, Gobolka Benaadir iyo Caasimadda Muqdisho waa wax ka dhexeeyo dadka Soomaaliyeed oo dhan, dad si gaar ah u leh ma jiraan, dad si gaar ah dadka kale uga xigaan ma jiraan, waa meel la wada leeyahay oo dadka Soomaaliyeed oodhan ay runtii wada leeyihiin.

Magaca Gobolka Benaadir iyo Caasimadda Muqdisho waxa ay ku suntantahay ama ay ku sidkantahay isirka Soomaaliyeed, haddii la maqlo magaca Gobolka Benaadir ama Caasimadda Muqdisho, qofkasta oo Soomaali ah ayaa iskaleh, waana wax dadka oodhan ka dhexeeyo waaye, shanta Soomaaliyeed ayaa runtii meeshaas iska wada leh, waa ogtihiin dhammaantiin, lagama sheekaynayo, waa magaalo shanta Soomaaliyeed laga wada heli karo, ay kuwada nool yihiin, ay ka dhexayso, haddii aad aragto qof u doodaayo, haddii warkiisa u ekaado inuu dad gaar ah u doodayo macnaheedu maahan inuu dad gaar ah u doodaayo ee wuxuu u doodayaa caasimadda, wuxuu u doodayaa gobolka, wuxuu u doodayaa shanta, afarta milyan ee gobol kaan ku nool oo ay ka kooban tahay Soomaali oo dhan.

Marka waxaan rabnaa, anagoo ka ambaqaadeyno arrintaas in la dhaho magaalo madaxda federaalka waxay noqonaysaa dawlad goboleed leh maqaam iyo xuquuq la mid ah kuwa dawlad goboleedyada. Magaalo madaxda qodobka kale, faqrada 2aad waxaa ku qoran magaalo madaxda federaalka kuma biiri karto gobol kal, ma noqon karto qayb dawlad goboleed kale ku dhul ballaarsato. Waxaan rabaa, haddaayayna waan sheegay, waxaan qorayno waa dastuur, ereyga dhul ballaarsi, asaga ayaaba xanaf leh, dadka dareen ayuu gelinayaa, dhul ballaarsi waxaa ka muuqdo xoog iyo isku awood sheegasho ayaa ka muuqata, dhul ballaarsi in ereygaas uu meeshaan ku soo arooro, horta waxaan qabaa inuusan sax ahayn oo marnaba munaasab ahayn, dastuurku waa wax tilmaamaayo, sharci iyo xeerar anaga aa leenahay, u dagsaneyno danteenna iyo maslaxaddeenna laakiin haddii la yiraahdo awood ballaarsi iyo dhul ballaarsi,

waxaa ka muuqato meeshaas qofkii arko asaga ayaaba dhiillo gelaysaa, waxaan qabaa marka qodob kaas in meesha laga saaro, laguna beddelo inuu maamul goboleedka awood u leeyahay ama uu ka shaqayn karo asagoo u marayo maamul goboleedka kale ee deriska la ah, wada hadal iyo wax isla faham, ayada oo laga duulaayo sharciyada maalgashi ama ballaarinta caasimadda iyo deegaan keeda iyadoo laga duulaayo waxaa la dhihi karaa marka wada hadal iyo waxay isla gartaan labada maamul goboleed oo ay kawada xaajoodaan laakiin dhul ballaarsi meesha ma soo geli karo, marka waxaan qabaa in la yirhaahdo waa u furan tahay laakiin waxay wada xaajood la galeysaa maamulka meeshaas marka laga maarmi waayay, ayaga waxay isla gartaan bayna sameynayaan, qodob kaasna waxaan qabaa in halkaas asagana doodeyda aan ku caddeeyo.

Waxaan rabaa Mudanayaal, meeshaan marka aan joogno, wax badanna waa laga dhawaajiyay, waxaan matalnaa Ummadda Soomaaliyeed, waxaa nahay xildhibaanada u soo dhaartay matalaada dal kooda iyo dad kooda ayaa nahay, waxaa naga reeban waxyaabo badan oo runtii dastuurkeenna ku qoran, xeer hoosaad keenana ku qoran.

Waxaan aaminsanahay waxa keliya oo ku kala bixi karno oo aan haddaan isqabsanno aan ku kala bixi karno inay tahay inaan si degan u doodno, codkeenna dhiibano anagoo ixtiraam iyo isqadarin iyo walaaltinimo runtii ay ka muuqata wada hadal kaas laakiin sida laga dhawaajiyay muuqaalladii maalmihii la soo dhaafay meeshaan ka baxay, ma ahayn runtii muuqaallo fiican, waxaana leennahay dadka Soomaaliyeed waan ka raaligelinaynaa, munaasab ma ahayn, ma habboonayn inay ka daawadaan shaashadaha iyo cod baahiyayaasha, xildhibaanadoodii oo runtii sidaas u dhaqmaayo, waan ka raaligelinaynaa, waan ka cudur-daaranaynaa, waxaana rajeynaynaa Insha'Allahu tacaalaa inay noqo doonto wax aan wax badan ku qaadanno, inaan hadda wixii ka dambeeyo iskudayno inaan dabaqno xeer hoosaad keena,inaan cod keena miiska la imaano, aqbalno haddii nalaga bato, haddii anagu badanana sidoo kale nala aqbalo, marka sidaas ayaa asluubta xadaariga ah, sida dadka ay ku kala baxaanna ah, sida xildhibaanada u shaqeeyaan waa sidaas.

Marka maanta sida laga dhawaajiyay meesha dawladnimadeena ay mareyso, dal keena uu maraayo, duruufaha caalamiga ah ee maanta jira, inuu muuqaal noocaasi oo kale ah inaga soo baxo runtii wax aad iyo aad looga xumaado waaye, waase kadabatageynaa. Walaalaha runtii saaxiibbada ah oo arrintaas runtii ka xumaatayna, waxaan rajaynayaa inay dib ugu soo laabtaan ayagoo u hoggaansan shuruucdooda, xeer hoosaadkooda iyo dastuurkooda. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Abdiqafar Elmi Hange**

Dawladda Dhexe iyo Federaalka, Dawladd gobleedyada xubinta ka ah iyo dawladda hoose qaabka ay guddigu u soo dhiraandhiriyeen oo u soo dhiggeen, midna waxaan wax yar ka oranayaa nidaamka *Federalism*-ka, mudane guddoomiye, mudanayaal iyo marwooyin, horta waxa muhiim ah, aragtida xillibaanadu doodooda ay dhisaayaan inay marwalba ku qotonto xaalada dalka, ee siyaasadeed iyo midda dhaqaale iyo midda keentay inagoo dadka Soomaaliyeed oo isku wax walba Ay wax walba ay wadaagaan inaan doorano nidaam federal ah, dadka Soomaaliyeed waxay waadaagaan luqad waxay wadaagaan dhalasho waa hal

"ethnic" oo "Multi ethnic society" maaha, waxay wadaagaan diin, waxay wadaagaan deegaan, sidaas darteed waddan kasta oo adduunyada federaal ah intaa ma wadaago, sababaha ugu badanoo feeraalka loo qaato nidaamka federaalka waxa waaye dadka intaa kala duwan, in ay helaan wax mideeya oo Identity-ah, aniga laakiin sabab taa ka duwan baan u qaadanay, dawladda dhexe naga burburtay waaan kala tagnay, waxaa la rabay inaan isku soo noqo inaan is aaminno oo dadka Soomaaliyeed dawladdnimadiisa la soo celiyo, marka nidaam federaal ah awooduhu inoo qaybsan yihiin oo waxna aan isla leenahay, waxna aan kala leenahay aan dhisano micnaheeda ma ahan qasab maahan federaalka inuu jiro, waxa ugu weyn waxay aheed dadka Soomaaliyeed iney isku soo noqdaan, kalsoonidooda isku soo noqoto, oo ay dawlada wax kuwada maamushaan, maalinta ay gaarto haddii "model" kale oo ka haboon oo unitry ah, uu yimaadana ay halkaa ugu gudbaan, marka waxaan rabnaa dooda ah wax qaybinta awoodaha caasimadda waxaas oo dhan inay arrintaa ku salaysan tahay.

Mida labaad ee aan rabo waxyar inaan ku noqdo oon dooda rabo in lagu saleeyo waxa weeye, Soomaaliya wa dal faqri ah, madaama dal faqri aan nahay haddii aan meel walba oo dowladd gobleedkii oo gole wasiirro leh oo wax alaale wixii dawladda dhexe lahayd aan sameyno oo haddana dawladihii hoose aan samayno oo haddana dawladihi dhexe ay jiraan "the more" aan badino dowlada qarashkeeda "more" aanay dawladnnimo taabagasho, waxtarta aanan helin waaye, waxan rabna dhaqalaheena waxa aan canshuurteena aan ku bixin karno iyo dawladda aan dhisayno, oo aan proposel-gareyneyno oo aan inagu masuul ugu nahay inaan dadka soomaaliyeed halkaa go'aan ugu qaadano in lays waajiyo ayaa muhiim ah. intaas ka dib caasimada markay timaado, caasimada waxaan aniga "Ta'kiidsanahay" xulashada koowaad, caasimadda waa in ay noqotaa caasimad madaxbannaan oo dawladda siday hadda tahay, sababtana waxay tahay, caasimadda dadka Soomaaliyeed bay ka dhexaysaa, marka la doodayo hadii ay noqoto u muuqdo wax gaar ah, "group" gaar ah ugu raadinaayo haday u muuqato waxaad ku xisaabtamaysaa inaad xilibaan kale iyo deegaano kalena ay rabaan inay caasimadda kula yeeshaan oo ay iska dhex arkaan, caasimad la wada leeyahay oo lahaanshaheeda *ownership*-keeda dadku ay kawada dhex muuqdaan ay tahay.

sababta caasimada dadka isku imaanayaan oo ay iskugu imaanayaan muhiimada u leedahay taa waaye. Midda labadaad waxa weeye caasimaddu waa run waxaa lays waafajin karaa ayadoo caasimad ah oo dawladd aan ahayn ayaa haddana waxyaabaha ay u baahantahay la heli karaa, aniga marka waxaan soo jeedinayaa guddiga in ay keenaan horta xulasha koowaad inay qaataan, lakiin matalaada xubnaha ka maqaka maan matalaada caasimada ayadoo la soo siyaadineynin waala garan karaa qaab baa loojaan gooyaygoboladii baalagu fariisiyay cida ay ugu maqan tahay ama haka keenaan xal ah inay Muqdisho mataladeedda hesho, Muqdishoinay golaha caasimada iyo golaha fluinta iyo magaalo madaxda sida caasimadaha kaleeto o magaalada ay u dhisanyihiin oo kale laakiin meesha ugu yar aan idin ka tusayo waxay tahay canshuuraha haddii dawladda dhexe halkaan joogta oo maamul gobleed ay noqoto oo hadana caasimad noqoto oo dawlad hoose noqoto oo hal magaalo ay tahay, sidee dakhliga ugu soo aruuurineysa? Side dakhliga aad soo aruurisay intaasoo maamul ugu fulinaysaa, dadkaa rabtaa in wax loo qabto oo caafimaadka iyo waxbarasha iyo wadooyinka iyo biyaha adeegii dadka rabeen in aad gaarsiiso misa waxaad ka shaqaynaysaa inaad dad dhistoo dad gaar ah u qaybiso aad golayaal samayso kulligood is wada khilaafsan oo araktiyo kala duwan wada oo maanta bari iyo bisha iyo sanadka aan laga dhammaaneen waxaan rabnaa marka waan soo aragnay waana ku soo daalnay wax interest-yo baqdin ku dhisan, oo ku dhisan aniga amaa leyga arkaa, aniga amaa leyga badsadaa, aniga waxaan arkaa in laga aado muhiimada in laga aado laga aado danta

guud oo u danaynaysa dadka guud, dadka ku nool Muqdisho waxay u baahan yihiin biyo, waxay u baaahan yihiin nadaafad waxay u baahanyihiin caafimaad, waxay u baahanyihiin waxbarasho waxay u baahanyihiin, waxay u baahan yihiin amni hormar, waxay u baahanyihiin hormar iney hori u dhaqaaqaan.

Marka mida u xallineyso ayaan qaadaneynaa hadduu Alle yiraahdo, mida kale waxa waaye awoodaha iyo sida loo qaybiyay, guddiga waxaad moodaa waxaa jira sidaan sheegay federaal iyo "Decentralize unitary system" awoodaha sida hadda guddigu u kala jajabiyeen waxaad moodaa "Decentralize unitary" iney tahay *Policies*-ki awoodihii daadajinta oo dhan waxay u reebeen dawladda federaalka ah halka maamul gobleedka laga soo qaaday sidii hal gobo loo kale oo asaga fulinta kaliya u xilsaaran, waxaan rabnaa guddiga awoodaha waa badan jadwalkaan lagu xusay 2A 2B iyo awoodaha la wadaago waxaan qaadannay federaal in loo ekaysiiyo oo aan aqbalno in aan federal qaadannay.

Maamul gobleed awooda la geeyay "why" awoodaha sababaha kaleeto dadkii Soomaaliyeed markii laga arruuriyay waxay waaye waxay rabaan in adeeggii loo dhoweeyo waxay rabaan go'aaan qaadashadii in waxay rabaan in ayagu aanay wax walba ay go'aankooda qayb ka noqdaan, marka hadii aynaan taa ku saleynin federal maahan, waa sax waxyaabaha magac dawladeed innaga fool xumaynaya aan ku raacsanahay Sanatar Manjiino halkaan ka hadlayay waxa weeye in madaxweynayaasha meel walba la dhigo, oo magaca in lakala beddelo waan qabaa madaxweynaha jamhuuriyada laakiin ku wa kale in magacyo kale loo bixiyo oo ku habboon, laakiin markay timaado awoodaha waxaan rabnaa maamul gobleedka inuu helo awoodii marka laga reebo waxyaabaha guud oo midnimada ah, siyaasada lacagta, difaaca dalka, arrrimaha dibadda, wixi la halmaama, awoodaha dajinta siyaasadaha iyo fulintoodaba waxabarashada iyo iyo biyaha oo dagmadaas saameynaaya ayadu la rabo iney u dhisaan garayso u aqbalno baa la rabaa, dabcan waa jirayaa mabaadi guud oo "Decentralization" oo aan la dhaafi karin, oo waxbarashada oo kale haddii uu maamul yiraahdo aniga "secondary" waxbarashhadii *system*-keedii wuxuu ku fadhiyaa 10 sano, maamul kalena uu yiraahdo wuxuu ku fariisanayaa 12 sano ama 13 sano way adkaaneysaa in la *combine*-gareeyo, *maybe*-si guud loo dajiyoo dawladda dhexe u dajiso lakiin siyaasadeda in loo daayo "standers" ay ku hagaan fulinteeda loo daayo caafimaadka sidoo kale, wali waaxan rabnaa in laga siidaadajiyo oo dawlada hoose gacanta loo sii geliyo fulinta "because" waaba taasba ujeeddadu waa taa in meelba Meesha ay ka hooseyso la geeyo adeeg bixinta iyo awood fulinta, dakhliga iyo canshuuraha doodaha maanta kuma jiro waxaa jiri sidaan u fahmay oo ah nidaamka federaalaynta maaliyadda dalka oo aad u dhib badan, dabcan looga hadlayo awooda daadajinta yaaleh awood dakhkligee bay soo aruurineysaa? Dawladda gobleedku keebaa dawladda dhexe aruurinaysaa? Sidee dakhligaa laftiisa lo qeyb sanayaa? Side hoos u dhac u imaanin waxaas waa qodobada marka khuseeya canshuuraha dadkhliga iyo nidaamka maamulka maaliyadda in laga saaro oo chapter-ka loo daayo si aanay isku soo noqosho iyo u abuurin, mida iigu danbeyso waxaa waaye dabcan nidaamka garsoorka iyadana la kala saari doonee garsoorka lagu soo qoray chapter-ka 2 B in loo daayo awooda iyadana chapter-ka ay qusayso cutubka ay khuseyso loodaayo la sugo oo laga fogaado.

Halkaan waxaan kaloo ku gabagabeynayaa oon guddiga u soo jeedinayaa, qoodbadaan la soo jeediyay gaar ahaan awoodaha iyo sida loo qaybsanayo waxaan kale maamul gobleed kale heshiis bay ka gaareen, heshiis baa jiray laga gaaray dawladda dhexe iyo maamul gobleedyada heshiis kaas waxaa ka maqnaa Puntland, waxan doonaynaa marka aniga aragtiyadeena aan ka

soo jeedineynaa in aad ku dartaan farqad ah inuu wali wada-xaajood ka furanyahay maamul gobleedkii ka maqnaa "because" ugu danbayn waxaa rabnaa wada yeelanaaya dalka dabcan awoodaha daadajinta sharciga baarlamaanka federaalkaa iska leh, lakiin waxaan rabnaa in la oo wadatashiga la siiyo oo lagu celiyo marka waxa la idinka doonayaa inaad halkaan faqrad ku soo dartaan maamulladii ka maqnaa oo hishiiskaa siyaasadeed aa saxiixinin in waqti wada xaajood ah la geliyo, oo ay ku soo darsadaan wax ay ka beddelayaan ama aragti ah oo ay hayaan aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin. Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Abdikani Gelle Mohamed**

Mahadsanid guddoomiye. Waan soo koobayaa maadaama wakhtigii salaaddu uu dhowyahay waxaan rabaa inaanan dhaafin meeshii habdhawruhu hadda ka hadlaysay oo aana dib ugu noqon meelihii shalay laga hadlay.

Qodobka 77aad oo looga hadlaayo dhexgalka baa waxaan rabaa inaan waxyar ka idhaahdo Faqradiisa 3aad waxay leedahay markii ay jirto xaalad degdeg ah oo aanay suurtagal ahayn in talo wadaa dawlada federaalka, waxay qaadi kartaa tallaabo. Halkaas waxay u muuqataa markii hore haddaan state ka laga la tashan ooo aan la gaadhsiin oo uusan wakhtigu suural ahayn dawladdu inay qaadi karto talaabo, tallaabo militari bay noqon kartaa markaa waxaad moodaa halkaa inaan u banaynayno inay is laayaan oo dawlada federaalka iyo ciidankeeda iyo inay islaayaan ciidanka state-ka. Arrintaas waxaan qabaa halkaa in laga hormariyo, haddii ayasan suurtagal ahayn in wada xaajood laga galo in loo gudbiyo aqalka sare si uu isagu go'aan uga gaadho iyadoon aqalka sare oggolaansho laga haysan haddii dawladda federaalka ahi tallaabo qaado oo dhexgal ay ku samayso, dhexgalkaasi mid milatari buu noqon karaa mid siyaasadeed buu noqon karaa islayn iyo dhibay keenaysaa. Qodobkaasi waxaan qabaa in dib loogu noqdo oo laga hormariyo awoodda tallaabo qaadka inay ku fulin karaan go'aan baarlamaan haddii alle idmo qodobkaa intaasaan uga gudbayaa.

Qodobka 2aad waxaa weeye jadwalka, jadwalku kuma jiro dastuurkii hore wax ku jiray ma ahayn waad arkaysan qodob waliba qodobada hadda aynu ka hadlayo kuma jiro isaguna meelgaaruu ku qoran yahay waana heshiis sida xidhibaannada qaarkood ay xuseen state-yada qaarkood iyo dawlada dhexe gaadheen, sida la sheegayna waxaa ka maqan Puntland, inaguna federaal baynu noqonay in markaa aynu gacan u taagno ama aan dhahno sidaasaa lagu shaqaynayaa, wax heshiis siyaasadeed u baahan way idinku soo noqnaysaa suurta galna maaha, waxaad ka markhaati tihiin halkan labo sano ka hor waxaan ku ansixinay afar cutub. Hadda shantii bari ee u haraysayna waxaan ka doodaynay kii aan asixinay laftigiisii baan ka doodaynay si uu noogu soo nodayna manaqaano. Annagu maanaan codsan labo boqol iyo itaasaa fadhisaday xildhibaan oo halkan lagu ansixiyay halkan waa kii Aadan ka lahaa masha Allah yaa nagu soo celiyay wuxuu ku soo noqday heshiis siyaasadeed wixii labada boqol ee xildhibaan ay gacanta u taageen dib buu u soo noqday yaa markaa damaanad qaadaya haddaynu maanta u gacan taagno kan bari inuusan soo noqonayn waxaan rabaa markaa inaynaan ku degdegin.

Arrinta wada xaajood baa laga galayaa heshiis siyaasadeed ayeyna u baahantahay qodobkan ha loo xawilo ugu yaraan cutubka 15aad inta laga heshinaayo. Midda ugu danbaysa waxaa weeye su'aal hadda ka hor guddiga la waydiiyey waxaa ku jiray, qodobadii dib loo dhigay oo aynu cutubkii 4aad ku ansixinay iyo saddexaad miduu ahaa ma garanayee oo ahaa da'da

qaangaadhka iyo diinta qodobadaas waxaa la yiri dibaa loogu noqonayaa haddana kuma jiraan cutubyada gudbay iyo kuwa soo socda midna. Waxaan xogta ku haynaa, waxaan u baahanahay guul maaha inaan dhahno banaankaan u saarnay inagaa halkan fadhiyeenaa iyaguna makhaayadaha ha fadhiyaan barri bay innaga inagu dhacaysaa. Arrinta wada xaajood ha laga furro oo golaha shacabka guddoonku arrintaa albaabka ha furo daawana ha la raadsho waad mahadsantihiin.



**Xil. Omar Ali Abdi**

Dhamman waxaa idinku salaamay, assalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu.

Waxaan rabaa marka koowaad inaa ku bilaabo ajandaha naloo soo diray, waxuu ahaa cutubka shanaad inaa ka doodno, meel 69, 67 iyo 70 ka bilaaway meel ay ku qornaydi ma jirin, marka annaga cutubka 5aad qof waliba meesha umuhiimsan ayuu ka doodi karaa, marka aad kala soo saartaan kala saar kaasaa qof waliba aragtidiisa ayuu ka doodi doonaa haduu alle yiraahdo, intaas waxaan iraahday *Team*-ka habdhooraha.

Waxaa intaasi ii xigta cutubka 5aad waxaan rabaa qodobka 63aad maqaamka caasimadda taasi waa muhiim, waxaan rabaa inaa ku billaabo horta magaaladaan Muqdisho waa magaalo oo Soomaaliyoo dhan ay ku dhantahay, sida odayaasha iga horreeyay ay sheegeen, waa caasimaddii dalka, waa meel muhiim u ah dalka, magaaladaan waxay ku dhibantahay, dakhliga ka soo baxo sidaas ah inaa ayaga looga celinin, waxaa ugu yar waddankaan waxa uu leeyahay Dakado, Maamul kastana Dakaduu leeyahay, dakada kaliya 15ka qaado inta kalana laga qaado kuwa kalena loo qeebiyo magaaladaan Muqdisho waaye.

Xildhibaanka hadda iga horreeyay ayaa ka hadlay dakhliga sida loo aruurinayo, dakhliga magaaladan waxaa lagu aruurinaa, dadka hada haaya ayaa aruurinayo, dad kale oo kor ka soo dagay oo cirka laga keenay oo la keenayo ma jiro, magaaladu waa amni doorashayy gashay, si xur ah ayay u gashay, wax caqabadoo jira malahan, duqeeda ayaa la dooran karaa ku xiggeenadeeda ayaa la dooran karaa, maamuladeeda ayaa la dooran karaa, halkaan waxaa kun taala laba xeer, xulashada 1aad sabab loo soo galiya aniga maba aqaanagba, gobol caasimad ah oo hoostimaada dawladda fadaraalka ayaa ku qoran maadaama ay saas tahay, hadeey tahayba, looma baahna, in la soo galiyo, Marka aniga waxaa qaadan lahaa xulashada 2aad, oo aan rajeenayo insha allaahu tacaalaa inee noqoto Muqdisho maamul Gobal Banaadir oo ma argtay Caasimad ah oo madax bannaana, qofka imaanayo la doortay, uu xur yahay oo la mid yahay maamullada kale, maamullada kale ayaa ka go'aan adag, maamulka Gobalka Banaadir, ka qaybgelka wadahadallada intaa arkeyseen ayaa laga maray, markii ka qayb galaaye Duqa ugu horeeyay, waxaa rabaa marka magaalada Muqdisho waxeey xaq u leedahay in la madaxbanneeyo, waxay xaq u leedahay in maamullada kale sida ay yihiin inee u noolaato, dakhligeeda iyo soo aruurinteeda in la madaxbanneeyo.

Waxaa rabaa inaa ka hadlo Qodobka 72aad ayaa ii labeeyo, awoodaha ugaarka ah dawlad gobaleedyada waa kan, Qodobka 70aad awoodaha ugaarka ah dawlada federaalka Qodobka 70aad waxaa ku jira awoodaha u gaarka ah dawladda federaalka, way badan yihiin qodobada

ma araktay  ku jira, jadwalka  2aad ama labo ah, awoodaha ugaarka dawlada federaalka,inta iigu muhiimsan ayaa waxay tahay, habraacyada nidaamiyaha hubka fuduud iyo saanadda gaarka loo leeyahay, waxaa u fahmay hubka "public" iyo "private" waxaa masuul ka ah dawlada federaalka soomaaliya,  waa difaacii dalka waaye, waana wasaarada gaashaandhiga masuul ka ah habraacyo lee yahay, waxaana rajeen doona insha allahu tacaala hada inta aan dastuurka ku jirno dhamaadkiisa ama dhexdiisa hadee suur tagal noqoto inaa keeno, "defency biil" oo ay soo diyaarisay wasaarada oo la soo marsiiyay xukuumadda, sidoo kalay habraacaani waxaa loo mar siiyay xukuumadda, hada jirta, waxaana masuul ugu ah hubka "public" iyo "private" ba saanad iyo wixii la keenayaba haddii ha u yaraato  hana u badnaato, waaarada gaashaandiga masuul ka ah waana difaaca dalka waana halka meel ay ku mideesan yihiin ummadda Soomaaliyeed in iyo wasaaradda arrima dibadda aan iraahdo waa meelaha ay ku midaysan yihiin in dawladda loo madax banneeyo, marka waxaa qabaa halkaan in luu cadeeyo "public" iyo "private" ba iyo saanada mid yar iyo mid weyn masuul ka tahay dawlada federaalka Soomaalieed.

Sidoo kale waxaa rabaa inaa ka hadlo isla qodabkaas waa kii 72aad awoodaha wadaagga 71aad waaye 71aad waxaa ku jiro awoodaha wadaagga ah awoodahaas wadaag ah waxaa ku jira, kaluumaysiga, maamul gobaleedyada, iyo ma araktay dawladda fedaraalka inee wadaag ku yihiin kaluumaysiga iyo qeeraadka, waxaa raabaa marka haddii maamul gobaleedyada maamul gobaleedka ka mid ah uu bixiyo shati ma araktay bahalkaan la yiraahdo markabka weyn ee wax maragtay xaalufiyo, hadduu bixiyo dawlada aysan ka war qabin, shaqo ku lahen, masuuladeeda yaa qaadaayo marka waa meelaha daqliga ugu muhiimsan dalka ka soo galo waa meelaha muhiimka ah waa meelaha ma aragtay aan lagu haleen karin mararka qaar maamullada, intii maamulada isla socdaan awood lee yihiin intee kala socdaan maamul walbo si gaar ah ayuu awood u leeyahay oo aad arkayseen oo hada ugu dambeysay ceyrintii la ceeriyay dawladihii madax bannaanida ma aragtay ku guda jiray maamule diiday in laga ceeriyo inee jireen marka awoodaha muhiimka ah oo dalka iyo dadka iyo taranka muhiimka u ah waxaa qabaa in aanan wadaag laga dhigin waana mahadsantihiiin.



**Xil. Jama Mohamed Askar**

Bismilaahi raxmaani raxiim guddoomiye xildhibannada sharafta leh halkaan fadhiya Asalaamu Caleykum waracmatulaahi wabarikaatuhu waan soo koobayaa dhawr qodob ayaan ka hadlayaa qodobbada 76aad ilaa 79aad baan ka hadlayaa oo ka hadlaya dhaxgalka dawladda federaalka ah dhaxgal markaan ka hadleyno guddiga dastuurka soo diyaarisay waxay adeegsadeen erey aad u ladhifan dhexgal run ahaantiina waxa laga hadlayo faragelin waaye dawladda federaalka ah goormee awoodeysaa in ay faragelin maamul goboleed oo mararka waar ay la wareegto maamulka gobolkaas waxay ku sababeeyey midnimada dhuleed ee Soomaaliya iyada oo la ilaalinayo sida ay ku dhigeen "article" ama qodobka 76aad farqadiisa 1aad "reasons"ka iyo sababaha waxa ay ku sheegeen intan waa midnimada dhuleed; amniga qaranka; iyo madaxbanaanida dalka

Waxay kaloo sheegeen daruufo adag oo ku yimaada dawlad goboleedka ee uu maarayn waayo ereyga daruufo adag waa kalimad aad u ballaaran oo faahfaahin ah oo wixii la doono lagu micnayn karo sharci ahaan waxaa fiican in halka *Reasons*-ka dawladda federaalka ah ay faragelin karto maamul goboleed ay caddaadaan waan ku waafaqsanahay midnimada qaranka

Soomaaliyeed haddii halis soo gaarto waan ku waafaqsanahay nidaamka dastuuriga ahii hadday dhibaato soo gaarayso.

Waxaa kaloo ay tahay in la caddeeyo duruufaha adag ee kale waxaan ula jeednaa "emergecies" hadey dhacaan tusaale ahaan dagaale ka dhacaan qabaa'ilka is laayaan haddii abaaro ka dhacaan masiibooyin dhacaan waa in ay cadaadaan duruufaha qasbi kara dawlada federaalka in ay fara geliso maamul goboleed sideedaba dawladda federaalka kama maqna federaalka labo "structure" kala madaxbanaan ma ahan maamul goboleedka waxaa jooga ciidan federaal ah oo booliis ah oo militiri ahiyo hay'ad ee dawlada ay leedahay ayaa joogi doona micnaha halkaan ereyga dhaxgelka waa erey ladhifan waa in waxa uu yahay lagu sheego.

Arimaha kale ee meeshaan ku qoran *Article*-ka 77aad Faqradiisa 3aad waxaa ku qoran haddii xaalad degdeg ah ay yimaadaan dawlada ayaa tallaabooyin qaadi doonta oo degdeg ah iyana 14 cisho ka dib bey horgaynaysaa aqalka sare isla "Article" waxaa ku qoran marka xaalada caadi tahay dawladdu 14 cisho gudahood bay ku geyneysaa aqalka sare micnaheeda waxaa waaye intey tallaabo qaado ayey geyn kartaa waxaa kaloo u banaan dawladda in aanay tallaabo qaadin ee aqalka sare geysa labada jeerba arrintaas waxaan ku talin lahaa in mar walba la helo *Approval*-ka horreeya faragelinta ay dawlada dhexe ay samaynayso oo aqalka sare sameeyo "aprove" gareeyo waa in kalee caadaataa nisbada uu ku oggolaanayo aqalka sare ma "simple majority" buu ku ogolaanayaa hal dheeri mise wuxuu ku oggolaanayaa seddax meelood labo meelood madaama faragelin tahay dawlada dhexe samaynayso waxaan ku talinayaa in la yiraahfo aqalka sare ayaa oggolaanaya faragelin kasta oo dawlada dhexe ku samaynayso maamul goboleedka aqllabiyada ay ku ogolaanayana uu ahaado seddax meelood laba meelood ee taariikhda markaan eegno Spain bey ka dhacday 2017kii Catelonia afti bay qadeen maamulkii halkaa ka jirey federaalka ahaa madaxbanaani bey ku dhawaaqeen dawladda Spain iyada oo ilaalineysa mid ahaanshaha dhul ahaaneed ee Spain sanadka ayey geysey sannadka markuu oggolaadey meeshooda dawladda la wareegtay maamulka oo dhan waxaa la hoos geeyay dawlada dhexe aakhirkii 2017kii ay doorashooyin ku qabteen oo ay dib usoo celiyeen ismaamulkii Catelonia marka waxaan ku talin lahaa hawshaasi aan noqon in guddiga ka shaqaynaysa "article" fara badan baa halkaan ku qoran ha la soo koobo "reason" ka dawladda ay u faragelin karto waa in uu ahaadaa wax cad oo kooban ha ahaado mid uu "aprove" gareynayo aqalka sare nisba ah seddax meelood laba meel ku oggolanayo saa dawlada federaalka ah markaa ay ku farageliso.

Arrinta jadwalka waan soo koobaya seddax "structure" ama seddax qaab dhismeed oo kala duwan baa lagaga hadlayey awoodahooda waxaynu utaag la'ayn dawlad federaalka ah iyo maamul goboleed hadana halkaan waxaan ku qornay awoodaha dawladaha hoose oo dastuuri ah taasina waxay abuuri doontaa is qabsi aad u xoogan iyo maamul xumo ka dhex dhacda maamulka sare ee maamul goboleedka iyo degmooyin waxan ku talin lahaa in arintaan gabi ahaanba meesha laga saaro oo awooda "structure" kaan ah mesha laga saaro awoodahana loo celiyo maamul goboleedka baarlamaankana uu soo saaro xeerka Gobbolada iyo Degmooyinka lagu maamulayo oo xeerka gobolada iyo degmooyinka oo seddax "structure" baan samayn karnaa, Soomaaliya hadday bar-barad tahay federaalki kow nooyahay aynu intii hore noo jirtay adkayno wasalamu caleykum waraxmatulaahi wabarakaatuh.



**Sen. Zamzam Abdullah Ahmed**

Guddoonka labada aqal xildhibaannada labada aqal, hawlwadeenka, guddiga waan idin salaamay.

Salaan kadib waxaan rabaa dhawr qodob in aan ka soo jeediyo aragtidayda ku aadan waxaan ku billaabayaa labada xulasho ee naloo soo gudbiyay Qodobka 63aad waxaan rabaa in aan codkayga ku biiriyo oo ku xoojiyo xulashada 2aad oo ah in sidii state ay noqoto magaalada Muqdisho anoo qiimeenaayo "concern" ka ay qabaan xildhibaanada intooda badan doortay xulashada 1aad iyo waxa ay "concern" ka qabaan.

Number 1 magaalada Muqdisho waxaa degan qiyaastii 2.8 ilaa 3 Milllon "people" ayaa dagan macquul ma ahan in la dhaho mayeelanayso nidaam iyo ismaamul iyo xuquuq ma yeelanayso in la dhaho wax suurtagelayo ma ahan "concern" ka la qabo in magaalada ay hal meel u badato aa la diidan yahay, wixii ka soo baxayo iyo ismaamulkeeda. Ayadoo "city state" ah *Representative*-keeda iyo maamulkeeda loo qaybin karaa 4.5 oo Soomaali oo dhan inay wada leedahay aan aaminsanahay aniga ka zamzam ahaan, oo 4.5 ayaa lagu qaybin karaa maamulkeeda laakiin waxaa qasab ah inay Muqdisho yeelato maamul.Haddii la dhaho "state" waxaa noqon kara hal gobol iyo wixii ka badan aniga waxaan qodobkaas ku biirinaayaa "state" ayaa noo dhisan in dib loo furfurin "one state" iyo wixii ka badan ayaa maamul noqon kara aan la dhihin, kuwa hadda noo dhisan dib naloog celinin laba "option" ayay noqonaysaa in aan ku noqono 18kii gobol oo "central government" ay noqoto ama laba gobol wixii kabadan ay "state" noqdaan anigu taasaa aaminsanahay. In muqdisho "city state" ay noqoto aduunkana way ka jirtaa "system" kaasi oo "system" kaas aan ku raacno een awood qaybsigeedna 4.5 hadda noodhisan oo kale ay noqoto, ummadda Soomaaliyeed ay kawada dhaxeyso, middaas intaas ayaa ugu baxaayaa.

Awoodaha federaalka iyo awoodaha maamul goboleedka gooni uleeyahay iyo awoodaha dawladda hoose dastuurka waxaa dib loogu furay horta in la hagaajiyo laakiin waxaan arkaa is barbar yaac badan wax badan oo isku qasan inay meeshaan ku yaalaan, waxyaabo xeerar soo maray baarlamaannada wasaaradihii ay ka shaqaynayaan in dastuurka lagu soo daray awood ahaan loo qaybiyana waan ujeedaa. Awoodahaan wax "gentleman agreement" lagaga wada hadlay dastuurka laga soo buuxiyay waayay, waxaan xeer nidaamyo ha loo sameeyo qaarna way samaysanyihiin wixii ka loo dhiman haloo sameeyo wasaaradaha ay hoos tagayaan inay hoos tagaan ayaan qabaa.

Qodobka 76aad Farqadiisa 1aad waxay leedahay "dawladda federaalka Soomaaliya waxay awood u leedhay inay soo dhexgasho dawlad goboleedyada kaliya marka midnimada dhuleed, amniga qaran ay ku timaado dhibaato" taasi wey saxantahay laakiin waxaa qaybta ugu hooseyso ku jirto duruufo adag, duruufahaas adag in la caddeeyo. Dastuurka mar waliba wuxuu ku qasban yahay in wax cad uu ka hadlo oo la fahmi karoo oo qof weyn iyo qof yarba ay fahmi karaan, sharcigana sidiisaba waxan lafahmi karin ma noqon karo wax xiran ma noqon karo laakiin waa inuu noqdaa wax muuqda oo cad yahay. Aqalka sare in la hoos geeyo oo aqalka sarana ay soo saaraana waan qabaa waad mahadsantihiin.



**Xil. Qali Ahmed Dirie**

Aniga waxaan rabaa inaan ka hadlo Qodobka 63aad Faqradiisa 2aad oo ah xulashada 2aad ee Maqaamka Gobolka Banaadir. Gobolkan Banaadir waxaad ogtihiin inuu soo maray dhibaato badan iyo burbur badan, maantana waxaa ku nool 5 Milyan, dawladuna waa gobolka keliya ee dawladnimada ama taakulaynta ay ku nooshahay la garab taagan. Marka waxaan soojeedin lahaay in la siiyo xulashada 2aad oo ah Dawlad Goboleed, kaasoo ah mid isbixinaya. Sidoo kale xildhibaanada waxaan rabaa anigoo aragtidooda ixtiraamaya 5ta Milyan maaha hal reer ee dhamaanteen ayaa masuul ka ah, waxa laga yaabaa dadka qaar inay inay u arkaan aragti hal reer ah markay arkaan aniga iyo dhawr qofoo kale oo ka hadlayna laakiin sidaas maaha oo 329ka xildhibaan ee baarlamaanku ka koobanyahayba masuuliyad ayaa ka saaran wakiilna waan ka wada nahay. Marka waxaan soojeedinayaa inaan xulashadaas labaad qaadano 5taas Milyana aan u hiilino ee bilaa xuquuqda ah si ay u helaan Dawlad Goboleed sida Dawlad Goboleedyada kale dalka si lamid ah.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Guddoonka aad baan uga mahadcelinayaa iyo hab-dhawrayaashaba, waxaan kale u mahadcelinayaa dhammaan xildhibaanada sharafta leh ee waqtiga u dhabar adeegay, saacadaanna weli aynu shaqadeeni qaranka aan kuwada haysano. Waxaan kaloo u mahadcelinayaa mar kale oo aan ka daaleyn guddiyadii hawshaan muddada dheer iyo waqtiga badan geliyay. Haddaan taa intaas uga gudbo. Mudane Guddoomiye, mudanayaal iyo marwooyin qodobka 70aad ilaa iyo 79aad ee ina horyaala, waxyaabo badan oo runtii markaan akhriyay, aan ku wareeray laftigeyga ayaa ku jira sida jadwalada, oo awoodo badan oo isku noq-noqonayo, *confusion*-kana kuma fiicno dastuurka oo kale, waxaa la rabaa inay wuxu wax cad yihiin. Haddaad fiiriso hadda qodobka 26aad jadwalka 2A iyo 17aad iyo qodobka 6aad ee 2C, waxyaabo badan baa madaxa isla galaayo oo aan kala caddayn awoodda dawladda federaalka toos u leedahay iyo awoodaha ay *state*-ku leeyihiin. Midda dawladaha hoose, taas waxaan uga hadalnay cutubkii horre, fikirkeenuna halkaas ayaan uga dhiibanay oo inay tahay culaab soo kordhaysa ayaa koley anigu markaas u arkayay.

Waxaad moodaa waxyaabo badan markaad aqriso jadwalada inay keeni karaan hadhowtii doodo badan iyo waxyaabo badan oo keenaya isfaham la'aan iyo is dhexyaac, waayo waan ku talin lahaa marka hore in aad iyo aad guddiyada dib ugu noqdaan arrintaas, qodobbadaan badan la yareeyo, la isdhexgeliyo, wax yar oo nuxur leh, meesha waxaan ka hadlaynaa waa dastuur, dastuurkana waa dukuminti nool, mar kasta oo baahidiisu jirto ayaa wax laga qaban karaa, dukuminti dhintay oo mar la soo saaray oo mar keliya ku eg maahan.

Marka sidaan haddaan ku waxaynu sidaad ogtihiin, anigu noloshayda inta badan "Law Enforcement" ayaan ka shaqaynaayay, haddaad maanta maxkamad tagto, qodobka 5aad, tusaale ahaan ayaan qodobka 5aad u soo qaatay, ayaa lawyer-ka, xeerka habka ciqaabta Soomaaliyeed oo kale, xeerka ciqaabta Soomaaliyeed oo kale, ayaa lawyer iyo garsoor iyo xeer ilaalin, ayay rabaan inay halkaas qodob baa la wada fasirayaa oo xeer-ilaaliyaha u fasirayaa si

uu u arko qof kaas eedeysanaha ah inuu ummadda dhib ku yahay, lawyer-kana uu u fasirayaa in qodob kaasi uu muwaadin kaas uu qareenka u yahay in lagu dulminaayo, garsooruhuna isla qodobkii ayuu ka garnaqayaa dhinacii ay ahayd, marka dastuurka haddii taas ookale uu galo, inta ugu badan ee ugu dhow ee ugu wanaagsan aysan dood iyo muran geli karin baa la rabaa inuu noqdo, wixii ka dambeeyo hadhow shuruuc iyo habraacyo ayaa ka soo baxaayo laakiin dastuurka inuu yahay sida ugu dhow oo ugu cad uusan shaki ahayn.

Waxa hadda aan ka hadleenay, awoodahaan aynu ka hadleeno. Marka aan ka hadleenay awoodaha goorta ay meel geli karto, xildhibaanno sharaf leh iyo senataro saaxiibaday ah oo iga horreeyay concern-kooda waa sax laakiin waxaad ka soo qaadaa maanta iyadoo dalkii la soo gelay oo caawa cadow ku soo duulay, dawladda federaalka oo laguu sheegaayo waa state-yadii iskutagay, dawladda federaalka wax hawo ah iyo meel cidlo ah maahan, waxay mataleysaa waa state-yada, state-yadii ayaa ah dawladdii federaalka, laa samaxallaah maanta ayaa duulaan ku soo dhacay, ma 14 iyo ma waxaa la fadhiisinayaa golaha shacabka iyo golaha aqalka sare miya la fadhiisinayaa, marka waa in la caddeeyaa mararka ay u baahan tahay iyo mararka aysan u baahnayn waxaa la rabaa inuu dastuurka caddeeyo, abaaraha iyo maamulo isdiiday iyo waa loo codsan karaa sida sharciguba, markii aynu sharci dajineyno flagrant wax la yiraahdo, dembi faraha lagula jiro garsooraha lama weydiiyo laakiin marka ay baaris iyo dembi la ogaaday in la baaro garsoorka ayaa la weyddiisanayaa oggolaanshihii, marka waa inaynu caddaynaa waqtiga aysan dawladda federaalka u baahnayn oo larabo misana muddo cayiman inay ku timaado golaha oo falkii ay fulisay iyo sababtii ay u fulisay ay ku sheegto waa inay dhacdaa laakiin haddaynu niraahno waxba lama qaban karo ilaa baarlamaanka ka fadhiisto, waxay noqoneysaa in wadankiiba lagu kala tagay ama wixii la rabay laga qabsaday, markaas arrinta sidaas u dhacdo.

Waxaan arkayay oo kale meelo badan oo ayagana isdhaafay sida hadda awoodaha la wada leeyahay iyo awoodaha lakala leeyahay, meel waxaa ku xusan sharciga shaqaalaha rayidka, dawladda federaalka ayaa iska leh, meesha kale waxaa ku xusan, awood la wada leeyahay, shaqaalaha dawladda, waa meeelaha aan leeyahay waa ku wareeray oo kale. Meelo badan oo marka waxaa fiican dadaal badan baa la sameeyay, hurdo seeg badan baa idinku dhacay, daal badan baa idinku dhacay, waxaas marka in la isku soo uruuriyo meelahaas oodhan la isku keeno oo waxyar anaga oo idinkaga mahadcelinayno oo marna abaalkiina aanan dafireenin. Waxaan ku soo koobayaa arrin dhawr jeer laga hadlay, wixii laga aamusi waayo, anigana waan ku qasbanaaday in aan wax ka iraahdo, maxay ahayd kalmadii cusbayd, hoos ka sii, arrinta caasimadda oo lagu soo celceliyay walaalayaalow gobol kaan wuuba u dhigmaa ee aan dhahno Gobolka Benaadir iyo Caasimadda, markii la isku daro laba gobol ayay iska noqonaysaa, Gobolka Benaadir waa gobol ka ballaaran oo shanta milyan oo la sheegayo ku noolyihiin, caasimaddana waa caasimaddii oo dad kaasi ku nool yihiin, marka in la yiraahdo Gobolka Benaadir ayna ku dhex taalo caasimadda Jamhuuriyada ay ku dhex taalo, waxay marka daboolaysaa in la yiraahdo ama gobol keliya ayaa la siiyay, mar haddaynu niraahno Gobolkii Benaadir iyo Caasimaddii Jamhuuriyada, waa wax isqaadan kara, adduunka oodhanna waa ay ka jirtaa. Marka arrintaan oo Gobolka Benaadir xaq ma leeyahay iyo state ma ka dhiganaa? A iyo B midkee u qaadanaa xulashada koowaad iyo xulashada labaad, waa doorashada labaad, waa state ka mid ah state-yada Soomaaliya, dadkii ugu badnaa ayaa ku nool, dadkii Soomaaliya gogosha u noqday ayaa ku nool, kulligeen shalayna waan iri haddana waan ku celinayaa, qof Soomaali ah oo wax ku lahayn oo karaamo ku lahayn oo afti ku lahayn oo ilaashaneyn ma jiro,

wax shaki ah iyo wax cuqdad ah yeysan naga gelin, aynu niraahno Gobolka Benaadir iyo Caasimadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa state ka mid ah state-yada.



**Sen. Saynab Ismail Mohamed**

Waxaan ka bilaabayaa gobol gooni u istaagi karo majiro, oo ah qodobka 61aad, halkaan waxaan oran lahaa haddii lagama maarmaan tahay waad ogtihiin waddanka dhibaatooyin badan baa ka jira waxaa dhici karta inay arrimahaa faragalinaha iyo waxa socdaa ay sabab u noqdaan, gobolka ka mid ah gobolada Soomaaliya uu gooni isku istaago sida gobolka Banadir oo kale oo maamul gobleed noqdo way dhici kartaa, marka waxaan leeyahay inaan intaas laga saaro gobol kaliya manoqon karto.

Faqqadda 2aad ayaa waxaay oraneysa dawladda federaalka waxay waajibaad keeda u gudanaysaa si waafaqsan dastuurka federaalka halka ay dawlad gobleedyada gudanayaan Dastuurka federaalka dastuurka dawlad gobleedka iyo xeerarka kale, innaga oo federaal ah ayaan waxaan doonaynaa wadanka in lays ku haayo oo uu jiro wax isku qabanaayo waxa isku qabanaayo oo inaga dhaxeeyo u noqdo dastuurka federaalka Soomaaliya, marka waxaan oran lahaa halkaas dawladda xubinta waxay leedahay dastuur gaar ah waa run iyo dastuurka federaalka laakiin in laga saaro xeerarkaasi oo xeerar yihiin wixii "emplomention" ama fulintu ay ku shaqeyneysay lakiin labadaa dastuur mabaadi ahaan iyagu ay noqdaan mabda maaha waxa waye asaga fulinta lakiin Dastuurku waa mabaadida hageysay iyo qarannimadeena meesha aan u socono waxaa ku jirta qodob dhahaayo golaha shacabka ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya ayaa wuxuu goynayaa tirada iyo xuduudaha xubinta ka ah dawladaha federaalka wuxuuna magacaabayaa.

Waxaa jiri jiray guddiga xuduudaha oo heer qaran ah, guddigaas ayay magacaabayaan golaha shacabka kaliya meelna la leeyahay aqalka sare ayaa wuxuu masuul ka yahay xalinta khilaafaadka iyo dawlad gobleedyadii halkaas way iska key qabsan weyday iyadana waxaan leeyahay arrintaasi in ama aqalka sare laga dhigo ama Meesha laga saaro, hadiiba haday tahay guddi qaranna waxaa is kaleh baarlamaanka guud haday tahay guddi kaliyana ma yeelan karaan ayaan leeyahay shacabka madaama aqalka sare u xilsaaran yahay. Golaha aqalka sare qodobka 2aad ayaa wuxuu oranayaa baarlamaanka federaalka Soomaaliya yaa go'aan ka gaaraaya oggolaanshaha dhismaha dawladeed jamhuuriyada federaalka Soomaaliyeed marka taasna waa maadaama uu u xilsaaran yahay xalinta khilaafaadka inuu hadana talooyinkas wax ka bixiyana waan taagerayaa. Tirada xuduudaha iyo dagmooyinka waxaa jira guddi dhawr iyo soddonkii sannadood oo aynu burburka ahayn samaysmay dagmooyinka farabadan, iyada laftirkeeda waxay mudanyihiin in la ixtiraamo kuwa ka waaween dagmooyinkii hore, waxaa jiray dagmooyin hore u samaysnaa oo hadda dagmooyinka sameysmay ay dad ahaan iyo shaqo ayaan iyo dhinac walba ay ka dhisan yihiin marka waxaan oran lahaa tirade dagmooyinkaas inay guddiga xuduudaha oo international-ka ah ay iyagu go'aamiyaan ama ay usoo gudbiyaan ay guddigaas, ay ka shaqeyso xuduudahaas, guddigaasna heer qaranna laga dhigo asagana ka shaqeeyo aan noqon guddi qayb ka mid ah baarkaaamka ay.

Waxaa kaloo jirta meel waxaa jirta dasturi ah maxkamadii dastuuriga ahayd waxay cabanaysaa marwalba dastuurkii hore iyo kanba maxkamadii dastuuri ayaa la leeyahay mana sameysna

iyada naftirkeeda waxaan oran lahaa in lagu xuso qodob gaar ah, qaabkeeda iyo sida ay noqonayso in loo sameeyo. Waxaan u soo gudbayaa qodobka 63aad xulashada caasimadda magaalo madaxda Soomaaliya jamhuuriyada federaalka Soomaaliya caasimada Muqadisho way mudan tahay in ay hesho maqaamkeeda way mudantahay in ay is maamusho way mudantahay laakiin inay noqoto "state" laakiin waxaan u baahan nahay halkaan waxaa ku qoran qodobka 1aad magaalo madaxda federaalka kuma biiri karta dawladd gobleed kale oo dhul balaarsato kaas labaad oo dhan waan kasaari lahaa, waxan ka shaqeynaa oo dhan waaa mabaadi ee ummadda Soomaaliyeed oo dhan u dhexayso waxaan akteyda ku balaarsato ilama qumana, waxaan jeclaan lahaa qodobkaa in si fiican loo calaliyo lana qaato xulashadaas inay caasimada soomaaliya hesho state-keeda iyadoo lakala guraayo dawladda federaalka ah iyo ayada taasaan iyadu qaadan lahaa. Halkaan waxaan moodaa qodobkaan 64aad oo mabaadi'da lagaga hadlaayo waxaad moodaa runtii mabaadi'da aan ka hadleyno dastuurka inuu ku jirto waxyaalo jilacsan oo iska dawa imaanaya oo aad is leedahay marmar, waa iska xeer hoosaad oo kale xarafka(d) inuu jiro xirir iskaashi iyo wadashaqeen oo joogta ah oo u dhaxeeya dowladda federaalka iyo dawlad gobleedyada kale dawlad gobleedyada dhexdooda iyadoo la ilaalinaayo midnimada iyo qaranka, waa khasab way jireysaa laakiin waxaa la rabaa xiriir kaas in dastuurka ay ku qoran tahay waa inuu jiro, oo si siiqeysan siiqada wax baan ka badali lahaa in masuuliyada fulinta adeegyada loo dhiibo hadba heerka dawladeed oo awood ku filan leh, maxaa lagu xaqiijinayaa awoodaas ku filan leh waan ognahay Soomaaliya nin jecleysi baa ka jira, qabyaalad baa xooggan haddiiba qofba qofka uu jecleysto wax u dhiibo qofka kalana waa qatan yahay taasna malahan "catogry" waa inay wixii adag yihiin ayaan qabaa madaama mabaadi tahay in heerarka kale duwan ay dawladda tahay si cadaalad ah ay u wadaagaan kala qaybsanaan khayraadka iyo dakhliga dawladdi dowladaha xubnaha ka ah dowlada fderaalka dowlada laftirkeeda cid caddaaladda ku qaybsi malahan hada waxaynu ognahay intaynaas oo dhan maamul gobleed walba waxa laamiyo iyo waxa walba waxaa hela magaalada caasimadda ka ah, meesha meelaha kale marka arrintaasi waxay u baahantahay maamul daadajinta in lagu daro oo aan lagu koobin.

Qodobka 65aad heerarka dawladaha heer kastoo dawlad waa inuu tixgaliyaa kaalinta xadka awoodaha loo asteeyay iyo awoodaha leeyihiin heerarka, la yeeshaa dawladaha xurmad iyo walaal tinimo iyo wax ku ool ah, kala shaqeeyo midnimada iyo wada jirka waa isla tii oo kale walaalnimada dadka waa iska shaqeynayaa way jirtaa lakiin wax dastuuriyan aniga ilama muuqato, ku wargaliya hay'adaha iyo siyasada hawlaha uu fulinaayo deegaanadooda kuwaas oo samayn kara deganaanta heer kale, waxaas oo dhan waa wax xeerar gali kara waa wax dastuurka gali kara ilama ahan dajiya siyaasada iyo adeegyada , wax laga shaqeeyaaba siyaasada iyo maamulka uu leeyahay taana waa wax ila jiclansan oo aan ku habooneen halka kaliya oo loo baahan waxa weeye in la xaqiijiyo sugitaanka iyo hormarinta inay ka dhexayso inrintaan oo kale xoojinta, minimada qaranka, aminiga hormarinta taas oo kale waala oran karaa lakiin meelahaas oo kale waa wax ila jilicsan waxaan kaloo ku dari lahaa bixinta siyaasadaha iyo halbeegyada federaalka xarafka (f) dhaqangalintooda ee la xiririta awoodaha wadaagga ah in lagu daro iyadana ay ku jirto xalinta khilaafaadka waxyaalaha laga shaqeynaayo waaan ognahay bini aadam baan nahay resourece iyo waxaa laga hadlaayaa wax wadaag, khilaaf baa imaan kara iney ku jirto iyada laftir keeda.

Qodobka 5aad baarlamaanka federaalka Soomaaliya waxaa qeexaaya iyo habraacyo fududeynaaya wadashaqeynta heerarka kala duwan ee dawladda waaa in ay jiraan lana qeexaaya xadgudubyada sida aqalka sare oo kale arrimahaas loo xilsaaro. Halkaan waxaa jirta qodobka 64aad waxaa laga gudbay afartii dowladu laheed oo arrimaha dibada iyo difaaca

marka laga reebo arrimaha dawlad gobleedyada waxaa muhiim ah waxyaalaha social service-ka ama arrimaha caafimadka waxbarashada iyo waxyaalahaas kee waxaas oo dhan waxa la rabaa maamul gobleedka inuu ku xoog badan yahay gad line-ka shuruucda kaliya ay dawladda ay federaalka arkaan ka dhaxayso lakiin inta kale ay iyagu leeyihiin. Qofbka 69aad ee golaha fulinta dawlad gobleedyada dawladd gobleed kasta wuxuu yeelanayaa gole fulineed oo kal kooban hogaamiye, hogaamiye ku xigeen waan fahmay iyo xoghayeyaal, aniga xoghayeyaal ma fahmin waxa lagala jeedo lakiin waa hogaamiye waa madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeenka hada u naqaan wuxuu leeyahay gole wasiiro, wuxuu leeyahay gole baarlamaaan marka arrintaan xoghayaal waxay ila tahay kalmad malaha meesha kusoo qaldantay. Qodobka 76aad, dawladda federaalka waxay awood u leedahay iney soo dhex gasho dawlad gobleedyada kaliya marka ay midnimada dhuleed ay jirto, waxaan xoojinayaa dawladda federaalka Soomaaliya awooda guud ay ilaalin karto xuduudaheeda iyo midnimada ay iyadu u xilsaaran tahay sidaan 4ta cutub ku soo araknay laakiin inta aynaan galin si ummada leys kugu haayo aynu nahay ummad soo ka bannayso oo hore u socono, inay aqalka sare soo marto oo la ansixiyo ayaan qabaa waxanan jeclahay xeerarka arrimahaas faahfaahinaaya inay soo baxaan.

Arrinta waxbarashada iyo caafimaadka ayaan ka hadlaayay wuxuu ku xoogsan karaa ama adeegaas lagu gaari karaa halka la leeyahay 2A iyo jadwaladan la soo saaray waxaad moodaa iney isku quban tahay, awoodihiina dawladihii hoose iyo dawladii dhexe iyo dawladdii federaalka inay leeyihiin waxaan anugu taageersanahay oon wadaa in loo badiyo dawladda desertanlivetions-ka ama dagmooyinka in ay gaaraan awooduhu si ay meel walba caafimaadkeeda iyo waxbarashadeeda iyo waxeeda u hesho dowladaha federaalka oo member-ka ahna ay noqdaan kaliya meelaha ay wax sii marayaan oo la heli awoodaas waa salaamantihiin.



**Xil. Yusuf Mohamed Adan**

Mahadsanid guddoomiye, guddoonka labada aqal, xildhibaannada a labada aqal, guddiga dib u eegista dastuurka ee waliba dawlada federaalka soomaaliya. Waxaan rabaa inaan aragtidayda ka dhiibto qodobada chapter 5 oo uu ugu horeeyo qodobka 63aad, maqaamka caasimada runtii waxay ila tahay caasimada muqdisho inay lahaato metelaad waa wax runtii mudan inay istaahisho laakiin waxan qabaa inay u baahantahay qaabka loo siiqeeyey guddigu inuu ubaahan yahay in dib uu u fiiriyo oo uu hagaaajiyo. Hadii kale waxay noqonaysaa "overlapping" iyo qaladaad badan ayaa dhici kara markaa aragti ahaan ani waxaan aqabaa in la qaato agatida 1aad ama xulashada 1aad in la qaataan qabaa. Waxaan qabaa xulashada 1aad qaybaha hoos imanaya sida lambeka 3aad oo kale oo ku qoran xeer gaara inuu baarlamaanku ka soo saari doono. Waxaan qabaa in meesha laga saaro ilayn haddii arati gaara ama xeer gaara xildhibaanadu soo saari karaan barri kamaalin waxaa dhici karta xildhibaano kale markay yimaadaan ay ka beddelaan meesha hadda maqaamka aan siinay. Marka si aysan u dhicin anaga haddii maanta aan joogno wixii aan sixi karo aan anaga saxno. Waxaan kaloon qabaa qodobkaas xarafkiisa 4aad waxaa ku qoran, caasimada dadka deegaanku inay yeelanayaan gole deegaan oo metalaya baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Markaa aragtidaasi waxay u baahan tahay weli macadda waa fiican tahay dadka Soomaaliyeed in ay yidhaah daan khaasatan dadka caasimadda in ay yiraaahdaan oo ku metala golaha shacabka labadiisa aqal laakiin waxay u baahantay in la dhamaystiray u baahan tahay.

Aqalka sare meeqa qof ayey ku yeelanayaan, golaha shacabka meeqay ku yeelanayaan. Markaa arrimahaas ayaa u baahan in dib loo fiiriyo. Markaa ka xildhibaan ahaan waxaan qabaa xulashada 1aad oo dib loogu laabto oo sida loo qoraan rabaa: 1. Caasimada Muqdisho in ay yeelato gole deegaan si toosa doorashadii dorraad lagu sameeyey. 2. Inay yeelataan qabaa caasimada Muqdisho maamul fulineed oo ay dadka deegaanku ay soo doortaan. Taasi markaa waxay meesha ka saari metalaad la'aantii iyo dadka in dad kor looga keeno ayey meesha ka saari. Waxaan kaloon qabaa inay caasimadu Muqdisho in ay yeelato sharci dejiyayaal oo "local" ah oo ka hadala oo u sameeya sida caafimaadka oo kale shaqada oo kale shuruuc iyo heerar u diyaariya ayaan qabaa.

Waxaan kaloon qabaa in lagu daro in Jamhuuriyada Federaalku macaa xukuumadu in aysan fara galin karin arrimaheeda gudaha, haddii laga reebo arrimaha masiiriga ah aminiga. Waxaan kaloon qabaa tirada xildhibaanada ay yeelanayaan labada aqal in la cadeeyaan qabaa oo la dhaho golaha aqalka sare in taasay ku yeelan doonaan, golaha shacabkana intaa ayey ku yeelan doonaan sida ay ku cadahay *chapter*-ka 6aad inta ay yeelanayaan golahaasihiin. Waxaan rabnaa caasimadda in ay yeelato gole deegaan oo dadkaas codkooda ku hadlaa la rabaa markaa qaabkaasaa la rabaa ani aragti intaa saan qabaa insha Allaah.

Qodobka 67aad dastuurka dawlad goboleedyada waxaa Faqradiisa 2aad ku qoran qodobkasta oo ay ka mid tahay dastuurka dawlad goboleed oo aan waafaqsanayn dastuurka dawlada Fedederaalka Soomaaliya wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan. Qodobkan aadaan ula yaabay mooyi guddigu qaab ay u soo diyaariyeen, wuxuu leeyahay shuruucda ama dastuurka dawlad goboleedku waa waxba kam jiraan. Waxaan is weydiiyey yaa go'aamiyey dastuurka inuu qaldan yahay inuu waafaqsan yahay yaa go'aamiyey. Waa su'aal madaxweynaha maa go'aamiyey, baarlamaanka jamhuuriyada federaalka maa go'aamiyey ma wasaarrada arrimaha gudaha maa go'aamisay ma maxkamad dastuuriyaa go'aamisay.

Markaa waxaan rabaa qodobkaas in dib loogu celiyo oo lasiiqeeyo ayaa qabaa, haddii kale waxaa iman karta in aannu u gudbinba Federaalka oo aanu weli leenahay "unitery system" kii aan soo aragnay. Markaa talo ahaan waxaan qabaa qaabkee loo dhigaa haddii tan wax laga beddeli waayo waxaa laga yaaba go'aama badanaa jira maamul goboleedyada hadda aan haysan sidaa ka warqabtaan jadwalka 2aad iyo 3aad iyo waxa lagu "base" gareeyey go'aamadii hore ee dawlad goboleedyadu soo sareen. Waxay leeyihin dastuuray leeyihiin markaa dastuurka anaga aan wadno oo "reform" ka ku wadano hadduu soo baxo ma go'aamadii hore faalis ayey noqonayaan si aysan taas u dhicin waxay u baahantahay qodobkana in dib loogu noqdo in lagu daraan qabaa maxkamada dastuuriga iyadu inay go'aan ka gaarto in la baaro wakhti in la siiyey u baahan tahay la ogaado inuu khilaafsan yahay dastuurka, haddana waxau ubaahantahay in wakhti la siiyo si iyada lafitigoodu dib ay ugu saxaan loona sheego.

Markaa in loo qoraan qabaa, qodob kasta oo kamida dastuurka dawlada goboleedka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo lagu tuhmo inuusan waafaqsanayn dastuurka jamhuuriyada federaalka soomaaliya waxaa lagu xalinayaa xal maxkamada dastuuriya, sidaa in loo qoraan qabaa. Si tashaafulka ama khalaadaadka meesha laga fahmikaraa oo xal loo helo.

Waxaan kaloon rabaa inaan ka faalaado qodobka 68aad oo ah golaha wakiilada dawlad goboleedyada qodobkaas faqradiisa labaad waxaa ku qoran tirad xubnaha golayaasha

wakiilada dawlad goboleed kasta waa in aysan ka badnaan 99 inayna ka badnaan ayaa la rabaa, isla qodobkaas wuxuu leeyahay waa in dadka ku nool dhammaantood waa inay helaan metalaad buuxda waxaan u malaynayaa qodobkan labo shay inuu xaliyuu rabaa hadana xal uma hayo, mid wuxuu leeyahay tiradiisu inuu 99 noqotoo rabaa number 2aad wuxuu leeyahay inay qofkastana uu metalaad helo.

Dawlagoboleedyadu isku mid maaha xajmigooduna isku mid maaha markaa waxaan qabaa in si loo helo oo qodobkan dib loo sameeyo waxaan qabaa in la ga dhigo tirada golayaasha dawlad goboleedyada inay ku xadidnaadaan ama ku qornaadaan dastuurkooda ay leeyihiin iyadoo laakiin lagu salaynaayo juquraafi ahaan tiradooda dadka iyo baahida dad ka imaatay ay keentay lagu mesalaynaayo. Markaa waxaan qabaa in tirada laga dhigo xubnaha tirada dawlad goboleed kasta waxaa lagu go'aaminayaa dastuurka dawlad goboleedka, iyadoo lagu salaynaayo tirada dadka, juquraaafiyad iyo baahida metaalaadda in lagu saleeyo. Haddii aan sidaa laga dhigi karin waxaan qabaa aragti kalaan qabaa oo ah in lagu qaaciido in lagu saleeyo oo ah in la dhaho 25,000 oo qof baa halkii xildhibaan oo gole deegaan inuu metalaan qabaa. Markaas waxay u baahantahay in tirakoob la sameeyo "national' oo qaran in lasameeyo ayaan qabaa anigu si markaas loo ogaado.

Qodobka 71aad awooddaha wadaaga oo labada dawlada federaalka iyo dawlaha xubnaha ka ah ay labadu ay wadaagaan markaa qodobkaa qodobkiisa 2aad ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan masuuliyiinta denjinta heerarka siyaasadaha, xeer nidaamiyayaasha iyo halbeegyadii la soo arkay waxaa u xilsaaran dawlada federaalka meeshaa waxaad u malaysaa in wali aan ku dhaqmayno qaabkii "unitary system" kii oo wax walba dejintii shuruucda in loo xilsaaray kaliya dawada federaalka markaa dawlad goboleed wuxuu leeyahay meesha maba lahaba. Qodobkaas waxaan u baahnahay awood wadaag maahine awood buuxda oo dawlada federaalku leedahay weeyaan horta ciwaankaaba qaldan iyadoo awood wadaag la leeyahay haddana waxa meesha ku cad awoodii oo dhan waxa qaatay dawlada federaalka. Markaa taas ayaan rabaa in dib maadaama ay wadaagaa awoodaha wadaagaan in shuruucda iyo xeerarkooda isla dejiyaan ayaan qabaa.

Qodobka 76aad oo faqradiisa 1aad dhexgalka maaha dawlada federaalka ama "interference" ay ku samayn karto qodobkiisa 1aad waxaan qabaa meesha waxaa ku qoran la leeyahay dawlada federaalka Soomaaliya waxay awood uleedahay inay soo dhexgasho dawlad goboleedyada kaliya markay midnimada dhuleed, aminiga qaranka, madaxbanaanida Jamhuuriyada federaalka Soomaaliya ay khatar ku jirto hadii duruufo adag ku yimaado oo dawlad goboleedku maarayn waayo. Duruufahaas waa bari ka maalin siyaasadaa loo isticmaali karaa duruufu waxay yihiin in la cadeeyaa la rabaa oo inay yihiin 1, 2, 3. Markaa si qodobkan loo saafo waxaan qabaa in dib loo fiiriyo.

Waxaan kaloon qabaa haddii dawlada federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah ay is khilaafaan xalinta waxaa loo baahan yahay kaliya aqalka sare waxaan qabaa aqalka sare isagaanan ku dhisnayn caddaalad, "equity" aan ku dhisnayn, isagaanan ba ku dhisnay 4.5 in dib loo fiiriyaan qabaa oo dib loo furo marka aqalka sare la saxo kadibaa caddaalada dooni haddii kale meelaa loo badnaan karaa markaa aad ayaad umahadsantihiin insha Allaah.



**Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud**

Bimillaah, Alxamdulilaah. Mahadsanid Gudoomiye. Waa ka mahadcelineenaa kulankeenna maalmahaan halkaan ka socday, oo ku saabsanaa wax-kabadalka dastuurka cutubka 5aad ilaa 9aad, marka waan soo koobaynaa, maadaama xilli dambe ay tahay.

Waxaan rabaa inaan ka hadlo qodobka 62aad dhismaha Dowlad Goboleedyada iyo soohdimaheeda, faqradda 4aad soohdimaha Dowlad Goboleed kasta cusub waxey ku saleysnaan doontaa soohdimihii Gobolada Dalka sideey u jireen 1991dii, ayaa halkaas lagu qoray, waxaana rabaa faqradaasi in lagu daro waxaana soo saarayo go'aanka gaarista Guddiga soodimaha iyo doorashooyinka in lagu daro ayaan soojeedinayaa in ay qortaan, team ka guddiga dastuurka warbixintaan xildhibaanada in ay qortaan ayaan codsaneenaa.
Intaa kadib Qodobka xiga Dowlad Goboleed waxaa ku midoobi kara labo ama afar gobol oo daris ah, waxaan rabnaa in laga dhigo hal gobol iyo waxii ka badan, maxaa yeelay gobol qeeraad kiisa iyo isku filnaan shihiisa gaara oo waxaa jiri kara mar walba ka xogaa badan labada gobol iyo waxii ka badan. Marka gobol iyo waxii ka badan laga dhigo ayaan rabnaa in lagu soo xuso oo sidaas loo badalo.

Faqradda 6aad waxaa ku qoron gobol gooni u istaagi kara dowlad goboleed ahaan ma jiro Xukuumadda fadaraalka Soomaaliya ayaa maamuleysa nina oo kubiiraayo gobol kale, faqradaasi in meesha laga saaraa rabnaa, ay waa faqdo oo laga dhigo halka gobol inuu gooni isku taagi karo, ayadana tasaa cod sameyaa.

Intaa kadib maqaamka Caasimadda aad baa looga hadlay, xildhibaanada inta badan waa ay taabteen, Caasimadda Soomaaliya in ay tahay qof walbana aragti ku leeyahay, run ahaantii meeshaan laba xulasho ayaa ku qoran dastuurkii cutubyadii hore mar la keenaye saddex xulasho ayaa ku qornaan jirtay, marka ma aqaano xulashadii saddexaad meeshii aaday, labada xulasho halkaan ku qoran bay aaminana, mid hadaa lagu dhaqmayoo sida Caasimadda tahay waaye waa Caasimadda 1aad, waa Gobol Caasimad hoos yimaada Dowlada fadaraalka ayuu hadda ku dhaqmaa, dadkuna waxey dhaheen Soomaalidu waxey ku maahmaah "yotaa calool waxii ku buko laguma bukeeyo kuma daaweysana" hadda Gobolka Banaadir sida uu yahay, dadka Soomaaliyeed Caasimadda ku noolna cabasho badan ayay ka soo gudbiyeen, waxaan rabnaa marka xulashada 2aad ee Caasimad Dowlad Gololeed in laga dhigo, waxaan rabnaa. Marka gudaheeda markii lagalo, waxaa ku qoran faqradda 3aad, Xukuumadda Dowladda goboleedka magaalo madaxda fadaraalka, iyo Xukuumadda fadaraalka waa in ay dhowraan mawaadi'da xiriirka iskaashiga ku xusan dastuurka, faqraddaan aad ayee u dheer tahay.

Waxaan marka dhihilahaa guddigana la codsanena nuxurka in la soo kobo dastuurka aad buu u badan yahay dadkuna way ku dhax wareerayaan, in la soo koobo ayaa codsanena, inta dambe oo dhiman waa in ay sigaar ah u heshiiyaan arrimaha canshuuraha iyo xeerarka iyo nidaamyaasha dhulka ay ku qoron tahay in lagu soo koobo, waa in ay si gaar ah ugu heshiiyaan, awoodaha labada heer dowladeed in lagu soo koobo ayaan cod sanayaa.

In qodob cusub lagu daro ayaan rabaa, Caasimadda waxaa la gu qoray magaalo madaxda fadaraalka kuba biiri karto gobol kale, ma noqon karto qeeb dawlad goboleed kale ku dhul

balaar sato. Waxaan rabnaa qodob cusub lagu daroo Caasimadda waxaa lagu biirin karaa degmooyin cusub oo dowlad goboledyada dariska la ah marka loo baahdo in lagu daro ayaan codsaneynaa.

Intaas ka dib waxaan rabaa inaa soo gaabino, inta ugu badneed xildhibaanadaa ka hadlay, qodobka 69aad golaha fulinta dowlad goboleedyada, waxaa halkaan lagu qoray dowlad goboled kasta waxa uu yeelanayaa golo fulineed oo ka kooban hoggaamiye, hoggaamiye ku xigeen, oo ay dooranayaan golaha wakiilada, waxaa halkaan lagu sii xijiyey xoghayeyaal.

Marka xoghayeyaasha waxaan u fahmay in ay wasiiradu yihiin, waxayna yeelanayaan xoghayeyaal ayaan is leyahay in ay kamaqan tahay halkaas, ha lugu soo daro, maadaama dalkii lagu wareeray madaxwenayaal iyo wasiiro tiro badan, in fadaraalka in xoghayayaasha uu yeesho wasiirada fadaraalka meesha ay ka baxaan, in xoghayayaasha ay yeshaan maamulada oo wasiiradana loo daayo fadaraalka loo daayo magacyadoda madaxweynaha madaxweynaha "stad" la loo daayo ayaguna hoggaamiyayaashaa lagu daayo ayaa muqaal kaasi ku qurxoon yahay muqaal ahaan ee dowladeed.

Qodobka 73aad awoodaha meesha ay ku qoron tahay ugaarka ah dowladda hoose, sida hadda ugu dhibannahay Dowladaha fadaraalka ee maamulka Soomaliya oo ku cusub yahay in ay federal noqdaan, waxaa culeys badan naga heysta sida loo wada shaqeen lahaa, marka hadii halkaan lagusii xuso dowladaha hoose awood lahoo dastuurka ku xusan, waxaan is leeyahay inaa loo baahneenin oo dheeraat ku tahay, qodob kaas awoodaha saddexda xeer lagu soo nidaamiyo la yiraahdo, dowladaha hoose waxaa xeer ka soo saaraayo ama xeerar ayaa laga soo saaraya in lagu ekeeyo, maamulada iyo dowladda dhexe wada shaqeentoda dastuurka lagu soo koobo.

Qodobka 74aad waxaa ku qoran awoodaha haraaga, waxaan rabnaa guddiga inaa weydiino awoodaha haraaga ah maxaa loola jedaa, muxuu yahay awoodaha haraaga, qodobkaas in naloo faa faahiyo aan rabnaa.

Arrimaha jadwalka aniga aad maba u fahminba, waa isku dhax fiirinay inta badan meelo badan oo isku soo laa labanayo ayaa ka jira guddigu waxaa ka cod saneynaa in uu kala soo saaro jadwalka sida hadda shaqaalaha, caafimaadka, awoodaha kaluumeysiga iyo kheyraadka, awoodo badan oo jadwalada labada dhinacba ku jira, marna wadaag noqonaya marna gaar u kala yeelanayaan ayaa qoran marka in lakala saaro, waxaa kaloo ka codsanayaa in la soo koobo nuxurka dastuurka, maadaama fisiraad uu yelanaayo oo xeerar ay ka fisirmayaan, in nuxur yaroo kooban oo la fahmi karo laga soo dhigo aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Sen. Deka Hassan Hussien**

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka sanatarada habdhowrka howl-wadeennada iyo “media” Asalaamacaleykum warraxmatulaahi wabarakaatuh. Guddoomiye aad iyo aad ayaad uga mahad santahay ee waxaan ka xumahay in maanta wixii la noo qoondeeyey aan ka gudubney lakiin maadaama aan maqnaa waxaan jeclaan lahaa in aan ku noqdo.

Waxaan ka bilaabayaa qodobka 62aad golaha aqalka sare ee baarlamaanka federaalka soomaaliya ayaa go'aan ka gaaraya ogolaanshaha dhismaha dowlad goboleedyada ee Jamhuuriyada federaalka Soomaliya waxaan kusoo kordhin lahaa oo aan ku waafaqsanahay xubnihii iga horeyey ee soo jeediyey in laxadido lambarka ogolaanshaha laga dhigo alabiyad ama laga dhigo ama "two third" seddax meelood labo meel ayey ku ogolaanayaan.

Waxaa kaloo jira horta aniga u mahadcelinaaya labada guddi ee kasoo shaqeyey ee Dastuurka waxaa la rabaa in uu "comprehensive" uu noqdo cadyahay isagoon akhrin badan galin in uu fahmi karo ee  qodobada iyo nuxurka ku dhax jira marka waxaan soo jeedinayaa in nuxurka miisaanka lasaaro isla qodobkaas farqadiisa 6aad '5aad halka ay ku qorantahay waxaa go'aan ka gaarayaa maxkamada Dastuuriga ah waxaan soo jeedinayaa maadaama aan jirin maxkamadii Dastuuriga aheyd loo baahan yahay in marka ay isku dhacaan oo kale la dhex galo waxaan soo jeedin lahaa guddiga xeer sare oo aqalka sare ah maadaama aqalka sare uu u taagan yahay maamul goboleedyada la yirahfo booskii maxkamada sare si kumeel gaar ah waxaa u fulinayaa guddiga aqalka sare oo guddi xeer sare ah oo loo igmadey.

Markaan usoo noqdo maamul goboleed yaa noqon kara aniga waxaan soo jeedinayaa gobol iyo wixii ka badan ayaa noqon kara maamul goboleed oo ku biirinaayaa intii iga horeysey ee soo jeedisey.

Faqrada ku xigta ee ah gobol gooni isku taagi kara majiro waxaan jeclaan lahaa in la cadeeyo gooni isku taag noocee ah mar haddiiba faqrada ka horeysa ay shegeyso dowlad goboleed waxaa noqon kara gobol iyo wax ka badan marba hadday sheegeyso faqradii ku xigtey in ay noqoto gobol gooni isku taagi karo majiro ana waxaan jeclaan lahaa in ama mesha laga saaro ama la cadeeyo waxa ay ka hadleyso.

Gobolka Banaadir anoo kamid ah gobolka banaadir dadka laga soo doortey maantana haddii dad matalayaan ay matalayaan xildhibaanadeenii gobolka Banaadir lagu doortey waxaan aad u taagyeerayaa oon codkeyga ku biirinayaa soojeedinta ah ee xulashada labaad maadaama "papulation" ka uga badan gobolkaan degan ee xuquuqda u baahanyihiin dowladii federaalka ee hada hoos tagaan waxaan jeclaan lahaa in xulashada labaad aan ku biiriyo codkeyga intii iga horeysey.

waxaan soo jeedinaayaa madaama isku walaaqanyahay oo xoogaa uusan aad u kala baxsaneyn waxaan jeclaan lahaa in lakala saaro lambar "one" lambar "two" in lagu joojiyo magaala madaxda federaalka in laga joojiyo oo laga dhigo faqradaas lakala jaro oo laga dhigo magaala madaxda federaalka kuna biiri karta gobol kale kuma biiri karto meesha ah joogdi wax kale in aan lagu darin inta kale laga jaro faqradaas intaas lagu dhaafo faqrada ku xigta laga jaro iyadana laga qeybiyo oo lagu  kala qeybiyo xukuumada dowlad goboleedka ee magaalo madaxda federaalka ee xukuumada federaalka sey iskugu soo noqnoqoneyso waad u jeedaan marka in siiqadana la saxo waa in ay dhowrtaa mabadi'da xiriirka iskaashiga ee ku xusan Dastuurka faqradaas intaas ku e kaato halkaas la kala jaro lasoo geliyo iyadana faqrad kale oo seddaxaad laga dhigo oo iyana siiqada lasaxo.

Qodobka 64aad ee ka hadlayo mabadi'ada federaalka waxaan ognahay in aan federaalka qadaney laakiin cadeyn ilaa hadda nooca federaalka ee Dowlada federaalka ay qadatey in kastoo hadda wasaarada arrimaha gudaha ay diyaarisey nooc la yiraahdo nooca iskaashiga

waxa la yirahdaa “coprative seystem” “coprative federalizem” kaas iyada naftirkeeda mabadi’ada markaan akhrino qodob qodob u dul istaagney ani waxaan soo jeedinaayaa mabadi’ada rasmiga ah ee ay leeyihiin iskaashiga ama “comprehensive fedeealizem” in halkaan ay ku cadaadaan oo markaad akhrisid qaab nuxur ah oo ka hadlaaya iskaashiga kuma qorna waxaan soo jeedinayaa guddiga in ay dib uga noqdaan oo ay nuxurka qodobkaas ay cadeeyaan.

Qodobka 79aad korjogteynta aqalka sare ee soo dhaxgalka dowlada federaalka ee qeybta faallada waxaan kusoo dari lahaa markii loo baahdo is dhexgalka in lagu soo daro oo ay markasta aan aheyn laakiin markii loo baahdo is dhaxgalka waxaa korjogteynayo golaha aqalka sare ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya.

Waxaan kaloo codkeyga ku biirinayaa qodobka awoodaha ka hadlaya ee awooda federaalka waa sida ay u qoran tahay waxaan soo jeedinayaa awoodaha wey kala weynyihiin weyna kala horeeyaan in la sameeyo awoodo waxaa jira weyn muhiimna ah kuna jira awoodaha dowlada federaalka in la kala horreeysiiyo sida, difaaca qaranka iyo Ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed oo gadaal lamariyey in hore lasoo mariyo waaye difaaca qaranka iyo xoogga dalka waxa ay noo yihiin muhiimadda uga weyn.

Waxaa kaloo jira booliiska oo kale ee waxaa jira qodobo kale oo ku dhax jira oo ayagana la rabo sida u kala sar sareeyaan awoodaha ama u sii kala muhiimsanyihiin in loo qoro tan haddaan ku biiriyo maadaama la yiri waxaa noqon kara labo gobol iyo kabadan shan gobol waan ognahay dhibaatada laga soo marey marka aan “state” yada aan dib uga noqono “state” walba meesha uu ka dhaqdhaqaaqo waa maagala madaxda inta kale waxa ay heystaan malahan in aan daadejino haddaan la heleynin maamul waxaan jeclaan lahaa in gobol gobol loo daadejiyo lagana dhigo in maamulkaas daadejintii gobolkaas iyo degmooyinkii uu ugaaro waxaan soo jeedinayaa oo ku adkeeynayaa oo ku celcelinayaa in aan dulsaar la isku noqoninee gobol walba is kiisa u istaagi karo oo laga dhigo maamul goboleedyadaas in ay noqon karaan gobol iyo wixii kabadan gobolka Banaadirna xaq u leeyahay laakiin qeybtaas iyo qodobka ka hadlaayo waa in si “clarification” lagu sameyo laga saarsaro “comprehensive” laga dhigo aad looga fiirsado aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin Asalaamucaleykum waraxmatulahi wabarakaatu.



**Xil. Mohamed Ibrahim Ali**

Guddoonka labada aqal, xildhibaanada sharafta leh, guddiga madaxbanaan ee dib-u-eegista dastuurka, dhammaantood way mahadsanyihhin.

Runtii xildhibaanada sharafta leh saaxiibadey ayaa waqtiga badan galiyey inay aragtidooda ku biiriyaan wax kabedelka cutubka 5aad illaa 9aad ee dastuurka kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya si aad ahna waan soo dhaweenayaa ra’yigooda kala duwan intaa kadib.

Waxaan dul istaagayaa cutubka 5aad qodobka 63aad ee ka hadlaya maqaamka caasimadda ee Muqdisho kaas oo muddo dheer shacabka soomaaliyeed ee ku nool caasimadda ay sugaayeen. Waad ogtihiin xildhibaanada sharafta leh in qodobkaani uu ku jiray 4tii cutub cutubkii ugu horeeyey ee loo sooraray cutubka 5aad asagoo kamid ah cutubka 1aad, waad dareemi kartaan ahmiyadda iyo muhiimadda uu uleeyahay shacabka Soomaaliyeed iyo xildhibaanada golaha

shacabka. Runtii caasimadda Muqdisho muddo dheer ayey ahyd matalaad la'aan dadkeeduna ay sugaayeen maantoo kale in lasoo gaaro in la keeno goloyaasha qaranka ee awoodda u leh dastuurka. Waad ogtihiin mudadii ay soo jirtay dowladdii KMG caasimadda maqaamkeed waxay ku maqneyd in la soo gaaro maanta oo kale oo dastuurka wax ka bedelkiisa maadaama oo qodobkaas oo ku xirnaa, dastuurkii KMG ahaa ee cutubkiisa 1aad uu ku jiray.

Oo aan waxba laga qaban Karin sidaas awgeed maanta fursad bey u tahay dhammaan shacabka Soomaaliyeed, ee ku nool caasimadda ee gaarayo, 3-4millon oo ah bulshada ku nool gayiga Soomaaliya ama federaalka gobolka ugu bulshada badan la dhihi karo.
Sidaas awgeed gudiga sharafta leh waxaan ku amaanayaa soojeedimaha ama xulashada qiimaha leh ay sameeyeen labada xulasho ee ugu muhiimsan ee soo kala saareen oo kala ah in caasimadda labadaas xulasho in midkood loo xusho, iyadoo waqti badan soo galiyey iyadoo sida aan arkeyno cilmibaarista ay soosameeyeen waqtiga badan ay galiyeen ee ku soo qiimeeyeen waddamo badan nala mid ah oo haysta nidaamka federaalka awgeed.

Labada xulasho ee soo saareen waxaan codkeyga ku biirinayaa in xulashada 2aad la qaato oo caasimadda ay noqoto "caasimad ahna dowlad goboleed" sidaas awgeed waad ogtihiin baarlamaankaan 11aad baarlamaankii ka horeeyey waxaa la horkeenay cabasho badan dareenka ay ka muujinayaan millons-ka kunool caasimadda sidaas awgeed ayaa waxay meel mariyeen inay caasimadda yeelato matalaad, waad xasuusataan baarlamaankan baarlamaankii ka horeeyey iyo dowladaan dowladdii ka horeysaba 13 xildhibaan ayey u codeeyeen aqalka sare in ay matasho.

Sidaas awgeed maqaamkan sidii iyo maamuuskii yeelanaayo waxay dib ugu dhigeen maanta oo kale in lasoo gaaro, sidaas awgeed xildhibaanada sharafta leh maadaama xildhibaanadii naga horeeyey baarlamaankii 10aad uu qaatay taariikh fiicaan annaguna aan taariikh lamid ah aan qaadano leeyahay waxaa soojeedinayaa in gobolka Banaadir iyo caasimadda labadaba ay noqdaan caasimadda ummada Soomaaliyeed, see qaranka ugu adeegto in sideeda u adeegto si lamid ahna in ay noqoto dowlad goboleed. Shacabka ku nool halkaan millonska ah ee xuquuq uyeeshaan siday shacabka kale ku nool dowlad goboleedyada dalka xuquuqda ay leeyihiin iyo maqaamka ay leeyihiin.
Waad mahadsantihiin.



**Xil. Sharif Mohamed Abdalla**

Guddigu waa mahadsanyihiin waa soo dedaaleen. Markii laga hadlayo dastuur waxay ku fiicnaan lahayd waqti ay xildhibaano badan joogaan si aragtida xildhibaanka dad badan ay u dhagaystaan. Hadii aan waxyar gadaal u noqdo Magaalada Muqdisho waqtigii ay nimankii askarta ahaa wadanka qabsadeen, dawladii kacaanka in la iraahdo waxa ka wanaagsan in la iraahdo askartiiye, sanadihii u horeeyay ee 1970kii ilaa 1973dii Magaalada Muqdisho waxay lahayd oo la siiyay Maqaam, Maqaamkaasina wuxuu ku salaysnaa oo uu ahaa in xubno kamid ah Golaha Sare ee Kacaanku maamulayaan. Maqaam marka la iraahdana waxa la siiyo waa caasimada waayo gobolada kale lama siiyo, Dawlad Goboleed ka maqaam sareeya Dawlad Goboleed kalena inay jirto ilama aha.

Waxaan inbadan maqalnaa qolo tiraahda hooyada iyo aabaha federaalka wax loogu baahanyahayna maaha. Waxaan rabno waxay tahay in maqaam la siiyo caasimada, caasimadiina hada waaba fiday oo xagana ilaa Afgooye ayay gaartay marka waxa loo baahanyahay in wax laga jaro, si kastaba ha ahaatee aniga xulashada 2aad ayaan ayidayaa. "Problem" dhaqaale ururin badan ahi ma jirayo oo nidaam ayaa xadaynaya oo cashuuraha dawlada hoose qaadayso iyo kuwa federaalku qaadayso labadaba nidaam ayaa kala xadaynaya.

Degmooyinka Gobolka Banaadir marka laga hadlayo intii 1991dii ay ahaayeen hada maaha oo way ka bateen, marka in marna la iraahdo waxaa la isticmaalayaa Degmooyinkii 1991dii marna degmooyin kale ay caasimadu isticmaasho waxaan u malaynayaa waa arrin ka fiirsasho u baahan. Sidoo kale dawlad goboleedyo ayaa samaysmay, dawlad goboleedyadaasoo waqtiyo dheer soo jiray laftoodu waxay samaysteen gobolo marka waxay ila tahay in cabashooyinkii nasoo gaarayay tusaale ahaan Hiiraan oo kaleeto in badan ayay dacwoonayeen oo ay lahaayeen ilaa 1960kii hal gobol ayaan nahay marka waa in arrintaas caasimada lagu xaliyo. Hada markii la iraahdo hal gobol iyo ka badan ayaa noqon kara dawlad goboleed waxa waaye arrin Logic-ah ayaa meeshii la gelinayaa tusaale ahaan gobolkaas dhaqaalihiisa, baaxadiisa, Population-kiisa iyo wixii lamida. Marka taasna waxaan ka qabaa in la iraahdo gobol iyo wixii ka badan laakiin gobolku uu noqdo mid la eegay, koley siiqada loo qorayo ayay ku xirantahay. Waxaan filayaa guddoonka ayaa i dhibsan doona hadaan hadal kale ku daro marka waan idin salaamayaa waad mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Deq Barre**

Bismillaahi raxmaani raxiim.

Guddoonka iyo xildhibaanada dhammaantiin assalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh. Haddii aan gudagalo qodobada aan isleeyahay wax ka toosin ayay u baahanyihiin, waxaa ka mid ah qodobka 62aad oo dhahaayo gobol gooni iskutaagaayo ma jiro ayaa la yiri, xukuumadda federaalka Soomaaliya ayaa maamulayso gobol kaas inta uu ku biirayo gobol ama dawlad goboleed meesha ah ma jiro, waxaa ku habooneed in la yiraahdo ma jiri karo siiqadaas in loo soo qoro, marka aniga waxaan qabaa meesha la leeyahay gobol gooni iskutaagi karo ma jiri karo oo aan isleeyahay waa loola jeeda in halkaa lagu e keeyo meeshii lagu biirin lahaa in la yiraahdo xukuumadda federaalka ayaa maamuleyso in laga reebo si aan loo dhiirogelin in maamul goboleedyada iyo system-ka markaas jiro uusan uga imaanin is dhexyaac iyo culeys uusan uga imaanin, ma jiri karo gobol gooni iskutaagi kara, in meeshaas lagu hakiyo ayaan qabaa.

Waxaa soo haray qodobka kale ee ka hadlaayo maqaamka magaalada Muqdisho xulashada koowaad caasimadda dawlad goboleedka, meesha xulashada koowaad iyo labaad laga leeyahay aniga waxaan soodhawaynayaa xulashada koowaad. Waxaan rabaa oo xulashada koowaad ku biirinayaa waxaa ku jira waxa la leeyahay waa in ay helaan baarlamaanka federaalka Soomaaliya waa inuu soo saaraa xeer gaar ah oo nidaaminaya isxukunka dimuqraadiga ah oo lagu maamulaayo gobolka magaalo madaxda gobolka federaalka ayaa la leeyahay. Aniga waxaan qabaa in meelaha doorashooyinka in lagu xusay baarlamaanka keliya si xuquuqda magaalada Muqdisho ay u hesho waa in lagu biiriyaa senetarada, waa inay aqalka sare wax ku

yeeshaan. Waxaa ku qoran qodobka 4aad, xeerka doorashooyinka federaalka waa inuu siiyaa muwaaddinka degan magaala madaxda xaq ay ku dooran karaan wakiilo ku matala golayaasha baarlamaanka federaalka Soomaaliya, waana inaysan matalaadaas ku waayin deganaashada ay degan yihiin magaala madaxda dawlada federaalka Soomaaliya.

Aniga waxaan qabaa in lagu qoro, qodob dhahaayo waa inay matalaad caasimadda ku yeelataa dadka degan golaha aqalka sare waa inay matalaad ku yeeshaan in lagu qoro waaye xulashada koowaad, arrinkaa waan soodhawaynayaa iyadoo runtii marka laga hadlaayo xildhibaanada yimid ee hadlay dhammaantooda isriixriix uu jiro, xildhibaano badan ay leeyihiin caasimadda waa inay matalaad yeelataa, marka la leeyahay caasimadda matalaad ha yeelato waa in senataradaas lagu soo xulaa 4.5 oo ah sida aan hadda baarlamaanka ku joogno waa in lagu soo xulaa oo aanan lagu soo xulin waa la kala badsan karaa oo anigu ma lihi macnaha tirada iyo aqalka sare inta uu noqonaayo, aniga oo og bulshada aan matalo ee beelaha Dirreed, magaalada Muqdisho lambar-ka ugu badan inay qaadan karaan ayaan aaminsanahay ama kan labaad, marka waxaan leeyahay waa in lagu xulaa hab caddaalad ah oo senatarada.

Midda labaad, waxaan la yaabay oo aad u la yaabay, markastana aan la yaabo waxay tahay, markasta waxaa laga hadlaayaa maamul goboleed ha soo biiro iyo maamul goboleed hala dhiso ama waa la dhisi karaa qodob ah, waxaan la yaabanahay aniga dadka aan matalo marka maamul goboleedyada shiraayaan, marka laga reebo reysul-wasaare Saalax, ma jiro xubin maamul goboleed ee beelaha Dirreed ay leeyihiin ma aqaano marka maamul goboleedyada sida ay ku sii socon karaa haddii beelaha Dirreed ka maqan yihiin.

Marka waxaan soojeedin lahaa maamul goboleedka ka maqan in lagu soo biiriyo si Soomaalida caddaaladda loogu wada sinnaado maxaa yeelay anigoo ku leh xildhibaano tiro la eg inta kale inta ay la eg yihiin labada aqal, inaan ka maqnaado madasha maamul goboleedyada oo aan maamul goboleed ahaan uga maqnaano wax sax ah maaha bulsho ahaanna sax maahan, dawladnimo ahaanna sax maahan, qaran ahaanna sax maahan.
Waa in la soo biiriyaa, hooyada Federaalka waan maqalnay, aabaha Federaalka waan maqalnay laakiin Awoowaha Federaalka waa in la keenaa, abka ummadda Soomaaliyeed, beelaha Dirreed waa in lagu soo daraa maamul goboleedyada

Marka taa aan ka gudbo, waxaan u gudbaayaa waxaa jiro oo laga hadlay awoodaha maamul goboleedyada waxaa kale oo laga hadlay awoodda dawladda federaalka, labadaba waan soodhawaynayaa laakiin waxaan rabaa oo codkayga ku biirinayaa in laga saaro awoodda ugaarka ah dawladaha hoose meesha la leeyahay sababta oo ah waa awoodda saddexaad. Dawladnimada daadejinteeda runtii dawlada federaalka ee jira si fiican ayay uga shaqeeyeen laakiin qodob kaan ah in tooda badan haba ku kala horreeyaan awoodda u gaarka ah dawladaha hoose ee la leeyahay jadwalka labaad ha lagu soo biiriyo awood cusub, anigu ma qabo arrinkaas waxaan qabaa in laga saaro maxaa yeelay wuxuu culeys ku yahay awoodda dawlad goboleedyada ayuu culeys ku yahay, dawladda federaalkana maahan, awooddii dawladd goboleedyadana maahan marka waa mid saddexaad, marka maadaama daadejinta dawladnimada Soomaaliya door muhiim ah ay ka qaateen maamul goboleedyada gaar ahaan aniga waxaan ka soojeedaa oo aan baarlamaanka ku matalaa dawladda Hiirshabeele oo kaalin xoog leh ka qaadatay daadejinta dawladnimada sababta oo ah marka uu state-ku ka shaqeeyo in nidaaminta iyo daadejinta dawladnimada macno weyn ayay sameyneysaa, hadda Hiirshabeele ookale kaalmaha horre ayay uga jirtaa, waxaana mahadaa leh dawladda

Hiirshabeele uu madaxweynuha ka yahay Mudane Cali Guudlaawe, waana ku faaneynaa in dawladda Hiirshabeele ay u tahay hormuud arintaas.

Anigu deegaan doorashadaydu dawladnimada iyo arimaha socda waxa keliya ee ku heli karto ama uga bilaaw ah hadda waa in dawladnimada dawladaha maamul goboleedyada inay ka shaqeeyaan sababta oo colaadaha iyo dhibaatooyinka dhaca waxaa hadda xaliyo halkii federaalka dirito loogu imaan lahaa dawlad goboleedyada ayaa xaliyo.

Dadku hadday helaan ceelal, hadday helaan maamulo ayaga loo daadejiyay oo dawlad goboleedyada ka jira, waxaa yaraaneyso colaadda labada reerood ee deriska ah ama dadka isqabsanaya ama daaqa isku qabsan lahaa maxaa yeelay waxaa ku kala dhex jiro nidaam dawladeed oo la daadejiyay ayaa kala dhexgalaayo. Dadka xoolo dhaqatada ah ama beeraleyda ah, waana sababta ay colaaduhu heerkii horre ee aadka u badnaa aad moodo inay hadda aad uga soodhacayaan. Marka aad ayaan u bogaadinayaa daadejinta dawladnimada, waxaana u deyneynaa in maamul goboleedyada arrintaas loo daayo, lagana saaro jadwalka labaad ee ah awoodaha u gaarka ah dawladaha hoose. Aad ayaad u mahadsantihiin. Guul iyo gobannimo.



**Xil. Dr. Mohamed Hassan Mohamed**

Waad mahadsantahay guddoomiye, Xillibaanada Sharafta leh, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Waa xilli danbe kolay waqtigana waa iska yar yahay, marka 1aad waxaan markale runtii u mahadnaqayaa ee guddiga dastuurka iyo guud ahaan ummadii soomaaliyeed ee kasoo tala bixisay ka shaqeysay in dalka dastuurkiisa la dhameystiro, maanta aan u joogno qodobka 70aad ilaa 79aad ka doodistiisa oo runtii qodobo aad u muhiimsan ay ku jiraan ay kow ka tahay su'aasha halka milyan oo doolar ah oo maanta dalkeena runtii culeysyo badan ku heysa su'aashaas oo ah sidee loo kala xadeynayaa nidaamkaan federaalka ah ee dowlad nimada Soomaaliya ay qaadatay, sidee awoodahooda loo kala xadeynayaa, waa qodob runtii aad u muhiim ah, waa qodob aan is leeyahay dalkaan hormarkiisa aan ku base-gareyno loo baahan yahay awood "federalizem skeleton" ah, oo runtii adag kaasoo keeni karta iney kala heyso dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka. Awoodahaas waa awoodaha maanta runtii ay u joogaan madaxda dowladaha xubnaha ka ah ee mucaaradka ku dowladda ee jooga xamar ama xalane, waxaa runtii culeeska ugu ween Soomaaliyeed heysata oo anan ka baxsanen waxa anaga hoos aan isku fiirineyno aanan aheen oo jira waxa aduunka indhaha nagu fiirinaayo ah, farqooyinkaan waxay sameynayaan qofka Soomaaliga ah ee jooga dibadaha iyo xaalada geopolitics-ka adduunka maanta ka jirta qabiilka uu doono ha ahaado 4.5 oo aan maanta aan ku fadhino waxaa la yiraahdaa waa Soomaali ilaa iyo kan madaxweynaha naga ah ama kan mataqanaa wasiir ah ama xillibaan ah ama qofkasta oo shaqsi Soomaaliyeed ah, ummada Soomaaliyeed runtii waxay u ooman tahay runtii magacooda iyo miisaan kooda dadkii soo celin lahaa ay yihiin dastuurkaan aan maanta ha hadleeno, qodobadaanna ay yihiin kuwa fundamental-ka u ah, sidoo kale adduunka maanta xoogga leysku heysto oo waddamada dariska oo 120 million ah oo koo kale oo inta joogo awoodaha noocaas ah oo aan arkeyno hadii dastuurka aan fududeysano waxay noqoneysaa miisaanka iyo culeeska aan ummada u heyno runtii aysan u qalmin matalaadaas.

Waxaan rabaa awoodahan dadka kala xadeynaaya federaalka iyo mid kale naloo soo raaciyay la yiri awood wadaag oo ayadana runtii aad u kala qeexan iyo jadwalkan runtii hadda lagu soo daray, jadwalka 2aad oo awoodaha u gaar ah dowladaha hoose awood u gaar ah dowladaha hoose waa casharkale iyo jaamacad kale oo dowladd nimada soomaaliya runtii culees kusiinoqonaaya maanta waxaa fadhiya xalane oo wada hadal lagula jiraa waa maamul goboleedyadii hadana haddii aan dastuurka ku darno dowladaha hoose ayadanu ma awoodo iyo kala saaristaas iyo culeskaas xataa dakhli markii dakhli la yiraahdo waxaan jeclaan lahaa qodobkaas sidiisaba in meesha laga saaro, loo gacan baneeyo hogaanka meesha uu heysto dadkiisana ay soo doorteen asagana uu ka oday yahay in ayagu ay waxooda sameystaan ay u noqdaan dad waxaas ka masuul ah.

Dalkeenu gaajo maalintii waxaa laga yaabaa hadda sida madaxweynaha maalin hore uu booqanaayay sodma report-tarada aan heyno dowladdnimada Soomaaliya in maalintii maanta aan fadhiisano dastuurka aan u fadhino naftigeeda in 13,500 oo qof oo Soomaaliyeed iney abaaraha ku dhimanayaan, madaxweynaha dhinacaasna "highlight" ayuu naga saaray, wuxuu yiri dowladaha wasiirada xukuumada kuligood haka shaqeeyaan caawinta dadkaas abaaraha 13,500 oo qof maalintii dhimanaysa, waa runtii dowladd la'aanta waxa keenaaya wasiir kii beerahaa joogay oo asagana xillibaan federal ah, dadka dalka baahida ka jirta waa baahi runtii markaad fiiriso maanka ah, hindiska uu madaxweynaha bixinaayo asoo haddana dib u hishiisiin ka shaqeynaaya wada hadal ka shaqeynaaya dastuurkii la dhameystiraayo oo shaqada si qurux badan ay u socoto, ayu haddana ummada Soomaaliyeed u sii sheegayaa war dhinacaasna yaanan la hilmaamin dowladdnimadii halaga shaqeyyo marka waxaan u baahanahay dad muslimiin ayaan nu nahay Soomaaliya ah diinta sheegta, haddii qodobka ugu muhiimsan fundomental-ka islaamka ah uu yahay "وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الْأَمْرِ مِنكُمْ" maanta waxaan dabafadhin laheen madaxweynaha, qaarbaa ku leeyahay ma'ogtahay war heedhe waxaad u nacamleyneysaa madaxweynaha waxaad noqoneysa guul wadeen maahan guul wadeen waa diin islaam qofka somaaliga ah maantayto dowladd la'aqoonsanahay oo aan heysano, waa dowlada federaalka oo calankeeda uu ka taagan yahay oo aduunka oo dhan aqoonsanyahay hoggaanna waxaa u ah, odeyga Mandaite-ka heystah oo Madaxweyne Xasan Shekh yahay marka haddii la raaco yaan raaci laheen haddaanan asagu aheen dastuurka halaga shaqeeyo ayuu yiri, oo waa ninkii dastuurka ilaalin lahaa hala hagaajiyo hala dhameystiro madaxweyne kasta ayaa usoo tartamay marka waxaan leeyahay runtii wax ka badan maankeena baahida jirta aan yareyno kulligeena waa wada dhargi doonaa dalku af hayeesho afka uu leeyahayna amiirka dalka ha noqdo ama hoggaanka dalka.

Baaqaas waa baaq runtii wiil Soomaaliyeed oo dhallanyaro ah oo taagan golaha shacabka Jamhuuriyada federaalka Soomaaliya oo jaanis u helay maanta inuu baaqaan halkaan ka diro una diraaya hogaanka maamul gobleedyada dowlada federaalka Soomaaliya, ee leysku dhagan yahay waxyaabo runtii aanan dalkaan sence u sameyneynin mararka qaar. Waxaa leysku heesto waa awoodda kursiga taasna waxaan leeyahay awood badan ayaad heleysaa xildhibaanada meeshaan loo soo diray ee federaalka ah maamul gobleedyadaas laga soo diray wa kuwa runtii ay soo xuleen maamuladaas, kuwaas ayaa ma taqanaa u maahan iyagu naftooda in ay xor ahadaan kana doodaan dastuurka wixii aad qabtid oo aad aminsan tahay oo awooda kuu siiyay maanta inaa aad dadkaas ku tiraahdo halkaan ka jogo golaha shacabka in ma taqanaa ku dhahdo fikirkeyga halkaa geeya Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Hussien Ali Haji**

Bismilaah, guddoonka labada aqal, xildhibaanada labada aqal oo sharafta leh waxaan rabaa inaan u hambalyeeyoo u mahadceliyo guddiga baarlamaanka ee dastuurka iyo guddiga madaxabanaan farxad ayey ii tahay maanta inaan goob joog ka ahaado dhamaystirka dastuurka. Runtii wakhti badan iyo heerar badan ayuu soo maray maanta meel fiicana wuu marayaa qof walbana nasiibuu u helaa waxaan rabaa inaan u mahadceliyo madaxweynaha Xasan Sheikh oo nasiib u helay ilayn madaxweynayaasha musharixiinta markii ay ahaayeen dhammaantood qof walba madaxweyne wuxuu kaambaynka ugu jiray wuxuu dhahaayey dastuurka inaan dhammaystiraan rabaa. Maanta anagaa nasiib u yeelanay madaxweynaha inuu nasiib u yeeshayna aadaa ugu faraxsanahay.

Waxaan rabaa waxyar inaan kaga hadlo qodobka maamul goboleedka, maamul goboleedyada, qodobada waxaa ku qoran hal gobol iyo wixii ka badan baa noqon kara maamul goboleed runtii Soomaaliya 18 gobol waaye haddii la dhaho gobol walba maamulgoboleed buu noqonayaa 18 maamul goboleed ayey noqonaysaa horta waaba lagu wareerayaa runtii markii laga hadlo. Markaa gobolka Banaadir in maamul goboleed uu noqdo waa wax fiican runtii, gobolka Banaadir waa caasimaddii federaalka waaye xuquuq walba oo gobolka Banaadir ay leedahay inay hesho muhiim waaye runta markii laga hadlo. Ani waxaan aaminsanahay reerka ani aan kasoo jeedo gobolka Banaadir dadka ugu badan inay yihiin ayaan aamin sanahay xaqiiqda Soomaaliyaa wada leh laakiin dadka ugu badan oo gobolka banaadir ka soojeeda inaan ahay aaminsanahay.

Laakiin halmidaa u baahan in la is waydiiyo haddii gobolka Banaadir ay maamul goboleed noqoto dawlada federaalka intay ku shaqaynaysaa macnaha maamul goboleed iyo dawlada federaalka madaxweyne maamul goboleed iyo madaxweyne federaalaa hal meel kuma wada shaqaynkaraan waaye. Markaa taasaa waxay u baahan tahay in wax xoogaa lafiiriyey u baahan tahay xaqiiqdii sababtoo ah waxaan caasimadda Soomaaliya caasimad marwalba way u baahan tahay, haddii la dhaho caasimaddu meeshan waaye oo dawlada federaalaka caasimad u tahay haddan maamul goboleed wax xoogaa waxaan dareemayaa inuu culays ka imaanayo laakiin runtii ani waa ku faraxsanahay inay noqoto gobolka Banaadir xuquuq walba ay leedahay senator hadii ay tahay, haddii xildhibanao ay tahay, haddii la isdooranaayo ay tahay waxwalba inay hesho gobolka Banaadir Soomaali oo dhan baa kuwada nool.

Laakiin marwalba in hoos loo fiiriyey u baahan tahay guddigiina fiiriyaan, gobolka Banaadir haddi marba madaxweynihii dalku uu ku shaqaynaayo in haddana maamul goboleed al dhaho wax xoogaa in ayna iswaafaqayn ayaan dareemayaa markaa arrintaa in aad loo fiiriyaan rabaa gobolka Banaadirna dadka ku nool xuquuqda ay leeyihiin inay helaan muhiim waaye senator haddii la dooranayo in lasoo doorto haddii caasimad meel kale loo wareejinaayo iyadana in xal loo helo waaye. Madaxweynaha federaalku meel uu ku shaqeeyo oo federaalka u madaxbanaan oo caasimad ah in la helo waa fiican tahay.

Waxaan kaloon rabaa in xildhibaanada sharafta leh oo saaxiibaday ah aadaa iskaga mahadcelinaynaa sababtoo ah qof walba muhiimay u tahay maanta dalka dastuurkan qabyaha

ah 50 sano maanta in la dhamaystiro qof walba muhiimay u tahay. Saaxiibadayda oo xildhibaanada is eegeegay oo iska xanxanaaqsanaa oo diidaanaa dastuurka in la dhamaystiro dad waxaa ku jira musharaxiina oo madaxweyne ahaa ayaa ku jiray oo rabay dastuurka iyaga inay dhamaystiraan. Adeerow hadday nasiibkaa noqon weyday qof kalay nasiibkiisa noqotee halaguu dhamaystiree adaa lagu shaqaynayee "problem" kama jiree iska daa, markaa aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin guulaysta insha Allaah.



**Xil. Yusuf Heyle Jimale**

Assalaamu Caleekum warax matullahi wabarakaatuhu, waxaan salaama labada guddoon ee Baarlamaanka, Baarlamaanka sharafta leh, Guddiga madaxa banaan ee dastuurka, waxaan salaamaa guddiga dastuurka qaabilsan Xuseyn Eidow madaxda ka yahay, intaas kadib anoo ku faraxsan waxaan rabaa qodobka maqaamka inaa dul istaago, oo Caasimadda Muqdisha ah.

Xulashada 2aad oo ah Muqdisho in ay yeelato maamul goboleed Caasimaddanimada Soomaaliyeedna ahaato Muqdisho wey mudan tahay. Muqdisho 1910 kii dad farabadan oo ajaaniib oo ganacsato ah ayaa yimiday, cidna kama takoorin, dad badanoo Soomaali ah ganacsi iyo dhul iyo guryo ku lahaa, cidna ma dhibaateen, haddoo la joogo 2026na ah aduunyo casri ahna qof qof ku dhibateyneyso majirto, marka waxaan leeyahay baarlamaanka Soomaaliyeed labada aqal way ka mudan tahay Caasimadda Muqdisho in ay noqoto Dowlad Goboleed Soomaaliyeed iyo Caasimaddii Soomaaliyeed intaasbo Muqdisho way mudan tahay in lagu abaal mariyo. Markaas waxaan ka codsanaa Baarlamaan ka Soomaaliyeed meel walbo oo joogo in Muqdisho loo hiiliyo, in Muqdisho ay hesho dowlad goboleed lamid ah dowlad goboledyada ka jiro Soomaaliya intaasi waxaan uga gudbaa Caasimadda. Waxaan rabaa inaa u mahad celsho guddoonka oo kalmadaan isiiyey, waxaan rabaa inaa ummada Soomaliyeed u sheego abaaro ba'an ayaa dalkii ka jirto, dadku way baa ba'ayaan aniga gargaarka iyo samafalka ayaan ka shaqeeyaa, marka waxaan rabaa qof walba uu Ilaahey wax siiyay iyo baarlamaanka inay ummada Soomaaliyeed caawiyaan. Hirshabele, Galmudug, Maamul goboleedyada kale waxaa ka jirta biyo la'aan iyo abaar ba'an, marka dadka ilaahey xoolaha siiyay iney ummada caawiyaan, intaas ayaan ugu baaqaa ummada Soomaaliyed meel kasto ay jogaan. Assalaamu Caleykum waraxmatullahi wabarakaatuhu.

# CUTUBKA 6AAD

## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA



**Kulanka 15aad (Febraayo 14, 2026)**

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kulfadhiga: | 7aad |
| Kulankiisa: | 15aad ee labad Aqal |
| Goobta: | Golaha Shacabka |
| Furmay: | 11:51 a.m |
| Xirmay: | 3:02 p.m |
| Shir-guddoomiye: | Guddoomiye ku xigeenka 1aad Aqalka Sare – Sen. Ali Shacban Ibrahim |

Ajendaha:

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka.
(2) Ansixinta Ajendaha.
(3) Dib u -eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad: Ka Doodista Soojeedimaha Wax-ka bbedelka Dastuurka. Cutubka 6aad: Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qodobbada 80aad ilaa 90aad.






**Xil. Hussein Qasin Yusuf "Idow"**
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee BFS

Iga gudooma salaan diiran, maalmahaan doodii cutubka 4aad iyo cutubka 5aad ee aan wadnay isbuucii lasoo dhaafay, waxaan filaa inaan gabo gabeenay maalintii khamiista. Cutubka 4aad wuxuu ku noqosho dastuurka shaqada ka socota oo labada gudi ay u xilsaaranyihiin waa dib-u-eegis laakiin cutubka 4aad sadexda qodob waxay udhigan tahay ku noqosho, sababtoo ah cutubka 4aad shaqadiisii Waxaa dhameenay sanadkii hore bishii March 30-2024

Isbedelada yar oo dhowrka ee ku dhacay oo Qod 49aad, Qod 50aad iyo Qod 54aad ku dhacay waxaan ugu yeeri karnaa ku noqosho, ansixintii baarlamaanku cutubka 4aad gudbiyey looga noqday.

Sidaas daraadeed heshiiskaas 25 august ee mucaaradka ee samatabixinta madax katirsan iyo dowladda federaalka ay gaareen wuxuu nasoo gaaray bishii hore julay kadibna gudiga madaxbanaan waxaan u dirnay inay tixgaliyaan oo ay ku soo dhaafaan isbadelada iyo nuxurka heshiiska cutubkii 4aad ee baarlamaanku gudbiyey sanadkii hore. Isbadaladaasi waxay taabanayeen doorashada madaxda dowladda federaalka ah iyo madaxda dowlad goboleedyada

Waxaa sidoo kale taabanayeen xukuumadda oo hogaamiye ra'iisul wasaaraha kalsooni siinteeda iyo kalsooni kala noqoshadeeda.

Waxaa kaloo saameenayeen nidaamka axsaabta ay ku sameysmaayaan iyo ugu dambeyn sida axsaabtu ay ku soo baxayaan afartaas nuxur ayaa dib loogu soo milay oo loo dhexgeliyey cutubka 4aad, nuxurka 1aad wuxuu yahay madaxweynaha JFS oo cutubkii 4aad ee aan ansaxiney xildhibaanada sharafta leh waxa aan idinka codsanayaa inaad dhagahiina isiisaan dhowr daqiiqo,si aan cutubka 4aad iyo cutubka 5aad nuxurkiisii aan meel iskula ogaano. Nuxurka 1aad wuxuu yahay doorashada madaxweynaha oo aanu gudbinay 4cutub hore oo ay dooranayeen shacabka Soomaaliyeed cod furan, heshiisku nuxurkiisu wuxuu badalayey go'aankaas isbedelka dastuurka, Waxaana lagu noqday nidaamkii barlamaaniga ahaa ee labada aqal ee dooranayeen madaxda.

Nidaamkaas waa nidaam ku xusnaa cutubka 7aad ee dastuurka, cutubka 4aad ee idin hor yaala markii aad eegto farqadda cadaynaysa madaxweynaha in shacabku dooranayaan waa laga saaray, waxaana la geeyey oo loo guuriyey cutubka 7aad oo doorashada madaxweynaha ay ku xeeran tahay.

Madaxda dowlad goboledyada oo isla cutubka 4aad aan ku xeerinay inay dooranayaan shacabka hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka asagana nuxurka farqadaas Waxaa loo guuriyey cutubka 5aad oo dowlad goboleedyada iyo dhismaha dowlad goboleedyada iyo baahinta awoodaha ay ku xeeran tahay.

Heshiiska nuxurkiisa 4aad oo ah axsaabta oo marka hore ay aheyd in sedex xisbi uu dalku yeesho ayna ku soo baxayaan doorashada dowladaha hoose isbedelaa ku dhacay, isbedelkaas wuxuu noqday oo heshiisku xeeriyey annaguna nuxurka isbedelka cutubka 4aad aan ku soo darnay 100/10 xisbiga hela baarlamaanka labada aqal inuu noqonayo xisbi.

Soojeedimaha muhiimka ah ee baarlamaanka doodii maalmahaan socotay oo ka qayb qaateen 69 mudane oo dooda ka qayb qaadatay cutubka 4aad sedexdiisa qodob nuxurka soojeedimahooda Waxaa ugu muhiimsan in ay soojeediyeen oo arinkaas, ururada Waxaa ku qoran aan umaleenayaa farqadda ugu horeysa oo udhigan doorashooyinka ha'yadaha tartanka xisbiyada siyaasadeed.

Qod 54aad mudanayaasha oo kadooday qodobkaas waxay soojeediyeen aragtida 1aad oo ah doorashooyinka hay'adaha kala duwan Waxaa ku tartamaya xisbiyada siyaasadeed sida rasmiga ah uga diiwaan gashan in lagu daro ururada oo Meesha xisbiyada ay ku tartamayaan, Maadaama xisbiyadu ay doorashada federaalka kasoo baxayaan ururada lagu daro. Xildhibaanada waxay soojeediyeen in "threshold" ga hoos loo dhigo oo 5% lagadhigo, aragtidaas xildhibaanada waa ku kala qaybsanyihiin, waan eegi doonnaa sida "tresh hold" ga ku haboon.

Cutubka 4aad waxaan filayaa nuxur intaas ka badan oo laga sheegay majiro is bedeladii aan soo sameenay xildhibaanadu wax weyn oo intaas ka aheyn kama aysan soojeedin.
Cutubka 5aad ee la xiriira awoodda jamhuuriyadda ee baahsanaanta awoodda jamhuuriyadda federaalka soomaaliya Qod 61aad ee ka hadlaya heerarka dowladda wuxuu xeerinayaa

qodobkan in heerarka dowladda ay ka koobanyihiin sedex heer oo kala ah dowladda fedraalka, dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose.

Mudanayaasha aragtida 1aad ee ku saabsan sedexda heer dowladeed waxaa lasoo jeediyey oo aad loogu nuux nuuxsadey in labadii heer oo u dhigneyd qaab dhismeedka dowladda jamhuuriyadda federaalka soomaaliya waxay ka kooban tahay laba heer dowladeed heerka xukuumadda federaalka iyo heerka xubnaha ka'ah dowladda federaalka oo dowladda hoose hoos timaada, aragtidaa in sidii horey loo daayo ayey xildhibaanada qaarkood ay ku nuux nuuxsadeen, waana tixgelin doonnaa haduu alla idmo.

Dhismaha dowlad goboleedyada oo ah Qod 62aad oo mabaadi'diida ay ugu horeyso iyo sida dowlad goboleedyada ay ku dhismayaan oo lasoo jeediyey oo nuxurka dastuurka hore ay ku qorneyd in lagu saleeyo 18kii gobol ee dalku lahaa 1991dii oo isku raacayeen labo labo sedx sedex iyo afar afar.

Isbedelka oo ku dhacay "state" ka sida loo dhisayo waxa ugu muhiimsan asalkii waxaan filayaa iney ku qorneyd laba dowlad goboleed iyo in kabadan waa nuxurka 1aad oo isbedelka ku dhacay, horta in kabadan Meesha wey ka baxday in kabadan waxay dhiiragelisay in goboladu ay kala jabaan oo jabba meel raaco, nuxurkaas waxaan umaleenayaa in inta badan sababta Meesha looga saaray ay aheyd, markii gudiga lasocodka iyo gudiga madaxbanaan ay samenayeen dib utoosinayeen.

Isbedelka 2aad oo muhiimka ah waxa waaye dowlad goboleedyadu sida ay ku dhismayaan, dowlad goboleedyadu waxay ku dhismayaan gobaladii 1991kii ay ahaayeen, wuxuuna kabilawdaa 2 iyo in kabadan ayuu ahaa, waa noqon kartaa dowlad goboleed,sedex waa noqon kartaa, afarna waa noqon kartaa. Waxaa meesha ka baxay in gobol bur buro ama qayb ay go'do qayb kale raacdo, taasi waxaan u maleenayaa "state" caafimaad qaba aan ku dhismi karin, ayna lagama maarmaan tahay goboladu inay isku raacaan, siday u dhismi lahaayeen oo aan kala go'in.

Nuxurka 2aad wuxuu yahay haddii dowlad gobleed, haddii gobol uusan gobol raacin gobol kale, waa dood muhiim ah doodaas, haddii gobol aan rabin inuu raaco gobol kale, muxuu noqonayaa gobolkaasi wuxuu xaq uleeyahay, inuu jiro xukuumadda federaalkana uu hoos yimaado, inta uu ka go'aansanaayo inuu gobol kale lamidoobo isagaa umadax banaan si duubduub ah gobol kale maraaci karo. Sidaas daraadeed gobol wuu hoos joogi karaa xaqna wuu u leeyahay, inuu kaligiis istaago. Mabaadi'da guud ee laxiriirta federaalka xildhibaanada dood weyn oo nuxur leh kama aysan soojeedin, sidaas daraadeed waxaan u qaadaneynaa inay sideeda ay u'aadeen.

Maqaamka caasimadda waxaan filaa inaad heysaan laba xulasho, xulashada 1aad oo ah caasimad gobol caasimad ah, oo ah magaalda gobolka banaadir inuu noqdo saldhigii ummada soomaaliyeed noqdo caasimaddii jaamhuuriyadda isla markaana uu yeesho dowlad hoose isla markaana dadkiisu ay yeeshaan xuquuq maamul iyo xuquuq matalaad xulashada 1aad.

Xulashda 2aad waa inuu noqdo dowlad goboleed dawladda federaalka ay dowlad goboleedkaasi marti u noqota, xulashada kale oo 3aad ee meesha taalay oo gudiga meeshas ka saaray waa xulashada dowladdu in yar kamid ay caasimad ka dhigato laba degmo oo kamid ah oo Malaha wardhiigley iyo boondheere oo la isku daray, xulashadaas meesha waa kabaxday oo

meesha mataalo because dowladdu hay'adaheedu gobolka banaadir way ku fidsanyihiin, maqaamka caasimaddu halkaas ayuu yaalaa labadaa xulasho oo xulashada 1aad uu lee yahay matalaad iyo maamul dowladda federaalku amni ahaan iyo siyaasad ahaanba oo saldhig u yahay labadaa xulasho ayaa meesha taala, waxaan filaa baarlamanka iyo dadka talada haya inuu go'aanka dambe uu baarlamanka leeyahay laakiin labdaa xulasho Ayaan ku soo koobnay xulashada 3aad meesha waan kasaarnay.

Xulashada 1aad waxay leedahay, laba problem ayey xalinaysaa maamulka gobolka iyo inuu saldhig u noqdo dowladda oo caasimadda ay noqoto waa lays waafajiyey gobolku wuxuu yeelanayaa "monspalant" wuxuu yeelanayaa dowlad hoose sida hadda uu u leeyahay mayor isla markaana wuxuu yeelanayaa maamul dowladda hoose oo shacabka u'adeega wuxuu sidoo kale yeelanayaa matalaad labda aqal oo Xeerka doorashada iyo xeerka axsaabta lagu xeerinayo ayuu yeelanaya.

Labadaas maqaamka xulashada 1aad iyo 2aad dooduna inteeda badan halkaas ayey taalay, waxaan filayaa doodaas markii aan draft-ga labaad keenayno annagoo tixgalinayno aragtiyaashiina ayaan soo gudbin doonnaa.

Dhismaha golaha wakiilada ee dowlad goboleedyada, waxaan usameenay "threshold" waxaan gaarsiinay 99 mudane oo golaha wakiilada xildhibaano lama yiraahdo, magacooda waxaa layiraahdaa golaha wakiilada 99 mudane waa tresh hold-ga ugu sareeya dowlad goboleed leeyahay midka ugu hooseyana wuxuu leeyahay 66 inta u dhaxaysa ayey kujiraan.

Marka in kor lag xiro waxay ahmiyad uleedahay, doorashooyinka iyo axsaabaha sababtoo ah waa lagu tartamayaa golaha wakiilada, golaha deegaankana waa lagu tartamayaa, sida marka siday muhiim u tahay in dastuurku uu goloyaasha federaalka uu usameeyo number ayey sidookale muhiim u tahay in golaha wakiilada ay yeeshaan cadad layaqaano oo axsaabta ay filan karaan inay ku tartamaan.

Golayaasha degmooyinka oo goloyaasha deegaanka doorashadoodu ka dhacayso, iyaga naftigood waxay leeyihiin number degmooyinka "A" ah waa 27 xubnood halka degmooyinka "B" ay yihiin 21 xubnood, maadaama xilal siyaasadeed oo axsaabta ku tartamayso ay yihiin waxaa meesha ka baxaysa in layiraahdo state-kasta hayeesho inta uu doono taas oo keeni karta tiro aan isku dheeli tirneyn ay meesha timaado taasna ay meesha kasaarto.

Qodobka udambeeya waa is dhexgalka, is dhaxgalku waa faragelin luqad kale lagu sheegay, faragelinta dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada markii ay timaado duruufo mucayin ah ama xaalad deg deg ah ama mushikilad khilaafaad uu yimaado oo ah umuuro is barkan oo sideedaba noqon kara,

Waxaan u dhignay laba aragti ayaa saldhig u'ah adagtida 1aad waxay tahay dowalad goboleedka laftigeed inay faragelinta soo dalbato dhexgalka inay codsato tiraahdo waxaan u baahanahay taageerada dowladda federaalka inay musiibo noocaas ah stateka iyo dalkaba halis ku'ah in dowladdu soo farageliso oo wax kala qabato. Markaas dowladda federaalka awoodeeda iyo dhaqalaheeda iyo mideeda maamul iyo mideeda amni ay ku hormariso ay geyso si ay wax uga qabato mushkiladas gobolka mucayinka kajira. Midda kale waxaa waaye dowladda federaalka inay go'aansato iyada inay farageliso, markay soo codsato iyaduna dhib Kama jiro

iyada state-ka ayaa soo codsaday, laakiin markaan state-ka soo codsan waxaa lagu xiray in Aqalka federaalka uu ogolaado ayaa lagu xiray.

Waxaan filayaa waxaa jiro exceptions, mararka qaarkood dowladda federaalka ay kagarin inay Aqalka sare ay ogolaansho waydiisato, xiliyada noocaas ookale draft-ga waxaa kujira soojeedimaha 14cisho kahor inay dhexgal kasameyn karto, kadibna 14cisho gudahood aqalka sare ay ku go'aan qaadato ay go'aanka Kama dambeysta uu aqalka sare noqdo. Aqalka Sare maxaa loogu gaar yeelay ayaa su'aal ah oo mudanayaasha qaar ka dhawaajiyeen sababta loogu gaar yeelay waxay tahay dowlad goboleedyada oodhan ayey matalaan sidaas ayaa loogu gaar yeelay.

Sidaas darteed Admission-ka dowlad goboleedyada markay dhismayaan waa in Aqalka sare lasiiyaa go'aanada dowlad goobleedyada saameenaya waxaa laga dhigay awoodaha ugaarka ah Aqalka sare markii la tago cutubka 6aad oo hadda bilaabanaya nuxurkeed ku arki doontaan intii aan iloobo waxaan rajenayaa inaad ii cudur dartaan.

Cutubka 6aad ayaan maanta bilaabanyaa Sen. Saciid Cowke ayaa ii dulmaraya laba Madax ayaa loo qaybiye Sen. Saciid ayaa faah faahinaya laakiin cutub muhiim ah waaye labada aqal iyo awoodahooda ka hadlaaya labada aqal waxaan ka codsanayaa inay indha caafimaad ku eegaan waad mahadsantihiin.



**Sen. Saed Abdi Hussien**
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee BFS

Guddoomiye waad mahadsantahay, mudanayaasha sharafta leh, sidaad ku war qabteen doodeenu maanta waxay daarantahay cutubka 6 aad, markaa anuu ku daahi maayo dhawr farsamo ayaan rabaa inaan u cadeeyo xildhibaanada. Dhalinyarada maxdarka qabata ama "minutes" ka qabataa waxaa ku adkaatay inuu "point out"-gareeyo xildhibaanku qodobka uu rabo inuu aragtidiisa ka dhiibto, guddoonkana waxay ka sheegteen in maadaama aanu kala jarjaraynay oo lahayn hala kala reeb reebo cutubka ay adagtahay xidhibaanka in lagu ilaaliyo meesha uu dooda ka dhiibanayo.

Waxa kaloo adag oo hadda is qoray "column" kaa aan fadhiyey dhawr iyo toban xildhibaan baa is qoray, "column" kan kalena 20 xildhibaan baa is qoray, in cutubka inta labo loo kala jaro in xildhibaankii jeexa labaad ama qaybta kalee la jaray uu ku soo laabtaa aad bay u adkaanaysaa. Markaa talada aan soojeedinaynaa guddoonkana u soojeedinaynaa hadday nala qaataan waxa weeyi, inaan la kala reebin cutubka oo dhan oo xildhibaanku cutubka oo dhan meesha aragtidiisa uu ka dhiibanayo ka dhiibto. Balse uu cadeeyo qodobka uu ka dhiibanayo aragtida oo uu dhaho qodobka 80aad, qodobka 84aad ee sababaha lagu lumiyo xilka qodobka 90aad uu sidaa u dhiibto.

Ka bacdina ay "minutes"-ka u sahlanaato hawlwadeenka qoraaya inuu qabto meesha uu xildhibaanku aragtidiisa ka dhiibanayo taladaan saan soojeedin lahayn, xildhibaanada talaan u soojeedinay. Guddoonkana waxaan u soo jeedinay taladaa oranaysa in la isku furo oo aan la kala reebin oo cutubka oo dhan xildhibaanadu ka doodaan, maadaama xildhibaana badani is

qoreen oo ay adkaanayso xildhibaanku inuu markale ku soo laabto, mudane guddoomiye intaasaan soojeedin lahaa. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Sen. Hassan Hussien Haji**

Asalaamu Caleykum waraxmatullaahi Wabarakaatuhu, Bismillaahi Raxmaani Raxiim.

Guddoonka labada aqal, xillibaanada sharafta leh, shaqaalaha aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin, Asalaamu Caleykum waraxmatullaahi Wabarakaatuhu, guddiga dastuurka waan ku jiraa laakiin xaq ayaan u leeyahay inaan soo istgaago oo ra'yigeyga dhiibto, waana is qoray waana mahadsantihiin.

Maanta waxaa laga doodayaa cutubka 6aad ee qodobka 80aad ilaa qodobka 108aad, qodobadaan dhan waxay ka hadlayaan baarlamaanka federaalka soomaaliya labadiisa aqal, baarlamaanka federaalka soomaaliya waa hey'ada ugu sareysa dalka waxaa waajibaadkooda marka lays kugu daro ugu muhiimsan doorashada madaxweynaha, xil ka xayuubinta madaxweynaha, siinta kalsoonida golaha wasiirada iyo wasiirka 1aad iyo in ay kalsoonida kala laabtaan, in guddiyada madaxbannaan ay ansixiyaan gudiyadaas oo ay ka mid yihiin golaha adeegga garsoorka, oo ah laanta saddexaad ee dowladnimada waxay soo saaraan xeerarka dalka lagu dhaqo waxay kormeer ku sameeyaan ha'ayadaha dowladda noocyadooda kala duwan heer federal iyo heer dowladd gobleed.

Maanta maadaama laga hadlaayo cutubka 6aad, waxaa laga hadlaayaa xillibaanada shaqadooda iyo waajibaad kooda waxaan marka ugu horeysa ka codsanayaa xildhibaanada, maadaama shaqadooda laga hadlaayo in ayaga danta qaranka ay hormariyaan ayna ka hormariyaan dantooda qaaska ah, maadaama shaqadeena baarlamaan ahaan laga hadlaayo. Cutubka 6aad markaad fiirisaan qaabka dastuurka hore ugu qoran yahay in kan waa kala duwan yihiin xoogahoo waa lagu wareeraa, loo kala qeybiyo awoodaha saddex qeybood, Awood golaha shacabka si gooni ah ay u leeyihiin, Awood golaha aqalka sare si gooni ah ay u leeyihiin iyo in la yiraahdo faqradaan iyo cutubkaan waa la raray, inkastoo aan guddiga kujiro waxaan dareemay in xildhibaanada ay ku wareersanyihiin, waxaan guddiga ka codsanayaa marlabaad in markii wax laga badalaayo qodobka intii lagu sixi karo meesha lagu saxo madaama xildhibanada macriifo ay u leeyihiin qodobka.

Intaas hadaan ka gudbo rayiigeyga aan ka dhiibto qodobka 82aad wuxuu ka hadlaayaa lambarka xildhibaanaduu ka hadlaayaa golaha shacabka waa 275 golaha aqalka sarena waa 54 goboladii dalkana waxaa waaye 91 markii laga soo anbaqaado 18 waaye waxaan rajeynayaa meeshaan in kastoo guddiga aan ka tirsanahay waxay tahay taladeyda 18 gobol iney lahaadaan sanatarada markii loo qeybiyo gobol kasta wuxuu yeelanayaa saddex sanatar taas ayaan soojeedinayaa.

qodobka 84aad, qodobkaan aad ayuu muhiim u yahay xil lumiska xildhibaanka ayuu ka hadlaa faqradiisa (f) wuxuu sheegayaa xildhibaanka unuusan wasiir noqon Karin, wasiirkana uusan xillibaan noqon Karin, qodobkaan aad ayuu muhiim u yahay talooyin markii lasoo sameeyay ummadii soomaaliyeed dhan waxay isku raacday qodobkaan labadaan hay'adood in la qaado,

sababtoo ah waxaa Meesha ka dhalatay waxa loo yaqaano dal is diidan waxaa is diidan wasiirkii oo xillibaan ah, hadana ka shaqeynaayo xafiiskii reysalwasaaraha iyo xukuumadii la xisaabtankii ayaa adkaanaaya baarlamaankii waxaa ku dhacaaya macna daro, xillibaankana marka hore uu rabo xildhibaan soo noqdo awoodiisa wuxuu soo galinaaya inuu wasiir noqdo marka wasiirka noqdana wuxuu isku dayayaa markuu waayana mucaarad ayuu noqonaa markuu noqdona xukuumada inuu difaaco ayuu bilaabaa, marka waxay noqonee iney xukuumada shaqeyn weyso, qodobkaan si fiiican ugu fakara dalkana u hiiliya labadaan awodoodna kala saara taas hadaan ka gudbo.

Qodobka 85aad, dhaarta xillibaanada guddiga waa kasoo shaqeeyay lakiin dhaarta hada ku qoran dhaartii ku qorneed dastuurkii 1960gii dhaartii hore ugu qorneed ayaa ka magacweyneed markaan fiirino, dhaartaas waxay kulmineysaa inaad ku dhaaraneyso difaaceyso dalka, diinta iyo dadka kan waaka maqan tahay marka waxaan is leeyahay dhaartii hore ayaa baaxadeeda aad iyo aad ugu weyneed.

Qodobka 87aad qodobkaan in la sheego waan ku qasbanahay dastuurkii hore waxaa la ogoleen oo ladiiday in baarlamaanka madaxweynaha kala diri karo, waalaga saaray dastuurkii hore qodobkaan si kale ayuu u qoranyahay lakiin macnihiisa macnihii waaye waxaa waaye madaxweynaha wuu kala dirikaraa baarlamaanka laba sano ka dib, hadii maaxweynihii kala diri karo baarlamaanka aan ognahay xaalada dalkaan ku jiro oo baarlamaankii 9aaad iyo baarlamaankii 10aad aan jirino xaladaas waa adagtahay danta inaad ka fakartaan oo arrintaas aad iyo aad ayaan ugu bogaadinaa taas hadan ka gudbo.

Guddiga adeegga baarlamaanka qodobka 95aad waxaan faqradda A,B,C in lagu daro ayaan qabaa waxaa waaye xilka waa sii joogayaan ayaala yiri xilkooda laakiin qofka haduu doonaayo inuu is casilo way u banaantahay iscasilaad in lagu daro yaan soojeedinayaa.

Qodobka 98aad, awooda baarlamaanka wadajirka waxaa laga ilooway dabcan waalaga ilooway ma'ogi waa ku jirtay, hada in lagu daro labada aqal doodoodi tahay doorashada madaxweynaha waa ku jirtay in yacnii labada aqal in awoodooda tahay doorashada madaxweynaha waa laga ilooway mooyee waa ku jirtaa in lagu daraan rajeynayaa waad mahadsantihiin intaas ayaan koley soojeedin lahaa.



**Xil. Mohamed Harun Abdilahi**

Bismillaahi, wa scw. Mudane Guddoomiye waad mahadsantahay. Muddo 50 daqiiqo ah guddiyadii dastuurka ayaa inala hadleesay, xiliga golaha la furayna waad arkeysaa, xildhibaanada intooda badan waa dareerayaan, marka guddiga dastuurka hadday isla socon ha noo sheegaan, haddii kale waqtiga yar ee nala siiyay ee daqiiqadaha kooban ah, dee yeenan doodoodu halkaan dib ugula soo noqon, saacado badan iyo bilo badan iyo sanado ayay heesteen, marka waqtigii yaraa nalaga dilay, guddiga dastuurka hanaga raali ahaadaan. Waa mahadsantihiin.

Runtii bogaadinna waan u hayaa labada heer ee dastuurka ka shaqeynayay, shaqo fiican oo aad arkeysiin in waqti badan la soogeliyay ayay ka soo shaqeeyeen oo aan oran karo, danahooda gaarka ah kama eegin ee danaha dalka ayay ka fiiriyeen.

Marka haddaan doodeyda ku billaabo, inkastoo waqtiga aad u yaryahay, hadda iiga billaw 10-keyga daqiiqo.

Qodobka 80aad ee soojeedintaan cusub ee dastuurka, waxaad tiraahdeen, wuxuu ka kooban yahay saddex farqadood, marka xagga faahfaahinta la eego, qalad yar baa idin ka dhacay, waxaan filayaa waa qaladkii koowaad aan ku arko, marka saddex farqadood kama koobno ee laba farqadood ayuu ka kooban yahay, inaad halkaas saxdaan ayaa idiin soo jeedinayaa.

Qodobka 83 (1) Kan kuxiga. Kan kalena ay noqoto 35 noqoto ayaa tiraahdeen, marka ugu yaraan inaad tiraahdaan, hadday taa noqoto macnaheedu waxa weeyaan dealing baad halkaa ku xirteen, inay error tahay ayaan filayaa, marka sidii kii horre u qornaa, kii horre 25 buu sheegayay laakiin ugu yaraan 25 buu lahaa, adinkuna ugu yaraan inaad tiraahdaan laakiin waa inay noqoto markaa tiraahdaan, horreyna loogama socdo, gadaalna loogama socdo ayay sheegeysaa.

Isla qodobka 83, faqradiisa (e) waxay sheegeysaa, aqoonta inay noqoto heer jaamacadeed, Jaamacaddaha shahaadooyin badan ayay bixiyaan, diploma ayay bixiyaan, short courses ayay bixiyaan, waa in la caddeeyaa oo la yiraahdaa shahaadada heerka koowaad ee Jaamacadda laakiin shahaado jaamacadeed haddaa tiraahdaan dood badan baa la isla gelin karaa oo hadhowtoole aydaan ka lug bixi doodin. Isla qodobkaa waxaa sii raacsan waayo-aragnimo udhiganta, waa tan xuquuqda dadka waxbartay oodhan lagu dulmiyo, waayo-aragnimo udhiganta ma jirto ee waa in toos loo caddeeyaa oo la yiraahdaa shahaadada heerka koowaad ee Jaamacadda, haddaanan aqoon loo baahneyn oo dhalinyaradeena aynu waxbarayno aa niyad jabineeno, toos halooga saaro oo hala yiraahdo waxbarasho looma baahno ee waayo-aragnimo ayaa loo baahanyahay.

Qofkasta oo nool waayo-aragnimo wuu leeyahay wuxuu ku soo waayo arkayba, qofkasta oo nool waayo-aragnimo wuu leeyahay, marka waa in toos loo yiraahdaa shahaadado jaamacadeed oo heerka koowaad ah. Isla xarafka (f) ee qodob kaas, waayo-aragnimo saddex sano ayuu sheegayaa golaha shacabka, kan kalena shan sano.

Marka qofkasta sidaan da'da ku soo sheegnay waayo-aragnimo wuu yeelanayaa haddaan waayo-aragnimada si gaar ah loo caddeynen oo la dhaheen, waayo aragnimo arimaha bulshada la xariirto, mid maamul la xariirto, haddaan la caddeynaynin in iyadana meesha laga saaro ayaan qabaa.

Qodobka 84aad oo ka hadlaya sababaha lagu waayi karo xildhibaanimada ama xilka xildhibaanka ee xubinnimada baarlamaanka, qodobkiisa koowaad, faqradiisa (b) is casilaado xildhibaanka baa tiraahdaan. Inta badan dastuurka meelaha aad ku qoreysaan xildhibaan iyo senatar waad isbarbardhigeysaan, marka taana inaad tiraahdaan xildhibaanka ama senatarka wuxuu ku waayi karaa iscasilaada aad ku dartaan oo xildhibaan keliya aa ku soo koobin sababtoo ah meelo badan oo kamid ah soojeedinta dastuurka qabyo qoraalkiisa waad ku tiraahdeen labada goleba. Xarafka (f) ee qodob kaan 84 oo ah xildhibaanka inaanu qaban karin xil kale ee dawladeed heerka uu doono ha noqdee, runtii kaa inaad cibaadeysateen oo danta dalka aad u dhaarateen ka taliseen ayaan aaminsanahay, dalkeyna wuxuu horre ugu socon waayey xildhibaan ahna wasiir.

Wasiiraddii quality ma yeealanayaan sababta oo ah waxaa lagu qasban yahay tiro kooban oo xildhibaano ah in wasiiro laga soo xusho, halkii Soomaalida malaayiinta ah laga soo dhex xulan lahaa dad awood iyo karti u leh inay hoggaamiyaan hay'adaha fulinta xildhibaanka ay shaqadiisa gaar ugu noqon laheed la xisaabtanka hey'adaha dawlada, marka dawlad micno leh haddii la rabo, aynaan danteena eegayn, waa laga yaabaa saa u badani tihiin waad ka soo horjeedsan doontaan, danta dalka aad u dhaarateen, dhaartiinana waan idin xasuusinayaa haddii aad xasuusataan, aynu kala saarno xildhibaannimo iyo wasiir aynu kala reebno, xukuumadda iyo golayaasha dawlada hakala saarnaadaan, saddexda gole ha noqdaan golayaal kala madaxbanaan. Marka aad baan ugu bogaadinayaa, waxaan filayaa xildhibaano inala mid ah ayay ahaayeen laakiin ra'yigii dadweynaha Soomaaliyeed ayay qaateen, waana idinku taageersanahay runtii.

Qodobka 88aad ee ka hadlaayo xeer hoosaadka golaha shacabka, wuxuu badalay qodobkii 68aad, kaa waxaan filayaa inuu ka faahfaahsanaa oo ka fiicnaa kii uu badelay ee 86, kaa in lagu soo celiyo ayaan rabaa marka laga reebo farqada 4aad oo ka hadleysa diidmada sharci qabyo qoraal ah, sharci qabyo qoraal ah qeybaha kale ayaad ku sheegteen, marka farqadaas laga reebo in 68 dib loogu celiyo ayaan rabaa, waad qoreysaan baan u maleynaa wiilasha iyo gabdhaha minute-ka qoraya,

isla qodobkaa qeybta ku xigta ee ka hadlaya fadhiyada iyo maamulada baarlamaanka meelo badan waxaad ku sheegteen in 30% golaha shacabka ay codsan karaan hal maamul ama hal dawlad goboleed senataradooda, marka senatarada dawlad goboleedyada ma dhammaantood baa? Waa in lancadeeyo mise aqlabiyadooda, haddii la yiraahdo senatorada hal maamul goboleed majority baa wax codsan kara, qeyb kamid baa diidi karta, marka hala caddeeyo oo hala yiraahdo majority-ga senatarada hal maamul goboleed.

Qodobka 90aad oo ka hadlaya shuruudaha guddoomiyenimo, faqradiisa 2aad oo ka hadlaysa guddoomiyaha marka loo doorto xilka guddoomiyenimo inuu baneeyo xil kale oo uu ka haayo xisbiyada siyaasadda, idinlama qabo inay saxsan tahay, guddoomiyaha waa siyaasi, dalka xisbiyo ayuu yeelanayaa, in shuruud looga dhigo inuu ka tanaasulo sax maahan because madaxbanaanida laftigiisa xisbi buu madax ka noqon karaa, mas'uul ka noqon karaa, hadana madaxweynaha qaranka ayuu noqon karaa, guddoomiyahana asagoo xisbi madax ka ah oo mas'uul ka ah, ayuu guddoomiyihii golaha shacabka ama guddoomiyaha golaha aqalka sare noqon karaa, waa in shuruudaha lagu daraa inuu si dhexdhexaad ah oo si uu xildhibaanada mucaarad iyo muxaafidba leh u hoggaamiyo oo xeerarka ku dhisan, inta badanna dalalka caalamka marka malaha Ingiriiska laga reebo, ma garanayo, labadaa xilba way isla hayaan, inta badan.

Xil waayida guddoomiyaha golaha baarlamaanka, kan aqalka sare ama kan golaha shacabka markaad sheegeyseen, qodobkiisa koowaad, faqradiisa (c) waxaad ku darteen, qiyaano qaran, qiyaano qaran waa in ay cidi caddeysaa, marka qofkasta ayaa iska oran kara guddoomiyaha wuxuu ku dhacay qiyaano qaran, marka waa inaynu niraahnaa, markii ay maxkamdu ku hesho inuu ku kacay fal qiyaano qaran.

Isla qodobka ku xigo ee 93aad, faqradiisa (c) oo ka hadleysa guddoomiyaha golaha shacabka uu guddoomiyo fadhiyada wadajirka ah, runtii waa sax, waana sida ay u badan tahay, kii horre

ee iminka aynu badaleyno, marna guddoomiyaha golaha aqalka sare ayuu qorayay marna guddoomiyaha golaha shacabka,wuu isku celcelinayay, wuxuu ka eegayay inuu khilaaf dhaco, inta badan wadamada caalamka markaan soo baaray, guddoomiyaha golaha shacabka oo ah kan ugu tirada badan golayaasha ayaa guddoomiya.

Qodobka 95aad, guddiga adeega baarlamaanka ayaad sheegteen, waxaan qabaa, dee practical maahan ayaan u maleynayaa, muddo 12 sano ah, dastuurkii horeba waa sheegayay, mana la sameynin, guddoomiyeyaasha oo u arkayay awooddooda inay wax u dhimayso, marka practical noqon maayo, haddiise aan laga maarmayn farqadiisa koowaad waxay sheegeysaa oo si optional ah u dhigaysaa, waxaa jiri kara ayay leedahay, waa inaynu waajibinaa ama waa inaynu meesha ka saarnaa ee waa inaan optional lagu soo koobin.

Qodobka 96aad, awoodda ugaarka ah golaha shacabka, marka aad sheegeysaan, eedeynta madaxweynaha ayaa lagu sheegay faqradiisa (f) awal horre ayay ahayd xil ka qaadistiisa, golaha maahan xeer ilaalin, eedeyn sameyn maayo, xaga kale ee awoodaha golaha aqalka sare waxaa lagu daray xil ka qaadista madaxweynaha, marka taa waxaan qabaa in dib loo soo celiyo oo la yiraahdo, labada gole oo wadajira ayaa xilka ka qaadi kara madaxweynaha, shuruudaha waa gooni laakiin eedeynta golahaan lagu soo koobay, eedeyn xeer ilaalin baa iskaleh, inaynu ka dhaafno ayaan qabaa oo sidiisi horreyto lagu soo celiyo.

Awoodaha u gaarka ah aqalka sare, aad baan u soo dhaweynayaa, dawladnimo ayay muujinaysaa, meelo aan la taaban jirin oo ay ka mid tahay taliyeshaasha, danjireyaasha, waan israacinayaa, weli waqtigeyga ayaan ku jiraa. 97 oo ah awoodaha u gaarka ah aqalka sare, runtii sidaan anigu qabo dawladnimo ayay muujineysaa, waxayna sheegeysaa inuu u baahan yahay xilal u baahnaa in ay golayaal helaan oo ay ka mid yihiin taliyeyaasha iyo danjireyaasha aad ku soo darteen faqradiisa koowaad ee xarafkeeda (f). Isla xarafka (c) waxaad sheegteen eray marar badan laga hadlay ee ah dhexgal, dhexgal ma caddo ee faragelin in toos loogu badalo ayaan aad u jeclaan laha.
Awoodaha wadaaga ah, in lagu sodaro tii xil ka qaadista ayaan jeclaan lahaa halkii horre loo yiri golaha shacabka la yiri eedeyn buu leeyahay.

Qodobka 98aad oo ah awoodaha wadaaga ee golayaasha, faqradiisa (d) maxkamadda dastuuriga ayaad ku soo darteen, aniga waxaan qabaa maxkamadda dastuuriga laba meeloodba haddii aynu ka eegno inaan dalkaan u habooneen, dan dhaqaale haddii aanu ka eegno maxkamadda dastuuriga oo budget ku baxo oo laga yaabo sanadkii halmar inay shaqo yar qabato, labadii sano mar qabato ama eesan shaqeynba, budget ahaan sax maahan, maamul ahaanna sax maahan. Hay'adaha dawladda waa inay ahaadaan hey'ado qabto shaqo daily ah oo umadda u qabtaan, marka in qodobka laga saaro oo maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuuriga hal ay noqdaan sida ay u badan yihiin dalalka aduunka oo aynu kamid nahay, dalalka aduunka inta badan qaababka dawladnimada way iskaga egyihiin, taa dhaqaale ahaan sax maahan, awood qeybsi ahaanna inkastoo diidannahay hadana meelo yaryar ayaa lagu soo koobay.

Maxkamadda Dastuuriga, maxkamadda sare iyo reysul-wasaare ku-xigeen iyo aqalka sare, kuwii baa hadana sii kala dhantaaleysaan oo waxa leedihiin maxkamadda dastuuriga halaga sameeyo, maxkamadda sare maxay qabaneysaa marka, haddii maamul goboleedyadii,

maxkamad gobol iyo tu racfaan iyo tu sare yeeshaan, maxkamaddii sare maxay ka shaqeynaysaa oo Muqdisho ku koobneed? Maxkamadda yaan lakala saarin.

Senator Muuse ayaan arkaayay oo Gobolka Benaadir u doodaayo, anaguna tanaanu rabnaa, haddii tan lakala saaro, anaguna Gobolka Benaadir ka shaqeyn meyno. Aad baad u mahadsantihiin, waan idinkaga mahadcelinayaa guddiga labada heer, heer baarlamaan iyo heer madaxbanaan aad baan uga mahadcelinayaa sida faahfaahsan ee ay waqtiga badan u soogeliyeen, waxaanse ka codsanayaa inayan maalmaha dambe waqtiga inaga lumin oo ay dooddooda ku soo dhammeystaan xafiisyadooda. Aad baa u mahadsantihiin.



**Xil. Abdulkadir Sheikh Ali**

Assalaamu caleekum warax matullahi wabarakaatuhu, gudoonka xildhibaanada labada Aqal waad salaaman tihiin aad bay u fiicantahay in maanta labo madax kaliya laga shaqeeyo, waayo waqtiga oo cariiri ah oo 10daqiiqa ah, iyo afar madax waxa ay noqoneysaa waa wax aan isqaadi karin, hadii aad soo koobteen waad ku mahad santihiin, insha allaahu waxa aanu sameynenaa, labada madax kaliya inaanu ka shaqeeno.n

Marka u gudo galo "page" ka ama qodobka 82aad farqadiisa 3aad, waxa ay leedahay, qofkastoo noqda madaxweeyne xilka baneeyo si nabad ah iyo dimquraadiyad, waxa uu ka mid noqonayaa aqalka sare, waa sax marka waxaa fiicnaan lahayd in lagu daro labada Guddoon ee Aqalka sare iyo Golaha shacabka, iyagana marka ay xilka baneyaan si dastuuri ah u baneeyaan in lagu daro iyagana.

Aqalka sare, waayo hadii kale waxay noqoneysaa dhinac u raran, waxay noqoneysaa mar walba in Aqalkii sare oo dhinac u rarmo, marka waxaan soojeedin lahaa ani aragtidayda in lagu daro Gudddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddomiyaha Aqalka sare, marka xilka baneeyaan si nidaam ah in lagu daro si xubin sharafeed meesha ay ka noqdaan.

Marka furo qodobka 87 farqadiisa 2aad iyo saddexaad, waxa ay leeyihiin doorasho xilligeeda laga soo hor mariyey, sida hadeer laga dhawajiyay doorasho xilligeeda laga soo hormariyey, waa la fahmi karaa waxaa la dhahay saddexda sano u danbeyso, madaxweynaha waxa uu awood u leeyahay inuu Baarlamaanka kala diro, marka madaxweynihii la doortay oo Baarlamaanka doortay sidee u dhaceysaa inuu madaxweynaha la doortay oo Baarlamaankii doortay inuu kala diro, marka qodob kaasi waxaan u maleenayaa farqo cusub, in laga saaro meesha. Baarlamaanka awoodiisa aan la dayacin, madaxweynihii hadii aan dooranay hadana la yiraahdo asagaa idin kala diri karo, xogaa waxaa la yiraahdaa mudul qofkii dhisay ayaa ka weyn, madaxweynaha Baarlamaanka iyo Aqalka saraa doortay, marka qodobkaas waxaan rajenayaa in meesha laga saaro.

Farqada 3aad iyo 4aad, waxey qoreysaa in markii uu la tashado xisbiyada ayaa la yiri, dalka waan ognahay xisbiyo noo ma dhisna, laakiin ururyo ayaa jira iyo guddiga doorashooyinka ayaa la yiri, marka hadii madaxweynaha uu la tashadi xisbiyadii qaran aan wali dhisney, marka sidee u dhaceysaa, marka madaxweynaha intee uu ka keenayaa xisbiyadii uu la tashanayo, marka waxaan rabaa qodob kaasi meesha sidiisaba laga saaro.

Madaxa 2aad qodobka 95aad, xogeyaha Guddiga Baarlamaanka Golaha Shacabka iyo xogeyaha waxaa la yiri waxaa guddoominaya ama madax noqonaya xogoyaha Aqalka sare, marka waxaan rabaa in laga dhigo xogeyaha golaha shacabka.

Marka aan fiirino awoodaha u gaarka ah xilka xayuubinta, marka waxaan rabaa insha allaah, in qodobadaasi si adag looga fikiro, hadii la dhahay madaxweynahana waxa uu kala diri karaa meshaan in xogaa ay u cuntamin golaha shacabka iyo Aqalka sare, sideeda hore loo daayo, aad baa umahadsantihiin, wassalaamu caleeykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu.



**Sen. Saynab Ismail Mohamed**

Bismilaahi raxmaani raxiim dhamaan xildhibanada labada gole iyo guddoonka Asalaamu caleykum waraxmatulahi wabarikatuh waxbo la iskagama maqlo fadlan aan iska deyno sheekooyinka ee aan wadano.

Waxaan ka bilaabayaa qodobka(???) farqafiisa 1aad waa oo ah awoodaha xeer dejinta waxaa u xilsaaran Baarlamaanka, waxaan is iri farqad kale ayuu u bahanyahay oo ansixinta Dastuurka iyo xeerarka Dalka oo ay meel mariyeen waxaan ka shaqeyney afar "chapter" hada waxaan wadnaa kuwo kale hadii waxa aan ka shaqeyney "negotiation" siyaasadeed lagu tiri karo macno mayeelaneyso marka xeerarka iyo ansixinta oo ay meel mariyeen Baarlamaanka dowlada federaalka ee soomaliya in wax cod aan baarlamaan aheyn lagu burin karin.

Qodobka 81aad farqadiisa 3aad xubin kasta oo kamid ah golaha aqalka sare waxay matashaa maamul goboleed marka waxaan ku darey halkaa xubnaha aqalka waxay masuul ka yihiin howl kasta oo ku xiran maamul goboleed.

Maamul goboleedka hadey imaadaan kabkooda iyo mashaariicdooda iyo waxooda iyaga lasiiyo hadaba masuul baan ka aheyn cidna dhegeysatana maleh cid aan utagi karno maleh hanoo soo galin bey na dhahaan marka waa in uu jiraa "link" isku xiraya Baarlamaanka aqalka sare iyo maamul goboleedka iyaga ay masuul uga noqdaan wixii danahooda oo mashaariic kaga xiran ee dowlada federaalka soomaaliya.

Qodobka 84aad sababaha lagu lumiyo xubin nimada Baarlamaanka waxaa kujirey in aan wasiir la noqon, waxaa jirto dadka soomaaliyeed qofka wasirka ah wuxuu isku heystaa wasirka iyo xildhibanka, wasiirka iyo senatarka waana "overlap" meshii reerkaas ay ka heli lahaayeen labo jago isagii baa heysta maalin walba waa lanagu dacaayadeeyaa dadka codeeya mesha fadhiya in ay wasiiro yihiin.

Waxaan taageerayaa oo aan soo dhoweynayaa in ay jirto "recognition" oo Baarlamaankana meel yahay golaha wasiiradana "recommendation" bey ku leeyihiin in ay "recommend" gareeyaan lakiin ay yihiin dad soomaaliyeed oo dibada ka yimid wali waxaan leeyahay aqalka sare waa in wakiil buuxa u fadhiya Dowlada federaalka ay noqdaan.

Qodobka 90aad shuruudaha doorashada guddoonka hadii uu katirsanyahay xisbi, waxaan rabnaa in uu yahay qofka guddomiyaha ah in uu xilka xisbiga iska dhigo taa waxay keeneysaa

qof walba oo ka tirsan xisbiyo hadii lagu imanayo xisbi walba in uu yahay dhaxdhaxaad sababtoo ah haduu xisbi katirsanyahay oo uu yahay qof dhaxdhaxaad ah hadana tuhun baa dhalan kara biniadam baa nahay marka in uu si u qanciyo xubnaha uu gudoonka u noqdey xilka kale ee xisbiga in uu bananka uga imaado taas ayaan xoojinayaa.

Halkaan waxaa ku qoran qodobka 92aad xil waayida guddoonka oo ay shegeyso waa in ay jirto marka laleyahay xad gudub iyo waxa uu sameyey denbiyada hadaaney jirin maxkamada dastuuriga ah maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ah farqi baa udhaxeeya. Maxkamada Dastuuriga ah dowlad goboleedyada dowlada gudaheeda ra'isulwasare iyo madaxweyne hadey is qabtaan wax kasta hadey dhacaan dowladaas dastuurka ay ayey ku xukumeysaa, marka waxaan leenahay waa in ay jirtaa maxkamada dastuuriga ah oo arrimahaasna ay u xilsarantahay.

Qodobka 95aad kulamada wadajirka ah ee labada gole ee ansixinta xaalada degdega ah iyo caaladaha deegaanka baarlamaanka ka masuul ah ayaa la yiri waad ogtihiin maanta marxaladaan kujirno waxaan kujirnaa wadanka in lagu soo xad gudbey waxaan kujirnaa in xuduudeheenii iyo madaxweynuhu maalin walbo u dhoofayo in uu ka ololeeyo soomaaliya mid ah marka baarlamaanka miyeysan awood ulaheyn xiligaan in aynaan doorashada gali kareyn oo ay kusoo saaraan qaraar in aan xiligaan aheyn xili doorasho lagalo marka awoodahaan dhan hadii lasiiyey maxaa udiidaya in ay baarlamaanku soo jeediyaan xiligaan xaalad adag, xaalad abaareed, xaalad amni intaba hadii lagu jiro in aan wadanka doorasho ka qabsoomi kareyn qodobkaas ayaan ku darey.

Waxaa jira awoodaha aqalka sare hubinta howl kasta oo dastuur ama xeerarka kale maadaama la yiri aqalka sare wuxuu wakiil kayahay ama uu la shaqeynayaa dowlad goboleedyada waa in ay jirtaa madasha hagida dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka guddonkooda iyo baarlamanadaba ay ku xiranyihiin ay jirtaa madal ay iyagu ku hagayaan.

Qodobka 97aad awoodaha aqalka sare ansixinta iyo gaarsiinta mashaariicda qodobkii horaan kaga hadley ilaa wa ilaa in ay jirto ansixinta mashaariicdooda iyo qorshayaasha maamul goboleedka in ay iyagu u gudbiyaan dowlada federaalka ah.

Qodobka mesha laga saarey 72 buu ahaa tirada xubnaha aqalka sare labo farqadood baa ku qornaa tirada dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka ee aqalka sare waxa ay leeyihiin xubno isleeg marka waxaan soo dhoweyneynaa waxay aheyd dowladaha cusub oo dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka "automatically" hadii dowladii lasameyey oo ay gahay dowlad xubnaha ka ah dowlada federaalka sida waqooyi bari in ay hesho 8 senatar bey aheyd taas ayaan xoojinayaa in ay degdeg u helaan waad mahadsantihiin.



**Xil. Yasin Abdullahi Mohamud**

Waxaan rabaa inaan doodayda gudagalo. Cutubka 6aad Qodobka 82aad ee tirada xildhibaanada waxa laga dhigay 275 waxaan ognahay in Dastuurkii Kumeelgaarka ahaa uu qeexayay in Madaxwaynaha Jamhuuriyada uu noqonayo xubin sharafeed, waxaan rabnaa marka in guddigu cadeeyaan xubin sharafeedkaas, sida uu noqonaayo, inuu cod yeelanayo iyo inaanu

yeelanayn waayo waxaan ognahay inuu hada joogo Madaxwaynihii 9aad sidoo kale Madaxwaynaha hada jooga ayaa jooga marka halkee ayay ka galayaan 275ta.

Intaas kadib tirada Aqalka Sare. Aqalka Sare markii laga hadlayo Dastuurkii Kumeelgaarka ahaa Qodobkiisa 9aad wuxuu qeexayay in Maqaamka iyo Matalaada Caasimada iyo xubnaha ay yeelanayso in lagu qeexayo dhamaystirka dastuurka. Waxa laga doodayo waa dastuurkii Maqaamka iyo Matalaada Caasimadu halkee ayay kasoo gelaysaa hadii aad tiraahdaan tirada aqalka sare waa 54 oo ah sidii horeyba uugu qornayd waxaan rabnaa inaad noo sheegtaan meesha uu kasoo galaayo. Waayo sidaan horey u sheegayba doodu waxay u badatay xulashada 2aad, xulashada 2aadna waxa ka dhalanaya in Gobolka Banaadir uu yeesho xubno aqalka sare ah, meeshana 54 ayaad kusoo qorteen.

Intaa kadib waxaan rabaa Qodobka 84aad. Sababaha xil-waayidda xildhibaanka, waxa lagusoo daray oo aan horey uugu jirin in qofka xildhibaanka ahi uu ku waynayo xubinimada haduu wasiir noqdo, anigu taas waxba kama qabo laakiin hadii uu xildhibaanku wasiir noqon karo waxaan rabnaa in xildhibaanku saraakiisha iyo xilalka ciidankana qaban karo waayo agaasimaha iyo wasiirka farqi badan uma dhexeeyo ama taliyaha iyo wasiirka marka hadii ay sidan ahaanayso waxba kama qabo laakiin hadii sidii hore lagu celinayo oo ahayd in xildhibaanku xil kale oo dastuuriya qaban karo waxaan qabaa in lagu daro saraakiisha sare ama agaasime ha noqdo inuu qaban karo hadii uu xildhibaan yahay. Doodayda intaasaan kusoo koobayaa salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.



**Sen. Deka Hassan Hussien**

Xubnaha labada gole ee baarlamaanka federaalka soomaaliya, xoghayeyaasha, habdhawrka, hawlwadeenada, *media*-ha, dhamaantiin aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

Uga horayn marka ugu horeysa waxaan labada guddi ee dastuurka warbixintii uu guddoomiyaha soojeediyey waxaan ka qabnaa anaga cabasho, iyadoo wali aan *statistics*-keedii aan la samaynin oo warbixinadii aan soojeedinay iyo soojeedimaheenii iyadoon la tixraacin in qodobyada la iska soo qaato ay ka mid tahay labo gobol kaliya ayaa noqon karta taas oo macnaheedu tahay *state*-yo maanta dhisan inay noqondoonin "state". Markaa waxaan ka codsanaynaa guddiga inay ilaa *statistics*–keedu soo baxdo oo aan codkeenii aan wax ku helno ama wax ku weyno inaan warbixintaas mardanbe nalala wadaagin, waad mahadsantihiin.

Qodobka 82aad faqradiisa 3aad waxaan anuu soojeedin lahaa, waxaan aad horta ugu taageersanahay guddiga inay *standard*-kii caalamka ay raacsiiyeen ahayd xubin sharafeedku inuu aqal sare ka mid noqdo waa taageerayaa waana soo dhaweynayaa. Faqrada 3aad shuruudaha xubinnimada baarlamaanka aniga waxaan soojeedinayaa oo xubnihii iga horeeyeyna ku waafaqsanahay ugu yaraan in lagu da'ad uguraan wuu ka badan karaa meesha waxa ku qoran inuu noqdo 35 golaha aqalka sare, golaha shacabkana uu noqdo qofka xubin ka noqonaaya baarlamaanka 30, waxaan soo jeedinayaa ugu yaraan in halkaasi lagu daro.

Faqrada kale marka heer jaamacad shuruudaha ka mida faqrada waxaan u malaynayaa inay tahay **(B)** waxaanan soojeedinayaa inay heerka koowaad, haddii la yiraahdo shahaada

jaamacadeed waa in la cadeeyo waayo dastuurkan wuxuu noqon doonaa in wax cad oo la raaco uu noqdo wax bushabahaad oo hadhawto khilaaf keeni doona ilama fiicna. Markaa in la yiraahdo shahaadada heerka koowaad ee jaamacada ama wax u dhigmana anuu ma garanaayo wax udhigma in laga saaro khibrad u dhiganta in laga saaraan qabaa.

Qodobka 87aad doorasho xilligeedii laga soo hormariyey aniga mana aqaano mana fahmin qodobkaas haddii qodobkaas la qaatana wuxuu ka hor imaanayaa qodobka cutubka 4aad qodobka ku jira ee ahaa muddada xilhaynta baarlamaanka federaalka soomaaliya oo ahayd 4 sano ayuu ka hor imaanayaa mar hadii la yiraahdo doorasho xiligeedii laga soo hor mariyey. Waayo afarta sano oo kuu dhamaanin haddii qodobkan uu hirgalo waxay noqonaysaa in la yiraahdo dib haddana doorasho ha loo galo adoo labo sano joogay ama adoo saddex sano joogay meeshaasna wuxuu ka hor imaanayaa qodob kale oo dastuuriya. Dastuurka markaa awlaa dastuurkeenu wuxuu ahaa dastuur iska hor imaanaaya haddana yaynaan ka shaqaynin inuu iska hor imaado oo qodobkii xilhaynta baarlamaanka qodobkan aad uu uga horimaanayaa.

Qodobka 84aad sababa lagu waayayo xilka waxaa xubinta baarlamaanku ay ku weynayso, halkan ma cada inuu xil dawladeed oo kale la qabto ma cada waa in la cadeeyo, waa in la yiraahdo sida xukuumada oo kale la cadeeyo inuu xilka ku waayi karo hadduu qofkaasi xukuumada kamid noqdo in la cadeeyo iyadana waan soojeedinayaa.

Qodobka 97aad ee awooddaha u gaarka ah golaha aqalka sare waxaan ku soo kordhinayaa labo faqradood oo kala ah, **(I)** oo ah korjoogtaynta, fullinta iyo la xisaabtanka mashaariicda horumarineed ee dawlad goboleedyada waana awooddaha aqalka sare, waxaan u malaynayaa inay joogaa dhalinyaradii "note"-ka qaadaysay. Faqrada kale oo ah **(J)** waxaan ku soo kordhin lahaa marka golaha wakiilada ee state waliba uu ka qaado xilka madaxweynaha state kaasi, waxaa ogolaanaaya ama diidaaya xilka qaadistii ay sameeyeen golaha wakiilada ee state walba waxaa ama diidaaya ama ogolaanaaya golaha aqalka sare ee baarlamaanka federaalka soomaaliya, waxaan ku soo gabagabaynayaa qodobkaas. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin, salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarkaatu.



**Xil. Jama Mohamed Askar**

Bismillaah,gudoomiye, xildhibaanada sharafta leh halkaan fadhiya waad salaamantihiin. Intaanan guda galin inaan qodobada kahadlo waxaan rabaa inaan baraarujiyo dhowr qodob,markaan dastuurkaan ka shaqeynayno waa inaan haysanaa "conceptual freamwork" ama "mental map" qodobada halkaan ku yaala maxey aakhirkii dhalinayaan? Dalkaan nidaam noocee ah oo siyaasiya dalkaan ka dhismaya? Haddaan ku mashquulno "attention" keenu qod-qod-qod,ee aan garan Karin ugu dambeyntii waxa dhismaya waa mushkilad. Sida markaad guri dhisayso "Architecture" ka loogu sameeyo sedex qol noqonayo,afar qol noqonayo sidaas oo kale weeye qodobada halkaan ku yaala.

Waxaan xoojinayaa dastuurkii hore ama dastuurka haysano 2012kii lasameeyey dalkaan wuxuu ujideenayey nidaam baarlamaani ah,dalkaan ma ahan nidaam "ri'aasi" waa nidaam baarlamaani ah oo awoodaha fulinta loo qaybiyey xafiiska madaxweynaha iyo xafiiska golaha wasiirada oo uu hogaaminayo Ra'iisul wasaaraha,sawabta sidaas loo sameeyey dalkaan Waxaa

soomaray nin xoog weyn oo Maxamed Siyaad Bare layiraahdo "Absolute power" buu lahaa,si aan ninkaa xoogoodu usoo noqonin oo "Executive" ka power-ka dalka hal qof gacanta ugu dhiganin Waxaa lajideeyey awoodda ra'iisul wasaaraha, awoodda golaha wasiirada iyo lakala qaybiyo awoodda fulinta, taas waa in lagu shaqeeyaa markaynu dib-u-eegis aan ku sameynayno dastuurka. Waxaa kaloo jira baarlamaan oo iyagu katirsan aan lahadlayo baarlamaankan siyaadada ama *sovereignty*-ga dalkaan warka isagu ay taalo weeye,wakil beynu kanahay shacbiga soomaaliyeed,shacbiga soomaaliyeed wey "exercise" gareenayaan siyaadada dalkaan iyagoo adeegsanaya wakiiladood halkaan jooga.

Wakiiladina muhiim bey yihiin markaan kahadleyni nidaamiga baarlamaaniga ah. Arinta kale marnaba aan la hilmaamin waxay tahay dalkaan dal federaal ah oo ka kooban dowlad dhexe iyo dowladaha xubnaha ka'ah dowladda federaalka. Intaa markaan kagudbo gudiga dib-u-eegista dastuurka waxaan kula dar daarmayaa erey bixinnada ay adeegsanayaan inay saxaan,mararka qaarkood waxay adeegsanayaan golaha shacabka,golaha aqalka sare,labada gole,baarlamaanka waa afar erey bixin.
Labada aqal iyo baarlamaanku waa isla hal ereybixin marna waxay adeegsanayaan baarlamaanka, marna waxay adeegsanayaan labada gole waa inay hal erey bixin adeegsadaan.

Qodobka 83aad wuxuu ka hadlayaa shuruudaha xubinimada Waxaa kujira inuu yahay qofka isku sharaxaya baarlamaanka cod bixiye diiwaan gashan inuu yahay,dastuurku wuxuu siinayaa inuu is sharixi karo ladooran karo waxna uu dooran karo,anigoo katanaasula xaqa aan wax ku dooran lahaa oon isdiiwaan galin taas micnaheedu maahan xaqaygii in la'idoorto ayaa Meesha kabaxaya, gabi'ahaan taas waa in Meesha laga saaraa,qof aan diiwaan gashaneyn oo Soomaaliyeed baa murashax noqon kara.

Qodobka 84aad **(F)** waxay kahadleysaa inuu luminayo qofka xildhibaanka jagada xildhibaanimo xil heerarka kala gadisan ee dowladda maamul goboleed haka qabto ama xukuumad haka qabto,markaan kahadleyno nidaamka baarlamaaniga ah oo xisbiga aqlabiyadda golaha shacbiga hela oo soo dhisi doona xukuumadda ama xaalado isku tagay ay soo dhisi doonaan qodobkan 84/F wuxuu ka hor imaanayaa nidaamkan baarlamaaniga ah. Xildhibaanada golaha shacabku xaqbey uleeyihiin inay qaban karaan iyagoo ah xildhibaano gole wasiirana noqon karaan waana "practice" calami ah,nidaam baarlamaani ayaan kahadlayaa kan kama hadlayo.

Waxaa ugu taariikhsan ugu dheer baarlamani system -ka aduunyada kajira ingiriiska oo ay ka faracmeen meelaha kale ee qaatay nidaamka baarlamaaniga ah,gudiga dib-u-eegista dastuurka waxaan kula talin lahaa inagoo ilaalineyna ruuxda nidaamka baarlamaaniga ah inaad sidiisa horey aad ku celisaan qodobkan, oo aad tiraahdaan wuxuu qaban karaa xil maqaban karo aan ka'aheyn wasiir.

Qodobka 87aad wuxuu kahadlayaa kala dirista baarlamaanka caadiyan nidaamka baarlamaaniga ah in lakala diri karo baarlamaanku way kujirtaa dasaatiirta dowladaha ku dhaqma nidaamkan laakiin waa goorma xiliga lakala diri kara? Haddii ra'iisul wasaarihii ku guuleystay aqlabiyadda golaha shacabka uu dhaco oo uu waayo aqlabiyadda baarlamaanka xisbigaasi lahaa suurtagalna ay noqon weydo in lasameeyo isbahaysi/iskaashi xisbiyo ah oo dib udhisa dowlad oo adkaata in xukuumad ladhiso baarlamaanka dhexdiisa.

Madaxweynaha federaalka Soomaaliyeed awood baa loo siin karaa inuu kala diro baarlamaanka oo "early election" laqabto,sida laakiin halkaan ku qoran wax shuruud ah oo Meesha yaala majiraan,in ra'iisul wasaarihii uu waayo kalsoonidii,in xisbigiisii uu waayo aqlabiyadda shacabka,in ay suurta gali weyday in iskaashi siyaasadeed lasameeyo/isbahaysi baarlamaankii dhexdiisa laga sameeyo xukuumad soodhisa,markaas buu sameyn karaa madaxweynaha inuu baarlamaanka kala diro.

Laakiin madaxweyne "executive power" leh "reason" la'aan ukala diri karaa baarlamaanka majiro.

Qodobka 88aad Faqrada 1aad, Waxaa ku qoran si waafaqsan xeer hoosaadka labada gole, gole waliba wuxuu sameysanayaa xeer hoosaad ugaar ah,waxaad moodaa xeer hoosaad ka sareeya labada gole xeer hoosaad yadood lsameyn doono saas ilama fiicna,gole waliba waa inuu yeeshaa xeer hoosaad ugaar ah iyo xeer hoosaad wadajir ah waa in lasameeyaa. Siwaafaqsan xeer hoosaadka labada gole ee kubilaabmaya qod 88/1 waa in laga saaro.

Qodobka 89aad Faqrada 1aad, baarlamaanka markii la doorto Waxaa ku qoran in gudiga doorashooyinka iskugu yeri doonto, baarlamaanku kama tirsano kaliya xildhibaano wuxuu leeyahay shaqaale 700 shaqaale Soomaaliyeed oo hogaamiye xoghayaha guud baa jooga ,waxaan ku talinayaa isku yeeridda marka uu fadhiisanayo baarlamaanku marka ladoorto iney ka shaqeyaan labada xoghaye labada baarlamaan isla mar ahaantaas kulanka lagu dhaarinayo labada aqal ay ku doortaan gudoomiye qofka ugu da'da weyn ee haga doorashada gudoonka labada aqal.

Qodobka 90aad oo ka hadlayo shuruudaha gudoonka aad baan ula yaabay gudoonku wuxuu kasoo dhex bixi karaaa dhammaan xildhibaan kasta oo halkaan fadhiya laakiin shuruudo gaar ah ayaa lakeenay sida: da'diisa, soomaaliya yahay,xaaskiisa iney ajaanib aheyn,inuu katanaasulo jinsiyad kale,cadeyn hantiyadeed iyo shuruucda kale eedagsan.
Waa in lamideeyaa Qod 90aad oo loo raraa waa haddii ay kuwaani lagama maarmaan ay yihiin shuruudaha xubinimada baarlamaanka waa in laga dhigaa ,haddii kale qodobkani wuxuu kala qaybinayaa golayaashii baarlamaanka oo kadhigaya qaar utartami kara gudoonka iyo kuwa aanu tartami Karin, "in equality" baa imaanaysa halkam xildhibaanadu way simanyihiin si xildhibaanadu u sinaadaan waa in shuruudahaan loo raraa shuruudaha xubinimada,haddii kale kala qaybsi baa imaan doona,in u qalanta inay gudoon noqoto iyo inaanu u qalmin baa soo bixi doonta.

Qodobka 92aad Faqrada 2aad xil waayidda gudoomiyaasha labada gole,waxay dhigaysaa in lagu soo oogi karo gudoonka labada gole xil kaqaadis (1/3), Waxaa ku qoran in la is hortaagin isla markaana la fargelin, waaya aragnimada waxay natusaysaa gudoonka halkaan fadhiya si ay u'adag tahay,waana awoodo aan annagu siinay ogaada.
Waxaan jeclaan lahaa in halkaan aad loo cadeeyo isla markaa (1/3) golaha shacabka ama aqalka sare ay ka neenaan in xilka laga qaadayo gudoonka waa inuu qabtaa xoghayaha aqalku laguna dhajiyaa aqalka hortiisa wixii lagu eedenayey gudoonka.

Oo gudoonku awood loosiin iney qabtaan iyo ineynaan qabanin,gudoonku koox bey noqdaan saaxiibo ah madhacayso eed laga keenayo kan in kan kale qabto 10sano baarlamaanka ku jirnaa arintaa waa in hoos loo eegaa.

Qodobka 93aad Faqrada 3aad oo kahadleyso fadhiyada wadajirka baarlamaanka waxa uu leeyahay go'aamada labada aqal waxay ku ansaxayaan hal dheeri (50+1) markii loo eego tirade guud ee aqal waliba, waa cajiib waan wada fadhinaa baarlamaanku markuu fadhiisanayo waah al jismi laba jismi Makala aha,labada aqal wada fadhiya oo laba gudoomiye lahoo kooramkood lakala xisaabinayo codeyntoodu lakala xisaabinayo hadey sidaas tahay labada aqal yaan lawada fadhiisinin.

Aniga waxaan aaminsanahay in laga dhigo gole shacab oo gaar ah iyo gole aqalka sare oo gaar ah iyo hal baarlamaan oo mar fadhiisanaya,tirade guud ee ee baarlamaanka oo 329 ah oo haldheeri waa in ay ku ansaxaan go'aamda baarlamaanku marka ay wada fadhiyaan ee aan loo eegin qole waliba inta ay tahay.

Arinta u dambeysa waxa weeye awoodaha labada aqal Qod96aad baa kahadlaya awoodaha golaha shacabka waxyaroo kooban bey qoreen aad u kooban ra'iisul wasaaraha iney kalsoonida siinayaan,iney kala noqonayaan,iney gudoon dooranayaan,iney laba gudi ay ansaxinayaan,iney xilkooda ay ku wareejin karaan aqalka sare. Horta xilalka la isku igmanayo Meesha halaga saaro haddii kale waxaan isku walaaqeynaa awoodaha labada gole.

Qodobka 97aad isna kahadlaya aqalka sare qod 98aad ayaa kahadlaya awoodaha ay wadaagaan intaa saas baan ku dhaafay.

Laakiin su'aashu waxay tahay Qodobka 99aad wuxuu kahadlayaa korjoogteynta iyo baaritaanka baarlamaanka federaalka Sen.Xasan baa kahadlay wuxuu dhahay waa lakala qaybiyey dastuurkii hore Makala qaybsaneyn buu yiri waa runtiis awoodaha uu leeyahay golaha shacabka ayaa lasheegay,kan aqalka sare ayaa lasheegay kuwa ay wadaagaan baa lasheegay,hadana Waxaa ladhahay korjogteyn iyo baaritaan labada gole dhexyaala ayaa lasheegay qaybtee galaysaa taas.

Mawaxaa leh golaha shacabka ma Waxaa leh aqalka sare ayaa leh ma awoodo ka dhaxeeyaa maynan iskku qabsaneyn hadhow? Hoosta waxaan ka xariiqayaa gole waliba qodobka uu ansaxiyo isagu anigu tusaale golaha shacabka ayaan kasoo jeedaa aqalka sare wuxuu ansaxinaya maamul goboleedka,daba gal ku sameenayaa xitaa hadhow "approve" gareenayaa in dowladda federaalka ay fara galin karta iyo in kale,golaha shacabku shaqa kuma lahan,golaha wasiiradu markay noqoto ra'iisul wasaaruhu ugu horeeyo golaha shacabka ayaa ansaxinaya laxisaab tankiisa waa inay yeeshaan,xilka qaadistooda,dabagalkooda waxaas oodhan iyo aqalka sarena ay warbixin heli karaan.

Hal qof ama hal "institution" laba "supervisor" mayeelan karaan aqal sare ayaa ka qaadi kara awoodda iyo gole shacab ayaa awood ka qaadi kara labadaba halkaan ayey ku yaalaan,tusaale ahaan Qod 99aad Faqrada 7aad maxay dhigeysaa,waxay dhigaysaa marka dabagal lagu sameeyo iyo korjoogteyn hadduu wasiirku iman waayo am acid kale dowladda ka tirsan iman weydey in xilkoodu dib u-eegis lagu sameyn karo,yacnii Waxaa dib loo eegi karaa aqalka sare Waxaa dib u eegi karaa golaha shacabka, awoodaha golaha shacabka hala kala saaro oo qaybta kore korjogteynta iyo baaritaanka baarlamaanka federaalka aad ku sheegteen waa in lakala qaybiyaa wixii aqalka sare layiri lasiiyaa wixii gola shacabka lee yahay golaha shacabka ay usoo haraan.



**Xil. Mohamud Abdirahman Omar**

Asalaamu Caleykum waraxmatullaahi Wabarakaatuhu, shir guddoonka waan salaamaya iyo xubnaha labada aqal ee baarlamaanka federaalka soomaaliyeed iyo dhammaan marti sharafta kale inala joogta, aad iyo aad waxaan u bogaadinayaa guddiyada u xilsaaran dastuurka iney aad u mahadsanyihiin sida fiican ay usoo tafatireen, qodobada ay inoo keeneen aad iyo aad ayaan u hambalyeeynayaa, intaa marka laga yimaado hadii aan iska guda galo doodeyda.

Waxaan ka bilaabayaa qodobka 82aad oo ka hadlaaya tirade xubanaha baarlamaanka federaalka soomaaliya, faqradiisa 3aad oo ka hadleysa madaweynaha jamhuuriyada markuu xilka dhameystoh mudo xileedkiisa si nabad ah ku dhammeystoh inuu ka mid noqonaya xubin sharafeed aqalka sare ee baarlamaanka soomaaliyeed ah, halkuu marka hore ka ahaan jiray xubin golaha shacabka ah, qodobkaa aad iyo aad ayaan usoo dhaweynayaa qodobkaa saas ay sax ku tahay, inuu madaxweyne kastoo xilka dhammeysta si nabad ah ka mid noqdo xubin sharafeed aqalka sare barlamaanka federaalka soomaaliya, xubin sharafeeda macnaheeda sidaan aniga u fahansanahay cod malahan lakiin karaamo iyo Sharaf ayuu ku leeyahay baarlamaanka uu fadhiyo.

Qodoka 83aad, shruudaha baarlamaanka federaalka soomaaliya lagu dooranaayo ee faqradiisa 1aad xarafka (A) oo ka hadlaaya shuruudaha inuu yahay muwaadin jamhuuriyada soomaaliya u dhashay qofka xubin ka noqonaayo baarlamaanka federaalka soomaaliya, halka laga yiri muwaadin jamhuuriyada federaalka u dhashay ee soomaaliyeed uu yahay waxaan kusoo kordhin lahaa in lagu xadido oo ah muslim, waayo hadii aan ku xadidin muslim nimo waxaa laga yabaa baarlamaankeena inuu soo fariisto qaar yahood ah iyo qaar cidkaloo diimo kale heystah, sidaa dasrteed aniga waxaan soojeedinayaa xarafkaa in laxadido oo la yiraahdo qofka baarlamaanka noqonaaya waa inuu yahay muwaadin soomaaliyeed oo muslim ah.

Qodobka 84aad oo ka hadlaaya sababaha lagu dhuminaayo xubin nimada baarlamaanka federaalka soomaaliya faqradda 1aad oo taaheyso shuurudaha kuluminaayo qofka baarlamaan nimadiisa waxaan kasoo qaadanayaa xarafka (f) oo ka hadlaaya qofk baarlamaanka federaalka soomaaliya ah, inuu xilka ku waayaaayo markuu aqbalo xilkale oo heerarka dowladda ah, waxaan soodhaweynayaa in lakala saaro inuu qofka noqdo “parliamentarian”noqdo iyo inuu ka mid noqdo golaha fulinta siday tahay, marka waa in si dhab ah u kala saran yihiin qodobkaana aad ayaan u soo dhaweynayaa qofka markuu qaato wasiirnimo ama xilkale dowladda leedahay waana “automatically” iskaga soo casilaa ama haduu casilmaayo xubinnimadii uu ka ahaa baarlamaanka markaa waa inuu kala doortaa inuu wasiir noqdo iyo inuu kala doorto kursigiisa baarlamanka kusii fadhiyo taasi waxay fududeyneysaa ama ay xoojineysaa kormeerkii iyo hufnaantii iyo isla xisaabtankii ee golaha fulinta iyo golaha xeerdajinta iyo garsoorku ay isku lahayeen ee dowladd nimo qodobkaa aad iyo aad ayaan usoo dhaweynayaa una hambalyeynayaa.

Qodobka 85aad oo ka hadlaysa dhaarta xubnaha labada gole ee baarlamanka federaalka siiqadii marka hore ay u qorneyd dhaartu waala badalay imika aniga waxaan xoojinayaa oo aan soojeedinayaa dhaartii hore ayaa ka shaamil saneyd oo ka guddo barlaarneyd qaabka ay u qorantahay dhaata imiku marka dhaartii hore halagu dhaafo qoraal ahaanna way ka

fududeyd,macno ahaanna way ka guddi barlaarneed sida darted waxaan soojeedinayaa siiqadii hore iyo dhaartii hore ee inoogu taalay dasruurkan aynu wax ka badaleyno ee kumeel gaarka ah in lagu daayo.

Qodobka 87aad ee doorasho xileedka laga soohormarinaayo waqtigeeda faqrada 2aad wayka hadleen xillibanadu anigu waxaan soojeedinayaa halka la yiri marka ay timaado xaalado, xaaladaha lagu kala diraayo waa in la xadido oo dastuurka si dhab ah oo cadaan ah loogu xadido iyagoo qodpobeysanoo xaalad heblaayo markay timaado, xaalad heblaayo markay timado, ayaa baarlamaanka la kala dirikaraa, oo wareegto madaxweyne lagu kala diri karaa taa ayaan usoo jeedinayaa laakiin in kaliya xaalado un lagu daayo maahan xaaladu noockasto ayay noqon kartaa to qaran dumis ah to iska fudud oo markaa madaxweynaha qaranku ulboocleh ugu soo kutubo, sidaa darted xaaladaha waa in la cadeeyo dastuurka si cad loogu cadeeyo.

Qodobka 90aad shuruudaha doorashada guddoonka labada gole baarlamaanka federaalka faqradiisa 1aad xarafka (b) waxaa la sheegay qofka guddoomiyaha ah isku soo sharaxaaya labada aqal midkood inaysan da'diisa ka yareen 30sanadood, qodobkaan waxaan oran lahaa, ama aan soojeedinayaa in laga dhigo 40 sanadood, 35 sanadood anigoonan niyadjabineynin dhallanyarada soomaaliyeed, hadana 35 sanadood waxaa lagu tirinayaa dhallanyarnimo, soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa dhallanyartu intay geed ka booday talo ka boodaa, da'da lafteeda waa khibrad iyo waayo arraknimo markaa waxan anigu kusoo darayaa in la yiraado ugu yaraan inuu qofka 40 sano jiray iyo wixii ka roon, isla qodobkaasi faqradda 1aad xarafka (d) waxaa lagu sheegay qofku inaanu xaaskiisa aheen ajnabi ama gabadha qof Ajnabi ah aano kaas u aheen anigu taa waan ka badalilahaa waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo dadka islaamku waa isku mid diinta islaamku ayay wada heystaan dalal way kala leeyihiin run waaye waala xeerinaayaa, xuduud baala xeerinayaa lakiin shareecadeena islaamka madiideyso qofka soomaaliyeed inuu guursado gabar Ajnabi ah muslim ah, madiideyso sidaa darted waxan oran lahaa halagu xadido inaanu xaas u aheen qof ajnabia ah oo aan muslim aheen, isla

Qodobka 90aad faqradiisa 1aad xarafka (i) waxaa lagu qoray in murashaxa heysta jinsiyad dalkale uu jinsiyadaa ka tanaasulo, anugu waxay ila tahay jinsiyadaas talaasulkeeda macno badan masoo kordhineyso dadka soomaaliyeed 30% ayaa ajnabi ah oo baasaboooro Ajnabi heystah sidoo kale xeerka jinsiyada iyo socdaalka soomaaliyeed ayaa qofka soomaaliyeed u ogol "duale citizen nationality" inuu qaato, marka anigu taa macno badan uma arko qofka haduu jinsiyad dalkale heystah, jinsiyad dalkale iska heystoh wax dhib ah oo buuran oo ay soo kordhineysaa majirto markaa waxaan soojeedinayaa in lagu daayo labadaa inuu iska heysto.

Isla qodobkaaasi xarafka (f) in lagu sheegay qofka murashaxa ah inuu hantidiisu cadeeyo, waxaan soojeedin lahaa cadeen kaliya yaanan lagu dhaafin asagu markuu cadeen keeno ama report-ka keeno waa in si dhab ah dabgal loogu sameeyoo itusoo I taabsii waxa hanti uu heytoh guddi heer qaran ah, ay dabagal ku sameeyaanoo hantidaa itus oo itaabsii noqoto oo bartaa lagu cadeeyo,

hadii aan kusii socdo qodobka 93aad ee ka hadlaaya kulamada wada jirka ah ee labada gole waxaan kasoo qaadanayaa faqradda 7aad ee ka sheekeyneysa xeer hoosaadka wadajirka ah baarlamaanka soomaaliya, xeer hoosaad ayno ilaa hada wadaleenahay hada majiro markaas waa in xeer hoosaadkaas sida ugu dhaqsiyaha badan la abuuro waaayo marar farabadan ayay shaqo wadajir ah oo dastuurka waajibyay aynu wada leenahay sidaa darted xeer hoosaad nah aga

marka aanu labadeena wada fadhiisano oo si deg-deg ah loo sameeyo waaye, maba jiro hada habayaraatee,

qodobka 95aad oo ka hadlaaya guddiga adeegga baarlamaanka faqradiisa 1aad waxaa la yiri waa iney jirtaa  guddiga adeegga baarlamaanka, guddigaasi waa iney jirto unbaa la sheegay mana jirto ficil ahaan markaa kow waa in la abuuraa guddigaasi adeegga baarlamaanka oo si dhab ah looga howl galo iyagoo baarlamaanka "pressure" cida u xilsaaran ee guddigaa abuureysa, isla faqradda 2aad guddiga adeegga ah ee baarlamaanka waxaa la sheegay iney ka koobnaaneyso 5 xubnood oo ay shir guddoonadu kow ka yihiin, shir guddoonka golaha shacabka guddoomiye ka yahay, shir guddonka golaha aqalka sare guddoomiye ku xiggeen ka yahay, wahaakadaa taa anigu totally waan badali lahaa, shanta xubnood ee labada aqal laga dooranaayo waa iney ka madaxbanaadaan shir guddoonka labada aqal, hadii kale adeegga ay qabanayaan wax ay soo kordhineysa majirto, waayo anigaa shir guddoonka u ah isla guddidii anigaa xukumaaya baarlamaanka macno badan makeeneyso, markaa 5ta xubnood ee labada aqall laga dooranaayo adeegga baarlamaanku  waa iney si dhab ah ugu badaxbannaanaadaan shir guddoonka iyo xoghayeyaashoodaba oo iyaduna ku qoran faqradda 5aad ee isla qodobkaasi, intaas ayaan kusoo gababgabeynayaa, aadna waadna u mahadsantihiin dhageysigiina wanagsan, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu.



**Sen. Zamzam Abdullah Ahmed**

Guddoonka labada aqal xildhibaanada labada aqal, guddiga dastuurka hawlwadeenada salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barkaatu. Salaam ka dib hadaan galo doodayda qodobka 82aad tirada xildhibaanada baarlmaanka federaalka cutubka 5aad ee la soo xiray qodobkiisii 63aad waxaan ku sheegnay laba xulasho oo ka hadlayso maqaamka muqdisho inay yeelanaayaan "city state" ama metalaad ay yeelanaayaan isla dastuurkii ayaa haddana wuxuu sheegayaa in xildhibaanada intoodii ay joogaan, maxaa loo qorsheeyey maadaama la soo sheegay muqdisho in loo samayndoono metalaad. Metalaada muqdisho xagay ku qeexan tahay, xagay ku cadahay? Cutubkii 5aad ee aan soo dhaafnay laguma cadaynin metalaadeedu waxay noqonayso iyo "system"-keeda iyo qaabkeeda lama sheegin.

Hadda oo laga hadlaayo baarlamaanka tiradiisiina wali lama sheegaayo oo ma cado, 54 senator oo aqalka sare iyo 275 tii xildhibaan kaliyaa wali cad. Dastuurka markaa waxaan rabnaa inuu "clarification"-na siiyo oo noo cadeeyo Muqdisho metalaadeedii xagay jirtaa intee laga soo saaraayaa xildhinaanadayada intay ka imaanaayaan, qodobkaa waxaa rabay inaan iftiimiyo oo aan cadayntaas helno hadduu ilaahay yiraahdo.

Qodobka 83aad shuruudaha xubinnimada baarlamaanka da'da ugu yaraan in la dhaho 35 iyo 30 waan qabaa anigana sidoo kale.

Qodobka 84aad wuxuu ka hadlayaa luminta xubinnimada baarlamaanka xarafkiisa (f) wuxuu sheegaayaa in qofka uu ku wenaayo hadduu helo xil dawladeed, xilkaas dawladeed muxuu yahay in la cadeeyo, haddii loola jeedo "executive" iyo wasiirada ay ku waynaayaan inay qaataan. Dastuurka 4 cutub ee lasoo ansixiyey waxaa ku jirtay in aan noqonayno xisbiyo oo wadanku aadaayo, xisbi haddii la dhaho wadamada baarlamaanteeriyaanka oo xisbiyada ku

dhaqmo waxay u shaqeeyaan xisbiga aqlabiyada qaatay ee "majority" qaata aad hogaamiya xukuumada "even prime minister"-ka iyo wasiirada waxa dhan waxay ka imaadaan xisbiga aqlabiyada qaata oo baarlamaanka hogaaminaaya "majority"-tiga "leader" ka qaata ee hogaaminaaya uu ka imaadaa.

Haddii markaa xisbi la qaadanayo intana la diido in qofkii xildhibaanka ahaa uusan qaban Karin wasiirnimo, waxaan arkaynaa "still" dastuurkii in iska horimaansho laga saxaayey wali ay taagan tahay, markaa maadaama dastuurkii iska horimaashadii iyo isqabqabsigii laga saxaayo meela xisbi lagu sheegaayo meelna la sheegaayo inuusan "executive" iyo xil dawladeed xildhibaanku qaban Karin, xilkaa waxa uu yahay in la cadeeyo waaye. Haddii asxaabtii loo guuraayo xisbiga aqlabiyada qaata iyo "majority"-ga sida ingiriiska oo kaleeto "even prime minister"-ka iyo wasiiradu waxay ka imaadeen xisbiga "majority"-ga qaata tan kalena "shadows" noqdaan, taana sidaasaan uga baxayaa.
Qodobka 87aad waxaa la sheegay faqradiisa 3aad iyo 4aad iyo 5aad waxay sheegaysaa in madaxweynaha uu soo saaraayo xeer lagu kala diraay baarlamaanka, xeerkaasi waa inuu cadyahay waxa sababaaya baarlamaanka in la kala diro madaxweynaha awooddaa siinaysa waa in la cadeeyo.

Laakiin haddii "open" laga dhigo qof walba wuxuu rabuu samaynayaa wadankan hadda anaga aan joogno dhibaatada iyo "problem"-kan hadda jira waa la ogyahay. Markaa baarlamaanka in la iska kalo diri oo "without reason" la dhaho madaxweynahaa kala diri kara "earlier election" baa la samyn karaa sax ma noqonayso doodo oo la soo sheegay markii hore muddo xileedka baarlamaanku inuu yahay 5 sano haddana dastuurka waxaa jira iska hor imaadshadii oo hadaaye aan sheegaayey oo kale xagan saddex sano ama labo sano lagu kala diri karaa baarlamaanka shan sano na muddo xileedkiisii waaye, sababtii lagu kala diraayeyna ma sheegaayo oo ma cadaynaayo.

Qodobka 90aad wuxuu sheegaayaa shuruudaha guddoonka labada aqal ay ku noqonaayaan guddoomiye, waxyaaba badanaa la soo taxay oo qofku mar haddii shuruudii uu ku soo galay baarlamaanka oo uu ku noqday xildhibaan la soo cadeeyey iyadaasaa kaga filan qofka iyadaasaa ku filan inuu ku noqdo guddoon, haddii kale waxay noqonaysaa dadna inay u qalmaan inay guddoomiya yaal noqdaan dadna inaysan u qalmin. Maadaama xildhibaano la soo wada noqay oo shuruudii xildhibaan lagu soo noqday la soo sheegay taas in lagu eekaadaan qabaa aniga, shuruudahan lasoo sheegay oo dhana aysan imaankarin, qofkii haddii uu xildhibaan noqdo uu "eligible" u yahay inuu guddoomiye noqon karo taasaan qabaa. Waad mahadsantihiin salaamu calaykum.



**Xil. Sahra Abdullah Igal**

Waa mahadsantahay guddoonka, waxaan rabaa inaan dib inyar u noqdo anigoo aan chance u helin intii horre. Waxaan rabaa toos inaan u abaaro qodobka 63aad ee maqaamka, waxaa nala siiyay laba xulasho, xulashada koowaad iyo xulashada labaad, doodii xildhibaanadii iga horreeyay aad baan u dhageysanaayay oo dhagta u raaricinaayay, xili walbana waxaan ahaa xildhibaanada sida tooska ah subixii ilaa xiliga la xiraayo u joogay, marka doodiina aad baan

uga dharagsanahay, aad baana u dhageystay. Waxaana rabaa inaan ku biiriyo codkeyga si weliba xoog ah aan ugu biiriyo, in la qaato xulashada 2aad.

Gobolkaan Benaadir, dadka degan marka la qiimeeyo tiradooda, awoodooda dhaqaale, waxay u qalmaan maamul goboleed iyo in ka badan, marka aad baan u soodhaweynayaa in maamu goboleed la siiyo, anigoo ku saleynaayo awoodda, tirada, rabitaanka iyo ayagoo Gobolka Benaadir uu muddo u dulmanaa shacabka ku dhex nool, aan xuquuqda laheen, meel ay aadaan iyo cid ay u tagaan aan heysan, waana codsanayaa, cod ahaanna, haddaan toban cod leeyahay, waan ku biirin lahaa inuu Gobolka Benaadir noqdo maamulada buuxa, waanan ayidayaa, taa maqaamka haddaan ka gudbo.

Qodobka 84aad, wasiir in lagu soo koobo xildhibaanada inaysan noqon karin wasiirada, doodaas aniga way ila jaban tahay, dood sax ah maahan, waa dood raqiis ah, xildhibaanka wuxuu macno ku leeyahay inuu wasiir noqdo. Xildhibaanada waad aragteen golaha qaabka aan u shaqeyno, asagaa na fahmi kara, haddaan wasiir noqodo anigoo xildhibaan ah, anigaa xildhibaanada fahmi kara, xildhibaanada aan wasiirada ahayn isma gaarno, waaba naga fog yihiin. Marka anagaa isku duruuf ah, ma oranayo waxaan heystaa grantee oo intaa soo noqdo baan wasiiro la shaqeyn doonaa laakiin hadda waxa joogo, waqtiga hadda ayaan ku koobayaa iyo awooda aan leeyahay, xildhibaanada in loo daayo inay wasiiro ahaadaan, waana runtii inta keliya oo shuruucda aan kawada shaqeyno ay muhiim u tahay, inaan la shaqeyno wasiir aan xildhibaan eheen oo aanan gaarin, qodobkaa waxaan rabaa inaan hoosta ka xariiqo Xildhibaan AskarJaamac Askar uu ka hadlay,

qodobka 88aad, awoodaha tirada laga badiyay in loo daayo sidoodii horre, laba xeer hoosaad baan kala leenahay labadeena aqal, hadday ka fursan weysay in xeer hoosaad isukeen keenaya oo aan kuwada doodi karno labadeena in loo sameeyo ayaan soodhaweynayaa.

Sidookale doorasho xiligeedii laga soo hormariyay, suuragal maahan, aniga aragtideyda macquulna ilama ahan, madaxweyne aan dooranay oo jooga, intuu siduu rabo yeelo, wuxuu doonaba haku saleeyee, inuu xildhibaanadii 295-tii ama haddii labada aqal labisku daro oo baarlamaanka la yiraahdo ayaa taagan oo asaga shalay doortay, inuu inta doorashada soo hormariyo uu kala diro, wax caqliga geli kara maahan, wax suuragal ahna maahan, hal qofna dalka laguma aamini karo, dalka wuxuu leeyahay baarlamaan laba aqal oo 339 ah ee kor joogteeya, haddaan la sababeyneyn oo la qeexeen sababta keeni karto in doorasho xiligeeda ka horreysa la qabto, haddaan la qeexeen oo sida hadda u taal si ka duwan loo dhigaynin, macquul ilama ahan, arrintaasna waxaan leeyahay sidaydii ha ahaato.

Tii ugu horreysay, maamul goboleed waxaa noqon kara hal gobol ka badan ayaan ayidayaa, waan ku soo caanamaalnay, Galmudug oo aan runtii dastuuriyan laba gobol u ahayn ayaan faa'iidadeeda soo aragnay oo soo dhadhaminay, aad baan gobol iyo wixii ka badan u soodhaweynayaa, waxaa dhisan Waqooyi Bari oo weliba xili dhaw la dhisay oo runtii jirtay xili ku meel gaar ah, inta ay qabatayna maamul goboleedyada muddada dheer soojiray ayay kaabiga u saaran tahay, haddaanay qeybaha qaar aanay bog dheerayn, marka waan ayidayaa, mar labaad iyo mar saddexaad baan ku soo celinayaa, gobol iyo wixii ka badan, dadka inaan la juujuubin, in umadda intii israbto la isku leexiyo, lix gobol haddii la helaayo uu maamul goboleed noqdo, haddii kalena hal iyo wixii ka badan loo daayo, gobolada raba oo jidka ku soo

jira ama Hiiraan State ha noqoto ama Awdal State ha noqoto ama maamul goboleed kale ha noqoto, in dadka loo daayo xoriyadooda ayaan soodhaweynayaa. Aad baa u mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Abukar Abdi**

Bismillah. Assalaamu Caleekum warax matullahi wabarakaatuhu. Guddooka iyo xildhibaanada sharafta leh waad salaamantihiin, xogaa waala daalay ayaan umalenayaa, dadkana xogaa way kala tageen, aadaa u mahad santihiin, intaa ka dib.

Doodeyda hadaan toos u galo, oo ah cutubka 6aad oo ah awoodaha Baarlamaanka federaalka Soomaaliya, hadaan toos u tago qodobka 82aad oo qoraya tirada xubnaha Baarlamaanka Soomaaliya. Waxa uu leeyahay Baarlamaanka federaalka Soomaaliya waxa uu ka kooban yahay, Golaha shacabka oo 275 xildhibaan ah iyo aqalka sare oo 54 sanatar ah, isla markaas waxa uu sii leeyahay, oo laga soo dooranaya 18 ka Gobol ee Soomaaliya, horayna sidaas ayaa u qornayd haddana sidaas ayaa lagu soo celiyay, marka halkaas waxaan rabaa inaa xogaa aan ku darsado aragtidayda.

Horta Baarlamaanka si gaar ah Aqalka sare, nidaam nucee oo ku dhisanyahay, waa 54 tirada, dastuurka waxaa ku qoran 18ka Gobol ee Soomaaliya oo min saddex sanatar ah, 18 Gobol markii lagu dhufto saddex sanatar waxa ay noqoneysaa tiradaas 54. Maxay ku dhisan yihiin maanta? 18kaan kuma dhisno, sidoo kale waxaa wax lagu qaybsadaa shantaa beelood ahna kuma dhisno, si kaloo kasii daran iyada laftirkoda hada lasameeeyo la yiraahdo Dawlad goboleedyada iyadu laftirkeeda kuma saleysna, marka nooca aya u dhisanyihiin iyadaa u baahan in wax la iska wadiiyo, ani waxaan aamin sanahay sida ay ku qorontahay 54 ta ah oo 18 gobol lagu saleeyo waa sida ay ugu macquul santahy, ugu yaraan hadii laga maarmi waayo, shanta beelood ha nugula qaybiyo.

Shan beelood ayaan wax ku qaybsanaaye ilaa aan iska dhigno xisbiyo aan ka sameysano, shanta beelood Aqalka sare haloo qaybiyo, sidoo kale ha u kala qaataan, ma ahan 18 ka gobol kaliya ha loo qaybiyo, maxaa kaloo soo baxayo markaas, hal kaan maal mahaan waxaan u taagneen Gobolka Banaadir arintiis, dhawr jeer ayaa laga hadlay laga dhawaajiyey, horta gobolka banaadir oo wax u diidan yaana wax u ogol,dastuurka ayuu xaquuq ku leeyahay, uma baahna inaa anaga u doodno, dastuurkaanaa waxuu dhigayaa in 18 ka Gobol ee Soomaaliya matalaad siman ay ku yeeshaan, marka cida wax u diidan baan rabnaa inaan ogaano, hadii la yiraahdo si kale dowlad gobaleedyada waxaa ognahay qabiil bey ku dhisneed, maanta dowlad gobaleed hebel hadii la dhaho isla markii qabiil baa soo xasuusan, mid hebel sii dheh qabiil kale baaa kuu soo baxaayo, ma caasimadii umada ma waxaaa ka dhignaa mid mar kii magaceed la sheego qabiil lagu soo xasuusto, taas maa u ololeenaynaa.

Hadii kale si markii loo dhigo ani dadkaa matalo awooda 2aad maanta gobolka Banaadir ku nool waaye dhaqaale ahaan , bulsho ahaan, canshuur bixiye ahaan, waxaa la lee yahay dekadaan mugdisho, madadka reer koon fur galbeed dakad kala mey leeyihiin oo tan Muqdisho aan aheyn, dakadee wax kala soo dagaan waa tan, halkaanaa laga canshuuraa, awooda wadakaan lagu difaacaan ahay midda 1aad, tan canshuur bixinta aan ahay midda 1aad, tan “populasion” kana saasan ka ahay, maanta wax Muqdisho yaalana halkee ka joognaa, dadka aniga aan matalo halkee ka joogaan, 20ka salidhig ku yaal xamar hal taliye saldhig ku malahan, waxa

xadda yaala horta noosima, aan arakno inaa daacad la noqon karo, waxa hadda yaalo aan qeyb sano, 17ka Degmo Guddomiya yaashooda yaa iskaleh, Digil iyo Mirifle maxey ku leeyihiin, halbaa la sheegaa micna badan laheyn, xogeye ku malahan qufna kama aqbaleeno marka, dadkaadi hadaaa u doodeyso anna ku weygi baan u hadlayaa, kuwa aan matalo canshuur bixiyaasha quxuuqdoodi aan rabaa, Gobolka Banaadi waxey u baahantahy inaan ka wada hadalno, xuquuqdiisa dhaysano, waa "normal" in lagu kala badan karo, laakiin markaan xaquuq raadineyno 18ka hal kaan ayee ku qorontahy, matalaada aqalka sare saddex ayee ku leedahay hala siiyo, sidaan wax ku qeyb sanana beelo waaye, beel Gobolka Banaadir la dhahaayo meele ey ka jirto yaa arkay yaa ii sheegi karo, beesha Gobolka Banaadir in tee ka jirtaa, shan beeloot baa wax qu qeyb sanaa, adoo beeshaada waxeyda soo qaatay baa waxaa rabtaa inaa idhahdo Gobolka Banaadir baan wax ku rabaa, wallaahi inaanan ka yeleen, beel baa ku fadhidaa, kursigaa ku fadhido beel baa ku matashaa, beeshaada magaceeda gobol ha ugu dhuuman, Gobolkaan waa noo siman yahay waa Caasimad ummada Soomaaliyeed, waxii yimaadana waxay Soomaali lahayd baa hal kaan yaala, Goofka Xamar ku yaala hal malyan baa la gadaa, haday Soomaali joogin miyuu naqon la haa, Guryaha kun kun doolar baa ku bixinaa, Baydhabo labo boqol oo doolar cid ku kireeysato ma lahan, waxay Soomaali lahayd baa halkaan yaala, war cid ugu xishoomayno anaga inaa xuquuq deena u hadalno, dadbaa nu matalnaa xuquuq bay leeyihiin, waxnu uma diidani dadka Soomaaliyeed, Muqdisho waa Caasimaddii ummada, waxa yaalo an qeyb sano, ileen waxii Soomaali lahayd baa halkaan yaalo, qodob kaas waxaan rabaa inaa halkaas uga gudbo.

Farqada 3aad qof kasta oo noqonaayo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, markuu xilka baneeyo, oo la dhahay aqalka sare waa taageersaneyna in Aqalka sare la geeyo, laakin waxa rabnaa in lagu daro labada Gudoomiye ee labada Aqal, iyagane inee xurun sharafed ahan u qaatan, waayo awood qeybsi ayan halkaan ku joogna Sanad walba, afar sanad walbo hadee reer lagu biilayo hal xildhibaan macquul ma noqoneyso marka, ama kasaar ama aan ku darno labada gudoomiye pointigas hala qoro.

Qodobka 84aad farqada B ama F Waxa ay leedahay, xildhibaanka haduu xil qabto xilkale qaban karin arrintaa ayada naftirkeeda waxaan leeyahay codkeyga waxaa ku biirinayaa walaalayaaloow 275 xildhibaan oo wasiirnimo raadineyso waa wax wadankeena manta Meesha dhigay waaye. Xildhibaan walba inta uu (accountable) ama la xisaabtami lahaa ha'adi fullinta ama uu daba geli lahaa wuxuu leen ugu jiraa in uu wasiirnimo helo maalin walba, wuxuu ilaalinayaa uu is leeyahay bal xukuumada magaceeda waxba haka sheegin si aad wasiir u hesho aniga qodobkaas badbaadada ummadaane ka mid tahay, dowladnimada badbaado u tahay, xildhibaanka haduu wasiir noqodo xildhibaanimada in laga qaado waaye haduu qabto taliye isla sidii oo kale marka qodobkaas 275 baarlamaanka sababta loo leeyahay koram la'aan waaye ileen 50 waa wasiiro maba jogaan ilaa iyo hada 2 laba ku joogtiin hada is fiir fiiriya gadaal fiiriya iyo 3 saddex ku joogtiin marka ani arintaa waxaa qabaa badbaadada umaddee ka mid tahay, hormarka iyo hor usocodka iyo isla xisaabtanka qeyb ka tahay wadankaan in la isla xisaabtami waayo waa wax yaabaha ugu waa weyn ee dib u dhigay marka arrintaa waan adkeenayaa waana ayidayaa in xildhibaankad haddii uu xilkale qabto state ha aado ama meel kale, aqalka sare ku soo biiray oo la rabay in uu state yadda la xisaabtamo asagana leenka wasiir raadiska soo galay marka aniga saas qabaa.

Qodobka 86aad oo xasaanadda xaquuqda xubnaha baarlamaanka federaalka ka hadlaayo Farqadiisa labaad Hadii aan la heysan ogolaansho Golah Shacabka ama Golaha Aqalka sare,

xildhibaan ama sanator la uguma oogi karo dacwad ciqaabeed, lama xeri karo, lama baari karo hub ahaaneed iyo hoygiisa, halkaan sidaas ayee ugu dhigan tahy dastuurka, laakiin maxaa dhacay, in labaaro iska dhaadee waxey mareysaa in ladilo Ildhibaanka oo meel oo udac wooda uu san laheyn, daliil baan uhayaa, isbuucii horay Baydhabo maxaa ka dhacay xildhibaan golaha shacabka nala ah wasiir ah gurigiis baa la weeraray, Isla daa wax kale musqulaha la bililiqeysti iska daa wax kale, marka dastuurka waxaa nagu dhigan in aan la baari karin gurigiisa, ma godoomiyaha iyo baarlamaanka ayaa ogolaaday, ma Baarlamaanka Soomaaliya ayaa ogolaaday in guryahaasi la fuqsado, Ani arin taasi waxaan qabaa, hadii aan dastuurka la dhaqan gali karin aan ka tirno, sabab too ah waxa aan u jeednaa wax yaabaha xildhibaanada ku dhahayo, waxii Baydhabo ka dhacay ayaa kow ka ah, ayada lafteeda waa lagu xad gudbay Ciddii ku xad gudubta waa leyskaga qoray halkaan, xilldhibaakii hoygiisa iyo gaarigiisa uu wato, maxaa ka loo hadana la sameynaa, taasina waxaan rabaa si sidaan ka badalan laga dhigo, hadii kale qofkii ku xad gudubta waa inaa heli karnaa isla halkaan aan ku qori karnaa, waxey la kulmi karto oo ciqaab ah, waan soo gaga gabeynayaa.

Isla qodobka 87 farqadiisa 1, 2, 3, ilaa iyo 4, oo tilmaameyso madaxweynaha inuu kala diri karo Baarlamaanka, ani arintaasi waxaan qabaa sax ma ahan, waqtiga hadda la joogo iyo sida hadda aanahay, in Baarlamaan lakala diro, beri hanoqoto ama saa dambe hanoqoto, ani waxaan qabaa, ani waxaan qabaa qodobkaasi in laga saaro sidiisaba, Baarlamaan kii doortay madaxweynaha ha kala diro arin sax ah ma ahan aadaa umahad san tihiin. Assalaamu Caleekum warax matullahi.



**Xil. Salah Sharif Sayid Ali**

Bismilah guddonka baarlamaanka xubnaha baarlamaanka shaqalaha baarlamanka saxaafada dhamaan Asalamu caleykum waraxmatulahi wabarikaatuh salaan kadibhadii aan uguda galo kadoodista.

Qodobada cutubka 6aad qodobka 82aad farqadiisa 1aad waxay leedahay baarlamaanka jamhuuriyada federaalka soomaaliya wuxuu ka koobanyahay golaha shacabka oo 275 xildhibaan iyo aqalka sare ah 54 sanatar oo laga soo dooranaayo 18kii gobol marka hada sidee lagu dooranooyaa waaye?.

Aqalka sare ee hada noo jooga 18kii gobol maku saleysanyahay ee qaabka beelaha aan wax uga qeybsano maku saleysanyahay, dowlad goboleed maku saleysanyahay wax uu kusaleysanyahay haba yaraatee lama arko marka waxaan ayidayaa oo aan soo dhoweynayaa in lasaco aqalka sare qaabka loo soo xulo in 18kii gobol lagu saleeyo oo aqalka sare in ay matalaan gobolada sidoodaba aqalka sare waxay matalaan dowlad goboleedyada oo ku dhisan gobol marka waa in 18kii gobol lagu saleeyaa aqalka sare waa tan uga fiican.

Sido kale qodobka 82aad faqradiisa 3aad waxay ledahay madaxweynaha jamhuuriyada federaalka soomaliya haduu xilka dhameysto oo si nabadgelyo ah uu ku dhammeysto oo waqtigiisa dhammaado wuxuu kamid noqonayaa xubin sharafeed oo aqalka sare ah marka taana waxaan qabaa oo aan adkeynayaa in sido kale cubnaha la doortey madaxweynaha guddomiyaha baarlamaanka iyo guddomiyaha aqalka sare markii waqtigooda uu dhamaado waa in seddaxdaas lagu soo daraa xubin sharafeed aqalka sare waayo hadii sanad walba halbeel

hal saenatar usoo siyaadayo oo beelihii kalena ay indhaha ka fiirinayaan sax ma ahan marka intii la doortey ee ah seddaxda masuul ee la doortey waxaan adkeynayaa in lagu maamuuso aqalka sare waayo intaan soo ogeyn baarlamaankii "pawer sharring" ahaa dhan ayuu ku badanaa dhana wuu u liicayaa marka taas si loo saxo waa in seddaxdaan qof la dhahaa oo hab maamuuskaas la wada wadaajiyaa iyo sharaftooda iyo gunadooda meel la saaraa.

Tankale hada maanta guddomiyii jamhuutiyada federaalka soomaaliya asoo wadankii ku sugan ayaa wuxuu shir guddomin la'ayahay baarlamaankii marka waxaa lagu taakeeyey kusime madaxweyne ayaa tahay aa la dhahaa mararka qaarkood marka taana waxaan ubahanahay guddomiyaha baarlamaanka in waqti walba baarlamaanka asaa masuul ka ahee in kusimo ha ahaado mar walbo in uu hogaamiyo waan soo jeedineynaa.

Qodobka 87aad waxa uu leeyahay "page"ka 41aad waxay ledahay doorasho xiligeeda laga soo hormariyey faqrada 1aad,2aad,3aad,aadvwaxay cadeynee in baarlamaanka baarlamaanka jamhuuriyada federaalka soomaliya labada dano uga horeyso marka laga reebo seddaxda sano ama labada sano u harsan madaxweynaha wuu kala diri karaa marka baarlamaan wadan "parliamentarian"ah shacabka ay soo xusheen madaxweyne walbo hadii labada sano ee uga horeyso ay dhammaato baarlamaanka uu kala diri karo taa wax la'aqbali karo ma ahan waxay dhantaalee awoodii golaha dhacabka sidoo kale waxay abuuree ku tagrifal awoodeed oo qofka madaxweynaha noqon kara marka waxaan adkeyneynaab baarlamaanka mudo-xileedkiisa waa in xiligii la doortey uu ahaadaa waa sida dastuurka ku cad 5ta sano aan ansaxiney waa in waqtigooda ay ku dhameystaan hadii kale hal sano oo la soo dooranaayey marka baarlamaanka oo dhan wuxuu baarlamaan ahaan karaa 1sano marka taana waxaan dhihi lahaa in laga saaro oo baarlamaanka muda xileedkooda doorashada sida loo soo doortey ay ahaataa.

Qodobka 90aad shuruudaha doorashada guddoonka labada gole ee baarlamaanka waxaan bogaadinayaa qodobka C,D,E oo dhahaya "c" guddonnka baarlamaanka shuruudaha laga rabo waxaa kamid ah waa in uu ahaadaa in labadiisa waalid ay yihiin muwaadhiniinta jamhuuriyada federaalka soomaaliya waa in laga dhalin hooyo ajinabi ah ama aabo ajinabi ah waa in aan laga dhalin sidoo kale qodobka "D" wuxuu leeyahay in uusan ama aysan qabin xaas ama nin ajinabi ah gabadhana waa in nin ajinabi ah uusan qabin ninkana waa in uusan qabin xaas ajinabi ah marka taa waan bogaadineynaa marka waxaa la dhacay qof caawa matoor kale lasoo sarayo in lagu aamino baarlamaanka guddoonkiisa sax ilama ahan waxayna abuuri kartaa "conglict of interest" wadanka xaaskiisa ay ka dhalatey ama ninkeeda uu ka dhashey ayaa waxaa laga yaabaa in uu sameyn ku yeeshto sido kale in musharaxa heysta jinsiyad dal kale uusan noqon guddomiyaha waan bogaadineynaa waana soo dhoweyneynaa waxaan rabnaa wadankaan qofka masuulka ah uu u ahaado qof dalka iyo dadka kanaxaayo oo u damqanaayo waa in jinsiyadiisa ay soomaali ahaataa iyo xasaskiisa iyo wax walbo ku hareereysan ay soomaali ahaadaan waa in soomaali "pure" uu ahaadaa ayaan aad usoo dhoweyneynaa qofkana waa in soomaali ahaadaa.



**Xil. Lul Ibrahim Omar**

Koley waxaan filayaa qodobka 82aad, tirada xubnaha baarlamaanka. Sida uu qabo xubnaha baarlamaankii hore 275 iyo Golaha Aqalka Sare oo 54 ah kuwaasoo loosoo dooranayo 18ka Gobol. Run ahaantii marka 18 loo qaybiyo 54 waa calaa 3 senator waxaan filayaa in halkan hal senator uu nooga maqanyahay aanan heli doono senatorkeena insha Allah.

Qodobka 82aad Faqrada 3aad, qof kasta oo noqonaya Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya marka uu xilka baneeyo si nabad iyo dimuqraadiyad ah wuxuu xubin sharafeed ka noqonayaa Golaha Aqalka Sare inta uu noolyahay hadii aan xil-ka-xayuubin lagu samayn inta aanay mudada xilhayntiisu dhamaan si waafaqsan Qodobka 115aad ee dastuurka. Halkan waxaan soojeedinayaa maadaama uu Madaxwaynihii helayo xubin sharafeed in Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare lagusoo kordhiyo. Maxaa yeelay Beelaha Soomaaliyeed waxay u qaybsadeen min 61, maanta waxaan aaminsanahay in Daarood 62 uu leeyahay, Hawiyena 62 uu leeyahay sidaas daraadeed waxa halkaas nooga maqan hal xubin, xubintaasna waxaan rabnaa in xubin sharafeedka naloogu daro.

Qodobka 84aad. In xildhibaanku uusan noqon karin wasiir hadii uu xildhibaan yahay, waanan sababaynayaa. Goluhu wuxuu ka shaqayn laayahay xukuumadda, wasiir kasta wuxuu isku difaacayaa halkan isagoo ilaashanaya xubinimadiisa. Waxaan soojeedinayaa inuu wayn doono xubinimadaas baarlamaanka hadii loo doorto xubin wasiir, taasna halkaasaan uuga baxayaa.

Qodobka 85aad. Dhaarta xildhibaanimada, waxaan soojeedinayaa in dhaarta lagu celiyo tii hore sababtoo ah tii hore ayaa wanaagsanayd, taasna halkaasaan uuga baxayaa.

Qodobka 87aad. Aslanba waxaan qabaa in qodobkan meesha laga saaro maxaa yeelay 4 faqradood oo cusub oo dastuurkii hore aan shaqo ku lahayn ayaa ku jirta, waxaan soojeedinayaa in meesha laga saaro qodobka 87aad dhamaantii.

**Kulanka 16aad (Febraayo 15, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 16aad ee labada Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 10:44 A.M |
| **Xirmay:** | 3:15 P.M |
| **Shir-guddoomiye:** | Sen. Ali Shacban Ibrahim<br>Guddoomiye kuxigeenka 1aad Aqalka Sare |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad: ka doodista Soo-jeedimaha wax-kabedelka Dastuurka. Cutubka 6aad: Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qodobbada 80aad ilaa 95aad






**Xil. Abdullahi Adan Ahmed**

Ugu horrayn waxaan rabaa inaan u mahadceliyo guddiga labada qaybood ee dib-u-eegista dastuurka oo runtii aan isleehay shaqo badan bay soo qabteen, markaad akhrisid dastuurka sida ay u soo dhigeen. Markaa haddaan gudagalo waxaan isleeyahay qodobbada ugu muhiimsan ee soo qaatay waa qodobka in badan oo saaxiibadaya hore uga hadleen.

Qodobkaa 82aad haddii aan ka billaabo qodobkaasi saaxiibaday iga horreeyay ayaa si runtii faahfaahsan uga hadlay, laakiin bal waxaan isleeyahay intii aan ka calaamadeeyey ayaan rabaa inaan bal wax ka idhaahdo. Qodobkaas markii laga hadlayo baarlamaanka labadiisa aqal gaar ahaan aqalka sare ayaan rabaa inaan ka billaabo faqrada 1aad qodobka 82aad waxay ka hadlaysaa baarlamaanka waxa uu ka kooban yahay, in aqalka hoosana sidaan wada ognahay 275 yahay aqalka sare na uu yahay 54 xubnood. Markaa halkan waxa ku qoran marka laga hadlo aqalka sare, aqalka sare oo ka kooban 54 senator oo laga soo doortay ama laga soo dooranayo 18 kii gobol. Faqrada 2 aad isla qodobkaasna waxay leedahay tirada guud ee xubnaha golaha shacabka iyo aqalka sare waa in metelaad isku dheelitiran ay ku yeeshaan dhamaan qaybaha bulshada.

Markaa qodobkaa haddaan fiirinno waxaa lagu sheegay laba arrimood inuu 54 ka kooban yahay laguna saleeyey 18 kii gobol ee Soomaaliya ugu danbeeyey, markaad meeshaas fiirisid, arrinkaas uu guddigu soo sheeegay, laakiin sida loogu qaybiyey gobolada lama sheegin siyaaba kala duwanaa runtii looga hadlay. Laakiin anigu runtii waxaan isleeyahay saddex arrimood mid in la sheego ayey ahayd in hadda sida golaha shacabku u qaybsan yahay loo sheegoo oo la yiraahdo shan beelood oo beelo lagu sheego, mise in 18 gobol in loo qaybiyo la yiraahdo ama tirkoob lama hayo oo in bulshada soomaaliyeed tiradeeda lagu saleeyo haddiiba la helilahaa.

Markaa saddex arrimood midna kuma salaysna sidaas darteed qodobka 2aad siduu u qoran yahay ee fikrada 2aad siday u qorantahay ayaa meesha ka maqan oo ah, tirada guud ee golaha shacabka iyo golaha aqalka sare waa inay ku yeeshaan metalaad isu dheelitiran dhammaan qaybaha bulshada ee shacabka soomaaliyeed.

Markaa waxaan isleeyahay meeshaas waxay ka soo dhigeen saaxiibaday qabyo halku dhigbaa jiray oranaaya "Qabyo ninkeedaa dhammaystira". Markaa saaxiibayaal markaa waxaan isleeyahay meeshaas waxbaa ka dhimane ma haddaad baarlamaanka u dayseen oo baarlamaanka ha sheego aad leedihiin waa war wanaagsan. Halkaa waxaan ka qabaa rayigayga markaa tirakoobna hadda ma hayno haddii beelaha Soomaaliyeed lagu qaybiyana waala garan karaa dee hadda qaybiyoo "divide by" inaan iraahdo ma rabo, laakiin sida ugu dhaw waa 18 gobol in lagu qaybiyo oo gobol walba la siiyo 3 diisii xubnood waa wax la garan karo oo caddaaladda ah. markaa qodobkaas in sidaas loo dhigo oo 18 kii lagu qaybiyo oo sida saaxiibadii iga horeeyay sidaa saan rabaa inaan u dhigo.

Waxaan rabaa sidoo kale faqrada 3aad ee isla qodobkaas waxay ka hadlaysaa iyadana waxay u qorantahay sidan "qof kasta oo noqda madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed marka uu xilka dhammaysto wuxuu helayaa xubin sharafeed oo weliba la geeyay aqalka sare". Arrinka waan ku raacsanahay waa sax, laakiin waxbaa ka maqan, waxaa ka maqan aan isleeyahay haddii meesha xubin sharaf la keenay labada guddoomiye ee labada aqalna xubin sharaf waa mudanyihiin ha lagu daro sida saaxiibadii iga horeeyay u sheegeen, qodobkaasna intaasaan ka qabaa.

Waxaan rabaa inaan tago qodobka 83aad oo isagana ka hadlaya waxaan u malaynayaa dadka xildhibaanka noqonaya wuxuuna u qoranyahay ugu yaraan xarafka (h) oo qodobka 83aad faqradda 1aad ah wuxuu u qoran yahay ugu yaraan inuu dalka joogo waa qofka muwaadinka ah ee xildhibaanka noqonaya siday u qorantahay. Ugu yaraan waa inuu dalka sii deganaadaa 2 sano oo ka horraysa maalinta doorashada la qabanayo iyo inuu xubin ka yahay xisbi siyaasadeed oo ka diwaangashan guddiga madaxbanaan ee dastuurka.

Markaa qodobkaa waan isleeyahay meelkalane waa ku arkaayay markii laga hadlaayi dadka "double citizen" ka ama laba baasaboor haysta idinkoo mahadsan yaan shuruud laga dhigin in labo sano qof aan dalka deganayn xildhibaan ma noqon kartid in layiraahdo waxoogaa waxaad mooddaa "diaspora" in loo darnaanayo qodobkan dib ha loo reebo in wax laga beddelaan qabaa.

Qodobka 85aad qodobka dhaarta runtii sida asxaab badan oo iga horraysay waxaa la qabaa tan qoran ka qurux badnayde tii hore ha loo daayo, qodobkaas waxaan rabaa inaan intaas uga gudbo.

Qodobka 87aad doorsho xilligeeda laga soo hormariyay runtii arrinkaas dadkii iga horeeyay aad bay uga hadleen haddii loo la jeedo wakhtigeedaa laga soo hormariyay in madaxweynahu kala diri karo waxaan leeyahay lama gaadhin markii madaxwaynaha ay soo doortaan shacabka Soomaaliyeed aan la sugno "because" madaxweynaha golahanaa doortay labadiisa aqal. Markaa Soomaalidu waxay tiraahdaa: 'Ilmaha waalidkaa ka weyne" baarlamaankii doortay madaxweynaha inuu kala dirayana waxaan u malaynayaa waxa loola jeedo waxay u baahan yihiin faahfaahin qodobkaasi isna meesha kuma jiraan qabaa.

Qodobka 90aad, waxaan rabaa isagana wax yar inaan ka iraahdo, qodobka 90aad faqraddiisa (b) waxay leedahay ee da'da waxay ka hadlaysaa da'da 35 lagu soo qoray qofka guddoomiye baarlamaan noqonaaya. Kaasna waxaan leehay 35 waa yar tahay  275 xildhibaan oo maanta aan ognahay Soomaaliya iyo baarlamaankeedii iyo sida hadda uu yahay 35 ma hoggaamin karee 40 ha laga billaabo sunahana way tahee, 40 qof ka yari xil looma dhiibi jirin ilaa iyo anbiyadii markaa qodobkaa intaasaan rabaa inaan ka iraahdo.

Isla faqraddaas musharraxa waxaa ku qoran xarafka (e) in musharraxa haysta jinsiyada dalka kale uu caddeeyo ka noqoshadiisa marka xilka loo doorta inuu jinsiyadda labaad beerdaraynaayo. Meeshaas waxaad mooddaa tii hadda aan sheegayay "diaspora" loogu darnaanayaaye, waxaan isleeyahay iyadana dib haloo fiiriyo cutubka 1aad ee dastuurkeena wuxuu ogolyahay "double citizen" wax layiraahdo ama labo dhalsho inuu qofka muwaadinka ahi qaadan karo.

Markaa haddaan cutubka 1aad aan leenahay 2 dhalasho ayaa la ogolyahay "paragraph" kana aan ku soo qornay waa inuu baasaboorka labaad iska celiyaa meeshaasna saaxiibayaalow "contradiction" baa ku jira waxaan isleehay isagana dib haloo eego yaan "diaspora" loogu darnaanine, bal qodobkaas dib ugu laataan leeyahay.

Waa mahadsantihiin aniga laftigaygay iga dhammaatee qodobbadii aan is idhi rayigaaga ku biiri waa intaas.

Mar labaad waxaan rabaa inaan guddiga si gaara ugu mahadceliyo runtii waa dadaalaysiin oo sida hadda ku cad inaa 32  ku soo koobteen  34 farqadood aad ku soo darteen, halkaa waxaa ka cad inaad isbeddel ka raadinaysaan dastuurka oo aad rabtaan wax badan inaad saxdaan. Laakiin bal meelah qaarkood oo aad mooddo in farriimo idiinku dhex jiraan wuxu waa dastuur dad Soomaaliyeed oo 34 dawlad la'aan ahaa loo samaynayo aad ha looga taxadiro. Aad iyo aad ayaa umahadsantihiin.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Bismilahahi raxmaaani raxiim guddonku waa mahadsanyahay waxaan u galayaa toos  qodobka 82aad faqraddiisa 1aad waxay qoreysaa 54senatar marka wax yaabo ayaa isku keey qaban la' haddaan la akhrinno soojeedinta guddiga ee maqaamka caasimadda haddii tan 1aad la qaato iyo haddii tan 2aad la qaato in kastoo oo aan  ahay dadka aad ka uga adag in tan 2aad la qaato.

Waxaa ka dhalanaysa markasta matalaad hala siiyo haddaan hadda xafidno aan dhahno 54waaye xaggee ka imaanaysaa tiradaas marka yacnii caqliga ayay ka baxsantahay. Waxaad dhahdeen maqaam halla siiyo haddii tan 1aad laqaato tan 2aad la qaatana halla siiyo oo dowlad goboleed laga dhigo caasimadda misana halkaa waxaan ku xanibnay tiro go'an oo aan dhahnay 54 ma dhaafi karaan marka taas guddiga sida uu isku qabad siin lahaa.

Waxaa lagu dhegganyahay oo kale in laga soo doorto 18kii gobol taas waxay ahayd axdigii ugu horreeyay wixii lagu soo saaray haddana dastuur baan maaraynaa aan saxayno xaqiiqadana waxaan ognahay haddaba 18 gobol in aysan ku dhisnayn maan toos u aadno marka oo laga soo doortay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya, in ay ka imaadaan ilaa haddaba ayageey ka imaadeenee.

Maxaa yeeley wax ka imaadey 18 gobol oo lagu doortay meshaan ma joogaan oo haddaba sidaan shegayay gobolka Banaadir waxa metalaya meshaan ma fadhiyaan yacnii aqalka sare ka tirsan marka middaas aan is waafajinno tiradana dib halooga noqdo sida loo farsamayn lahaa 18ka gobolna halla saaro meesha hala yirahdo ka imanayaan dowladaha xubnaha ka ah Dowlada Federaalka Soomaliya maxaa yeeley dastuurkeena waxa uu leeyahay dowlad goboleedyada ayay matalaan marka halkaas is waafajin oo oo aad looga bahanyahay ayaa ka muuqata.

Isla qodobkaas faqraddiisa 3aad waxaa la yiri: "Madaxweynaha xilka dhammaysta oo si sharaf leh uga tagaa waxuu noqonayaa xubin sharafeed aqalka sare" '*good*' wax fiican waaye in golaha shacabka uu ka baxo oo loo wareejiyo golaha aqalka sare, laakiin sharciga in uu wax furan uu noqdo ma ahan waxa dejinynaa dastuur, in ay waxa cadyihiin.

Waxaan aaminsanahay haddaba waad fadhidaayee halagu daro cod leh ama cod aan lahayn, maxaa yeeley nidaam ahaan waxan naqaanaa sharafeed haddii la yirahdo cod maleh, laakiin isna ma cadda in la caddeeyo ayaa fiican, Soomaalida aniga damiininta ayaan ka mid ahay " Damiin far waaweyn baa wax laaga dhigaa" ha caddaato haddii kale hadhowdii yaysan dood na gelinin.

Waxaan kaloo aad uga yaabay waxaan ka hadlaynaa waxyaabo oo aan koleey marka aan layaabo anoo aad u xushmaynaya golaha iyo xildhibaannada saxiibadasyda ah oo qof kasta fikirkiisa leeyahay, hase yeeshee waxaan ka doodayno mararka qaar waxaad mooddaa, in ay ku dhisanyihiin weli qaabkii hore ee aan ku shaqayn jirney ee dadban! Weli fikirka aan ka doodeynu kuma jiheysno dhanka xisbiyo fara badan iyo xisbiyo baarlamanka ummadda Soomaliyeed kuma jiheysno taasna waxaa caddayn u ah maanta dhan waxaan ka hadlaynaa qodobka hadda oo kale 84aad xarafka "B" hadduu aqbalo xildhibaan gole wasiirro.

Golaha wasiirrada hadda kaddib xisbiyo ayaa keensanaya xisbigana xildhibane ayay u yihiin ama waxay rabaan bay u yihiin xisbigaa xor u ah adduunkana marka axsaab laga yimaaddo axsaabta dadka ka soo gala oo xildhibaannadooda ah ayaana wasiirradooda ah oo xisbi kasta wasiirradiisa waxaa noqonaya xildhibannadiisa halka xildhibaan ma noqon karo wasiir dooddaa maxaa keenay meeshan mise noo sheega haddaan u soconno tii hadda oo kale oo dadban markaas waayay waan galayaa ama magalayo aan ka doodno, laakiin axsaabta iyo afkaartooda iyo hoggaankooda muddo kooban maxaan ka rabnaa anaga xisbiyaa lagu soo galayaa? Xisbiyadana dadkooda wata xildhibannadooda ayagaa wata. wasiirradoodana ayagaa wata ayagaana og qofka ay wasiir ka dhiganayaan markii la isku shiddeeyo hadda la yirahdo

macna ahaan aan ufasirno, Bashiir hadda wasiir yahay wasiirka haddaan ka tagayaa wax macna ah masameynayso, laakiin mabda'iyan iyo sharciyan waa in uu culayskiisa leeyahay, shuruucda maanta aan ka hadlaynana haddaan 100% gaaraynin "atleast" 60% ama 70% ku jiraynaa dhinaca xisbiyada dimuqraadiyadda aan u soconno marka haloo noqdo qodobka 59aad yaan la isku shiddaynin yaan waqti la gelinin ha noqdo iyo yuusan noqonin wax inoo yaala ma ahan ee xisbiyada aan u dhaafno.

Inta aan ka bixin kaas asxaab badan oo aan aad ujeclahay oo sharaf leh waxay soo jeediyeen xildhibankii hadda maxasuusto wuxuu yiri: "Inta la doorto xubin sharafeed hallaga dhigo" hadda lama doorto labada guddomiya keliya waxa la doortaa guddomiyaal iyo guddomiye ku xigeeno inta la doorto marka horta "termonology" gaas in uu saxsanyahay, dadna waxay toos u aadeen labada guddoomiye halaga dhigo,

Horta guddomiyaha golaha shacabka haddii uu xilka ka dhammaado muwaadin guddomiye noo ah oo "speaker" golaha shacabka ka ah, sabab uu Aqalka Sare u aado oo xubin ugu noqdo ma ahan karo aniga haddiiba aan siinayno kan aan joogno aan siinno oo "speaker" uu ka ahaa ee maxaa aqalka geeyay? Taas laftirkeeda waxay u baahantahay, in laga fiirsado, laakiin dhinac kale aan ka rabo ayadaha Qur'aanka laftigiiga illaheeys sababu nusuul buu mid kasta ku soo dejiyaa sababta dadka keeney waan fahmayaa waxa qabiil baa ka maqan haddiiba aan qaadanayno waxba kama qabo ee guddoomiye ku xigeenka 1aad ee golaha shacabkana halagu daro baarlamaanka kan 1aad guddomiyaha Aqalka Sare ayaa matalaya waa in ay caddaataa ha iga yeelina ee fikirkayga in aan soojeediyo ayaan utaaganahay haddii la yiri waxaan akhrinaynaa guddomiyaha waa la yaqanaa madaxweynahana waa la yaqanaa A iyo B ayuu ka imanaa hadda, laakiin mardhow "c" ayuu ka imanaa ama "D" ka imana ama F ayuu ka imanaa weliba markaan "F" ayaan hormarinaynaa, haddii aad ku salaynaysaa oo dooddiinu ahayd qabiil fadhiyan oo tirada sii yaranaysa war Ilaahay inta ka yaabtaan isku xishootaan guddomiye ku xigeenka 1aad ee golaha shacabka qofka noqdo toos wuxuu u noqonayaa xildhibaan sharafeed ama naga daaya ee ninkii madaxweyne noqdo aan ku ekeeyno oo halkaas aan ku hayno.

Dorashooyinka wakhtigooda laga soo hormariyay waa farqadda 2aad ee qodobka 87aad waxa la yiri labo sano haddaan u noqonno nidaamka xisbiyada iyo caalamka waxa ka jira 6bilood keliya ayay dowladda ku dumi kartaa meel kale halla aadina weli waxaan sarannahay tii dadbanayd iyo nooca hadda aan ku fadhino xisbiyo hadday yimaaddaan oo xisbiyo wax isku darsadaan oo xisbi labo xildhibaan leh oo dowladda uu ku galo oo baxo dowladda waa dumee. Hadii mid kale uu dhiso uu la heshiiyo waa dumee oo lix bilood gudaheed doorashaa la aadi karaa wax la yirahdo labo sano ama seddax sano iyo afar sano majirto xisbiyo ayaan aadnay oo xisbiyada awood ay ku xukumaan dalka ayay yelanayaan ama ilaa ay ka helayaan 6 bilood walbo doorasho ayaa la aadayaa.

Ma ahan wax madaxweyne kala dir iyo awood madaxweyne ma ahan madaxweynaha waxaa ujeediya xisbiyada oo yirahda waan xukumi weynay dalkii markay dowlad dhisi kari waayaan madaxweynaha markaas odaygii qaranka wuxuu leeyahay doorasho aada, laakiin doorashada madaxweynaha kama timaaddo baarlamaana makala diro marka waxa sida ay yihiin in ay caddaadaan marka labadaas sano halaga saaro haddii kale hadda aan ku heshiino goluhu hadduu fadhiyaa dastuurka haddaan gacanta ku heynaa waxeena aan iska jacbursano mesha iska yaalo mise "democracy" ayaan aadnay? Axsaab baan aadnay habka axsabta looga dhaqmo aan aadno.

Qodobka 93aad farqadda seddaxaad go'aanada kulamada wadajirka ah aqlabiyad cod dheeri ah ee goob jooga labada gole waxaa lagu daray hoos kasii baa kujirta, haddii dastuurka si kale u arko "side u arki karaa dastuurka?" Halaga saaro middaas haku caddaato caqlabiyada saas ayay ku egtahay go'aanada labada gole ee wadajirka ah caqlabiyad cod dheeri ah ayaa lagu kala qadanaya inta goob jooga ah, haddii haddiidaas maxaa waaye? Oo shaki baa la gelinayaa marka dastuurka waa in uu cadaaddaa "No" hoos kasii aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Sen. Abdikani Gelle Mohamed**

Waxaan rabaa inaan horay u galo oo aanan wakhti badan lumin. Qodobka 82aad Faqraddiisa 3aad ayaan rabaa inaan ka billaabo, qof kasta oo qabta xilka Madaxwaynaha Jamhuuriyada Soomaaliya oo kaga dega si nabad ah wuxuu xubin sharafeed ka noqonayaa aqalka sare. Waa arrin fiican in madaxwaynaha dalka soo hoggaamiya in laga dhigo xubin sharafeed aqalka sare ah, laakiin waxaan isleeyahay sidii hadda dad badanba ka hadlayeen arrintaas shuruudda ku xiran aad ayay caato u tahay waxa la yiri si nabad ah oo dimuqraadiyad ah, anigu waxaan qabaa in lagu daro markuu muddo xileedkiisa dhammaysto, waayo hadduu muddo xileedkiisu dhammaaday ma dimuqraadiyad ayuu kaga dagay mise nabad sidaas daraadeed anigu waxaan qabaa in lagu daro markuu muddo xileedkiisu dhammaado oo si sharaf leh uu ku dhammaysto ayuu ka mid noqonayaa golaha aqalka sare haddii kale wuxuu noqonayaa oday maamuus leh oo banaankiisa mushahar ku qaata. Marka anigu waxaan qabaa in shuruuddaas lagu, daro laakiin hadduu wakhti ku darsado wuxuu noqonayaa madaxwayne hore, middaas intaasaan kaga gudbayaa.

Qodobka kale oo aan rabo inaan ka hadlo waa qodobka 83aad ee ka hadlaysa xubinnimada baarlamaanka. Xubnaha golaha baarlamaanka waxaa loo dooran karaa muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxaan qabaa in lagu daro muwaadin u dhashay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Isla xarafka (D) waxaa ku qoran, da'diisu tahay 30 ama 35, waxaan qabaa in laga saaro ereyga "ama" waayo waxay noqonaysaa in midkii la doono la qaato. Ujeedka aad ka lahaydeena waxay ahayd aqalka sare oo 35 ah iyo golaha shacabka oo 30 ah marka hadday sidaas tahay ujeedkiinu hala kala qaado oo halaga saaro ereyga "ama". Xarafka kale ee (H) ee isaguna halkaas ku jira. Oo oranaysa ugu yaraan inuu joogo 2 sano waxaan oran lahaa "waa in la xaqiijiyay Soomaalinimadiisa".

Qodobka 84aad oo ka hadlaya sababaha lagu wayn karo xubinimada baarlamaanka xarafka (F) aqbalaad xil kale oo dawladeed. Sidii hada uu ka hadlayay xildhibaankii iga horreeyay waxaan qabaa in lagu cadeeyo oo la iraahdo haddii uu xilkaasi noqdo agaasime iyo hadduu wasiir noqdaba inuu ku waayi karo, inta halkan fadhida oo xildhibaanada ah haddii ay noqdaan wasiirro yaa lala xisaabtamayaa? Waxay noqonaysaa "nin dawee la leeyahay dambi uu bar leeyahay" marka anigu waxaan qabaa in laysku bareero oo la kala saaro xildhibaanada iyo wasiirrada, dhanka kale marka laga eegana dad badan ayaa shaqo helaya oo 70 qof oo aqoonyahano ah oo banaanka jooga ayaa shaqo helaayo.

Arrinta xisbiyada oo la leeyahay xisbiyo ayaa la noqonayaa, waxaan leeyahay nimanyahow horta in la riyoodo waxa ka horraysa in la seexdo, xisbi Hargasa ama Garoowe ka soo baxay

inay halkan imaadaan oo halkan ay ka tartamaan Ilaahay ha ina gaarsiiyo, waa inaynu u bareerno oo aynaan xaqiiqada ka dhuuman.

Qodobka 86aad ee ka hadlaya xasaanadda xubinta baarlamaanka haddii aan laga haysan ogolaasho Golaha Shacabka ama Golaha Aqalka Sare xildhibaanka ama senator-ka laguma oogi karo dacwad. Waxaan qabaa xildhibaan iyo senator inay tahay isku mid oo ay kaafinayso in la yiraahdo xildhibaanka laguma oogi karo oo senatorka meesha laga saaro.

Qodobka 87aad oo doorashooyinka xilligeedii laga soo hor mariyay waa laga shikiyey shiki badan aya laga qaaday haddii aad haysaan guddigu waxa lagu daaweyn karo hadda sida loo akhrinayaa siday u muuqato in awooda madaxweynuhu uu kala diri karo waa kala diri karaa madaxweynuhu inuu kala diri karo Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka aya soo saaraya xeer madaxweyne ee lagu qabanayo doorasho xcilligeedii laga soo hor mariyay ee goloyasha Barlamaanka kaddib markuu uu dhegeysto talada xisbiyada siyaasadda, markaa waxa cad in madaxweynuhu kala diri karo wakhtina qaban karo lagu qaban karo doorasho .

Waddankii waa burbur waad ognahay haddana waxbaa isku caddilan iyadoo haddeertaan aan ognahay Barlamaannada awoododu intay iska leegtahay anoon dhaliilayn haddaa loo tag layahay madaxweynaha awooddiisa ama State-ka ha joogo ama Federal ha joogee haddii la yiraahdo Barlamaankii hala kala diro waddanku wuxuu ku noqonayaa hal qof inuu taliyo ayay ku noqonysaa markaa waxan qabaa qodobkaas ama si kale haloo beddelo oo sidaa ka khafiisan ama meshaba ha laga saaro.

Qodobka 89aad farqadda shanaad fadhiyada labbada Gole midkood waxa shir guddoominaya kaas iska daa ka gudub.

Qodobka 90 aad shuruudaha guddoomiyaha iyo G/xigeenka xildhibankii iga horreeya ka hadlay in musharraxa Guddoonka labbada Gole aysan ka yarayn 35 sano taas waxan qabaa sidii hadda xildhibankii hore ka hadlay in laga dhigo tirada 40 sano qofka xilka qabanaya Guddoonka oo Aqalada hoggaaminayaa in aysan da"diisu ka yaraan 40 sida saxda ahan Nabiyadii ama Rusushii Ilahay inoo soo diray intooda badan 40 kaasay xilka loogu dhiibi jirasy tiradaasi way buuxdaa marka waxaan qaba in 40 kaas ka dhiganno oo Sunnadana aan qaadanno.

Farqadda (e) in musharraxa haysta jinsiyad dalkale uu caddeeyo ka noqoshada markuu xilka qabto Soomaaliya waa 30 mliyan 15 ka mida ama 10 ka mida waxay ku noolyihiin adduunka markii uu waddanku burburay passport keenana wad ogtihiin wakhtigan inta waddan ee lagu tagi karo way koobanyihiin waa kow iyo labo waxaan qabaa marka farqaddaas meesha kuma jirto anuu qurbo joogta ka mid ma ahi, laakiin waan u doodayaaye halaga saaro meesha 30 milyna oo 15 banaanka jirto inta hadda meesha fadhidaa 3/2 haysata pasaport rada ajanabiga ah passport-=keenana waxa lagu tagi karaa 10 waddan ma dhana marka waxan qabaa farqaddaa, in mesha laga saaro waxay cadaadis ku tahay dadka ama aqoonta keenaya ama dhaqalaha keenaya ama aqoonyahanka muwa'diniinta ah ayay xadgudub ku tahay taasi.

Qodobka 93aad oo ka hadlaya Kulamada labbo da Gole kulamada wada jirka ah ee labada gole ee baarlamaanka federaalka waxa shir guddoominaya, guddoomiyaha golaha shacabka anuu taas waxaan qabaa in laga dhigo xarun kasta haddii xarunta golaha shacabka lagu shiriyana

waxa hoggaaminaya oo guddoominaya guddoomiyaha golaha shacabka haddii aqalka sare lagu shiriyana guddoomiyaha aqalka saraa hoggaaminaya haddii midkood maqan yahayna hadba kii jooga hoggaaminaya, laakiin marwalba yaan la oran guddoomiyaha golaha shacabkaa hoggaaminaya haddii xarunta aqalka sare lagu shirayo ma guddoomiyaha golaha shacabkaa hoggaaminaya? Xogaa waxay u ekaanysaa hoos u dhig markaa hadba xarunta lagu shirayo guddoomiyaheeda hoggaanka iska leh anuu taasban in laga dhigo qabaa.

Qodobka 95 aad Guddiga adeegga Barlamaanka wuxuu ka kooban yahay 5 xubnood oo ka kala imaanaya labbo da Gole ee Barlamaanka ee federaalka waxayna kala yihiin: Guddoomiyaha Golaha shacabka ayaa noqonaya guddoomiyha guddiga, guddoomiye ku xigeenkana waxa noqonaya guddoomiyaha Aqalka sare, guddi hadda maynan samayne marka gudoonkii ayaad talada u bararinseen ood u xoojiseen ee guddi samayn maaha taasi. Guddiga adeegga Barlamaanka waxa looga baahanyahay guddi uu barlamaanku u ashkatoodo oo baahidooda ka garnaqa oo ay duruufahooda u gudbiyaan oo xaajadooda u geeyan, haddii marka la yidhaahdo labbadii guddoonbaa taladii wadaya dee iyagaa haddaba hayee maxad inoo mashquulinaysan maad iska daysaanba?

Anigu waxan qabaa guddigu inay noqdaan 9 xubnood in laga dhigo 2da golena ka kala yimaddaan guddoonkana ay ka madax banaanaadaan guddoonku isagaa mar kasta xukuma, laakiin guddi ka turjuma baahida Barlamaannada inuu noqdo sidaasan anuu aragti ahaan qabaa 9 xubnood ha laga dhigo hana lagu dhiso sida ay ku yimaadaan ama hadda aynu ku dhisannahay guddiyada guddi kastaa 5ta beeloodba lagu dhisaaye. Sidaasna ha ku yimaadan aAqalka shacabkana waxan odhan lahaa labbada gudibaa wax isku dhafan jira Guddiga Maliyadan iyo Guddiga Dastuurka   Mid walbana idinkaa gudoonka haysta golaha shacabka haysta marka taasna anaga noo daaya. Aad baad u mahadsantihiin.



**Xil. Dr. Mohamed Sh. Ahmed**

Waxaan ku darsanayaa dhowr qodob doodda, waxaan ka billaabayaa marka koowaad inaan u mahadceliyo guddiga runtii ee madaxbanaan soo diyaariyay wax ka beddelka dastuurka, runtii shaqo aad u fiican bay qabteen oo bogaadin ay leeyihiin iyo guddiga baarlamaanka oo dabcan arrintaas kor joogteenayay.

Cutubka 6aad ee baarlamaanka khuseeya shaqo aan caadi aheyn baa laga soo qabtay wax u isku dhexjiro ma aheyn wuxuu u muuqday baarlamaanka waxaan hey'ad keli aan ahayn oo laba hay'adood oo kala ah, laakiin hadda waxaad moodaa in aad la isku dhex geliyey hal gole in laba laan kale inuu yahay ayaa la cadeeyey ilaa qodobadii ay isku dhexyaaceen oo la kala garan waayay meel ay jireen, sababtoo ah wax islaheen maba ahan markii hore.

Golaha shacabka ayaa inta badan qoraaladda iska lahaa aqalka sare waxyar baa meel ugu qornaa in hal aqal uu yahay wax waliba uu wadaago, hadday shuruud tahay iyo hadday awood tahay oo la isdhex geliyay la isku dhaqo qodobbadana ay isku dhexdaataan waxaa keenaysa shaqadaas weyn oo laqabtay. Waxaan rabaa intaan qodobbada aanan u gelin ama aan guda galo Qodobka 82aad oo runtii markii hore aanan rabin inaan aad uga hadlo dooddad xildhibaannada aad ugu soo noqnoqtaya waxyar ka dhahayaa.

Qodobka 82aad oo tilmaamaya tirada Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka iyo farqadda 3aad iyadana madaxweynaha ah meeshaas dood waxaa ka soo baxday dadku inay tabanayaan, farqadda 2aad ay caddanayso in loo baahan yahay tirada guud ee xubnaha golaha shacabka iyo golaha aqalka sare waa in ay matalaad isku dheeli tiran ku yimaadaan dhammaan qaybaha bulshada, meeshaas ayaad mooddaa dadku inay dareen ka qabaan aqalka sare ha noqoto, dooddu Aqalka Sare ayay ka billaabatay oo dabcan tiradiisa oo aan gobol lagu dhisin beelihii shanta ahaana aan lagu dhisin oo si u yar.

Dad waxay tabanayaan inay wax ka maqanyihiin oo hal iyo labo ay kamaqan yihiin, dad kalena waxay tabanayaan iney meesha dhanba ay kamaqan yihiin oo beesha shanaad oo kale tusaale, in golaha sare hal ruux oo gobolka Hiiraan ka yimid ku jiro cafwan laba ruux inay ku jiraan, meeshaas waa tabasho weyn, laakiin annaga maba aanan hadlin qoliyihii kale baahidood aad u muuqataa, maxaa keenay marka meeshaas?

Waxay ka soo baxday ilaa madaxweynihii loo ekeysiiyo waxaan dadka ka dhaxeynin oo dad gaar ah ay leeyihiin oo timaaddo doodda xubin sharafeedka waa, in guddoomiyaha baarlamaanka uu yeesho, waa in guddoomiyaha Aqalka Sare uu yeesho iyo guddoomiye ku xigeenku asigana beel buu matalayaa maxaa keenay oo asna uu yeesho?

Waxaas oo dhan waxay ka dhasheen dareen ah wixii wax lawada leeyahay inuusan ahayn dadkii kawada dhaxeeyay inay dad gaar ah leeyihiin, marka waxay noqotay nin waliba wixiis inuu difaacdo, dareenkaasi si uu meesha uga baxo waxaa la rabaa, in ladareemo wada lahaansho, jagooyinka waddanka ugu sareeyana in wareegto laga dhigo dadku wada yeeshaan si aan dareen looga qaadin madaxweynaha doodda meesha way kabixi lahayd guddoomiaha Aqalka Sare iyo guddoomiyaha golaha shacabka iyo guddoomiye kuxigeenka ayagana xubin sharafeed hala siiyo dareen baa keenaya dareenkaasi si meesha looga saaro, jagada madaxweynaha ha latuso in ay dadka kawada dhaxeyso jagooyinkana wareeg halaga dhigo. Haddii kale dadka waxay u arkayaan sidii meesha laga sheegay in jagadaas dad gaar ah leeyihiin, markii dad gaar loogu roonaanayo, qodobkaas intaas ayaan uga baxayaa.

Qodobka 83aad shuruuda xubnaha baarlamaanka farqadda 1aad ee xarafka **(e,w}** waxaa ku jirta in uu leeyahay shuruudo laga rabo qofka xildhibaanka noqonaya inuu leeyahay aqoon heer jaamacadeed oo la aqoonsan yahay ama waaya-aragnimo u dhiganta.

Intaas weli kama aanan qaan gaarin miyaa? Waaya-aragnimada u dhigantada? Weli ma aanan soo gaarin miyaa heer aan aqoonta ku kal soonaanno? Waxaan qabaa in meesha laga saaro oo loo baahneyn hadda.

Qodobka 84aad oo khuseeya xildhibaanka haddii jago fulin ah qabto ama wasiir ha noqoto ama jago kale ha noqotee inuu xilkiisa weenayo, arintaas iyada ah malaha ruuxdii nidaamkii madaxtooyada oo markii hore lagu dhisay meesha ayaa haraadigeeda waaye malaha, nidaam ri'aasiga ah ayaa aad u kala saara golaha wasiirrada iyo baarlamaanka, laakiin markii dambe waxaa ii soo baxday guddiga aan warsaday talooyinkii dadka lala yeeshay waan arkay warbixintana waan ka arkay, inay dareenkaas dadku xoog u qabaan in lakala saaro waana sax.

Dhinac markii aan fiirino baahida aan u qabno isku dayno inaan ku xalino jagooyin badan in la abuuro madaxweynayaal iyo baarlamaano iyo golayaal wasiirro iyo boqolaal jago ayaan isku

daynay inaan wax ku xallino welina waan xallin weyney, laakiin baahidaas way jirtaa iyadoo baahidaa ay jirto, marka jagoooyinkii in la is dul saaro kuwii ugu waaweynaa mushkiladda ayay qayb ka noqonaysaa, dhinac in la kala saaro way fiican tahay dareenka bulshada la tixgeliyo haddana nidaamkii xisbiyada iyo nidaamka baarlamaaniga ah ayadoo la tixgelinayo waxaan qabaa inaan gabi ahaan lamamnuucin, laakiin la xaddido oo la yiraahdo: "Golaha wasiirrada" si uu gole fulin u noqdo, baarlamaankana gole sharci dejin uu unoqdo, golaha wasiirrada xildhibaannada ku jirta kama badnaan karaan 10%, yacnii haddii ay 30 yihiin 10 kabadan xildhibaanno lagama dhigi karo si uusan u'imaanin dareenka in meesha 50-60 wasiir soo fadhiistaan meeshii ma gole baarlaman baa mise waa gole fulineed/wasiirro? Sidoo kale dadkana aan loo xaddidin, waxaa dhici karta in loo baahdo dad xildhibaanno ah kartidood in looga baahdo golaha wasiirrada si wixii oodhan loo aruuriyo in 10% loo sameeyo, si loo ilaaliyo isku dhexmilanka labada hay'adood.

Qodobka 87aad doorashooyinka degdegga ah wuxuu ka hadlayaa doorashooyin wakhtigooda ka soo horreeya qodobkaas isaga laftigiisa waxaan dareensanaa markii hore malaha nidaamkii madaxtooyada oo lagu dhisay dastuurkii wax ka beddelitaankiisa oo laga soo celiyay seddex qodob intii kale muu ka tirsanaa dareen ah baan qabay.

Waxaa jirta dastuurkii 1963dii ayuu ku jiraa qodobkaas ayadoo baarlamaani dowladdu ay tahay ayuu sidaa ugu jiraa ficlan, in loo baahdo in arrintaas ay iman karto oo madaxweynuhu uu u diri karo haddii xisbiyadii si dhammaystiran ugu heshiiyaan xukuumad dhisitaankii ama iyagu ay keenaan guddoomiyaha baarlamaanka iyo xisbiyada.

Laakiin waxaan qabaa duruufta hadda aan kujirno sida hadda aan unaalno kalsoonidii bulshada iyo weli dowlad midaysan oo dalkii oodhan gacanta kuhaysa aysan jirin kalsoonidii oo ladhisayo, hay'adihii dowladda oo wada dhismin weli oo hay'addii garsoorka ay laalan tahay oo ahayd awooddii sharciga "control" lahayd gaar ahaan maxkamadda dastuuriga, baarlamaankii oo aad mooddo hadda farqaha ugu jiro golaha fulinta jawigaas markii la fiiriyo, waxaan qabaa lama ogolaan karo in la dhaho madaxweynaha baarlamaankuu kala diri karaa.

Laakiin waxaa la xaddidi karaa siyaabo kooban oo qodobbo xaddidan dastuurka in lagu xaddido sida dastuurka ugu caddayd,1,2,3 markay dhacdo isla markaana maxkamadda dastuuriga ay ogolaato in ay sidaas tahay oo awood kuleedahay oo garsoorka la dhiso xaalado qaar waa loo ogolaan karaa.

Laakiin hadda haddaan iska dhahno aan sidaas fudud ku marino dowladdii hal hay'ad inay tahay ayaa soo baxayso, baarlamaankana asagoo luudaya uu faraha kabaxo.
Qodobka 90/1/F oo tilmaamaysa shuruudda doorashada guddoonka labada gole ee baarlamaanka federaalka waxaa kujirta halkaas, waxaa laga rabaa waa inuu caddeeyo hantida uu leeyahay, uuna ku gudbiyo hab qoraal ah xafiiska hantidhowraha qaranka, qodobkaasi aad buu u fiicanyahay waa haddii madaxda lagu dabbaqayo aad buu u fiican yahay. Waad mahadsantihiin.

**Xil. Mukhtar Mohamed Guled**



Bismillaahi Raxmaani Raxiim, guddoomiyaha, xildhibaannada labada aqal iyo saxaafadda Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh, cafwan waxaan ilooway iyo Guddiga Madaxbannaan ee Waxka-beddelka Dastuurka salaam, kaddib waxaan rabaa inaa si toos ah u guda galo dooddayda ku saabsan waxka-beddelka dastuurka gaar ahaan, cutubka 6aad oo maalmahaan ay dooddiisu ay socoto, marka hore waxaan rabaa inaan u soojeediyo mahadcelin ballaaran guddiga labada gole iyo guddiga madaxabannaan ee dastuurka shaqada wanaagsan ay ka soo qabteen waxka-beddelka dastuurka, laakiin weli waxaad mooddaa in sababaha looga cararaayo loogu guuraayo dastuurkii hore ee waxka-beddelka loogu waday, weli inay taagan yihiin ay ka midtahay, in qodobbada qaar weli ay tahay ay isku soo noqnoqdaan oo laba meelood kale lagu arki karo, hadhaw marka sharciyad ahaan waxaa adkaaneyso sida loo kala saari lahaa qodobbadaa hay'adaha ay khuseeyeen.

Marka sidaas darteed marka guddiga waxaan ka codsanaynaa qodobbada ay soo qorayaan ineysan ku soo noqnoqonin oo ay kala saaraan oo hay'adaha kala madaxbaneeyaan.

Intaa kaddib haddii aan ku hormaro, sixitaan yar madaxa 1aad qodobbada guud ka hadlaaya cutubka 6aad oo ka hadlaayo waxaa ciwaan kiisa ugu dhigteen Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya? Gudaha qoraallada inta badan waxaa ku jirto oo ku qoran baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, marka hal magac intaad raacdaana ayaa fiican ama inaad qortaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ama Baarlamaanka Jamhuuriyada Fderaalka Soomaaliya sixitaan ahaan meeshaas waxaa idin soojeedinayaa inaad saxdaan, sidoo kale isla qodobkaasi 80aad, faqraddiisa 2aad meesha ay ku qorantahay waajibaadka u gaarka ah gudanaaya goonidiisa waxaa ku qoran xilalka wadaagga ah si wadajir.

Xilal ay wadaagaan labada gole inay jiraan uma malaynaayo ma jiraan, laakiin waxay wadaagaan shaqooyin ama howlo marka ayadana waxaan codsanaayo meesha shaqooyinka ah inaad howlo ku beddeshaan aad saxdaan.

Sidoo kale qodobka 81aad xilka xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya faqraddiisa 1aad waxaa ku qoran xubin kasta oo ka mid ah golayaasha baarlamaanka federaalka marka ay waajibaad kooda gudanayaan waa inay ku shaqayso sida ay ku jirto waxaad soo qorteen danta ummadda iyo qaranka Soomaaliyeed, meeshaas waxaad mooddaa inay ka maqan tahay diinta, iyadana waxaan soojeedinayaa in lagu daro diinta oo laga dhigo sida ay ku jirto danta diinta iyo ummadda iyo qaranka Soomaaliyeed oo aan laga tagin diinta.

Sidoo kale qodobka 82aad faqradiisa 1aad waxaa qoran 275 xildhibaan inkastoo aad u guuriseen Aqalka Sare qeybta kale ayaan ugu hadli doonnaa waan ka gudbi doonaa, qodobka 82aad faqraddiisa 1aad qeybta danbe ee aqalka sare wuxuu ka koobnaan doonaa ayaad dhahdeen 54 sanatar ama uu ka kooban yahay oo laga soo doranaayo 18kii gobol.

Aqalka Sare ee hadda 54 ah Dastuurka asal kiisa qodobbadii ahaa siday u qornayd hal qodob Dastuur uu ku dhisan yahay maanta maba jirto 18 gobolna kuma dhisna beelaha Soomaaliyeedna kuma dhisno state-na kuma dhisna, marka hore asaga naftirkiisa si qaldan

ayuu ku dhisanyahay madaama hadda aan saxayno dastuurkii hadda sixitaan waxka-beddel aan ku wadno waxaan soojeedinayaa 18ka gobol haddii laga dhigaayo ragga gobolka Banaadir keliya u doodaayo 18ka gobolka Banaadir ayay ka mid noqon doonaan oo 18ka oo saddexdeeda xubnood ama saddexda xubnood oo aqalka sare ah ayay ka heli doontaa gobolka Banaadir markaas matalaad gaar ah oo loogu doodi doona umma baahna, laakiin meeshaas waxaa muuqato in aqalka sare oo dulmi farabadan uu ku dhisanyahay oo sidii la rabay Soomaali waxqeybsigeeda uu ku dhisnaa uusan ku  dhisnayn, marka aniga shaqsi ahaan waxaan soojeedinayaa in 5ta beelood lagu qeybiyo oo dib loogu laabto aqalka sare, laguma qeybin karo state laguma qeybin karo dowlad gobleed, oo waxaan ognahay labo state iyo saddex state reeraha qaarna ay leeyihiin hal state reeraha qaarna aysan lahayn, sidaa darteed marka waxaa soojeedinayaa aniga ka Mukhtaar ahaan in 18 gobol, state iyo waxba aan lagu dhisinee aqalka sare dib loogu dhiso 5ta beeloodna loo qeybiyo; oo sidaas ognahay waxaa ka maqan aan dhihi karno gabi ahaanba beesha 5aad, oo labo xubin keliya ku leh marka in meel laba xubin keliya ku lahaayo meelaha qaarna 12 iyo 13 iyo 11 , 12 ay ku lahaadaan wax caqli gal ah maahan, marka haddii aan rabno aan ka shaqayneyno caddaalad Dastuurkaan waxka-beddelkiisa waxaan soojeedinayaa, in aqalka sare lagu qeybiyo 5ta beelod ay Soomaali wax ku qeybsato ayaan soojeedinayaa.

Isla qodobkaas faqraddiisa 3aad waxaa ku qoran qofkasta oo noqda Madaxweynaha Jamhjhuuriyada Federaalka Soomaaliya markuu xilka banneeyo si sharaf leh wuxuu xubin sharafeed ka noqonayaa golaha aqalka sare inta uu noolyahay, haddii aanan xil ka xayuubin lagu sameynin  iyadoo aanay mudada xil heyntiisa dhammaan si waafaqsan qodobka 115aad ee dastuurka xuquuqda wajibaadaha iyo xadiddaadda la xiriira xubinnimada sharafeed waxaa lagu nidaamin doonaa xeer gaar ah, horta sideeda siduu sheegay wasiir Bashiir  waxa lagu nidaamin doonaa xeer gaar ah iyo  hadduu uusan Dastuurka usan u dhigin iyo haddii xeerka si kale uusan u dhigin meel ay ku jirto siddeedaba  waxa laga wadaa hadhow sidaan rabo ayaan u isticmaali karaa marka sidaa darteed waxaa fiican madaama uu Dastuurka yahay heshiis bulsho qodobboda la qoraayo inay noqdaan qodobbo cadcad oo la ogyahay oo muran uusan ka dhalan karin ayaan qabaa, sidoo kale isla qodobkaasi waxaan ka qabaa dood ah qofka madaxweynaha ah jamhuuriyadda ka dega oo xilka ka dega si nabad ah u baneeyo haddii uu noqonaayo markii hore waxay ahayd haddii golaha shacabka uu noqonaayo, haddana waxaa soo qortay inuu noqonaayo aqalka sare, hoorta meesha kuma aadan caddaynin xubin sharafeedkaasi cod maleeyahay misa malahan? Horta waxay ahayd inaa soo caddaysaan cod malahan inaa tiraahdaan oo waxaan ognahay madaxweynaha hadda jooga ee Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud, in tream-kii hadda ugu danbeeyay doorashadii codkiisa dhiibtay sababta uu codka u dhiibtay waxay ahayd? Kuma qorneen inuu cod leeyahay iyo inuusan cod lahayn sidaasna uu ku muteysan karay dood sharci ah, horta waxaan qabaa in lagu soo caddeeyo inuu san cod lahayn, sidoo kale isla xuquuqda uu yeelan karana waxay la mid noqon kartaa mida xubnaha uu ku biiray ama aqalka sare hanoqoto.

Waxaan soojeedinayaa in labada guddoomiye ee golaha shacabka iyo golaha Aqalka sare in lagu daro xubin sharafeedka.

Sidoo kale qodobka 83aad shuruurdaha xubinnimada baarlamaanka gaar ahaan faqraddiisa (d) waxaa ku qoran da'diisa inay tahay 30 jir, haddii uu u sharraxan yahay golaha shacabka ama 35 jir haddii uu u sharrxan yahay golaha aqalka sare, ka da'da ahaan aniga "problem" kuma qabo waxaan aaminsanahay inay saxan tahay oo ay fiican tahay walow uu weli kusii fiicneed

40 jir in laga dhigo wixii kasii korreeyo, laakiin qeybta danbe oo lagu daray oo ah cod bixiye ahaan u diiwaan gashan qodobkas waxan u maleynaa in hadhow dad badan lagu xanibi doono doorashadooda, sidaas darteed marka waxaan soojeedinaya qeybta codbixiya ahaan u diiwaan gashan yahay in laga saaro ayaan soojeedinayaa.

Guddoomiyaha ama habdhowraha waxaan u sheegaayaa cutubka laga doodaayo 80aad ilaa 108 iyo 10 daqiiqo isma lahan idinkaa isku soo daray marka fadlan idinka wakhtiga ku dara, si looga doodo qodobbada ay dood rasmi ah dood meeshaas ay ugu dhalato, haddii kale waxay noqoneysaa qaar golahaan ganaax ay ku maqanyihiin dooddii loo diidaay kuwii joogay wixii ay ka doodi lahaayeen laga hor istaagay ayay noqoneysaa, marka sidaas darteed guddoonka fadlan wakhti nasii aan kaga doodno cutubka madaama uu badan yahay.

Sidoo kale qodobka 87aad doorasho xilligeeda laga soo hormariyay qodobkasi waxaan qabaa sidiisii hore in dib loogu noqdo oo la celiyo oo doorashadaa wakhtigeeda aan laga soo hormarin karin wakhtigeeda, in ay ku dhacdo ama 4sano ha noqoto ama 5 sano ha noqoto sidaasaan qabaa, haddii kale waxay noqonaysaa madaxweyne kasta haddii ay golaha is fahmi waayaan uu wakhti kasta doorashada uu ka soo hormariyo uu kala diro ay noqoneyso.

Isla qodobkaasi waxaa is burinaaya qeybtiisa danbe oo 5aad ama faqradda 5aad waxa ku qoran baarlamaanka xilka ka degaaya ayaa sii heynaaya awoodda baarlamaanka ilaa inta lagu dhawaaqaayo natiijoonka doorashooyinka xubnaha goloyaasha baarlamaanka, haddii golahii la kala diro oo doorasha la soo hormariyo madaxweynaha asagana doorasho cusub muu galayaa? Naftirkeeda misa madaxweynihii ayaa sii joogaaya? Marka bahasha waa isqabaneysaa haddii uu siijoogaayo in wixii dhan ay isla baxaanoo kaddib doorasho toos ah la wada aado.

Qodobka 93aad kulamada wadajirka ah faqraddiisa 3aad waxaan la qabaa wasiir Bashiir qaybta haddii aan Dastuurka si kale u dhigin waxaan qabaa, in laga saaro Dastuurka si kale uu u dhigi karo malahan way qorantahay idinkaa soo qoray marka inaad ka saartaan haddii Dastuurka uu si kale u dhigin inaad kasaartaan ayaan soojeedinayaa, sidoo kale qodobka 83aad awoodaha gaarka ah. Waad mahadsantihiin.



**Sen. Mohamed Abdi Osman**

Guddoonka labada aqal, xildhibaanada labada aqal, labada guddi ee dastuurkaa ka soo shaqeeyay, martisharafta. Madia-ha, kulligiin waan idin salaamaayaa. Asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh.

Dooddayda waxaan ka billaabayaa qodobka 83aad, farqaddiisa (e), qodob kaan wuxuu ka sheekeenayaa shuruudaha xubinnimada baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, farqadda (d), da'diisu tahay 30 jir, haddii uu u sharraxan yahay golaha shacabka, ama 35 jir, haddii uu u sharraxan yahay golaha aqalka sare, cod bixiyana ka yahay, diiwaan gashan, halkaas waxaan qabaa in golaha shacabka da'diisa la gaarsiiyo 40 sano, aqalka sarana la gaarsiiyo 45 sano ayaan qabaa.

Qodobka 95aad, farqadiisa 2aad, guddiga adeega garsoorka, guddiga baarlamaanka, waxaa halkaan ku qoran, guddiga inuu ka koobnaan doono 5 xubnood oo ay ku jiraan labada

guddoomiye, xildhibaanadii iga horreeyay baan la qabaa in laga saaro labada guddoomiye oo guddiga uu noqdo guddi baarlamaani ah oo baarlamaanka u doodaayo xuquuqdiisa, tirada anigu waxaan qabaa in laga dhigo 7.

Qodobka 90aad, faqraddiisa(e), in musharraxa haysta jinsiyad kale, waxay u qoran tahay, in musharraxa haysta jinsiyad dal kale uu caddeeyo ka noqoshada jinsiyaddiisa, haddii uu ku guulaysto guddoonka mid kamid ah labada aqal ee baarlamaanka federaalka, taas waxaan la qabaa xildhibaannada saaxiibaday ee iga horreeyay, arrintaas in meesha laga saaro ayaan qabaa.

Qodobka kulamada wadajirka ah ee labada gole, golaha shacabka iyo golaha aqalka sare waxay wada yeelanayaan kulamo wadajir ah, markii loo baahdo si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, waxaan qabaa arrintaas yacnii markii loo baahdo ee kalmad kaga habboon haddii la heli karo in la raadiyo waan soojeedinayaa.

Qodobka ka hadlaya xildhibaanka sida uu ku luminaayo. Qodobka 85aad dhaarta waxaan qabaa in lagu celiyo sidiisa horre sida ay xildhibaannada kaleba sheegeen, sidii horre in lagu celiyo ayaan qabaa. Waxaan kale oo rabaa, siyaabaha lagu lumin karo xildhibaanka haddii uu aqbalo xeer kale ama shaqo kale, mudanayaasha sharafta leh, waxaan ognahay in ay baarlamaanka iyo golaha wasiirrada ay yihiin laba hay'adood oo kal madaxbanaan oo larabo inay iskorjoogteeyaan. Xildhibaannada sharafta leh, si shaqada baarlamaanka inoogu qurxoonaato, fulintana shaqadeeda u qabsato, waxaan soojeedinayaa in arrintaas lakala saaro oo baarlamaanka uu noqdo mid shaqdiisa qabsada, golaha wasiirrada oo dhiban oo marba dhinac u ordaaya, marna shaqada xafiisyada sugayso, marna inta ku soo ordaya oo meeshi ma joogtaa, representation-kiisa meesha ma joogtaa, taas dhib bay ku tahay.

Midda kale oo muhiimka ah iyadana waxa weeye, runtii baahida shaqo, gaaladu waxay tiraaahdaa, kalmad baa jirta oo tiraahda "double deep" Nin baa maraqa laba rooti ku dhuuqaaya, meeshii la rabay inuu hal ku dhuuqo, labo ayuu ku dhuuqaayaa, marka waxaynu u jeednaa, yacnii shaqo abuurka, employment-iga aad iyo aad meel sare u jooga inay habboon tahay in labadii la kala qaado. Hadda golaha wasiirrada 50 weeye ayaan u malaynayaa, 52 qofood oo kale ayaa shaqo heli lahaa, marka arrintaasi waa muhiim, carrabka ayaan ku adkeenayaa, saaxiibadii iga horreeyayna waan la qabaa, waxaan aaminsanahay xildhibaannada sharafta leh, raggii iyo haweenkii wasiirrada noqon lahaa, banaanka ayay joogaan, waxaan codsanayaa in isbaarada laga qaado oo baarlamaankana shaqadiisa qabsado, golaha wasiirradana si miyir leh oo deggan iyaguna shaqadooda u qabsadaan. Asalaamu caleykum, waa iga dhammaatay.



**Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud**

Mahadsanid guddoomiye iyo xubnaha xildhibaannada sharafta leh. Doodaydaan horay u sii galayaa, cutubka 8aad golayaasha Baarlamaanka faderaalka Soomaaliya, waxaan guddiga rabnaa qodobbada ugu badan ee dastuurka ku xusan, maalin dhoweydna waan ka sheegay halkaan, aad iyo aad ayuu u badan yahay, faafaahin badan ayaa meeshaan ku qoran dastuurkii inuu koob naado nuxurkiisii aad u kooban yahay laga rabay, waxaaad mooddaa sidii xeerar kii

oo kale u qoronyahay, marka in la soo koobo ayaan mar kale cod sanayaa, labada Guddi aan ka cod sanayaa.

Qodobka 80(2) waxa uu leeyahay, Baarlamaan ka fadaraalka Soomaaliya waxaan rabnaa in la dhammaystiro, Baarlamaanka Jamhuriyadda fadaraalka laga dhigo, Soomaliya waxuu ka koob nanayaa halkaas, in saas loo dhammaystiro, aan soojeedinayaa.

Qodobka 81aad xilka xubnaha Baarlamaan ka fadaraalka Soomaaliya waxaa ku qoran, xubin kastoo ka mid ah golayaasha Baarlamaan ka federaalka Soomaaliya, markii ay waa jibaad keeda gudaneyso, waa in ay ku shaqeysaa sida ay ku jirto danta ummadda iyo qaranka ayaa hal kan lagu qoray, waxaan rabnaa in la soo koobo oo laga dhigo dadka, dalka iyo diinta in lagu soo koobo ayaan cod saneynaa.

Qodobka 82aad tirada xubnaha Baarlamaan ka, waxaa ku qoran Baarlamaan ka federaalka Soomaaliya waxa uu ka koob nanayaa Golaha Shacabka 275 xildhibaan, halka Aqalka Sare asaga uu noqon doono 54 sanatar oo laga soo dooranayaa 18 ka Gobol ee dalka, ayaa ku qoran.

Marka hadda maku dhisan yihiin?    Kuma dhisna. Waxaan soojeedinayaa maadaama dastuur kii horayna uu ku qornaa qodob kan, hadana uu qoran yahay laguna shaqeenin in dib loo saxo.

Qaybta hadda xildhibaanada inta ugu badan ay ka hadleen, hadder waxaa maqaamka Caasimadda halkaan looga hadlayaa, maqaamka caasimadda waxay ku jirtaa, goloyaashana ay ugu qorontahay in ay matalaad yeeshaan, haddana isla dastuurkii hore iyo isla kanba waxaa ku qoran in 18 ka loo qaybsanayo 54 kan, 54 kan waxba kama helin, haddaba magaalada waxba ku ma lahan caasimadda aan joogno, ama caasimad xulashada 1aad ha noqoto, ama xulashada 2aad  hanoqoto, midna waxba ku ma helin.

Waxaa sidoo kale dastuurkii hore ku qornaa in maamuladii si "equal" ah ay Aqalka sare ay wax ugu qeeb sanayaan, maamullada qaar ayaa 11 heysto, kuwo qaar waxey heystaan 8, waxaa hadda soo kor dhay maamulka cusub, ay dowladdu dhistay Waqooyi Bari, matalaad ayuu Aqalka sare ku yeelan doonaa, xisaabtu weli iskuma saxna, marka waxaan soojeedin lahaa in Guddigu aragtida halkaan ku qoran ay wax ka soo saxaan, dib loogu laabto, tirada iyo qeybsigaba maxuu ahaa wax laga soo beddelo, oo howshaas sidaas la yeelo.

Intaa kaddib qodobka 83aad waxaa ku qoron qof kastoo noqdo madaxweynaha jamhuriyadda markuu xilka banneyo, si nabad ah iyo dimuqraadiyad ah, waxuu xubin sharafeed ka noqonayaa Golaha Aqalka sare inta uu nool yahay, haddana waxaa halkaan nooga sii qoran, haddii aan xilka xayuubin lagu sameyn ayadoo mudda xileedkiisu dhammaan si waafaqsan qodobka 111aad, waa war tira badan, oo halkaan waxaa ku sii qoran xuquuqda waajibaadka iyo xayiraadda la saaray, xubinnimada sharafeedka waxaa lagu nidaamin donaa xeer gaar ah, ayaa halkaan ku sii qoran. Baarlamaanka 11aad madaxweynaha hadda jooga, waxuu ku codeeyay madaxweynihii horayna yahay xubinna ka yahay Baarlamaanka ayuu ku codeeyay, waxaa sidoo kale halkaan lagu dhaariyay madaxweynihii xukunka ka degay oo Baarlamaankaan 11aad ee Golaha shacabka halkaan lagu dhaariyay, asaguna doorasho ayuu u imaan donaa hadda waa musharrax, kan joogana waa musharrax, horayna waa loo codeeyay, haddana xubin sharafeed ayaa lagu qoray.

Markaa haddii ay Aqalka Sare aadayaan waa qodob furan, laakin labadaba in la caddeeyo Golaha Shacabka ama Aqalka sare in xubinnimadoodu ay la mid tahay xildhibaannada oo ay cod leeyihiin ku soo caddeeyaan, ayaduna soo jeedinayaa.

Qodobka 83aad shuruudaha xibinnimada Baarlamaanka Soomaaliya xarafka H ugu yaraan waa in uu dalka degganaa muddo 2 sano ah, ayaa lagu qoray, 2 sano ka hor maalinta doorashada la qabanayo dalka uu daganaa, waxaan ku soo koobi lahaa maadaama dalkan "diaspora" uu leeyahay, aqoonyahanno dalka dibaddiisa ka yimaadda ay yimaadaan in laga dhigo, meesha labada sano ah in laga dhigo 6 bilood, ayadana soojeedinlahaa.

Da'da xildhibaannada uu 30 jir yahay iyo da'da Aqalka sare 35 labaduba wey fiican yihiin, laakin laba xaraf in lakala siiyo ayaan soojeedinlahaa, labo xaraf ay kala qaataan, oo faqradaas lagu kala saaro.

Qodobka 84aad sababaha loo luminayo xubinnimada Baarlamaanka federaalka waxaa ku qoran xarafkiisa F aqbalaadda xilkale oo dawladeed ee heerarka kaladuwan ee dowladda ayaa lagu qoray. Qodobkaas waxaa dhinaca kale ee dastuuka ku qoran, hadii xubintu ay aqbasho xil dowladeed aan wasiir ka ahayn ayaa inoogu qornaan jirtay dastuur keennii hore, marka aqbalaadda xilkale ee dowladeed heerarka kala duwan dowladda ee aan ka ahayn wasiir ayaan soojeedinayaa, maadaama dalkaan aysan dastuurka ku salaysnayn, wax maanta iyo berri taagan oo mustaqbal laga hadlayo, dadkuna axsaab iyo xisbiyo doorasho la aadayo, xisbigii guuleysta waxuu rabaa xildhibaannadiisa iyo asagaba inay wasiirro ka noqdaan dalka oo ay difaacdaan xukuumaddooda.

Marka dal hadda 4.5 ah oo qabaa'il ah oo shaqo la raadinayo anagu shaqa abuur hadda kama shaqayno, waxaan rabnaa xukuumaddii iyo "policy" yaa laga hadlayaa iyo siyaasad, xisbiyadu qofka ayaga muhiimka u ah ayay Golaha wasiirradu u dirsanayaan, in qodob kaas sidaas loo saxo ayaan ayadana soojeedinayaa, oo lagu daro aqbalaaada xilkala oo dowladeed ee heerar kala duwan dowladda ee aan wasiir ka ahayn in lagu daro ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 85aad dhaarta xubnaha, waxaan rabna in ay dhaartii hore dalka ku taalay oo dastuurka noogu qoranayd in lagu daayo, maxaa yeelay in meesha hadda tiro badan faajfaahin badan, oo nuxur kii dastuurka aad u badan yahay baa ku qoran, marka in lagu daayo, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay, inaa u guto xilkeyga si daacada oo ay ku jirto danta dalka, dadka iyo diinta in lagu daayo dhowrana dastuurka qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u taalo, in taasaa soojeedinayaa.

Doorashada xilligeeda laga soo hormariyay, qodobka 87aad waa suuragal mararka qaar, markaan ka hadlayno sharciga xisbiyada iyo axsaabta tirada badan, dalka waxaa laga yaabaa haddii doorasho xisbiyo la galo oo ay doorashadaas xisbiyadu ay xildhibaanadu "equal" ay kuraaasta helaan, haddana ay wada shaqaywaayaan, "colision" iyo xisbiyo isku tago **lawaayo**, waxaa lagu qasban yahay dalkaasi in doorashadiisu dib loogu laabto, marka qodob kaan aad buu muhiim u yahay, waana soo dhoweynaynaa in guddigu uu ku soo daray, keliya faahfaahinta madaxweynaha ayaa qodobka saddexaad ay ku qoran tahay ayaa soo saaraya madaxweynaha jamhuriyadda fadaraalka ayaa soo saaraya, xeer madaxweyne ee lagu qabanayo doorashada laga soo hormariyay.

Golayaasha Baarlamaanka, ma Golayaasha keliya ayay e ku egtahay? Mise xukuumadda iyo madaxweynaha waxoo dhanaa dib doorashada u galaayo? Taasaa la rabaa in xoogaa la faahfaahiyo.

Qodobka 90aad shuruudaha doorashada guddoonka labadiisa gole, qodobkiisa labaad waxaa ku qoran guddoonka inta uusan qaban xilka xafiiska guddoonka mid kamid ah labada Gole ee Baarlamaanka waa inuu ka tanaasulaa xil kasto oo rasmi ah oo ka hayay xisbi siyaasadeed, xilkiisana uu u guto si dhexdhexaad ah.

Guddoonku waa siyaasi nin hadda suuqa laga soo qabtay ma ahan, xisbiyo ayuu ka imaanayaa waa nin xisbi ayaa dhisanaya, aragti ayuu ku yimid, marka guddoon iska socda oo khali ah majiro, hadduu guddoomiyuhu xildhibaan yahay waxa uu ku tiirsan yahay xisbigiisa, waxaan dhihi lahaa qodob kaas in meesha laga hagaajiyo. Guddoonku waa in uu si dheaxdhexaad ah uguto, xisbiyada kala duwan uu hoggaaminayo, in laga dhigo ayaan soojeedin lahaa, xildhibaannada xisbiyada kala duwan oo hoggaaminayo waa inuu xilkiisa si dhexdhexaad ah u guto.

Qodobka 93aad kulamada wada jirka labada Gole faqraddiisa saddexaad, sida xildhibaannadii hore ay ka hadleen, ayaaan soojeedinayaa, kulanka wada jirka labada Gole u dhexeeya, waxa ay ku ansaxinayaan in ugu yaraan aqlabiyad hal dheeri ah, tirada guud ee xibnaha Gole walbe ay goob joog ka yihiin oo ay codeyaan in intaas in lagu ekeeyo ayaa soo jeedinaynaa.

Isla faqradda 5aad waxaa ku qoran xarafkiisa C, kulamada wada jirka waxaa loo qabanayaa arrimaha ay ka midka yihiin doorashada madaxweynaha, miisaaniyad sanadeedka iyo xisaab xirka ayaa ku qoran. Furitaanka rasmiga ah ee kal fadhiga Baarlamaanka, haddana waxaa lagu sii qoray, madaxweynaha jamhuriyadda federaalka sanadkiiba hal mar.

Madaxweynaha jamhuriyadda federaalka kalfadhi walba wuu yimaadaaye sanadkiiba hal mar ma ahan, qodobkaan C in lagu ekeeyo furitaanka rasmiga ah ee kalfadhiyada Baarlamaan ka, oo inta kale laga tiro ayaan ayadana soojeedinayaa.

Waxaan rabaa inaan u gudbo qodobka 95aad Guddiga adeegga Baarlamaanka, waxaa lagu qoray inuu ka koob nanaayo 5 xubnood oo ay ku jiraan labada guddoomiye iyo 2 xubnood ayaa dooranaya xubnaha golaha, marka waxaan soojeedinayaa lahaa, haddii guddiga adeegga waxa uu ka shaqanayo waa Baarlamaanka iyo hormarkiisa, haddii guddoonka hadda uu ku filan yahay ha loo daayo shaqadiisa hadda wuu hayaahee, haddii kalana guddigan inuu ka dhex yimaaddo Baarlamaanka labadiisa Aqal, oo guddi ka madaxbannaan ay u noqdaan ayaan soojedinlahaa, asagane saas laga dhigo.
Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Ali Hassan**

Qodobka 82aad faqraddiisa 1 aad waxa ku cad oo ku qoran, Baarlanaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay golaha shacabka oo 275 xildhibaan ah iyo golaha aqalka sare oo 54 ah.

Qodobka aan rabo inaan si toos ah u abaaro waa baarlamaanka 275 xildhibaan aan rabaa waxaad moddaa waxoogaa in laga leexleexday oo aan si toosa loo abbaarin. Markaa waxaan rabaa inaan dul istaago, waxaan aaminsanahay aniga 275 baarlamankan ku dhisan hadda sida caadiyan lagu soo dhisi jirayna inaysan sax ahayn oo aysan xalaal ahayn, oo Soomaalida inaan la kala badnayn inaan la kala tiro badnayn, inaan la kala sharaf badnayn. Sidaa darteed maadaama dastuurkii si rasmi ah faraha u gula jirno oo aan rabno inaan saxno waxyaabihii soo qaldamay, waxaan aaminsanahay meeshii laga sixi lahaa haddaan taaganahaye 275 hala qurxiyo oo beelaha laga dhigay 61 oo 4.5 ka laga dhigay si siman shanta beelood ee Soomaaliyeed ha laga dhigo, inta laga gaadhaayo tirakoob rasmiya is xisaabin iyo xisbiyo iyo awoodo shacabku codkooda ku ciil baxaan inta laga gaadhaayo. Maadaama hadda aan dultaaganahay, sixitanka ugu habboon ee la sixi karo haddaan taaganahay markaa waxaan aamisanahay in la saxo meeshaas.

Isla qodobkaas wuxuu ka hadlaayaa aqalka sare oo ka kooban 54 senator oo laga soo dooranaayo 18 kii gobol taa iyadana xalaal maahan, haddii wax la qaybsanaayo oo aqalka sare metalaad uu yahay isagaaba qodobkan wuxuu ka hor imaanayaa maqaamkii caasimadda iyo awood qaybsigii ayuu ka hor imaanayaaye.

Haddii la sixi karo waxaan tallo ahaan soojeedinlahaa in lagu kala qaato sida siman ee wax lagu qaybsado ee shanta beelooda, in lagu qaybiyaa isagana oo laga dhigo shantii beelood 54 ahaa la saxo, 50 senator ah laga dhigo shanta beelood lagu kala qaato inta laga gaadhaayo asxaabtii iyo metalaaddii laga gaadhaayo inta ka horraysa waxaan isleeyahay 18 ka gobol wax lagu qaybin karaa hadda ma jiraan, dawlad goboleed wax lagu qaybin karaayina ma jiraan. Sidaa darteed waxaan leeyahay qodobkana waxaa ku dhex jirta qodobbo ka mida ah, in maqaamkii iyo caasimaddana uu taabanayo oo la rabo, in metalaad loo helo sidaa darteed caasimadda waa caasimaddii ummadda Soomaaliyeed caasimaday ahaanaysaa, dawlad goboleed ma noqon karto caasimaddu waa caasimad Soomaalida ka dhexayso dawlad goboleedna ma noqon karto.

Sidaa darteed waxaan soojeedinayaa talo ahaan caasimadda ummadda Soomaaliyeed inay ahaato.

Qodobkan la leeyahay 54 la saxo oo 50 laga dhigo ama haddii wax lagu kordhin karana oo 54 la buuxiyo oo 55 laga dhigo min hal lagu kordhiyo shanta beelood lagu kala qaato qodobkan intaasaan uga gudbayaa.

Faqradda 3aad isla qodobkan wuxuu ka hadlayaa qofkasta oo madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka noqda marka uu xilka banneeyo si nabad ah iyo dimoqoraadiyad ah wuxuu xubin sharafeed ka noqonayaa golaha aqalka sare inta uu nool yahay haddii aan xilka laga xayuubin.

Qodobkaas dhawr qof baa ka hadashay waxaan rabaa inaan sii xoojiyo waxaan rabaa Soomaali awood qaybsiga iyo markii la dhaho reeraha meelaha ugu xanuunka badan yihiin waaye, waa meelaha keliya ee Soomaali laga kiciyo waa diinta iyo reeraha ee ay ka kacdo. Sidaa darteed aniga markaan hadda meeeshan taaganahay reerihii aan metalaayay labo jeeray ku qadeen sharci darrandan iyo ruwaayaddan la sameeyay oo madaxweynahaa wax buu ku kordhinaya la leeyahay xubinuu qaadanayaa la leeyahay anuu waxaan u arkaa baadil oo aan xalaal ahayn.

Madaxweynaha haddii xubin sharafeed la siiyana maqaam gooniyaa loo samayn karaa xeer gooniyaa loo samayn karaa, si kalaa loo sharfi karaa waa madaxweynihii jamhuuriyada federaalka, qofkii madaxweyne soo noqda waa la sharfi karaa ixtiraam gooniyuu leeyahay maqaam gooniyaa loo samayn karaa. Laakiin maaha xubin inuu noqdo xildhibaan noqdo oo beelihii kalee lamidka ahaa inuu ka cod badiyo oo ka tiro badiyo sida haddaba dhacday doorashadii ugu danbaysay ee madaxweyhana hadda jamhuuriyadda jooga oo codkiisa uu ku noqday 62 beesha uu metalaayo. Sidaa darteed lama aqbali karo in in madaxweyne haddana sidaad ogtahay makhaayadaasi waxay u shidan tahay labo reerood aa isku beddesho maalinba xaafaddaasi xaafado kalay u shiddaa.

Sidaa darteed markaa reerihii kale intay ka soo diyaargaroobaayaan ee tirakoob lagaaraayo ee axsaab aan gaadhayno waxaan soojeedin lahaa, bahasha naga daaya, 61 aan ku balanay oo ruwaayadan ahayd aan isku ogaano oo ha la saxo yaan lasamayn wax la kordhiyo xitaa kuwii hore ee loo kordhiyay waxaan aaminsanahay in laga laabto, qodobkaa markaa intaas aan uga gudbo.

Qodobka 84aad faqraddiisa (f) aqbalaadda xilal kale ee dawladeed waxaan ka hadlayaa sababaha lagu luminayo xubinnimada baarlamaanka federaalka Soomaaliya, waxaa meeshan si maldahan loo qoray oo la caynbaa ku qoran oo si cad aan loo sheegin waxaan rabaa qodobkan waxaan rabaa in la caddeeyo ma ogtahay haddii wax la dadaboolo hadhaw baa dib la iskugu qabsan doonaaye. Waxaa lagu sheegay qofka xildhibaanka haddii uu aqbalo xil dawladeed heerarka kala duwan ee dawladda aqbalaadda xil kale ee dawladeed ee heerarka kala duwan, waxaan rabaa in si cad loo qoro oo lagu caddeeyo in qofka xildhibaanka ah uusan qaban karin xil kale nuucuu doono ha ahaadee wasiir, wasiir ku xigeen.

Sidaan la soconno hadda waagii hore iyo qaababkii “gentleman agreement”-tiga ahaa golaha wasiirradu waxay ka imaan jireen golaha shacabka hadda senator-dii ayaa lagu soo kordhiyay oo wasiirro noqonaaya, waxaa intaas dheer xildhibaan dawlad goboleedku ka soojeedo wasiir ka noqonaaya, wasiir ku xigeen ka noqonaaya. Markaa taa iyadana in la “clear”-gareeyo si cad loo qoro oo la dhaho qofka xildhibaanka ah shaqadiisa waajibaadkiisu waxay tahay golaha shacabka ama senator-ka uu ka shaqeeyo shaqadiisu intaa ku eekaato, wixii intaa ka baxsan hadee shaqada xildhibaanada ha banneeyo rag iyo dumar kaloo ku shaqaynaayaa la helayaaye.

Markaa si cad oo “clear” ah ha loogu qoro ha dhaho. Wax xil ah nuucuu dooni ha ahaadee aan xidhibaan ahayn ma qaban karo qofkii sidiisa gaarka ah wuu u banaanyahay wuu shaqaysan karaa, laakiin xilal dawladeed ama shaqo oo “public” ah oo dad laoogu shaqaynaayo oo masuuliyad ah ma qaban karo.

Qodobka 85aad waxaan la qabaa xildhibaannadii sharafta lahaa oo iga horreeyay oo ahaa dhaarta sidii horay waadaxi ku ahayd oo ku caddayd oo si qurux badan ugu qornayd sideedii hore ha loogu soo celiyo.

Qodobka 87aad doorasho xileed la soo hormariyay ka hadlaya faqraddiisa 3aad waxaa ku qoran, madaxweynaha jamahuuriyadda federaalka ayaa soo saaraaa xeer madaxweyne oo lagu qabanaayo doorasho xileed macnaha xiligeedii laga soo hormariyey. Kaa isaga “clear” ma aha madaxweynahana hadda haddii uu kala dirayaa la dhaho nin ba maalintiisii waaye ku kastoo yimaadana xisaabtiisuu xiranayaa wuu iska kala leexinayaa dadka. Sidaa darteed waxaa ka

horeeyaan isleehay in maxkamaddii dastuuriga ahayd, in la dhiso in la dhammaystiro, maxkamadana go'aan ka gaarto haddiiba xaaladaha oo adag ay yimaadaan sidaa darteed waxaan qabaa inaan madaxweynaha jamhuuriyadda uusan kala diri karin ee baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka sSoomaaliya.

Isla qodobkaas waxaa ku jira faqraddiisa 4aad baarlamaanka xila ka degay ayaa sii haynaya awooddaha, qodobkaasi wuu is raacayaa inaan la kala diri karin ayaan ku soo koobayaa isagana ilaa saddex inaan loo baahnayn.

Qodobka 90aad faqraddiisa 2aad guddoonku inta uusan qaban xilka xafiiska guddoonka mid ka mida labada gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa inuu ka tanaasulo xil kasta oo rasmi ah uu ka hayo xisbi siyaasadeed xilkiisana u guto si dhexdhexaada inta xisbiyada laga gaadhaayo. Ururrada siyaasadeed ee hadda jirta waxaan isleehay qofka xisbiyo hadda loomaba gudbine inta looga gudbaayo xisbiyada, ururrada siyaadeed keliya ay jiraan waxaan isleeyahay inuu iska sii joogo xubintii ama urur siyaasadeedkii uu ku soo caanamalaayay ee meelahaa uu ku soo gaadhay inuu makhaayaddiisa iska sii dhex joogo oo uu ka shaqaysto hawshiisa aan laga qaadin, laakiin inta laga gaadhaayo.

Qodobka 93aad faqraddiisa (c) waxaan u malaynayaa inay soo hoos gashay oo aan la arkin in la caddeeyo bes ay u baahantahay, furitaanka fadhiga rasmiga ah ee kalfadhigaas baarlamaanka, madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka wuxuu kalfadhiga furayaa sanadkiiba hal mar la leeyahay. Taas waxaan umalaynayaa inay ka hoos baxdaan u malaynayaa guddiga kalfadhiga waa laba mar sanadkiiba markaa sida darteed labada ha lagu qeexaan leeyahay. Aadaad ayaad u mahadsantihiin salaamu calaykum wa raxma tulaahi.



**Sen. Zamzam Dahir Mohamud**

Bismilaah marka hore Asalaamu caleykum waraxmatulahi wabarikatuh qof kasta waxaan ku salaamayaa mansabka uu ku fadhiyo, ee baarlamaankii waxaad mooddaa, in xildhibannadii sharafta lahaayeen ay qofba qoladeedii ay la safatay arrinta ah guddoonka guddomiyaha golaha shacabka haddii uu kursiga ka degto wuxuu ku biirayaa xubin sharafeed baarlamaanka kamid ah, oo abadiyan ah ee anaga hadda dastuurka noogama qorno kuma jirto haddii lagu soo daro, laakiin wey furmeysaa oo ku xigeenka guddomiyaha aqalka sare ee 1aadna asagana ruuxiis wey soo gelaysaa haddii uu wasiir Bashiir Goobbe uu u dooday ku xigeenka labaad ee golaha shacabka, annagana waxaan codkeena ku biirinaynaa guddomiye ku xigeenka koowaad ee golaha aqalka sare inuu asigana xubin sharafeedkaas kamid noqdo hadduu Alle idmo haddii kale sidooda loo dhaafo.

Sidoo kale waxaan in aan ka hadlo qodobka 83aad ee ah shuruudaha xildhibaanimada baarlamaanka fedderaalka ah ee Soomaaliya xafkiisa "D" waxaa ku qoran da'adiisu tahay 30 jir hadii uu u sharaxanyahay golaha shacabka ama 35 jir haddii uu u sharraxanyahay golaha aqalka sare macnaheeda waxaa waaye 35 ka yar ama ka badan uma tartami karo aqalka sare 30 jir badan ama ka yar uma tartami karo golaha shacabka marka waxaan qabaa, in ladhaho uga yaraan da'adiisa tahay oo la isticmaalo 30 sano wixii kabadana markaas ay jaanis u helaan in ay

golaha shacabka u tartamaan 35 wixii ka billabanaysana in ay aqalkii sare ay u helaan jaanis in ay u tartamaan.

Qodobka 83aad xarafkiisa koowaad ee "E" ayadana waxaa qoran aqoonta laga rabo xeerka aqooneed ee laga rabo qofka xildhibanka noqonaayo ama senatarka noqonaayo baarlamaanka federaalka Soomaaliya ku soo biiraayo oo ayadana gadaal laga raaciyey inta la yiri marka hore leeyahay aqoon heer jaamacadeed oo la aqoonsanayahay markaasaa gadaal waxaa laga raaciyay ama waaya-aragnimo udhiganta waxaan qabaa intaas danbe in la tiro oo laga reebo la yirahfo jaamacad "bacholar" iyo wixii kasareeya oo jaamacad la aqoonsanyahay ah aad ayaad umahadsantihiin.



**Xil. Omar Ali Abdi**

Marka koowaad waxaan rabaa inaan sii daba dhigto middii hadda ay ka hadashay Sen. Samsam iyo Wasiir Bashiir oo ahayd xubin sharafeedka. Horta xubin sharafeed waxaa lagu ogaa madaxwayne oo keliya marka haddii la yiraahdo guddoomiye baarlamaanna halagu daro waxaa imanaysa guddoomiye kuxigeenkana halaga daro, waayo qof kastaba qabiil iyo deegaan ayuu matalaaye qof kastaba wuxuu oranayaa halagu daro marka waxay noqonee min 6 xubin sharafeed in sanad kasta lagu daro meeshuna xero geel ayay noqonaysaa marka waxaan qabaa, in madaxwaynaha oo keliya loo dhaafo.

Midda labaad waxaan rabaa inaan ka hadlo qodobka 82aad. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ka koobanyahay Golaha Shacabka oo 275 ah marka waxaan ku ogayn 277 oo ay ku jiraan 2 madaxwayne oo kala ah midka hadda jooga iyo midkii ka horreeyay, halkan kalana waxa ku taalla Aqalka Sare oo kala kooban 54 isla meeshaasna waxa ku qoran in madaxwaynaha laga dhigo Aqalka Sare iyo weliba xuquuqdii aan u doodaynay oo ahayd maqaamka Muqdisho, iyada lafteedu waxay xaq u leedahay mar haddii aynu isku raacno oo xildhibaannada iyo codayntooda wixii ka dambeeya in tiradan 54ta ah ay is bedasho ayay noqonee micnaha. Xildhibaannadii inaga horreeyay sidaad ogtihiin magaalada Muqdisho waxay u ansixiyeen 13 Senator in la siiyo marka tan lafteeda markaan ka doodna ayaa halkan lagu dari doonaa. Marka waxaan qabaa meeshan 54ta lagu qoray in laga tiro oo Aqalka Sare keliya la yiraahdo, 18ka gobol haddii lagu qaybiyana waxay noqonaysaa in Magaalada Muqdisho ay xubnaheeda hesho, laakiin deegaannadii kale oo aan anaga ka soo jeednnay oo halkan aan u joognay ama qabiil ha ahaato ama deegaanba ha ahaatee in xubno laga doono ayay noqonaysaa, anagana hadda inaan xubno raadino maahane in xubno nalaga jaro diyaar uuma nihin marka waxaan qabaa hadda iyo ku daristeeda in laga fikiro.

Qodobka 84aad ee ka hadlaya xildhibanka inuusan qaban karin shaqo kale waan adkaynayaa, waxaan adkaynayaa xildhibaanka inuu ahaado xildhibaan. Hadduu senator yahay inuu ahaado senator oo aan loogu darin wasiir, waxaan qabaa inay kala madaxbannaanaato baarlamaanka iyo hay'adaha fulinta si dadka khubarada ah ee bannaan joogga ay ugu shaqayn karaan dawladnimada. Waxa laga yaabaa hadda inaan ahay wasiir sidoo kalena aan ahay xildhibaan, wasiirnimadana aan ku qaatay inaan ka tirsanahay baarlamaanka marka qof cilmigeeda iyo shaqadeeda leh in lagu ixtiraamo qof banaanka jooga shaqo abuurna way tahay, dawladnimadana way u fiicantahay, madaxbannaanina waa la helaa hadii Ilaahay yiraahdo

marka qodobkan 84aad sida lagusoo qoray ayaan ku adkaynayaa anigoo weliba ah wasiir ka tirsan xukuumada.

Qodobbada aan rabay inaan ka hadlo maanta waa qodobka 95aad wixii ka dambeeya, kuwaas oo ah awoodaha ka dhexeeya aqalka sare iyo golaha shacabka oo aan dood badan ka qabo, laakiin dooddaas waxaan u dhigan doonaa marka ajendahaas la soo diro, hadda ajendaha wuxuu ku egyahay qodobka 95aad. Sidoo kale dastuurka hadda jira oo qabyada ah oo aan ku soo dhaqmaynay waxyaabaha wareeriyay wuxuu ahaa albaab iyo dariishad oo mid kasta meeshu rabo uu ka gelayay, isla sidii anaga oo rabna inaan ka gudubno oo aan u gudubno dastuur dhammaystiran oo dadka kala xadida haddii inta qodob la soo qaado la yiraahdo go'aankaas waxa loo gaaraa sidan iyo sidan oo marka u dambaysa la yiraahdo sida uu dhigayo dastuurka. Dastuurka wuxuu dhigi karaa qofba wuxuu ku doodayo, hadda tusaale ahaan qodobka 93aad markaan ka doodayo "haddii si kale uu u dhigo dastuurku" ayaa la yiri, qodob kale ayaan marka aadi karaa oo aan qof ku eedayn karo, marka waxaan qabaa waxyaabaha noocaasa halaga dhaafo. Waanad mahadsantihiin.



**Xil. Asha-kos Mohamud Omar**

Mahadsanid guddoomiye,waxaan dib inoogu celinayaa cutubkii 5aad ee la soo dhaafay oo nasiib aan u yeelan dooddiisa, taas oo laba qodob keliya rabo inaan xoogga saaro oo midi tahay halka layiri hal maamul goboleed kuma jiro oo shalay uu u akhriyay guddoomiyuhu in maamul goboleed hal gobol uu noqon karo iyo ka badan in lagu qoro, waayo muwaadiniin Soomaaliyeed ayaa raba inay kamid noqdaan dowladda federaalka Soomaaliya oo ugu horreeya gobolka Banaadir oo baaxad weyn leh oo aad aragteen inta uu la'eg yahay iyo inta uu yahay iyo gobolada qaar ineyn la ekayn inta degmo halkaan ka dhisan.

Tan labaad, waxay tahay anigu waxaan qabaa xulashadii 2aad ee gobolka Banaadir xulashada loogu sameenayay oo ah inuu yeesho maamul goboleed waajibaadkiisa leh, kaas oo bulshada matasha gobolka Banaadir ay xaq iyo xuquuq uleeyihiin.

Mudanayaal sidaad ogtihiin baarlamaankan baarlamaankii ka horreeyay waxa uu ansaxiyey 13 xubnood oo matalaad ay leeyihiin gobolka Banaadir waxaana lagu ansaxiyay cod aqlabiyad leh, madaxweynaha jamhuuriyadda ayaa loo gudbiyay qoraalkeediina hadda wuu yaalaa.

Xulasha 1aad haddii la qaadanayo waa in 13kii xildhibaan ee Sent-ahaa ee gobolka Banaadir lasiiyay sidiisa lagu muujiyo haddayna aheyna waa inay matalaadooda helaan oo ay maamul goboleed siiyaan taasaan ku soo koobi lahaa.

Midda kale haddaan ka hadlo qodobada halkaan ku xusan Qodobka 82aad wuxuu kahadlayaa baarlamaanadu inta ay ka koobanyihiin golaha shacabka waa la ogyahay 275 waa siday dastuurka ugu qoranyihiin, laakiin waxaa ku soo biiray madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo markaa noqday xubin, xubintaasi ma'ahayn xubin sharafeed xildhibaanimo.

Guddoomiye Jawaari Alle ha unaxariistee, wuxuu kacaddeeyay baarlamaanka hortiisa oo duuban madaxweynuhu xuquuqdiisa, waajibaad uu gudan karo hadday tahay doorasho iyo inta

xildhibaan waajibaad uu ku leeyahay inuu leeyahay hadday tahay gunno iyo waxkasta. Taasina waa mid qorneyd dastuurkana halaga eego gudoomiye Jawaari maalinta uu madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud madaxwenimo loo dhaarinayey intaas ayuu noo sheegay, madaxweynihii 2aad ee ku xiga wuxuu ahaa madaxweyne Maxamed Abdullahi Farmaajo sidoo kale intaas ookale waajibaad ayuu leeyahay.

Haddii madaxweynaha uu soo galo oo uu yimaaddo oo uu qaato wuxuu noqonayaa xubin kamid ah qalka sare oo waajibaadkeeda yahay, inta xubinta la soo doortay ayay leedahay haday tahay xaq oo mushahar ah iyo hadeday tahay cod bixin taasina waa taas.

Mudanayaal waxaa jira maamulo soo kordhay oo maamul goboleed ah, oo curdin ah, oo aan lahayn matalaad guriga ay ku matalaan tii aan aheyn middii qabiiladooda ku soo doorteen, laakiin hadda maamul dhisay. Anigu waxaa soojeedinayaa Qodobka 54aad halagu saleeyo maamul goboleedyada soo kordhaaya in lagu saleeyo oo laga daayo 54tii.

Waayo 54 waxay ku dhisan tahay 18kii gobol ee Soomaaliya oo min seddex gobol ah, lagumana haysto 18kii Soomaliya oo min seddex ah, dad baa caddaaladdaro wax ku haysto dadna way ku qatanyihiin, taasna waxaa leenahay bulshada haddii loogu hiilinaayo yaan shaar la'eg latolonin haloogu hiiliyo bulshada Soomaaliyeed ee soo galaysa maamul goboleedada.

Haddii aan ugallo Qodobka 84aad dhaartu, waa dhaartii nalagu soo dhaariyay lagu dhaariyay madaxweynayaasha guddoonka lagu dhaariyay, waa dhaartii hore dhaartaan dambe hala dhaafo, dhaartii hore hanalagu dhaariyo.

Waan soo koobayaa farqad kasta idinkaa akhriyay xildhibaanno hortiina ayay taallaa, waa qodobk 84aad iyo 85aad. Haddii aan kahadlo qodobka 87/3aad wuxuu leeyahay madaxweynuhu markii xaaladi timaaddo inuu kala diraayo baarlamaanka, baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa baarlamaanka doortay madaxweynaha hadduu ku yimaado xisbi iyo hadda waxa qoran in uu dalku yahay “parliamentary”baarlamankuna uu dooranayo madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya sidee buu madaxweynuhu ku kala diri karaa baarlamaankii doortay? Hora u laalnay qodobkaas, aniga siday ila tahay waa laalis, wax loo cudurdaaro oo loo sameeyo malahan qodobkaasi waa laalis qodobkaas qofkii ku soo darayna wuxuu ugu soo daray inuu isku xidhnaado sharcigu madax iyo mijaha iskaga duubnaado qodobkaas sidiisaba waa laalis.

Waxaa jira waajibaadka lakala siiyay xildhibaannada golaha shacabku waajibaadku uu leeyahay intii uu horay ulahaa baa laga yareeyay xaq waxaan uleenahay annaga raysalwasaaraha aan ansixinno iyo xukuumaddiisa inaan u yeeri karno oo ka imaan karta golaha shacabka kor joogteyntiisana annagaa leh inaan la xisaabtanno oo kor joogteyntiisa aan lahaano annagaa leh, sidii dastuurka madaxweynaha iyo raysalwasaaraha qoorta isku geliyay labada aqal yaan qoorta la isku gelin.

Waajibaad kooda haloo kala caddeeyo, midda kale soojeedinta “Ambassadors” yada iyo taliyaasha ciidanka waxaa iskaleh wasaaradaha xukuumaddaa leh, soojeedinta “ambassadorada” Waxaa iskaleh wasaaradda arrimaha dibadda golaha wasiirrada ayaa u codeeya madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ayaa loo geeyaa sidaas ayaa lagu soo saaraa.

Taliyaasha ciidanka wasaaradda amniga ayaa keenta soojeedinteeda golaha wasiirrada ayaa u codeeya madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya talo ayuu ku leeyahay waa loo geeyaa, bahasha feeraha yaa laga rarin ummadda yaan la isku xirin, waxay xukuumaddu xaq uleedahay yaan la hoos geenin golayaasha baarlamaanka, golayaashu waa sharci dejiyaal shaqadana wey kala leeyihiin.

Shaqada wadajirka aan leenahay waan wada qabaneynaa, qodobka 88aad xeerhoosaadka halagu soo celiyo qodobkiisii 68aad, waayo majiro xeer hoosaad labada aqal ay leeyihiin oo wadajir ah annagoo labada gudi u dhan ayaan guddoonka baarlamaanka u tagnay aqalka sare iyo golaha shacabka oo hadda qaar fadhiyaan waxaan dhahnay waxaan dhisaynaa xeer hoosaadkii ayaan sameenaynaa ee labada guddi wayna suurtageli weyday inta laga sameenayo xeer hoosaad lagu shaqeeyo gole kasta xeer hoosaadkiisa haku shaqeeyo.

Mudanayaal waxaynu nahay xildhibaanno Soomaaliyeed waxaynu dejinaynaa waa sharcigii dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ma ahan inaan heyb wax ugu raadino haddii la yiri, guddoomiyaasha aqalka halagu daro 1aad, annagana waxaan soojeedineynaa cod buuxa kuleenahay guddoomiyaasha lixda ah oo kuwada yimid cod aqlabiyad leh baarlamaanku doortay lixda guddoomiye haddii wax lagu daraayo toos ha ugalaan.
Wabillahi tawfiiq.



**Xil. Mohamed Harun Abdillahi**

Bismillaah wasalaatu wasalaamu calaa rasuulillaah guddoomiye aad baad u mahadsantahay.

Qodobka 82aad farqaddiisa 3aad oo ka hadlaysa, in madaxweynaha noqdo xubin sharafeed aqalka sare ah, waxaan talo ku dari lahaa in guddoomiyeyaasha labada gole Baarlamaanka, aqalka sare labadaba ama golaha shacabka labadoodaba inay noqdaan labo xubin sharafeed. Waan maqlaayay dad baa lahaa guddoomiye ku xiggeenada haddii ay rabaan ayagana guddomiyeyaal ha u yartamaan marka labada guddomiye laba odey oo iyaguna dalka u shaqeeyay sida madaxweynaha, in iyagana lagu daro ayaan qabaa.

Tirada aqalka sare oo 54 ah yaan la taabtaabanin maalin walba inta maamullo la sameysto haddana laga raadiyo matalaad iyo waxaasi waa sad bursi Soomaali bayna sii kala dileysaa, 54taa baa sida hadda loo qeybsaday lagu kala qanacsaneen, marka yaan lataabtaabanin, haddii lataabtaabanaaya dhammaan waa wax inoo wada kordhayo yihiin cid gaara yaanay ku kala gorgortamin, si walba suurtagal noqon meyso.

Qodobka 84aad oo ka hadlaayay golaha wasiirrada shalayna waan caddeeyay maantana waan ku celcelinayaa marnaba suurtagal maaha inuu dalkaani xuluumad shaqeyso oo waxtar yeesho iyadoo golaha wasiirradu iyo golaha Baarlamaanka leysku dhafan yahay, golaheena xukuumaddu wuxuu ka kooban yahay 78 xubnood dal adduunka la mid ah tiradaasi oo kale oo "cabinet" ah ama xukuumad leh majirto China iyo Hinda ugu dadka badan adduunka malahan xataa tiro intaa le eg, sababtana waxaa qasbaya xildhibaannadan wada wasiir raadiska ah oo

madaxweynaha iyo raysalwasaare kasta markaa joogaba ku khasbaaya iyo inay golahan soo galaan iyaguna xukuumaddooda mid steple u noqoto wuxuu ku khasbanaanayaa inuu golahii ballaariyo 78 xukuumad laguma sheegi karee waa gole kaloo baarlamaan, marka marnaba maqabo iney labadaas gole isku milmaam.

Qodobka 87aad faqraddiisa 1aad oo ka hadleysay kala diridda ama doorasho xilligeeda la soo hormariyay waxaan qabaa in laga dhigo sanadka 5aad, madaama dastuurkaan qodobadiisa hore aan ku soo sheegay muddo xileedka inuu shan yahay, haddii marxalado timaaddo haddii la filaayo inay abaaro filan karaan xilliga doorashadu ku beegantahay haddii si kale saadaashu aynu fiicneen ama xaalado kaloo xasaasi yimaaddaan sanadkaas 5aad fursadaas laha siiyo madaxweynaha inuu kala diri karo golaha lakiin inta ka horeysa uuna kala dirin karin waxaan qabaa 2daa sano halka ay ka yiraahdeen saa hala yiraahdo 4ta sano makala diri karo, laakiin sanadka 5aad waxa uu haystaa "option" ah inuu kala diri karo.

Qodobka 89aad oo ka hadlaaya kalfadhiyada Baarlamaanka oo sidaan horay u soo ogeen ahaa laba kalfadhi midkiiba 4 bil yahay waxaan qabaa, in laysku daro 9 Bilood oo xiriir ah inuu golaha fadhiyo kaddibna saddex bilood oo fasax ah, in la galo waad ogtihiin markaan 4 bilood shaqayno golaha uu fasax galo inay soo noqdaan hadda wakhti kale ayay qaadataa bilo badan baa ku lumo marka wakhti badan baa ku luma, markaa fadhigaa gola in laga dhigo xiriir kaddibna uu golaha uu saddex bilood oo deegaan doorashadiisa uu ku noqonayaa ama hawlo kaluu qabsado oo fasax ah uu galo.

Qodobkaa 91aad oo ka hadlaaya sida guddoonka lagu dooranaayo faqraddiisa 2aad xarafkiisa (a) waxad ka dhigteen inuu noqdo saddex meelod oo laba saa maqabo, waxaan qabaa, in laga dhigo hal dheeri siduu awalba ahaan jiray guddoomiyaha boqolki 50 iyo plus hela inaan ciddii fursad heshaa laga hor istaagin ee la oran markalaad wareg kala galee haddii uu wareegga koowaadba heli karo ciddii musharrax ah inuu asaga sidaa ugu guulaysto aan la oran wareeg kalaa la gelaya ma qabo sidaa aad ka soo dhigteen tiraahdeen saddex meelod oo labo. Waad mahadsantihiin guddoomiye.



**Xil. Mohamud Abdulkadir Haji**

Salaan kaddib. Maanta waxaan ka hadlaa cutubka 6aad, qodobka 82, aqalka sare, dastuurka hadda aan rabno inaan ka guurno oo ku meel gaarka ahaa, qodobkiisa 72 ayaa sheegaayo sida aqalka sare 18-ka gobol in lagu saleeyo, laakiin nasiib darro ma aysan dhicin 18-kii gobol in lagu saleeyo, si gaar ah ayaa loo qaybsaday, Gobolka Benaadirna matalaaddii uu lahaa lama siinin. Baarlamaan kaan baarlamaankii ka horreeyay ee 10aad wuxuu meel mariyay, in 13 xubnood la siiyo, tiina way socon weysay, marka sidaas darteed, haddeerna qodobka 82aad, waxaa lagu sheegaa in 18-kii gobol lagu saleeyo, aqalka sare, laakiin waxaa noo muuqata sidii horre uun inay meel taal, marka waxaan soojeedinaa xildhibaannada sharafta leh oo la rabaa inay nagu taageeraan, in shanta beylood loo qeybsado, wax dhib ah, cunfi inuu ka imaanaayo u malayn maayo, because golihii wasiirrada waxaa lagu qaybsadaa shanta beelood, culasysna kama jiro sidaas darteed marka haddii tirada la kordhinaayo iyo haddii tirada maanta la heesto lagu qeybsanaayo, waxaan qabaa in shan beylood lagu qeybsado golaha aqalka sare, in dadka ay sinnaadaan.

Maanta dad marxaladdii lagu qaybsan jiray xukunka dal kaan, waa laga soo gudbay maanta, xilligii dal kaan maslaxaddiisa lagu qaybsanaayay kuraasta, waa laga soo gudbay. Maanta waxaan rabnaa kuraasta in si siman loo qaybsado, aqalka hoose ee golaha shacabka way tegi doontaa, laakiin hadda marxallada ugu dhow ee wax laga qaban karo waa midda aqalka sare, waxaana soojeedinaa in aqalka sare sidaas loo qaybiyo. Isla cutubka 6aad, qodobkiisa 84aad, xildhibaanka xubinnimada baarlamaanka shuruudaha uu ku weyn karo waa la soo taxay geerida, in istaqaalo uu dhiibo, waa la sheegay, laakiin tan haddii xil kale uu qabto, xildhibaanka wuu weynaa xildhibaannimadiisa, xoogaa waxaad moodaa inay hoos gelis tahay sidaas darteed, in waxa la qeexo oo la caddeeyo ayaa fiican. Xildhibaanno iga horreeyay ayaa halkaan ka sheegay, in lakala qaado qofka hadduu xildhibaan noqdo inuusan wasiir noqon karin, qofkii ugu dambeeyay ee hadda saaxiibkay Cumar Cali Cabdi aa ka hadlay xildhibaanka wasiirka, waxaad mooddaa xoogaa inuu ma aqaan, culays miyay ku noqotay, marka niicda waa kuu ballaaranee Ilaahay haddii uu yiraahdo, hakala qaadin, marka in qodob kaas laga saaro, sidiisi horreyto loo sii daayo xarafka (f), totally in laga saaro meesha ayaan soojeedin lahaa sidaas darteed marka waxaan rabaa Soomaalida maanta sidaan horray u sheegay, marxaladihii horrey loogu soo gudbay in awood qeybsiga 4.5 iyo waxyaabaha la midka ah waa lagu soo caanamaalaayay, laakiin maanta in laga gudbo ayaa fiican, Soomaalida waxay tiraahdaa: "Keyga anigaa iskaleh kaagana kula lihi" wax sax ah maahan.

In goboladii dalka oodhan matalaad helaan, inay xuquuq helaan, Gobolkii Benaadirna uusan xuquuq helin, haddana haddii la yiraahdo waa laga hadlaa Gobolka Benaadir ama dooddiisa ayaa la keenaa qofwalba uu darafka ku dheggen yahay uu leeyahay sidaan suuragal maahan, kiisana wuu haystaa oo meel buu u yaalaa, kii kaleeto oo aan waxba haysanna, inuu wax qabsado looma ogola sidaas darteed waxaan soojeedinaa in darfaha looga fuqo Gobolka Benaadir, qof walba oo Soomaaliyeed ayaa xuquuq ku yeelan karo, waa loo ogol yahay, anagii deegaaan kaan nalagu tirinaayay ayaa xuquuq la'aan ah, marka in culeyskii ina saarnaa in la sii laba jibaaro oo culeys kale la sii saaro oo dooddiisa maalin walba ay noqoto marxaladii dalka oodhan laga hadli lahaa, in Gobolka Benaadir culeys la sii saaro oo dadkii canshuur bixiyayaasha ahaa aysan xuquuq helin sax maahan, gaar ahaan dadka aniga aan matalo kuma lahan aqalka sare matalaad, Beesha Shanaad wax firdhis ah ayaa laga siiyay oo quursi ah oo la leeyahay hal qof ama wax la mid ah hala siiyo, wax sax ahna maahan, Beelaha oo Beesha shanaad ay ka kooban yihiin way badanyihiin, laakiin gaar ahaan dadka aniga aan matalo oo Gobol kaan Benaadir deggan oo aan looga ogoleen in maamul goboleed wax qeybsi laga soo siiyo, haddana in Gobol kaan Benaadir lagu sii dhibo oo la yiraahdo, Gobolka Benaadir matalaad ma helaayo, wax sax ah maahan, Soomaali ayaan u gardhiganaynaa maanta, anaga waxaan rabnaa matalaad sax inaan helno oo nalaga dhaafo keyga anigaa iskaleh, kaagana waan kula leeyahay. Waad mahadsantihiin. Asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu.



**Sen. Abdihakim Moalim Ahmed**

Bismillahi Alraxmani Alraxiimi, Alxamdullailahi Rabil caalamiin wasaalatu wasaaalam calaa rasuullilahi.

Guddoonka sharafta leh, xildhibaannada, waxaan rabaa inaa hore u galo qodobadda, waxaan umaleynayaa, waxaa naloo sheegay shantiriskii la

ansixiyay ee baarlamaanka ansixiyay ku qornaa, qodokan ee cutubkan ilaa qodobka 95aad inee dooddu hadda ku salaysnayd, marka inagu waxaan ku joojinay, ama aniga shaqsiyan ku joojiyay, Meesha ay dooddu ku salaysnayd, qodobka kale iyo wixii ka danbeeya waxaan rejaynayaa markii la furo ayaan u gudbi donaa.

Cutubka 6aad qodobkiisa 80aad, farqadda ugu horraysa ee 1aad waxaa la qoray, awoodda sharci dejinta waxaa iska leh Baarlamaan Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, marka aniga waxaa keliya oo aan raacsiiye, in la dhaho in lagu sii adkeeyo ee raali ahaada. Awoodda xeerdejinta qaranka waxaa u xilsaaran Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka oo keliya in la raacsiiyo, cid kale oo xaq u leh inee sharci dejiso inaysan jirin, isagoo leh cid kale nala yeelan kartaa marka taa waxaa dhahay kalmadaa raaciye.

Qodobka 82aad ee farqaddiisa 3aad xeerka gaar ah ee lagu nidaaminayo madaxweynaha, waxaa la yiri marka uu xilka ka dego wuxuu ka mid noqonayaa xubin sharafeed Aqalka sare noqonayaa, xeer gaar ah lagu nidaaminayaa xeerka gaarka ah ee lagu nidaaminayo lama sheegin, cidda dejinaysa cidda laga sugaayo oo soo qorayso lama sheegin.

Marka ani waxaan qabaa, in la yiraahdo maadaama Aqalka Sare aad u wareejiseen madaxweynihii inuu member ka noqdo, in Aqalka Sare uu sameeyo xeerka lagu nidaaminaayo, maxaa la yirahdaa madaxweynaha kamid noqoshadiisa, marka in la qayido oo laga dhigo, Aqalka Sare samaynaya, beddel uu is ka furnaa lahaa, hadhow awooddiisa la isku qabsan lahaa cid samasay aan la garanayn aan dhihi lahaa, haddii Baarlamaanka la leeyahay si kastaba la caddeeyo, laakiin aniga aragtideyda waa in Aqalka Sare la yiraahdo.

Qodoka 83aad farqaddiisa kowaad xarafkiisa D iyo F iyo G saddexdaba wax baa ka iri. Mida ugu horraysa waa xaraf D xubinta Aqalka Sare noqonaysa iyo xubinta golaha shacabka, xildhibaan noqon kara, midna waxaa la qoray 35 Aqalka Sare golaha shacabkana waxaa laga dhigay 30, aniga waxaan qabaa in loo daayo 25 kiisii si dhallinyarada loo siiyo doorkooda oo ay u helaan, ee maxaa la yirahdaa marwalba waxani waxaa la aadi donaa doorasho qof iyo cod ah, haddii Ilaahay yiraahdo, sida looga fakarayo iyo go'aankeeda ay gacan ku jira, dad gaara ma noqon doonto ee waxa uu aadi doonaa shacabka Soomaaliyeed, marka qofki kifaa adiisa iyo (capacity) giisa leh ama dhallinyaro ha noqodo ama ha weynaado inuu xaqiisa laga tuuro ama laga dalfiyo maqabo marka waxaan qabaa in la yiraahdo loo daayo dhallinyarada oo dhan inay ka qaybgeli karaan 25 lagu celiyo.

Qodobka kale oo maxaa la yiraahdaa; kala duwanaashaha xagga khibradda, saddex sano iyo shan sano laga kala dhigay, ee labada aqal haddii Aqalka Sare Khibrad ka badan golaha shacabka looga baahan yahay, waxay ahayd in waajibaadka iyo howlaha mas'uuliyaadka naftirkiisa iyo "issues" ka waa weyn ee go'aamada laga gaarayo, ayada naftirkeeda Aqalka Sare loo raro, ileen hadda khibraddii xaggaa geyseen ma ogtahay, haddii shan sano khibradda Aqalka Sare laga rabo ee tahay waxyaabaha waaweyn iyo malafaadka culculus Aqalka Sare geeya, malafaadkiina waa soo rarteen oo in badan halkan keenteen, xaggiina khibraddii baad la aaddeen, waxaa tiraahdeen inta waxaa laga rabaa saddex sano xaggana shan sano marka caddaaladda hala aado, ayaanta guddiga meel kale ayaan ku sheegi doonaaa.

Waxaa jira qodob kaleeto, oo asagana waxaa ka hadlaya qodobka 83aad farqaddiisa kowaad, xarafkiisa G waxaa lagu daray qodob hal beeg ah, oo xubinta daacadnimo iyo amaano,

daacadnimo iyo amaano lama qiyaasi karo, daacadnimada iyo amaanada wax la taaban karo maaha, hal beeg ma noqon karo wax lagu xusho, qofkasta, waa daacad qofkasta alle ayuu ka cabsadaa, qof walbaa waa wanaagsanyahay waa suu isu arko, marka ka tira aniga uma arko dastuurka daacadnimo iyo amaano lala aado oo qofka lagu soo xusho ee xildhibaan in uu ku noqon karo inuu daacad yahay inuu amaano badanyanyahay hal beeg (logic) ah ma aha bay ila tahay, kaana in laga tiraan qabaa.

Qodobka 84aad xarafkiisa G marka la joogo, mudadda xilheynta dhammaadka, ee waxaa lagu daray inuu xubinnimada ku waayi karo qofku in muddo xileedka uu dhammaado, muddo xileedka marka uu dhammaado xubinnimada xildhibaanka waa weynayaa baa la yiri, halkaas waxaan rabaa in iskortaago, waxa ka dhalanaysa waajib, horta markii xubin muddo xileedkaagu markuu dhammaado hadda sida wadankeenna ku jiro, xaaladaha iyo daruufta waa la socotaan, ee qajajacdaas iyo qabqabsigaas maalin walba yimaadda, waxaa si caadiya la shegaa inuu Baarlamaanka, Baarlamaan kale beddelo inay tahay, laakiin in aanay go'aynin qofkii xuquuqdiisii iyo waajibaadkiisii muddo xileedka, haddii aad tiraahdaan, haddii la yiraahdo marka uu dhammaado muddo xileedka wuu weynayaa xubbinimadiisa, "automatically" inta dastuurka u qeexayay ama afar sano ha noqoto, ama shan sano ha noqoto, markee dhammaato waxaa ka dhalanaysa inuu xuquuqduu lahaa qofka go'do, waajibaadka lagu lahaana go'do ilaa xubinimadii buu waaye marka waxaan qabaa qodobkaa inaan halkaa lagu qeydin xubinnimada waxa qofka ku "loose" garayn karaa Dhimashada, istiqaalada inaa lagu darin qabaa ee qodobkaa laga dhaafo oo laga tiro haddii kale (automatically )waxey noqonaysaa xubinnimaday ku xernaanayaan xuquuqda iyo waajibku, sidaa darteed Dastuurka cidna maalin walba ma saxayso wax la taaban karo manoqoneyso taasna intaa baa ka dhihi lahaa.

Qodobka 85aad Dhaarta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa xildhibaannada dhaarinaya ayaa la yiri, haduu safro, hadduu xanuusado, haddii si kale wax ka noqdaan, hadduu diido, wax beddela majiro waxaa qoran keliya waxaa dhaarin kara keliya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare marka "at least" ama qof uu u wakiisho, in la yiraahdo si kaleeto haddii asaga daruuf qabsato, cid kaleeto oo baddeli karto inee jirto ayaa fiicnaan lahayd, marka keligiis meesha ku qoran waa sax isagaa aaminsanahay, in uu yahay qofka xaqa u leh, laakiin de haddii la waayo waa in ay jirtaa cidda ka naa'ib noqon kartaa beddelkiisa geli kartaa.

Qodobka 87aad dhaarta naftirkeeda siiqada ay u qorantahayna, yara waxaa soo jeedin lahaa in la qurxiyo oo lagu noqodo. Qodobka 87aad farqaddiisa 1aad, waa la qaban karaa baa la yiri doorasho xilligeeda ka soo hormartay, meesha la yiri farqadda 1aad, lama qaban karo 2 sano ugu horraysa, doorasho xilligeeda ka soo hormarti, anugu waxaan qabaa bisha 1aad ama bisha 2aad ama bisha 3aad baa la qaban karaa, doorasho xulligeeda ka soo hormarta, laakin doorasho xilligeeda ka soo hormarta la qabanayo sidee bey tahay? Sidee u ogaan kartaa? Goor mee tahay in la qabto? Ma qeexayo qoraalka aad soo sameyseen ma u qeexayo, aniga waddan ku markuu axsaab yeesho, xukuumad la dhiso, xukuumadda la dhisi waayo, axsaabtu hadduu hal aqlabiyad ku guu leysan waayo, haday suuri taawi weyso inay isku tagaan dowlad mid ah dhisaan, maalintaa waxaa lagu qasbanyahay in uu Madaxweynaha idmo, ama uu soo saaro xeer uu ku kala dirayo Baarlamaankii, si aqlabiyad cusub xildhibaanno cusub ay u samaystaan, laakin ayadoo taasi imaanin wax kaloo meesha ku qorteen mugdiyaa ku jira wax la fahmi karo ma ahan, haddii marka aad u jeeddaan, haddaa taa ujeeddaan waa inaa sidaan loo saxaa, doorasho wakhtigeeda ka soo hormartay waxaa la qaban karaa keliya, haddii xisbi aqlabiyad waayo, ama axsaabtii ay ku heshiin waayaan inay xukuumad wada dhistaan, markaa kaddib ijaraa-aadka

ka leeto iyo talaa waddooyinka madaxweyna loo siyo inuu qaado waa waafaq sanahay, laakin sababta waa inaa sidaaan loo caddeeyaa, haddaysan ahayn waa in meesha laga saaraayo laga tiraa, waxaa ogaataan maaalin walba in madaxweyne masuul ah ama qof masuul ah dalka ma joogo, mid baa xanaaqaya qalinkiisu iska qabsanayaa wuu kala dirayaa, marka maalin walba, in baarlamaan ladumiyo hadda waddamada Carabta marbo inaa magaciisu aan sheego, laakin mid ka mid ah inkii xoqday baa qoraal u soo saaray 5 sano soo socota xildhibaanno lama dooran karo ayuu yiri, kii joogana waa kala diray 5 sanoo soo socotana wuxuu galiyay hakad, in Baarlamaan la doorto, waa Baarlamaan la'aan, marka inaa taas oo kale is ka noqonno waxay ku xerantahay hadba qofka masuulka joogo sida uu u dhaqmo, yaan albaabo aan la jeri karin la furin.

Qodobka 90aad shuruudaha. Doorashooyinka marka laga hadlaye, sifiican in leega *note*gareeyo ayaan jeclaanlahaa, farqadda 1aad xaraf kiisa G waxaa lagu qoray, waxaan qabaa horta in la tiro, wax macnaha ay soo kor dhinayso qodobkaasi ma jiro, waxaa la yiri marka qodob kaasi la soo akhriyay, qodobka 90aad xarafka G waxaa ku qoran waxaa laga hadlayo waa shuruudaha doorashooyinka Baarlamaanka fadaraalka, shuruudaha kale ee ku xusan xeerarka kale ee dalka ayaa ka mid ah markii la soo tiriyay, qodobbada la soo tiriyay, dastuurku ma daliishan karo xeerar kaleeto asagaa ugu weyn, marka yay tahay shuruudda kaleeto kadambeyso uu dhaliishanayo, oo lagu gaarayo loo firinayo doorashada guddoonka haddii asaga dastuurkii la xadido, dastuurkaa ugu weyn asgaa la tiirsadayo laga dhigtaa, laakin isagii baa cid kale xiganaysa, anugu cod kale ayuu asagii xiganayaa magaranayo, shuruudihii markii la soo tiriyay waxaa loo gadaal mariyay, shuruudaha kale ee ku xusan xeerar ka kale ee dalka, hadde iga qarsoontahay dey adigaa garanaysaan, aniga waxay ilatahay in qodobkan meesha laga saaro,

isla markaa qodobkaa 91aad doorashada guddoonka, waxaan qabaa waxaan qabaa, in lagu daro faqro kale, oo dariiqa uu marayo marka qofka la dooranayo, xubno badan markay yihiin sida ay isku kala reereebayaan ayaa la soo sheegay, ilaa markii ugu dambaysay 2 qofood ay noqoto, laakin markii 2 qofood markay yihiin cidda tartamaysa ma wareeganaa lamarayaa, aniga waxaan qabaa markii 2 qofood yihiin, in la yiraahdo musharrixiinta tartamaa yiyihiin 2 musharrax waxay kukala baxayaan cod hal dheeri ah, afar wareeg in lamaro ayadoo musharrixiintu marka 1aad ay labo yihiin ma u malanayo in "logic" tahoo caqligu keeni karto, wayne dhacday marar badan qalad jeedin wuu dhacay, marka waxaan qabaa in la yiraahdo labada musharrax, haddii musharrixiinti noqdaan 2 kaleya, waxay ku kala baxayaan "automatic" kali cod hal dheeri ah, wareegga 1aad ba, lama marayo firqoyinka A, B iyo C lama marayo.

Qodobka 92aad xil weynta Guddonka, Guddon ka marka xilka weynayaan waxaa la sheegay, mar walba Soomaalidu marka ay doodaha ay galayaan hal beeggoda waa qofka kursiga fadhiya, hadduu yahay xildhibaan asagaa mooda in laga hadlayo, hadduu guddoonyahay asagaa mooda in laga hadlayo, hadduu madaxweyne yahay, hadduu wasiir yahay, qof walbaa, anagu qof kama hadlaye dastuurka Soomaali ayaan wax ka dhahayaa, marka guddoonku ha igaraalli noqdeen hadduu hadal keygu kiiraben uu noqon waayo.

Qodobkaan xil weynta Guddoonka horta markii la qorayo waxaa la yiri, waxaa lagu dooranayaa cod hal dheeri ah, oo qof guddoomiye ku noqon karaa wareegga udambeya, marka ugu ganbeysa 2xubnood oo tartamayaa guddoomiye qofka ku noqon karaa cod hal dheeri ah, laakin marka xilka laga qadayo waxaa la yiri 2 third ayuu u baahan yahay, oo wixii lagu keenay

muuku waayo xilka, maxaa keenay cod hal dheeri ah ku yimaaddo, laakin xildhibaannadii soo doortay 50+1 hadday maya, dhahaan kuwa shalay keenay, xilka ma weynkaro caqliga insaanka ayaadidaya, marka aniga waxaan qabaa dastuurkii horayna waa ku qorneed, laakin qodobkaan in la soxo, oo lagu saxo waxa uu ku weynayaa sida uu ku yimid, cod hal dheeri ah ayuu ku yimid, cod hal dheeri ah ayuu ku weyn karaa, sidaas in lagu saxo aan qabaa, oo laga daayo 2 third-ka lala aaday.

Waxaa tagayaa 92 farqaddiisa 1aad xarafkiisa E, qodobka 93aad kulamada wada jirka ah farqaddiisa saddexaad, waxaan qabaa in inta dambe laga tiro oo dhahaysa haddii aan dastuurka si kale aan u dhigin, dastuurka waa kan aan ka hadleno adaaba qortay halkaan baa ku qortay waaba caddaysay, siduu u qoran yahay marka si kale oo dastuurka udhigi karaahi ma jirto, wax yaabaha albaabyada luuq yada laga soo gelikaraa dastuurka halaga daayo, marka si kale u dhigi karana halaga dhaafo, taa halaga tiro.

Qodobka 93aad kulamada wadajirka ah farqadda 5aad guddoonka labada gole marii laga hadlaya, waxaan soo jeedinayaa xarafka D iyo E, Burhaan iyo Xuseyn Eyow "coffee" gina way naga dhammeyeen, waxii oo dhanna magaranayo waan ku qasaarnayoo meel kalee u rareen, haddaan nahay Aqalka Sare, marka xogaa waxaad moddaa sifiican ay noogu shaqeysteen, bal horta awoodaha 2 Aqal in la qeybiyo "at least" wax lesku reebo ayay u baahan tahay, meesha la yiri shirguddoonka oo dhan kulamada isku, oo dhan guddoomiyaha markii hore waxaa dastuurkii hore ku qornaa, guddoomiyaha Aqalka Sare is kaleh guddoonka, ama haddii shaki yar ku jiray xooga anaga tanaasulnay, waxii waa nagula socod siiyay, marka shirarka kuwo waxaa jira, mararka qaar aqalka sare si gaar ah inee u sii taabanayo laga yaabo, marka ani waxaa qabaa shirgaddoonka laftirkiisa marka madaxweynaha la dooranayo shirarka madaxweynaha u yeero qodobbada inta la qeybiyo, laakiin qaar ka mid ah shirgaddoonka aqalka sare la siiyo, masalan marka dastuurka dooddiisa la galayo iyo xaaladaha degdegga dalka, xaaladaha degdegga dalka gobbpllada dalkee ka dhacayaan, stateyada ka dhacayan, daa-iman waxaa lagayaaba inoo more faderaal inee tahay dalkana waa iska fadaraalba, marka in aqalka sareeto shirarka qaar inee iyaga “chair” gareeyan in loo sameeyo loo daayo, shirarka qaar doorasada iyo madaxweynaha iyo kuwa waa weyn qaataye waa idin dhaafaynaaye qolaha shacab in loo daayo marka taas ani saas dhihi lahaa 93.

95aad waa qodobka igu dambbeeye qodabadii aan wax ku soo qorqoray, adeegga baarlamaanka waa taan hadda ka hadlaayay dhinac u raristii waye, horta waa in labo la kala saaraa marka xubno wax loo qeybinayo fiiri miisaaniyada dalka marka la qoraayo golaha shacabka iyo aqalka sare isku miisaaniyad ma ahan waxaa badan miisaaniyadda goloha shacabka waayo u badan tahay waa 275 xilibaan, marka 275 xildhibaan mishaarka lagu dhufto waa batay, 54 xildhibaan marka mishahar lagu dhufto waa batay, xuquuqdii marka ma sinna, laakiin 2 aqal marka la dhaho guddiyo la dhisanayo guddiga dasturka ka mid ah equal waaye waa labo aqal ma ahan waxa laga hadlaayo wax la qayb sanaayo ma ahan oo xubno loo qaybinayo, marka labada aqal wax u dhaxeeya marka labo aqal ahan loo dhisaayo guddiyada mushaharka ah oo wada yeelanayaan oo shaqada u haayo labo maamul ka kala socdaan kanaa badan kanaa yar ma taqaanno, so waa in ay equal ahaadaan, masuuliyadeeda iyo maamulkeeda waa inay u sinnaadaan.

Hadda golaha adeegga baarlamaanka la yiri, golaha adeegga baarlamaanka wuxuu jaangonaya sida loo shaqaynaya, waxuu jaangoynayaan ka shaqaynaya mishaharkooda, waxuu ka

shaqaynaya xuquuqdooda, laakin labo aqal ayuu ka shaqaynayaa marka guddoonkii iyo seddex xubnood baa la isku siiyay golahii shacabka, aqalkii sare waxaa la yiri guddoomiyo ku xigeen iyo xubin bay lee yihiin, shantii xubnood, xoghaya maya, ma ahan maamuul, macnaha xoghayuhu shanta xubnood ka hadlayaa aqalka guddiga dhismaayo waa inay noqdaan , waa inee sinmaan, waa inay la simee, haddii kale oo la simin waa in guddoonka aqalka sare la siiyaa, seddex golaha shacabka la siiya shan haddaad ka dhigteen guddiga qolada seddex la siiyo qolada kale waa in guddoonka yeeshaan , waa labo aqal ma ahan xubno wax looma qaybinayo, marka sax ma ahan sidan aad hadda u soo qorteen.

Farqadda 3aad isla qodobka 95aad waxaa xubinnimada lagu luminaya ayaa la sheegay, hadduu waxaa qabaa, in lagu daro hal xaraf oo kale, xubnahan waa la dooranayo baa layiri, madaxaa hakufurto ma ahan laftirgooda sida qoran waa sidaa haddii baarlameenka keenay u arkay inuu san istaahilin aqalkii keenay u arkay inuu san mudneen, waa in uu xil ka qaadis ku samaynkaraa, kuma jirto farqo c ayaa soo kordhiyay oo dhahaysa, haddii uu kalsoonida kala laabto golihii soo doortay, xubinnimada wuu weynaya qofka shantaa ka mid ihi haddii uu kalsoonida kala laabto. Marka intaas 95 aan ku joojiyay sidaas guddiga ii sheegeen.



**Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud**

Ugu horrayn waxaan ka billaabayaa qodobka 82aad faqraddiisa aad ee ku salaysan ama ku saabsan tirada xildhibaannada ee la sheegay 275 in tahay Aqalka Sarana 54 uu yahay. Horta 275 marka la samaynaayay waxaa loo sameeyay waxaa weeyaan xaq ma rabnee xalaan rabnaa oo shirka Carta ka soo billowday khayr alle ha siiyee dawladda Jabuuti, laakiin Soomaalida ay iyada go'aansatay inay nidaamkaa wax u qaybsadaan qaarkoodna ay ba diidanaayeen xitaa "point five" ka in la keeno oo magacyo badan ay u bixiyeen.

Markaa inta aanan u gudbin wax la yiraahdo asxaab Soomaaliya ha isku raacdo in 275 ta laga dhaqaaqo oo 305 loo dhaqaaqo oo beesha shanaad 30 ka u dhiman la isa soo gaadhsiiyo shacabkoo wada midaysan asxaab inay wada dhistaan. Qodobka isla meeshaasi 54 ta senator ee la sheegay "automatically" markaad sidaa u fiiriso 275 iyo 54 maskaxda xildhibaannada "automatically" waxay qaadatay dhanka qabiilkay awood qaybsiga qabiilkay qaadatay. Wacyigii loo keenay dastuurka oo ah dastuurkii hore inuu beddelo oo dastuur asxaab siyaasadeed ku dhisan iyo "programme iyo police" ku dhisan dhan waa u jeedinayaa. *Because* qodobbadan wuxuu u arkaa tiradan uu u arkaa 275 markuu arko 4.5 ayuu ka dhex arkaa ama 305 hala wada gaadho ama haddii xisbi la tagaayo si "point five" loo iloobo hoos halooga soo dhaca oo waddankan 15 million ah ma qaadi karo 275 xildhibaan iyo 329 hoos ha looga soo dhaco, 225 ama boqol iyo "something" hala keeno xagga tirada.

Samaysanka markaa aqalka sare, aqalka sare horaan u sheegnay baarlamaankii 10 aad ayaan sheegnay kanna waan ku celinaynaa. Qodobkii 72 ee dastuurkii hore waxaa ku qornaa waxyaalo madaxa iskula jira, mar waxaa la leeyahay waxaa lagu qaybsanayaa 18 gobol, mar waxaa la leeyahay waxaa lagu qaybsanayaa maamul goboleed, weliba maamul goboleedyada ee haysta tirada si equal ah ayay u qaybsanayaan, mar waxaa la leeyahay iyadoo afka laga ilaalinaayo qabiilka isku dheeli tirnaanta bulshada wax loo bixiyey. Haddeer markaa kow waxaa soo kordhay maamul goboleedyaa soo kordhay maamul goboleedka soo kordhay

xaalkiisa siduu noqonayaa ma waxay la bixi doonaan intii yar ee ay Puntland ku lahaayeen iyo Somaliland ma itaasay la baxayaa oo gooni u qaadanayaan si 54 loo ilaaliyo? mise xubna kalaa soo kordhi doona? Sidoo kale gobolkan Banaadir dadka asal ahaan ka soojeeda xuquuqdoodii aaway oo weliba markaa ku arkaayay Banaadiriga oo an gobollada kale wax xubina ku lahayn oo Banaadir bes kule xuquuqdoodii aaway? Aqalka Sare ani waxay ila tahay inta lagu shaqaynaayo system kan qabaliga ah waan leehay shanta beelood ha lagu qaybsado. Because wixii sharciga ku qornaa waa ka gudubnay baarlamaankii 9 aad ayaa is afgarad wax layiraah inta gaar loo baxay ayaa dastuurkii inta laga talaabay, golihii sharci dejinta laga talaabay ayaa waxa loo booday is afgaradkaas, ayaa lagu saleeyay.

Koonfur galbeed oo "population" aad u fara badana ayaa waxa la yiri 8 senator ha qaateen, dalkan aniga waxaan la yaaba nahay ma gobolaa la fiiriyaa? Ma population ayaa la fiiriyaa? Sidee wax loo fiiriyaa waa fahmi waayay. Waxay ilatahay system xisbi rasmi ah laga gaadhaayo ha lagu qaybsado wax kastoo la qaybsanaayo xataa golaha baarlamaanka ha lagu qaybsado nidaamka shanta beelood ah.

Qodobka 82aad faqraddiisa 3aad madaxweynaha isla golahanaan ka sheegnay madaxweynaha waa qof u dhaxeeya ummadda Soomaaliyeed oo ummadda soomaaliyeed oo dhan ay wada leedahay "at the same time" waxaa la rabaa dadka kale xuquuqdooda in la ilaaliyo. Labo mid inaan mid qaadano in isagana lagu saleeyo nidaamkii "point five" ka ahaa ama gabigeedaba in meesha laga wada saaro oo wax la yiraahdo madaxweynahaa xilka ka degay wuu sii joogayaa inaan la oran oo meesha laga saaro ama madaxweynaha dawrada hadba yacnii qolooyinka qaata iyada ha yeelato.

Weliba ani waxaan soojeedin lahaa, inta kalee ka harsan ee digil iyo midhifle iyo beesha shanaad iyo dir waar awooddii jirtaa tihiine wadne intaan isku yeelno bahasha maan rogno oo madaxweynaha qaadano waxa naga hortaagan maxay yihiin. Madaxweynaha aan ku koobno yaan xubin sharafeed guddoomiyana qaadan aqal sarena qaadan madaxweynahaas ha la iskugu tago ajandaha waaye waxaan ka hadlayno, maalin kastaba waxaad keenteen luuqaa inaa wax ka soo kordhisaan luuqaan idin la gelaynaa markaa waxaan aaminsanahay madaxweynaha totaly qodobkaas ha laga saaro. Madaxweyne sharfan waaye banaanka ha noo fadhiyo, sida Cabdiqaasim bannaanka noogu fadhiyo, madaxweyne sheekh Shariif bannaanka noogu fadhiyo, madaxwene Farmaajo, madaxweyne Xasan sheekh hadda joogo iyo madaxweyna yaalka imaandoonaba bannaanka ha noo fadhiyaan iyagoo muxtaramiin ah.

Qodobka 83 aad faqraddiisa (f) xarafka (d) da'ad xildhibaanka, da'da xildhibaanka anuu waxaan soo jeedinayaa 25 kii hore in loo daayo aqal sare hadduu yahay iyo gole ha shacabka hadduu yahayba. Dhanka kale guddoonka niman yahow marka hore albaabka xira oo dhaha 35 qof aan ahayn ma noqon karo waa wax la gartay, laakiin mar hadduu qofku xildhibaan mar noqdo "the same rights" waa inay wadda yeeshaan oo ah inay wax dooran karaan iyagana la dooran karo. Maaha in qof xildhibaana xuquuqdiisa inta laga xaddido oo layiraahdo 25 sanaad jirtaa iskuma sharrixi kartid guddoonka golaha shacabka ama aqalka sare maaha, anuu waxaan soo jeedinayaa 25 sano lagu ekeeyo loo celiyo, qof kastoo xildhibaan ahna uu guddoonka isku sharrixi karo, da'duu doono ha jiro marba hadduu xildhibaan noday inuu isku sharrixi karo.

Qodobka kalee ku xiga iskla qodobkaa 83aad xarafka (h) qofka xildhibaanku waa inuu labadii sanee ugu danbaysay uu noqdaa qof dalka jooga, ujeedka laga leeyahay maxay tahay? Ilayn

qodobka markii la keenaayo waa in ujeed laga lahaado, ujeedka laga leeyahay ma in qofka in jaajuusnimo looga baqayn baa? Oo kuwii local ahaa baaba ka daranee jaajuus la heli karaaye, ujeedka ma waxaa inuu qofkan xaalka dalka la socon aduunka "technology"-ada wuu gudbay kuwa gudaha ku jira kuwa dibada jiraa kaga xogogaalsane. Ujeedada ma waxa weeyaan in xoola dad inta la dhacaa in lala tagaa kuwa gudaha joogaaba hantida intay qaateen dibadda wax ku dhistee, qofka muwaadinka Soomaaliyeed jinsiyaduu rabo ha wato ha loo wada furo, yaan labo sano iyo sanad iyo lagu xujeeynin qofka waa muwaadin. Qofka "behavior" iyo bii'ada uu ku barbaaray ku xiran tahay wax shaqsiyadiisa isaga ah, boqolaal baasabooro "double" wataa jira kana wadanisan dadka kale. Markaa ummadda Soomaaliyeed iyo shacbiga Soomaaliyeed iyo muwaadinka Soomaaliyeed ha u kala saarin si isku mida ha loo wada qaato.

Qodobka 84aad aqbalaada xil kale musuqmaasuqa sidiisaba la sheego maaha keliya dhaqaale in la bixiyo, musuqmaasuqa waxaa ka mida "institution" aan loo baahnayn ama shaqooyin laga maarmi karo in la kobciyo ama la weyneeyo sidaa aawadeed anoo ka ambaqaadaaya dhaqaale ahaan anagoo dibadda ku tiirsan inta badan oo wax soo saar aanan lahayn. Idinku waxaaba sheegaysaanba qofka inuu wasiirna noqdo xildhibaana noqdee anuu waxaan soo jeedin lahaa xitaa wasiir ku xigeen iyo wasiirudawle la iska daayo oo wasiir iyo agaasime guud lagu soo koobo, iyagiina aysan xidhibaan noqon, qofkii xildhibaan noqdana xubinnimadiisii uu sidaa ku waayo.

Waxaa kaloo mushkilo ah mushkilad markay taagantahay anaga inata badan ma xalinee mushkilad kalaan sii abuuraa, xildhibaannada qaar kamidaa halkan xusay, mushkilada dastuurka haysatay ee dalkan "political crisis" ka galiyay waxay ahayd raysalwasaare iyo madaxweyne aan xuduudooda la caddaynin masuuliyad iyo waajibaad oo la yiri madaxweyne xilka waa u dhiibi kartaa, laakiin kama qaadi kartid. Iyadoo loo baahnaa tii in la xalliyo oo marmarsiiyo lagadhigay mayee awoodahaa waxa la ilaalinayaa beelahaa la ilaalinayaa ku awooddii la carariyo tiiyaa la ilaalinayaa oo Soomaalinimo aan laga hadlayn oo mushkilad kale la soo kordhiyoo laba "institution" maanta waxa na haysta oo aqal sare iyo gole shacab. Aqal sare oo la diyaarinin wuxuu qaban lahaa waajibaadkiisa, masuuliyadiisa iyo xuquuqdiisa aan la sheegin, oo haddana maanta la isku haysto oo maaliba loo kordhinaayo, gole wasiiraa idin la ansixinaynaa golaha wasiirradan idinla mid nahay, miisaaniyadda an idinla ansixinaynaa, guddiyadaan idinkala mid nahay dastuurkaan idinla ansixinaynaa waxyaabaha hadda abuurmayey tahay.

Waxa ahayd wixii ay qaban lahaayeen kow horta in la sheego sidaa darteed anuu waxaaban soojeedin lahaaba Soomaali oo dhan golaha shacabka ha iskugu tagto aqalka sare meeshaba halaga saaro.

Qodobka 87aad kala dirista baarlamaanka qodobkaas waxaan kaga hadalnay baarlamaankii 9aad waddan "conflict countries" ku jira oo xaalad dhibaato iyo xaalad siraacaad iyo la tacaalaayo awooddeeda waxaa fiican inay maamusho "institution". "Institution"-ka baarlamankana in awooddiisa sidiisa loo daayo madaxweynana wax shaqa uuna ku lahayn kala diris iyo isku keened maadaama waxa weeyaan isaga ay dooranayaan sidiisa ha u jiro. Sida xildhibaan Cabdixakiin uu sheegayba nin baa iska soo booday iska yidhi shan, shan waxaa weeyi ma jiri doono.

Musharraxa guddoonka qodobkaasi waan sheegay, qodobka 93aad sida hadduuna sida kale u dhigin waa waxyaalaaha la isku haysto waxyaalaha hummaaga ah weeyi, humaaga halaga saaro waxaa la rabaa inuu si saxa u bixiyo, guddoonka adeega baarlamaanka ee federaalka Soomaaliya isagana qodobaan ka qabay, laakiin dib ayaa la iga fahansiiyey, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Abdi Mohamed**

Bismilah guddomiye waad mahadsantahay xildhibaannada sharafta leh dhammaantii waxaan idinku salaamaya salaanta islaamka. Aslaamu caleykum waraxmatulahi tacaalaa wabarikaatuh mudaane guddomiye marka uga horrayso guddonka iyo xoghayayaasha waxaan ka nahay cabasho anagoo malintii dhoweyd aan is qorney oo ilaa iyo maanta aan taaganahay ayaa qof shalay hadlay haddana ayaa maanta dib looga celinaayaa hadal dib loo siinaayo aan arkeyney iyo kuwo shalay aysan imaanin ayaa maanta hafal lasiinaayey ilaa saacadaan idinka aad aragtaa ayaa meshaan aan joogno marka taas sida aad ka yeeli laheydeen idinka marka caaddaalad daradaas mar kale yeysan soo laabanin oo in aysan dhicin rajeyneynaa.

Markaan doodeydii horey aan usii guda galo cutubka 6aad qodobkiisa farqadiisa 82aad oo ka hadlaya baarlamaanka federaalka Soomaaliya wuxuu ka koobanyahay 275 xildhibaan iyo 54 oo aqalka sare ah sida aad wada ogtihiin xildhibannada sharafta leh inta badan marka aad fiirisaan 54 aqalka sare gobolna kuma salaysna beelihii ummadda Soomaaliyeed ee 5ta beelood wax ku qeyb saneyseyna kuma saleysno marka sidaas darteed waxaan rabaa in aan soo jeediyo in nidaamkii reeraha ummadda Soomaaliyeed oo ay wax ku qeybsaneyaey marka sidaas darteed waxaan rabaa in aan soo jeediyo in nidaamkii beelaha ummadda Soomaaliyeed oo ay wax ku qeybsaneysey oo shanta beelood in loo qeybiyo ayaan soo jeedinayaa talo ahaan.

Waxaa kaloo jirta maadaama goboladii naloo qeybiyey 18kii gobol oo markii horeba lagu qeybiyay waxaan rabaa in aan halkaan xildhibano saciibadeena ah in inta intay soo istaageen ay leeyihiin gobolkii Banaadir waxaa ka maqan maqaamkeedii iyo matalaadeedii ma aysan helin waa sax sida la sheegey gobolka Banaadir ma aysan helin matalaadoodii ay ku lahaayeen waxaad ogtihiin 54 oo aqalka sare waxaa lagu qaybiyay 18kii gobol gobolka Banaadirna 18kaas gobol ayay kamid tahay.

Waxaa kaloo lawada ogsoonyahay dadaa horay u boobay oo dadkii horay uboobeyna waa la ogyahay ee dadkaas halaga soo celiyo horta matalaadood sidaas ayey ku heystaan sida aan ognahay isla qodobkaas farqaddiisa 3aad qof kasta oo noqda madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya wuxuu noqonayaa xubin sharafeed haddii xilkaxayuubin aan lagu samaynin qodobkaasi waxaan soo jeedinayaa in lagu daro guddoonka labada guddi aqalka sare iyo baarlamaanka golaha shacabka labadoodaba in lagu daro oo halkaana in lagu caddeeyo oo cod aan lahayn oo xubin sharafeed oo ay yihiin oo sidoodii iyo mudnaantoodii iyo waxa ayuga ay leeyihiin sidooda in sidooda lagu siiyo taas ayaan rabnaa in lagu caddeeyo sababtoo ah sida aad ogtihiin madaxweynaha hadda taladahaya doorashadii hadda ugu danbaysay asigoo xubin sharafeed ah ayuu isku coddeeyay kan hadda talada kadegeyana sidaas oo kale asaa isku codaynayay marka reero gaar ah in mar walbo ay u sii korodho halkii teeramba hal xubin sharafeed oo mar walbo madaxtinnimada inta ay u soo istaagto isku codaynayso marka sidaas

darteed waxaan qabaa in guddoomiyayaasha lagu soo wada daro oo laga dhigo xubin sharafeed oo aan cod lahayn taas ayaan soo jeedinayaa haddii kale laga wada saaro madaxweynahana laga saaro meesha.

Qodobka 83aad farqaddiisa "D" oo ka hadlayso da'adiisa waa in ay tahay 30jir oo u sharraxanyahay golaha shacabka ama 35jir haddii uu u sharraxanyahay golaha aqalka sare codbixiye ahaana uu u diiwaangalsanyahay aniga waxaan qabaa marka uga horrayso in laga saaro qodobkaasna in sidiisii hore oo dastuurkeenna horaa uga qornayd 25ka da'adiisa aysan ka yarayn in sidiisii hore loo celiyo taas ayaan ku sii taageersanahay.

Qodobka 85aad dhaarta xubin nimada golaha waxaan qabaa in sideedii hore lagu daayo ee qodobka 87aad oo ah doorasho xilligeeda laga soo hormariyay hadaad maqashid waad dareemi kartaa xaaladda iyo waxyaabaha iska dhici karo "incase" tusaale ahaan aniga waxaan soo jeedinayaa talo ahaan in aan loo ogolaanin qodobbadan sideedaba la iska laalo oo laga saaro ama in baarlamaanka loo soo jeediyo haddii madaxweynihii ayaga ay dhisteen oo baarlamaankana uu yahay hay'adii dalka uga saraysay oo haddana madaxweynihii intuu warqad iska soo saarto uu leeyahay baarlamaankii waan kala diray taasi waxaa ka imaan kara micnaha dimoqraadiyad dastuuri ah iyo kala soo ciddii awoodaha oo hay'adaha ay kala lahaayeen oo ay si kale ay uwiiqikaraan madaxda dalka sida xildhibannadii hadda nagahoreeyay ay sheegayaan, haddii madaxweynaha iska soo jaro 10ka sano hadda soo socota micnaha baarlamaan majiraayo sidaan ayaa lagu wada joogayaa taasna ma ahan wax suurtagalayso marka sidaas darteed talada yaan laga dhihin wax awood oo madaxweynaha keliya oo asiga ay ka koobantahay wakhtiga uu rabo micnaha iska kala diraayo.

Qodobka 90aad shuruudaha doorashada guddoonka labada gole ee baarlamaanka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya ee farqaddiisii "B" in da'ada musharraxa guddoonka golaha aysan ka yareyn 35sano sida hadda ay tahay ayaan ku taagyeersanahay in kastoo xildhibanada qaar oo aysan badnayd oo ilaa 40ta hala gaarsiiyo oo ayagoo tusaale ahaan nooga soo qaadanaayo nabigeena Maxamed caleyhi salaatu wasalaam sida aad wada ogtihiin Usaama binu Seyd marka uu magacaabayeay hoggaamintii ciidankii dhanka Shaam markuu umagacaabayay da'adiisa waxaa lagu qiyasayay 18sano jir marka qofka haddii kartideedii iyo aqoonteedii iyo hoggaaminteedii iyo daacadnimadeedii uu leeyahay waxaan qabaa aniga in uu kamid ahaan karo oo isku soo sharrxi karo guddonnka golaha shacabka ayada oo aan ognahay xildhibanadaayada oo aan ognahay xildhibanada waxaan usii sheegayaa in aysan iskaga qaldaneyn Nabigeena Maxamed caleyhi salaatu wasalaam oo Ilahay soo diray oo Ilah doortay dadkana laga doortay iyo qof bashar ah oo anaga aan magacaabayno nidaamkii aan ku xulan lahayn iyo in ay is barbardhigaan taas waan ku bogaadinayaan in aysan suurtagal ahayn.

Qodobka 95aad guddiga adeegga baarlamaanka guddigaan sida hadda ay u soo diyaariyeen guddiga waan ku taagyeersanahay, waxaan kasloo rabaa in halmar dib uga yara laabto qodobkii 63aad oo inta badan xildhibaannada ay ku soo celceliyeen maqaamkii caasimadda ummadda Soomaaliyeed aragtidayda inta badan xildhibaannada waxay qaateen oo aan wada ognahay xulashada 1aad oo ahayd gobol madaxabanaan oo u ah dowladda federaalka colashadaas 1aad intooda badan xildhibannada taas ayay qaateen guddigana waxaan rabaa in ay ahmiyad gooni ah ay siiyaan xildhibaannada aragtiyadooda iyo xulashada meesha ay ayaga ubadanyihiin ee tusaale ahan haddii caasimaddii ay noqoto maamul goboleed micnaha dhaqaalihii dalka awooddii siyaasadeed taasina midnimo daro iyo dowli siyaasadeed oo ka hor imanaya

dastuurkeenii Dastuurkeennii waxa uu dhigayaa 2gobol iyow wixii ka badan ayaa waxaa noqon karo maamul goboleed marka Muqdishana waa caasimaddii ummadda Soomaaliyeed waa hanti qaran ummadda Soomaaliyeed oo dhan ayaa wadadeggan cid hadda si gooni ah ayada u sheegan karto oo ay leedahay ee anagoo dhan ayaa waxaan ka hadlaynay hadda sida aad arkayseen horray ayaa looga dooday seddexda senatar oo gobolka Banaadir uu leeyahay reeraha haysta waana lawada ogyahay reerahaas halaga soo dhiciyo  wasalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarikaatuh.



**Xil. Mohamed Kerow Mohamed**

Mahadsanid Guddoomiye, xildhibaanada sharafta leh, si gaara waxaan ugu mahadcelinayaa Guddiga Madaxabannaan. Warkayga ayaan toos iskaga bilaabanayaa. Waxa horta aad uu fiicnaan lahayd nidaamka federaalka ah ee soomaali qaadatay oo hada aan dastuurka u qoranayno in marka hore nooca federaal oo aan qaadanayno anaga inta la daraaseeyo la sheego markaa nooc kasta oo la qaadanayo wuxuu yeelanayaa muhiimadiisa. Aduunyada boqol sagaashan iyo dhawrka dawladood oo ka jira, 27 dawladood oo kamid ah ayaa federal ah, marka 27da dawladood oo federaalka ahba qaabka presidential-ka ama qaabka baarlamaaniga ahba waa u dhaqmaan. Marka inaga qaabkii daraad aan qaadanay oo ahaay presidential-ka awoodihiisa ayaa wali ina daba socda, waxaan qabaa marka kii isaga ahaa uun inta laga heshiiyay baarlamaankana la keenay marka laga noqday, marka hadii qaabkii presidential-ka ahaa laga laabtay oo qaabka baarlamaaniga ahna loo laabtay waxaan qabaa aqal ka sareeya aqalkan ma laha oo wuxuu u quduucayaa nidaamka la qaatay. Mida kale waxaan qabaa nidaamka la qaatay inuu yahay nidaamka keeni kara requirement-ga nidaamka aan qaadanayno.

Waxa kaloon rabaa inaan cadeeyo baarlamaanka inagu dad ayaan ku matalnaa, dadkaas aan ku matalnana waxay ogolyihiin oo keliya soomaali inay sadex qaab oo keliya wax u qaybsato, qaab kale oo 4aad hadii la keeno dadka inaga aan matalno ma yeelayaan, sadexdaas qaab maxay kala yihiin markaa. Qaab waxa waaye midka hada aan qaadanay oo beelaha ah oo xalka ah oo la iri xal waayee xaq maahan, ilaa laga gaarayo qaabka kale oo ah in la tiriyo population-ka soomaaliyeed oo deegaan kasta markaa la siiyo matalaad u dhiganta iyo qaabka sadexaad oo ah qaabka gobolada oo in 18kii Gobol wax lagu qaybsado iyadna waa la ogolyahay. Hada waxay xildhibaanadu ka shanqariyeen inay soo kordhi karaan dawlad goboleedyo cusub, kuwo daraad la sameeyayna ay jiraan hadii ay soo kororto xataa dawlad goboleedku cirka kuma yaalee dee dhulka ayuu ku yaalaa oo 18ka gobol ayay ka tirsantahay marka 18ka gobol halagu qaybsado gobol kastana wuxuu helayaa 3 xildhibaan sidaas ayayna sax ku tahayoo cadaaladu ay ku jirtaa, Gobolka Banaadirna xuquuqdiisa cidii haysata halooga soo celiyo ilayn gobol ayaa wax lagu qaybiyee.

Qodobka 82aad Faqradiisa 3aad waxay ka hadlaysaa in tirada aqalka sare lagu dari karo Madaxwaynaha. Waxaan qabaa in lagu daro “si xubin sharafeed aan cod lahayn”.
Qodobka 83aad oo ka hadlaya shuruuda xubinimada qofka xildhibaanka u tartamayo Faqrada 1aad (H) wuxuu ka hadlayaa in qofka u tartamaya xildhibaanka inuu ugu yaraan 2 sanno wadanka joogo. Taas waxay ila tahay iney caqabad ku tahay ka qayb galka siyaasadda dadka qurba joogta ah, in aad loo dhimo oo lagu soo koobo muda aad u kooban oo 6bilood ah,halka ay hadda ka tahay 2sano.

Qodobka 84(F) sababaha lagu lumin karo xubinimada baarlamaanka federaalka Waxaa kamid ah in qofka uu aqbalo xil dowladeed noocey doonto ha noqotee, waxaan qabaa farqadaan in loo celiyo sideedii hore oo la yiraahdo inuusan qaban Karin xil aan ka aheyn wasiir federaal oo halkaas lagu xiro wasiirka inuu yahay wasiir federaal.

Qododibka 84/2aad, wuxuu dhigayaa sababaha lagu lumin karo xubinimada ku xusan farqadda 1/C,D ee qodobkaan Waxaa loo baahan yahay aqlabiyad tusaale, Waxaa la leeyahay qofka wuxuu xilka ku weyn karaa maqnaansho uu ka maqnaaday labo kalfadhi sawab la'aan iyo xilgudasho la'aan joogto ah, labadaasi qodob waxay ubaahan yihiin in cod aqlabiyad ah uu golaha u qaado codkaas aqlabiyadda ah macada ma 50+1 baa? 2/3 miyaa? Noocuu yahay aqlabiyaddaasi?

Qodobkaani fadhigii hore ama kalfadhigii 5aad wuxuu ahaa kii 6aad ayaan umaleenayaa, kalfadhigii 6aad qodob muran dhaliyey ayuu ahaa sidaasi daraadeed waxaan qabaa gudigu waa mahadsanyihiin iney ku soo dareen in aqalka uu cod u qaado laakiin codkaasi aqlabiyadda wuxuu ubaahan yahay isagana in lacadeeyo oo layiraahdo 50% halagu daro, mese 2/3. Qododbka 85aad wuxuu dhigayaa dhaarta xubinta baarlamaanka waxaan qabaa tii hore in lagu celiyo.

Qododabka 87aad oo ah doorasho waqtigeed laga soo hormariyey oo madaxweynaha xeer kasoo saarayo taa waxaan qabaa in loodaayo baarlamaanka arintaa inuu go'aan ka qaato maxaa yeelay baarlamaanka isagaa mas'uul ka ah naftiisa, sidaas daraadeed baarlamaanka haka soo saaro go'aan oo inaan madaxweynaha loo deynin ayaan qabaa.

Qododabka 92aad wuxuu dhigayaa xil waayida gudoomiyaha baarlamaanka Farqadda C, waxay u qoran tahay khiyaano qaran inuu galay marka khiyaana qaran macada, maxaa layiraahdaa khiyaano qaran, yaana cadeenayo inuu galay khiyaano qaran?

Tan waxaan rabaa in lagu xiro in maxkamadda dastuuriga ah ay cadeyso in gudoonka lagu soo eedeyn karo inuu khiyaano qaran galay.

Qododabka 93aad wuxuu dhigayaa kulamada wadajirka ee labada aqal Waxaa ku qoran sanadkiiba mar ayey kulamayaan, taas waxaan umaleenayaa "error type" iney ahayed saas ayaan filaa waxaan qabaa sideedii in lagu soo celiyo oo la yiraahdo sanadkiiba laba mar oo madaxweynaha uu furaayo. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Sharif Mohamed Abdalla**

Runtii waxaan ka hadlayno waa dastuur waa mustaqbalka ummadda Soomaaliyeed warqaddii loo qorayay, ee ma'ahan inaan ku fakerno qaab beeleed ama qaab lamid ah inaan u fakerno ma ahan taas inaan ka gudubno ayaa horta fiican.

Waxaan u soo noqonayaa "points" ka aan samaystay degmooyinkii 1991dii waa 92 degmo, degmo kasta oo lasameeya waxaa ay xaq uyeelanaysaa inay hesho matalaad, tusaale doorashooyinka.

275 iyo degmooyinka oo iska batay magaranayo sidey isku qaadan karaan, Qod 82/1aad aqalka sare 18kii gobol lagu saleeyo, horta sideedaba aqalka sare xaggeen ka soo qaadanay? Ma mid meel ku xiran baa oo go'an (fixed) mese waa sameysmi karaa?

Tusaale, America haddaan ka soo qaado "states" ka ayaa iska leh gobol malahan waana ay simanyihiin, labalaba Senotor bay leeyihiin, Waxaa samaysmi kara "state" kale ayaa sameysmi kara, markay sidaas ay tahay in la "fixed" gareeyo lagu saleeyo dowlad goboleed loo beddelo meesha hadda gobol ay ahayd, hadba wixii soo saa-iida dowlad goboleed samaysta numberka la siinaayo kaas uu noqdo.

Qodobka 82/1aad aqalka sare waan kahadlay, farqadda 3aad isla qodobkaan waxaa weye, madaxweynaha marka ay shaqada ay ka dhammaato wuxuu yeelan karaa sida meelo badan ay jirto xuquuq iyo xushmad dhaqaale leh, amni leh, hab maamuus leh, wax nagu qasbaya inaan golahan ama midkale geyno majirtee, waxaa la damaanad qaadi karaa sharaftiisii xuquuqdiisii hab maamuuskiisii taas baan qabaa inaan loo baahnayn aqal sare iyo aqal hoose midna inaan lageynin.

Waxaan ku darsanayaa aqalka sare erey bixinta la xiriirta hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeenka dowlad goboleedka meesha la dhahayay, waxaan dhihi lahaa in layiraahdo (Duub), duubku waxa waaye gobolada Soomaaliyeed oo dhan waa ka dhaxeeyaa waa erey tilmaamaya in qofkaan la doortay, sidaas darteed meeshaas waxaan dhihi lahaa duub halaga dhigo.

Qodobka 83/1aad wuxuu kahadlayaa shuruudaha xubinnimada baarlamanka federaalka Soomaaliya, da'da waxa waaye dalkaan dhallinyaro buu ubadan yahay 25sano in laqaato heerka aqoontana qofka xildhibaanka noqonayo ma ahan shaqaale ma ahee jaamacad iyo batch iyo bahashaas in lagu xiro ma ahan, qofka haddiiba howshiisa dardar gelin kara in dugsi sare laga dhigo, dadka axsaab bay ka imaanayaan xisbiga isagaa soo xulanaya dadkiisa, meesha kuma jirto siday ilatahay in heerka aqoontiisa jaamacad lagu xiro.

Sidoo kale khibradda, xisbiga dadka uu soo dirsanaayo wax khibrad oo loo baahan yahay majirto marba haddii howshiisa gudan kara, siyaasad weeye meeshaan dhaq dhaqaaq ayay ku xirantahay iyo ololaha uu sameeyo.

Doorashada xilligeeda laga soo hormarinayo waxay ku imaan kartaa sida lasheegay marka baarlamaanka uu ku fashilmo in xukuumad wadaag ah uu dhisto ay ku heshiin waayaan ama marka miisaaniyaddii la'ansaxin waayo, madaxweynaha makala dirayee xaashidii buu soo saarayaa dikreeto buu soo saarayaa mooyane, madaxweyne dadkuu kala dirayaa ladhahayo ma ahan, waa kala diri karaa macnaheedu ma ahan in uu isaga awood adeegsanayo ma ahan, laakiin markii arrinta ay timaaddo ayuu dikreeto ku soo saarayaa.

Shuruudaha guddoonka iyo shuruudaha xubinnimada laftigeedii, muwaadinkasta Soomaaliyeed xaq wuxuu uleeyahay inuu wax doorto lana dooran karo, in la adkeeyo Soomaaliya kala bar ay dibadda joogaan, haddana layiraahdo waa inuusan "passport"haysan

waa inuusan xaas ajaanib qabin waxaas oodhan arrin loo baahan yahay ma ahan, shuruudahaas guddoonku xildhibaanaduu lamid yahay wixii shuruud oo xildhibaan u yaalay wuu yeelanayaa xildhibaanada ayay ku xiran tahay qofka ay dooranayaan hadday khibrad, aqoon waaya-aragnimo iyo wanaag kale lagu og yahay ayay ku xiran tahay, laakiin ma ahan shuruud lagu xiraayo ee marka horeba yuusan isa soo sharrixin maqabo.

Maxaa yeelay xildhibaanada gudoonka dooranaya murashaxiinta iyagaa ka xulanaayo qofka u qalma, Waxaa kaloo jirta meel iska farsamo oo Waxaa jirta wareega sedexaad Waxaa ugudbaya labada ugu codbata Waxaa dhici karta mararka qaar wareega sedexaad laftigiisii horena loo arkay in sedex murashax ay min 80 keenaan, oo ay isla ekaadaan kan kalena wixii soo haro uu yeesho.

Sidaas darteed ilaa laga gaarayo natiijo laga gaarayo kala badnaan ah wreeg seddexaad waa ugudbi karaan, in kabadan hal xildhibaan waa ugudbi karaan. Waxaan ku soo koobayaa guddoonka shuruudihiisii wuxuu lamid yahay xildhibaannada da'da xildhibaanka waa 25sano, shuruud kale oo lagu xirayo majirto marba hadduusan dambi ku xukunayn intaas ayaan ku soo koobayaa iyo madaxtooyada oo aan leeyahay qofkii xilkaas ka leexda in xushmad kale la siiyo labada aqal midna loo rarin.
Waad mahadsantihiin.



**Xil. Adan Mohamed Ali**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, mahadsanid guddoomiye, wakhti danbe ayaa la joogaa wakhti madhuminaayi si toos ah waxaan u geli doonaa qodobba aan is leeyahay inaan wax ku kordhiyo, qodobka 80aad faqraddiisa 1aad waxaa dhihilahaa baarlamaanka labadiisa aqal ee jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, in lagu kordhiyo oo aan la dhihin baarlamaanka keliya la caddeeyo sababtoo ah dastuurka markii laga hadlaayo wax isku dhex jira lama sheego, in la caddeeyo auaa fiican si aan leesku qabsan ay u caddaadaan waxyaalaha laga hadlaayo farqaddiisa 2aad waa "okey" oo siday u qoran tahay waa fiican tahay dabcan qodobka 82aad waxan ku kordhin lahaa oo ka hadlaayo sanatarada waxaan soo dhaweynayaa sida ay u qoran tahay ay guddiga usoo diyaariyeen in laga dhigo gobolo 18 gobol ee halkaan ku qoran waxay u qeybsan yihiin dhammaan dalka Soomaaliyeed, gobol meel ku yaala oo aan ka tirsaneen jamhuuriyadda majiryo, marka sidaas ayay caddaalad ku noqonee waxyaabaha hadda la tabanaayo oo gobolka Banaadir uu ka mid yahay halkaas ayay imaan kartaa marka waxaan is leeyahay dastuurkii ayaan ka hadlayaa maalin walba dastuurka ma furno sidaa ogtihiin waa maanta in laga faa'iideystoh, wixii dhibaato keeni kara maanta laga saaro oo la caddeeyo waxyaalaha maanta aan ka hadlayno oo dastuurka uu caddaado waxyaalaha uu ka hadlaayo dhammaantood.

Qofwalbaa oo noqdaa madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya wuxuu noqonayaa xubin sharafeed intuu noolyahay, waan soo dhaweynayaa taa iyada ah in sidaa looqaato, laakiin lagu daro guddoonka labada aqal jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, laakiin si kale loo dhigo laakiin la yiraahdo ugu yaraan waaxaad ogtihiin, madaxweynaha jamhuuriyadda markuu dalka ka baxo guddoomiyaha wuxuu noqdaa kusimaha madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka waxaa noqonaayo guddoomiyaha marka sidaas daraadeed in la

dhaho ugu yaraan haddii ay gaarto kusime nimadiisa 6 bilood, in sidaa oo kale la yiraahdo shuruud lagu xiro, laakiin laga tagin sababtoo ah asagaa noqdo kusimaha madaxweynaha wuxuuna qabanaa howlihii madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya uu qabanaayo ayuu qabanaayaa ku simaha in sidaa la yiraahdo ayaan soojeedinayaa,

qodobka 83aad farqaddiisa (a) in lagu daro muslim ah in la yiraahdo waxaa ogtihiin baryahaan waxaa soo baxay social meda-ha markaad fiirisaan dad Soomaali “Cristian” ayaan ahay dadka dhahaayo xataa waala arkay marka in la caddeeyo in la ogaado, mala ogaan karo, laakiin markii la caddeeyo in la’ogaado ineysan muslim aheen in laga saari karo golaha shacabka oo shacabka Soomaaliyeed aysan matali karin qof aanan muslim aheen shuruudaha ka mid noqoshada.

Sidoo kale faqradda (d) waxaan dhihi lahaa sideeda hore ayay ku wanaagsan tahay 25tii hore in lagu daayo ayay ku wanagsantahya waxba lagu darin oo qofka golaha shacabka ka mid noqonaayo in uu da’diisa aysan ka yarareen 25 sideeda hore lagu reebo, sidoo kalena aqalka sare sababtoo ah laga reebo sidoo kale experience-ga khibrada sababtoo ah qofka xilibaanka ahi ma’aha “ticnition” waa “polititian” marka sidaas daradeed aanan lagu xirin waxyaabo loogu baahnyahay “technically” majirto siyaasad ayuu matalayaa marka sidaa in loo dhigo ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 84aad farqaddiisa (f) in sideeda hore laga dhigo, laakiin lagu kordhiyo in qofka xillibaanka ahi uu noqon karo keliya, wasiir oo ah federaalka dowladda federaalka Soomaaliya waxaa dhacaday in golaha baarlamaanka qaarkood ay yihiin maamul gobleed in ay ka noqdaan marka in fursadaasi la baneeyo, sababtana waxay tahay waxay keeni kartaa in xataa la yareeyo kharashaadka baxaaya, oo waxaad ogtihiin maamul gobleedyo waxbadan ayaa la sameyay marka waxaa soo koobmaaya siyaasiyiinta fara badan oo aan la heen xuquuqo markii ay ka tagaan xilalka,

qodobka 85aad oo ka hadlaaya dhaarta, waxaan dhihi lahaa sideeda hore ayaa wanagsan, waxaad ogtihiin markii la dhaaranaayo inta badan shakhsi, shaksi looma dhaarto, oo baarlamaanka wuxuu ka kooban yahay 330 ku dhawaad, marka guddiga wuxuu soo qoray anigoo ah ayuu ku billaabay marka taa iyada ah suuragal manoqonayso dadka isku magac maahan isku nooc maahan waxaa dhici karta mararka qaar, in qofka uusan hadlin xataa intuu meesha iska istaago iska aamusanyahay marka, laakiin waxaa la fiirinaayaa ula jeedka marka waxaan dhihi lahaa dhaarta tii hore ayaa wanagsan oo wax micno ay soo kor dhinayso malahan tan hadda la sameeyay in qoraal ahaan isku qasanyahay mooyee.

Qodobka 90aad oo ka hadlaayo doorashada guddoonka labada aqal baarlamaanka federaalka Soomaaliya, waxaan soojeedinayaa waxaan la qabaa inaysan ka tirsaneen xisbi, waxaaan soojeedinayaa in xisbigiisa aan shuruud lagu xirin xisbigiisa sababtoo ah markii hore ayaa shuruudo ka mid aheed, oo kusoo galaayay qof aan xisbi ka tirsaneed xillibaan manoqon karo marka xisbigiisa inuu iskaga tirsanaado, aqlibiyada baarlmaanka ciddii noqota ayaa hoggaaminaysa haddii ay ahaan laheen madaxweyne iyo xukuumad marka in sidaa lagu dhaafaan dhihi lahaa,

qodobka 92aad in laga saaro farqadda (e) ayaan dhihi lahaa gabi ahaanbo, qodobka 95aad guddiyada adeegga baarlamaanka kuwa loo bixiyay waxaan dhihi lahaa, gabi ahaanba asagan looma baahna sababtana waxay tahay waa guddoonkii oo keliya, in markale maxay aheeto in

shaqada uun lagu badiyo uun bey keenee in laga reebo taa iyada ah, wuxuu leeyahay guddiga adeegga baarlamaaanka wuxuu ka kooban yahay guddoomiyaha golaha shacabka iyo guddoomiyaha baarlamaanka marba haddii guddoonkii yihiin in sidaan lagu reebo oo shaqooyinka lagu badin waan qaban karaan guddiga labada guddoon oo lagu daray habdhoorayaashooda sidaas noocaas ah lagu wado oo aan loo baahneen guddiga gaar ah, oo la yiraahdo guddiga adeegga baarlamaanka qodobka 96aad bari ayaa laga billaabaa u maleynaa aad ayaad u mahadsantihiin. Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Said Mohamed Mohamud**

Bahda saxaafada oo ayagana weli xilligan noo soo joogo, guddigii ka soo shaqeeyay oo noo soo xar xariiqay dastuurkan. Haddaan cutubka 6aad aan horray ugu sii socno oo horray u sii galno, qodobka 82aad, faqraddiisa (x), laba nin oo meeshaan fadhiyo ayaa inoo soo xariiqay, marka adiga taada waad ka hadashay ee iyara sug Cabdixakiinow, tirada xubnaha baarlamaanka federaalka, golaha shacabka waa 275, taas muran kama jiro, laakiin aqalka sare oo ah 54 oo la yiri ha loo qeybsado 18-kii gobol, haddii xitaa taa lagu saleen lahaa 18-kii gobol, waxa ka muuqata inaysan jirin caddaalad oo siday hayd loogu qeybsan lahaa, maxaa yeelay gobol walba waxay ahayd inuu yeesho saddex qofood oo senator ah, senator asal keeda waa matalaad gobol maahan gole shacab sidaa daraadeed sidii loogu talagalay waa laga tagay.

Qodobka 82aad, faqraddiisa 2aad oo oraneysa, tirada guud ee xubnaha golaha shacabka iyo golaha aqalka sare waa inay matalaada isku dheelitirka ku yeeshan dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada. Af-Soomaaliga marka horre, guddiga qoraalka way soo qoraan laakiinse ma fasirno, qeybaha kala duwan ee bulshada micnaheeda maxay tahay? Xitaa waxaa ku jira disable inay helaan, qeybaha kala duwan ee baarlamaanada adduunka oodhan waxay leeyihiin dadka disable-ka matalaad bay ku leeyihiin.

Waxaynu ka codsanaynaa walaalaheen inay arrintaas hoos ka xariiqaan, qeybaha kala duwan ee bulshada fasiraadeeda inay deeply u galaan. Labo, bahashu Soomaaliidu haddaan waxba kala qarsaneynin oo runta isku sheegno, bahasha qabiilo ayaa lagu soo kala qeybsadaa gobolada, deegaan walba qabaa'il baa ilaahay dajiyay, qolo ha u badnaato ama ha u yaraato, waxay ahayd bahashu inay siday tahay bulshada kala duwan loogu kala qeybiyo, haddii beeshaada oo (A) ahayd oo aqalka sare 10 xabo ka qaateen, golaha aqalka sare, qeybihii kale ee bulshada oo magaalada eheed in loo qeybiyo sidaa daraadeed waxaan talo ku soojeedinayaa in aqalka sare kor loo qaado 72 laga dhigo, 18-kii gobol waa min afar, Gobolka Banaadirna uu ku yeesho xuquuqdiisa sababta oo ah caasimaddii qaranka, Hooyadii ummadda, qofwalba oo Soomaali ah oo maalgashtay oo yimid in maalin walba, sanad walba doorasho markii la yimaado, la yiraahdo raalli ahaada, xal kale ayaa la idiin raadinaayaa, filim kaas anaga ayaa horrey ugu soo dhunnay oo beeshanada waxaa la yiri xaq maahan ee xal waaye, marka in Gobolka Banaadir iyadana la raaciyo oo la yiraahdo xaq maahan ee xal waaye sanad walba, beesha shanaad iyo Gobolka Banaadir labadaba xal dambe ma rabno, xaq ayaan rabnaa in loo raadiyo sida ay tahay, maadaama tirada hadda intaas 54 ay joogto, la isleeyahay intaa u badan, intaa u yar, bal in kor loo qaado, si guud wax loowada helo.

Qodobka 83aad oo ah shuruudaha xildhibaannimada baarlamaanka, shuruuda xubinnimada baarlamaanka, waxaan ku talinaynaa da'da golaha shacabka ee la yiri 30, xeerka baarlamaanka adduunka wuxuu qabaa 25 ilaa 35 inuu qofka dhallinyaro yahay, marka haddaad 35 uga billawdo "youth forum" ayaa meesha ka baxaayo sidaa daraadeed waxaan leenahay 25 halaga dhigo, laakiin aqalka sare waa la weyneyn karaa sababta oo ah Golaha Odayaasha ayaa la yiraahdaa oo ilaa 40 jir, dhinacaas kor waa loogu qaadi karaa, laakiin dhinaca golaha shacbigu wuxuu xaq u leeyahay da'diisu inay 25 ka billawdo.

Qodobka 87aad, kaladirista golaha shacabka, waxaan u arkaa in madaxweynihii golaha shacabka soo doortay iyo labadooda gole in la yiraahdo wuu kala dirayaa, xoogaa in la iska horkeenaayo hay'adii fulinta iyo hay'adii sharci dejinta sidaa daraadeed in qodob kaas lalaalo ayaan ku talin lahaa.

Qodobka 90aad, faqraddiisa (a), inuu xubin ka yahay golaha ee sida shuruudda guddoonka labada aqal, qofka guddoomiyaha baarlamaanka noqonaayo, waxaan talo ahaan soojeedinayaa hortay inuu xubin baarlamaan yahay, xubinnimo looma diidaayo, laakiin calal-aqal inuu hal fatro oo horre xildhibaan soo ahaa uuna yaqaano wuxuu yahay parliamentary sababta oo ah qof maantay xildhibaannimo soogalay, guddoon wuxuu yahay ma yaqaano, sidii uu ukala hagi lahaa xildhibaannada ma yaqaano, calal-aqal khibrad maheysto sidaa daraadeed waxaan ku talinaynaa, guddoonka, guddoomiye iyo gudoomiye ku-xigeen intuu ahaa labada aqalba, qofkii soogalaayo oo musharrax guddoomiye noqonaayo inuu yahay qof ugu yaraan fatro kale soo ahaa xildhibaan uuna u haysto experience.

Muwaadinnimadiis, waxaa la yiri inuusan lahayn jinsiyad kale, ummadda Soomaaliyeed duruufo amni ayaa geysay qurbaha ee uma aysan tegin dawarsi iyo raaxaysi uma tegin, muwaadinnimadiisa qofka Soomaaliga ah kama saarrayso waddan kale ayuu tagay ama dhalasho ka qaatay sidaa daraadeed waxaan soojeedinaa in kalmad faqraddaas laga saaro oo in muwaadinka Soomaaliyeed uu yahay muwaadinnimadiisa aan shaki la gelin karin.

Qodobka 95aad, guddiga adeegga baarlamaanka, waxaan ku talinayaa inuu shantiisa loo daayo laakiinse guddoonka oo shaqo badan u tiilay in lagu dhexdro waan ka soo horjeedaa, shan ay ahaato, saddex golaha shacabka oo doorasho ku imaanaya sida guddiga dastuurka u galayaan iyo labo golaha aqalka sare, lagu kabo labada xoghaye oo iyaga ah technicality, sidaas ayaan soojeedinayaa. 5 iyo 2da xoghaye ee saas 7 ku noqdaan, guddoonkuna ay shaqadii ka weyneyd ee hoggaaminta baarlamaanka loo daayo, ayna ka leexdaan waxyaabahaan, shaqadaan hoose ee guddigaan adeegga baarlamaanka, ayaan ku talinayaa.

Waxaa iigu dambeeya oo aan ku darayaa sidoo kale xubnaha baarlamaanka, xil aan baarlamaanka ahsayn ma qaban karaan ayaa la soojeediyay, waa talo fiican, laakiin marka horreyto waa inaad ogaataa waddankaaga muxuu yahay? Waa parliamentary, weli presidential ma aad gaarin, markii aan dastuurka soo socdo u beddelno insha Allaah uu noqdo presidential, ayuu noqonayaa xildhibaanka nin iska dhex fadhiyo baarlamaankiisa oo shaqo kale laheen. Adduunka dowladaha waaweyn, hadda Ingiriiska oo kale waa parliamentary, xildhibaanka wuxuu noqdaa wasiir, waxaa la samayn karaa golaha wasiirrada 50% calal-aqal ayaa laga dhigi karaa, maahan inay kulli noqdaan, laakiin inuu qaban karo xil gole wasiirnimo, taa ayaan aniga soojeedinayaa.

Walaalkeyga Cabdixakiin wuxuu yiri, Gobolka Banaadir kuraasta la qeybinaayo Banaadiri ayaa inteeda kale xaq u leh, waa run. Banaadiri waa dadkii gobolkan Banaadir loogu yimid iyo qabaa'ilka kale ay la deganyihiin, wuxuu ilooway beesha shanaad inay deegaan walba oo Soomaali ah degto, hadduu wax ka hadlaayo inuu gooni u hadlo ayay ahayd ama uu iska aamuso sidaa daraadeed Cabdixakiin waxaa kaa maqan Somali Geographically sida loo kala degan yahay, indhahaaga hal meel lee ayay qabteen, waxaa fiican Somali Geography keeda in laguu dhigo, geography ay Soomaalida dhigan jireen waad ka maqneed ayaan umaleynayaa, Al-islaax iyo aflaax, iskooladaaan ay Carabaha laga keenay hadda ayaad ku soo barbaartay, sidaad baarlamaanka Carabta ugu oroday ayaan ka gartay ee Ibnu-baduuda iyo waxaas ayaa laguu dhigaayay, beadka buuraha Golis iyo laguuma dhigin iyo Soomaaliya siday tahay. Waad ku mahadsantihiin. Wasalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh.

**Kulanka 17aad (Febraayo 16, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 17aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 10:51 A.M |
| **Xirmay:** | 2:43 P.M |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sh. Adan Mohamed Nur (Madoobe)<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 3aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-ka bedelka Dastuurka. Cutubka 6aad: Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Qodobbada 96aad ilaa 108aad).



**Xil. Abdikarim Abdow Heydar**

Hawlwadeennada, bahda saxaafadda, guddiga madaxabannaan ee dastuurka dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka, salaamu calaykum waraxma tulaahi wabarakaatuhu, bacdasalaam, aniga siduu guddoomiyuhu sheegay qodobadii hore ayaan rabaa inaan ka hadlo oo shalay wakhtigu iga dhammaaday oo saddex bari aan sugaayay. Midda koowaad oo aan rabo inaan ka hadlo waa qodobka 82aad, qodobka 82aad waxay ila tahay mar haddii aan dhammaystirayno dastuurkii, waxaa la yiri: "Qur'aan aan alif ka toosinaa al-baqra kama tooso". Mar dastuurkii haddii la dhammaystiraayo waxay ila tahay xildhibaanbnada maqan oo naga dhiman in lagu soo daro oo 4.5 ka gudubno oo shan beelood oo siman la noqdo, qodobka 82aad sidaasaan ka leehay oo intaas ayaan ku soo gaabinayaa ma dheeraynayo.

**Qodobka 83aad** oo looga hadlayo musharraxnimada guddoonka labada gole da'diisu 30 sano iyo 35 jir tahay, arrintaas waan ka badin lahaa laba arrimood ba waan uga badin lahaa. 30 sano nin dhallinyaro ah oo jira waxaa laga yaabaa culuumtii iyo maadigii inuu dhammaystiran yahay, laakiin khibraddii way yartahay. Marka uu madaxweynuhu waddanka ka maqanyahayna waddanka madaxwaynihiisa isaga waaye, sidoo kale hadduu madaxweynuhu dhintana madaxweynaha wadanka isagaa ahaanaaya. Nin oday ah oo khibrad leh oo odayaasha iyo dhallinyarada iyo haweenka iyo dalka isku wadikara hawshana markaas hanankara khibradna ku habayn kara ayaa loo baahanyahay.

Mudane Guddoomiye, arrintaas mayeelaayo xaq ayaana u leeyahay in aan hadlo saddex bari ayaan sugaayay, shalay markii meeshan la xidhaayay waa fadhiyay, dadkii lagu xidha ayaan ka mid ahaa, markaa maanta ka gudub qodobbadaadii kaa yeeli maayo raallina ahow. Barri ayaa lagu hormarinayaa ayaa la igu yiri in aan dhammaystana xaqbaan u leehay, markaa waa dhammaysanayaa mudane guddoomiye raalli ahaw, saddex bari ayaan sugaayay oo

wakhtigaygii waaye, qodobbada aan raabo in aan ka hadlo muhiim ayay ii tahay, waana metalaadaydii adoo raalliya. Qodobka markaa waxaan ka hadlayasy musharraxa 30 jirka ah waxay ila tahay in 40 laga dhigo, midka 35 jirka ahana in 45 laga dhigo ayaan qabaa ama labadooda 40 laga wada dhigo, 40 waa da' dhexe qofkuna uu masuuliyad badan ku gudan karo taas iyada halkaasaan uga gudbayaa.

Arrinta lagu lumin karo xubinta baarlamaanka oo arrimaha golaha wasiirrada la leeyahay ha laga saaro, dhawr sababoodba ma qabo in laga saaro aniga, sababta koowaad waxay ila tahay "cost-ga" wasiirrada banaanka laga keenaayo oo badnaan doona iyo xukuumadda oo caqabada badan ka dhex galindoonta baarlamaanka dhexdiisa. Sidaas daraadeed, waxaan qabaa sida ay hadda ay tahay in loo daayaan qabaa oo xildhibaanku wasiir noqon karo, waxaa jira kuraas badan oo la isla leeyahay oo markii uu damco xildhibaanku inuu waxoogaa caqabad ku noqdo beesha waxay la leeyahay cadkanow ama cunay ama ku ciidee anagu halkaa aan ka naqaanaa. Markaa waxaa jira xildhibaano badan oo markii ballanqaad la siiyo waxbaa soo socdee sug layiraahdo shaqada sidiisii u sii wadaaya, haddii kale xukuumadda qoortaa loo wada galayaa wax ala waxa xildhibaano ah qoorta ayay uwada galayaan. Markaa sideeda inay ahaato oo xukuumaddu dad ay ku dhexyeelato golaha shacabka aad ayay u fiicantahay, markaa arrintaas in sidaas loo daayo ayaan qabaa.

**Qodobka 85aad** dhaarta waxaan qabaa golaha shacabka waa dhaartii hore ee nalagu dhaariyay iyadana in wax laga beddelo ma qabo in la "note" gareeyaan rabaa sideedii hore in loo daayaan qabaa.

**Qodobka 95aad** ayaa iigu xiga, oo ah guddiga adeegga baarlamaanka. waxaa ku qoran shan xubnood in ay yihiin labada guddoon ay ku jiraan, waxaan qabaa labada guddoon in laga saaro meesha "*shanta*" ahna laga dhigo "*sagaal*" ayna ahaadaan guddi ka madaxbanaan guddoonka oo iyagu u adeega danaha baarlamaanka taas ayaan qabaa.

Qodobkayga ugu dambeeya waan gaabiyay, waa **qodobka 97aad** ee ah awoodda aqalka sare, saaxiibbaday ha iga raali ahaadaan. **Qodobka 97(f)** waxaa ku qoran golaha aqalka sare ayaa madaxweynaha ka xayuubinaaya xilka.

**Qodobka 97(f)** waxaa ku qoran xil ka xayuubinta madaxweynaha waxaa ku samaynaaya aqalka sare, awoodda aqalka sare khaaska u ah waaye. Arrintaasi sidaas may ahaan jirin, waxaan ku sii qoran haddaa fiirisaan qodobkaas iyadoo la fiirinaayo dastuurka sida waafaqsan dastuurka ku qoran. Dastuurka **qodobka 92(3)** waxay leedahay labada gole saddex meelood laba meel ayaa madaxweynaha xilka ka qaadi kara, marka arrintaas waxay ila tahay in sidaas loo daayo, sideedii ay ahayna in loo daayo waa khaldan tahay arrintaas ani in laga saaro ayaan qabaa meesha.

Sidoo kale, waxaa ku qoran ansixinta iyo magacaabista, ansixin iyo magacaabis isma raacdo, magacaabistu meel kale ayay ka timaaddaa, ansixintuna waa timaadaa. Waxaa ku qoran ansixinta iyo magacaabista danjirayaasha, taliyayaasha ciidanka aa ku qoran. Marka, hadda sida sharcigu yahay wasaaradda arrimaha dibadda ayaa golaha wasiirrada waxay u soo gudbisaa danjirayaasha la magacaabaayo, golaha wasiirraduna cod buuxa ayay ku ansixiyaan.

Marka ansixin iyo magacaabis isma raacdo, arrintaasina faqrad meesha ku jira in la fiirsho waaye. Taliyayaasha ciidanka waxaad mooddaan, taliyayaasha ciidanka hadda waxaa soojeediya wasiirka amingaa soojeedsha, markuu wasiirku soojeedshana golaha wasiirradaa ansixiya, marka, waxaad mooddaa 54tii saaxiibaday ahaa ha raalli ahaadaan, 54-tii senator ayaa la wareegay awooddii 275-kii xildhibaan waadna mahasantihiin, intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa.



**Xil. Mohamed Abdulkadir Mohamed**

Bismilaahi Raxmaani Raxiim الحمدلله رب العا لمين، والصلاة والسلام علي أشرف الأنبياء والمرسلين،سيد نا محمد وعلي آله وصحبه أجمعين.

Marka uga horraysa waxaan u mahadcelinayaa guddoonka baarlamaanka labadiisa aqal, xildhibanada Baarlamaanka Golaha Shacabka, Aqalka Sare, guddiga lasocodka ee baarlamaanka dastuurka, guddiga madaxabannaan ee dastuurka iyo saxaafada dhammaan, waxaan ku salaamayaa Asalamu caleykum waracmatulaahi wabarakaatuhu.

Salaan kaddib, waxaan kamid ahay xildhibaannadii shalay wakhtigii dooda uu ka dhammaaday oo maanta lagu soo bilabayay, waxaan rabaa in aan doodayda iyo qodobada dastuurka ee cutubka 6aad ee baarlamaanka federaalka soomaaliya aan ku daro.

**Qodobka 82aad** ee ka hadlaya Baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya wuxuu ka koobanyahay Golaha Shacabka oo ka kooban 275 xildhibaan iyo Aqalka Sare oo ka kooban 54 Senator oo matalaya 18-kii gobol ee Soomaaliya, waxaan isleyahay doodo badan ayaan arkayay oo xildhibaannada "contrabution" badan ay ku darayeen anaga sideedaba "constitution" ka ama dastuurka hadda aan ka shaqaynayno waxa uu ku salaysanyahay dastuur dimoqoraadi ah oo ummadda Soomaaliyeed matalaya.

Matalaaddoodii haddii ay ahaan lahayd golaha shacabka oo deegaanno matalaya iyo aqalka sare oo matalaya goboladii iyo "state" yadii matalaya, doodo badan oo waxaan arkayay 4.5ka iyo matalaaadda 4.5ka ma dheellitirna. Walaalahay 0.5-ka oo kale saaxiibbo badan baa aad u hadlaayay waa sax, xuquuqda ka maqan Soomaali lama tirin oo horta makala badna cid 0.5-ah horta majirto, laakiin, sideedaba anaga shaqada aan ka shaqaynayno oo "consitituton" ka aan ka shaqaynayno waxaan udiyaarinaynaa gabdhaheena iyo wiilasheena loo diyaarinayo. Waxaa loo diyaarinayo waxa waaye, in 4.5kii laga gudbo, in matalaaddii saxda ahayd ee dadka ay dooranayeen ciddii matalaysay, in la diyaariyo shuruucda caalamiga ah ee saxda ah la diyaariyo marka sidaa daradeed anigu waxaan qabaa qodobkaasi 275 ta ah oo matalaya "constituency" in ay ku habboontahay.

Qodobka 84aad ee ku saabsan sababaha lagu lumiyo xubinnimada baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya farqaddiisa 1aad, waxa uu leeyahay xubinnimada baarlamaanka federaalka Soomaaliya waxaa lagu lumin karaa xafafkiisa "F" aqbalidda xil kale ee dowladeed ee heerarka kala duwan ee dawladda. Qodobkan waxaan isleeyahay doodda ugu weyn ee ka timaaday waxaa waaye xildhibaanka baarlamaanka ka tirsan ee golaha wasiirrada noqonaya oo hadda meesha laga saaray ka baxday xildhibanku in uu noqdo oo wasiir noqdo falsafadda ka danbeeysa waxaa waaye maadaama xildhibankaan uu ku imaadey cod shacab oo

shacabkana ay soo doorteen awooda shacabkana uu meesha ku fadhiyo, qofka uga mudanj ee shabka matali kara sida sidoo kale xildhibanka in uu wasiir noqdo waaye ama waxaa loo yaqaanaa "popular legitimacy".

Qofka xildhibanka noqonaya ee qof iyo cod ku yimaada ee shacabku soo doorteen isga ayaa uga mudan in shacabka uu matalo uu wasiir noqdo horta farsamada taas ayay qotontaa, marka aragtida 2aad ee dhahaysa xildhibanka yuusan wasiir noqonin, waxay ku qotontaa in hay'adihii awooda lakala saaro oo "acountbility"ga la xoojiyo horta waa labo " theory" oo jiro waaye, laakiin maadaama "system" keena uu yahay mid "system "parliamentary" u xoog badan uu yahay oo xagaas bahasha aan u soo ceshanay oo baarlamaankii madaxweyne ay dooranayaan oo "parliamentary" gii uu xoogeysanayo.
Marka xildhibanka in fursad uu u helo in holaha wasiirrada uu kubiiro aniga waxaan is leeyahay arrin lagama maarmaan ah waaye aniga waxaan isleeyahay qodobkaas sida hadda uu uqoranyahay in sidiisa hore lagu celiyo oo qofka xildhibanka ah in uu ka imaan karo baarlamaan ka imaan karo loo soo celiyo ayaan qabaa.

Waxaan kaloo ku darayaa isla qodobkaasi **qodobka 84aad** farqaddiisa labaad waxay leedahay sawabaha lagu lumiyo xubin nimada ay ku xusan farqadda koowaad ee " **c** iyo d" ee qodobkaan waxaa loo baahanayahay aqlabiyad golaha uu ka tirsanyahay xildhibaanka haddii uu weynayo wax yaabihii ee xarafka "c iyo d" ee mesha ay yimaadaan aqlabiyadaas, waxan qabaa in lasii caddeeyo oo la yirahdo "absolute majority" ama "two third" la yirahdo ayaan ku darayaa.

**Qodobkaas 84(3)** waxay leedahay haddii xubin kamid ah golaha baarlamaanka booskeeda uu banaanaado, habraaca buuxinta waxaa loo raacayaa xeerarka doorashooyinka. Qodobkan waxaan isleeyahay xoogaa faafaahin buu u baahanayahay, waxaa jirtay boosas badan oo xildhibanna ah oo golahan ka tirsan ama ka tirsan aqalka sare oo banaanaaday sida xildhibaanno geeriyooday ama xildhibaanno boosas kale qabtay oo boosaskooda sanad iyo ka badan iska bannaanaa. Waxaan soojeedinayaa qodobkaan in lagu daro "*muddo 60 cisho gudahood waa in la soo buuxiyaa xildhibaankii booskiisa bannaanaaday*" oo muddo furan aysan noqon oo ay mudo xiran ay noqotaa la yaqaanaa goormee ayaa lasoo buuxinayaa booskaan bannaanaaday.

Waxaa jiray niman saaxiibadayda ah oo xildhibanno ahaa oo xilal kale qabtay sanado naga maqnaa haddana soo laabtay, marka maxaa diidaya booska matalaad shacab waaye kursigan waa kursi "constituency" ku yimaaday ama reer ku fadhiyay waaye in uu bannaanaado sanad iyo kabadan waxay ka turjumaysaa matalaaddii oo aan si sax ah aan ahayn, marka waxaan soojeedinayaa "*60 cisho ilaa 90 cisho*" in lagu qoro ayaan qabaa oo dastuuri ay noqoto.

**Qodobka 86aad** wuxuu ka hadlayaa xasaanadda iyo xuquuqda xubnaha baarlamaanka, qodobkan waa qodob oo aad muhiim u ah, sideedaba, hadda dastuurka aan ka shaqaynayno waxaan uga shaqaynayno waxaa waaye ummadda Soomaaliyeed iyo jiilasha dambe waaye, waxaan rabnaa annaga xuquuqdeenna baarlamaanka iyo waajibaadkeena in ay ka dhax muuqato waxyaabo xoojinaya isla xisabtanka iyo "acountbility" ga waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad 5aad oo ay qeexeyso "*xildhibaanka in aysan bannaanayn inta uu xildhibaanka uu yahay in uu iibsado ama kiraysto hantida dowladda*" sidoo kale, dowladda ay ka kiraysato ama ay ka iibsato hantidiisa, maxaa yeelay, waxaa soo dhexgalaya "conflict of interest" ninkaan xildhibaan waaye haddii xoogaa meesha masaaliix soo gasho waxa dhalanaya xoogaa xuquuqdii shacabka

Soomaaliyeed ay lahaayeen wax badan ayaa halkaa ku lumaya, marka waxaan soojeedinayaa in lagu daro farqo 5aad oo sidaas qeexeysa.

**Qodobka 101aad** oo markii horee ahaa dastuurkii hore **qod.97aad** hindise xeereed, markii hore sida uu udhignaa waxaa kujiray in uu aad uga qeexnayn, laakiin hadda sida loo sharraxay oo ah si waafaqsan hindise xeereed waxaa soojeedin kara oo ku saabsan (a) wax ka beddelka dastuurka (b) diyaarinta xeer cusub (c) dib u-eegis lagu samaynayay xeer hore, qodobkan qaabkii hore ee uu u qornaa runtii waxaa lagu sameeyay "modification" fiican ayaa lagu sameeyay, sidaan uu hadda yahay ayaa in badan oo kamid ah caddaynaysaa sida uga habboon.

**Qodobka 102aad** waxa uu leeyahay soo bandhigidda iyo curinta hindise xeereed farqaddiisa 1aad waxa ay leedahay waxaa golaha shacabka horkeeni kara hindise xeereed; golaha wasiirrada; 10 xildhibaan oo golaha shacabka ah iyo kun muwaadin ee buuxiyay shuruudaha cod bixinta maadaama matalaadda shacabka iyo bulshada Soomaaliyeedba ay xildhibanadu ay qaadeen oo 10 xildhibaan la yiri oo xildhibaannada darajo la soo gaarsiiyay "ratio" shacabka Soomaaliyeed iyo xildhibaannada matkastaba la isku giirinayo aniga waxaan qabaa 10 kun lambarkaan in uu yaryahay ilaa 20kun oo muwaadhin la gaarsiiyo oo tirada 10 kun kale lagu daro ayaan soojeedinayaa aad ayaad umahadsantihiin.



**Sen. Abdiweli Mohamed Ibrahim**

Bacda salaam, guddoomiye iga raalli noqda, waxyar ayaan gadaal idiin celinayaa, laakiin qodobbada waan isku darsanayaa oo way ii dhammaystiranyihiin.

Haddii aan ku hormaro Qodobka 82aad ee xubin sharafeedka waxaan qabaa in la caddeeyo inuusan cod lahayn, waayo xubin sharafeed maahan qof la soo doortay oo deegaan metala marka waa in si cad loogu qeexo dastuurka inuusan wax cod ah lahayn.

Qodobka 95aad ee ka hadlaya guddiga adeegga baarlamaanka, sida qaabdhismeedkiisa loo sameeyay ma ahan mid sax ah. Guddoonka ayaa ku jira guddoonkuna waa marjicii loo laaban lahaa marka waa in laga dhigo guddi madaxbannaan oo ka kooban xildhibaanadda, si siman oo 4.5 ahna loo qaybiyaa.

Qodobka 84aad oo ka hadlaya sababaha lagu luminayo xildhibaanimadda farqaddiisa 4aad ma cadda, waa in si cad loogu qoraa "kama mid noqon karo golaha xukuumadda" Waxaan arkaayay meelo badan oo ay ku qorantahay Xeerhoosaadka Baarlamaanka Federaalka, xeer hoosaad labada aqal ka dhexeeya ma jirro marka taasna waa in guddigu si fiican u fiiriyaa oo meel kasta oo ay ku qorantahayna ka dhigaa "xeer hoosaadyada labada aqal" inta laga samaynayo Xeer hoosaadka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Qodob kale oo uu hadda xildhibaankii iga horreeyay ka hadlayay oo ahaa magacaabista guddiyada gaarka ah ay u qorantahay golaha shacabka naftooda, marka meel kasta oo ay ku qorantahay magacaabis, xildhibaannadu xaq uma laha inay magacaabaan guddiyo ama safiirro, laakiin waxay xaq u leeyihiin inay sameeyaan marka qodobkaas guddiga ayaa qalad ku sameeyay ayaan u maleynayaa waa in laga dhigo waaye dhammaantood. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Mohamud Abdulkadir Haji**

Guddoonka labada aqal, xildhibaannada labada aqal, guddiyada ka shaqaynaya dib-u-eegista dastuurka, dhammaan howlwadeennada iyo saxaafadda waan idin salaamay. Dabcan weli waxaan ku jirnaa cutubkii 6aad ayaan kujirnaa oo maanta gabagabo inoo ah.

**Qodobka 96aad** awoodaha gaarka ah ee golaha shacabka waxaa kamid ah awoodahaasi: kalsooni siinta raysalwasaaraha, golaha wasiirrada si waafaqsan Qodobka 28aad ee dastuurka. Farqaddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin sidii hore ay ugu qornayd ayay udhaafeen waad ku mahadsantihiin.

**Qodobka 97aad** awoodaha ugaarka ah golaha aqalka sare, golaha aqalka sare wuxuu matalayaa dowlad goboleedyada awoodiisana waxaa kamid ah; ansixinta dhismaha dowlad goboleedyada; la xisaabtanka iyo korjoogtaynta dowlad goboleedyada; ansaxinta iyo ogolaanshiyaha soo dhexgalka dowlad goboleedka; ilaalinta nidaamka federaalka iyo midnimada qaranka, ilaalinta khilaafaadka soo kala dhexgala hay'adaha dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ama dowlad goboleedyada dhexdooda.
Waatii mandate-koodu ahaa larabay inay ka shaqeeyaan inkastoo aanan arkin eedna aan ka dhigeynin, inkastoo aan arkin weli khilaafaad dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada is heysto aqalka sare soo dhexgalay.

Xarafka "F" xil kaxayuubinta madaxweynaha waxaad mooddaa xil kaxayuubinta madaxweynaha JFS si waafaqsan habraaca kuxusan dastuurka sida saxda ahna awooddaasi malahan dastuurka aan hadda ka guurayno qodobkiisa 92aad ayaa qeexaya habraaca xilka looga qaadayo madaxweynaha JFS wuxuu marayaa maxkamadda dastuuriga ah eedda loojeediyay culayska ay leedahay ku xadgudubka dastuurka dambiyo culus waxyaabo badan baajiro.

Waxaan qabaa in loo daayo dastuurkii hore, qodobka 92aad in loodaayo qodobkaas.
**Isla Qod 99aad** korjoogtaynta golaha shacabka iyo aqalka sare, waxay awood uleeyihiin korjoogteynta, koormeerka hay'adaha dowladda ee qodobka ugu horreeya awoodda baarlamaanka waxaa ku qeexan in raysalwasaaraha iyo xukuumaddiisa ama golaha wasiirrada ay ansaxinayaan golaha aqalka sare halkaas dowr kuma lahan.

Haddana laxisaabtanka in ay dowr kuyeeshaan wax isdiidaayo waaye, waxaan rabaa in lacadeeyo in golaha shacabka awooddiisa gaarka ah loo siidaayo aqalka sarana shaqada uu haayo la xisaabtanka maamul goboleedyada in loo siidaayo uu ka shaqeeyo ayaa muhiim ah maadaama uusan ansixintii goleha wasiirrada iyo raysalwasaaraha uusan qayb ka ahayn inuu haddana la xisaabtamo wax meesha imaan kara ma ahan.

Sidaas darteed waxaan rabaa guddiga in uu hoos ka xariiqo awoodaha dastuurkii hore oo aan ka guuraynay si qeexan u kala saaray, in wixii la soo kordhinaayo ay noqdaan wax maangal ah, laakiin awoodaha golaha shacabka oo gaarka u leeyahay iyo awoodaha aqalka sare oo gaarka uleeyahay in lakala saaro ayaa muhiim ah aan la isku dhex darin.

Waxaad mooddaa xoogaa haddii aan kaftan ku darsado team-kii golaha shacabka ka socday ee larabay inay ka shaqeeyaan dastuurka wax ka beddelkiisa, dowrkoodii baa meesha kamaqan qaarkood banaanka ayay kumaqanyihiin waxaan codsanayaa, in guddoomiyaha ee dib-u-eegista dastuurka saaxiikay Xuseen Iidow oo nimankaas u yeero uu soo xareeyo, matalaadda ay kumatalayeen golaha shacabka meesha ka muuqato.

Hadda waxaa cad inaysan meesha ka muuqanba matalaaddii saxda ahayd dib-u-eegista dastuurka aan kulahayn, waxaan rabaa saaxiibaday aqalka sare inay raalli ku noqdaan doorkoodii saxda ahaa inay qaataan, la xisaabtanka ay lahaayeen waxaa waaye inay aaddiyaan maamul goboleedyada khilaafaadkooda ayaa aad u badan, waxaa muuqata dowrkaas inaysan ka muuqan waxaan rabaa dowrkaas inay muujiyaan. Waxaan ku soo gabagabeenaa maadama wakhtiga uu aad noogu lumaayo saaxiibadday in labada aqal inta dhiman dooddoodu ay ka qayb qaataan. Waad mahadsantihiin.



**Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Alxamdullilaahi Rabilcaalamiin walcaaqibatu lilmutaqiin walaa cudwaana ilaa calaa daalimiin, wasalalaahu calaasayidinaa muxamadin wacalaa ahlihii wasaxbihii ajmaciin. Guddoonka sharafta leh oo dhammaan is wata xildhibaannada labada aqal ee sharafta leh habdhoorayaasha oo guddoonka ka tirsan dabcan dhammaan inta joogta, asalaamu calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Mudane guddoomiye, waxaan cabasho ka ahay tan iyo shalay ilaa dorraad ayaan ku qornaa marka wax dhibaato ah majiro dacwo ma ahi, laakiin, waxaa la rabaa dadka siday u kala horreeyaan dadkii shalay qornaa siday u sugaayeen sagaal saac iyo bar ku gaaray, haddana maanta dadkii shalay hadlay, in maanta laga hormariyo xogaa waxaad mooddaa in hoos u eegid u baahan tahay, see ku dhacdayba haku dhacdee, dacwona iga ma ahan, waa in loo kala fiiriyo dad sida ay u kala horreeyeen. intaa ka dib, waxaaan rabaa markale iyo markale waxaan rabaa amaan iyo bogaadin iyo hambalyo inaan u soo jeediyo guddoonka oo dhan runtii habsami u socodka iyo xasilloonida runtii iyo qaabka loo daadihinayo golaha saas oo kale waxaan rabaa xildhibaannada sharafka leh qaabka maamuuska leh iyo xasilloonida ay howsha yacni ugu qeyb galayaan, intaa markaan iraahdo.

Mudane guddoomiye, haddaa saan oo kale u daahdid waxaa dhacaaya wixii aad qabtay in horay loo sheego marka waxay noqonaysaa xogaa ku celcelin ayay noqonaysaa marka kollay waan sheegi doonaa intii wixii aan qabay ku hadashay, ayaan ayidayaa gareynayaa oo qaarna aan ka xusi doono.

Toos ayaan u aadayaa qodobbada, bacdamaa aan liiska ku qornaa shalay ee ka billaabanaayay ayaan ku jiraa oo hore ee ka billaabanaayay ayaan ku jiraa, qodobka 82aad oo ah tirada xubnaha baarlamaanka federaalka oo kala xusay labada 275-ta kan kalana lagu xusay aqalka sare oo 54-ta ah oo laga soodooranaayo 18-ka gobol, taas waxaan rabaa inaan hoos ka xarriiqo, waxaan rabaa inaan ku daro ama ku dari lahaa in yacni sidaan ognahay in ay weli meeshaa ka maqan tahay, tiradii ay meeshan ka maqan tahay tiradii gobolka Banaadir, oo aan xusaayo tirada gobolka Banaadir sidaad la socotaan baarlamaankii hore tii lagu soodaray yacnii dooddiisa waa

tii la soo xusay 13 ee lagu soo daray guddigii, waxaan ka mid ahaa guddigii waagaa loo saaray oo hadda ay rag ka joogaan saan filaayo uu ka mid yahay Cabdixakiin iyo wasiir Maxamed Soomaali iyo rag kale oo wagaas lagu soodaray oo isku dhaf ahaa. marka taas waxay igu noqonaysaa markaste dabcan arrintii matalaaddii gobolka Banaadir, shalayna uu ka dhawaajiyay xildhibaan hadda ka hadlaayay ku hadal qabsan karayo, inuu soo xusay inay jiraan aan dhaho dad deegaankana ah meelkalana aan ku laheen wax xuquuq ah, ayuu ka soo dhawaajiyay oo waa dhab, midda kale waxaan rabaa inaan hoos ka xuso waxyaalo kale oo walaahow ah oon rabo inaan ugu faa'iidaysto fursadaan oo ah matalaadda iyo maqaamka Muqdisho inysan ahayn wax gaar ah oo ay tahay muraayad leeska dhex arkaayo, maxaa yeelay waxaan raba inaan idin xasuusiyo guddiga shaqadii waagii 13kii ayada ahayd oo baaqatay howrshaas meysan fuline ee waxaa dhacday, in la sii wado leeska dhex arkaayo lagu kala habeeyay loo qeybiyay ayay aheed ayaa jirtay marka waxaan rabaa midaas inay tahay mid runtii maqaamka iyo matalaadda Muqdisho ama caasimadda ama gobolka Banaadir mid kaa rabtid dhehe inay tahay mid la wadaleeyahay leyska sii dhex arkaayo si loo arko taas ayaan rabaa tiradaa gobolkaasi loo xuso ayaan ku talin lahaa.

Mudane guddoomiye, midda kale ee muhiimka ah oo aan rabo inaan xuso waxay tahay, **qodobka 3aad** oo ah madaxweynaha markuu xilka ka dego ka soo qeybgalkiisa ama in lagu meeleeyay ama in uu ka mid noqonaayo ayaa la yiri iyadoo xubin sharafeed ah oo ka mid noqon doono aqalka sare, waxaana lagu nidaamin doonaa xeer gaar ah. waxaan rabaa inaan laba arrin ka iraahdo qodobkan; kow xeerka gaarka ah ee madaxweynaha ka soo detgay lagu meeleenaayo ama uu ka mid noqonaayo aqalka sare yaa u xilsaarnaanaaya, ma aqalka sare ayaa kasoo tala bixinaya, Misa xeerkaas gaarka ah ma labada aqal oo isku jira ma meel kale? marka waxay u baahantahay xeer gaar ah. Nidaamintiisa cidda kasoo shaqeyneyso in la ogaado.

Midda kale, waxaan rabaa midda ku wajahan xubin sharafeedka adduunyada dhan waa jirtaa anaga xataa Soomaaliya waxay ka billaabatay ayadoo weliba aqalka sare jiray waagii lixdameeyadii, Mudane Aadan Ciusmaan madaxweynihii oo xilka ka degay wuxuu noqday sanatar iyadoo markaa jirin baarlamaan ka mid ah, hadda, laakiin aqalkii sare waa "factional" yacnii waa shaqeynayaa yacnii ayagii waxay ka mid noqonayaan aqalkii sare markaa waa in la caddeeyaa waa in la caddeeyo waa inuu noqdaa "active" si active ah oo noqdaa uu ugu qeyb galaa oo xuquuqda uu leeyahay xubinta kaloo ka tirsan sanatarada waa in uu ka mid noqdaa taasna yacnii hora loo soo arkay yacnii madaxweynaha hadda jooga Madaxweyne Xassan sheekh habraacaas ayuu maray marka taas in la xuso meesha laga dhihi lahaa xubin sharafeed inkastoo xeer nidaamintaas loo daayay iyo cidda weli samaynaysa weli la aqoonin, laakiin waxaan dhihi lahaa si active ah inuu u noqdo xubnaha kale xuquuqdaasi leh inuu ugu qaybgalo ayaan soojeedin lahaa. Waan kookobayaa bacdamaa horay looga hadlay waxaan oo dhan.

Waxaan rabaa qodobka 83aad, waa midda ku wajahan xarafkiisa weli waxaan rabaa oo ku wajahan da'da yacni aqalka sare iyo golaha shacabkaba oo yacnii u sharraxan golaha shacabka 30 jir golaha sahcabka 35 waxaa la yiri golaha aqalka sare, da'daas waxaad moddaa inay runtii inay macquul ahayn oo caqligalaynin, inkastoo aan soo jeedin lahaa ama ku dari lahaa dadka dhallinyarada ah weliba meesha laga yiri 30ka, maxaa yeelay bulshadeenna ee ummaddeena ama "Population-keena markii la fiirinaayo tirakoobka 75% waa dhallanyaro, bacdamaa dhallanyartu ay badan tahay dadkii mustaqbalka ama jiilkii msutaqbalka in meeshii 30ka laga yiri lageeyay laga dhigo 27 ayaa la qaataba, maxaa yeelay dhallaiyaradu waa lafdhabarka waana muhiim, runtii curintoodana waa mid loo baahanyahay maskaxdooda mid caafimaad qabto oo

runtii “active” ah taasina waxaan ugu hiilinaayo waxkale maahan waxaa waaye dabcan waxaan ka tirsanahay dhallinyaradii shalay maahan maanta ka soco waxaan adaayaa waan soo gabagabeynaaa.

**Qodobka 84aad** waxa waye dabcan mida dabcan ku wajahan sababaha loo lumin karo xubinnimada baarlamaanka federaalka, anigu waxaan qabaa anoo soo kookoobaayo in golaha yacnii sida hadda ay tahay ay u roontahay, maxaa yeelay waxaan xasuustaa sharcigan waa jiray waagii hore, waagii Carta aan ka nimid ayuu jirayba qofka markuu aado golaha xukuumadda inuu luminaayay oo yacnii lagu beddelayay anaaba kasoo mid ahaa golahii wagaas oo golaha Carta, laakiin waxaan ku talinayaa ayadoo nambarka koobanyahay in yacnii xildhibaanku uu noqon karo hanoqdo golaha shacabka ama golaha aqalka sare, inuu aadi karo golaha xukuumadda, inkasta oo aqalka sare runtii arrintaas waa xasuusin hoos aan ka xariiqaayo oo xuquuqdaas oo leeyahay iyo xuqooqo kaloo badan oo gadaal aan ka sheegi doono wax badan oo ku lumiyay, maxaa yeelay majirin sabab loo xakameynaayo in muddo ah inaanan aqalka sare loodiiday ama loo ogolaanin uuna u gudbo wax diidaayo malahan, wax diidaayo iyo sharci diidaayo ineysan jirin.

Waan soo koobaayaa waxan adaayaa **qodobka 85aad o**o dhaarta xubnaha labada gole baarlamaanka federaalka ah waxyar ayaan rabaa inaan ka xuso waxa waaye kulanka ugu horreeya xubanaha labada gole ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya waxa dhaarinaayo guddoomiyaha maxkamada sare, dhaarta oo ah sida tan, “okey” waxaa dhaarinaayo guddoomiyaha maxkamadda sare waa sax, guddoomiyaha maxkamadda sare haddii dad ka mid ah aan filaayo aan ku raacaayo maxkamadda sare guddoomiyaheeda hadduusan joogin haddii kale waxyaabo kale lama filaan ay ku yimaaddaan waxaa la rabaa in meeshaa lagu xuso maxkamadda sare ama cidda kale markaas beddelayso haddii yimaaddaan ama “forza majora” laakin sida kale tii ayaan u racaayaa aan leeyahay dhaarta tii hore oo kale ayay ku wanaagsan tahay.

Midda kale, waan soo gabagabeynayaa xasaanada iyo xuquuqda baarlamaanka federaalka sidii loo yiri inta hadashay iyo inta qoran ayaan ku wafaqsanahay, keliya waxaan rabay marka laga hadlayo xuquuqda ayaa ku jirta meesha ah baarlamaanka federaalka ah ee hadda jira waaye, laakiin aniga waxaan rabaa xuquqda xubnaha baarlamaankii hore baarlamaanadii horey xubnihii ka tirsanaa oo dhowrjeer weliba xuquuqdooda laga hadlay meelna la dhigay weli inaysan haysanin xuquuqdii lahaayeen iyo gunooyinkii loo ogolaaday waxaan jeclaan lahaa qodobkaasi madaama xuquuqda laga hadlaayo xunaha baarlamaanka ah, baarlamaanadii hore ee ahaa 10aa, 9aa, 8aa, horana loo qoondeeyay mar horena in ayagana la xuso oo arrintaan xuquuqdoodii meeshaan lagu soo daro.

Ugu dambayn, waxaan rabaa **qodobka 87aad** doorasho xilligeeda laga soo hormariyay waa muuhiim, aad ayaa looga hadlay doorashooyinka xilligooda laga soo hormariyay sideedaba waxaa rabaa faqradaha 1aad, 2aa, iyo 4aad, qodobadaas in laga soo hormarinaayo waa in lasoo hormariyaa lakiin xaalada gaar ah lagu soo hormariyaa marka waxaan rabi lahaa xaaladaha lagu soo hormarinaayo waxay u baahantahay xoogaa sharaxaad oo aan waqti badan aan u heysanin marka waxaan u jeedaa mida kale ee 4aad madaxaweynaha jamhuuriyada ka dib markuu dhageystoh, mida kale ka dirida badanaa waxaa la kala diraa oo yacnii lasoo hormariyaa wax layiraahda “election” soo hormara, waxa waaye xisbiyada aqlabiyad.

Waa imaan kartaa marka Kalena waxa waaye xisbiyadii waxaan aad ula socdaa xisbiga wadanka talyaaniga xisbiyadii coalition-ka sameeyay hadii dowladd la dhisay hadii ay ka baxaan qaar kale oo xisbi majooronsada uu dhumiyo waxaa dhacaaya markaas in la aado doorasho laga soo hormariyay oo madaxweynahana uu kala diri karahi iyo baarlamaankii lakiin waxyaabaha kale oo runtii imaan karaa waxaan qabaa in yacnii dib-u-eegis loogu sameeyo waxaan jeclaan lahaa wadcigaas anaga hada majoogno in hoos lodhigo ma'adkeynaayo raali iga ahaada aad ayaad u mahdsantihiin.

Waxaan rabaa bacdamaa wakhtiga aan aad u qaatay waxaan rabaa inaan ku waafaqsanahay intii ay yiraahdeen wakhti ii saamaxeynin gaar ahan weliba intii ay sheegeen qodobbadan aan ka gaari la'ahay sanatar Cabdixakiin iyo xildhibaan Cagaweyne iyo raggii kale oo hadlay wakhtiga ii saamixiwaayay.
Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin, mudane guddoomiye aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Abdulkadir Sh. Ali**

Asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh, guddoonka labada aqal iyo xildhibaannada sharafta leh ee labada aqal waad salaamantihiin. Waxaan rabaa inaan guudmar yar ku sameeyo qodobbadii, waxaan ka billaabayaa qodobka 82aad, tirada xildhibaannada ee aqalka sare waxaa loo qaybiyay gobol, marka waxaan rabaa oo ku ayidayaa in sidii uu ahaa loo soo qoro oo loo qaato oo loo qaybiyo goboladii 18-ka ahaa sidaas loo qaato. Farqadda saddexaad ee madaxweynaha haddii uu xilka ka dago wuxuu ka mid noqonayaa aqalka sare, waxaan rabaa in lagu qoro xubin sharafeed aan cod laheen in la muujiyo haddii kale hadhowdii waxay noqonaysaa is qabqabsi iyo hadal badan ayaa ka imaanaya, marka waxaan qabaa in lagu qoro xubin sharafeed aan cod laheen.

**Qodobka 83aad** shuruudaha xildhibaannada baarlamaanka in qodob kaas sidiisa loo qaato, Guddoomiye adiga ayaa wakhtiga naga qaaday, aniga 10 daqiiqo ayaan leeyahay, toban keyga daqiiqo meesha aan rabo aan la aado, codsigeyga guddoomiye waa inaad toban keyga daqiiqo isiisid si aan u soo koobo, haddii ay iga dhammaato hala iga joojiyo please.

**Qodobka 84aad,** sababaha lagu lumiyo xildhibaanka, sida loo soo qoray raalli baan ka ahay sidaas in loo qaato. Qodobka 85aad oo dhaarta ka hadlayo in loo soo celiyo sidii horre ay dhaartu ahaan jirtay. Qodobka 87aad, doorashada xilligeeda laga soo hormariyay waa laga hadlay, waxaan rabaa qodob kaas in sidiisaba meesha laga saaro waayo xisbiyo inooma dhisno, markii xisbiyo la dhiso oo la aqoonsan yahay oo dalka ka shaqeeyo, markaas ayuu madaxweynuhu kala diri karaa ama uu doorashada soo hormarin karaa iyadoo wakhtigeeda la gaarin.

**Qodobka 90aad,** shuruudaha doorashada guddoonka, da'da markaan ka hadlo waa in laga dhigaa 40, meesha ay ku fiican tahay. Qodobka 96aad, awoodaha u gaarka ah golaha shacabka iyo awoodaha u gaarka ah golaha aqalka sare, marka laga reebo xarfaha D,E iyo F iyo aqalka sare marka laga reebo xarfaha F iyo G inta kale in loo raro qodobka 98aad oo ah awoodaha wadaagga ah ee labada gole in la geeyo, waayo waxaa nahay baarlamaan, waxaan u shaqeynaa hal wadan, waxaa nahay xildhibaano aan dano gaar ah laheen, waxaa nahay xildhibaano isku

dana, marka waxaan qabaa in qodobadaas la mideeyo oo qodobka 98aad la iskugu geeyo marka laga reebo golaha shacabka xarfaha D,E iyo F iyo aqalka sare F iyo G marka laga reebo, inta kale in la mideeyo oo awoodaha gaarka ah la iskugu geeyo.

**Qodobka 104aad**, hindise xeereedka ka billawdo golaha shacabka iyo hindise xeereedka ka billawdo golaha aqalka sare, waxaa la yiri gole walba wuxuu haysan karaa 90 cisho, waxaan u malaynaa in wakhtigaas aad u dheer yahay, in la soo gaabiyo oo laga dhigo 30 cisho ama 45 cisho waayo sharciyada qaar kood waxay u baahan yihiin wakhti aad muhiim u ah inay ku soo aadaan.

**Qodobka 107aad**, dhaqangalka xeerka, waxaa la yiri, haddii madaxweynaha diido uu ku saxiixi waayo 30 cisho gudahood, xeerkaas wuxuu noqonayaa dhaqangal, marka waxaan rabaa guddiga inaan weydiiyo xeer uu madaxweynaha diiday inuu saxiixo, sidee ayay suuragal ku noqonaysaa marka inuu dhaqangal noqdo? Marka intaas ayaa ku soo koobayaa. Aad ayaa u mahadsantahay guddoomiye.



**Xil. Mohamud Abdirahman Omar**

Bismilaahi arraxmaani arraxiin, Alxamdulillaahi rabilcaalamiin, wasalilaahuma caalaa nabiyinaa Maxamed, wacalaa aalihii wasaxbihii wasalim. Shirguddoonka aad baan u salaamayaa iyo xubnaha labada gole, howlwadennada Baarlamaanka iyo guddiyada u xil saaran dib-u-eegista dastuurka, aad iyo aad baan u salaamayaa.

Horaan ka galayaa **qodobka 96aad** oo sheegaya awoodaha u gaarka ah Golaha Shacabka, faqraddiisa "A" waxaa lagu sheegay Golaha Shacabka kalsoonida inuu siinayo ra`iisul wasaaraha, iyo Golaha wasiirada ayaa ay siinayay xukuumadda kalsoonida, sida aan ognahay ama horay aan u soomarnay, Xukuumadda markii la dhisay ayadoo isku duuban ra`iisul wasaarihii noo keenay, Golaha wasiirada iyo Xukuumaduna ansaxinay, laakin intii kadambeysay ra`iisul wasaaruhu markii "resevel" ama isku shaan deen uu sameeyo, ama isku badal wasiiro cusub ayaa lakeenaa halkaan ayaa lagu dhariyaa, laakiin Golaha Shacabku ma an sixiyaan oo qof qof uma an sixiyaan, marka tala ahaan waxaa u soo jeedin lahaa, reiisul wasaaruhu markii isku badal sameeyo ama wasiiro cusub oo xukuumaddii ugu horeysay aan ku jirin la keeno, inta aan la dhaarin Golaha shacabku in ay gacanta u taagan in qof Kaan mu naasab ku yahay, in uu jamhuriyadda federaalka Soomaali in uu wasiir u noqdo shacab Koda, oo la hubiyo ama "feting" lagu sameeyo, sidaa darteed waxaan soo jedinayaa in la ansaxiyo wasiirka qof qof loo an saxiyo, wasiir kastoo oo cusub oo la keeno.

**Qodobka 97aad** oo ka hadlaayo awoodaha u gaarka ah Golaha aqalka sare, waxaa ku qoran, Golaha Aqalka sare waxuu matalaa Dowlad Goboleed yada awoodiisana waxaa ka mid ah qodobadaan soo socda: qodobada waxaa ka mid ah xarafka "E" xalinta khilaafaadka soo kala dhexgala, hay`adaha Dawladda fedaraalka iyo Dowlad Goboledyada, ama Dowlad goboleedyada dhexdooda, inay aqalka sare xubnahoodu qilaafaadka xaliyaan, iminka waxaan ognahay dhibaatoyin farabadan oo siyaasadeed ay dhextaagan yihiin Dowladda fadaraalka iyo Dowlad Goboleedyada qaar ka mid ah, ma aanan maqal hadii aan hoos hoos loo dirin, Guddi sare oo Aqalka sare ka tirsan, ama Aqalka sare isku duuban in ay u carareen ama u sacyeen,

ama tafaha ay u xeerteen, iney kala dhexgalaan Dowlada fadaraalka iyo Dowlad Goboledyada qilaafka la dhaxeeyo, waan sidaan ogsoonahay madashii wadatashiga ay ka dhaxeysay Dòwlada fadareelka iyo Dowlad Goboledyada xubnaha qaar way ka baxeen khilaaf dartii ayay oga baxeen, ma aynan maqlin Aqalka sare oo hawshaas ka shaqenaya. marka aniga waxaan soo jeedin lahaa, maadaama uu dastuurku xaq u siiyay in ay khilaafaadka xaliyaan, inay nan meesha fadhinin in ay khilaafaadka ka soo dhax galay ficil u badalaan oo ay dhex galaan, halka laga yiri Aqalka sare waxuu ugaar yahay xilka xayuubinta madax weynaha jamhuriyadda fadaraalka oo ah xarafka F qodobka 97 , ani waxaan soo jedinayaa oo xoojinayaa in lagu daayo 92(3) hab raaca ku qoran dastuur keenii hore in loo daayo ay aheyd Madaxweynaha xilka waxaa laga xayuubin karaa, labada gole wada fadhigooda ama kulan kooda oo saddex melood laba meelood ay xilka ka qaadi ka raan Madaxweynaha, oo aan lagu deeny 54 xubnood, ee Aqalka sare oo kaliya ayaa Madaxweynaha ka qaadaya Madaxweynaha, arintaa aad baan u diidanahay anigu, sidii hore halugu celiyo.

Waxaa kaloo isla qodobka 97(G) lagu xusay wax yaabaha ay lagaarka yihiin Aqalka sare in ay ansaxinayaan, magacabayaan, danjirayaasha ama safiirada u fadhida Soomaaliya u fadhiya dalal ka shisheeye, iyo kaaliyayaasha ciidanka, labo erey in la kala qaado aniga munaasab bey ila tahay, eryga ansaxinta iyo ereyga magacaawista, anigu saan u fahmay, sida saxda waxa weeye in ay magacaawista horeyso oo cidi soo magacaawdo, hadii la doonayo awoodaa gaar ka ah yeeshan Aqalka sare ay ansixiyaan, ama Madaxweynaha hasoo magacaawo ama golaha wasiirada halugu soo magacawo safiirada iyo taliyayaasha, laakin ansaxinta kaliya loodaayo, magacaawista ayagu kaligood aan yelanin, waliba anigu gaar ahaan waxaan soo jedinayaa in labada Aqal oo isku jira ay yeeshaan, ansaxinta oo aan Aqalka sare oo kaliya gaar la noqon.

**Qodobda 98aad** oo ka hadlaya awooda labada gole we Baarlamaanka faderaalka Soomaaliya, waxaa ku qoran xarkaha D iyo E sidaan marka horayba ku soo sheegay labadii erey baa isla socda, oo ah masalan ansaxinta iyo magacaawista Guddoomiya Maxkamadda sare, iney isla an saxinayaan isla magacabayaan, sidoo kale xarafka E waxaa ku qoran ansaxinta iyo magacaabista Guddomiyaha Bangiga dhexe, labadaan erey in lakala qaado ayaan marwalba soo jedinayaa, oo magacaabista cid kale yeelato, ansaxintana labada Aqal yeshaan, qodobkaane intaasaa ku dhaafay.

Waxaan u imaanayaa xeerarka ama qodobka 107aad oo ka had laya, dhaqan galinta xeerarka waxaa ku sheegan, faqradiisa 1aad xeer kastoo labada Gole an saxiyaa ama meel mariyaan, inuu Madaxweynaha jamhuriyadda fadaraalka Soomaaliya inuu ku saxiixayo ama uu ku diidayo oo ku soo celinayo, sidaas maadaama habraacu uu yahay faqradiisa 5aad, isla qodob kaasi waxaa ku qoran Garyaqaanka guud inuu nuqulada asalka ahi uu Madaxweynaha saxiixay, ku soo gudbiyo xogaye yaasha labada Gole, si ay u keediyaan ama ay uxafidaan, xal kaan waxaan ku soo dari lahaa in Bulshada Soomaaliyeed, Bulshada Soomaaliyeed intaanan gaarin, marks shir gudoonka loo keeno nuqulada asalka eh oo Madaxweynaha uwu ansaxiyey ee dib loogu soo celinaayo shir gudoonka in mar labaad Si loogu qeebiyo xubnaha labada Aqal si oo xubinkasta oo Baarlamaanka ka tirsan ay u heysato, hindisiyo sharciyeed ka la meel mariyey, sidoo kale waxaan soo jedinayaa Bulshada Soomaaliyeed ee dalka ku dhaqan iney xaq u yeelan karaan oo ay ka cod san karaan, shir Guddoonka ama xogayadda labada Aqal nuqul iney ka qaadan karaan "public" looga dhigo ummada Soomaliyeed, in ay helaan nuqulo asal ah xeer gududo sharciyeed oo la meel mariyay ah.

Ugu dambayn anigoo soo gaabinayo 108aad oo ugu dambeeya waxa ku qoran faqradiisa 1aad xeer maray habraaca ansaxinta xeerar ka iyo dhaqan galinta waxaa lagu durikaraa oo kaliya inuu ka soo horjeesto shareecada islaamka, ayaa la qoray waxaa kaloo la qoray dastuurka jamhuuriyadda faderaalka iyo baa la yiri danta qaranka, dantaa qaranka waxaan soo jedinayaa in la xadido, danta qaranka waxey ku jirtaa shareecada islaamda iyo dastuurka, hadii dankale oo kabax san shareecada islaamka iyo dastuurka aynu dhiganay ay jirto waa in dastuurka lagu xadidaa , oo kow iyo laba iyo saddex oo dantatahay qaranka tahay lagu sheego, laakin hadii danta qaranka leys ka duuduubo waxaa laga yaabaa qofka meesha maamulaya ama siyaasadda jaan joonaya, wax asagu dantiisa u arko inuu yiraahdo dantii qaranka weyanoo xeerkii ka horyimid wa in laduro, markaa dantaa qaranka maha haligu joo jiyo, labadaa xaraf oo kaliya halugu daayo, xeerka la hor yimaada shareecada iyo dastuurka fadaraalka oo kaliya ha ligu daayo ama ama danta qaranka kow iyo labo iyo saddex hala tiriyo. Aad iyo aad ayaa u mahad santihiin



**Sen. Hassan Hussien Haji**

Maanta qodobbada laga hadlaayo waxaa aan ka billaabaynaa oo ajanadaha uu yahay 96 waxaana laga hadlayaa awoodaha baarlamaanka. Sidaa u jeedaan awooddaha saddex ayaa loo qaybiyay awoodda u horraysa ee 96 golaha shacabka awooddahaas, waxaa ka mida: kalsooni siinta raysalwasaaraha iyo xukuumaddiisa iyo doorashooyinka guddoonka. Waxaa ku qoran awooddo oo kooban ilaa(g), aqalka sarena awooddihiisa waxaa lagu sheegay 97 awood wadaaggana waxaa lagu sheegay 98 intaan awooddaha u gudda gelin. Baarlamaanka waxaa u jeedaan inuu awoodda badan uu leeyahay aasaaska dawladeenna uu yahay. Wax kasta oo waddankan ka dhaca, in isla xisaabtan kor joogtayn iyo daah furnaan ka warhayo isaga iyo guddiyadiisa khilaafaadkiisana inuu ku xalliyo dhexdiisa maadaama "self-governing body" uu yahay, khilaafaadka kalee dawladdana waa inuu xalliyo weeyi isagoo guddiyadiisa dhex maraya, waxa kastoo dalkan ka hallaaba markaa waxaad ogaataan in baarlamaanka masuul ka yahay. Yacnii hadduu waajibkiisa guddan waayo waxa hallaabo dalka baarlamaankaa masuul ka ah, markaa xildhibaanadii ha yaraysanina awooddaas oo dastuurka idiinku qoran yacnii awooddaas in la isticmaalo si dawladnimada loo ilaaliyo waa muhiim.

Khilaafaadka baarlamaanka dhexdiisana in la xallinkaraa halkanaaba lagu sheegay waxaa weeyi in baarlamaanku uu xalliyo, awoodaha kale ee baarlamaanku leeyahay awoodaha maamul waaye. Waad ogtihiin xildhibaanno badan in lagu ganaaxay awoodda maamul oo markaa loo baahan yahay guddoonka labadiisa aqal oo waajib ka saaran yahay khilaafaadkaas si loo xallin lahaa, maadaama dastuurka u baahan yahay ansixin "two third majority" in laga shaqeeyo, intaas haddaan uga gudbo.

Qodobka 96(f) eedaynta madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya si waafaqsan habraaca ku xusan dastuurka, yacnii eedayn uun baa lagu sheegee xilka qaadis halkan laguma sheegin, laakiin waa ku jirtaa. Xildhibannada qaaraa u qaatay inaa aqalka sare eedayn ay samaynayaan oo ka doodaynin oo cod gelinaynin yacnii kama muuqato, laakiin waa ku jirtaa markii iyaga fadhiistaan oo "two third majority" ay madaxweynaha xilka uga soo qaadaan markaasaa aqalka sarena lakeenayaa markaasaa aqalka sarena wixii iyaga go'aan ay soo gaadhaan ay ka jawaabayaan.

Awooddaha markaad fiirisaan golaha shacabka laba guddiyaa kujirta guddiga la dagaalanka musuqmaasuqa iyo guddiga shaqaalaha rayidka, markaa fiirisaan awoodda golaha shacabka ee maamul goboleedyada la xisaabtankooda laga reebo, waxaa ku jirta ansixinta iyo magacaabista danjirayaasha iyo taliyayaasha laba xagaasaa looga tagay, labana halkanaa la geliyay markaas si la iskugu dheelitiro labada awooddood. Xildhibaanno badan ayaan arkay inay "concern" weyn ka qabaan, laakiin awoodda wadda jirka ah ayay ku qoran tahay wax kastoo guddiya ah madaxbanaan la magacaabaayo. Markaa xildhibaannadu inay sidaa u fahmaan ayaan qabaa sababtoo ah waxaa dad badan oo xildhibaano ah oo la sheekaystay igu dhaheen awoodda badan baa laga qaaday golaha shacabka waxaa la geeyey aqalka sare, sax maaha taas awooddihii labaa loo qaybiyey awooddihii wadda jirkana meelaa la iskugu geeyay. Markaa arrintaas sidaas haloo fahmo.

Waa tii hore aan u sheegay ee haddana waa ku soo celinayaa awooddaha wadaagga ah xil ka xayuubinta iyo magacaabista madaxweynaha si awood ahaan in loogu soo daro hore waan u sheegay haddana meesheediiyaa la joogaa in lagu soo daro. Kor joogtaynata iyo baaritaanka baarlamaanka federaalka waa ta ugu sarraysa oo baarlamaanku leeyahay hadda aan sheegayay ee la rabo la xisaabtanka xukuumadda yacnii awooddaasi iyadana aad iyo aad ayady u muhiin tahay.

Haddii aan u gubo qodobka 102aad, yaa soo jeedin kara hindisa sharciyeed hore waa u qorteen golaha wasiirrada iyo 10 xildhibaan iyo dabcan dawlad goboleedyadu inay soojeedin karaan marka la joogo aqalka sare iyo 10,000 oo muwaadina. Arrintaas distoorikii hore waa ku qornayd tana waa soo noqotay waa arrin iyadana aad iyo aad loogu daahay ayay ahayd in sidaas ay ahaato, haddii qodobkaasi aan ka gudbo.

Qodobkale oo isagana muhiim ah aadna loo soo celceliyay, waa durista xeerarka waa qodobka 108 dabcan baarlamaanka xeerar badanuu soo saari doonaa xeerarkaas la soo saaray sidee lagu duri karaa? Waa arrin taagnay bay ahayd guddiga markay fiiriyeen dustuurkii hore aad bay ugu bayaamiyeen haddii la isku qabsadana wax badan baa la soo jeediyay ee aad ku arki doontaan maxkamadda dastuuriga waxaana ugu tagi doontaan cutubka 9aad ayaa ugu tagi doontaan.

Doodahan aan dhegeysanaynay waxaa ku jirtay in laga maarmi karo maxkamadda dastuuriga, dabcan maadaama aan nidaam federaal ah qaadanay cutubka 9aadna waa ugu tagi karnaa ra'yi ahaan maxkamadda dastuuriga ah waa maxkamadda ugu muhiimsan waana maxkamadda siyaasi ah arrimaha khilaafaadka dastooriga ahna xallisa. Khilaafaadka waxa ugu badan khilaafaadka dastuuriga, markaa maxkamadda dastuuriga waxaan u arkaa inay aasaas u tahay deggenaanshaha nidaamka federaalka, markaa waxaan kaga hadlidoonaa markaan gaadhno maxkamadda dastuuriga cutubka 9aad, intaasaan ku soo gaabinayaa. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Guled Bihi Abdi**

Mahadsanid guddomiye, uga horayn dhamaantiin Aslaamu caleykum waraxmatullahi wabarikatuh salaan kadib waxaan soo diyaariyey 80 ilaa 108 lakiin sidaad sheegeysaan, hada wuxuu ka bilaabanayaa 96aad marka waan jeclaan lahaa in aad ogolaataan in lawada dhameystiro hadii aad diidaan halkaan waan ka bilaabo doonaaaad iyo aad baa umahadsantihiin.

Uga horrayn, waxaan umahadcelinayaa guddiyada dib u eegista dastuurka dhammaan xeerarka kaladuwan iyo hay'adaha dowliga ah ee ka soo shaqeeyey sida fiican ay uga soo shaqeeyeen oo ay ugaliyeen wakhti aad iyo aad baad uga mahadsantihiin.

Wax yar talo ahaan waxaan soo jeedinlahaa, dastuurka qodobbadiisa iyo faqradihiisa mararka qaar farqadaha kuma filna waxaa la isticmaalayey xarfo marka maadaama dastuurka uu yahay keydka uga weyn ee sharci aan yeelaneyno uu yahay cidda aan u qoraynana ay tahay ummadda Soomaaliyeed xoogaa in ay ka muuqato Soomaalinimadii halka aynu "Alphapetic" isticmaleyno"engish" in aan Soomali isticmaalno aad iyo aad ayay u fiicnaan lahayd waana fahmaynaa nuqullada danbe ee la keenidoono in sidaa lagu keeni doono.

**Qodobka 97aad** waxaad mooddaa dhammaan horta "chapter" kaan aan ka hadlayno waa "chapter" ka 6aad wuxuu ka hadlayaa baatlamaanka iyo awoodihiisa waxaad ka daremeysaa markaad akhrido in lagu soo sameyey aqalka sare ama ayaga "host" gareeyeen ama ay "secreterial" ka ay lahaayeen baad ka garanaysaa sida loo soo qoray waan ka xumahay in aan irahdo, laakiin howlaha marka la samaynayay ujeeddooyinkii loo sameeyay waxay ahayd in lagu dheellitiro dowladnimada ma ahayn in lagu qaso markaad eegto iminka awoodaha ugaarka ah ee aqalka sare waxay samaynayaan "contredictions" badan baa kujira awood maroorsi in awood ay u oomanyihiin oo tusaale ahaa in ay qaataan shaqooyin golaha shacabka uu lahaa ama xukuumaddu ay lahayd ama hay'adaha dowlada uu lahaa.

Tusaale ahaan qodobka 97aad faqradda "D" waxaa ku qoran awoodaha ugaarka ah aqalka sare ilaalinta nidaamka federaalka ah iyo midnimada qaatan waa sax dhammaanteen waxaan u wada jirnaa ilaalinta labadaas qodob "spesific" ma ahan waa masuuliyad wadareed arrintaasi ilaalinta midnimada qaranka iyo dastuurka waa masuuliyad wadareed ay wada leeyihiin shacabka Soomaaliyeed dhammaan "polacy" oo ay dowladda ka koobantahay waa sharcidejin ee fulin iyo garsoorba leh tusaale ahan dowlad goboleed howlihiisa wakiillada wayaa wuxuu soo saaray sharci ama xeer khilaafsan dowladda federaalka halkaa waxaa ka soo gelaya maxkamadda dastuuriga ah ayaa soo geleysa haddii markaa aynu leenahay awoodihii aqalka sare lahaa taas waxay keeneysaa khilaaf maxkamada dastuuriga ah marka arrintaas in lagu noqdo oo la caddeeyo waa sax ilaalinta nidaamka federaalka ah waa masuuliyad wadareed oo inawada saaran oo wax idin gaar ah ma ahan marka guddiga in ay atintaan dib uga noqdaan.

Xarafka "f" xilkaxayuubinta oo lagu soo celceliyay xilkaxayuubinta waxa ay ahayd sida caadiga ah "process" kaxilkaxayuubinta ee madaxweynuhu waxa ay ahayd in howlaha shacabka 1/3 ay eedeynta soo jeedin karaan oo madaxweynihii ay oran karaan tusaale ahaan khiyaano qaran dastuur jabin iwm marka ay soo jeediyaan eeda in loo gudbin doono mackamada dastuuriga ah waa sida ay ahayd dasaatiirteenii hore iyo kan xataa naftiisa aan ka shaqaynayno golaha

shacabka 1/3 bey soo gudbinaya mackamada sare usoo gudbinaya oo maxkamadda dastuuriga ah markay ku waafaqdo ee ay dhahaan qodobbadan aad sheegtaan dhammaan waa sax madaxweynuhu wuxuu ku kacay danbiyadaas arrinta xilkaxayuubinta aad baa loo adkeeyay waxa la yiri labada gole oo wadajir ah ujeedada sidaa loo lahaa waxay ahayd in arrintaan la weyneeyo oo weliba wadajir keliya loogama harinee waxaa la yiri 2/3 seddax meelood laba ujeedada sidaas loo sameynayey " check and balance" iyo "trancparence" marka laga yimaado in aan la dhayalsan haddii la yirahdo 28 xildhibaan madaxweynaha cilka ka qaadi kara mudda xileedkii shanta sano ahayd waxa dhacaya seddax afar madaxweyno aan yeelano xigmadda kujirtay ee loolahaa labada gole ee wadajirka ah degnaashiya falkaa kamid ah marka arintaasna in dib looga noqdo.

Arrinta safiirrada aad baa looga soo celceliyay, safiiriinta soo jeedinta waxaa iska leh wasaaradda arrimaha dibadda taliyaasha ciidamadana waxaa iska leh sida la sheegay wasaaradda amniga wasaaradda amniga waxay u gudbinayaan golaha wasiirada ansixinta inta badan "acountible" waxaa loo noqdaa ciddii magacaabday baa loo noqdaa xukuumadda iyo wasiirada waxaa "Accountable" uyihiin golaha shacabka waxay magacaabaan naftooda waxay "Accountable" u noqonayaan golaha shacabka haddii markaa taliyayaasha iyo safiirrada ubaahdaan in magacaabistood la ansaxiyo golaha shacabka ayaa xaq u leh. Marka aad iyo aad baad umahadsantihiin.



**Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud**

Waxaan toos u gelayaa qodobbada maanta laga doodayo oo ay u horrayso Qodobka 97aad Awoodaha Aqalka Sare xarafkiisa (F) xil kaxayuubinta Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qodobkaas isaga ah waa qodob halistiisa wata, dal hadeertaan laga fikirayo isku hayntiisa iyo xasilloonidiisa buuqa ka dhalan karo sida loo fudaydsanayo waxay ila tahay arrin halis ku keeni karta degganaanshaha siyaasadeed ee dalka, oo sida hadda xildhibaankii iga horreeyayba uu sheegay waxa dhacaysa in dhawr madaxwayne sanadkiiba la doorto. Marka waxaan dhihi lahaa *Process*-kii hore ee Dastuurkii Kumeelgaarka ahaa ku qornaa halagu celiyo. Dhanka kale waxaan dhihi lahaa hala adkeeyo maxkamadda dastuuriga ah sidii lagu dhisi lahaa, waayo iyadaa u xilsaaran kala saaridda awoodaha jira ee dalka, marka taas waxaan qabaa in sideedii lagu celiyo.

Isla Qodobka 97aad xarafka (G) ansixinta iyo magacaabista safiirrada iyo taliyayaasha waxay ila tahay raggan guddigu inay soo akhriyeen uun tajrubooyin kale ama dalal inaga naga hormarsan, waa macquul in *Senate*-ka Maraykanka la horgeeyo safiirrada ama taliyayaasha ama dalal kale ay ka jiraan, laakiin nidaamka xukun ee dalalkaas ka jira iyo taariikhda dawladaha casriga ah ee 1776dii, 1777dii dadka xorriyada qaatay ee in ka badan 300 oo sano jirey ee nidaam dimuqraadi ah tijaabiyay ee madaxwaynaha 45aad iyo 46aad sii maraya, isla tajrubadaas sideeda oo qalalan inta la soo qaado la keeno dal diktaytar ka soo baxay kaddib jabhado ka soo baxay kaddib hadda nidaam qabali ah marayo in lagu tujumo waxay ila tahay arrin aad iyo aad u adag.

*Logic* ahaana, marka la fiiriyo haddii aanad waxba ku lahayn ansixinta Golaha Wasiirrada gaar ahaana wasiirka arrimaha dibedda oo isagu ah wasiirka soojeedinaya safiirrada iyo wasiirkii

gaashaandhigga iyo midkii amniga oo labadooduba ah kuwii soojeedinayay taliyayaasha ciidamada ee xukuumadda u gudbinaayay taliyayaasha magacaabistooda haddii aanad ansixinaynin marka qolooyinka ka hooseeya oo *Operation Level*-ah amaba ka hooseeya in aqal sare la horgeeyo waxay ila tahay arrin aan *Logic*-ahayn. Sidoo kale koorjoogtaynta markii laga hadlaayo, koorjoogtaynta midna waa mid sharcidejin ah oo anaga aan u xilsaaranahay iyo koorjoogtayn fulineed oo ah wasaaradaha markaas ay hoostegayaan, marka waxay ila tahay miisaaniyada la dejinaayo iyo *Operation*-ka la fulinaayo cida ku koorjoogtaynaysa waa wasaaradaha ay hoostegaan, iyagaan halkan ugu wacnaa, iyagaan la xisaabtanaa, haddii xilka laga qaadayana wasaaradahaas ayaa dib-u-fiiris ku sameeya marka waxay ila tahay qodobkaas isaga ahna inaysan meesha ku jirin oo aysan suurtagal ahayn.

Arrinta hay'adaha la xisaabtanka dawladana sidoo kale waxaan leeyahay Aqalka Sare hala adkeeyo inay xoogga saaraan deegaannada iyo dawlad goboleedyada ay metalaan. Laakiin wax kasta oo ku saabsan hay'ad dawladeed ama hay'ad fulineed waxaan soojeedin lahaa in loo daayo golaha shacabka.

Xalinta khilaafaadka hindise xeereedka ee la yiri guddi wadajir ah ayaa loo samaynayaa, dastuurkan waxa loo samaynayo waxay tahay waxkasta oo xeerjajab ah ama geed hoostiis ah, ama isfahan ah in meesha looga saaro oo sharciyad qoran oo dadku ay ku kala baxaan in la sameeyo marka guddigaas wadajirka ah waa guddiga hada aan aragno in farihiisa iyo khilaafaadkiisa uu hada ka dhex muuqdo waxyaabaha hada meesha lagu soo qoray marka sidaas darteed aniga ma qabo waxyaabo humaag ku jiro ama aan cadeyn ama aan sharciyad adadg aan ku fadhin in meesha lagusoo qoro oo la yiraahdo khilaafaadka labada dhinac ka imaado waxa xalinaayo guddi wadajir ah. Taas beddelkeeda waxaan soojeedin lahaa wax kasta oo xuduud shaqo ah, xuduud waajibaad ah iyo xuduud masuuliyadeed ah in ay si caddaan ah ugu qornaato dastuurka. Qodobkaas isaga ahna inaysan meesha dib loo fiiriyo ayaan soojeedin lahaa, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Sen. Saynab Ismail Mohamed**

Bismillaah guddoonka iyo dhammaan baarlamaanka waan salaamayaa labada gole. Horta waxaan halkan ku qoran wax lagabeddelay oo muuqdaa majiraan waa kii 2012 ku qornaa badanaa la soo dhiga, laakiin "clarification" baa lagu soo sameeyay. Halkaan awoodaha ah baan inyar ku noqonayaa, sidaan ognahay mas'uuliyiinteennu waa indha ku garaadle waagii hore waxaa la oran jiray carruurtaa waxay leedahay, kal cabsoota ayay leeyihiin, waxaasaa cabsooday maleh.

Dastuurka aqalka sare awoodihiisa oo u badan dowladda federaalka ee keliya waxaa kujira ansaxinta, magacaabista danjirayaasha iyo taliyaasha ciidanka oo lakala gurin, taas micnaheed waxa waaye hadey ansaxiyeen haddii ladoono wey ridi karaan baa banaan michaeedu automatically sidaas uyahay.

Sida raysalwasaaraha waad aragteen golaha aqalka sare waxba uma yaqaan, haddii 10 aqalka sare ugu tagno hal qofood baarlamaanka oo golaha shacabka kayimaaddo albaabka uu kafuraa, beelaha yar yarka inaad nagu taabataan maqabo waxaan kaloo qabaa inan ku kordhiyo awoodahaas, laba qodob labadaas qodob waxay kala yihiin korjoogteynta iyo la xisaabtanka

fulin ee xaga mashaariicda maadaama dowlad goboleedkii aan anagu wakil buuxo unahay inaan mashaariicda waddanka ka socota iyo sida loo fulinayo aan kor joogtayn kuleenahay. Waxan kaloo ku dari lahaa qodob labaad ogolaanshaha ama diidmada haddii baarlamaanku golaha wakiillada ee dowlad goboleed ay madaxweynahaasi ridaan in aqalka sare yahay kan diidi karo ama ka ogolaan karo labadaa awoodood ayaan ku kordhin lahaa.

Halkaan waxaa ku qoran Qodobka 99aad farqadihiisa waxaa ku qoran oo meel waliba ku soo laabatay golaha shacabka, golaha fulinta, waxaan qabaa si hadhow ileen buug yar ayuu noqonayaa qoraalada badan ay u yaraadan baarlamaanka dowladda federaalka in lagu soo koobo, waan ognahay baarlamaankii 11aad baanu nahay labada gole fadhiyadeedu waa sidey yihiin, meelahaan golaha aqalka sare, golaha shacabka, meelaha wadajirka kahadlayo golaha in lagu sookoobo baarlamaanka dowladda federaalka Soomaaliya,taas ayaan ku dari lahaa iyadana.

Qodobka 99(4) waxay sheegaysaa awoodda baaritaan markii musuqmaasuq laga shaqeeyo awoodda baaritaanka ama wixii waxaa geystay sidii loo daba gali lahaa marka lafuliyo qaladaadkaas laxiriira hirgelinta, fulinta xeerarka in la ogaado musuq maasuqaas, waxaan oran lahaa maadaama musuqmaasuq laga hadlayo dastuurkana ay ku qoran tahay hay'ad madaxbannaan oo musuqmaasuq ka shaqaysa wixii aan wax weyn aheyn oo dhaawacaya qarannimada iyo wadajirka Soomaaliya in guddigaas ay baarlamaanku kala shaqeeyaan guddigaas musuqmaasuqa. Farqadda 6aad ayaa dhahaya guddiga baaritaanka in gudi lasaaro baarlamaan ah, gudigaas ka shaqeeyaan waxyaabahaas waxay keenaysaa wixii guddiga madaxabannaan oo musuqmaasuq ka shaqayn lahaa iyo qoladii dhammaydoo garsoorka oo waxoodi faraha lala galo.

Taas guddigaas ayaan udeynlahaa halka kale waxaan dhihi lahaa guddiga baaritaanka fulinayo farqadda 6aad baa oranayo in gudi lasaaro labada aqal ah oo baaritaankaasi fulinaya, waxaan oran lahaa arrintaasi in loo gudbiyo xeer ilaalinta oo wixii marka la ogaado baaritaan 2aad iyo waxaasi ay noqoto, CID iyo xeer ilaalin loo gudbiyo aan baarlamaanku faraha lala gelin waayo hadaan lasii galno wixii beynu qayb ka noqonaynaa.

Qodobka 100aad wuxuu kahadlayaa heshiisyada, runtii waxaa waddanku kujira heshiisyo badan ilaa hadda ma aragno wax la horkeenay ee baarlamaanka, baarlamaanku ama ay shacabku uga warrami karaan waxaan leenahay heshiisyadaas baarlamaanka la keenay in si wadajir ah looga shaqeeyo ayna noqdaan kuwa la soo maro guddiyada ku shaqada leh, hadday kuwa kheyraad yihiin, haddy kuwa social service yihiin waxay yihiinba iyaga in lasoo maro.

Waxaan u soo kacay oo maanta ugu weyn qodob codsi ah aan guddoonka uwado iyo dhammaan baarlamaanka, waxaa yaala xeerar guddiyada kale waa nala mid, baarlamaankana waa xirmi doonaa marka isku xirka maalmaha waxaan dhihi lahaa maalmo isbuucii labo maalin haloo qoondeeyo xeerarka kale oo muhiimka ah oo yaala iyagana oo runtii doonaya in la ansaxiyo codsigaas ayaan soojeedin lahaa. Waxaan rajeenayaa in nagala aqbalo insha Allaah.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Bismilhi raxmaani raxiim guddoonka waa mahdsanyihiin waan salaamayaa iyo xildhibaannada sharfta leh maanta xoogaa yar raalli hala iga ahaado hadaan adeegsado kalmado media loo adeegsado oo bulshada adeegsato oo huradada dadka ka kicinayo sida waa qaxayaa, fuustaan riixayaayoo, oo marar ka qaar aan dhihi karo kalmado baarlamaan ma ahan mararka qaar hurdadaa leyskaga kiciyaa.

Marka qaxa kow waxaan ku qaxayaa guddoonka xeer hoosaadkana siduu sheegayo marka ay soo galaan guddoonka waa, in loo istaagaa waa istaagnaa nama fiiriyaan ixtiraamka aan siinay nooma celiyaan hadda kaddib yaan nalo celinin seddexdii maalmood waa fiirinayay waa sii yaraanayeen dadka istaagaya guddoonka isagana markuu soo galo intuu fiiriyo dhahadyo waa mahdsantihiin fariista, waana meesha ya ka billaabato ixtiraamka iyo ma argtay kala dmbeynta.

Waxaan kaloo rabaa inaan ku qaxo maanta guddiga guddoomiyaha waa u sheegay shalay waa fuutiyay maanta waa fuutiyay, laakiin waa nagu badatay xubnaha guddiga iyagoo sharfan waa noo soo shaqeeyeen mahad iyo waxaan u heynaa Sharaf. Halkan marka anga noo keeneen hanoo dhaafaan ayagii xaggaas ku soo karkariyay ayagii halkaan kula murmaayo hadhowna ayagaa nuqul saari lahaa haddii ay habraacooda ay ayga samaysteen oo cod kula soo kala baxeen waa inuu u hoggaansamo guddigiisa wuxuu kula soo heshiiyay waa mahdsanyihiin.

Waxaan u gudbaya qodobka 96aad awoodaha golaha shacabka ayuu ka hadlayaa farqadda 1,2aad bal aan la akhrino qodobka 98aad iyo Qodobka 99aad, oo awoodaha aqalka sare u gaarka ah iyo awoodaha wadaagga ka hadlaya "totally" waa lagu wareerayaa maxaa dhacyo qodokaas wuxuu sheegayaa xukuumada yaa ansixiya waxaa ansixiya golaha shacbka qolodaii ansixisay ayaa kuleh kor jeegteen iyo la xisaabtan marka hadda waa tagnaa golaha xukuumadda ku jira.

Sharfta iyo qiimaha uu golaha leeyahy waa u tageynaa waa ixtiraameynaa, laakiin sharciga markii la yiraahdo golaha shacabkaa iska leh ikhtisaa saadkaas in loo dhaafo golaha sarena maanta aniga horta haddii lay doorsiinayo Ilaah ila ogyahaye golaha sare ayaan aadi laaha, waa meel odayaal, waa meel akhayaar, waa inay noqdaan dadkii dadka u dhaxeeyay oo dejin lahaa, laakiin muxuu ahaa ayga aysan awood iyo ciriiris iyo orad aysan gelin.

Awoodaha u gaarka ah ee aqalka sare farqadda 1aad/F akhriya xilkaxayuubinta madaxweynaha waa leysku cayaaraa markaa 36 senetar ka qaadeyso madaxweynaha jamhuuriyadda xilka marka cayaar ayaanba heynaabo raalli ahaada haddaan hadalkaas isticmaalay dheesha dheesha halaga daayo, waxaa loo adkeenayo oo loo waxeynayo waxaa waaye dalkaan inuu yeesho dowlad adag oo taagan oo si fudud ku burburi karin.

Laakiin xuuf baxaa 36 xildhibaan ayaa ridayso madaxweynaha jamhuuriyadda war meeshaan ma argtaye ma aqaano si loogu fikir karo in lagu fikiri karaa diidanahay anigu, in maanta la yiraahdo 36 ayaa ridayyso madaxweynaha aan u noqno sida ay ahayd oo 3/2, labdii golo oo wada fadhiya aan u deyno iyo habraacyadii loogu talagalay, midda kale waxaa la yaabanahay waxa lagu sheekeeyaa dhexdeena, suuqayada siyaasadda waxaa loogu sheekeeyaa maxkamad dastuuri in la dhisto madxweynayaasha diida, madaxweynayaasha ma gaar laha waxa

layiraahdaa madxweynaha diida maxaa dhacay, waxay ansixin karaan, madaxweynaha diidaya maxkamdda dastuuriga waala qaadi karaa dacwad 3/2 lagu ansixinayo diidaya 36 ku rideysa siduu ku yaalaa marka caqligeyna taas inuu gartaa.

Waxaa kaloo raacayaa isla qodobkaas xarafkiisa D ilaalinta nidaamka federalka himilada qaranka waxaa masuul ka ah baa ku qoran aqalka sare oo golahaan shacabka muxuu u joogaa? Muxuu ka shaqeeyaa midnimadda qaranka ma ahan? Kama shaqeeyo ilaalinta dowladanimada ma ahan? Ilaalnimada federalka ma ahan? Golaheena sharfta leh ee aqalka sare waxay si gaar ah inoo xilsaaranyihiin ilalinta dalka iyo la xisaabtanka iyo u qareemidda u qareemidda hala yiraahdo meeshaaas dowladaha xubnaha ka ah dowladda federalka, laakiin haddii la yiraahdo takhasus gaar ah waaye ayagaaba shaqo ku leh xildhibaanada golaha shacabka naftooda waxay matalaan waa "state" yadii waa midna shacabka ayuu ku matalaaa midna "state" ka ayuu ku matalaa marka taasna halkaas ku dhahaa.

Golaha shacabka ayaa la xisaabtama fulinta laxisaabtama ha loo keeno ayaga ha ansaxiyaan, haddiidaan waana aaminsanahay inay fiican tahay in lasii cusleeyo si qofka xilkaas loo dhiibayo dhibaato oo uu maaro oo uu dareemo.

Awoodaha wadaagga ah curinta shuruucda, sida xeerka noogu qorantahay waxaa iska leh golaha shacbka wareer baa ka imaanaya hadda, haddii la yiraahdo golaha shacabka curinayo inaga saas ayaan iskaga daba meeraysanaynaa, xisaabtanka iyo kor joogtaynka hay'adaha dowladda iyo meel kale qodobka 98aad ku qoran iyo qodobka 99aad isgana uu ku qoranayahay korjoogtaynta iyo baarista hay'adaha.

Waxaas waa shaqo golaha shacabka waaye wixii fulinta ah golaha shacbka iska leh wixii "state" yada ahna aqalka sare ayaa iska leh wxuu inuu saas inagu kal qeybsantahay, haddii wixii la isku cajiibiyo way isku cajiibmayaan haddaa wareer ka bixi la'nahay wareerkaas sii saa'idinaynaa, waana aragtidayda iyo garashadayda yar.

Waxaa la mida heshiisyada caalamiga ah waa shaqo fulineed golaha shacabka ayaa qabto golaha shacabkana halkan xildhibaanka soo istaago oo golaha shacabka ah u- hadli maayo golaha shacabka waxaan ka hadlayno waa mustaqbal dal iyo dowlad dhiskiisa waaye, ma ahan qofka haddee meel uu joogo oo uu iska cabbirayo, shaati asiga la eg iyo kabo uu gishanayo oo ku habeenayo ma ahan.

**Qod. 102aad** waa isla sidii soo bandhigada iyo curinta xeer, muxuu ahaa hindisa xeer farqda 4aad aqalka sare ayaa ku qoran, Qod 103aad khilaafka iyo hindisa xeer waxaa la yiri xal daastuur, haddii lagu heshiin waayo inuu wareer abuurmayo halkaas ayaa la soo geliyay, waxaa la yiri gudiyo haloo saaro dastuurka xaal dastuur ma galo, xaal mastuurka ha laga dhaafo waa inay wuxuu cadyihiin cidda awooddeeda leedahay ay caddahay.

**Qod.105aad** hindise sharciyeed ka ka billaabmaya aqalka sare, kama bilaabmi karo.
Qod 107aad dhaqan gelinta xeerarka farqadiisa 2aad hadduu diido madaxweynaha aqalkii soo gudbiyaa lagu celinayaa, aqalka marka horeyba curinaya, curin karaa waa golaha shacbka isagaa lagu soo celinayaa waa in si cad ugu cadaataa.

**Qod. 108aad** durid xeer oo lagu sheegay in lagu durayo inuu diinta ka soo horjeedo golaha xukuumada ma ahan inu soo aqbalo, wax diinteenna ka soo horjeeda mabaadi'da guud ee dastuurka sheegaya, in golaha xukuumada ka soo baxo ma ahan, golayaashaaysha inay mariyaan ma ahan, waa in marka hore lagu baqtiyaa meesha ya ka soo billaabmeyso wax diinta islamka diinteenna aysan oggoleen dasturkeena ma oggola dadkeenna ma oggola dadka matalayaanna ma oggola aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Aweys Mohamed Omar**

Guddomiye iyo guddomiye ku xigeennada dhammaan xildhibaannada sharafta leh iyo labada guddi ee dastuurka iyo dhammaan saaxafadda asalamu caleykum waraxmatulahi wabarikatuhu. salaam kaddib, waxaan rabay shalayna waan qornaay darraadna waan qornaa wax yar hala ii ogolaado in aan soo khulaaseeyo ee runtii waxaa sharaf ah in maanta dood wadaag qiimo badan si wanagsan inooga socoto ee dastuurka iyo wax ka beddelkiisa.

Waxaan rabaa qodobka 83aad shuruudaha xubinnimada waxaa la yiri qofka waa in uu leeyaay aqoon heer jaamacadeed ah oo la aqoonsanayahay waxaa la racsiiyay ama waaya-aragnimo u dhiganta waaya-aragnimada qofka 60 jirka ah aan weligiis wax baran ee la yiri qofna lagu xiray heer jaamacadeed qof kalana lagu xiray waaya-aragnimada waxaan qabaa in la dhaho xaafidul Qur'aan innuu ahaado ayay ahayd, laakiin waaya-aragnimada ha laga qaato ayaan qabaa, maxaayeelay iyadana waa dhibaato maxaa yeeley.

Luminta xubinnimada waxaa la yiri in xil dowladeed uu qabto qofka xildhibaanka ah wuu ku lumin karaa in la caddeeyo ahayd oo la dhaho 1,2,3,4,5,6 ayuu ku lumin karaataa midaas ayaan ka qabaa lama caddaynin.

**Qodobka 85aad** dhaarta waxaan qabaa tan aad ayaad u dheereyseen waxaan qabaa dhaartii hore in lagu laabto taas ayaa muhiim ahayd la yaqaanay lafahmi karay saxna ahayd taas ayaan qabaa waa fikirkayga in dib looga noqdo.

**Qodobka 87aad** waxaa la yiri saddexda sano uga danbaysa guddiga ayaa go'aan ku gaaraya madaxweynaha ku sharraxaya in doorasha la aado dadka oo teeramkooda dhammaanin in doorasho la geliyo qalalaaso ayay waddanka gelinaysaa ayaan dhihi lahaay sidaas darteed taasna in dib looga noqdo ayaan qabaa.

**Qodobka 90aad** shuruudaha doorashada guddonka labada gole waxaa la yiri tan jinsiyadda rabaa in aan dul istaago markuu guddomiye noqdo ayaa ka waxaa ka horraysa, in la yiraahdo markuu soo tartamayo in uu ka tanaasulo ayaa fiican jinsiyadiisana uu dhiibo taas ayaan qabaa, maxaa yeelay haddii la yiri haddii uu noqon waayo maxaa la samaynaa jinsiyo ayuu iska haysanayaa miyaa taas in dib loo fiirsho ayaan qabaa oo in dib looga laabto oo iyadana dib looga laabto.

Waxaan rabaa qodobka 97aad awoodaha u gaarka ah aqalka sare waxaan isleeyahay siyaado ayaa laga dhigay awoodahooda aad ayaa loo badiyay oo 54 ssanatar in la dhaho xil ka xayuubin madaxweyne ayay karaan 36 xildhibaan waxaan umaleynaa 36 sanatar waa yara foolxumo

waaye waana dhibaato aad uweyn, maxaayeeley 275 xildhibaan ku dar xubin sharafeedyadaba ayaa waxaa la yiri kala qeybin ma ahan ee xataa waa wax iska yar marka waxaan dhihi lahaa waddanka, in aad qalalaaso galisiin in aad tabtiin ayaan dareemayaa marka ilama fiicno waxaan dhihi lahaa saxiibkay Xuseen Iidow iyo tiimkiisa fahankooda intaa wuu ka sareeyay dad nabaddoonana way ahaayeeneen dib uga laabta dhihi lahaa arrintaas.

Waxaa kaloo laga hadlay oo la yiri ansixin iyo magacaabis wacan umaleynaa in caqligeena lagu dheeldheelo in aad u soo qorteen waxyabaha qaarkood, laakiin mafiicno ayaan dhihi lahaay sababta waxay tahay ansixin iyo magacaabis maba is raaci karaan wax walbana awooda waxaan geyseen danjirayaasha iyo taliyaasha hadey magacaabayaan aqalka sare wacoodana ansaxsanayaan baarlamaanka maa la iska dudumiyo oo la iskaga tago sawabta waxay tahay wax walbaba iyo awood walbo waxaa loo dhigay aqalka sare fiiri marka safiir la magacaabayo ama danjirayaal la magacaabayo xukuumad ayaa iska lahayd arrimaha dibadda iska lahayd maa xukuumadda  iyada dhan la iska daayo awoodihii dhannaa xukuumaddaa qaadateen awoodii "parlemetary" golaha shacabka marka waxaan dhihi lahaa, in la kala saaro awoodaha lana qeybiyo aad ayay u fiicantahay si loo fahmo ummadda.

Dalkaan sida aad ogtihiin waxa uu ubaahanayahay xasillooni aad u weyn marka labada gole agalka sare iyo aqalka hoose in xasilloonida dalka ay ka shaqayaan ee ma ahan in hal aqal awood isku koobo ka bacdina intaas saxo marka waxaan dhihi lahaay arrintaasna wax fiican ma ahan.

Waxaan rabaa qodobka 95aad guddiga adeegga baarlamanka waxaan meshaan ku arkayaa adiga dubo oo daangeyso wax la dhaho haddii la leeyahay guddigii adeegga baarlamaanka la leeyahay guddomiyaha golaha shacabka ayaa guddomiye ka noqonaya guddomiye ku-xigeena aqalka sare ayaa ka noqonaya "transparent" majirto marka, maxa yeeley ayagaba waxa ayaga rabaan ayay samaysan karaan yaa la xisaabtamayo oo "check and blance" lagu samayn lahaay oo shaqadaan ay ka dhex bixi lahaayeen hadduu rabo akoonka si toos ah lacag ugala baxo bangiga in uu asiga awood uleeyahay wixii dhaqaalo ah oo asaga awood uleeyahay wixii dhaqalo ah oo asi miisaaniyaddii baarlamaanka goosanayaa waxaan dhihi lahaa guddiga adeegga baarlamaanka waa in uu madaxbannaanaadaa guddoomiyayaasha aqalka sare iyo aqalka hoose way wada gali karaan taas ayaan dhihi lahaayee arintaas waa in ay awood kale jirtaa oo la madaxbanneeyaa waa sababta haddana heysata marka dhaqaalo la yiraahdo la isku haysto waa fahmi kartiin ayaan u malaynaa marka marabo in "deepley" aan gudagalo duruufaha marka waxaa dhihi lahaa arrintan guddiga dastuurka dib ha uga laabtaano.
Laxisabtanka waxaan rabaa qodobka 98aad awood wadaagga golayaasha saa horay u sheegay ansixin iyo magacaabis raacaan waa in la kala saaraa ee keliya waa in ay ansaxiyaan habraacyadii hore in loo dhafaan qabaa.

Gobolka Banaadir waa in uu noqodaa maamul goboleed buuxa arrintan keliya ma ahan mid aragti siyaasadeed ah waa mid xaq dastuuri ah ay u leeyihiin gobolka Banaadir waa in ay noqotaa maamul goboleed marka qodobkii labaad Iidow waxa uu soo jeediyay qodob labaad qodobka labaad ayaan waxaan la qabaa in la qaato waxaana dhihi lahaay caasimadda ama gobolka Banaadirba xaq dastuuri ah ayay leeyihiin in ay noqdaan maamul goboleed buuxa.

Waxaan rabaa siiqo yar in aan saaxiibkay Iidow ujeediyo waxan ku naqaannaa nin nabad doon ah guddiga dastuurkana saad dareemaysid laba xubnood ayaa ka maqan ama hal xubin in aad soo dhammaystirtid oo waxaan dhihi lahaa nabaddoonimadii iyo waaya-argnimadaadii aad dib

uga laabatid wixii jira khilaafaad ahna aad hoos u xalisid فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَصْلِحُوا ذاتَ بَيْنِكُمْ waslaamu caleykuma waracmatulaahi wabari kaatuh.



**Sen. Abdihakim Moalim Ahmed**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, guddoonka sharafta leh xillibaaannada iyo dadka saxafiyiinta iyo inta meesha ku sugan waan salaamayaa, hadal kayga inta aan gelin waxaan ku billaabanaayaa, waxaa jirta maahmaahyo Soomaaliyeed iyo xikmad uun aan iska iraahdo ma garanayo hadda aad uma xifdisani, laakiin waxaa la dhahaa latak, latak qofkii waxaa la dhaho hadduu mar badan latak latak ka dhigta uma fiicna ayaa la yiri ma maqli karo, akhyaarta golaha shacabka halkaa ka yimaaddeen aqalka sare siday u dhigayaan waxay ka turjumeysaa rabitaankooda ku saabsan dalkaba inuu hal aqal ka jiro inaanu labo gole jirin inuu golaha shacabka kaliya yahay dalka waxa ka jira hadalkooda marka qiimayn rasmi ah lagu sameeyo horta saas ayay u muuqataa.

Hadda xildhibaan Bashiir siduu halkan ka sheegay waxa u muuqataa oo keliya aqalka sare hala tirtiro golaha shacabka bes halaga dhigo, macno kale ay leedahay majiro, akhyaarta in badan waxay ku celcelinaayeen waxaani waxay ka timid fulinta aan idin weydiiyee waxaan fulinta ka imaanin maa dalka ka jira? Ma waxaan madaxweyne samaynin oo raysalwasaare samaynin maa dalkaan ka jira? Ma waxaan dawlad gobleed samaynin maa dalka ka jirta? Fulinta ayay ka yimaaddaan tillaabo kasta oo la qaado iyo wax kasta oo la samaynayo waa wax ka yimid xukuumadda waaye haddaad arki weyso maroodiga ma arkaa la yiri shinbir miyaa waxa dhabarka saran ma arko ayaa la yiri, takartaas dhabarka ka saran ma arko ayaa la yiri, maroodiga golaha shacabka iyo akhyaarta halkan ka hadashay ma arkaan awoodaha balaaran gola shacabka u qoran, laakiin waxaa dhegehooda soo kaceen taliye ciidan iyo safiir ayaa aqalka sare la hor geynayaa, wax ka jira malahan wax kalood aad sheegtaan waad weyseen labadaa qodob ayaa la sheegay labadiiba waxay idinku noqotay mufaaji'a marka qeyladiina adduunkii ayaa geddiseen oo rogteen. war niman yahow so dhawaada iyo gabdhaha sharafta lehe ka tirirsan dalkana waa laba aqal marka dastuurka la qoraayana dastuurka anaga kuma noolin baadiyaha iyo meel naadiya oo bini aadam ku noolayn kuma noolin adduun ayaan ku nool nahay oo looga shidaal qaato shurrurda dalwalbaa waxa uu qoranaayo adduunka intiisa kale sida uu u shaqeeyo waxa ka jira looga shidaal qaataa.

Waxa aad ka hadleesaan maanta oo dhan oo sharci wax u soo kordhay oo adduunkii aad la gubeysaan aan jin aad ka dhigeysaan dowladaha dariska noogu ah Kenya ayaa noogu sokaysa inta hadda aad ka cabanaysaan aqalkeeda sare awooddiisa ayay ku jrtaa. horta waxaan rabaa hal xabo ayaan rabaa inaan waxyar ka iraahdoo qodobka ka hadlaayo madaxweynaha iyo impeachment-ga xilka qaadistiisa horta hadda siduu u qornaa sidoo dastuurka ugu qornaa labada aqalba waxay xaq u lahaayeen iney "Impeachment" ka keenaan madaxweynaha waxayna xaq u lahaayeen labadauba inay codeeyaan oo xilka qaadistiisa sameeyaan, hadda aqalka sare waxaa laga joojiyay in ay "Impeachmen" qorikaraan oo ay ayagu qori karaan ay ka diyaarin karaan madaxweynaha oo ay eedayn karaan waxaa ka loo laga joojiyay inay iyagu u codayn karaan marka koowaad golaha shacabkaa la yiri "Impeachmen" asagaa qoraayo.

U fiirso isagaa eedayn karo horta haddana asagaa xilka ka qaadaaya taa horta waa inaad fahamtaan, xilka qaadista madaxweynaha waxaa sameynaaya waa golaha shacabka, laakiin keliya meesha maxkaxamadda approvel-ka lahayd ayaa la yiri aqalka sare ha yeesho marka in aad intaa fahmi weydaan adduunkii inuu soo gaddoomay aad ka dhigtaan horta waa wax kale adinkaa xilkaqaadista iska leh adinkaana is ka leh inaad eedeysaan madaxweynihii aqalka sarena awoodaas waa laga qaaday, laakiin approvel iyo ogolaansho ayaa la siiyaan 54 qof iyo 22 qof midna maahan, aqalka saraa la dhahaahee baarlamaanka Soomaaliya waa inaad saa u fahmtaan, waa 54 qof iyo waa 24 qof midna maahan ixtiraamka iyo xushmadu aqalka leeyahay inaad taqliiliso gardarro ayay kugu tahay oo aad sidaa ugu hadasho aqalka sare ee baarlamaanka jamhuuriyadda federaalka ayaa la yiraahdaa magaciisa saas u fahma hadduu 54 sanatar fadhiso dastuurka dalkaa fariisiyoo 54 sanatar ka dhigay.

Hadii 200 qof yihiiin dastuurka dalkaa ka dhigayee anugu kama dhigin, midda kaleeto haku xisaabtamin anugu golaha shacabkaa ahaa baarlamaanka golaha shacabka ka tirsan baan ahaa teeram-kii lasoo dhaafay, maantana aqalka sare ayaan ka tirsanahay barina Ilaahay baa yaqaano meesha aan joogaayo waddankaa iska leh shuruucda la qoraayee adigu waxaan aad isku cabirerysoo gashaneyso iska daa oo makaxdaada ku jiroo oo aad mooda inaad adugu leedahay, waxa dalkeenaa qaribay oo u sameysmi la'yahay waa qof shaar tolanaayo waaye inaad "iImpeachmen" uu keeno uu ka keeno madaxweynaha golahaani oo u codayo oo marka uu u codeeyo u ogolaanayso "check and balance" labda aqal ayaa isa saxaaya markaad codeyso, in xagga lakeeno waa iska normal waa dabiici, aad baad u mahadsantihiin waxaan rabaa inaan idiin sheego.

Awoodaha golaha shacabka shalay baan haystay nimanka guddiga ah ee ka shaqaynaaya aqalka, golaha shacabka ee aan u adkaysan karin inaan hadal ka jeediyo qodob ka hadlaaya shar in lay ogolaaday masuuliyaad ka qaar aad dalbaneysaan waaba idinku culustahay marka iga raalli ahaada.

**Qodobka 97aad** faqradda 1aad waxaan qabaa waxaad ogtihiin dalka waa federaal meelaha dalka iskaga xiran yahay waxaa la yiri Aqalka Sare waa ilaaliyaha midnimada dalka iyo wadajirkiisa ayuu ilaaliyaa ayaa la yiri arrintaa, maadaama uu arrintaa masuul ka yahay waxaan qabaa in hal qodob lagu soo kordhiyo hal qodob oo muhiim u ah ilaalintaas midnimada dalka iyo wadajirkiisa muhiim u ah, awoodaha iyo siday u qeybsanyihiin iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaallka ku xirnaashahooda dalka ay ku xiran yihiin dowladda dhexe awood inay jirta waaye, marka la leeyahay kormer ayuu ku xiranyahay joogteen ayuu ku leeyahay iney jirto "power" iyo awood uu isticmaali karo oo aqalka laftiisa dowladda ayay iskaga xiran tahay tusaale waxaan u soo qaadanaynaa oo kale dalalka ugu dhow dalalkan dimoqraadiga ah, dastuurka leh ayaa tusaale inta badan loo soo qaataa marka Kenya noogu dhow.

Kenya oo kaleeto marar badanna waan sheegay marka govener-ka ninka ah ama gabadha xilka laga soo qaaday oo uu ka qaado baarlamaanka dowlad deegaanka markuu ka qaado, gobolka uu katirsan yahay kaddib ayaa waxaa loo gudbiyaa Aqalka Sare ee dowlada Kenya "then" aqalka sare ayaa wuxuu ka sameyaa approval-ka ama ogolaanshaha asagaa Sameeya marka taa waxay keenaysaa inay jirto meel uu ugu xiranyahay faderaalkii meel laga maamulikaro oo saamayn looga yeelan karo inay jirto ayay samaynaysaa.

Marka aniga waxaan qabaa in lagu soo daro qodobkaas 97aad faqraddaas oo dhahaysa marka uu dowlad gobleedka golaha wakiillada dowlad gobleedku xil ka qaadis ku sameeyo madaxweynaha dowlad gobleedka waxa loo soo gudbinayaa aqalkii sare asaga ayaa waafaqaya ama diidaaya qodob sidaas dhahaya in lagu soo daro waxaan ku ilaalinaayaa midnimaa laga hadlaaya laftirkeeda iyo wadajirka dalkaan ku ilaalinaayaa iyo isku xirnaashaha hay'adaha dowlad iyo baarlamaanka meel ay iskaga xiran yihiin inay jirto shalayna hadalkaa sanataraa ka dhawaajiyay inay jirto iyo xildhibaanno markaa marka qodobkaa in lagu daro ayaan codsanayaa awoodaha aqalka sare in lagu soo kordhiyo.

Qobodka 98aad hindise xeereed ayaa la qoray aniga waxaan qabaa hindise xeereed wax la dhaho majiro hindise sharciyeed weeyaan, marka in loodhaafo kalmaddaa siday ay u qorneed oo hindise sharciyeedka ah meelwalba hindise xeereeed ayaa laga dhigay, malaha waxaaad mooddaa afkaar diin diin ayaa ku dhex jirto xeerka iyo sharciga labada waa kalmad Carabiya ah iyo kalmad Soomaaliya ah sharcidajinta Ilaahay baa iska leh, ibni aadamka malahan anaga wax sharci ah haddii la qoraayo iyo haddii la dejinayo kulli Ilaahay baa iska leh kitaabka Qur'aanka iyo shareecada waxkasta oo khilaafsanna waa malqi oo lama ogola, laakiin magaca xeer hindise sharciyeed baala yiraahdaa sidaasuna dastuurkeena iyo qawaaniinteena ugu qornaan jiray hindise xeereed magac qurux badan maahan xitaa lama fahmi karo, marka hindise sharciyeed ayay aheed in sideeda lagu celiyay ayaan codsanayaa.

**Qodobka 99(2)** waxaan qabaa in sidaan uu u qoranyahay laga badalo oo laga dhigo golayaasha baarlamaanka siduu yeeli karaa xubin ka mid ah golaha wasiirrada wasiirka loo yeerayna waxaa waajib ku ah inuu ugu aqbalo soojeedinta golaha isagoo ku jawaabaya hadba sida looga soo dalbaday qoraal ama horjoogsi inuu golaha horyimaaddo waxaa la qoray oo hadda qoran hadduu inuu qoraal ku jawaabi karo hadal saas camal ayaa qornaa marka hadba sida looga soo codsaday oo golaha soo dalbaday ugu soo codsaday waa inuu ugu jawaabo wasiirka,laakiin asaga inuu sii ixtiraacdo ma ahan.

Waxaan halkan ku arkayaa oo qodobadan hadda akhyaartan ay ka dhawaajiyeen ka mid ahaa wasiirka uu aqalka sare u yeeraayo ayaa dood laga keenay waxaan idin weydiiyaymarkii la yiri state-yaduu matalaa marka "Budjet" dawladda aniga guddiga maaliyadda waxaa ka mid ahay aqalka sare, maxaan maaliyad ugu shaqeynayaa haddaanan golaha wasiirrada ama wasiirka maaliyadda ama hay'adaha "budjet" dowladda ku baxaaya aan kula xisaabtami karin? State-yada dalka iyo resource sharing-ka dalka lagu sameeyay soo ugu qaybiyay sida maxaa la yiraahdaa u maamulay sidii howshii ugu fushay aanan xukuumaddii ugu xisaabtami karin matalaadda aan matalaayo yaan kula xisaabtamayaa ma dhagaxdaan kula xisaabtamayaa?

Golaha wasiirrada, golaha shacabka ayaa iska leh ayaa tiraahdeen inuu la xisaabtamo oo markaa shaqadu guddiyadu ka shaqeeyaan aqalka sare yay la xisaabtamayaan bal ii sheega shaqaadaa waxa qabata cid aan xukuumadda ahen soo wasiirrada maqabtaan ma state-ka ma state baan ahay aniga? Warniyow dalalka adduunka sida looga dhaqmo wax soo akhriya hala akhriyo caalamka sida looga noolyahay iyo dowladuhu siday u shaqeeyaan iyo baarlamaannada adduunka siday ay u shaqeeyaan aan akhrinno siday wax u jiraan aan raacno, laakiin golaha wasiirrada waxaa la xisaabtamaaya shaqada ay hayaan ciddii ay taabaneyso, aqalkanina wuxuu hayaa shaqadii federaalka ahayd ee qaranka, marka waa inaad taa fahamtaa.

**Qodobka 99(5)** waxaa laga hadlay baaritaan cidda samayn karta aya laga hadlay marka anigu waxaan qaba in sidan laga dhigo, baaritaan waxaa samayn karaa la yiri guddiyada baarlamaanka ikhtisaaska u leh, macnaha guddiyada baarlamaanka ee ay khusayso inay baaritaan sameeyaan, waxaa la yiri meeshaan guddi wadajir ah oo labada aqal ay leeyihiin ayaa sameynaaya baaritaanka haddii baaritaanka looga jeedo oo si gaar ah loo sharrxaayo waa wax kale, laakiin aniga waxaan aminsanahay haddii baaritaanno la samaynayo mowduuc mucayan laga sameynaayo, markasta guddiga baarlamaaniga ah ee ikhtisaaska u leh shaqdiisa ay tahay, ayay tahay baaritaaan kaas inuu sameeyo loona dhaafo, haddii baahi ay timaado si gaar ah waala dhihiyaa guddi ayaa loo dhisayaa, laakiin in halkan loo daayo ayaan qabaa.

**Qodobka 100(2**) heshiisyada caalamiga ah waxaa la yiri wakhtigaa aad loo dheereeyay marka aniga wakhtigaa waxaan soojeedinayaa in laga dhigo 60 cisho wakhtiga oo golaha baarlamaaku inuu ku codeeyo ay tahay lixdan casho in laga dhigo waxan kaloon qabaa, waxaa la yiri 120 maalmood oo shaqo ayaa la yiri marka shaqada inaad ka dhaaftaan li'anuu anaga kalfadhiyaa la shaqeeyaa haddii shaqo la yiraahdo Jimcaa laga jaraa Khamiis aalaga jaraa maalmaha aan la shaqaynin ayaa laga jaraa maalmaha la shaqeeyo laftirkooda leyskuma raacsana ma kuwa guddiyada shaqeeyaan baa ma kuwa aqalka fariistaa marka maalmo shaqo meesha aad tiraahdeen shaqada ka dhaafa maalmo caadiya ka dhiga si guud "120 cisho" oo kale halaga dhigaan qabaa.

**Qodobka101aad** ciwaanka halaga saxaan qabaa waxaa laga dhigay "*hindise sharciyeed*" halaga dhigo, meesha "*hindisa xeereed*" la yiri waa wixii kii hadaayay ii kale aan ka hadlaayay oo kaleeto adeer waxa oo dah naan sameyneyno waa shuruuc shuruucdaa, laakiin marjica ay ku xirantahay waa shareecada islaamka wixii ka soo hara ee shareecada aan waafaqin waa malfi, laakiin waxaan aan isku nidaminayno inaan sharci u magacawdo iyo inaad xeer u magacowdo iyo xeer u magacawdo diin calaaqad lama laha, markaa haloo daayo hindise sharciyeedka inoo aheedee hindise heereerkaa naga tira wax a fahmi karo ma ahan.

Qodobka 104aad farqadda 1aad hindise sharciyeedka ka bikllaabanaaya golaha shacabka iyo kan aqalka sare aad ha loo caddeeyo meesha hindise sharciyeedka ka billaabanaaya aqalka sare iyo kan ka billaabanaaya golaha dhexe jumlada ugu horeyso ee lasoo qaatay ayaa waxay u baahantahay waaxyar iney si tafaasiil ah loo cadeeyo oo aan aad loo fahmi karin marka waad mahadsantihiin



**Xil. Mukhtar Mohamed Guled**

Haddii aan gudagalo doodda, gaar ahaan qodobka 96aad, awoodaha u gaarka ah golaha shacabka gaar ahaan faqradda (f), ayaan rabaa inaan wax yar ka iraahdo oo ahayd eedeynta madaxweynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya si waafaqsan habraaca ee ku xusan dastuurka, qodob kaas waxaan rabaa oo aan soojeedinayaa sidii saaxiibaday iga horreeyay ay u soojeediyeen in sidiisi horeeto lagu celiyo oo eedeyntaas madaxweynaha "Impeachmen" lagu soo celiyo qodobbadii hore ee asalka dastuurka oo u oggalaanaayay golaha shacabka inay hawshaasi gutaan, marka saaxiibaday ayaan aniga recomend-gareynaayaa. Sidoo kale, awoodaha golaha shacabka ee asalka dastuurka waxaa kamid ahaa gaar ahaan qodobkii horre ee asalka dastuurka 63aad wuxuu sheegaayay, faqraddiisa (b) waxay lahayd, ansixinta waxkabadelka iyo diidmada

sharciyada la horgeeyo golaha waxaa iska lahaa golaha shacabka sidaa darteed waxaad ku darteen awoodaha wadaagga, iyadana waxaan soojeedinaa in lagu soo celiyo awoodaha golaha shacabka uu leeyahay ansixinta, wax ka beddelida, diidmada sharciyada la horkeeno golaha.

**Qodobka 97aad** ee awoodaha gaarka u ah golaha aqalka sare, waxaad mooddaa guddiga labada aqal ee dastuurka oo ka koobnaa min shan xubnood oo golaha shacabka ku mataleysay guddiga dastuurka, inay ka maqnaayeen doodaha arrimaha wax ka beddelka dastuurka looga doodaayay oo aysan goobjoog eheen, keliya meeshaas ee shaqadooda ka qabsadeen guddigii qaybta ku matalaysay golaha aqalka sare, taas oo aad ka dareemeyso awoodaha dheeriga ah ee loo sameeyay in aqalka sare gaar loogu yeelo iyo sidoo kale awoodo gaar u ah golaha shacabka oo lagu dhexdaray awoodaha ay wada leeyihiin labadooda, marka meeshaas waxaad mooddaa guddiga golaha shacabka ku matalaayay guddiga dastuurka ah ee labada aqal, inaysan goobjoog eheen shaqada la soo qabtay. Senatore waad mahadsantahay guddigaan way madaxbanaan yihiin oo guddiga ayay kala shaqaynayaan, laakiin doodaha meesha ka dhaceysay qeybta golaha shacabka eheed way ka maqneed, laakiin waxaan soojeedinaynaa ragga nagu matalaayay iyo gabdhaha inay dib ugu laabtaan qodobada meeshaas lagu sooqoray gaar ahaan qodobka 97(f) oo lagu gaar yeelay xil ka xayuubinta madaxweynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya si waafaqsan habraaca ku xusan dastuurka, sidaan hadaayay sheegaayay qodobka 96aad markaan ka hadlaayay, waxaan soojeedinayaa inay sidii asalka dastuurka ahayd lagu celiyo.

Sidoo kale ansixinta, magacaabista danjireyaasha iyo taliyayaasha ciidamada, sida uu senator-ka haddaayay shegay waa run, labada aqal ma lahaan jirin oo waxaa markii hore soojeedin jiray golaha wasiirrada, waxaana magacaabi jiray madaxweynaha, marka iyadana waxaan qabaa maadaama golaha fulinta ay ka imaanayso, waxaan qabaa in taliyeyaasha loo daayo golaha shacabka, danjireyaashana lagu wareejiyo golaha aqalka sare oo labadaas lakala qaado, midna golaha shacabka lagu wareejiyo, midna golaha aqalka sare loo daayo, sidaas ayaan soojeedinayaa. Sidoo kale faqradda (h), waxaan soojeedinaa in meesha laga saaro, waxaa ku qoran, hawl kasta ee kale oo dastuurka ama xeerarka kale ee dalka ay u xilsaaraan, qodobkaas sidiisaba sidii hore loo sheegay oo cutubkii 5aad iyo 4aad aan ku sheegnay, marba haddii qodobbada awoodaha ay u leeyihiin golaha shacabka ama golaha aqalka sare ama xukuumadda meesha lagu sheegay micno ma keeneyso in la yiraahdo, haddii dastuurka si kale aanu u dhigin, marka waxaan soojeedinaa faqraddaasi iyadana in la tirtiro oo meesha laga saaro.

Sidoo kale, qodobka 98aad, awoodaha wadaagga ah ee baarlamaanka gaar ahaan faqradda koowaad ama (a), waxaa ku qoran curinta, ansixinta, wax-kabeddelida xeerarka ama diidmada hindise sharciyeed ama hindise xeereed ee la hor keeno si waafaqsan habraaca xeer-dejinta ee ku xusan dastuurka, curin sheyga la yiraahdo oo sharciga inuu ka soo billawdo ah waxaa keeni kara oo keliya oo asalka dastuurkana uu sheegayaa laba hay'adood oo kala ah, hay'adda fulinta ee xukuumadda inuu ka soo billawdo kaddib markii ay soo ansixiyaan loo soo gudbiyo golaha shacabka, markii ay ansixiyaan kaddib loo sii gudbiyo golaha aqalka sare.

Sidoo kale asalka dastuurka wuxuu sheegaayay in curintaas ay ka billaabaan karto golaha shacabka ayna ansixin karaan kaddibna loo sii gudbin karo golaha aqalka sare, marka meel ay curin uga jirtay xeer ama hindise sharciyeed ay ku curin karaa golaha aqalka sare, asalka dastuurkana kuma jirin, midkaan aa hadda ku soo darteen, waxaan soojeedinaa in laga saaro oo sidiisa loo celiyo, curinta hindise sharciyeedka ama hindise xeereedka loo daayo golaha xukuumadda iyo golaha shacabka. Sidoo kale qodobka (c), ansixinta iyo diidmada heshiisyada

xukuumaddu gashay ama heshiisyada caalamiga ah, waxaad moodaa ayada laftigeeda in awooddii golaha shacabka laheed oo laga wareejiyay golaha shacabka, loon wareejiyay ama iskudar laga dhigay oo shaqo wadaag looga dhigay, faqraddaasi

Qodobka 100aad oo ka hadlaayo heshiisyada caalamiga ah, waxaa dib u eegtaan qodobka 90aad ee asalka dastuurka oo ka hadlaayay awoodaha madaxweynaha, faqraddiisa (q), guddiga soo diyaariyay waxaa dib u fiirisaan qodob kaas, wuxuu sheegaayay, madaxweynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya wuxuu saxiixayaa heshiisyada caalamiga ah kaddib markii ay soo ansixiyaan golaha xukuumadda iyo golaha shacabka ayaa ku qorneed, marka sidaas darteed awooddaasi waxay ahayd awood golaha shacabka u gaar ah sida asalka dastuurka uu sheegaayo sidaas darteed marka waxaan soojeedinaa in dib loogu celiyo awooddii golaha shacabka ay laheed oo heshiisyada caalamiga ah ansixn tooda ama diidmadooda, sidoo kale isla faqraddaas, xarafka (g), ansixinta guddiga madaxabanaan ee xuquuqul insaanka, awoodaha golaha aqalka uu oggolaanaayay asalka dastuurka kuma aysan jirin guddiyada madaxabanaan gaar ahaan guddiga madaxabanaan ee xuquuqul insaanka, waxay ahayd awoodaha golaha shacabka ayay ahayd guddiyadaas madaxabannaan, ayadana waxaan codsanayaa dib loogu soo celiyo meesha ay lahayd lagu soo celiyo.

Golaha aqalka sare guddiyada uu ansixinaayay ama loo oggolaa ama wadaagga ay ahaayeen dabcan meesheeda ayay ka muuqataa oo waxaa ka mid ah tusaale ahaan, guddiga xuquuqul insaanka, guddiga xuduudaaha iyo doorashooyinka, sidoo kale maxkamadda dastuuriga iyo sidoo kale maxkamadda sare, marka sideeda inaad ku celisaan oo aa awoodihii isku dhex qasin ayaa idiin soojeedinaa, sidoo kale faqradda ugu dambeysa ee ah la xisaabtanka iyo korjoogteynta hay'adaha dawladda federaalka si loo xaqiijiyo dhaqangalka xeerka Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, arrintaan lafteeda waxay dhaawac ku tahay shaqadii golaha shacabka, senator iga horreeyay ayaa halkan wuxuu ka sheegay, haddii hindise sharciyeedkii golaha ansixiyeen uu u gudbay golaha aqalka sare, dooddaas haddii aysan la xisaabtamaynin golaha wasiirrada oo wixiina fulinta ay ka yimaaddeen, maxaa loogu diiddan yahay aqalka sare, arrintaas ayaan waxaan rabaa inaan bayaaniyo oo iftiimiyo, senatore arrinta la diiddan yahay maahan la xisaabtanka sharciyada markay idin soogaaraan, wasiirkii shaqadaas lahaa ama hay'adii lahayd inaad su'aalo ka weydiisaan oo loo yeero maahan, laakiin waxay tahay sida golaha shacabka guddiyadooda ay wasiirka u yeeraan, ay la xisaabtamaan, haddii su'aalaha la weydiiyay ama caddaymaha uu ka jawaabi waayo, gole weynaha intay hor keenaan xilka ay uga qaadi karaan mid lamid ayay hadda golaha aqalka sare hooshooda tahay oo ay wadaan, meel uu sharciga ugu baneeyay oo ay ku jirto hadday haayaan, ayagaa laga rabaa inay noo caddeeyaan ma jirin, laakiin la xisaabtan kooda kale ee hindise sharciyeedyada golaha ka gudbay ee ayaga gaaray inay la xisaabtamaan ama su'aalo ay ka weydiiyaan golaha wasiirada, xaq ayay u leeyihiin laakiin ayadoo hindise sharciyeed oolin ama xeer oolin, inay golaha wasiirrada intay u yeeraan, ayagana ay la xisaabtamaan, caqli gal maahan, qof aadan soo ansixinin oo soo oggolaanin ama aadan soo magacaaabin, saa ula xisaabtamaysid oo aadan xil ka qaadi karin, ayadana ma naqaano.

Sidoo kale qodobka 99aad, korjoogteynta iyo baaritaanka baarlamaanka federaalka, qodob kaasi waxaan qabaa gabi ahaanba comments-kiisa waan ku laabanaa haddaan dhaho maanta oodhan kama baxayo sidaas darteed marka isku duuduub, anigoo isku soo daraayo waxaan soojeedinaa qodob kaasi in dib loogu laabto oo labada hay'adood ee aqalka sare iyo golaha shacabka awoodahooda gaarka ah maadaama la soo kala sheegay in shaqada meeshaan ku

xusan la ka la qaado, ayadana la soo caddeeyo sababta oo ah waxay u badan tahay korjoogteynta ay ku leeyihiin iyo kormeerida hay'adaha dawladda. Marka haddii shaqadii golaha shacabka mid la mid ah ayagiina ay qabanaayaan oo ay weliba u sii dheer tahay inay la xisaabtamaan dawlad goboleedyada madaxdooda iyo shaqooyinka dawlad goboleedyada, golahaan shacabka maxaa shaqo ay qabanaayaan? Marka haddii waxaan aa laga tanaasuli karin oo sidooda ay ku soconayaan oo guddiga sida ay iskugu soo qaseen inaan ku socno, waxaan soojeedinaa labada aqal intaa iskudarsano hal aqal aan ka dhigano, aan mideeno labada aqalba, sabab aan ugu baahannahay ma jirto inaan labo aqal sii ahaano, haddii isku shaqo aan qabaneyno marmar, marka sidaas darteed qodob kaasi 99aad gebi ahaanba waxaan soojeedinaa in dib loogu laabto.

Qodobka 100aad, hadaayay ayaan sheegay faqrad kale markaan ka hadlaayay, heshiisyada caalamiga ah meel ay ka soogalaan golaha aqalka sare gebi ahaanba ma jirto oo sidaan hadaayay sheegay qodobka 90aad, asalka dastuurka oo ka hadlaayo awooda madaxweynaha, faqradiisa (q), waxay leedahay, Madaxweynaha Jamhuuriyadda awoodihiisa waxaa ka mid ah inuu saxiixo heshiisyada caalamiga ah kaddib markii golaha wasiirrada soojeediyaan, golaha shacabkana ansixiyo, marka aqal sare meeshaad uga soodarteen ma naqaano, waxaan soojeedinaa inaad qodobkii 90aad aa dib ugu laabataan.

Sidoo kale qodobka 102aad, ayadana haddaayay ayaan horray uga hadlay, markale ayaan sii xoojinayaa oo ah curinta, hindise xeereedka ama hindise sharciyeedka, golaha aqalka sare meel ay ka soogalayaan ayadana ma lahan, waxaan soojeedinaa in dib loogu laabto. Waa mahadsantihiin.



**Sen. Deka Hassan Hussien**

Bismilaahi raxmaani raxiim. Guddoonka, sanatarrada, xildhibaannada, habdhowrka, xoghayayaasha, howlwadeennada, mediyaha, asalaamu caleekum waraxmatul laahi wabarakaatuhu.

Marka ugu horraysa waxa aan ku hor marinayaa xogaa "clafication", dastuurka ku meel gaarka xilligii la samaynayay 2012 ma arkin Golo Aqal sare, sidaas darteed, awoodaha maanta ka qeylineysaan waxay ahayd awood Golaha shacabka sababta loo geeyay ayay ahayd, si dalka hori loogu sii socdo maadaama markaas uuna dhisnayn Golaha Aqalka sare, taas beddelkeed marks maanta waxaa u fadhinaa in dastuurkii dib loogu noqdo, laga shaqeeyo, sanadkuna waa 2026 in dastuur hormarsan wixii isku dhex juray in la ka la qaado, awoodihii la qeebiyo, dastuur uu dalka isticmaalo oo muddo, ileen waxaan waa "loc time" waxa aan ka hadlayno wax inteena fadhida maaha berri nin walba golaha kale ayuu ku biiri karaa, marka dastuurkan aan ka shaqeeyo, sida maanta lo xusayo loo leeyahay dastuurka ku meel gaarka waxa uu ahaa 2012 ayaa la sameeyay, dastuur ummadda wax utara oo ummadda wax utar, hormarka dalka ka shaqeeya, "jug and balance" ka shaqeeya oo labadii Aqal si ay isku dheelli tiraan inaa ka shaqeeno, oo aan ka soo dagno fikradaha kale aan ka hadleeno waan soo jeedinayaa.

Waxaan kaloo rabaa "clarification" kale, Golaha Aqalka Sare yuu matalaa? Golaha Aqalka Sere Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu matalaa dowlad Goboleed yada, wuxuuna ku

matalaa dowladda fedaraalka siyaasadda guryaha ka juirta, maadaama aan fadhino halkaan waxa aan u fadhino siyaasad aan ka shaqeneynaa, siyaasadda aan ka shaqeenayno, waxa ay keenaysaa wax yaabaha hadda cabashoyinka Kenaya inay ka shaqeeyaan Golaha Aqalka sare, ayagoo ku matalaaya Dowlad Goboleedyada.

Marka aan u noqdo qorobka 96aad ee awoodaha Golaha Shacabka, marka hore waxaa isku jiray labadaa awodood oo hadda la kala saaray, waa jireen, taasaa keenaysa.

Faqradda ka hadleaýsa eedaynta madaxweynaha, anagu ma soo eereen karno, laakiin shaqo aad qabateed aan dhammaystiri karnaa keliya, marka idinku aad qaladaan anagu aan saxno, in wixii Golo Shacab qaldo Aqalkii sare uu saxo, oo "jug and balance" uu chaco, sasaa sabab u ah.

Waxaan kaloo rabaa  qodobka 97 awoodaha Aqalka sare, ani waxa aamin sanahay awoodaha Aqalka sare  inay yaryihiin, marka loo fiiriyo siyaasadda dalka maanta, ee shuruucda aan ka shaqaynayno halka laga fulinayo waa " state" yada, " state-yadiina " waxaa matala Aqalkii sare, marka anaga waaba naguyar yihiin awoodaha hadda aad ka qaylinaysaan, waxaan jeclaanlahaa in lagu soo kordhiyo labo awoodood, oo kala ah korjoogtaynta la xisaabtanka, fulinta mashaaricda hor marineed, laga hirgalinayo dowlad goboleedyada, taasna waxaan ula jeednaa wasaarad walba waxaa agyaalla mashaariic badan oo in lagu tala galay in loo gu hormariyo dalka, halka laga fulinayana waa "state-yada", maanta labadeenna golana ma jiro gole wax yaabaha laga fuliyo gobollada ogna ma jiro, maadaama idinku shacabka matashaan anaguna " state-yada " matalno, waxaan jeclaan lahaa awoodas in lagu soo kor dhiyo korjoogteenta, la xisaabtanka, fulinta, sida loo fulinaayo mashaariicda lagu hormarinayo dowlad goboleedyada, waa midda labaad in Aqalka Sare waa in uu awood u yeesho, lasiyo awoodda ogolaan shaha iyo diidmada, golaha wakiillada dowlad goboleed yada inay xilka ka qaaddo madaxweynaha, Golaha Aqalka sare ogolaadan ama diidaan.

**Qodobka 100aad** ee ah heshiisyada caalamiga, saa ogtihiin waxaa maalin walbo wasiirradu ay soo galaan heshiisyo caalami ah, maadaama anagana aan ka wakiilnahay dowlad gobaleedyadi, idinkuna aad shacabkiinna aad ka wakiil tihiin, waxaa muhiim ah in laxisaabtanka ama inaa ogaataan heshiisyada caalamiga la soo galay ama diidaan ama ogalaataan, laakiin ogaataan maadaama qodobada meesha ku qoran ay sheegayaan qaar ka mid ah in Golaha wasiirrada qaar ay u soo gudbiyaan Baarlamaanka federaalka Soomaaliya labadiisa aqal.

Meel yar oo saxid ah waan ku dari lahaa, faqradda 1aad waxaa ku qoran Baarlamaanka federaalka Soomaaliya labadiisa gole in lagu qoro, maadaama doodda socoto hadda ay tahay awood aa lee nahay inaa diiddan tihiin waxaa soo jeedinayaa Baarlamaanka federaalka Soomaaliya keliya ku qorane, maadaama baarlamaanka maanta marka la maqlo loo arkaayo in golaha shacabka yahay, in halkaas lagu soo daro baarlamaanka Soomaaliya labadiisa gole ayaa masuul ka eh heshiisyada caalamiga heshiisyada caalamiga ah inay  qodobka 103aad xallinta khilaafaadka, waxaa jirtay teeramka hore mar khilaaf ka dhacay state-yada qaarkood iyo dawladdii dhaxe , waxaa jirtay in 54kii marka laga reebo guddoonka weli guddoonka uu ka qayb galo.

**Qodobka 105aad** hindi shariciyeed ka billowda Golaha Aqalka sare, saa ogtihiin mudanayaasha sharafta leh ee labada Aqal masuuliyad ayaa naga wada  saaran dalka, sida saxda ah Baarlamaanada adduunka haddaad dib u raac daan, qof walba oo Baarlamaanka ka mid ah

haddii "problem" markaas uu jiro uu arko ama "group" yihiin ayaga laftirkooda ayaa curin kara, way curin karaan, markay curiyaan marka, ka soo qaad waxay ka tirsan yihiin Baarlamaan ka ama Aqalka sare, Aqalka sare, maadaama aan ku jirno haddii arrin ay soo baxdo anagoo tiim ah, qofba hanoqdee hal kuu geynayaa? Wuxuu geynayaa Golahiis ayuu geynayaa, marka anaga naga soo billaawdo, anaga naga soo boxo, ama Golaha wasiirrada hanoo soo gudbiyaan, in anaga eed ka keenno ma ahan, anaga ay waajib nagu tahay inteena meesha fadhida, daruufaha dalka ka jiro inagoo og, maadaama golihii xeerdajinta aad ka mid tihiin, idinka xitaa qaarkiin soo abuurtaan oo keentaan Golaha, marka waxaan kaas kaga gudbayaa golaha Aqalka sare dastuurkaa siiyay, awalna waa ay ugu qornayd, laakin maadama la ka la saaray taas ayaa keentay "talsetive" ka waxaa ku soo gaba gabeynayaa, maanta dalka meesha uu marayo iyo abaaraha ka jiro iyo daruufaha ka jiro, inaa anaga dastuur isku er erino waxaa ka fiican maanta runtii aad uga xumahay, inaa dadkii ugurmano, madaama bishii weli aan laqaadanin, in aan dadkeenna garab istaagno, hadday noqoto Aqala aqal, haday noqoto si wadajir ah, inaan ugurmanno dadkeenna in taasaa ku darsanayaa oo qodobka ku jirin. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Nur Ahmed Dirie**

Labada aqal, bahda saxaafadda iyo shaqaalaha dhammaantii marka hore salaamu calaykum waraxma tulaahi wabarakaatu. Waxa badanoo haddala waa la maray, marka hore waxaan ku horamarayaa waddanka waxaa kajira abaar aad u ba'an oo ummaddina naafaysay, runtii waad kawada war qabtaan, gobolladii Soomaaliya halka ay wada marayaan xaaladooda, marka hore ilaahay baan u baryaynaa inuu roobka u keeno ummadda oo Ilaahay soo gaadho.

Marka xiga waan leenahay dhammaan hay'addaha dawladda saddexda heer, ganacsatada Soomaaliyeed, qurbajoog iyo dhammaan inta hawlahaas wax ka gelikarta, inay wax kagalaan baaqaas waan u soojeedinaynaa. Ka baarlamaan ahaan baarlamaankana waxaan leenay labada aqal xaaladahan oo kale markay dhacaan waa loo istaagi jiray, baarlamaanka laftigiisaa khidmad isa saari jiray, arrintaas cod dheer baan ku sheegaynaa baarlamaanka laftigiisu arrintaa inuu qaato oo shacabka u istaago.
Maadaama labadan aqal ay yihiin labadii mataalayay shacbiga Soomaaliyeed in iyagana iska billaabaan waan soo jeedinaynaa marka hore arrintaas cod dheer baan ku sheegaynaa labadii aqalna waa fadhiyaan meesha.

Intaas markaan hore uga sii socdo runtii dastuurka hawshiisa waa uga mahadcelinayaa guddiyaasha labada dhinac ba sida ay kuwadaan, oo hadda cutubyadii hore oo ka shaqaynay soo-afjarkiisii iyo sida ay noo fahansiiyeen iyo kan danboo gabagaba ah sida uu ku socdo intaba guddoonka iyo xildhibaannadaba waan uga mahadcelinaynaan. Waxaan leenahay baarlamaankan awooddiisa inuu garto baan horta ku boorrinaynaa, meeshan awoodaha lagu soo qoraayo rag ku shaqeeyaa loo baahan yahay.

Qofka baarlamaaniga ah oo baarlamaankan 11aad ka tirsan awoodda uu xaqa u leeyahay waa inuu isticmaalo, shaqa qaybsigan hoose oo hadda aan ku wada hadlayno ood mooddo in aqalka sare sadbursi baa muuqda. Runtii arrintaa ma rabo inaan saaxiibbaday sii iraahdo, laakiin sigaar ah ayaan ugu sheegay, qaabka hadda awoodaha loo soo qoray waxaan leenahay aqalka sare

waxoogaa gadaal inuu u yara dego aadaan u yara jeclaan lahayn, sababtoo ah awooddaha qaarana waa wadaagaynaa, qaarna anagaa khaas u leh, qaarna idinkaa iska leh.

Markaa waxoogaa intaas anagu odayaashii baan nahay waxaan ka shaqaynaa isku hayntii labada aqal baan ka shaqaynaa oo runtii in aan labada aqal si fiican bay ku soo billaabantay hawshoodii baarlamaankan 11aad, sifiican inay ku dhammaystaan baan aad u jecelnahay. Markaa waxoogaa aan isku yara dabcino xadhkaha yaan ku wada dhegin xaggan iyo xaggaaba, baarlamaanka golaha shacabka waxay aad u eedaynayaan Xuseen oo ay leeyihiin waxaad mooddaa awoodihii golaha shacabka Xuseen inuu ka jiifo taasi waa Xuseen bay khaas u tahay. Markaa taas waan soojeedinayaa in uu dhinac walba dabciyo xadhiga oo isku hayntii labada aqal laga fikiro.

Ragga aad u cadcad oo senator C/xakiin iyo rag kale waxoogaa gadaal ha loo yara istaago taasi waan soojeedinayaa. Mida kale idinkoo aad u mahadsan waxaan rabaa anaga duqaydiibaan nahee inaa waxa jira isku sheegno labada aqal isku haynaa lanaga rabaa oo aanaan wax inaga kala durkin. Markaa qodobo iska dulmar ah uun maraayaa, laakiin intaan u soo istaagay xooggeeda waxaa waaye, labadan aqal habka ay ku soo billowdeen oo baarlamaankii 11 aad ay isku ahaayeen, arrintaa iyada ahayd in dastuurkan iyo awoodihiisii iyo wixii aanaan ku kula irdhoobin baan soojeedinayaa, oo ah wixii jirijireen ha jireen waxaan jiri jirina wax kalaa jira, markaa taas waan leehay waa qodobbo yaryar waxaan hadda ka hadlaayo.

Abaarahana allah ha inaga bixiyo sida qodob da'da ku saabsanaa oo halkan looga hadlay **qodobka 83(d)** da'daas horta dhallinyarada aad bay u jecel yihiin in arrintaas loo dabciyee bal 30 kii ha u ahaato, haddii Alle yiraahdo. Qoladan kalena 40ka ha u ahaato in kastoo ragga qaarkeed qabeen 40 ilaa 45, taas halkaa saan u daynayaa.

Qodobka kale hoosaan u yaradhacay raalli ahaada, qodobka 84aad oo ah xilalka kale arrintaasi waa arrimaha aan u soo istaagay ka mid tahay, xildhibaanka ama senator ka inuu aqbalo xilkale oo xilkan ahayn. Horta waan ku ceebaysanahay arrimaahaas xilalka, xildhibaanno iyo senator badan oo aan xil aan macquul ahayn aqbalaa jira indhahana laga fiirsanaayo, waxoogaa waad mooddaa inuu xag u yaallo arrintaas hadda waxaa la soo qoray wasiir inuusan noqon karin. Markaa meeshaas waxaan dhihi lahaa hadda waxaa jira kuwa wasiir maamul goboleedaa jiraba oo xildhibaanno ah, markaa waxoogaa wixii hoos bay u sii dhacayaan ha lagu soo koobo, xildhibaanka wuxuu noqon karaa keliya wasiir federaal, arrintaas ha lagu soo koobo. Haddii kale bahasha shaatigaa laga sii qaadayaa, taas horta sidaasaan dhihi lahaa.

Xasaanadda iyo xuquuqda xildhibaanka meeshaasna **qodobka 86aad** iyo waxaan ku soo kordhin lahaa in lagu kordhiyo xildhibaanno meeshaas u soo halgamay oo dhib badan u soo maraynaa jiray. Waad ogtihiin baarlamaankii 10 aad, kii 9 aad, kii 8 aad iyadoo caqli lagu daraayo xuquuqdoodii in lagu soo daro meeshan intaan anaga joogno haddii Alle yiraahdo lagu soo kordhiyo xuquuq loo qoondeeyay oo boqoley ku salaysan arrintaas waa soo jeedinayaa. Sababta oo ah qofka masuul buu ahaa xilkii baa laga qaaday, xilka haddii laga qaaday banaankuu taagan yahay xal in loo helo waana muhiim, waan qof soo halgamay oo ururadii argagixisada ay wiidaysanayaan, qodobkaana sidaasaan ka qabaa.

Qodobka 96aad waxan leehay sidiisii hore halagu soo celiyo oo eedaynta madaxweynaha ka hadlaayo, sidii hore uu ahaan jiray ha inoo ahaado qodobkaasi. Haddaan wax fara farayno waxyaalo badan ayaan inaga qarib maaya.

**Qodobka 97aad,** Aqalka Sare wuxuu masuulka yahay dawlad goboleedyada waar taas ma ogolin, waxaad masuul ka tihiin maamul goboleedyada, dawlad wax la yiraahdo waa na dhibtay ma jirto, maamul goboleed baad masuul ka tihiin. Waxaan daba taagnayn in madaxweyne la baabiiyo oo hoggaamiye laga dhigo dawladii ma wadaynaa markaa, haddana ma dawladaan ku garab wadnaa maya, Aqalka Sare wuxuu masuul ka yahay dawlad maamul goboleedyada, wax dawlad la yiraahdo dawladda federaalkaa ka jiraysa wax madaxweyne la yiraahdana madaxweynaha federaalkaa ka jiraaya, sidaas inay arrintaas u dhigantaa la rabaa. Sababtoo ah, hadda haddii dastuur baa la qorayaaye wixii haddaanan meel macna leh la geynin waa lagu sii rafaadaayaa.

**Isla qodobkaas 97(f)** meeshaas aqalka sare waxaa weeye xilka iyagaa ka qaadi kara madaxweynaha taasi xildhibaana hora ka hadlee inaan sidaa u sii dabagalo ma rabo, taasi sax maaha waddadii hore oo ku shaqayn jirnay sidaasay noo ahaanaysaa. Madaxweynaha waad ogtihiin qaabka uu ku yimid siduu ku yimid labadii aqal baa doortay markaa taasna sidaasaan ka qabaa in sideedii hore ay ahaato oo wax kale aysan dhicin. Waa meelaha aan idin leeyahay waxaa ka jira bahalkii.

Waxaan rabaa markaa qodobka 98aad oo awooddaha isku darka ka sheekaynaaya, hadda awoodaha in la isticmaalo aan rabo waana kuwaas, wuxuu ku leeyahay dastuurka isticmaal inaad hirgaliso ka shaqayso wuxuu ku markaa doorasho iyo dastuur ba anigaa iska leh e awooddaada bal isticmaal aqalka baarlamaanka 11 naadow. Ayaan dhexdaas oo aan halkan ka hadlaayayna waan idhi, markaa awoodda aan leenahay Ilaahay baa awood lehe aan isticmaalo oo ku salaysan waxyaabaha sida gaarka ah u leenahay. Sida dastuur iyo doorasho iyo ka hadalkeed aqalkan baa iska leh labada aqal baa iska leh markaa intaas baan soojeedinayaa. Waan dheereeyay hadalka baan u malaynayaa, waxaan u mahadcelinayaa markale guddiga madaxabannaan iyo labada guddi oo kale. Waanan qabaa in la soo ururiyo arrimaha dastuurka, khilaafaadka ku jira oo tirada badan oo labadan aqal awooddaha markii la yiraahdo u dhexeeyana in la soo ururiyo waan idinku boorinayaa. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin, guddoonkana waan salaamayaa, salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu.



**Sen. Fartun Abdulkadir Farah**

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka labada aqal iyo xildhibaannada sharafta leh ee labada aqal waxaan idinkugu salaamay salaanta islaamka Asalaamu caleykum waraxmatulaahi tacaalaa wabarikaatuhu, salaan kaddib, waxaan tabaan dhowr qodob oo gaagaban in aan dul istaago run ahaantii waxana horyaallo oo maanta noo qalan haddii aan nahay baarlamaanka labadiisa aqal waa dastuurka sideedaba dastuutka waa heshiis bulsho dastuur marka laga shaqaynaya waxaa wanaagsan dhammaan ummadda Soomaaliyeed meel walboo ay joogto in ay ku qanacsantahay oo aan cid la jujuubay iyo cid cod lagu maquuniyay aysan jirin dastuurka waxa nakala hagaya waaye oo qof walbaba ay fiicantahay in qanaacaddiisa ay ka muuqato iyo

golayaasha baarlamaanka hadda ka shaqaynayaba qodobbada hadda miiska saran waxaa kamid ah awoodaha labada aqal.

Horta waxaad ogaatiin walaalayaaloow, sideedaba in loo hadlo ma ahan anaa aqalka sare ah iyo anaa gole shacab ah xilka waa meerto ama xilka waad iskaga tagi kartaa ama golaha aqalka sare kaa soo wareegi kartaa golihii shacabka ayaad iman ama aqalkii sare ka tegi kartaa waa inaan ku dhaqanaa in xeer marka la akhrinayo ama dastuur la jaanqaadi kara caalamka in aan heysano in aan ka fikirno ma ahan gole shacab iyo aqal sare qof walbo hadduu intaas maanka ku haayo oo dastuur qurux badan oo loo dhanyahay oo awoodihii ay kala baxsanyihiin oo waxaan heleynaa oo aad iyo aad u qurux badan.

Waxaa laga dhawaajiyay aqalka sare sad bursi ayay sameynayaan iyo wixii dhan ayagaa qorteen iyo dadkii ka soo shaqeeyay oo juhdiga badan muujiyay guddiyadii baarlamaanka iyo guddiyadii madaxbannaanaa in eedo loo jeedinaayo, xadiiskaan waxa uu leeyahay "من لا يشكر الناس لا يشكر الله marka in aan u mahadcelino dadkii ka soo shaqeeyay dastuurka oo aan horta eedeynin taas ayaan soo jeedin lahaay.

Aqalka sare waxaa la yiri awoodihii oo dhan ayuu qaatay aniga iima muuqato awood dheeri ah ama wax yaabo siyaado ah oo aqalka sare qaatay marka waxaan soo jeedinayaa in awoodaha aqalka iyo awoodaha labada gole sida loo qoray in sideeda aan ku ansixino oo aan waxbo lafarafartaynin, waxaan rabaa in aan ku laabto qodobka ka hadlayo tirada xildhibaannada aqalka sare runtii aqalka sare 54 senatar ayaa ku qoran hadaa nahay anaga 0.5 kuma qanacsanin waxaan soo jeedinayaa in la kordhiyo oona la dhaho xildhibaanada aqalka sare in shanta beelood loo qeybiyo qodobkaas saas ayaan kusoo jeedinaa waxaana rajeynaa in aad ila fahantaan maadaama aan ka shaqeyneyno dastuurkii dastuurkana ay tahay qanaacad bulsho.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa gobolka banaadir in uu yeesho matalaad. matalada gobolka banaadir in ayadana la siyaasadeynin oo gobolkaan banaadir waxaad ogtihiin wax yaabo badan in uu marti geliyey in matalaaddiisa aan war lagelinin oo si buuxda loo qaato oo uu yeesho maamul goboleed, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa midda da'ada oo laga hadlay sidaan ognahay ummadda Soomaaliyed 75% waa dhallinyaro da'ada meesha lagu qorayna dad badan ayay niyadjebineysaa waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo da'ada 25 sano qofka haddii uu 25 sano gaaro uu wax barto waxaan aaminsanahay in uu wax badan uu beddeli karo uuna matali karo ummadda Soomaaliyeed intaas ayaan ku soo koobaa. Asalaamu caleykum waraxmatulaahi wabarikaatuh.

**Diyaariyey:**
(1) Abdirahman Ali Afrah
(2) Abdirisak Mohamed Adan
(3) Abdullahi Abubakar Yacqub
(4) Adan Abdullahi Omar
(5) Ali Mohamed Rooble
(6) Khalid Mohamed Deheye
(7) Mahad Abdikarim Jimale
(8) Mustafe Mohamed Abdi

**Tifaftiray:**
(1) Abdimajid Abdisalan Mohamud
Agaasimaha Xoghaynta iyo Xusuus-dhowrka

(2) Avv. Yusuf Abdullahi Hassan
Agaasimaha Dastuurka iyo Shuruucda

(3) Mohamed Deheye Ismail
Lataliyaha Guddiga ee Arrimaha Dastuurka

(4) Dayax Axmed-iley
Tifaftiraha Guddiga

**Hubiyey:**
(1) Sen. Said Abdi Hussein
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

(2) Abdulkadir Mohamed Hassan
Xoghayaha Guud ee GMDHD

**Oggolaaday:**
(1) Avv. Burhan Aadan Cumar
Guddoomiyaha GMDHD.

(2) Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA

اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور

Independent Constitutional Review
and Implementation Commission